Siduu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Risaalada u gudbiyay

Iyo

37 Warqadood iyo Qoraallo Rasuulka Ilaahay,
Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Waxaa dhigay

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM

Minneapolis, Minnesota, USA

Siduu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa SallamRisaalada u gudbiyay

Iyo

37 Warqadood iyo Qoraallo Rasuulka Ilaahay,
Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Waxaa dhigay

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM

Minneapolis, Minnesota, USA

Tusmada Kitaabka

Mawduuca **bogga**

1. Tusmada kitaabka 3
2. Aarrata dhigaha kitaabka 12
3. Juzka Koowaad 14
4. Al Bicthah 14
5. Soo degidda Quraanka 15
6. Macnaha soo dejinta Quraanka 16
7. Bilaabashada Waxyiga 16
8. Isku dubidda iyo camajuujinta 17
9. Salaamidda iyo cawthibillaysiga 18
10. Ku noqosho Xadiithka Waxyiga 18
11. Khadiijah iyo Caddaas 18
12. Nabiga, SCW, iyo Waraqah bin Nawfal 19
13. Dhanbalidda laabtiisa SCW shariifka ah 20
14. Joogsiga Waxyiga 20
15. Salaamidda dhagaxda iyo geedaha 20
16. Ictikaafkiisa SCW ee Ghaaru Xiraa’ 21
17. Kasoo degidda buurta 22
18. Khadiijah iyo Jibriil 23
19. Martabooyinka Waxyiga 24
20. Ghaaru Xiraa’ 29
21. Sarraynta Ghaaru Xiraa’ 29
22. Bilaabashada soo degidda Quraanka 33
23. Islaamidda Khadiijah bintu Khuwaylid 34
24. Khadiijah gurigeeda luulka ah ee jannada 34
25. Salaanta Ilaahay Tacaalaa ee Khaddijah 35
26. Fardi yeelidda salaadda 35
27. Waysada 35
28. Tukashada Khadiijah 36
29. Waqtiyada salaadda 36
30. Joogsiga Waxyiga 36
31. Juzka Labaada 38
32. Kuwa ugu horreeyey oo islaamay 38
33. Haweenta ugu horreysey oo Ilaahay iyo Rasuulkiisa SCW aamintay 38
34. Abuu Bakr waa nin ugu horreeyey oo Ilaahay iyo Rasuulkiisa SCW rumeeyey 38
35. Ragga u yeeriddda Abuu Bakr Al Ssiddiiqu ku islaamay 40
36. Cuthmaan bin Caffaan 40
37. Al Zzubayru bin Al Cawwaamu 41
38. Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf 41
39. Sacd bin Abii Waqqaas 41
40. Dhalxah bin Cubaydu Allaahi 42
41. Islaamidda Calii bin Abii Dhaalib 42
42. Siduu Calii qoyska Nabiga SCW uga mid noqday 44
43. Abuu Dhaalib oo islaamidda Calii ogaanaya 45
44. Calii waan ku riyooday 45
45. Xogogaalnimada dadka dhintay 45
46. Qisada Shariifka iyo aabahay Qaalli Sheekh Xuseen Cismaan 47
47. Islaamidda Zayd bin Xaarithah 47

48. Al Ssaabiquuna 49
49. Kuwa kaddib islaamay 49
50. Rasuulka Ilaahay SCW oo islaamka muujiyay 59
51. Tukashada salaadda Rasuulka Ilaahay SCW iyo asxaabtiisa 60
52. Colaadinta gaalada ee Rasuulka Ilaahay SCW 60
53. Kulanka koowaad ee Abuu Dhaalib iyo Quraysh 61
54. Kulanka labaad ee Abuu Dhaalib iyo Quraysh 61
55. Kulanka saddexaad ee Abuu Dhaalib iyo Quraysh 62
56. Kulanka afaraad ee Abuu Dhalib iyo Quraysh 62
57. Ku ololaynta gaalada ee muslimiinta 63
58. Mawqifka Al Waliidiidu bin Al Mughiirah ee Quraanka 63
59. Quraanka Al Waliidu bin Al Mugiirah kasoo degay 64
60. Warka Nabiga SCW ee dalalka carabta ku faafay 65
61. Islaamidda Xamzah 65
62. Xamzah 66
63. Dadkuu Abuu Bakr Al Ssiddiiqu gatay oo xoreeyey 67
64. Islaamidda Cumar bin Al Khadh-dhaab 70
65. Cumar iyo Ummu Cabdu Allaahi 70
66. Cumar iyo walaashiis Faadhimah 71
67. Inta u dhexeysey islaamidda Xamzah iyo islaamidda Cumar 73
68. Riwaayada reer Makkah ee islaamidda Cumar 73
69. Cumar, Kacbada iyo Quraysh 74
70. Cumar iyo Abuu Jahal 75
71. Ku daridda Al Suhaylii ee islaamidda Cumar 75
72. Cumar waan ku riyooday 76
73. Cumar 76
74. La kulanka Rasuulka Ilaahay SCW ee arijirka madow 77
75. Rasuulka Ilaahay SCW iyo addoonka madow ee Xadiithka Khaybar 78
76. Juzka saddexaad 79
77. Gaarsiinta Risaalada qabaa'ilka Carbeed 79
78. Rasuulka Ilaahay SCW oo qabaa'ilka Carbeed isu soo bandhigay 79
79. Qabiilka Kindah 80
80. Qabiilka Banuu Kalb 80
81. Qabiilka Banuu Xaniifah 80
82. Qabiilka Banuu Caamir 81
83. Isu soo bandhigidda Carabta 81
84. Qabiilka Thali iyo qabiilka Shaybaan 81
85. Rasuulka Ilaahay SCW oo Al Dhaa'if tegey 84
86. Al Dhaa'if 85
87. Cutbah bin Rabiicah iyo Shaybah bin Rabiicah 87
88. Masjidka Caddaas 87
89. Suuqyada Carabta 88
90. Islaamidda Al Dhufaylu bin Camr Al Dawsii 88
91. Islaamidda Al Dhufaylu bin Camr aabihiis iyo haweentiisa 89
92. Ducada Rasuulka Ilaahay SCW ee Daws iyo islaamiddooda 89
93. Qisada Al Acshiyyu bin Qays bin Thaclabah 90
94. Rasuulka Ilaahay SCW oo Rukaanah la legdamay 91
95. Juzaka Aafaraad 93
96. Gaarsiinta Risaalada Soomaaliya iyo Afrika 93
97. Hijrada Al Xabashah 93
98. Hijrada Koowaad ee Al Xabashah 96

99. Dekadday ka dhoofeen Muhaajiriintu 96
100. Asxaabta Hijrada Koowaad haajiray 96
101. Taariikhda Hijrada Koowaad 98
102. Hijrada Labaad ee Al Xabashah 98
103.Tirada inta Al Xabashah uu haajirtay 103
104. Wafdigay Qurayshi u dirtay inay Muhaajiriinta soo celiyaan 103
105. Wada hadalka Muhaajiriinta iyo Al Najaashiyyu 104
106. Muhaajiriinta iyo guusha Al Najaashiyyu 106
107. Siduu Al Najaashiyyu boqor ku noqday 107
108. Islaamidda Al Najaashiyyu iyo janaazada lagu tukaday 108
109. Al Najaashii 109
110. Ruqayyah bintu Rasuuli Allaahi SCW ayaa islaamka Soomaaliya gaarsiisay 109
111. Kitaabka “Kitaabu Al Zzunuuji” 110
112. Al Kashuur 112
113. Hijrada Carabta ee Geeska Afrika ee Tubbac Al Ximyarii 113
114. Kitaabka Al Maqriizii ee Zaylac/Harar/Barbara iyo Muqdisho 115
115. Warka dalka Zaylac 115
116. Dawladda Awfaat/Jabarta/Harar 117
117. Barbara 117
118. Muqdisho 117
119. Juzka shanaad 117
120. Islaamidda Ansaarta 117
121. Xadiithka Suwayd bin Saamit 117
122. Islaamidda Iyaas bin Mucaath iyo qisada Abii Xaysar 119
123. Rasuulka Ilaahay SCW oo Al Caqabah rag Al Khazraj kula kulmay 119
124. Al Aws iyo Al Khazraj 120
125. Magacda Khazrajiyiinta Rasuulka Ilaahay SCW la kulmay 120
126. Baycatu Al Caqabah Al Uulaa 121
127. Heshiiska Al Caqabah 124
128. Muscab bin Cumayr iyo Wafdiga Al Caqabah 125
129. Muscab bin Cumayr 125
130. Jumcaha ugu horreeyey oo Al Madiinah lagu tukaday 126
131. Hamzah Al Nabiiti iyo Naqiicu Al Khadamaati 126
132. Islaamidda Sacd bin Mucaath iyo Usayd bin Xudayr 127
133. Islaamidda Usayd bin Xudayr 127
134. Islaamidda Sacd bin Mucaath 127
135. Islaamidda reer Banuu Cabdu Al Ash-hal 128
136. Amarka Al Caqabah Al Thaaniyah/Caqabada labaad 129
137. Al Baraa’u bin Macruur iyo salaaddiisa xagga Kacbada 129
138. Islaamidda Cabdu Allaahi bin Camr bin Xaraam 130
139. Labada haween oo baycada ka qayb galay 130
140. Al Cabbaasu iyo Ansaarta 131
141. Cahdiga Rasuulka Ilaahay SCW iyo Ansaarta: Heshiiska Caqabada Labaad 131
142. Laba iyo Tobanka Naqiib 132
143. Magacda Laba iyo Tobanka Naqiib 132
144. Saddexda Naqiib ee Al Aws 134
145. Xilka laba iyo tobanka Naqiib 135
146. Al Cabbaasu bin Cubaadah 135
147. Saxaabiga ugu horreeyey oo Rasuulka IlaahaySCW gacanta geliyey 136
148. Shaydaanka Ibliis iyo Heshiiska Al Caqabah 136
149. Rasuulka Ilaahay SCW oo aan Ansaarta xarbi u oggolaan 137

150. Doodda Quraysh iyo Ansaarta ee Heshiiska Al Caqabah 137
151. Quraysh oo Ansaarta raad raacday iyo qafaalidda Sacd 138
152. Sii daynta Sacd bin Cubaadah 138
153. Athaakhir 138
154. Qisada sanamka Camr bin Al Jamuux 139
155. Islaamidda Canr bin Al Jamuux 140
156. Shuruudaha Heshiiska Caqabada Labaad 140
157. Magacda dadka Caqabada Labaad ka qayb galay 140
158. Wadarta dadka Caqabada Labaad ka qayb galay oo baayactamay 145
159. Labada haweeney 145
160. Al Caqabah ah iyo Masjidu Al Baycah 146
161. Rasuulka Ilaahay SCW oo uu idanka dagaalku kusoo degay 146
162. Juzka lixaad 148
163. Nuurka Nabinnimada iyo Dugsiga Masjidkiisa SCW 148
164. Juzka toddobaad 148
165. Jihaadkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wsa Calaa Aalihi Wa Sallam 148
166. Juzka Sideedaad 148
167. Ka guursigiisa SCW qabaa'ilka Carbeed 148
168. Duullaanka Banii Al Musdhaliq 148
169. Sababta Duullaanka 149
170. Fitno 149
171. Fitnada ibnu Ubayya iyo nifaaqiisa 150
172. Quraanka kasoo degay ibnu Ubayya 151
173. Mawqifka Cabdu Allaahi ee aabihiis 151
174. Imaatinka Maqyas oo muslin ah 152
175. Halhayska muslimiinta 152
176. Ragga laga dilay Banii Al Musdhaliq 152
177. Amarka Juwayriyah bintu Al Xaarith 152
178. Quraanka kasoo degayAl Waliidu bin Cuqbah 154
179. Juzka sagaalaad 154
180. Sanadka wufuudda ee hoggaansiga Carabta 154
181. Wafdiga Banuu Tamiim 155
182. U qaylintooda Rasuulka Ilaahay SCW 155
183. Jawaabta Thaabit 156
184. Islaamiddooda iyo hadiyadaha la siiyay 156
185. Camr bin Al Ahtam 157
186. Qisada ibnu Al Dhufaylu, Arbad iyo wafdiga Banii Caamir 157
187. Dimaamu iyo wafdiga Banii Sacd bin Bakr 157
188. Dadkiisuu islaamka ugu yeeray 159
189. Al Jaaruudu iyo wafdiga Cabdu Al Qays 159
190. Islaamidda ibnu Saawaa 160
191. Wafdiga Banuu Xaniifah iyo Musaylimah al khath-thaab 160
192. Musaylimah oo nabinnimo sheegtay 161
193. Zaydu Al Khayli iyo wafdiga Dhayyi' 161
194. Amarka Cadiyyu bin Xaatim 161
195. Islaamidda Cadiyyu bin Xaatim 163
196. Farwah bin Musayk Al Muraadii 164
197. Imaatinka Camr bin Macdi Yakriba iyo wafdiga Banuu Zubayd 164
198. Imaatinka Al Ashcathu iyo wafdiga Kindah 165
199. Surudu bin Cabdu Allaahi iyo wafdiga Al Azd 166
200. Siduu Surudu dadka Jurash u laayay 166

201. Rasuulka Ilaahay SCW iyo wafdiga Jurash 166
202. Islaamidda reer Jurash 167
203. Wafdiga boqorrada Ximyar 167
204. Qoraalkuu Rasuulka Ilaahay SCW Ximyar u dhigay 167
205. Dardaaranka Rasuulka Ilaahay SCW ee Mucaath bin Jabal 169
206. Islaamidda Farwah bin Camr Al Juthaamii 170
207. Islaamidda Banuu Al Xaarith 170
208. Warqadda Rasuulka Ilaahay SCW ee Khaalid bin Al Waliidu 171
209. Imaatinka Khaalid iyo wafdigooda 171
210. Rasuulka Ilaahay SCW iyo wafdiga Banii Al Xaarith 171
211. Rasuulka Ilaahay SCW wuxuu u diray Camr bin Xazm 172
212. Imaatinka Rifaacah bin Zayd Al Juthaamii 175
213. Wafdiga Hamdaan 175
214. Labada beenlow ee Musaylimah iyo Al Aswadu Al Cansiyyi 176
215. Riyada Nabiga SCW ee labada beenlow 176
216. Xadiithka Rasuulka Ilaahay SCW ee dajjaaliinta 176
217. Bixidda amiirrada, kuwa zakada loo xilsaaray iyo magacdooda 176
218. Warqadda Musaylimah ee Rasuulka Ilaahay SCW iyo jawaabteeda 177
219. Juzka tobanaad 178
220. Gaarsiinta Risaalada Jinniga 178
221. Jinniga 178
222. Cunnada jinniga 178
223. Jinnigu waa is dhalaa 179
224. Anwaacda jinniga 179
225. Jinnigu waa dhintaa 180
226. Degmada jinniga 181
227. Shayaadiintu markay qorraxdu dhacdo ayay hawl usoo baxaan 182
228. Nabi Muxammad SCW jinnigana waa loo diray 182
229. Xadiithka Calii CS 184
230. Kuhaanta Carabta oo odorostay soo diridda Nabiga SCW 185
231. Siday Carabtu zamanka jaahiliyada u haysatay xidigaha la ganayo 187
232. Ganidda shayaadiinta 189
233. Jinniga Quraanka dhegeystay 190
234. Go’idda kuhaanada 191
235. Kaahinada Al Ghaydhalatu 191
236. Khadar: kaahinka Banuu Lihib 192
237. Kaahinka qabiilka Janb 194
238. Cumar iyo Sawaad bin Qaarib Al Dawsiyyi 194
239. Riwaayada Al Suhaylii ee Xadiithka Cumar iyo Sawaad 195
240. Arrinka Jinniga Nasiibiin 197
241. Nakhlah 198
242. Jinniga Quraanka dhegeystay oo islaamay 199
243. Cumar bin Cabdu Al Caziiz 200
244. Nasabiin 200
245. Juzka Kow ito tobnaad 200
246. Qoraallada Rasuulka Ilaahay SCW 200
247. Qoraalka koowaad 200
248. Qoraalkuu Nabigu, SCW u kala dhigay Muhaajiriinta iyo Ansaarta 200
249. Qoraalka labaad 203
250. Qoraalka Heshiiska Nabi SCW iyo yuhuudda Al Madiinah 203
251. Qoraalka Saddexaad 205

252. Qoraalka Heshiiska Al Xudaybiyyah 206
253. Heshiiska Nabadeed ee Al Xudaybiyyah 206
254. Calii ayaa Heshiiska dhigay 207
255. Qoraalka Heshiiska Nabadeed ee Al Xudaybiyyah 207
256. Al Xudaybiyyah maanta magaceedu waa Al Shumaysii 208
257. Juzka Laba iyo tobnaad 208
258. Qoraallada Rasuulka Ilaahay SCW ee boqorrada 208
259. Magacda ergayda iyo cidda loo diray 209
260. Riwaayada ibnu Xabiib ee diridda ergayda 210
261. Magacda ergayda Ciise 210
262. Qoraalka afaraad: warqadda Rasuulka Ilaahay SCW ee Hiraql 210
263. Abuu Sufyaan iyo Hiraql 212
264. Al Israa'u wa Al Micraaju, Abuu Sufyaan iyo Hiraql 213
265. Qoraalka shanaad 214
266. Warqadda koowaad ee Rasuulka Ilaahay SCW ee Hiraql 214
267. Qoraalka lixaad 215
268. Warqadda labaad ee Rasuulka Ilaahay SCW ee Hiraql 215
269. Hiraql gaalnimuu ku dhintay 217
270. Siday boqorrada Rooma warqaddaas u ilaaliyeen 217
271. Xadiithka Cumayr bin Isxaaq 218
272. Dixyah iyo Hiraql 218
273. Rasuulka Ilaahay SCW oo Dixyah uga aargooyay Banuu Jutham 219
274. Imaatinkooda Rasuulka Ilaahay SCW 220
275. Qoraalka toddobaad 222
276. Qoraalka Rasuulka Ilaahay SCW ee Kisraa boqorka iiraan 222
277. Boqorka roomaanka Justiiniyanus 222
278. Thuu Nawaas iyo muslimiinta 223
279. Daws iyo boqorka Rooma Justiiniyanus 224
280. Koofil 225
281. Koofil walaashiis 226
282. Xuseenow caqligu kaama baxo –afbakayle- 227
283. Dardaaran 229
284. Inigiriisku wuxuu dilay dalool shacbiga soomaaliyeed 230
285. Maqashiiya Uunka 230
286. Yaman oo gumaysiga xabashida hoos gashay 231
287. Boqornimada Abraha ee Yaman 232
288. Abuu Murrah Sayf bin Thii Yazin iyo Kisraa Anuu Shirwaa 233
289. Abuu Murrah Sayf bin Thii Yazin iyo Qaysarka Rooma 234
290. Abuu Murrah Sayf bin Thii Yazin iyo Al Nucmaanu bin Al Munthir 234
291. Taajka Kisraa 235
292. Boqorrada iiraan 236
293. Haweeney dawlad ama qabiil islaam ah madax uma noqon karto 236
294. Al Iskandar iyo Daaraa 236
295. Wahriz bin Isbihbith oo ciidanka amxaarada jebiyay 237
296. Dilidda Nuuzaad wiilka Wahriz 237
297. Wahriz oo Masruuq bin Abraha dilay amxaaradana jebiyay 237
298. Shuruudaha uu Kisraa uu Abuu Murrah Sayf bin Thii Yazin la galay 238
299. Sayf bin Thii Yazin waxaa dilay amxaar ilaaladiisa ka mid ah 238
300. Gumaysiga iiraan ee Yaman 238
301. Gumaysiga iiraan ee amxaarada 239
302. Al Marzabaanu bin Wahriz oo Yaman boqor u noqday 239

303. Amarka Kisraa in Nabi Muxammad SCW la dilo 239
304. Islaamidda Baathaan boqorka Yaman ugu horreeyey oo muslinka ah 239
305. Qoraalka sideedaad 240
306. Warqadduu Nabigu SCW Kisraa boqorka iiraan u dhigay 240
307. Nabi Muxammad SCW oo boqorrada iiraan habaaray 242
308. Cabdu Allaahi bin Xuthaafah ayaa warqadda u geeyey 242
309. Xadiithka Abuu Hurayrah: ninka usha wata iyo Kisraa 243
310. Hadiyada Kisraa ee Nabiga SCW 243
311. Qoraalka sagaalaad 244
312. Warqadda Nabiga SCW ee Al Najaashiyyu 244
313. Camr bin Umayyah Al Damriyyu ayaa warqadda u geeyey 245
314. Wada hadalka Camr iyo Al Najaashiyyu 245
315. Jawaabta Al Najaashiyyu uu Rasuulka Ilaahay SCW usoo diray 246
316. Nabi Muxammad SCW laba warqadood ayuu Al Najaashiyyu u diray 247
317. Al Najaashiyyu wiilkiisa iyo wafdiggisa badday ku dhinteen 247
318. Quraanka raggaas kasoo degay 248
319. Nabiga SCW ayaa Al Najaashiyyu janaazada ku tukaday 248
320. Qoraalka tobnaads 250
321. Warqadda Nabiga SCW ee boqorka Al Najaashiyyu ka dambeeyey 250
322. Imaatinka Rasuulka Ilaahay SCW wafdiga krishtaanka ah ee Al Xabashah 251
323. Quraanka wafdigaas kasoo degay 251
324. Amxaarada oo Nabi Muxammad SCW kusoo duushay 252
325. Amxaaro waa jilib qabiilka Carbeed ee Ximyar 253
326. Qoraalka kow iyo tobnaad 254
327. Warqadduu Rasuulka Ilaahay SCW u diray boqorka Masar 254
328. Masriyiintu Carab ma aha 254
329. Kitaabka “Zawjaatu Al Anbiyaa’i” 255
330. Al Xasan bin Faadhimah oo tuulada Maariyah jizyada ka dhaafay 258
331. Kitaabka Al Zarqaanii 258
332. Warqadda Rasuulka Ilaahay SCW ee Al Maqawqis 259
333. Ergayga Rasuulka Ilaahay SCW: Xaadhib bin Abii Baltacah 261
334. Kulanka hore ee Al Maqawqis iyo Mughiirah bin Shucbah 263
335. Warqadduu Al Maqawqis Nabiga SCW usoo diray 264
336. Siduu Al Maqawqis Xaadhib u karaameeyey 264
337. Saddexda su’aalood ee Al Maqawqis ee Xaadhib 265
338. Maariyah walaasheed Siiriin 265
339. Kitaabka Muxammad Ridaa 267
340. Halisnimada cunno badan oo la cuno 267
341. Qoraalka laba iyo tobnaad 268
342. Warqadda Rasuulka Ilaahay SCW ee Al Munthiru bin Saawaa 268
343. Warqadda Rasuulka Ilaahay SCW 269
344. Al Calaa’u bin Al Xadramii iyo Al Munthiru bin Saawaa 270
345. Furaha jannada 270
346. Islaamidda ibnu Saawaa 271
347. Qoraalka saddex iyo tobnaad 272
348. Warqadduu Nabigu SCW labada boqor ee Cumaan u diray 272
349. Camr bin Al Caasii iyo Cabdi boqorka Cumaan 273
350. Camr bin Al Caasii, Cabdi iyo Jayfar 274
351. Islaamidda boqorrada Cumaan 275
352. Intaan islaamin wuxuu kusoo rogay jizyo 278
353. Riwaayada Al Suhaylii ee Camr iyo Al Julandii boqorka Cumaan 275

354. Qoraalka afar iyo tobnaad 276
355. Warqadduu Nabigu SCW u diray boqorka Al Yamaamah 276
356. Hadalka Saliidh bin Camr 276
357. Hadalka Huuthah 277
358. Jawaabtuu Huuthah u diray Rasuulka Ilaahay SCW 277
359. Huuthah iyo Arakuun 277
360. Qoraalka shan iyo tobnaad 278
361. Warqadduu Nabigu SCW u diray Al Xaarith bin Abii Shimr 278
362. Qoraalka lix iyo tobnaad 279
363. Qoraalkuu Nabigu SCW u dhigay Al Ddaariyyiina 279
364. Warqadda Abuu Bakr Al Ssiddiiqu ee Daariyiinta 282
365. Dardaaranka Rasuulka Ilaahay SCW ee Daariyiinta oofsashadiisa 282
366. Amarka Fadak 283
367. Magacda Daariyiinta uu Rasuulka Ilaahay SCW u dardaarmay 283
368. Qoraalka toddoba iyo tobnaad 283
369. Qoraalka Heshiiska Rasuulka Ilaahay SCW iyo Yuxaannah boqorka Aylah 283
370. Aylah 284
371. Qoraalka sideed iyo tobnaad 285
372. Qoraalka Heshiiska Rasuulka Ilaahay SCW, Jarbaa'a iyo Athruux 285
373. Qoraalka sagaal iyo tobnaad 286
374. Rasuulka Ilaahay SCW oo Khaalid u diray Duumatu Al Jandal 286
375. Qoraalkuu Rasuulka Ilaahay SCW Ukaydir siiyay 286
376. Sababta keentay Duullaanka Tabuuk 287
377. Qoraalka labaatanaad 287
378. Wafdiga Thaqiif iyo islaamiddooda 287
379. Qoraalka Rasuulka Ilaahay SCW ee Thaqiif 291
380. Qoraalka kow iyo labaatanaad 292
381. Wafdiga Banuu Xaniifah iyo Musaylimah al kath-thaab 292
382. Musaylimah oo nabinnimo sheegtay 292
383. Qoraalka laba iyo labaatanaad 293
384. Warqadduu Musaylimah Rasuulka Ilaahay SCW usoo diray 293
385. Warqadduu Rasuulka Ilaahay SCW u diray Musaylimah 293
386. Qoraalka saddex iyo labaatanaad 294
387. Qoraalka Nabiga SCW ee gadidda addoonka 294
388. Qoraalka afar iyo labaatanaad 295
389. Qoraalka Rasuulka Ilaahay SCW zakada uuna Abuu Bakr hayay 295
390. Qoraalka shan iyo labaatanaad 298
391. Qoraalka Rasuulka Ilaahay SCW nisaabka zakada oo Cumar hayay 298
392. Qoraalka lix iyo labaatanaad 299
393. Qoraalka Rasuulka Ilaahay SCW ee Banii Nahd bin Zayd 299
394. Qoraalka toddoba iyo labaatanaad 301
395. Qoraalka Rasuulka Ilaahay SCW ee Qadhan bin Xaarithah 301
396. Qoraalka sideeda iyo labaatanaad 302
397. Qoraalka Rasuulka Ilaahay SCW ee Waa'il bin Xujr 302
398. Qoraalka sagaal iyo labaatanaad 304
399. Asalka Diinta Ciise ee Najraan 304
400. Asalka diinta yuhuudda ee Yaman 305
401. Warqadda Nabiga SCW ee krishtaanka Najraan ee Yaman 305
402. Riwaayada Al Bayhaqii 305
403. Aftida Al Usqufu 306
404. Al Usqufu oo dadkiisa la tashaday 307

405. Wafdiga Najraan ee Rasuulka Ilaahay SCW 307
406. Soo degidda Suuratu Aali Cimraana 308
407. Wafdiga Najraan oo la habaartanka Nabiga SCW diiday 309
408. Xukunka Nabiga SCW ee reer Najraan 309
409. Gaddoonka wafdiga Najraan 311
410. Is lacnidda iyo waxa ka dhasha 312
411. Riwaayada ibnu Isxaaq 312
412. Wafdiga krishtaanka ah ee Najraan 312
413. Makaanka Abuu Xaarithah ee boqorrada Rooma 313
414. Sababta islaamidda Kurz bin Calqamah 313
415. Boqorrada Najraan iyo islaamidda wiilka midkood 313
416. Krishtaanka oo qorrax kasoo bax u tukaday 314
417. Magacda wafdiga Najraan iyo caqiidadooda iyo murankooda 314
418. Rasuulka Ilaahay SCW iyo wafdiga Najraan 315
419. Krishtaanka oo la habaartanka Nabiga SCW ka cabsaday 316
420. Krishtaanka oo oggolaaday inay jizyo bixiyaan 316
421. Cumar iyo Abuu Cubaydah 317
422. Quraanka kasoo degay wafdiga Najraan 317
423. Ilaah kale ma jiro aan Ilaahay ahayn 319
424. Ilaahay agtiisa diinta runta ahi waa islaamka 319
425. Quraanka kasoo degay waxay yuhuudda iyo krishtaanku hindiseen 320
426. Quraanka kasoo degay inay muslimiintu kuwaas ka digtoonaadaan 321
427. Quraanka kasoo degay abuurista Ciise 321
428. Qoraalka soddonaad 322
429. Qoraalka Rasuulka Ilaahay SCW ee Abuu Dumayrah 322
430. Qoraalka kow iyo soddonaad 323
431. Qoraalka Nabiga SCW ee wafdiga Hamdaan 323
432. Qoraalka laba iyo soddonaad 324
433. Warqadduu Rasuulka Ilaahay SCW yuhuudda Khaybar u diray 324
434. Qoraalka saddex iyo soddonaad 326
435. Islaamidda Banuu Al Xaarith 326
436. Warqadda Rasuulka Ilaahay SCW ee Khaalid 326
437. Imaatinka Khaalid iyo wafdigooda 327
438. Rasuulka Ilaahay SCW iyo wafdiga Banii Al Xaarith 327
439. Qoraalka afar iyo soddonaad 328
440. Rasuulka Ilaahay SCW oo diray Camr bin Xazm oo awaamirtiisa sida 328
441. Qoraalka shan iyo soddonaad 331
442. Wafdiga boqorrada Ximyar 331
443. Qoraalkuu Rasuulka Ilaahay SCW u dhigay 331
444. Dardaaranka Rasuulka Ilaahay SCW ee Mucaath bin Jabal 333
445. Qoraalka lix iyo soddonaad 334
446. Qoraalka Rasuulka Ilaahay SCW ee reer Yaman 334
447. Qoraalka toddoba iyo soddonaad 335
448. Qoraalka Rasuulka Ilaahay SCW ee Banii Zuhayr 335
449. Taariikh nololeedka dhigaha kitaabkaan 447

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Araarta dhigaha kitaabka

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, Risaalada Ilaahay Tacaalaa wuu gudbiyay

Al Xamdu Lillaahi Rabbi al Caalamiina, Wa al Th-thanaa'u Li Allaahi, Wasallaa Allaahu Caalaa Sayyidinaa Muxammadin,wa Calaa Aalihi wa Saxbihi, wa Sallam tasliiman kathiiran.

Nabi Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, waxaa loo soo dhiibay Risaalad lagu amray inuu caalamiinta u gudbiyo oo khalqigoo idil ah, ayna ka mid yihiin jinniga iyo insiga oo idil, sida ugu fiican oo ugu kaamilsan ayuuna ugu gudbiyay, Ilaahay ha ka abaal mariyee, dariiqyaduu u marayna Ilaahay keli ah ayaa koobi kara oo ku cilmi leh.

Waxaan kitaabkaan ku xusaynnaa Axaadiith ujeedadaas ku saabsan ayna ka mid yihiin:

Kow. Al Bicthah, oo ah sida loo soo diray Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.

Laba. Qaar ka mid ah dadkuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Risaalada bilowgeeda qof qof ahaan ula hadlay oo sidaas ku islaamay.

Saddex. Qaar ka mid ah dadku Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ayagoo wadar ah islaamka usoo bandhigay, sida qabaa'ilka, ama Carabta muusimka xajka Makkah isugu yimaada, ama dadka suuqyada isugu yimaada.

Afar. Qaar ka mid ah qabaa'ilkuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam rag asxaabtiisa ka mid ah u diray oo islaamka sidaas ku gaarsiiyay.

Shan. Waraaqaha uu boqorrada adduunka u kala diray uuna Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, diinta islaamka ugu yeerayo.

Lix. Qoraallo ka mid ah qoraalladuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam qabaa'il u kala diray uuna ugu sharxayo shareecada islaamka iyo axkaamteeda.

Toddoba. Qoraallo uu u dhiibay Abuu Bakr Al Ssiddiiqu iyo Cumar, Allaha raalli ka wada noqdee, uuna ugu caddeynayo Sallaa Allaahu Calayhi a Sallam qaar ka mid ah axkaamta islaamka.

Sideed. Heshiisyo nabadeed oo uu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam la kala galay dawladu gaalo ah iyo jizyada uu ku xukumay inay sanad walba bixiyaan.

Sagaal. Heshiiska uu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam la galay yuhuudda degganayd Al Madiinah Al Munawwarah iyo qabaa'ilka Carbeed oo isla degmadaas ku noolaa ahna Ansaarta.

Toban. Heshiiska nabadeed ee Al Xudaybiyyah.

Kow iyo toban. Jihaadkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.

Laba iyo toban. Inuu la xididay qabaa'il kala duwan oo Carab iyo cajam ah sida Maariyah bintu Shamcuun, Ummu Al Mu'miniina oo dalka Masar u dhalatay.

Waxaan anigu marag ka ahay inuu Nabi Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, bi abii anta wa ummii oo aan aabahay iyo hooyaday ku furanayo, Risaalada loo soo dhiibay nasoo gaarsiiyay oo aan ku noolaannay lib iyo guulna ku helnay. Waxaanna Ilaahay ka baryayaa inuu uga abaal mariyo waxa ugu fiican oo uu Nabi ummaddiisa uga abaal mariyay.

Maraajicda dib loogu noqon karana waa kutubbada Tafsiirka Quraanka, gaar ahaan Tafaasiirka Al Baghawii, iyo kutubbada Xadiithka sida Bukhaarii, Muslim iyo Axmad iyo Sunanka; Kutubbada Siirada sida Ibnu Hishaam (oo dhintay labo boqol iyo saddex iyo toban sanadka Hijriga), Al Rawdu Al Unuf ee Al Suhaylii (oo dhintay shan boqol iyo kow iyo sideetan ee sanadka Hijriga), Sharxu Al Callaamah Al Zarqaanii (dhintayna kun iyo boqol iyo labo iyo labaatan Hijriga) calaa Al Mawaahibu Al

Laduniyyah bi Al Minaxi Al Muxammadiyyah ee Al Qasdhalaanii (oo la oofsaday sanadka sagaal boqol iyo saddex iyo labaatanka Hijriga), iyo Usudu Al Ghaabah uuna allifay Ibnu Al Athiir, oo la oofsaday sanadka lix boqol iyo soddon ee Hijrada. Tafsiirka af Soomaaligana waxaan in badan ka qaatay Kitaabka uu tarjumay Sheekh Maxmuud Maxamad Cabdi Allaha dambigiisa dhaafee. Wararka aan kutubbada kale kasoo qaatayna meeshooda ayaan ku sheegayaa.

Waxaanna Ilaahay ka baryayaa inuu iga aqbalo, qofka akhristana uu ku anfaco, ajarkiisana uu aniga iyo labadii i dhashay nasiiyo. Kitaabkaani waa nicmuu Ilaahay igu galladeystay, waxa qalad ah oo ku jirana waxay ka yimaadeen aniga iyo shaydhaan.

Warka aan kasoo qaatay kutubbo kalena meesheeda ayaan ku xusayaa, inshaa'a Allaahu.

Waxaa dhigay midka naxariista iyo dambi dhaafka Ilaahiis faqiirka u ah,

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan

Minneapolis, Minnesota, USA

Maalin axad ah, ee bisha Rabiicu Al Aakhar tahay lix iyo labaatan ee sanadka kun iyo afar boqol kow iyo soddon Hijriga, una dhigantah kow iyo tobanka Abriil laba kun iyo toban Miilaadiga.

Juzka Koowaad

Al Bicthah: soo diridda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Al Bicthah macneheedu waxaa weeye "soo diridda", waana soo diridda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, insiga iyo jinniga Nabinnimo iyo Rasuulnimo loogu soo diray. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, afartan sano gaaray, ayuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu u soo diray isagoo raxmad caalamiinta u ah iyo dhammaan dadkoo idil, si uu ugu bishaareeyo. Wuxuu Ilaahay Tacaalaa hore ballan uga qaaday Nabi walba oo uu hortiis soo diray inuu rumeeyo oo uu wuxuu la yimidna rumeeyo, uuna uga hiilliyo cidda khilaafta, wuxuuna ka qaaday ballanka ah inay ballankaasna u gudbiyaan inta ayaga rumeysa oo raacda. Anbiyada dhammaantoodna cahdigaas way oofiyeen, oo xaqqaas lagu leeyahay way gudbiyeen. Wuxuuna Ilaahay Tacaalaa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri Aayadda kow iyo sideetanaad ee Suuratu Aali Cimraana: **"Wa ith akhatha Allaahu miithaaqa Al Nabiyyiina: lamaa aataytukum mmin Kitaabin wa Xikmatin thumma jaa'akum Rasuulun musaddiqun limaa macakum la tu'minanna bihi wa la tansurannahu. Qaala: "A'aqrartum wa akhathtum calaa thaalikum isrii?" Qaaluu: "Aqrarnaa!" Qaala: "Fa ash-haduu wa Anaa macakum mina al shaahidiina**(81)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Xusuuso markuu ka qaaday Ilaahay ballan adag Anbiyada, oo ah: "Waxaan idin siiyo oo Kitaab iyo Xikmad ah, oo uu markaas kaddib idiin yimaado Rasuul rumaynaya waxaad haysataan, oo ah kutubbadooda, waa inaad (Rasuulkaas) rumaysaan, una gargaartaan". Wuxuu Ilaahay yiri: "Ma qirteen oo ma ku qaadeen arrinkaas Ballankeyga?" oo ay ayaguna yiraahdeen: "Waan qimay (oggolaannay) ballankaas." Markaasuu ku yiri: "Maraga ka noqda, oo Aniguna la jirkiinna ayaan ka mid noqonayaa kuwa ka marag kaca(81)."

Sidaas ayuu Ilaahay wuxuu dhammaan Anbiyada ka qaaday ballanka ah inay aaminaan, ayna cidda khilaafta uga hiilliyaan, waxayna ballankaas u gudbiyeen oo kale inta ayaga laftooda rumaysay oo aamintay oo ka mid ah kuwa labada Kitaab la siiyey (oo ah krishtaanka iyo yuhuudda)". Al Imaamu ibnu Xajar Al Casqalaanii iyo Imaam ibnu Kathiir, siday uga wariyeen Al Qasdhalaanii iyo Al Azraqii, waxay yiraahdeen inay soo diriddu ahayd maalin isniin ah oo ay bisha Ramadaan afar iyo labaatan habeen ka gudbeen. Ibnu Xajama wuxuu Fatxu Al Baarii ku yiri: "Waxa saxiix ah oo mash-huurka shaacsan oo la wada qabo ah inay dhalashadiisu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallarn, ahayd bisha Rabiicu Al Awwal, oo sidaasey marka Waxyiga lago soo dejiyay uu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallarn, afartan sano iyo lix bilood jir yahay." Waa intaas warka ibnu Xajar ee Al Fatxu. Inta qabta inay Bicthadu bisha Ramadaan dhexdeeda ahayd waxay xujjo ka dhiganayaan Aayadda boqol iyo shan iyo sideetanaad ee Suuratu Al Baqarah, oo oraneysa: **"Shahru Ramadaana allathii unzila fiihi Al Qur'aanu**(185)**"**, oo macneheedu yahay: " bisha Ramadaan ee lasoo dejiyay dhexdeeda Quraanka." Culummada sidaas qabtana waxay yiraahdeen: "Waxa ugu horreeya oo uu Ilaahay Tacaalaa ku karaameeyey Nabinnimadiisa waa soo dejinta Quraankuu kusoo dejiyay." Taasi waxaa weeye inay soo degidda Quraanku bisha Ramadaan bilaabatay. Axrnad iyo ibnu Jariir Al Dhabarii iyo Al Dhabraanii iyo Al Bayhaqii waxay Waathilah ka wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Unzilat Suxufu Ibraahiima fii awwali laylatin min Ramadaana, wa unzilat Al Ttawraatu li sitti maadiina min Ramadaana, wa unzilati Al Injiilu li thalaatha cashrah khalat min Ramadaana, wa unzila Al Zzabuuro li thamaani cashrah khalat min Ramadaana, wa anzala Allaahu Al Qur'aana li arbaca wa**

cishriina khalat min Ramadaana." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Suxufta lbraahiim waxaa lasoo dejiyay habeenka ugu horreeya ee Ramadaan, Tawraaddana waxaa lasoo dejiyay markay lix ka gudubtay Ramadaan, Injiilkana waxaa lasoo dejiyay markay saddex iyo toban ka gudubtay Ramadaan, Zabuurna waxaa lasoo dejiyay markay sideed iyo toban ka gudubtay Ramadaan, Ilaahyna wuxuu Qur' aanka soo dejiyay markay afar iyo labaatan ka gudbeen Ramadaan." Al Xaafith ibnu Xajar wuxuu Fatxu Al Baarii bi Sharxi Saxiixi Al Bukhaarii ku yiri: "Xadiithkaani wuxuu ku dhabbaqan yahay Hadalka Ilaahay Tacaalaa ee ah **"Shahru Ramadaana allathii unzila fiihi Al Qur'aanu"**, oo macneheedu yahay: "bisha Ramadaan ee lasoo dejiyay dhexdeeda Quraanka", iyo **"Innaa anzalnaahu fii laylati Al Qadri**(1)**"** oo macnheedu yahay: "Annagaa soo dejinnay Quraanka habeenka Laylatu Al Qadarka(1)." Waana Aayadda koowaad ee Suuratu Al Qadri. Intaasuu ku egyahay warka ibnu Xajar.

Soo degidda Quraanka

Markaas kaddib Quraanku wuxuu usoo degay Aayado kala gogo' an: ama shan Aayadood ama toban ama ka badan ama ka yar, hadba siday dhacdooyinku yihiin. Waxaa saxiix ah inay tobanka Aayadood ee qisada ifkiga ee Suuratu Al Nuur mar soo wada degeen, siday saxiix u tahay inay tobanka Aayadood ee ugu horreeya Suuratu Al Mu'minuun mar soo wada degeen. Waxaa ayaduna saxiix ah inay **"Ghayru uulii al ddarari"** oo macneheedu yahay "oo aan kuwa dhibban ahayn" ay keligeed soo degatay, waana qayb ka mid ah Aayadda shan iyo sagaashanaad ee Suuratu Al Nisaa'i. Sidaasoo kale waxaa keligeed soo degatay **"Wa in khiftum caylatan"** oo macneheedu yahay: "Haddad ka cabsataanna saboolnimo", ahna qayb ka mid ah Aayadda sideed iyo labaatanaad ee Suuratu Tawbah, ilaa dhammaadka Aayadda, waxay soo degatay mar ka dambeysey Aayadda inteeda hore usoo degatay. Ibnu Abii Shaybah wuxuu wariyay inuu Cikrimah yir: "Ilaahay wuxuu Quraanka usoo dejiyay qayb qayb ka kooban saddex Aayadood ama afar Aayadood ama shan Aayadood." Al Bayhaqiina wuxuu wariyay inuu Cumar yiri: "Quraanka u barta shan shan Aayadood, maxaa yeelay Jibriil wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kusoo dejinjiray shan shan." Quraanku wuxuu soo degayey, isagoo qaybo qaybahaas ah muddo ku siman saddex iyo labaatan sano, ayadoo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lasoo diray isagoo afartan jir ah, uuna noolaa saddex iyo lixdan sano. Culummo kalena waxay tiri in Quraanka isagoo idil habeenkay ahayd Laylatul Qadarka laga soo dejiyey **Lawxul Maxfuuthka** lana keenay **Baytu Al Cizzaati** (Guriga Cizzada) ee ku yaalla Samadaan Adduunka ee dhow.

Macnaha soo dejinta Quraanka

Al Casqalaanii wuxuu yiri: "Al Asfahaanii wuxuu yiri: "Waxay Ehelu Al Sunnah wa Al Jamaacah isku waafaqeen in Hadalka Ilaahay lasoo dejiyay, waxayse isku khilaafeen soo dejinta macneheeda. Waxaana la yiri: waa muujinta akhrintiisa. Waxaa kaloo la yiri: Ilaahay Tacaalaa wuxuu Hadalkiisa ilhaamiyey Jibriil isagoo Samada kore ku sugan. Markaasuu baray sida loo akhriyo. Markaas kaddib ayuu Jibriil arliga ula soo degay oo uu sidaas Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu gudbiyey. Al Qudhbu Al Raazii wuxuu yiri: "Macnaha soo dejinta Kutubbada Rususha lagu soo dejiyo waxaa weeye inuu marka hore Malaggu intuu u fahmo si dhakhso leh, oo uu Ilaahay uga barto si ruuxaani ah, ama uu kasoo xifthiyo Lawxul Maxfuuthka, uu markaas intuu lasoo dego uu ayaga u gudbiyo." Quraanka kasokow, Jibriil wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kusoo dejiyay Sunnada Shariifka ah oo idil, sidayba noogu

caddeeyeen Aayadaha sadex iyo afar iyo shan ee Suuratu Al Najmi**: "Wa maa yandhiqu cani al hawaa**(3)**In huwa illaa Waxyun yuuxaa**(4)**Callamahu shadiidu al quwaa**(5)**"** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Kamana hadlo hawadiisa(3)Mana uusan aha waxaan ahayn Waxyi loo waxyooday(waana wuxuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku hadlo, oo ah Sunnadiisa)(4)Waxaana wax baray (oo xagga Ilaahay kasoo gaarsiiyey) ku xoog wayn (oo ah Malag Jibriil)(5)."

Bilaabashada Waxyiga

Al Bukhaarii wuxuu kitaabka "Al Tacbiiri" ee saxiixiisa uga wariyay Caa'ishah Xadiithkaan: "Awwalu maa budi'a bihi Rasuulu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, mina Al Waxyi al rru'yaa al saadiqatu fii al nnawmi. Fa kaana la yaraa ru'yaa illaa jaa'athu mithla falaqi al ssubxi. Fa kaana ya'tii Xiraa'an fa yataxannathu fiihi wahwa al ttacabbudu al llayaaliya thawaati al cadadi wa yatazaawwadu li thaalika. Thumma yarjicu ilaa Khadiijata fa tuzawwiduhu li mithlihaa, xattaa faji'ahu Al Xaqqu wa huwa fii ghaari Xiraa'in. Fa jaa'ahu Al Maliku fiihi fa qaala: **"Iqra'"**. Fa qaala lahu Al Nabiyyu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam: **"Maa anaa bi qaari'in". Fa akhathanii fa ghadh-dhanii xattaa balagha minnii al jahda. Thumma arsalanii fa qaala: "Iqra'" Fa qultu: ""Maa anaa bi qaari'in". Fa akhathankii fa ghadh-dhanii al thaaniyata xatta balagha minnii al jahda. Thumma arsalanii fa qaala: "Iqra'". " Fa qultu: ""Maa anaa bi qaari'in". Fa akhathanii fa ghadh-dhanii al th-thaalithata xatta balagha minnii al jahda. Thumma arsalanii fa qaala: "Iqra' bi Ismi Rabbika Allathii khalaqa xatta balagha maa lam yaclam**." Fa rajaca bihaa tarjufu bawwaadiruhu xatta dakhala calaa Khadiijata fa qaala: **"Zammiluunii Zammiluunii."** Fa zammaluuhu xatta thahaba canhu al rrawcu. Fa qaala: **"Yaa Khadiijatu Maa lii?"** Wa akhbarahaa al khabara wa qaala: **"Qad khashaytu calaa nafsii."** Fa qaalat lahu: **"Kallaa abshir! Fa wa Allaahi laa yukhziika Allaahu abadan! lnnaka la tasilu al rraxima wa tasduqu al xadiitha wa taxmilu al kalla wa taqrii al ddayfa, wa tuciinu calaa nawaa'ibi al xaqqi."** Thumma indhalaqat bihi Khadiijatu xattaa atat bihi Waraqata bina Nawfali bini Asadi bini Cabdi Al Cuzzaa bini Qusayyin wahwa ibnu cammi Khadiijata akhuu abiihaa, wa kaana imra'an tanassara fii al jaahiliyyati wa kaana yaktubu al kitaaba Al Carabiyya fa yaktubu bi Al Carabiyyati mina Al Injiili maa shaa'a Allaahu an yaktuba, wa kaana shaykhan kabiiran qad camiya, fa qaalat lahu Khadiijatu: "Ay ibna cammi! Asmac min ibni akhiika." Fa qaala Waraqatu: "Ibna akhii maa thaa taraa?" Fa akhbarahu Al Nabiyyu, Sallaa Allaau Calayhi Wasallam, maa ra'aa. Fa qaala Waraqatu: "Haathaa Al Naamuusu allathii unzila calaa Muusaa! Yaa laytanii fiihaa jathacan akuunu xayyan xiina yukhrijuka qawmaka." Fa qaala Rasuulu Allaahi, Sallaa Allaau Calayhi Wasallam**: "Awa mukhrijiyya hum**?" Fa qaala Waraqatu: "Nacam, lam ya'ti rajulun qadh-dhu bimaa ji'ta bihi illaa cuudiya, wa in yudriknii yawmuka ansurka nasran mu'azzaran." Thumma lam yanshab Waraqatu an tuwuffiya. Wa fatara Al Waxyu fatratan xattaa xazina Al Nabiyyu, Sallaa Allaau Calayhi Wasallam, fiimaa balaghanaa xuzsan ghadaa minhu miraaran kay yataraddaa min ru'uusi shawaahiqi al jibaali. Fa kullamaa awfaa bi thirwati jabalin likay yulqiya minhu nafsahu tabaddaa lahu Jibriilu fa qaala: "Yaa Muxammadu! Innaka Rasuulu Allaahi xaqqan!" Fa yaskunu li thaalika ja'shuhu wa taqirru nafsuhu. Fa yarjicu fa ithaa dhaalat calayhi fatratu Al Waxyi ghadaa li mithli thaalika. Fa ithaa awfaa bi thirwati jabalin tabaddaa lahu mithla thaalika." Qaala ibnu Cabbaasin: "Faaliqu al isbaaxi daw'u al shamsi bi al nnahaari wa daw'u al qamari bi alllayli." W aana Xadiithka tirsigiisu yahay lix kun iyo sagaal boqol

iyo labo iyo sideetan ee saxiixu Al Bukhaarii. Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxa ugu horreeyey oo uu Waxyiga kusoo dega Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku bilowday waxay ahayd riyo run ah oo uu arko isagoo hurda. Markaasuu markuu riyo arko waxay riyadu u caddayd sida subuxu ama waabarigu u cad yahay oo uu u iftiimayooo kale (oo waxay ahayd riyo aan beeni ku jirin iyo shaki, in la fasirana aan u baahnayn ayadooba iska caddayd). Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu tegi jiray (godka magaciisu yahay Ghaaru Xiraa'a ee ku yaalla buurta ku taalla Makkah Al Mukarramah ee la yiraahdo Jabalu Al Nuuri, halkaasoo uu ku cibaadeysan jiray, kuna jiri jiray habeenno (iyo maalmohooda) badan. (cibaadeysigiisuna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ahaa mid fikriga ah, siduu jamhuurku u yiri, isagoo ku taagan Al Xanafiyyah, oo ah Diinta Ibraahiim). Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hoggaas markuu aadayana saad ayuu qaadan jiray (saadkiisa ama cunnadooduna waxay ahayd hilib iyo caano, kuwaasoo aan wax badan raagayn ee fasaadaya, isaguna uu godkaas bil ku ictikaafi jiray iyo inuu u qumo xaajooyinka qoyskiisaba). Kaddibna wuxuu usoo laaban jiray Khadiijah, taasoo hadana siin jirtay saad kii la mid ah (intuu ictikaafka ku jiro). Sidaas isagoo ku sugan ayaa waxaa kadiyay Xaqqa (Xaqqa macnihiisu waxaa weeye arrinka xaqqa ah oo ah Waxyiga oo Xaq loogu magacaabay isagoo ka yimid xagga Ilaahay. Ama waa Rasuulka Xaqqa, oo markaas Xaqqu waa Jibriil) isagoo hogga Xiraa'a ku jira. Markaasaa waxaa u yimid Malagga (Jibriil). Markaasuu wuxuu yiri: "Akhri." Markaasaan waxaan iri: "Anigu ma aqaanno sida wax loo akhriyo". Markaasuu i qabtay oo intuu si xoog leh isku kay duubay i camajuujiyay ilaa heer aan ka mashaqqooday oo aan dhibtooday. Kaddibna wuu i sii daayey. Markaasuu hadana wuxuu yiri: "Akhri." Markaasaan waxaan iri: "Anigu ma aqaanno sida wax loo akhriyo". Markaasuu markii labaad i qabtay oo intuu si xoog leh isku kay duubay i camajuujiyay ilaa heer aan ka mashaqqooday oo aan dhibtooday. Kaddibna wuu i sii daayey. Markaasuu hadana wuxuu yiri: ""Akhri." Markaasaan waxaan iri: "Anigu ma aqaanno sida wax loo akhriyo". Markaasuu markii saddexaad i qabtay oo intuu si xoog leh isku kay duubay i camajuujiyay ilaa heer aan ka mashaqqooday oo aan dhibtooday. Kaddibna wuu isii daayey. Markaasuu hadana wuxuu yiri: **"Iqra' bi Ismi Rahbika Allathii khalaqa**(1)**Khalaqa al insaana min calaqin**(2)**Iqra' wa Rabbuka Al Akramu**(3)**Allathii callama bi al qalami**(4)**Callama al insaana maa lam yaclam**(5)" Aayadaha, oo ah Aayadaha koowaad ilaa shanaad ee Suuratu Al Calaqi macnohoodu waxaa weeye: "Wax ku akhri (nabiyow) Magaca Rabbigaa ee khalqiga abuuray(1)Dadkana ka abuurau xinjir(2)Akhri Rabbigaana waa Kan sharafta leh(3)Midka dadka baray sida qalinka wax loogu dhigo(4)Dadkana baray waxayan aqoonin(5)". Al Xaafith ibnu Xajar wuxuu yiri: "Waxaa dhici karta inay xikmada ku jirta in iqra' lagu celceliyay ay tahay inuu iimaanka Waxyiga sababtiisa ka dhalanaya uu koobayo saddex kala ah (Kow) Hadalka, (Labo) Camalka iyo (Saddex) Niyada, ayadoo uu Waxyiguna (waana Quraankee) saddex ka kooban yahay: (Kow) Tawxiidka midnimada Ilaahay, (Labo) Axkaamta iyo (Saddex) Qisaska. Qaalli Shurayx wuxuu saddexdaas goor oo uu Jibriil Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isku duubay oo uu camajuujiyay ilaa heer uu ka dhibtoodo kala soo dhex baxay inaan ardayga Quraanka la barayo lagu dilin saddex goor mooyee, siduu Jibriil isugu duubay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sadeexdaas goor.

Isku duubidda iyo camajuujinta

Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Xikmada ku jirta inuu Jibriil Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isku duubay oo uu camajuujiyay waa saddex: (Kow) inuusan, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arrin kale u jeesan oo uusan waxa loo sheegayo ka

mashquulin, (Labo) Muujin waynaanta iyo xoogga arrinkaan iyo (Saddex) Ku baraarujin culayska hadalka lagu tuuryo."

Salaamid iyo cawthibillaysi

1bnu Jariir Al Dhabarii wuxuu wariyay inuu Jibriil marka ugu horreysa oo uu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Quraan kusoo dejiyay uu ku amray inuu cawthibilleysto, siduu uga wariyay ibnu Cabbaas, ooyiri: "Marka ugu horreysa oo uu Jibriil kusoo degay Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: "Muxammadow, cawthibilleyso! Markaasuu wuxuu yiri: **"Acuuthu bi Al Ssamiici Al Caliimi mina al sh-shaydhaani al rrajiimi"**, oo macneheedu yahay: "Waxaan magan galay Midka wax walba maqla, wax walbana u cilmi leh, kana magan galay shaydhaanka la rajmiyo oo la fogeeyey." Jibriil wuxuu yiri: "Waxaad tiraahdaa Bi Ismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi". Markaas kaddib ayuu wuxuu yiri: **"Iq ra' bi Ismi Rabbika Allathii khalaqa".** Cabdu Allaahi wuxuu yiri: "Waana Suuradda ugu horreysey oo uu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, korkiisa kusoo dejiyay." 1bnu Kathiirna wuxuu yiri: "kani waa Xadiith ghariib ah."

Ku noqosho Xadiithka Waxyiga

Caa'isha waxay tiri: "Markaasuu la soo noqday (waana Quraanka lagu soo dejiyay iyo wixii dhacayba), ayadoo uu daqayga labadiisa garab u dhexeeya dubaaxinayo (ujeedadeeduna ay tahay isagoo, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wada jaraynaya oo gariiraya), oo uu Khadiijah (guriga) usoo galay, uuna uga warramay wixii dhacay, kaddibna wuxuu yiri: "i duuduuba (oo maro ama buste igu duuduuba)". Markaasaa la duuduubay ilaa ay cabsidu ka tagtay. Markaasuu wuxuu yiri: **""Yaa Khadiijatu Maa lii?"** oo macneheedu yahay: "Khadiijoy, waa maxay waxa ii sugnaaday, si ay iigu sugnaato waxa ii sugnaaday?" Markaasuu khabarka wixii dhacay u sheegay. Kaddibna wuxuu yiri: **"Qad khashaytu calaa nafsii"**, oomacneheedu yahay: "Nafteydaan u baqay." Khadiijah waxay tiri: "Sidaas ha oran, ama ha cabsan ee abshir oo bishaareyso, oo wa Allaahi inuusan Ilaahay ebedkiis ku fadeexeeyneyn, maxaa yeelay adigu **riximka,** oo ah qaraabada, ayaad xiriirisaa (xagga maalka, xagga u qumidda u adeeggooda, booqashadooda, salaamiddooda, iwm.), **runtaadna ku hadashaa** (oo weligiis been ma sheegin, lagumana tuhmin Nabinnimada horteed, siduu Abuu Sufyaan, oo markaas gaal cadawgiisa ah uu Boqorka Roomaanka Hirqal hortiis ugu qiray. Runlownimaduna waa sifooyinka ugu sharaf badan oo uu qofku yeesho), waxaadna **culayska ka qaaddaa** oo aad ka xambaartaa **kuwa taagta daran** (sida ciyaalka agoonta ah iyo kuwa sidoodaba u taagta daran. Muslim wuxuu ku daray inay tiri: "waxaad **dadkana siisaa** waxayan ghayrkaa ka heleyn), **martidana** cuntadaad inta samaysid siisaa iyo meeluu ku hoydaba, dadkana waxaad **ka taakulaysaa dhacdooyinka** ku yimaada." Khadiijah hadalkeedaasu wuxuu caddeynayaa ballaarnaanta caqligeeda iyo fiqigeeda, ayadoo koobtay dhammaan anwaacda makaarimta akhlaaqda, ayadoo uu biyo shubadka hadalkeedu yahay: haddaad intaasoo wanaaga leedahay, waxaad kahato kugu dhici mayaan, taasoo daliil u ah inay wanaagga akhlaaqdu celiso waxa la kahdo, ayna sabab u tahay nabadgelidda.

Khadiijah iyo Caddaas

Markaasey Khadiijah, siduu Al Zarqaanii uga soo guuriyay Sulaymaan Al Taymiyyi iyo Muusaa bin Cuqbah, soo baxday oo ay u timid nin addoon ah oo uu lahaa Cutbah bin Rabiicah. Addoonkaasu wuxuu ahaa krishtaan, wuxuuna ka mid ahaa dadka degah

degmada Niinawaa (waana magaalada Nabi Yuunus Calayhissalaamu ee ku taalla waqooyiga Ciraaq), magaciisuna ahaa Caddaas. Markaasey waxay ku tiri: "Ilaahay ayaan ku xusuusinayaaye ee waa illaa inaad ii sheegtid inaad u cilmi leedihiin Jibriil." Markaasuu Caddaas wuxuu yiri: "Qudduusun, Qudduusun! Sayyidda haweenka Qurayshey! Muxuu yahay arrinka lagu xusayo arligaan uu dadkeedu yahay dad asnaamta caabuda?" Markaasey waxay tiri: "ii sheeg waxaad ka ogtahay." Wuxuu yiri: "Jibriil waa Amiinka dhex socda Ilaahay iyo Anbiyada, waana saaxiibka u imaan jiray Muuse iyo Ciise." Markaasey Caddaas kasoo gaddoontay oo ay gurigeeda kusoo laabatay. Markaasey Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la baxday oo ay ula tagtay Waraqah bin Nawfal.

Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam iyo Waraqah bin Nawfal

Waraqah bin Nawfal bin Asad bin Cabdu Al Cuzzaa bin Qusayy, sidaan usoo aragnay wuxuu ahaa ina adeerka laxmiga ah ee Khadiijah bintu Khuwaylid bin Asad bin Cabdu Cabdu Al Cuzzaa bin Qusayy, wuxuuna ahaa nin caabudidda snaamta ka tegey oo krishtaan noqday Islaamka hortiis. Wuxuuna ahaa nin dhigidda farta Carabiga yaqaanna. Markaasuu wuxuu farta Carabiga ku dhigi jiray Kitaabka Injiilka, ugana dhigi jiray intuu Ilaahay doono inuu dhigo. Injiilku wuxuu ku dhignaa afka Saryaaniga, Tawraaduna afka Cibriga. Marka Waraqah, siduu Al Nawawii u yiri iyo ibnu Xajarba wuxuu kutubbadaas ku dhigi jiray afafka Carabiga iyo Cibrigaba. Al Xaafith ibnu Xajar wuxuu yiri: "Waxaan (Waraqah) ugu sifeeyey inuu InjiiIka dhigi jiray, oo aan u oran waayey wuu xifthin jiray, ayadoo xifthinta Tawraadda iyo Injiilkuba ayan ahayn kuwo la sahlay, sida loo sahlay xifthinta Quraanka, oo ummaddaan lagu gooni yeelay, taasoo u sabab ah in sifadeeda (waa ummaddaane) ay ka mid tahay: Anaajiluhaa fii suduurihaa (oo ah kutubbadooda laabohooda ayay ku sitaan, oo waa Quraanka ayay qalbigooda ku sitaan ayagoo korka ka haya oo xifthiyay)." Waa intaas warka ibnu Xajar. Waraqah wuxuu ahaa oday da'yn oo indho beelay. Markaasey Khadiijah waxay ku tiri: "Ina adeerow, bal dhegeyso wiilka walaalkaa dhalay" (oo aabaha saddexaad ee Waraqah waa Cabdu Al Cuzzaa, waana walaalka la dhashay aabaha afaraad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Cabdu Manaaf bin Qusayy). Markaasuu Waraqah wuxuu yiri: "Wiilka walaalkeeyow, maxaad aragtay?" Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uga warramay wuxuu arkay oo uu la kulmay. Markaasuu Waraqah wuxuu yiri: "Midkaani (waana Malag Jibriil) waa Al Naamuusu (oo macneheedu yahay: Midka u saaxiibka ah sirta oo ah Waxyiga), waana midka Muuse kusso degay (wuxuuna Ciise u oran waayey isagoo krishtaan ahaa rumayn uu Risaalada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalalam, rumaynayo, ayadoo kusoo degidda Jibriil ee Muuse ay krishtaanka iyo yuhuuduba isku waafaqsan yihiin, yuhuudda intooda badanse ay Nabinnimada Ciise inkirayaan). Maxaan u ahaan waayey nin dhallinyaro ah mudada Nabinnimada (waana Nabinnimada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam). Maxaan u noolaan waayey markay dadkaagu dalkaaga ka saarayaan." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Awa mukhrijiyya hum?"**, oo macneheedu yahay: "oo miyay waddanka iga saarayaan?" (oo waxaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la waynaatay inay dadkiisu wadankiisa, oo ah Xaramka Ilaahay ee Makkah Al Mukarramah iyo beledka aabihiis Ismaaciil ka saarayaan sabab la'aan. Al Suhaylii wuxuu yiri: "Ka tegidda waddanka nafta way ku adagtahay, taasoo ku muuqaneysa naxdinta iyo cabsida taas laga cabsado, oo kama uusan nixin, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Waraqah u sheegay inay dhibi doonaoo, ayna beenin doonaan, sida Xadiithka mursalka ah ee Cubayd bin Cumayraan wariyay inuu Waraqah ku yid: "Waa lagu beeninayaa, waana lagu dhibaateynayaa, waana lagula dagaallamayaa").

Markaasuu Waraqah wuxuu ku yiri: "Haa, oo waa lagu saarayaa. Horena ninna lama uusan imaan waxaad la timid oo kale ee waa illaa midka la colaadiyey. Haddaan gaarana maalintay Diintaadu faafeyso waxaan kuu hiillinayaa oo kuugu gargaarayaa hiillo iyo gargaar wayn oo xoog leh." Waraqah kulankaas kaddib wax badanba ma noolayn ee wuu dhintay. Taariikhda Waraqahna hore ayay noo soo martay.

Dhanbalidda laabtiisa shariifka ah, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa laabtiisa la dillaaciyey oo lasii daahiriyay afar jeer, oo kala ah: (Kow) intuu caruurta ahaa oo uu ku sugnaa aqalka Xaliima Al Sacdiyah. (Labo) Markuu toban jirsaday, ama meelahaas. (Saddex) Markuu afartan jirsaday oo Waxyiga loo keenayey. (Afar) Habeenka la dheelmiyay. Marka saddexaad ee laabtiisa shariitka ah la dillaaciyay, qalbigiisana, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lasoo bixiyay, waa markuu afartan jirasaday, oo uu Jibriil, Calayhissalaamu, ugu yimid Ghaaru Xiraa', uuna Waxyiga u keenay. Jibriil iyo Mikaa'iil ayaa laabtiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhanbalay, kaddibna uu Jibriil ku yiri: "Iqra'", ilaa shanta Aayadood oo ugu horreeya Suuratu Al Calaq. Xadiithka oo ay ka wariyeen Caa'ishah Abuu Nucaym, Al Bayhaqii, waxaan isagoo tifaftiran kusoo warinnay kitaabkeenna Agoonka, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ahaa kitaabka sagaalaad ee taxanahaan, boggiisa si deed iyo soddonaad.

Joogsiga Waxyiga

Caa'ishah waxay tiri: "Markaasuu Waxyigu ka joogsaday Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo uusan Jibriil, kaddib markuu Nabinnimada xagga Ilaahay uga keenay, uusan dib ugu soo noqon in muddo ah. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aad uga tiiraanyooday imaansho la'aanta Jibriil, sida nasoo gaartay, ilaa heer u damcay inuu inta tafo buuraha ugu dheer fiiddooda iska soo tuuro oo uu kasoo dhaco (markaas ma uusan j irin sharci xagga Ilaahay ka yimid oo taas diidaya). Markaasuu mar kasta oo uu fiidda buur istaago si uu isaga soo tuuro, isagoo ka baqaya inuu Waxyigu uga joogsaday sabab isaga ka timid, oo ka baqay inay joogsigaasi markaas ciqaab xagga Rabbigiis uga timid tahay, ayuu Jibriil hortiisa isku muujiyaa oo uu Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arkaa. Markaasuu wuxuu ku yiraahdaa: "Muxammadow, run ahaan adigu waxaad tahay Rasuulka Ilaahay." Markaasuu taas qalbigiisu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku xasilaa, oo garaaciddii badnayd ka degaa, ay naftiisuna degtaa, oo uu markaas gurigiisa dib ugu laabtaa. Hadday mudada Waxyigu ka maqan yahay dheeraato, sidaas oo kale ayuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, buuraha u aadaa. Markaasuu markuu buurta fiiddeeda istaago ayuu Jibriil is tusaa, oo uu sidii oo kale ku yiraahdaa." (Al Bukhaarii) Ibnu Cabbaas wuxuu yiri: "Falaqu al subxi waa iftiinka qorraxda maalinta dhexdeeda ah iyo iftiinka dayaxa ee habeenka dhexdiisa ah."

Salaamidda dhagaxda iyo geedaha

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Ilaahay doonay inuu karaameweyo, Nabinnimadana uu u bilaabo, waxay ahayd in markuu xaajadiisa u baxo (oo uu musqul aadayo) wuu fogaan jiray, ilaa uu guryaha (Makkah) ka libro, uuna buuraha Makkah dhexdooda galo, iyo uurka dooxooyinkeeda. Markaasuusan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, mari jirin dhagax ama geed ee waa kan illaa ku yiraahda "Al Ssalaamu calayka yaa Rasuula Allaahi!" Wuxuu yiri: "Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,

hareerihiisa fiiriyaa iyo midigtiisa iyo bidixdiisa iyo gadaashiisa. Markaasuusan arag waxaan geed iyo dhagax ahayn. Xaaladdaas ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku sugnaa, isagoo arkaya oo maqlaya intuu Ilaahay doono inuu sidaas ahaado. Kaddibna waxaa u yimid Jibriil, una keenay wuxuu uga keenay Karaamada Ilaahay, isagoo Xiraa'a ku jira bisha Ramadaan dhexdeeda." Waxaa kaloo Xadiithka wariyay Al Dhabarii oo ku wariyay kitaabkiisa taariikhda, mujalladka koowaad bogga shan boqol iyo sagaal iyo labaatan, kana wariyay Barrah bintu abii Najraal.

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Ibnu Isxaaq wuxuu xusay in waxay Nabinnimadu ku bilaabatay ay ka mid ahayd inuusan mari jirin dhagax iyo geed toona ee waa kan illaa yiraahda "Al Ssalaamu calayka yaa Rasuula Allaahi!" Kutubbada Al Tarmathii iyo Muslim-ba waxaa ku xusan inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"innii la acrifu xajaran bi Makkata kaana yusallimu calayya qabla an yunazzila calayya".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Anigu waxaan aqaannaa dhagax Makkah dhexdeeda ah oo i salaami jiray ka hor intaan (Waxyiga) la igu soo dejin." Waxaa wariyay Saxiix Muslim, waana Xadiithka laba kun iyo labo boqol iyo toddoba iyo toddobaatan ee ah Xadiithka labaad ee Kitaabu Al Fadaa'ili, iyo Axmad: mujalladka shanaad, bogga sagaal iyo sideetanaad, iyo Al Dhabraanii: mujalladka koowaad, bogga laba iyo tobnaad. Kutubbada qaarkoodna waxaa intaas ku ziyaado ah inuu dhagaxaas salaami jiray, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu yahay Al Xajaru Al Aswadu, Dhagaxa Madow ee Kacbada ku jira." Intaasuu ku egyahay warka Al Suhaylii. Saalim Muxammad Jamaal, oo ahaan jiray Madaxa mudhawwafiinta Dawlada Carabta ee Makkah wuxuu kitaabkiisa Daliilu Al Xaajji wa Al Macmuuri boggiisa boqol iyo saddex iyo tobnaad ku xusay inay daarta Ummu Al Mu'miniina Khadiijah , ayna caruurtay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u dhashay ay dhexdiisa ku dhasheen, hadana inta la dumiyey dhulkiisu uu Masjidu Al Xaraamu ka mid yahay, la oran jiray dariiqy uu ku oolli jiray Ziqaaqu Al Xajari, ahan wadada dhagaxa, looguna bixiyey inuu halkaas oolli jiray dhagax ka mid ahaa dhagaxda Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, salaami jirtay.

Ictikaafkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Xiraa'a

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxaa ii warramay Wahb bin Kaysaan, mawlaha qoyska Al Zubayr, wuxuuna yiri: "Waxaan maqlay Cabdu Allaahi ibnu Al Zubayr oo u warramaya Cubayd bin Cumayr bin Qataadah Al Laythii oo leh: "Cubaydow noo warran. Sideebey ahayd waxay ku bilaabatay Nabinnimada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu u yimid Jibriil, Calayhissalaamu?" Wuxuu yiri: "Markaasuu Cubayd wuxuu yiri, aniguna aan go ob joog ahay, isaguna uu Cabdu Allaahi bin Al Zubayr u warramayo iyo dadka la jooga: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ahaa kan sanad walba bil ku ictikaafi jiray oo ku nagaadi jiray Xiraa' a, taasoo ka mid ahayd Al Taxannuth-ka Quraysh (oo ah ka fogaanshaha dambiga)". Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Carabtu waxay tiraahdaa Al Taxannuthu iyo Al Taxannufu, ujeedadooduna waxaa weeye Al Xaniifiyyah, markaasey tha'da (saddexda dhibcood kor ku leh) fa' (dhibic kor ku leh) ku beddelaan". Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waxaa ii warramay Abuu Cubaydah oo ii sheegay inay Carabtu tiraahdo fumma meeshey ka oran lahayd thumma, ayagoo tha'da fa ku beddela". Al Suhaylii wuxuu yiri: "Al Taxannuthu wuxuu ka yimid al xinthu oo ah waxa la qaado oo culus. Marka al taxannuthu waa al tabarruru, macneheeduna uu yahay ka bixidda iyo iska rididda dambiga." Al Suhaylii wuxuu yiri: "Hadalkiisa ah (waana hadalka Cubayd ee Xadiithka ibnu Isxaaq ee kore) yujaawiru fii Xiraa'a ... al jiwaaru waxay la macne tahay al mujaawaratu, waana ictikaafka (oo ah ku nagaadidda),

oo farqi uma dhexeeyo al jawaari iyo al ictikaafu hal waji oo keli ah mooyee, ahna inuusan ictikaafku ku ahaaneyn masjid gudihiisa mooyee, jawaarkuna uu masjidka dibaddiisa ku ahaanayo. Sidaas waxaa yiri ibnu Cabdu Al Barru, oo taas daraadeed ayuusan jiwaarkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Xiraa' ictikaaf ugu magacaabin, ayadoo uusan Xiraa' masjid ahayn, uuse buuraha Xaramka ka mid yahay." Waa intaas warka Al Suhaylii. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Wahb bin Kaysaan ayaa ii warramay, wuxuuna yiri: "Cubayd (bin Cumayr) wuxuu yiri: "Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ahaa midka bil sanad walba (Ghaaru Xiraa') ku ictikaafa. Markaasuu inta masaakiinta uga timaadda cunno siiyaa. Markaasuu markuu ictikaafka bishaas dhammaysto, soo gaddoomaa. Markuu ictikaafkaas kasoo gaddoomo, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxa ugu horeeya oo uu ka bilaabi jiray waxay ahayd inuu tegi jiray Kacbada, ka hor intuusan gurigiisa gelin. Markaasuu toddoba goor ku dhawaafi jiray, ama intuu Ilaahay ka doono inuu ku dhawaafo. Markaas kaddib ayuu , Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam , gurigiisa u laabtaa. Markaasey markay ahayd bishuu Ilaahay Tacaalaa doonay inuu dhexdeeda ku karaameeyo, oo ka mid ahayd sanadkuu Ilaahay Tacaalaa soo diray dhexdeeda, bishaasna waxay ahayd bisha Ramadaan, ayuu Xiraa' aaday oo uu ku ictikaafay.

Kasoo degidda buurta

Markuu Jibriil Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo hogga Xiraa' ee Jabalu Al Nuur ku jira Quraanka iyo Nabinnimada iyo Rasuulnimada u keenay, kulankaas kaddib, Nabigu, Sallaa Allaahu CaIayhi Wasallam, wuu kasoo baxay godkaas, wuxuuna kasoo degay buurta. Intuu buurta kasoo deganayey, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayuu Jibriil mar kale arkay. Ibnu Isxaaq wuxuu wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Fa kharajtu xattaa ithaa kuntu fii wasdhin mina al jabali samictu sawtan mina al Ssamaa'i yaquulu: "Yaa Muxammadu! Anta Rasuulu Allaahi, wa anaa Jibriilu".** Qaala: **"Fa rafactu ra'sii ilaa Al Ssamaa'i anthuru. Fa ithaa Jibriilu fii suurati rajulin saaffin qadamayhi fii ufuqi Al Ssamaa'i yaquulu: "Yaa Muxammadu! Anta Rasuulu Allaahi, wa anaa Jibriilu".** Qaala: **"Fa waqaftu anthuru ilayhi, famaa ataqaddamu wa maa ata'akh-kharu, wa jacaltu asrifu wajhii canhu fii aafaaqi Al Ssamaa'i. Falaa anthuru fii naaxiyatin minhaa illaa ra'aytuhu kathaalika. Fa ziltu waaqifan maa ataqaddamu amaamii wamaa arjicu waraa'ii, xattaa bacathat Khadiijatu rusulahaa fii dhalabii. Fa balaghuu aclaa Makkah, wa rajacuu ilayhaa, wa anaa waaqifun fii makaanii thaalika. Thumma insarafa cannii, wa insaraftu raajican ilaa ahlii, xattaa ataytu Khadiijata. Fa jalastu ilaa fakhthihaa mudiifan ilayhaa. Fa qaalat: "Yaa abaa Al Qaasim! Ayna kunta? Fa waAllaahi laqad bacathtu rusulii fii dhalabika, xattaa balaghuu Makkah wa rajacuu lii". Thumma xaddathtuhaa billathii ra'aytu. Fa qaalat: "Abshir yaa ibna cammi wa athbut! Fa wa Allathii nafsu Khadiijata bi yadihi, innii la arjuu an takuuna Nabiyya haathihi al ummati".** Thumma qaamat fa jamacat calayhaa thiyaabahaa, thumma indhalaqat ilaa Warqah bin Nawfal bin Asad bin Cabdu Al Cuzzaa bin Qusayy, wa huwa ibnu cammihaa, wa kaana Waraqah qad tanassara, wa qara'a Al Kutuba, wa samica min ahli Al Tawraati wa Al Injiili." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Markaasaan soo baxay oo aan hoos usoo daadegey. Markaan marayo buurta bartameheeda, ayaan cod Samada ka yeeraya maqlay, oo leh: "Muxammadow! Adigu waxaad tahay Rasuulka Ilaahay, aniguna waxaan ahay Jibriil." Wuxuu yiri: "Markaasaan madaxeyga Samada kor ugu qaaday anigoo dhuganaya, mase waaba Jibriil oo suuradda nin leh, oo ay labadiisa cagood ku safan yihiin Samada dhexdeeda oo leh: "Muxammadow! Adigu waxaad tahay Rasuulka Ilaahay, aniguna waxaan ahay Jibriil." Wuxuu yiri: "Markaasaan istaagay,

anigoo fiirinaya, anigoo aan horayna u soconayn, dibna u dhaqaaqayn. Markaasaanan dhinacna u jeesan oo aafaaqda ka mid ah ee waa illaa anigoo arka isagoo sidaas ah. Markaasaan sidaydaas u taagnaa, anigoo aan xagga hortaydana u soconayn, xagga gadaashaydana u noqonayn. Sidaas ayaan ahaa, ilaa ay Khadiijah rususheeda (oo ah dad isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam raadinaya) usoo dirto baadi goobkayga. Markaasey Makkah dusheeda gaareen, kaddibna (markay soo waayeen Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) ayada dib ugu laabteen. Intaasoo idilna anigu meesheydii ayada ahayd ayaan taaganahay. Kaddib (Jibriil) wuu iga gaddoomay. Markaasaan aniguna soo gaddoomay, anigoo ehelkeyga (xaaskeyga) usoo laabtay. Markaasaan Khadiijah u imid, oo aan bawdadeeda agteeda fariistay kuna dhowaaday. Markaasey waxay tiri: "Al Qaasimu aabihiisow! Xaggee baad jirtay? Oo wa Allaahi rususheyda aan raadintaada u diray, oo Makkah ayay kaa raadiyeen, kaddibna ay ii soo noqdeen . ayagoo kusoo waayey!" Kaddib waxaan uga warramay waxaan arkay." Markaasey waxay tiri: "Bishaaro ina adeerkeeyow! Oo sugnow! waxaan ku dhaartay Midkay Khadiijah nafteedu ay Gacantiisa ku jirto, waxaan anigu rajeynayaa inaad adigu Nabiga ummaddaan tahay." Markaasey intay istaagtay oo ay dharkeeda si adag u xiratay, ayay waxay aaday Waraqah bin Nawfal bin Asad bin Cabdu Al Cuzzaa, oo ina adeerkeed ah. Waraqah wuxuu hore u galay diinta krishtaanka, kutubbadana wuu akhristay, wuxuuna cilmiga ka qaatay ehelu Tawraadda iyo ehelu Injiilka. Markaasey u sheegtay wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu CaIayhi Wasallam, ayada u sheegay inuu arkay oo uu maqlay. Markaasuu Waraqah bin Nawfal wuxuu yiri: "Qudduusun, Qudduusun, waxaan ku dhaartay Midkay Waraqah Gacantiisa ku jirto, ee haddaay Khadiijey waxaad ii sheegtay ay run yihiin, waxaa u yimid Al Naamuusu Al Akbaru, midka u imaan jiray Muuse, isaguna waa Nabiga ummaddaan. Marka, waxaad ku tiraahdaa: "Sugnow". Markaasey Khadiijah Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, usoo noqotay, una sheegtay warkuu Waraqah bin Nawfal yiri. (Kaddib RasuuIka Ilaahay, Sallaa Allaahu CaIayhi Wasallam, wuxuu ku noqday hogga Xiraa', si uu usoo kaamisho bishuu halkaas ku ictikaafi jiray). Markaasuu markuu RasuuIka Ilaahay, Sallaa Allaahu CaIayhi Wasallam, ictikafkiisii (bisha ku sinnaa) dhammaystay, uuna soo gaddoomay, ayuu wuxuu yeelay siduu yeeli jiray oo kale, oo uu Kacbada ka bilaabay, oo uu ku dhawaafay. Markaasuu isagoo, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhawaafaya ayuu wuxuu la kulmay Waraqah bin Nawfal, oo isaguna Kacbada ku dhawaafaya. Markaasuu Waraqah wuxuu ku yiri: "Wiilka walaalkeeyow, ii sheeg waxaad aragtay iyo waxaad maqashay." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay. Markaasuu Waraqah wuxuu ku yiri: "Waxaan ku dhaartay Midkay Waraqah naftiisu Gacantiisa ku jirto, adigu waxaad tahay Nabiga ummaddaan, waxaana kuu yimid Al Naamuuso Al Akbaru, isla kii Muuse u yimid. Waana lagu beenin doonaa, waana lagu dhibaateyn doonaa, dalkaagana (Makkah) waa lagaa saari doonaa, waana lagula dagaallami doonaa. Haddaan aniguna maalintaas gaarana, waxaan Ilaahay u gargaarayaa gargaar uu ogyahay." Intaas kaddibna intuu madaxiisa u dhoweeyey ayuu wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka dhunkaday wajiga. Kaddib Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gurigiisa ayuu u gaddoomay." Waxaa kaloo Xadiithka wariyey Al Bukhaarii, waana midka lixkuniyo sagaal boqol iyo labo iyo sideetan, iyo Muslim oo ah midka laba boqol iyo labo iyo konton ee Kitaabka iimaanka.

Khaddijah iyo Jibriil

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxaa la ii wariyay inay Khadiijah, Allaha raalli ka noqdee, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku tiri: "Ina adeerow, ma kartaa inaad ii sheegtid saaxiibkaagaan kuu yimaada markuu kuu yimaado?" Wuxuu, Sallaa

Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Nacam"**, oo "haa" ah. Waxay tiri: "Marka, goortuu kuu yimaado ii sheeg." Markaasuu Jibriil, Calayhissalaamu, u yimid, siduu yeeli jiray si la mid ah. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Khadiijah ku yiri: **"Yaa Khadiijah, haathaa Jibriilu qad jaa'anii."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Khadiijoy, Jibriil waa kanaa oo ii yimid." Waxay tiri: "Ina adeerow istaag oo bawdadeyda bidix ku kor fariiso." Wuxuu yiri: "Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, istaagay oo uu bawdadeeda bidix ku kor fariistay. Waxay tiri: "Ma aragtaa (waa Jibriile)?" Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Nacam", OO** "Haa" ah. Waxay tiri: "Soo wareeg oo bawdadeyda midig ku kor fariiso." Waxay tiri: "Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo wareegay oo uu bawdadeeda midig ku kor fariistay. Markaasey waxay tiri: "Ma aragtaa (waa Jibriile)?" Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Nacam", OO** "Haa" ah. Waxay tiri: "Kasoo wareego oo dhabtayda kusoo fariiso." Waxay tiri: "Markasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kusoo wareegay oo uu dhabteeda soo dhex fariistay. Markaasey waxay tiri: "Ma aragtaa (waa Jibriile)?" Wuxuu yiri: "Nacam", oo "Haa" ah. Markaasey iska fayday oo ay iska dhigtay khimaarkeeda, oo ah hagoogta madaxa iyo qaarka sare u saarneyd, ayadoo uu Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhabteeda dhex fadhiyo, kaddibna waxay tiri: "Ma aragtaa (waa Jibriile)?" Wuxuuy, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Laa"**, oo "Maya" ah. Waxay tiri: "Ina adeerkeeyow, sugnow, bishaareysana, oo wa Allaahi isagu waa Malag, oo kani shaydhaan ma uusan aha." Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxaan u sheegay Xadiithkaan Cabdu Allaahi bin Xasan, markaasuu wuxuu yiri: "Waxaan maqlay hooyaday Faadhimah bintu Xusayn oo Xadiithkaan Khadiijah ka warineysa, waxaanse maqlay ayadoo leh: "Waxay Rasuulka Ilaahy, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gelisay ayada lafteeda iyo cambuurkeeda dhexdooda. Markaasuu Jibriil markaas ka tegey. Markaasey waxay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku tiri: "Kani waa Malag, mana uusan aha shaydhaan."

Martabooyinka Waxyiga

Waxyi macnihiisu waxaa weeye ogeysiin ama wax u sheegid si sir ah ama ogaysiin dhakhso badan, oo khabarka Samada korkeeda ka yimaada ayaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isla markiiba u imaan jiray. Xagga shareecadana, wuxuu Al Zarqaanii yiri inuu Waxyigu yahay: "Waa ku wargelinta shareecada", wuxuuna sidaas ka wariyey Al Shaamii. Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Ibnu Al Qayyim iyo ghayrkiisba waxay yiraahdeen inuu Ilaahay Tacaalaa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, siiyey martabooyin tiro leh ee Waxyiga, ayna ka mid yihiin: (Kow). Al Ru'yaa Al Saalixah, oo ah riyada runta ah, oo siday Caa'ishah, Allaha raalli ka noqdee, u warisay, ma uusan arki jirin riyo ee waa illaa tan u cad sida dharaarta marka qorraxda iftiinkeedu buuxsamo. Al Suhaylii iyo ghayrkiisba waxay u daliilsadeen inay riyada Anbiyadu Waxyi tahay. Aayadda boqol iyo labaad ee Suuradda Al Saaffaat, uuna Nabi Ibraahiim wiilkiisa Ismaaciil ku leeyahay: **"Qaala yaa bunayya innii araa fii al manaami anni athbaxuka**(102)**".** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Wiilkeygow, waxaan ku arkay hurdada anigoo ku gawracaya(102)." Aayaddanina waxay daliil u tahay inuu Waxyigu Anbiyada ugu imaan jiray ayagoo hurda si la mid ah siduu ugu imaan jiray ayagoo soo jeeda. Al Bukhaariina wuxuu Cubayda bin Cumayrin ka wariyay inuu yiri: "Riyada Anbiyadu waa Waxyi, kaddibna wuxuu akhriyay **"innii araa fii al manaami anni athbaxuka",** ahna "waxaan ku arkay hurdada anigoo ku gawracaya", oo ah Aayadda Al Saaffaat oo mar dhow nasoo martay.

Al Baghawii wuxuu tafsiirkiisa uga wariyay Cabdu Al Raxmaan bin Caa'ish al

Xadramii inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Ra'aytu Rabbii fii axsani suuratin, fa qaala: "Fiima yakhtasimu al mala'u al aclaa yaa Muxammadu?" Qultu: "Anta aclamu ay Rabbi" marratayni." Qaala: Fa wadaca kaffahu bayna katafayya, fa wajadtu bardahaa bayna thadyayya, fa calimtu maa fii Al Ssamaa'i wa al arda."** Qaala: thumma talaa haathihi al Aayah: **"Wa kathaalika nuriya Ibraahiima malakuuta al Ssamaawaati wa al ardi wa li yakuuna mina al muuqiniina." "Thumma qaala: "Fiima yakhtasimu al mala'u al aclaa yaa Muxammad?" Qultu: "Fii al kaffaaraati". Qaala: "Wa maa hunna?" Qultu: "Al Mashyuu calaa al aqdaami ilaa al jamaacaati, wa al juluusu fii al masaajidi khalfa al ssalaawaati, wa iblaaghu al wuduu'i amaakinahu fii al makaarihi." Qaala: "Wa man yafcal thaalika yacish bi khayrin wa yamut bi khayrin wa yakun min khadhii'atihi ka yawmi waladathu ummuhu. Wa mina al ddarajaati idhcaamu al dh-dhacaami wa bathlu al ssalaami wa an yaquuma bi al layli wa al nnaasu niyaamu." Qaala: "Quli Allaahumma inni as'aluka al dhayyibaati wa tarka al munkaraati wa xubba al masaakiina, wa an taghfira lii wa tarxamnii wa tatuuba calayya. Wa ithaa aradta fitnatan fii qawmin fa tawaffanii ghayra maftuunin".** Fa qaala Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam: **"Tacallamuuhunna fa wa Allathii nafsii bi yadihi innahunna laxaquun."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaan arkay anigoo hurda Rabbigay oo leh suuradda ugu qurxoon, markaasuu wuxuu yiri: "Ma ogtahay waxay ku doodayaan Malaa'igta Samada kore, Muxammadow?" Waxaan iri: "Adiga u cilmi leh Rabbiyow". Sidaas ayaan laba goor iri. Markaasuu gacantiisa iga saaray labada garab dhexdooda, oo aan markaas qabawgeeda ka dareemay labadeyda naas dhexdooda. Markaasaan waxaan cilmigeeda yeeshay waxa ku sugan Samaawaadka dhexdooda iyo arliga dhexdiisaba." Al Xadramii wuxuu yiri: "Kaddibna wuxuu akhriyay Aayaddaan (oo ah Aayadda shan iyo toddobaatanaad ee Suuratu Al Ancaam): **"Wa kathaalika nuriya Ibraahiima malakuuta Al Samaawaati wa al ardi wa liyakuuna mina al muuqiniina**(75)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Saasaan u tusinnay Ibraahiim xukunka Samooyinka iyo dhulka inuu ka mid noqdo kuwa yaqiiniya (xaqqa)(75)." Markaas kaddib ayuu wuxuu Rabbi yiri: "Ma ogtahay waxay ku doodayaan Malaa'igta Samada kore, Muxammadow?" Waxaan iri: "Kafaaragudka dambiyada tirtira." Wuxuu Rabii yiri: "Waana kuwee kuwaasi?" Waxaan iri: "Waa ayadoo loo lugeeyo si jamaacaadka looga qayb galo, iyo ku nagaadidda masjidyada dhexdooda kaddib marka salaadaha la tukado, iyo waysada oo la gaarsiiyo meeleheeda mararka la kahanayo." Wuxuu: "Qofka sidaas falana wuxuu ku noolaadaa khayr, wuxuuna ku dhintaa khayr, dambiyadiisana wuxuu' uga baxaa oo uu ka ahaadaa si la mid ah maalintay hooyadiis dhashay oo kale. Darajooyinkana waxaa ka mid ah (oo lagu helaa oo kor loogu kacaa) cunnada la bixiyo oo la quudiyo dadka, iyo salaanta oo la fidiyo, oo dadka la salaamo oo Al Ssalaamu Calaykum la yiraahdo in badan iyo dad badan, iyo inuu habeenka dhexdiisa hurdada ka kaco oo uu salaad tukado ayadoo uu dadku hurdo." Wuxuu Rabbi yiri: "Waxaad tiraahdaa (waana, siday riwaayado kale oo isla Xadiithkaani noo caddeeyeen ciribta Salaad walba oo la tukado): "Ilaahayow! Waxaan ku weydiisanayaa khayraadka samayntooda (inaad i waafajisid, iina sahashid) iyo inaan ka tago oo aan ka haro samaynta waxa xun oo la inkiro, iyo jeclaanta masaakiinta, iyo inaad ii dambi dhaaftid, iina naxariisatid, tawbadeydana aad aqbashid iyo inaad haddaad qawm inaad fitnayso oo aad tijaabisid dooneysidaad aniga idishid oo aad nafta iga qabatid anigoo aan la i fitnayn." Markaasuu wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "Barta, oo waxaan ku dhaartay Midkay nafteydu Gacantiisa ku jirto intaasu waa xaq run ah." Isla Xadiithkaan waxay Cabdu Al Razzaaq, Axmad, Al Tarmathii, Al Dhabraanii ka wariyeen ibnu Cabbaas. Waxay ibnu Maajah iyo Al Tarmathii iyo Al Xaakim ayna saxiix ka dhigeen, ay Cumar ka wariyeen inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Law tawakkaltum**

calaa Allaahi xaqqa tawakkulihi la razaqakum kamaa yarzuqu al dh-dhayra: taghduu khimaasan wa taruuxu bidhaanan". Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Haddaad Ilaahay talo saaran lahaydeen siday xaq u tahay in loo talo saarto, wuxuu idiin rizqiyi lahaa si la mid ah siduu shimbiraha u rizqiyo: waxay aroortii gurigeeda ka baxdaa ayadoo gaajoon, waxayna usoo noqotaa galabtii ayadoo dheregsan." Imaam Axmad wuxuu Xadiithkaan ka yiri inay tahay in rizqiga la raadsado, siday shimbiruhuba u raadsadaan, isla markaasna Ilaahay la talo saarto.

(Labo). Martabada labaad ee Waxyigu waa ayadoo uu Malaggu Nabiga naftiisa iyo Qalbigiisa ku rido, isagoo uusan Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Malagga arkayn, uuse codkiisa maqlayo. Afka Carabigana waa: yulqii al Malaku fii ruucihi wa qablbihi. Martabadaan Waxyiga waa midduu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka yiri oo kale: **"Inna Ruuxa Al Qudusi nafatha fii ruucii anna nafsan lan tamuuta xattaa tastakmila ajalahaa wa rizqahaa, fa ittaquu Allaaha wa ajmiluu fii al dh-dhalabi, wa laa yaxmilanna axadukum istibdhaa'a al rizqi an yadhlubahu bi macsiyati Allaahi, fa inna Allaaha Tacaalaa la yunaalu maa cindahu illaa bi dhaacatihi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ruuxu Al Qudusi, oo ah Malaku Jibriil, wuxuu nafteyda dhexdeeda iyo qalbigayga ku riday inayan nafna dhimanayn jeer ay cimrigeeda u qornaa dhammaystirato iyo rizqigeedaba. Marka, Ilaahay ka dhawrsada oo si xalaal ah rizqiga ku I'aadsada, oo si qurxoon oo uu Ilaahay raalli ka yahay ku doonta, oo xaraanta ka fogaada. Soo gaabinta uu rizqigu idinka soo gaabiyana yeeyan midkiinna ku xambaarin inuu ku raadiyo si caasinta Ilaahay ku dheehan tahay, maxaa yeelay waxa Ilaahay agtiisa ah laguma helo waxaan adeeciddiisa ahayn." Xadiithka waxaa kaloo wariyay ibnu abii Al Dunyaa, Al Xaakimna saxiix ayuu ka dhigay. Waxaa kaloo wariyay Al Bayhaqii oo ku wariyay kitaabkiisa Sharxu Al Sunnah.

(Saddex). Nooca saddexaad ee Waxyigu wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu imaan jiray isagoo uu Jibriil nin isku soo ekeysiiyey. Markaasuu si toos ah oo fool ka fool ula hadli jiray, uu isaguna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam waxaas uu u waxyooday weeleyn jiray. Jibriil wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu imaan jiray isagoo leh ekaanshaha Dixyah bin Khaliifah Al Kalbiyyi. Dixyah, oo ah ninkuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laba goor laba warqadood ugu kala dhiibay boqorka Rooma, wuxuu ahaa nin qurux badan, oo uu Al Suhaylii yiri: "Waxaa la wariyay in markuu Dixyah Al Madiinah Al Munawwarah soo galo, waana isagoo safar ganacsi ka yimid, ay haweenka dhallinyarada ahi ay dhammaantood guryohooda kasoo bixi jireen si ay u arkaan qurux badnidiisa daraadeed." Waxaa Xadiithkaan wariyay Al Nasaa'ii, kana wariyay ibnu Cumar.

(Afar). Nooca afraad ee Waxyigu wuxuu ahaa sidatan: wuxuu Waxyigu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu imaan jiray sida "Salsalati Al jarasi", oo ah "sida dhawaaqa jaraska oo ah koorta birta ah oo kale". Jaras waxaa la yiraahdaa koorta xoolaha luqunta loogu xiro oo bir ka samaysan ama macdan kaleba, oo marka la dhaqdhaqaajiyo birto dhexda ku jirta ay midda ku daboolan ku garaaceyso oo ay sidaas dhawaaq isku xigxiga oo taxan sameyneyso. Dawaaqaasna ah "al salsalatu" waxaa weeye, ayaa la yiri, ayuuna al Zarqaanii yiri "Waa codka Malagga oo Waxyiga sida. Waxaa kaloo lagu sheegay inuu yahay sharqanta baalasha Malagga. Ujeedada iyo xikmada codkaasna waxaa weeye inuu maqalkiisu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Waxyiga u firaaqoobo, oo uusan wax kale u jeesan." Waxyiga noocaan ah ayaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu adkaa, ilaa heer uu wajigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhidid ka dureero ayadoo ay maalin qabaw badan tahay, iyo ilaa heer ay daabadda uu saaran yahay ay dhulka fariisato, siduu Al Bayhaqii Caa'ishah uga wariyay inay tiri: "Waxaa loo waxyoon jiray isagoo hashiisa saaran markaasey dhuunteeda dhulka ku dhufataa, waa kaddib markay culayska Waxyiga daradiis la

fariisato." Mar ayuu Waxyigu sidaas oo kale ugu yimid, ayadoo ay bawdadiisu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, saarantahay bawdada Zayd bin Thaabit Al Ansaarii Al Najjaarii, oo ka mid ahaa ragga Waxyiga u dhigi jiray. Markaasey ku culusaatay ilaa heer ay ka jebin gaartayba. Al Bukhaarii wuxuu Zayd ka wariyay inuu yiri: "Ilaahay ayaa Rasuulkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam (Waxyi) kusoo dejiyay, ayadoo ay bawdadiisu bawdadeyda kor saaran tahay. Markaasey culusaatay (waana bawdada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) ilaa heer aan ka baqay inay bawdadeyda jebiso." Al Bukhaarii iyo Muslim iyo Maalik waxay Caa'ishah ka wariyeen inay tiri: "Al Xaarithu bin Hishaam ayaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu weydiiyey: "Sideebuu Waxyigu kuugu yimaadaa?" Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri: **"Axyaanan ya'tiinii mithla salsalati al jarasi wa huwa ashaddu calayya. Fa yafsimu cannii wa qad wacaytu canhu maa qaala. Wa axyaanan yatamath-thalu lii Al Malaku rajulan fa yukallimunii fa acyii maa yaquulu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Mararka qaarkood wuxuu ii yimaadaa si la mid ah codka jaraska, kaasaana iigu adayg badan. Markaasuu iga go'aa, anigoo weeleeyey wuxuu yiri. Marar kalena Malaguu wuxuu isaga soo kay dhigaa nin, markaasuu ila hadlaa. Markaasaan wuxuu yiraahdo weeleeyaa." Caa'ishah waxay tiri: "Waxaan arkay isagoo uu Waxyigu kusoo degayo maalin qabaw badan, markaasuu ka go'aa ayadoo uu wajigiisa dhidid ka dureerayo." Al Dhabraanii wuxuu Zayd bin Thaabit ka wariyay inuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaan waxyiga u dhigi jiray, Waxyiguna wuxuu ku qaban jiray xanuun la mid ah kan qandhada oo kale oo adag, wuxuuna dhidi jiray dhidid badan oo ay xabbadihiisu la mi dyihiin xabbado luul ah oo yaryar. Kaddibna Waxyigaa ka go'a oo ka faydma. Aniguna waxaan dhigi jiray (Waxyiga, oo ah Quraanka) isagoo ii yeerinaya, kamana uusan jeesan (yeerinta) jeer ay lugteydu ku sigatay inay la jabto culayska Waxyiga, ilaa aan ka iraahdo: "Waligay dambe lugteydaan ku socon mayo ebedkey. Markay kusoo degatay Suuratu Al Maa'idah cududda hashiisu waxay ku sigatay inay jabto, culayska Suuradda daraadeed." Waxaa kaloo wariyay Axmad iyo Al Bayhaqii.

(Shan). Nooca shanaad ee Waxyigu waxaa weeye ayadoo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u arko Malagga suuradda uu Ilaahay u abuuray, waana Malag Jibriil, isagoo leh lix boqol oo baal, oo baal walba uu Samada oo idil qarinayo ilaa Samadaba la arki waayo, lix boqol oo baal oo luul iyo yaaquut ka samaysan. Markaasuu Malaggu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u waxyoodaa wuxuu Ilaahay doonay inuu u waxyoodo. Sifadaanna wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Jibriil ku arkay laba goor, sida ku sugnaatay Aayadaha sadex iyo toban iyo afar iyo toban ee Suuartu Al Nnajmi:

"Wa la qad ra'aahu nazlatan ukhraa(13)**Cinda sidrati Al Muntahaa**(l4)**".** Labada Aayadood macnohoodu waxaa weeye: "Dhabnimuu Nabigu u arkay Jibriil mar kale(13)Sidratu Al Muntahaa agteeda(l4)." Muslim wuxuu Caa'ishah ka wariyey inay tiri: "Ma uusan arag (waa Jibriile) suuradduu Ilaahay ku abuuray intaan laba goor ahayn." Axmad iyo ibnu abii Xaatim iyo Abuu Al Shaykh waxay ibnu Mascuud ka wariyeen inuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ma uusan arag Jibriil oo leh suuradduu Ilaahay ku abuuray oo asalka u ahayd intaan ahayn laba goor. Labadaas goor middood Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa JibriiI waydiistay inuu is tusiyo, markaasuu is tusiyay oo uu ufuqa (oo ah intay ishu qabato ilaa meesha aad mooddo inay cirka iyo dhulku iska gelayaan) buuxiyay. Marka labaadna waxay ahayd habeenka Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam la dheelmiyay, wuxuna' ku arkay Sidratu Al Muntahaa agteeda." Al Xaafith ibnu xajar wuxuu Fatxu Al Baarii ku yiri: "Xadiithkaan wuxuu caddeynayaa Xadiithka Muslim ee Caa'ishah ay warisay, oo sheegtay inuusan Nabigu, Sallaa , Allaahu Calayhi Wasallam, Jibriil suuraddiisa asliga ah uusan ku arag laba goor mooyee."

(Lix). Martabada lixaad ee Waxyigu waxaa weeye wuxuu Ilaahay u waxyooday isagoo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku sugan yahay Samaawaadka ka kor, sida shanta Salaadood oo waajibka ah, iyo jihaadka, iyo Hijrada iyo Zakada iyo soomidda Ramadaan iyo waxa san oo la is faro, xumaantana la iska reebo, sida uu u caddeeyey Xadiithka dheer ee Abuu Saciid Al Khudriyyi ee habeenka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasaallam, la dheelmiyey oo uu Al Bayhaqii wariyay. Xadiithkaas waxaa ka mid ah inuu Ilaahay Tacaalaa Nabigiisa Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: **"Wa acdhaytuka thamaaniyata ashumin: Al Islaama wa al Hijrata wa al Jihaada wa al Ssalaata wa al Sadaqata wa sauma Ramadaana wa al amra bi al macruufi wa al nnahya cani al munkari."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaanna ku siiyey sideed sahmi, waa sade, oo kala ah (Kow) Islaamka, iyo (Labo) Hijrada iyo (Saddex) Jihaadka iyo (Afar) Saladadda iyo (Shan) Zakada iyo (Lix) Soomidda Ramadaan iyo (Toddoba) Waxa suuban oo la is faro suubintooda iyo (Sideed) Waxa xun oo la iska reebo sameyntooda."

(Toddoba). Nooca toddobaad ee Waxyigu waa ayadoo uu Ilaahay Tacaalaa uu si toos ah Nabigiisa Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ula hadlay, dhexdhexaadinta Malag la'aanteed, siduu Muuse ula hadlay si la mid ah, oo uu markaas xijaab gadaashiis kala hadlay.

(Sideed). Martabada sideedaad ee Waxyigu, ee ay ku kordhiyeen culummada qaarkood waa inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ilaahay Tacaalaa fool ka fool ula hadlay, ayadoo uusan xijaab ka xigin, siduu ibnu Al Qayyim u yiri. Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Waxaad mooddaa muu ibnu Al Qayyim taas ka qaatay Al Suhaylii." Martabadaan sideedaadna waxaa qaba culummada rumaysan inuu Nabi Muxammad, SalIaa Allaahu Calayhi Wasallam, habeenka la dheelmiyey uu Rabbigiis Tacaalaa indhihiisa ku arkay, taasoo ay culummadu isku khilaafasan yihiin.

(Sagaal). Martabada sagaalaad ee Waxyigu waa cilmiga uu Ilaahay Tacaalaa ku riday qalbigiisa iyo carrabkiisa, markuu axkaamta ku ijtihaadayo, isagoo markuu ijtihaadoo kasta xaqqa haleelaya oo inuu gafo macsuum ka ah oo ka dhawrsan. Martabadaani waxay al nafthu fii al ruuci, oo ah martabada labaad ee nasoo martay, uga duwan tahay isagoo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markaan ijtihaadayo, marka horena qalbigiisa xaqqa lagu ridayo ijtihaad la' aan. **(Toban).** Martabadaan Waxyigu waa ayadoo uu Jibriil ugu imaan jiray suuradda nin aan Dixyah ahayn, ayadoo ay asxaabtu Dixyah yiqiinneen.

(Kow iyo toban). Al Xaliimii, oo loo nisbeeyey awoowaha aabihiis, isaguna uu yahay al callaamah oo culuumta Xadiithka kusoo if baxay oo ku xeel dheer, qaalliga ah Abuu Cabu Allaahi Al Xusayn bin Al Xasan bin Muxammad bin Xaliim al Shaafici, faqiiha cilmiga ku gacan dheeraaday iyo kutubbada uu sannifayba ee faa'iidada badan, dhintayna bisha Rabiicu Al Awwal ee sandka afar boqol iyo saddex wuxuu xusay inuu Waxyigu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu imaan jiray lix iyo afartan nooc, intooda badanna, siduu Al Xaafith ibnu Xajar Fatxu Al Baari ugu sheegay, ay ku saabsan yihiin sifooyinka Malagga Waxyiga sida, dhammaantoodna ay soo hoos gelayaan inta nooe oo aan hadda soo sheegnay.

Inta goor oo uu Jibriil kusoo degay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Wuxuu ibnu Caadil ku xusay tafsiirkiisa inuu Jibriil, Calayhissalaamu, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kusoo degay **afar iyo labaatan kun oo jeer.** Aadanna wuxuu kusoo degay laba iyo toban goor, Idriisna afar goor, Nuuxna konton goor, Ibraahiimna laba iyo afartan goor, Muusana afar boqol oo goor, Ciisana toban goor. Sidaas ayuu yiri Allaha u naxariistee!" Al Zarqaanii wuxuu intaas ku daray oo uu yiri: "Al Xaafith Al Daymii wuxuu ku kordhiyey, siduu uga soo guuriyey ardaygiisa Al Shamsu Al Tataa'ii fii Sharxi Al Risaalah: "Yacquubna afar goor, Ayyuubna saddex goor." Waxaana halkaas ka cad

inayan tiro kale soo gaarin oo Anbiyada kale ku saabsan."

Ghaaru Xiraa'

Godkaasi wuxuu ku yaallaa buurta la yiraahdo **Jabalu Al Nuur**, oo macneheedu yahay Buurta Nuurka, ayadoo uu Waxyigu kusoo degey Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo godkaas ku jira, uuna ugu yimid Malaku Jibriil, Calayhissalaamu, uuna u keenay Quraankii ugu horreeyey oo lagu soo dejiyo, ahaana shanta Aayadood oo ugu horreeysa Suuratu Iqra', iyo Nabinnimadaba iyo Rasuulnimada. Buurtaas waxaa kaloo la yiraahdaa **Jabalu Xiraa'**. Buurtaasu waxay badda ka korreysaa lix boqol iyo kow iyo labaatan mitir, fiideeduna waxay salkeeda ka korreysaa laba boqol iyo kow iyo sideetan mitir waana buur tafiddeedu ay aad u adagtahay, qofka xoog lehna wuxuu ku tafayaa qiyaas hal saac, Godkaas afkiisu wuxuu u jeedaa xaqqa Waqooyi, marka la gelayana waxaa la dhexmaraa labo dhagax oo afkiisa saaran, afka ballaarkiisuna uu yahay lixdan sentiimitir. Godka dhererkiisu waa qiyaas saddex mitir, ballaciisuna meeshuu ugu fog yahayna waa hal mitir iyo soddon sentiimitir. Godka taaggiisa korena waa laba mitir. Godku wuxuu ku filan yahay laba qof oo wada tukanaysa, oo midkood uu midka kale daba taaganyahay. Dhanka midigta ahna waxaa ku taalla intuu qof fadhiya ku tukado. Al Bukhaarii wuxuu Abuu Hurayrah ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo buurta Jabalu Al Nuur dul saaran, ay buurtii dhaqdhaqaaqday, Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, burtii la hadlay, oo uu ku yiri: **"Askun Xaraa'a, fa maa calayka illaa Nabiyyun, aw Siddiiqun aw shahiidun."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Xiraaow deg oo xasil, korkaaagana ma aha cid aan ahayn Nabi iyo Runlow iyo Shahiide." Waxaana markaas buurta dul saaran Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Abuu Bakar Al Siddiiqu iyo Cumar bin Al Khadh-dhaab iyo Cuthmaan bin Caffaan iyo Calii bin Abii Dhaalib iyo Dhalxah bin Cubaydu Allaahi iyo Al Zzubayu bin Al Cawwaam iyo Sacad bin Abii Waqqaas, Allaha dhammaantood raalli ka noqdee. Waana xadiithka lixkun iyo labo boqol iyo sideed iyo afartan ee Al Bukhaarii. Jabalu Al Nuur wuxuu Al Masjidu Al Xaraami saddex kiiloomitir ka xigaa xagga Waqooyi-Bari.

Sarraynta Ghaaru Xiraa'

Al lmaamu ibnu abii Jamrah wuxuu keenay su'aasha ah: "Muxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ghaaru Xiraa'a inta hog oo kale uga doortay inuu ku cibaadeysto, uuna dhexdiisa ku ictikaafo oo ku nagaado keli ahaantiis?" lmaamku wuxuu uga jawaabay sidatan: "Wuxuu Al Musdhafaa ugu gooni yeelay oo uu ku doortay inuu Ghaaru Xiraa' leeyahay saddex waxyaalood oo aan lala wadaagin daraadood, oo kala ah: (Kow) Wuxuu ka gudban yahay cagta dadka, oo markuu godkaas galo, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dadka is dhex geli mayaan oo cibaadeysigiisa ayuu u keli noqonayaa. (Labo) Qofka godkaas gala, oo ku keliyeysta, dareenkiisa oo idil ayaa kulmaya, oo si taam ah ayuu u cibaadeysan karaa, oo wax cibaadeysigiisa ka jeedinaya ma jiraan. (Saddex) Markuu godkaas galo, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu si toos ah ugu jeedaa Guriga Rabbigiis, oo Kacbada ah, ayadoo uu wajiga albaabka kasoo horjeeda uu ku beegan yahay, ayadoo uu dhammatka hoggu leeyahay jeex dheer oo ku beegan Kacbada. Fiirinta Kacbaduna waa cibaadeysi, siday ugu sugnaatay Xadiithka ah: **"Inna Allaaha yanzilu calayhi cishriina raxmatan"**, oo macnihiisu yahay: "Qofka Kacbada dhugta Ilaahay wuxuu kusoo dejiyaa korkiisa labaatan raxmo, oo ah naxariis." Sidaas ayay Ghaaru Xiraa' saddex cibaadeysi ugu kulmeen, oo kala ah: (Kow) Al Khalwatu, oo ah u firaaqoobid

Rabbigiis iyo dadka laftiisa oo laga firaaqoobo. (Labo) Al Taxannuthu, oo ah ka fogaanshaha dambiga, oo al xinthu waa dambiga. Marka waa al tacabbudu, ayadoo uu cibaadeysigu dambiga suuliyo oo uu raadtiro. (Saddex) Al Nathru ilaa Al Bayti, oo ah fiirinta Kacbada. God kale oo ay saddexdaasi ku kulmeenna ma jiro. Cabdu Al Mudhalib bin Haashim, Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, awoowihiis ayaa ahaa kan ugu horreeya oo Xiraa' ku cibaadeysta. Nabiguna, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu godkaas geli jiray Nabinnimada ka hor iyo kaddibba, intay ahayd zamanka fatrada Waxyiga, oo ah intuu ka joogsaday, oo ahayd saddex sano ama meelahaas, kana bilaabata bilaabashada Waxyiga iyo markuu Jibriil, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Nabinnimada iyo Rasuulnimada godkaas ugu keenay shanta Aayadood ee Suuratu Al Calaqna u keenay. Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Xiraa' geli jiray bisha Ramadaan oo ay Quraysh islaamka hortiis waynayn jirtay. Qurayshi Caashuuraa'na, oo ah maalinta tobanaad ee bisha Muxarram, way soomi jirtay. Wa li Allaahu darru al imaamu al qudwatu, al waacith, al mufassir, al faqiih, suufiga ah Cabdu Allaahi bin Muxammad Al Qurayshiyyi Al Murjaanii, laguna dilay Tuunis sanadka lix boqol iyo sagaal, markuu sarraynta iyo fadaa'isha Xiraa' ka warramay, gabayna uu ka tiriyay, uuna yiri:

1. Ta'ammal Xiraa'a fii jamaali maxyaahu/
fa kam min unaasin min xulaa xusnihi taahuu.
2. Fa mimmaa xawaa manjaa li culyaahu zaa'iran /yufraju canhu a1 hammu fii xaali marqaahu.
3. Bihi khulwatu Al Haadii Al Shafiici Muxammadu wa fiihi lahu ghaarun lahu kaana yarqaahu.
4. Wa qiblatuhu lil Qudusi kaanat bi ghaarihi
wa fiihi ataahu Al Waxyu fii xaali sabraahu.
5. Wa fiihi tajallaa Al Ruuxu bi al mawqiti allathii
bi Allaahu fii waqti al bidaayati sawaahu.
6. Wa taxta tukhuumi al ardi fii al sabci asluhu
wa min bacdi haathaa ihtazza bi al sufli aclaahu.
7. Wa lammaa tajallaa Allaahu Qaddasa Thikruhu
li Dhuurri tashath-thaa fa huwa ixdaa shathaayaahu.
8. Wa minhaa Thabiiru thumma Thawru bi Makkata
kathaa qad ataa fii naqli taariikha mabdaahu.
9. Wa fii Dhiibata aydan thalaatha fa cudhaa:
Fa Ciiran wa Waraqaanan wa Uxudan rawaynaahu.
10. Wa yuqbalu fii saacati al thuhri man dacaa
bihi wa yunaadaa: "Man dacaanaa ajabnaahu".
11. Wa fii axadi al aqwaali fii caqabati Xiraa'
ataa thumma Qaabiilu li Haabiila ghashaahu.
12. Wa mimmaa xawaa sirran xawat-hu sukhuuruhu
mina a1 tabri iksiiran yaqaamu samicnaahu.
13. Samictu bihi tasbiixahaa ghayra marratin
wa asmactuhu jamcan fa qaaluu samicnaahu.
14. Bihi markazu mawdicu Al Nuuri Al Ilaahii muthbitan
fa li Allaahi maa axlaa maqaaman bi aclaahu.

Gabyga macnihiisu waxaa weeye:

1. Dhaag Xiraa'a quruxda wajigiisa/intee dad ayaaa aragtida iyo ku macaansiga aragsamida quruxdiisa ku wareeray.
2. Waxaa gudihiisa ku sugnaadayna waxaa ka mid qof meeshaas korreysa ugu yimid isagoo soo booqday, isagoo doonaya inuu ka barakaysto, ayadoo uu halkaas ku sugnaaday Al Musdhafaa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Illaahay wuxuu faraj uga

furayaa kulli hammigiisa iyo kurbada haysa qofka tafaya buurtaas.
3. Hoggaas, oo ku yaalla fiidda buurta Xiraa'a, fadligiisu yahay inuu ku keli ahaansan jiray (waa khalwah) Al Haadii, o ah kan wax hanuuniya, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uuna ku khalwoon jiray Nabinnimada horteed iyo dabadeedba, qiyaas saddexdii sano oo uu Waxyigu ka go'ay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lana yiraahdo zamanka fatrada, oo fatara macneheedu waxaa weeye waa go'ay/kaasoo, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, buurtaas ku leh hog, uuna tafi jiray buurtaas.
4. Qibladiisuna waxay ahayd Quddus intuu ghaarkiisa hoggiisa ku jiray (taasoo in fiiro loogu laabto u baahan, ayadoo uu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Quddus ay Qiblo u noqotay habeenka la dheelmiyay oo salaadda lagu fardi yeelay, rnarkaas ka horna ay Qibladiisu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallarn, Kacbada ahayd)/isaga dhexdiisuuna Jibriil Waxyiga ugu keenay, isagoo ku sugan xaaladda uu naftiisa keli ahaanshaha iyo cibaadeysiga ku xabbisay, oo uu ku sabray,
5. Dhexdiisuuna Jibriil iskugu muujiyay, mawqifka uu/Ilaahay bilawga u suubiyay.
6. Asalka Xiraa'na wuxuu ku sugan yahay arliga toddobaad oo toddobada arli ugu hooseeya/markaasuu kaddib kuwa fiiddiisa saaran la gariiray, kaddib markuu asalkiisa hooseeya gariiray. Tixduna waxay waafaqsan tahay Xadiithka Muslim ka wariyay Abuu Hurayrah inuu Nabi Muxamad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, buurta Xiraa' saarnaa, isaga iyo Abuu Bakar Al Siddiiqu iyo Cumar iyo Cuthmaan iyo Calii iyo Dhalxah iyo Al Zzubayru iyo Sacd. Markaasey buurtu gariirtay. Markaasuu Nabigu, sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu buurta ku yiri: **“Askun Xaraa'a, fa maa calayka illaa Nabiyyun, aw Siddiiqun aw Shahiidun."** Xadiithka rnacnihiisu waxaa weeye: "Xiraa'ow deg oo xasil, korkaaagana ma aha cid aan ahayn Nabi iyo Runlow (oo ah Abuu Bakar Al Siddiiq, Allaha raalli ka noqdee) iyo Shahiid (oo intooda kalena waxaa lagu dilay shahiidnimo).” Qisadaas mid la mid ahna waxay ka dhacday ayaduna buurta Uxud dusheeda iyo buurta Thabiir dusheeda. Waxayna ka mid yihiin mucjizooyinka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Xadiithkaanna wa isla Xadiithka lix kun iyo laba boqol iyo sideed iyo afrtan ee Al Bukhaarii.
7. Markuu llaahay, Qaddasa Thikruhu -xusidda Magacaiisu Daahir ha ahaadee in la mid ah nuska foodda faryarada (waana wax u dhigmee) siduu u xusay Xadiithka uu Al Xaakimu saxiixa ka dhigay, uu buurta Siinay ee dalka Masar ku taalla u muujiyay, buurtu way burburtay. Jabjabkeeda qaar ka mid ah way kala duuleen, oo ay gaballadaas duulay buuro kale noqdeen. Marka buurta **Jabalu Xiraa'** waa gabal ka mid ah gaballadiisa. Gaballada buurtaas burburtay ka kala duulay waxaa ka mid ah buurta **Jabalu Thabiir,** oo kasoo horjeedda buurta Xiraa', waxaana labadooda u dhexeeya waadi, labadooduna waxay isku dhinac uga yaallaan, waana dhinaca bidixeed, dariiqa qofka inta Kacbada ka baxa Mina u socda. Waxaa kaloo gaballadaas kasoo duulay buurta **Jabalu Dhuur** ka askumay buurta **Jabalu Thawr**, oo isaguna buuraha Makkah ka mid ah, kuna yaalla xaafadda hadda la yiraahdo Xayyu Al Hijrah, oo ah xaafadda Hijrada. Buurtaas dusheeda waxaa ku yaalla hog la yiraahdo **Ghaaru Thawr**, waana godka uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Makkah ka haajiray, isagoo uu wehliyo saaxiibkiis Abuu Bakar Al Siddiiqu, uu galay, ayna afkiisa caaradu guri ka dhisatay, qoolleyduna ay ayaduna afkiisa ukunteeda dhigatay, oo ay markay sidaas arkeen ay gaaladii raadkooda ku jiray ay isaga noqdeen. Qofka buurtaan dusheeda saaran, buurta Xiraa' way u muuqataa, qofka Xiraa' saaranna middaan ayaa u muuqata.
8. Waxaana gaballada soo duulay ka mid ah buurta Jabalu Thabiir, oo aan kasoo warrannay, kaddibna Thawr, oo aan isagana soo aragnay, oo Makkah ku yaalla/sidaas ayaa lagu soo wariyay inuu Xiraa' bilowgiisu ahaa.
9. Dhiibana, oo ah Al Madiinah Al Munawwarah, waxaa ku yaalla saddex buurood, oo

ayaguna gaballadaas soo duulay ka mid ah, ee tiri:
/buurta **Jabalu Cayr**, ahna buruta uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka yiri, siday Al Bazzaar iyo ghayrkiisba u wariyeen: **"Wa Cayru yabghadunaa wa nabghaduhu, wa innahu calaa baabin min abwaabi Al Naari"**. Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Cayr-na waa na neceb yahay, annaguna isaga waan necebnahay, isaguna wuxuu ku yaallaa albaab ka mid ah albaabada Naarta." Riwaayadu kale waxay ku sheegeen buur kale, sida **Jabalu Radwaa**, oo ah buur Al Madiinah ku taalla, siduu Al Baghawii u wariyay iyo Al Qudus, oo uusan buurtaas aan necebnahay ahayn. Iyo buurta **Jabalu Wariqaan**, oo ah buur madow oo ku taalla meel u dhexeysa **Al Caraj** iyo **Al Ruwaythata**, midigtana ka qabaneysa qofka Al Madiinah ka yimid oo Makkah u socda, Allaha Wayni labadoodaba cadawga ha ka ilaaliyee. Waxaa kaloo burburkaas soo faniinay ka mid ah buurta **Jabalu Uxud**, waana buurta caanka ah oo Al Madiinah Al Munawwarah ku taalla, uuna Al Musdhafaa, Sallaa Allaahu CaIayhi Wasallam, ka yiri: **"Uxud jabalun yuxibbunaa wa nuxibbuhu",** o macneheedu yahay: "Uxud waa buur annaga na jecel, annaguna aan ayada jecel nahay." Sidaas ayaanna u warinnay: Al Waaxidii wuxuu Anas ka wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Lammaa tajallaa Rabbuhu lil jabali jacalahu dakan. Dhaara li cathamatihi sittatu ajbulin. Fa waqacat thalaathatun bi Al Madiinati: Uxudun, wa Wariqaanu, wa Radwaa. Wa waqaca bi Makkata Thawrun, wa Thabiirun, wa Xaraa'u."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Markuu Rabbigiis isku muujiyay buurta, wuxuu ka yeelay burbur, oo ay Cathiimnimadiisa daraadeed ay lix buurood u duuleen. Markaasey saddex waxay ku dheceen Al Madiinah, oo kala ah Uxud iyo Wariqaan iyo Radwaa. Makkana waxaa ku dhacay saddex, oo kala ah Thawr iyo Thabiir iyo Xiraa". Al Baghawii markuu wariyay Xadiithkaan wuxuu ka yiri: "Tafaasiirta qaarkoodna waxay wariyeen: markaasuu Xadiithkaan xusay." Fatxu Al Baarii Xadiithkaan Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kor uguma uusan qaadin. Waxaana Xadiithka wariyay ibnu abii Xaatim, oo ka wariyay abii Maalik, oo kor Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu qaaday, waana wax lala yaabo, isagoo uu Xadiithku Mursal yahay. Burburidda buurtaas waxay ku xusantahay Aayadda boqol iyo saddex iyo afartan ee Suuratu Al Acraaf, oo uu Ilaahay Tacaalaa ku yiri: **"Fa lammaa tajallaa Rabbuhu Illjabali jacalahu dakkan",** oo macneheedu yahay: "Markuu Rabbigiis (waana Nabi Muuse) isu Muujiyay buurtii, wuxuu ka yeelay burbur."
10. Waana la aqbalaa ducada qofka ku ducaysta saacadda duhurka dhexdiisa/waxaana loogu dhawaaqaa oo lagu yiraahdaa: "Qofka na baryay waan ka aqbalnay baryadiisa, wuxuu rabayna waan siinnay."
11. Warinna waxay sheegtay inuu **Qaabiil** ina Aadan meesha Ghaaru Xiraa' laga tafo uu walaalkiis **Haabiil** ugu yimid, oo uu halkaas **ku dilay**. Al Thaclabii wuxuu yiri: "Haabiil maalinta la dilay wuxuu ahaa labaatan jir." Waana la isku khilaafay sida iyo meesha Haabiil lagu dilay. Qaar kalena waxay yiraahdeen: "waxaa lagu dilay caqabada, waana jiirta laga koro, Xiraa'." Jacfar Al Saadiq wuxuu yiri: "Waxaa lagu dilay Basrah ee arliga Ciraaq, Masjidka wayn dhexdiisa barta ku beegan, ayadoo uusan waqagaas masjidkaasi jirin." Intaasuu warka Al Thaclabii ku egayahay. Al Saddiyyu wuxuu isnaad uu isagu leeyahay ku xusay inay sababtuu Qaabiil walaalkiis Haabiil u dilay ay ahayd inuu Aadan wiil kasta oo uu dhalay u gurin jiray gabar ayan isku calool ahayn, calool kalese ka dhalatay, ayadoo ay Xaawo mar walba wiil iyo gabar mataano ah dhali jirtay. Mataanta Qaabiil ayaa waxay ka quruxsmayd mataanata Haabiil. Markaasuu Qaabiil wuxuu damcay inuu walaashiisa ay isku caloosha yihiin isagu guursado. Markaasuu Aadan u diiday. Markuu Qaabiil arrinkaas ku adkaystay, wuxuu Adan labadiisa wiil amray inay qurbaan Ilaahay u bandhigaan, oo kii uu qurbaankiisa Ilaahay aqbalo uu gabadhaas guursanayo. Markaasuu Qaabiil wuxuu qurbaan ahaan usoo

bandhigay xirmo zarac ah, waa haruuree, oo uu beertiisa kasoo gooyey, isagoo beeraaley ahaa. Haabiilna wuxuu qurbaan ahaan usoo bandhigay wan buuran, isagoo xoolaaley ahaa. Markaasaa waxaa cirka kasoo degay dab loo jeedo, oo qurbaanka Haabiil cunay, kii Qaabiilna ka tegey, taasoo ah inuu Ilaahay qurbaanka Haabiil aqbalay, kan Qaabiilna uusan aqbalin. Taas ayay ahayd sababta labadooda dhex martay. Ibnu Xajar wuxuu Fatxu Al Baarii ku yiri: "Taas weeye midda caanka ah."

12. Waxa gudihiisa – waana Ghaaru Xiraa'e,- ku jira waa sirta dhagaxdiisa ku jirta/oo ah dahab iyo qalin iyo macaadin la dhalaalinayo, si kiimikada waafaqsan. Sidaas ayaan maqalnay, oo aan ghayrkeen kasoo guurinnay, waxaan taas runnimadeeda rumaynaya:

13. Inaan anigu godka Xiraa'a ka maqlay tasbiixda dhagaxdiisa, oo leh Subxaana Allaahi, in mar ka badan/waxaanna tasbiixsigaas maqashiiyey koox rag ah, oo markaasey waxay yiraahdeen: "Annaguna dhegeheenna ayaan tasbiixdiisa ku maqalnay."

14. Xiraa' waxaa ku sugan bartuu Nuurka Ilaahay ku sugnaaday/marka Ilaahay ayaa iska leh barta oo macaaneeyey joogiddeeda oo fiiddeeda ah, waa Xiraa'e.

Waa intaas tarjumidda gabaygu. Buurtaan Jabalu Nuur, waxaa kaloo la yiraahdaa Jabalu Xiraa', fiideedana waxaa ku yaalla hog la yiraahdo Ghaaru Xiraa'. Godka laftiisana waxaa la yiraahdaa, haddii la doono, Jabalu Xiraa'. Aniga iyo wiilkayga Ibraahiim Al Khaliilu Xasan waan galnay dhexdeedana aan ku tukannay, wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina wa laa ilaaha ghayruhu wa ashhadu anna Muxammad, Rasuulu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Bilaabashada soo degidda Quraanka

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Kusoo degidda Quraanka ee Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay bilaabatay bisha Ramadaan, siduu Ilaahay Cazza wa Jalla ugu yiri Aayadda boqol iyo shan iyo sideetanaad ee Suuratu Al Baqarah: **“Shahru Ramadaana allatbii unzila fiihi Al Qur'aanu**(185)**”,** oo macneheedu yahay: "Bisha Ramadaan ee lasoo dejiyay dhexdiisa Quraanka(185)." Wuxuu kaloo Ilaahay Cazza wa Jalla Aayadda koowaad ee Suuratu Al Qadri ku yiri: **“Innaa anzalnaahu fii laylati Al Qadri**(1)”, oo macneheedu yahay: "Annagaa soo dejinuay (Quraanka) habbenka Laylatu Al Qadarka ah (ee bisha Ramadaan dhexdeeda ku jirta)(1)". Wuxuu kaloo Cazza wa Jalla Aayadaha labo ilaa shan ee Suuratu Al Dukhaan ku yiri: **"Wa Al Kitaabi Al Mubiini**(2)**Innaa anzalnaahu fii laylatin mubaarakatin Innaa kunnaa munthiriina**(3)**Fiihaa yufraqu kullu amrin xakiimin**(4)**Amran min cindinaa Innaa kunnaa Mursiliina**(5)" Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Waxaan ku dhaartay Kitaabka wax caddeeya (oo xalaasha iyo xaaraanta kala caddeeya)(2)Annagaa soo dejinnay habeen barakaysan, Annagaana ah kuwa digaya(3)Habeenkaasaana la kala bixiyaa amar kasta oo xikmad miiran ah(4)Waana amar agteenna ka ahaaday, Annagaanna soo dirnay (Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Rususha ka horteyseyba)(5)". Wuxuu kaloo Ilaahay Tacaalaa Aayadda kow iyo afartanaad ee Suuratu Al Anfaali ku yiri: **"In kuntum aamantum bi Allaahi wa maa anzalnaa calaa Cabdinaa yawma al furqaani, yawma iltaqaa al jamcaani**(41)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Haddaad tihiin kuwa rumeeyey Ilaahay iyo waxaan kusoo dejinnay Addoonkeenna (waana Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) maalinta kala saaridda (waana Maalintuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, duullaanka Badar gaalada kula kulmay, uuna Ilaahay kala saaray xaqqa iyo baadhilka, runta iyo xumaanta beenta ah ee gaalnimada), maalintay kulmeen labada ciidan: ciidanka iyo xizbiga Ilaahay iyo ciidanka iyo xizbiga shaydhaan(41).”

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: “Wuxuu ii wariyay Abuu Jacfar Muxammad bin Caliyyi bin Xusayn inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ay ku kulmeen isaga iyo gaaladu Badar maalin jimce ah, subaxa ay bisha Ramadaan toddoba iyo toban ahayd.” Al Suhaylii wuxuu yiri: “Aayadda boqol iyo shan iyo sideetanaad ee Suuratu Al Baqarah, oo leh : **"Shahru Ramadaana allathii unzila fiihi Al Qur'aanu"**, oo macneheedu yahay: "Bisha Ramadaan ee lasoo dejiyay dhexdiisa Quraanka" ayuu ibnu Isxaaq wuxuu daliil uga dhigtay in Quraanka lasoo dejiyay bisha Ramadaan iyo Laylu Al Qadri oo bisha Ramadaan ka mid ah. Taasi waxay ixtimaaleysaa labo tafsiir: (Kow) inuu ka wado inuu Quraanka soo degiddiisu iyo inta ugu horteysaba ay ahayd bisha Ramadaan dhexdeeda, iyo (Labo) siduu u yiri ibnu Cabbaas in "Quraanka jumlo ahaan iyo wadartiisaba isla mar loo soo dejiyay Samada Adduunka oo la dhigay Bahytu Al Cizzati isagoo ku sugan Al Suxufo Al Mukarramah, Al Marfuucati Al Mudhahharah, kaddibna Aayadba Aayad kale dabadeed iyo Suuradba Suurad kale dabadeed lasoo dejiyay aydoo kuwa wax weydiiya (Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) looga jawaabayo, iyo dhacdooyinkaba, ilaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga oofsaday.” Tafsiirkaan ayaana u eg siday runtu ahayd oo ay wax u dheceen, uguna saxsan inta la wariyay”. Waa intaas warkaa Al Suhaylii. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Intaas kaddib si buuxda ayuu Waxyigu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaallu Calayhi Wasallam ugu soo degay, isagoo aaminsan Ilaahay oo rumaysan waxa xaggiisa uga yimid, isagoo si buuxda u oggolaaday, xambaarayna oo u dul qaatay waxa lagu xambaaray ee raallinnimada iyo carada addoommada Ilaahay, ayadoo ay Nabinnimadu tahay culaysyo wayn oo uusan qaadi karin ragga xoogga badan oo go'aanka leh ee Rususha ka mid ah rnooyee, ayadoo uu Ilaahay taageerayo iyo tawfiiqdiisa ayna u sabab yihiin waxay kala kulmayaan dadka iyo siday ugu diidayaan waxay ugala yimaadeen xagga Ilaahay Subxaanahu wa Tacaalaa. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku dhaqaaqay amarka Ilaahay, uusanna u aabo yeelin wuxuu dadkiisa kala kulmay oo khilaafid iyo diididba ah.

Islaamidda Khadiijah bintu Khuwaylid

Waxaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aamintay Khadiijah bintu Khuwaylid, rumaysana wuxuu xagga Ilaahay ka keenay, amarkiisana ku taageertay oo ay culayska ka qaadday. Khadiijah waxay ahayd qofka ugu horreeya oo aaminta Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rumaysana wuxuu xaggiisa ka keenay. Rumayntiisaas Khadiijah ayuu Ilaahay Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uga khafiifiyay (dhibka iyo culayska), oo markuu dadka ka maqlo wuxuu kahdo oo diidmo ah iyo beenin wuu ka calool xumaadaa oo ka tiiraanyoodaa. Markaasuu markuu Khadiijah usoo laabto ayuu Ilaahay faraj u furaa, ayadoo amarkiisa ku sugta, kana khafiifisa oo rumaysa, dadku waxay ku faleenna uga dhigta waxaan qiimo lahayn oo yar. Allaha u naxariisto oo raalli ka noqdo Mu'miniinta hooyadood Khadiijah bintu Khuwaytlid.

Khadiijah gurigeeda luulka ah ee Jannada

Ibnu lsxaaq wuxuu yiri: "Waxaa ii warramay Haashim bin Curwah oo ka wariyay aabihiis Curwah bin Al Zubayr oo ka wariyay Cabdu Allaahi bin Jacfar, Ilaahay dhammaantood raalli ha ka noqdee, oo yiri: “Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri: **"Umirtu an ubash-shira Khadiijah bibaytin min qasabin, laa sakhaba fiihi wa laa nasab"**. Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: “Waxaa la i amray inaan Khadiijah ugu bishaareeyo guri xabbad luul ah oo dhexda ka daloosha ka sameysan oo aan dhexdiisa cod kor loo qaaday laga maqlayn, waa qaylee, ayanna

kasbiddiisa ku daalin," “ayadoo markuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam islaamka ugu yeeray si sahlan ay markiiba u yeeshay, ayadoo aan u baahin inuu codkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kor u qaado, uuna ku daalo, siday raggu u daalaan markay haweenkoodu ku adkaadaan". Al Suhaylii ayaa sidaas u fasiray. Ayadoo aan kasbidda gurigaas ku daalinna macneheedu waxaa weeye inuu Ilaahay gurigaas siiyay ayadoo aan camal adduun oo ay ku daashay ku kasbanin, xag Allese laga siiyey oo intay camal ku kasbatay oo ay ku daashay loogu daray. Markuu Jibriil Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u imaanayo oo uu bishaaradaas u keenayo, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku jiraa Ghaaru Xiraa' , siduu Al Dhabraanii u wariyay.

Salaanta Ilaahay ee Khadiijah

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Jibriil, Calayhissalaamu, ayaa u yimid Rasuulka IIaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna yiri: “Khadiijah waxaad u gudbisaa salaan uu Rabbigeed usoo diray." Markaasuu Rasuulka IIaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Yaa Khadiijah! Haathaa Jibriilu yuqri'uka Al Ssalaama min Rabbika",** oo macneheedu yahay: "Khadiijey! Kani waa Jibriil oo Salaan kaaga wada xagga Rabbigaa". Markaasey Khadiijah waxay tiri: "Ilaahay Isagaa ah Al Ssalaamu (oo waa magac Magacda Ilaahay ka mid ah), Isagayna Al Ssalaamu ka timaadda oo laga helaa (oo ah nabadgelyo), Jibriil korkiisana Al Ssalaamu (nabadgelyo) ha ahaato". Xadiithka waxaa kalkoo wariyay Bukhaarii mujalladka afaraad bogga boqol lix iyo soddon iyo Xadiithka kow iyo sagaashanaad ee Muslim iyo kuwo kaleba.

Fardi ka yeelidda tukashada Salaadda

Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Waxaa la wariyay inuu Jibriil Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid isagoo leh suuradda ugu qurxoon, lehna carafta ugu udgoon, uuna ku yiri: "Muxammadow! Ilaahay Salaan ayuu kuu soo diray wuxuuna kugu leeyahay: **"Anta Rasuulii ilaa al jinni wa al insi. Fa adcuhum ilaa qawli Laa ilaaha illaa Allaahu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Muxammadow! Adigu waxaad tahay Rasuulkeyga aan u diray jinniga iyo insigaba ee hadda dhammaantood ugu yeer inay yiraahdaan Laa ilaaha illaa Allaahu."
Kaddib Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa fardi looga yeelay tukashada Salaadda. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxaa ii warramay Saalix bin Kaysaan oo ka wariyay Curwah bin Al Zubayr inay Caa'ishah tiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, marka ugu horreysey oo Salaadda korkiisa fardi looga dhigay, waxaa fardi looga dhigay laba laba rakco ayadoo ah, oo ay salaad walba labo rakco tahay. Kaddibna Ilaahay Tacaalaa wuxuu taam yeelay (uu buuxay oo dhammaystiray) Salaadda qofka muqiimka ah, oo gurigiisa jooga, wuxuuna u sharciyeeyey oo uu daayey Salaadda Safarka siday markeeda horeba lagu fardi yeelay oo labo rakco ah." Xadiithka waxaa kaloo wariyay Al Bukhaarii mujalladka sideed bogga kow iyo Muslim iyo kuwo kaleba.

Waysada

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Marka Salaadda lagu fardi yeelay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, korkiisa, waxaa u yimid Jibriil, isagoo ku sugan Makkah dusheeda. Markaasuu Jibriil ciribtiisa dhulka dooxada dhankeeda ku dhuftay. Markaasaa waxaa bartaas kasoo burqatay il biyo ah. Markaasuu Jibriil biyahaas ka wayso qaatay, ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,

fiirsanayo, si uu u tuso sida Salaadda loogu wayso qaato. Markaas kaddib ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u wayso qaatay siduu u arkay inuu Jibriil u weyseystay. Markaasuu Jibriil istaagay oo uu tukaday. Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu salaadiisa ku tukaday oo uu la tukaday. Intaas kaddibna Jibriil wuu ka gaddoomay, oo Samaduu kor u tafay."

Tukashada Khadiijah

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, Khadiijah u yimid, oo uu horteeda ku wayso qaatay, si uu u tuso sida Salaadda loogu wayso qaato, siduu Jibriil u tusay. Markaasey waxay u wayso qaadatay siduu horteeda ugu wayso qaatay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, si la mid ah. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, tujiyay oo uu u tujiyay siduu Jibriil isaga laftiisa u tujiyay oo kale. Markaasey Salaaddiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku xiratay oo ay la tukatay." Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Markuu Jibriil Samada kor u tafay, ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo gaddoomay, isagoo aan ag marayn dhagax iyo dhoobo midna ama geed ee waa illaa kan salaama oo yiraahda "Al Ssalaamu Calayka yaa Rasuula Allaahi". Markaasuu markuu Khadiijah u yimid ayuu u sheegay warka waxa dhacay, oo uu farax daraadiis ayada isku duubay, kaddibna uu amray oo ay waysaysatay oo uu Salaadda tujiyay siduu Jibriil isaga u tujiyay." Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Ayaday ahayd, waa Khadiijee, qofka ugu horreeya oo Salaad tukada."

Waqtiyada Salaadda

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxaa ibnu Cabbaas laga wariyay inuu yiri: "Marka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, korkiisa Salaadda lagu fardi yeelay waxaa u yimid Jibriil, Calayhissalaamu, markaasuu wuxuu tujiyay Salaadda Duhur markay qorraxdu Samada xagga galbeed uga iilatay. Kaddibna wuxuu tujiyay Salaadda Casar markuu hooskiisu isaga, waa Nabigee Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, le'ekaaday. Markaasuu wuxuu Salaadda Maghrib tujiyay markay qorraxdu dhacday. Kaddibna wuxuu tujiyay Salaadda Cishe markuu cirguduudku cirka ka tegey. Kaddib wuxuu tujiyey Salaadda Subax markuu waabarigu dillaacay. Kaddib (waana maalinta labaad ee taas hore ku xigta) wuu u yimid, wuxuuna Duhurka tujiyay maaalinta labaad markuu hooskiisu isaga laftiisa (waana Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) le'egyahay. Kaddib wuxuu tujiyay Salaadda Casar markuu hooskiisu isaga laftiisa (waana Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) isaga laba jibaarkiisa yahay. Kaddib wuxuu tujiyay Salaadda Maghrib markay qorraxdu dhacday, isla waqtigii shalay. Kaddib wuxuu Salaadda Cishe tujiyey markuu daloolka koowaad ee habeenku tegey. Kaddibna wuxuu tujiyay Salaadda Subax markuu waago caddaansho yahay ayanse qorraxdu weli soo bixin. Intaas kaddib ayuu wuxuu Jibriil yiri: "Muxammadow! Waqtiga Salaaddu waa inta u dhexeysa goortaad maanta tukatay iyo markaad shalay tukatay."

Joogsiga Waxyiga

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Kaddib Waxyigu dib ayuu uga joogsaday Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, o ah inuusan Jibriil u imaan oo uusan Waxyi u keenin, wuxuuna ka joogsaday muddo, ilaa heer ay mashaqqo ku noqotay (waa Nabigee, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam), oo uu ka tiiraanyooday. Markaasaa waxaa u yimid Jibriil oo u keenay Suuradda Al Duxaa, oo uu Rabbigiis ugu dhaaranayo, ahna

Rabbiga ku karaameeyey wuxuu ku karaameeyey, inuusan ka tegin, uusanna u caroon, wuxuuna Tacaalaa yiri: **"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Wa Al Dduxaa**(l)**Wa Al llayli ithaa sajaa**(2)**Maa waddacaka Rabbuka wa maa qalaa**(3)**Wa lal'aakhiratu khayrun laka mina al uulkaa**(4)**Wa la sawfa yucdhiika Rabbuka fa tardaa**(5)**Alam yajidka yatiiman fa'aawaa**(6)**Wa wa jadaka daallan fa hadaa**(7)**Wa wajadaka caa'ilan fa aghnaa**(8)**Fa ammaa al yatiima falaa taqhar**(9)**Wa ammaa al ssaa'ila falaa tanhar**(10)**Wa ammaa bi nicmati Rabbika fa Xaddith**(11)**."** Aayadaha oo ah kuwa kow toban ee Suratu Al Duxaa macnohoodu waxaa weeye: "Waxaan ku dhaarta barqada(l)Iyo habeenka markuu dumo(2)Kaama uusan tegin oo kuma sagootin Rabbigaa, kuumana uusan caroon(3)Aakhiraana kaaga khayr badan adduunka(4)Rabbigaana wuu ku siin doona, adiguna waxaas lagu siiyay raalli ayaad ku noqoneysaa(5)Soo kuma uusan helin adigoo agoon ah oo uusan markaas ku dhowayn(6)Oo miyuusan ku helin adigoo lunsan oo uusan ku hanuunin(7)Oo miyuusan ku helin adigoo sabool ah oo uusan markaas ku hodmin(8)Marka agoonkana ha qahrin(9)Midka baryootamayana ka canaanan(10)Nicmada Rabiigaa ku siiyayna ka warran(11)". Wuxuu Ilaahay Tacaalaa sidaas Nabigiisa Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay oo uu ugu dhaartay inuusan ka tegin, uusanna nicin tan iyo goortuu jeclaaday, wuxuuna ku yiri: (4) waxa agtayda kuu yaalla markaad ii soo noqotid: taasaana kaaga khayr badan oo kaaga fiican karaamada aan kuu soo dedejiyay oo aan adduunkaan kugu karaameeyey oo kugu siiyay, markaasaad waxaas aan ku siiyey fiicnaantooda aad raalli ku noqon doontaa, adduunkaanna waxaan kugu siiyey guul iyo lib iyo gacan sarrayn, Aaakhirana ajar iyo thawaab(5)." Aayadaha lix ilaa sideedna wuxuu Ilaahay Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegayaa bilawga karaamentiisa adduunkaan iyo siduu ugu mannaystay karaamayntiisa markuu agoonka ahaa iyo lunsanaantiisa iyo siduu intaasba naxariistiisa uga badbaadiyay. Aayadaha sagaal ilaa toban wuxuu Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku leeyahay: "Ha noqonin jabbaar iyo mid kibra oo isla wayn, hana ahaanin mid addoommada Ilaahay oo taagta daran ku qalbi adag". Aayadda kow iyo tobnaadna macneheedu waa sidatan: "Ee sheeg oo ka warran waxa nicmo iyo karaamo iyo Nabinnimo ee Ilaahay ku siiyey: xus, dadkana ugu yeer." Markaasuu Rasuulka Ilaahau, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sheegi jiray nicmooyinka uu Ilaahay korkiisa yeelay. Nabinnimadana wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, si sir ah ugu sheegi jiray intuu isku hallaynayo oo dadkiisa ka mid ah. Al Bukhaariina wuxuu Jundub bin Sufyaan ka wariyay in "Markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Waxyigu dib uga joogsaday in muddo ah, uu xanuunsaday, oo uusan labo ama saddex habeen soo kicin. Markaasey haweeney waxay tiri: "Anigu waxaan rajaynayaa inuu shaydaankaagii kaa tegey". Markaasuu Ilaahay Tacaalaa Suuratu Al Duxaa soo dejiyay." Waana Xadiithka afar kun iyo sagaal boqol iyo konton ee Al Bukhaarii. Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Mudada uu Waxyigu ka joogsaday waxay ahayd saddex sano, siday u sugeen ibnu Isxaaq iyo kitaabka taariikhda ee Al Imaamu Axmad bin Xanbal, iyo Yacquub bin Sufyaan oo Al Shacbiyyi ka wariyay. Sidoo kale waxaa u wariyay ibnu Sacad iyo Al Bayhaqii."

Juzka Labaad

Kuwa ugu horreeyey oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, islaamka usoo jeediyay oo islaamay

Haweenta ugu horreysey oo Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam rumaysay

Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Qofka ugu horreeyey oo aamina Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo rumeeya waxay ahayd runlayda haweenka ee Khadiijah. Markaasey waxay u kacday oo ay xambaartay mashaqqooyinka ay xambaaraan kuwa runlowyaalka ab. Wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Khadiijah ku yiri, waana markuu buurta kasoo laabtay: "**Khashaytu calaa nafsii**", oo macneheedu yahay: "Naftaydaan u baqay". Markaasey waxay ku tiri: "Abshir! Bishaareyso, oo Wa Allaahi inuusan Ilaahay marna ku fadeexeyneyn ebedkaa." Markaasey waxay hadalkeedaas u daliilsatay sifooyinka iyo akhlaaqda iyo dhaqanka ee uu leeyahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo in qofka sifooyinkaas leh aan ebedkiis la fadeexeyneyn ee abshir oo bishaareyso, oo wa Allaahi inuusan Ilaahay ebedkiis ku fadeexeeyneyn, maxaa yeelay adigu **riximka**, oo ah qaraabada, ayaad xiriirisaa (xagga maalka, xagga u qumidda u adeeggooda, booqashadooda, salaamiddooda, iwm.), **runtaadna ku hadashaa** (oo weligiis been ma sheegin, lagumana tuhmin Nabinnimada horteed, siduu Abuu Sufyaan, oo markaas gaal cadawgiisa ah uu Boqorka Roomaanka Hirqal hortiis ugu qiray. Runlownimaduna waa sifooyinka ugu sharaf badan oo uu qofku yeesho), waxaadna **culayska ka qaaddaa** oo aad ka xambaartaa **kuwa taagta daran** (sida ciyaalka agoonta ah iyo kuwa sidoodaba u taagta daran. Muslim wuxuu ku daray inay tiri: "waxaad **dadkana siisaa** waxayan ghayrkaa ka heleyn), **martidana** cuntadaad inta samaysid siisaa iyo meeluu ku hoydaba, dadkana waxaad **ka taakulaysaa dhacdooyinka** ku yimaada." Al Azraqii wuxuu yiri: "Waxaa kaloo wariyay ibnu Isxaaq iyo Muusaa bin Cuqbah iyo Al Waaqidii iyo Al Umayyu iyo ghayrkoodba." Al Nawawii wuxuu yiri: "Jamaaco muxaqqaqiin ahna sidaas ayay yiraahdeen." Sidoo kale waxaa wariyay Al Thaclabii (waana imaamka iska leh kitaabka Tafsiirka Quraanka ee ay kasoo qaateen ibnu Kathiir, Al Baghawii iyo kuwa kaleba) iyo ibnu Cabdu Al Barru iyo Al Suhaylii, oo dhammaantood isku wada raacay. Ibnu Athiir-na wuxuu yiri: "Muslimiintu waxay isku raaceen inuusan nin iyo haween toona uusan ka hormarin, waa Khadiijee". Waa intaas warka Al Zarqaani, markuu kitaabka Al Qasdhalaanii sharxayo.

Abuu Bakr Al Siddiiqu waa ninka ugu horreeyey oo Ilaahay iyo Rasuulkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rumeeya

Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Ninka ugu horreeyey oo aaminay, runleyda ummadda kaddib, ummaddana islaamka ugu hormaray waa Abuu Bakar (Abuu Bakar waa koofaar, magaciisuna waa Cabdu Allaahi bin Cuthmaan bin Caamir bin Camr bin Kacb bin Sacd bin Taym bin Murrah. Muurah waa isla awoowaha lixaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo nasabkiisu wuxuu kula kulmaa kan Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, awoowaha lixaad). Markaasuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kabay oo uu ka caawinay u gargaaridda Diinta Ilaahay. Ibnu Cabbasna waxaa laga wariyay inuu Abuu Bakar yahay kan dadka ugu hor islaamay, wuxuuna xujjo ka dhigtay oo uu marag gashaday hadalka Xasaan bin Thaabit (oo ahaa gabayaaga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo isagoo

hortiisa taagan uu yiri, Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uusan ku beenin) oo yiri:

1. Ithaa tathakkarta shajwan min akhii thiqqatin
athkur akhaaka Abaa Bakrin bimaa facalaa.
2. Khayru al bariyyah atqaahaa wa acdalahaa
bacda Al Nabiyyi wa awfaahaa bimaa xamalaa
3. Wa al thaanii al taalii al maxmuudi mash-haduhu
wa awwali al naasi qidaman saddaqa al Rusulaa.

Tixaha macnohoodu waxaa weeye:

1. Haddaad hammi iyo calool xumo xusuusato, ahna wuxuu Abuu Bakar beerka u dhigay iyo siduu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxa loo geystay uga tiiraanyooday, xusuuso hadaba siduu saaxiib iyo walaal lagu kalsoon yahay uu saaxiibkiis daraadiis, oo ah siduu Abuu Bakar ugu dul qaatay oo uu u xambaaray mashaqqooyin jirka ah iyo kuwa qalbiga ahba, xusuuso waxa suuban oo uu Abuu Bakar falay .

2. Waana kan ummadda ugu khayr badan, Ilaahayna ugu cabsi badan, uguna caadilsan Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dabadiis. Waana midka ugu oofin badan cahdiga, oo ugu ilaalin badan wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Ca1ayhi Wasallam, ka xambaaray oo ah waxa san oo la is faro, xumaantana la iska reebo iyo u qumidda xuquuqda Ilaahay, ayadoo ay aadaabtay mudnayd loogu qumo.

3. Isaguna waa kan labaad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ghaaru Thawr kula jiray, isagoo raacsan, isagoo ku bixiyay maalkiisa, kana tegey ehelkiisa iyo maalkiisa iyo madaxtinnimadiisaba, intaasna uga tegey adeecidda Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo siduu u laaziamay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uuna naftiisa dadka uga ilaaliyay. Waaba ayaduu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Inna min amanna al nnaasa calayya fii suxbatihi wa maalihi Abuu Bakrin**", oo macneheedu yahay: "Kan dadka iigu gallad badan xagga saaxiibtinnimadiisa iyo maalkiisaba waa Abuu Bakar." Wuxuu kaloo Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Maa axadukum acthamu cindii yadan min Abii Bakrin: waasaanii hi nafsihi waa maalihi",** oo macneheedu yahay: "Axadkiinna kama wayna gacantuu Abuu Bakar ii geystay: wuxuu igu kabay naftiisa iyo maalkiisaba." Waxaa Xadiithka wariyay Al Dhabraanii. Wuxuu kaloo Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Inna acthama al nnaasa calaynaa munnan Abuu Bakr: zawwajanii ibnatahu wa waasaanii bi nafsihi",** macnheedu yahay: "Dadka waxaa noogu munno badan Abuu Bakar: wuxuu ii guuriyey gabadhiisa, wuxuuna igu kabay naftiisa." Waxaa wariyay ibnu Casaakir. Al Shacbiyyu wuxuu yiri: "Ilaahay wuu ku canaantay (oo eraygu waa cataba) dadka arliga deggan oo idil Aayaddaan intaan Abuu Bakar ka ahayn, waana Aayadda afartanaad ee Suuratu Tawbah." Aayaddaasi wax ay leedahay: **"Illaa tansuruuhu fa qad nasarahu Allaahu ith akhrajahu allathiina kafaruu thaaniya ithnayni ith humaa fii al ghaari ith yaquulu lisaaxibihi: "la a taxzan innaa Allaaha macanaa": fa anzala Allaahu sakiinatahu calayhi**(40)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Haddaydnaan u gargaarin (waa Nabigee, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) waxaa u gargaaray llaahay markay (dalkiisa Makkah) ka saareen kuwii gaaloobay, isagoo labo midkood ah markay godka ku jireen, markuu ku lahaa saaxiibkiis (Abuu Bakar): "Ha murugoonin oo Ilaahay ayaa nala jira". Markaasuu Ilaahay kusoo dejiyay (waa Abuu Bakar) xasilloonidiisa." Siduu ibnu Isxaaq yirina, Abuu Bakar wuxuu ahaa nin uu tolkiis oggolyahay, uuna jecel yahay oo sahlan, wuxuuna ahaa ninka Quraysh abtirsigeeda ugu badiya, uguna aqoon badan wanaaggooda iyo xumaantoodaba. Wuxuu ahaa nin taajir ah oo maal badan leh, lehna khuluq fiican, macruufkana fala. Ragga tolkiisna way u imaan jireen ayna oggolaan jireen cilmigiisa iyo ganacsigiisaba daraadood iyo

wanaagga la fariisashadiisa, tolkiisna dhexdooda wanaag iyo is jacayl ka dhaliya. Markaasuu ragga tolkiis ah oo uu ku kalsoon yahay diinta islaamka ugu yeeray, kana midka ahaa kuwa majliskiisa yimaada, kuna soo noqnoqda. Markaasaa u yeeridiisaas koox ayaga ka mid ihi ku islaameen, sidaan u arki doonno, inshaa'a Allaahu. Abuu Bakar waa kan ugu horreeya oo Rususha rumeeyey, oo markuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rumeeyey wuxuu rumeeyey dhammaantood. Waxaa wariyay gabaygaan aan soo xusnay Abuu Cumar bin Cabdu Al Barr iyo Al Dhabraanii oo Al Kabiiru ku wariyay. Waxaa inay sidaas tahay oo uu Abuu Bakar kan ugu horreeyey oo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rumeeyey yahay ku waafaqay isaguna ibnu Cabbaas iyo Al Xasan. Ibnu Isxaaq wuxuu wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Maa dacawtu axadan ilaa al islaami illaa kaanat cindahu kabwatun wa natharun wa taraddudun illaa maa kaana min Abii Bakra: maa cakama canhu xiina thakartu lahu."** Xadiithka macnihiisu waaa weeye: "Axadna islaamka uguma aanan yeerin ee waa illaa kan simbiririqda, dibna u joogsada oo fiiro ugu noqda oo hakada, intaan ka ahayn Abuu Bakar kanoo aan dib uga joogsan oo aan marna hakan ee horeba ka yeelay markaan u xusay oo aan ugu yeeray." Abu Bakr aabihiis Cuthmaan koofaartiisu waxay ahayd **Abuu Quxaafah**. Al Qixf, siduu Al Raazii u yiri waxaa la yiraahdaa lafta madaxa ugu sarreysa oo maskaxda daboosha; waxaa kaloo la yiraahda baaquli qori laga sameeyey oo namuunadda laftaas leh, waxaana la yiraahdaa oo kale waa la tegey, waa qaaday. Cuthmaan wuxuu ka yimid al cathami, oo ah inay laf jabto oo la kabo ayan kabiddaasna ku sinnin, oo ayana siman. Abuu Bakr Al siddiiq, Allaha raalli ka noqdee, wuxuu leeyahay siiro qiimo wayn leh, oo kutubbo laga allifay, ujeedadeyduna ma aha inaan halkaan siiradiisa kusoo guurinno, ee islaamiddiisa uun ayaan halkaan ku xuseynnaa. Siirada Nabi Muxammadna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Abuu Bakr waaba ku jiraa, sidaan u arki doonno, inshaa'a Allaahu.

Ragga u yeeridda Abuu Bakr Al Siddiqu ku islaamay

Markaasuu Abuu Bakr Al Siddiiq rag Quraysh ah islaamka ugu yeeray oo ay sidaas ku islaameen. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasaa ugu yeeriddaas Abuu Bakr islaamka waxaa ku islaamay, sida isoo gaartay:

(Kow) Cuthmaan bin Caffaan

Cuthmaan bin Caffaan bin Abii Al Caas bin Umayyah bin Cabdu Shams bin Cabdi Manaaf bin Qusayy bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy bin Ghaalib." Cuthmaan, sida Abuu Bakr, wuxuu ka mid yahay tobanka Jannada loogu bishaareeyey, iyo saabiqiinta, wuxuuna ka mid yahay ragga Baycatu Al Ridwaan, Badr, Uxud iyo Mashaahidda oo idil. Nasabkiisu wuxuu kan Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kula kulmaa Cabdu Manaaf, oo ah awoowihiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, saddexaad, isagaana tobaankasba Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, nasab ahaan uga dhow intaan Calii bin Abii Dhaalib ahayn oo oo ina adeerkiis laxmi ah ah, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Cuthmaan hooyadiis waa Arwaa ibnatu Kurayz bin Rabiicah bin Xabiib bin Cabdu Shams bin Cabdu Manaaf, oo ayaduna islaanatay. Arwaa hooyadeeda dhashayna waa Ummu Xakiim Al Baydaa' bintu Cabdu Al Mudhalib bin Haashim bin Cabdu Manaaf, eedada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ahna mataanta aabihiis Cabdu Allaahi. Kuniyada Cuthmaan waa Abaa Cabdu Allaahi oo ah wiil ay u dhashay Ruqayyah bintu Rasuuli Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ama Abaa Camr. Koofaartiisuna waa Thuu Al Nuurayni, midka labada nuur u saaxiibka ah, isagoo laba gabdhood ee Nabi Muxammad, Sallaa

Allaahu Calayhi Wasallam, guursaday, annaa la hayn nin isaga mooyee laba gabdhood oo uu Nabi dhalay guursaday. Cuthmaan waa ninka Rakcada Witirka Quraanka oo idil ku akhrin jiray oo ku khatimi jiray. Cuthmaan waa khaliifka saddexaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Allow raalli ka noqo Cuthmaan bin Caffaan.

(Labo) Al Zubayru ibnu Al Cawwaamu

Al Zubayru ibnu Al Cawwaamu bin Khuwaylid bin Asad bin Cabdu Al Cuzzaa bin Qusayy bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bun Lu' ayy. Al Zubayru wuxuu ka mid yahay tobanka Jannada loogu bishaareeyey, iyo saabiqiinta, iyo ragga Badr iyo Baycatu Al Ridwaan iyo Uxud iyo mashaahidda oo idil isagoo la socda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi WasalIam. Al Zubayru wuxuu nasabkiisu kula kuimaa midka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Qusayy bin Kilaab, oo ah awoowaha afaraad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Ummu Al Mu'miniina Khadiijah bintu Khuwaylid bin Asad waa eedadiis aabihiis la dhalatay. Al Zubayru hooyadiisa dhashayna waa Safiyyah bintu Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim bin Cabdi Manaaf, eedada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aabihiis Cabdu Allaahi la dhalatay. Koofaartiisuna waa Abaa Cabdu Allaahi.

(Saddex) Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf

Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf bin Cabdu Cawf bin Cabdu bin Al Xaarith bin Zuhrah bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy. Cabdu Al Raxmaan bin Cawf wuxuu ka mid yahay tobanka Jannada loogu bishaareeyey iyo saabiqiinta. Zamanka jaahiliyada magaciisu wuxuu ahaa Cabdu Camr, waxaa kaloo la yiri Cabdu Al Xaarith, waxaa kaloo la yiri Cabdu Al Kacbah, markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Cabdu Al Raxmaan u bixiyey. Kuniyadiisuna waa Abaa Muxammad. Wuxuu kaloo Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u bixiyey Al Saadiqu, runlowga, iyo Al Baarru, kan baarriga ah. Nasabkiisu wuxuu kan Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kula kulmaa Kilaab bin Murrah, oo ah awoowaha shanaad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Waxaana la yiraahdaa Al Qurashiyyi Ai Zuhriyyi, oo sidaasuu wuxuu ku yahay abtiga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo reer Banii Zuhrah ka dhashay. Cabdu Al Raxmaan bin Cawf hooyadiisa dhashay waa Al Shifaa'u bintu Cawfbin Cabdu Al Xaal'ith Al Zuhriyyah, oo islaantay, kaddibna haajirtay, waxayna ahayd umulisada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hooyadiis Aaminah ka umulisay. Allow raalli ka noqo Cabdu Al Raxmaan bin Cawf iyo hooyadiisba.

(Afar) Sacd bin Abii Waqqaas

Sacd bin Abii Waqqaas abii Waqqaas magaciisuna waa Maalik bin Uhayb bin Cabdi Manaaf bin Zuhrah bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu' ayy. Sacd waa abtiga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayadoo ay ilmo adeer laxmi ah yihiin Aaminah bintu Wahab bin Cabdi Manaaf bin Zuhrah bin Kilaab bin Kacb bin Lu'ayy, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hooyadiis. Nasabkiisu wuxuu kula kulmaa midka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Kilaab bin Murrah, oo ah awoowaha shanaad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Sacd iyo Cabdu Al Raxmaan bin Cawf wuxuu nasabkoodu ku kulmaa Zuhrah bin Kilaab. Sacd bin Abii Waqqaas, ayuu Al Daxxaak wariyay, ayaa wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: "RasuuIka Ilaahayow, anigu yaan ahay?" Markaasuu wuxuu ku yiri:

"Anta Sacd ibnu Maalik bin Wahb bin Cabdu Manaaf bin Zuhrah: man qaala ghayra thaalika fa calayhi lacnatu Allaahi", oo macneheedu yahay: "Adigu waxaad tahay Sacd bin Maalik bin Wahb bin Cabdu Manaaf bin Zuhrah, qofka waxaan sidaas ahayn yiraahdana korkiisa waxaa ah lacnadda Ilaahay." Sacd hooyadiis waa Xamnah bintu Abii Sufyaan bin Umayyah bin Cabdi Shams, oo Abuu Sufyaan bin Xarb ayaa abtigiis ah. Kuniyada Sacd waa Abaa Isxaaq. Allow raalli ka noqo Sacd b.Abii Waqqaas.

(Shan) Dhalxah bin Cubaydu Allaahi

Dhalxah bin Cubaydu Allaahi bin Cuthmaan bin Camr bin Kacb bin Sacd bin Taym bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy. Dhalxah wuxuu ka mid yahay tobanka Jannada loogu bishaareeyey iyo ragga Badr iyo Baycatu Al Ridwaan iyo Uxud iyo mashaahidda oo idil. Nasabkiisu wuxuu kula kulmaa nasabka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Murrah bin Kacb, oo ah awoowaha lixaad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Dhalxah waxaa la yiraahdaa Al Qurashiyyi Al Taymiyyi, o nasabkiisuna wuxuu midka Abuu Bakar kula kulmaa Kacb bin Sacd bin Taym. Dhalxah hooyadiis waa Al Sacbah bintu Cabdu Allaahi bin Cabaad bin Maalik bin Rabiicah Al Xadramii, walaasha la dhalatay Al Calaa'u bin Al Xadramii. Kuniyadiisu waa Abaa Muxammad, waxaana lagu koofaari jiray **Dhalxah Al Khayr** oo uu u bixiyey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Maalinta Uxud. Wuxduu kaloo Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u bixiyey **Dhalxah Al Fayyaad**, oo macneheedu yahay "Dhalxah kan deeqsiga ah" uuna u bixiyey maalinta duullaanka Thuu Al Cushayrah, iyo **Dhalxah Al Jawd** oo ah: "Dhalxah kan deeqsiga ah" uuna u bixiyey maalinta duullaanka Xunayn. Magac kalena Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu u bixiyey. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markay raaggaasu ugu yeeridiisa islaamka yeeleen, ayuu soo waday oo uu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u keenay. Markaasey islaameen, o ay Salaadana tukadeen. Sida isoo gaartayna, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu oran jiray: **"Maa dacawtu axadan ilaa al islaami illaa kaanat fiihi cindahu kabwatun, wa nathar wa taraddud, illaa maa kaana min Abii Bakrin bin Abii Quxaafah: maa cakama canhu xiina thakkartuhu lahu wa maa taraddada fiihi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Axadna islaamka uguma aanan yeerin ee waa illaa kan simbiririqda, dibna u joogsada oo fiiro ugu noqda oo hakada, intaan ka ahayn Abuu Bakar ina Abii Quxaafah: kanoo aan dib uga joogsan oo aan marna hakan ee horeba ka yeelay markaan u xusay oo aan ugu yeeray."

Islaamidda Calii bin Abii Dhaalib

Nasabka Calii bin Abii Dhaalib wuxuu kula kulmaa midka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Cabdu Al Mudh-dhalib, oo ah awoowaha koowaad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo labadooda aabe waa walaalo isku hooyo iyo isku aabe ah. Sidaasaa waxaa Calii loo yiraahdaa Al Qurayshiyyi Al Haashimiyyi. Calii hooyadiisna waa Faadhimah bintu Asad bin Haashim bin Cabdi Manaaf, ayadaana ah tii ugu horreysey oo Haashimiyad ah oo nin Haashimi ahna dhashay, wayna islaantay, ayna haajirtay waxayna ku dhimatay Al Madiinah Al Munawwarah, aaskeedana waxaa maamulay oo goob joog ka ahaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo khamiiskiisa intuu siibay u labbisay oo kafanta uga hoos mariyay oo jirkeeda uusan waxba ka xigin, uuna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qabrigeeda dhex seexday, kaddibna qabrigeeda korkiisa ayuu salaadda janaazada kula dul tukaday. Markaas kaddibna wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"Albastuhaa litalbisa min thiyaabi ahli al jannati, wa adjactu macahaa fii qabrihaa li ukhaffifa canhaa min daghdati al qabri. Innahaa kaanat axsana khalqi Allaahi saniican ilayya bacda Abii Dhaalibin." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaan u labbisay si ay u labbisato dharka ehelu jannada, waxaanna ula seexday qabrigeeda si aan culayska iyo ciriiriga qabriga uga khafiifiyo. Ayadu waxay ahayd tan khalqiga Ilaahay iigu samafalid fiican Abii Dhaalib dabadiis." Kaddibna wuu ooyay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna yiri: **"Jazaaka Allaahu min ummi khayran, fa laqad kunti khayra ummin**", oo macneheedu yahay: "Allaha kaaga abaal mariyo waxa ugu khayr badan oo hooyo lagu abaal mariyo, adiguna waxaa hubaal ah inaad ahayd hooyada ugu khaur badan." Ayadaa hooyo u ahayd oo soo korisay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu awoowihiis dhintay oo uu adeerkiis Abuu Dhaalib kafaalo qaaday. Waxaa Xadiithkaanna wariyay Al Muxibbu Al Dhabarii kuna waraiyay Al Riyaadu, kitaabka uu ka qoray manaaqibta tobanka jannada loogu bishaareeyey. Faadhimah waxay kaloo Abuu Dhaalib u dhashay Dhaalib iyo Caqiil oo toban sano ka yar iyo Jacfar oo Caqiil labaatan sano ka yar iyo Calii oo Jacfar toban sano ka yar, iyo Ummu Haani' oo magaceedu yahay Faakhitah iyo gabar labaad oo la yiraahdo Jumaanah. Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Calii u bixiyey **Siddiiq,** runlow ah, iyo **Abii Al Rayxaanatayni,** oo ah aabaha labada reexaan oo kala ah Al Xasan iyo Xusayn, iyo **Abaa Turaab.** Kuniyadiisuna waxay ahayd **Abaa Al Xasan.** Calii bin Abii Dhaalib bin Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim bin Cabdu Manaaf, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ahaa wiilka ugu horreeyey oo islaama, wuxuuna markaas yahay toban jir, wuxuuna ku noolaa guriga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo qoyskiisuu ka mid ahaa. Inay sidaas tahay, ayuu Al Zarqaanii yiri, waxaa u daliil ah inuu Mucaawiyah usoo dhigay warqad Calii bin Abii Dhaalib, uuna yiri: "Al Xasan aabihiisow! Anigu waxaan leeyahay fadaa'il (oo ah deeqo aan dadka intiisa kale dheerahay), o anigu waxaan ahay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, seedigiis, (oo walaashiis waa Ummu Al Mu'miniina Ummu Xabiibah Ramlah bintu Abii Sufyaan bin Xarb haweenta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) iyo kaatibkiisa (oo wuxuu ahaa mid ka mid ah ragga Waxyiga dhiga)." Markaasuu Calii bin Abii Dhaalib wuxuu yiri: "Wa Allaahi inaanan u dhigayn (jawaab ahaan) waxaan gabay ahayn, wuxuuna u dhigay oo uu yiri:

1. Muxammadun Al Nabiyyu akhii wa sihrii
wa Xamzah Sayyidu Al Shuhadaa'i cammii.
2. Wa Jacfaru allathii yadxaa wa yamsii
yadhiiru maca Al Malaa' ikati ibnu ummii.
3. Wa bintu Muxammadin saknii wa cursii
mashuubu laxmuhaa bi damii wa laxmii.
4. Wa sibdhaa Axmadi ibnayya minhaa
fa man minkum lahu sahmun ka sahmii.
5. Sabaqtukum ilaa al islaami dhuran
saghiiran maa balaghtu awaana xulmii.

Tixahaas macnohoosu waxaa weeye:

1. Nabi Muxammad waa walaalkay iyo soddoggay
Xamzana, hoggaamiyaha shahiidiintu, waa adeerkey.
2. Jacfarka ku waabariista kuna hoyda (Jannada)
isagoo malaa'igta la duulaya waa ina hooyaday.
3. Gabadha Muxammadna waa hoygeyga iyo aroosaddeyda hilibkeedu wuxuu ku darsamay dhiiggeyga iyo hilibkeyga.
4. Axmadna labadiisa Sibdhi waa labadeyda wiil oo ayadu ii dhashay
marka kiinneebaa leh sad la mid ah sadkayga?
5. Islaamkaan waan idiinka wada hormaray

anigoo yar oo aan wali qaan gaarin.
Ibnu Isxaaq iyo ghayrkiisba waxay wariyeen Xadiithka Abii Raafic oo macnihiisu yahay: "Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu tukaday bilowga maalinta isniinta, Khadiijana waxay tukatay dhammaadkeeda, Calina wuxuu tukaday maalinta (taas ku xigtay oo) talaadada ah." Waxaa kaloo wariyay Al Dhabraanii. Al Xaakimna wuxuu Al Mustadrak ku yiri: "Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa Nabi laga dhigay maalin isniin ah, Calina wuxuu islaamay maalinta talaado." Ibnu Isxaaq wuxuu yid: "Laboodka ugu horreeya oo dadka ka mid ah oo Rasuulka Ilaahay rumeeyey, lana tukaday, rumeeyeyna wuxuu xagga Ilaahay Tacaalaa ka keenay waa Calii bin Abii Dhaalib bin Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim bin Cabdu Manaaf, raallinnimada iyo nabadgelyada Ilaahay korkiisa ha ahaatee, isagoo maalintaas toban sano jira. Nicmooyinka uu Ilaahay Calii bin Abii Dhaalib, Allaha raalli ka noqdee, ku mannaystay waxaa ka mid ahaa inuu islaamka hortiisba qoyska Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka mid ahaa, oo uu gurigiisa ku noolaa."

Siduu Calii Qoyska Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uga mid noqday

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Nicmooyinka uu Ilaahay Calii bin Abii Dhaalib ku mannaystay waxaa ka mid ahaa iyo wuxuu Ilaahay u suubiyayba iyo wuxuu khayr la doonay, inay Quraysh abaar xoog leh haleeshay, Abuu Dhaalibna wuxuu lahaa caruur fara badan. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu adeerkiis Al Cabbaas, Allaha raalli ka noqdee, oo ka mid ahaa ragga reer Banii Haashim ugu hodansan, ku yiri: **"Yaa Cabbaas, inna akhaaka Abaa Dhaalib kathiiru al ciyaali, wa qad asaaba al nnaasa maa taraa min haathihi al azmati. Fa indhaliq binaa ilayhi falnukhaffif canhu min ciyaalihi: aakhuthu min baniihi rajulan, wa ta'khuthu anta rajulan, fa nakiluhumaa canhu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Cabbaasow, walaalkaa Abaa Dhaalib waa ciyaal badan yahay, dadkana waxaa haleeshay waxaan aad u jeeddo oo abaartaan ah. Marka ina keen aan u tagnee, oo aan ciyaalka ka fududeynno: aniguna waxaan wiilashiisa ka qaadanayaa nin, adiguna nin ka qaado, oo aan sidaas uga kafaalo qaadno, ugana filnaanno." Markaasuu Al Cabbaas wuxuu yiri: "Waa yahay." Markaasey wada dhaqaaqeen oo ay Abuu Dhaalib u wada yimaadeen, waxayna ku yiraahdeen: "Annagu waxaan dooneynnaa inaan ciyaalka kaa khafiifinno ilaa goortay dadka ka faydmeyso waxaan ay ku sugan yihiin (abaarta)." Markaasuu wuxuu Abuu Dhaalib labadooda ku yiri: "Haddaad Caqiil ii dhaaftaan waxaad doontaan fala." Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waxaa la yiraahdaa inuu yiri: "Caqiil iyo Dhaalib (haddaad ii dhaaftaan) waxaad doontaan fala." Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Calii qaatay oo uu qoyskiisa ku biiriyey. Cabbasna wuxuu qaatay Jacfar oo uu qoyskiisa ku biiriyey. Sidaas ayuu Calii Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ula joogay ilaa uu Tabaaraka wa Tacaalaa kasoo diray isagoo Nabi ah. Markaasuu Calii raacay, Allaha raalli ka noqdee, oo uu aaminay oo uu rumeeyey. Jacfarna wuxuu ka tirsanaa qoyska Cabbaas ilaa uu ka islaamay, oo uu ka kaaftoomay." Al Suhaylii wuxuu yiri: "Calii wuxuu Jacfar ka yaraa toban sano, Jacfarna wuxuu Caqiil ka yaraa toban sano, Caqiilna wuxuu Dhaalib ka yaraa toban sano. Dhammaantoodna way islaameen intaan Dhaalib ka ahayn, oo aan islaamiddiisa la ogayn. Calii hooyadiisa dhashayna waa Faadhimah bintu Asad bin Haashim, wayna islaamtay, waana mid ka mid ah Faadumooyinka uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu Calii, Allaha raalli ka noqdee, uga yiri: **"Aqsimhu bayna Al Fawaadhimi al thalaathi",** oo macneheedu yahay: "U kala qaybi saddexda Faadumo." Waxa loo qaybinayana waa dhar xariir ah". Al Qutaybiyyu wuxuu yiri: "Waxaa weeye

Faadhimah bintu Rasuuli Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Faadhimah bintu Asad, tan saddexaadna ma aqaanno." Cabdu Al Ghanii bin Saciid wuxuu wariyay: **"Aqsimhu bayna Al Fawaadhimi al arbaci",** O macneheedu yahay: "U kala qaybi afarta Faadumo", wuxuuna ku daray labadaas Faadumo oo hore Faadhimah bintu Xamzah, wuxuuna yiri: "Ma ogi midda afaraad." Wuxuuna ku wariyay kitaabka Al Ghawaamidi wa Al Mubhamaati."Waa intaas warka Al Suhaylii.

Abuu Dhaalib oo islaamidda Calii ogaanaya

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Culummadu waxay wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markay salaaddu soo gasho uu buuraha Makkah aadi jiray, waxaana raacay Calii bin Abii Dhaalib oo aabihiis Abuu Dhaalib ka dhuumanaya, o iska qarinaya, iyo dhammaan adeerradiis iyo tolkiisa intooda kale oo idil. Markaasey labadoodu halkaas ku tukadaan. Markaasey markuu habeenku soo galo dib usoo laabtaan. Sidaas ayay ku sugnaadeen intuu Ilaahay doono inay ku sugnaadaan. Kaddib maalin ayuu Abuu Dhaalib wuxuu arkay labadooda oo tukanaya. Markaasuu wuxuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: "Wiilka walaalkeeyow! Maxay tahay diintaan aan arkayo inaad ka diin yeelaneyso?" Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Ay camm, haathaa Diinu Allaahi wa Diinu Malaa'ikatihi, wa Diinu Rusulihi, wa Diinu abiinaa Ibraahiima. Bacathani Allahu bihi Rasuulan ilaa al cibaadi, wa anta, ay camm, axaqqu man bathaltu lahu al nasiixata, wa dacawtuhu ilaa al hudaa, wa axaqqu man ajaabanii ilayhi wa acaananii calayhi",** oo macneheedu yahay: "Adeerkeeyow, kani waa Diinta llaahay iyo Diinta Malaa'igtiisa iyo Diinta Rusushiisa iyo Diinta aabeheen Ibraahiim. Ilaahay wuxuu Rasuul ahaan iigu soo diray addoommadiisa, adiguna, adeerow, waxaad tahay midka ugu xaq badan inaan xoog geliyo u naseexeyntaada iyo waanintaada, aanna hannunka ugu yeero, adiguna waxaad tahay kan ugu xaq badan inuu iga yeelo, iguna caawino." Ama siduu yiriba Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu Abuu Dhaalib wuxuu yiri: "Wiilka walaalkeeyow, anigu ma karo inaan ka baxo oo aan ka tago diinta aabayaalkey iyo waxay ku taagnaayeen, laakiin wa Allaahi inuusan kusoo gaareyn waxaad kahato intaan noolahay." Waxaa la wariyay inuu Abuu Dhaalib wiilkiisa Calii ku yiri: "Maandhow, maxay tahay Diintaan aad ku taagan tahay?" Markaasuu wuxuu yiri: "Aabow, waxaan rumeeyey Ilaahay iyo Rasuulka Ilaahay (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam), waxaanna rumeeyey wuxuu la yimid, waana la tukaday Salaadda, waana raacay." Waxaa la yiraahdaa inuu markaas aabihiis ku yiri: "Waxaa hubaal ah inuusan (Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) kuugu yeerin waxaan khayr ahayn ee laazim oo ku laammaansanow."

Calii waan ku riyooday

Sanadka kun iyo afar boqol iyo afar iyo labaatan Hijriga ayaan waxaan habeen anigoo hurda ku riyooday sidatan. Waxaa lagu jiraa dagaal guud oo la isaga soo horjeedo muslin iyo gaalo, aniguna waxaan ku suganahay safka ugu horreeya oo ay labada ciidan isaga soo horjeedaan, waxaanna ku dhex jiraa teendho ama taambuug wayn oo dad badan qaadda. Teendhooyin badan ayaana hareereheeda ah. Meeshuu waa meel buuraaley ah oo bartaas ay teendhooyinku ku yaalliin waxaa agteeda ah dooxo buurahaas dhexdooda ah, teendhaduna waxay u dhowdahay qarka ku foorara dooxadaas. Marka qarkaas la taagan yahay dhinaca buurtu waa taagan yahay oo salkeedaba looma jeedo loomana degan karo oo qofkii qarkaas ka dhaca waxaa hubaal ah inuu halaagmayo. Dooxadaas oo wareegsan meel keli ah oo laga soo galo ma laha, oo buurahaas dhaadheer ayaa ku wareegsan. Anigoo teendhada dhexdeeda fadhiya ayaa

waxaa isoo dul istaagay Calii bin Abii Dhaalib iyo Faadhimah bintu Rasuuli Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo caruurtooda Al Xasan, Al Xusayn iyo Zaynab iyo Ummu Kulthuum. Markaasuu Calii salaan gacantiisa iigu soo fidiyay. Markaasaan waxaa u arkay inayan ahayn inaan gacanta u dhiibo oo aan salaamo aniguu fadhiya, ee ay tahay inaan u istaago. Markaasaan u hawl galay sidaan u istaagi lahaa, anigoo marka hore jilbaha dhulka dhigay kaddibna is uruuriyay oo istaagay. Intaan hawshaas ku jiray, oo waqti iga qaadatay, Calii wuxuu u tegey rag kale oo teendhada dhexdeeda taagtaagaan, xigana xagga qarka buurta oo uu salaamay oo gacan qaaday. Intaanan wali istaagin ayay Faadhimah, Sallaa Allaahu Calayhaa Wasallam, gacanta salaan iigu soo fidisay oo aan gacan qaaday oo aan salaamay, ay caruurteeduna mid mid gacanta ii soo fidiyeen oo aan mid walba gacan qaaday oo aan salaamay. Al Xasan wuxuu ii soo taagay gacantiisa bidix, oo isagu wuu gurranaa, aniguna midigteyda ayaan ku salaamay. Markaan istaagay Calii wuu noo soo noqday, gacantiisuuna mar kale salaan iigu soo fidiyo, aniguna aan salaamay oo gacan qaaday una sheegay inaanan dooneyn inaan salaamo anigoo fadhiya, ayse tahay inaan u istaago oo u sare joogsado. Salaan kaddib wuxuu igu yiri: "Gabar ayaan idinka soo doonnay, wayna na diidday." Aniguna waxaan ku iri: "Gabari idinma diido karto, annagaana la hadleynna." In yar kaddibna waan kusoo noqday oo aan u sheegay inay gabdhu yeeshay inay ninkii doonayey guursato." Kaddib Calii wuu i waday isagoo ii sheegay inuu doonayo inuu gurigiisa isoo tuso. Buurta qarkeeda ayaa waxaa ka baxda dhuun qori sulub ah ka samaysan dhumucdeeduna qof dhudhunkiis le'egtahay oo intay hawada marto dooxadaas hoosteeda ah dul mareysa oo ku fidsan. Markay bartamaha dooxada tagto ayay dooxada lafteeda hoos ugu deganeysa, waxayna geleysaa qasri keligiis halkaas ku yaalla oo darbi dheer oo weyni ku wareegsan yahay, buur yarna ka kor dhisan, wabina ku hareereysan yahay salka buurtaas yar. Gurigaas si kale oo in dhuuntas la raaco mooyee laguma tegi karo, oo dariiq tagaa ma jiro, in samada kore looga yimaado mooyee. Qasrigaas, oo qalcad oo kale ah, marka korka laga arko waxaad moodda inuu shamiinto iyo bir la shubay ka sameysan yahay, oo midabka boorka ah ee shamiinta inuu leeyahay ayaad mooddaa, markaan dhexdiisa galayna waxaan arkay inuu ka sameysan yahay marmar guduudan iyo wax qurux miiran ah oo sulub ah oo midabyo isku dhow leh, oo darbiyada iyo dhulkaba sida muraayad aad nadiif u ah oo sida muraayad oo kale u dhalaalaya. Markaan dhex galnay Calii wuxuu igu yiri: "Waa kan gurigeygu, cid aanan anigu halkaas soo marinna oo ananan anigu keeninna sooma geli karo, si kalena laguma soo geli karo." Riyadaasuna intaasey ku egtahay, wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina wa Sallaa Allaahu Calaa Sayyidinaa wa Mawlaana Muxammadin wa calaa Aalihi wa Saxbihi wa Sallam tasliiman kathiiran.

Xog ogaalnimada dadka dhintay

Waxaa riyadaas ka cad inay dadka dhintay, goor kasta ha dhinteene, ay ka war hayaan waxay dadkooda ay adduunkaan uga tageen ay ku nool yihiin, sida Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, looga wariyay inuu yiri: **"Inna acmaalukum tucradu calaa cashaa'irikum wa aqaaribikum mina al mawtaa, fa in kaana khayran istabshiruu wa in kaana ghayra thaalika qaaluu: "Allaahumma laa tamithum xattaa tahdiyahum limaa hadaytanaa,"** oo macneheedu yahay: "Acmaashiinna waxaa loo bandhigaa oo la tusaa cashiiradiinna, oo ah tolkiin iyo qaraabadiinna dhintay, marka hadday acmaashaasuu kuwa khayr ah yihiin way ku bishaareystaan, hadday si kale yihiinna waxay yiraahdaan: "Ilaahayow, ha dilin jeer aad u hanuuniso waxaad annagana nagu hanuunisay." Xadiithkana waxaa Al Tathkirah ku wariyay Al Qurdhibii, waxaana wariyay Axmad iyo Abuu Daauud. Al Qurdhubii wuxuu kaloo Axmad iyo ghayrkiisba ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu

Calayhi Wasallarn, yiri: **"Tucradu al acmaalu yawma al ithnayni wa yawma al khamiisi calaa Allaahi, wa tucradu calaa Al Anbiyaa'i wa calaa al aabaa'i wa al ummahaati yawma al jumucati, fa yafraxuuna bi xasanaatihim wa tazdaadu wujuuhuhum bayaadan wa tashraqu. Fa ittaquu Allaaha cibaada Allaahi la tu'thuu mawtaakum bi acmaalikum."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Acmaasha waxaa loo bandhigaa maalinta isniinta ah iyo maalinta khamiista ah Ilaahay, waxaana loo bandhigaa Anbiyada iyo aabayaalka iyo hooyooyinka maalinta jimcaha ah. Markaasey acmaashooda suuban ku farxayaan oo ay wajiyadoodu caddaani u kordheysaa iyo dhalaal iyo iftiin. Marka, ka dhawrsada Ilaahay, addoommada Ilaahayow, oo kuwiinna dhintay ha ku dhibina acmaashiinna." Riyadaasi intaase ahayd, waana nicmo uu Ilaahay igu galladaystay, waxanna leeyahay wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina wa Sallaa Allaahu Calaa Sayyidinaa wa Mawlaana Muxammadin wa calaa Aalihi wa Saxbihi wa Sallam Tasliiman kathiiran.

Qisada Shariifka iyo aabahay Qaalli Sheekh Xuseen Cismaan

Fasirka hadalkaas uu Calii igu yiri waxaan u arkay inaad tahay qisadaan soo socota, oo aniga aabahay iyo nin ashraaf ah dhex martay. Intaanan anigu dhalan ka hor ayuu aabahay, Allaha u naxariistee, wuxuu qaalli ka noqday degmada Gaalkacyo ee Gobolka Mudug. Markaasaa waxaa gabar uu dhalay, oo anigana walaashay ah, magaceeduna ahaa Faadumo Sheekh Xuseen Cismaan, Allaha u naxariistee, kasoo doonay nin shariif ah. Markaasuu isaguna siiyey, gabadhuna ay oggolaatay inay ninkaas guursato markuu aabeheed weydiiyay. Markaasaa waxaa habeen madaxdii degmada iyo gobolku iyo dad badani isugu yimaadeen nikaaxii gabadhaas shariifka loogu mehrin lahaa. Markaasaa waxaa gabadha loo diray cid walaayada kasoo qaadda. Qofkii loo diray wuxuu kusoo laabtay gogoshii la fadhiyey wuxuuna dadka u sheegay inay gabadhu diiday inay ninkaas guursato. Markaasay dad badani isaga daba noqdeen, ayaduna ay diiday in shariifkaas loo guuriyo. Sidaas ayaa habeenkaas lagu kala tegey. Kaadib aabahay wuxuu baaray sababtay Faadhumo shariifka ku diiday, kaddib markay isaga u sheegtay markii horeba inay guurkiisa raalli ku tahay. Wuxuu Sheekh Xuseen Cismaan ogaaday inay haweeni gabadha shariifka ku direen, ayna ka dhaadhiciyeen inayan guursan. Markuu taas hubsaday ayuu odagu haween inta maal siiyey wuxuu kula dardaarmay inay ka dhaadhiciyaan Faadumo inay shariifka guursato. Sidaas ayayna noqotay. Habeen kale ayaa hadan nikaaxa shariifka iyo Faadumo la isugu yimid, oo markaan la isu guuriyey. Shariifku intuusan Faadumo la aqal gelin, isago guur u qalab aruursanaya oo suuqa Gaalkacyo dhexdiisa jooga doonayana inuu sariir iyo qalab kale gato ayaa xabbad lagu dhejiyay oo la dilay. Sidaas ayay Faadumo asay ku qaaday. Qisadaas ayaan hore u ogaa, marka markaan subixii dambe hurdada kasoo kacay taas ayaan warka Calii, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, ku fasirtay. Waxaana halkaas ka cad inay asharaaftu run ahaantii dhasha Calii yihiin. Calii iyo markay qisada aabahay iyo walaashay iyo shariifku dhacaysana waxaa u dhexeysey qiyaas kun iyo afar boqol oo sano. Marka ha la iska ilaaliyo in qoyska Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay kahdaan loo geysto, Allaha naga ilaaliyee. Faadumo waxay guursatay, kaddib, Xaaji Xuseen Aadan Macallin oo Looboge ah, oo ay u dhashay Shamsu Al Diini Xaaji Xuseen Aaadan Macallin, oo aan abti u ahay, ayaduna waxay dhimatay mar hore.

Islaamidda Zayd bin Xaarithah

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Kaddib waxaa islaamay Zayd bin Xaarithah bin Shuraxbiil bin Kacb bin Cabdu Al Cuzzaa bin Imri'iu Al Qays bin Al Nucmaanu bin Caamir bin

Cabdu Al Wudd bin Cawf bin Kinaanah bin Bakr bin Cawf bin Cuthrah bin Zayd Allaati bin Rufaydah bin Thawr bin Kalb bin Wabarah. Waxaana dhacday inuu Xakiim bin Xizaam bin Khuwaylid uu Shaam kasoo laabtay isagoo addoommo wata (oo uu arligaas kasoo gatay), uuna ka mid yahay Zayd bin Xaarithah oo addoon ahaa. Markaasaa waxaa Xakiim bin Xizaam bin Khuwaylid gurigiisa ugu timid eedadiis (aabihiis la dhalatay) Khadiijah bintu Khuwaylid, ayadoo markaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u dhaxda. Markaasuu wuxuu ku yiri: "Ka dhexdooro eedey midkaad addoommadaas ka dooneysid ee qaado adigaa iska lehe." Markaasey waxay dooratay Zayd oo ay qaadatay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku arkay isagoo agteeda jooga, markaasuu weydiistay inay u hibeyso, ayaduna sidaas ayay yeeshay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xoreeyey oo uu kaba wiil yeeshay, taasoo ahayd ka hor intaan loo waxyoon (oo uusan Nabi Mursal ah noqon)." Al Suhaylii wuxuu yiri: "Wabarah waa ibnu Thaclabah bin Xulwaan bin Al Xaafi bin Qudaacah. Zayd hooyadiisna waa Sudaa bintu Thaclabah (bin Cabdu Caamir) una dhalatay reer Banii Maciin oo ka mid ah qabiilka Dhayyi'. Zayd hooyadiis ayaa ka waday beeshey degganaayeen si ay ayada ehelkeeda, oo ah isaga reer abtigiis, usoo booqato oo ay usoo tusto. Ayadoo degmadaas ku sugan ayaa waxaa soo weeraray fardooley reer Banii Al Qayni bin Jisr u dhashay, oo Zayd qafaashay. Markaasey waxay ku gateen suuqa la yiraahdo Xubaasha, o aswaaqda Carabta ka mid ahaa. Markaas Zayd wuxuu jiraa sideed sano." Waa intaas warka Al Suhaylii. Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Zayd aabihiis Xaarithah si xoog leh ayuu u walwalay una calool xumaaday, wuuna booyay markuu wiilkiisa waayey, wuxuuna yiri:

1. Bakaytu calaa Zaydin wa lam adri maa facal
axayyun, fa yurjaa am ataa duunahu al ajal.
2. Fa wa Allaahi maa adrii, wa inni la saa'ilun
aghaalaka bacdii al ssahlu, am ghaalaka al jabal.
3. Wa yaa layta shicrii hal laka al dahra awbatun
Fa xasbii mina al dunyaa rujuucuka lii bajal.
4. Tuthakkiruniihi al shamsu cinda dhuluucihaa
wa tacridu thikraahuu itha gharbuhaa afal.
5. Wa in habbat al arwaaxu hayyajna thikrahu
fa yaa dhuula maa xuznii calayhi wa maa wajal.
6. Sa ucmilu nassa al ciisi fii al ardi jaahidan
wa laa as'amu al tadhwaafa aw tas'amu al ibil
7. Xayaatiya aw ta'tii calayya maniyyatii
fa kullu imri'in faanin, wa in ghaarahu al amalu.
8. Sa uusii bihi Qaysan wa Camran kilayhimaa
wa uusii Yaziid thumma uusii bihi Jabala.

Tixaha macnohoodu waxaa weeye:

1. Zayd waan ku dool booyay, mana ogsooni waxa dhacay/inuu noolyahay oo araggiisa aan rajeeyo iyo inay ajashiisu gashay oo uu dhintay.
2. Oo wa Allaahi inaanan ogsooneyn in kastoo aan wax badan ka wareystay/inuu gadaashay isagoo mayd ah yaallo bananka ama buuraha.
3. Maan ogaado inaad waligaa soo noqon doontid/adduunkana waxaa iiga filanba inaad ii soo noqotid.
4. Markay qorraxdu soo baxdo isagay i xusuusinaysaa/Qorraxdhacuna waxay soo celineysaa xusuustiisa.
5. Markay dabaysho kacdo xusuustiisey kicineysaa/waxaa dheeraaday intaan u murugsanahay una cabsanayo.
6. Waxaan xoog ugu fuulayaa awrta ugu fiican oo arligaan ka raadinayaa/kana daali

mayo baadigoobkiisa awrtuba ha daashee.
7. Intaan noolahay oo idil ilaa ay geeridu iiga timaaddo/ayadoo uu qof kasta dhimanayo, inkastoo yididiiladu ragga dagto.
8. Waxaan kala dardaarmayaa Qays iyo Camr labadoodaba/Waxaanna kala dardaarmayaa Yaziid kaddibna Jabal.
Tixda sideedaad waxaa wariyay Al Suhaylii oo yiri: "Yaziid bin Kacb (bin Sharaaxiil) waa Zayd ina adeerkiis ayna isku hooyo yihiin. Jabalna waa Jabal bin Xaarithah, o ah Zayd walaalkiis, kana da'waynaa. Jabalah ayaa la weydiiyey: "Kiinnee weyn: ma adiga mase Zayd?" Markaasuu yiri: "Zayd ayaa aniga iga wayn, aniguna hortiis ayaan dhashay", uuna ka wado isagaa iga fadli badan oo islaamka iiga horreeyey."

Al Saabiquuna: kuwa islaamka ku hormaray oo Quraanka ku xusan

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Sideed nini waa kuwa dadka islaamka uga hormaray, oo Salaadda tukaday, oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rumeeyey wuxuu xagga Ilaahay ka keenay." Sideedaasi waa: (Kow) Abuu Bakr Al Siddiiqu. (Labo) Cuthmaan bin Caffaan. (Saddex) Calii bin Abii Dhaalib. (Afar) Al Zzubayru ibnu Al Cawwaam. (Shan) Sacd bin Abii Waqqaas. (Lix) Dhalxah bin Cubaydu Allaahi. (Toddoba) Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf. (Sdeed) Zayd bin Xaarithah. Kuwaas islaamka ku hormaray Quraanka kasoo degay waxaa ka mid ah Aayadaha toban, kow iyo toban iyo kuwa ka dameeya ee Suuratu Al Waaqicah.

Kuwa kaddib islaamay

lbnu lsxaaq wuxuu yiri: "Kaddib waxaa islaamay:

Kow. Abuu Cubaydah Caamir bin Cabdu Allaahi Al Jarraax

Abuu Cubaydah, oo magaciisu yahay Caamir bin Cabdu Allaahi Al Jarraax bin Hilaal bin Uhaybi bin Dabbah bin Al Xaarith bin Fihr. Abuu Cubaydah wuxuu ka mid yahay tobanka Jannada loogu bishaareeye, iyo ragga Badr, oo maalintaas aabihiis oo gaal ah oo rag muslimiin ah dilay ayuu isaguna dilay. Nasabkiisu wuxuu midka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kula kulmaa Fihr bin Maalik, oo ah awoowaha tobnaad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Sidaas ayaa waxaa lo yiraahdaa Al Qurashiyyi Al Fihriyyi. Hooyadiisna waxay u dhalatay reer Banii Al Xaarith bin Fihr, wayna islaantay. Nabigaa, Sallaa Allaahu CaIayhi Wasallam, wuxuu ku magacaabay **"Amiinu haathihi Al Ummah",** oo macneheedu yahay “Midka aaminay ee ummaddaan". Abuu Cubaydah wuxuu marka hore u haajiray arliga xabashada, kaddibna Al Madiinah Al Munawwarah. Wuxuu ka mid yahay ragga Baycatu Al Ridwaan, Uxud iyo mashaahidda oo idil iyo ragga uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka tegey isagoo raalli ka ah. Waxaa lagu oofsaday daacuunka Camwaas oo ka dhacay arliga Shaam sanadka sideed iyo tobnaad ee Hijrada, Qabrigiisuna wuxuu ku yaalla Urdun, aniguna waan dul istaagay, wa al xamdu li Allaahi.
(Labo) Abuu Salamah, oo magaciisu yahay Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Asad bin Hilaal bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum bin Yaqthah bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy.
(Saddex) Al Arqamu bin Abii Al Arqam, oo Abii Al Arqam magaciisu waa Cabdu Manaaf bin Asad - oo Asad waxaa lagu koofaari jiray Abaa Jundub- bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum bin Yaqthah bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy.
(Afar) Cuthmaan bin Mathcuun bin Xabiib bin Wahb bin Xuthayfah bin Jumax bin

Camr bin Husays bin Kacb bin Lu'ayy iyo labadiisa walaalood oo kala ah
(Shan) Qudaamah iyo **(Lix)** Cabdu Allaahi ilmo Mathcuun.
(toddoba) Cubaydah bin Xaarith bin Al Mudh-dhalib bin Cabdi Manaaf bin Qusayy bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy.
(Sideed) Saciid bin Zayd bin Camr bin Nufayl bin Cabdu Al Cuzzaa bin Cabdu Allaahi bin Qurdh bin Riyaaxi bin Razaax bin Cadiyyi bin Kacb bin Lu'ayy, hooyadiisna ay tahay Faadhimah bintu Bacjah bin Khalafin Al Khuzaaciyyah, iyo haweentiisa **(Sagaal)** Faadhimah bintu Al Khadh-dhaab bin Nufayl bin Cabdu Al Cuzzaa bin Cabdu Allaahi bin Qurdh bin Riyaaxi bin Razaax bin Cadiyyi bin Kacb bin Lu'ayy, ahna Cumar bin Al Khadh-dhaab walaashiisa la dhalatay.

Toban. Asmaa'u bintu Abii Bakr Al Siddiiq

Asmaa'u bintu Abii Bakr Al Siddiiqu iyo walaasheed Caa'ishah. Asmaa'u ibnatu Abii Bakrin Al Siddiiqi, oo ay Cabdu Allaahi bin Abii Bakr isku hooyo yihiin, waxayna caruur u dhashay Al Zubayru ibnu Al Cawwaam: Cabdu Allaahi **(**oo Amiiru Al Mu'miniin noqday boqorka Dawladda Islaamka intaan Shaam ahayn) iyo Al Munthar iyo Curwah (oo caalinka iyo Muftiga Masjidka Nabiga, Salalaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Al Madiinah noqday) iyo Caasim **(**oo ayan ciribi ka harin, noqdayna Guddoomiyaha dalka Ciraaq, oo waagaas gabol Dawladda Islaamka ka mid ah ahaa) iyo Al Muhaajira oo ayan isagana ciribi ka harin, iyo Khadiijah Al Kubraa iyo Ummu Xasan iyo Caa'ishah. Asmaa'u koofaarteedu waa **Thaata Al Nidhaaqayni**, ayadoo markuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo aabeheed ay godka ku jireen oo Hijrada ahayd uu Cabdu Allaahi bin Abii Bakr u keenay cunnaday dariiqa saad ahaan ugu qaadan lahaayeen oo ku jirta sufriyad. Markaasey dhex xirkeeda labo u kala dillaacisay oo ay jeexna sufriyada afkeeda ku xirtay si marka ratiga la saaro oo uu la soedo ayan cunnada ku jirta uga daadan, jeexa kalena dhexdeeda ayay ku xiratay, oo sidaasey maradii midka ahayd labo uga dhigtay oo labo nidhaaq ku yeelatay. Nidhaaqna waa marada aya haweenku dhexda ku xirtaan. Cabdu Allaahi iyo Asmaa'u hooyadood waxay ahayd Qaylah bintu Al Cuzzaa bin Cabdu Ascad bin Nasr ibnu Maalik bin Xusl bin Caamir bin Lu'ayy, ayadeyna kusoo degatay Aayadda sideedaad ee Suuratu Al Mumtaxinah. Aayaddaasi waxay leedahay: **"Laa yanhaakumu Allaahu cani allathiina lam yuqaatiluukum fii al Ddiini wa lam yukhrijuukum min diyaarikum an tabarruuhum wa tuqsidhuu ilayhim innaa Allaaha yuxibbu al muqsidhiina**(8)**Innamaa yanhaakumu Allaahu cani allathiina qaataluukum fii al Ddiini wa akhrajuukum mmin diyaarikum wa thaaharuu calaa ikhraajikum an tawallawhum wa man yatawallahum fauu'iaa'ika humu al th-thaalimuuna**(9)**."** Labadaas Aayadood macnohoodu waxaa weeye: "Ilaahay idinka reebi mayo kuwaan idinkula dagaallamin Diinta daraadeed inaad u sama fashaan, una caddaalad fashaan dalalkiinnana aan idinka soo saarin, maxaa yeelay Ilaahay wuu jecel yahay kuwaa cadaaladda fala(8)Ilaahay wuxuuse idinka reebayaa kuwa Diinta Islaamka daraadeed idinkula dagaallamay oo dalkiinna idinka soo saaray iyo kuwa gacan ku siiyey oo ugu gargaaray in dalkiinna la idinka soo saaro inaad gargaarayaal iyo sokeeye ka dhigataan oo aad xiriirisaan. Kuwa kuwaas sokeeye iyo gargaarayaal ka dhigtana waa daallimiin(9)." Aayaddaan xukunkeeda oo ah asaaska xiriirka muslimka iyo gaalada ila yawmul Qiyaamaha, sababtay kusoo degatay waxay ahayd sidatan, siduu Al Baghawii tafsiirkiisa Cabdu Allaahi bin Al Zubayr uga wariyay: "Waxay kusoo degatay Asmaa'u bintu Abii Bakr markay hooyadeed Qutaylah bintu Cabdu Al Cuzzaa ay Al Madiinah ugu timid (ayadoo Makkah kasoo safartay inay gabadheeda aragto), uguna keentay hadiyad ahaan jubnah oo ah caano la fariisiyey iyo subag iyo iqdh oo ah caano geel oo la garooriyey. Hoyadeedna markaas waa gaal. Markaasey Asmaa'u waxay hooyadeed

ku tiri: "Hadiyadaada kaa aqbali mayo, gurigeygana iigu soo geli meysid jeer aan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka ithan qaato." Markaasey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka ithan qaadatay inay hooyadeed hadiyadaha ka oggolaato, gurigeedana ay soo geliso. Markaasey Aayaddaani soo degatay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Asmaa'u amray inay hooyadeed gurigeeda soo geliso, hadiyadeedana ay aqbasho, ayna karaameeyso, una same fasho." Allow raalli ka noqo Asmaa'u bintu Abii Bakr Al Siddiiq. Asmaa'u bin Abii Bakr Ai Siddiq, Allaha raalli ka noqdee, waa eedadey aabahay la dhalatay.

Kow iyo toban. Caa'ishah bintu Abii Bakr Al Siddiiqu

Ummu Al Mu'miniina Caa'ishah bintu Abii Bakr Al Siddiiq, haweenta Nabi Muxammad, Sallaa AlIaahu Calayhi Wasallam, waxay islaanatay ayadoo markaas gabar yar ah, siiradeedana meesheeda ayaan uga warrami doonnaa, inshaa'aAllaahu. Waxaa halkaan ku sheegeynnaa oo ayada faan iyo ammaan ugu filan inuu Al Muxibbu Al Dhabarii ku wariyay Al Riyaadu Al Nadirata iyo Al Sayuudhii oo Al Isaabatu ka wariyeen iyo ghayrkoodba Camr bin Al Caasii Al Sahmiyyi inuu yiri: "Waxaan iri: Rasuulka Ilaahayow, qofkeebaad dadka ugu jeceshahay?" Wuxuu yiri: "**Caa'ishah."** Ummu Al Mu'miniina Caa'ishah, Sallaa Allaahu CaIayhaa Wasallam, waa eedaday aabahay la dhalatay.

Laba iyo labaatan. Khabbaab bin Al Arat

Khabbaab bin Al Arat, oo reer Banuu Zuhrah xilfi la lahaa. lbnu Hishaamna wuxuu yiri: "Waa Khabaab bin Al Arat oo reer Banuu Tamiim u dhashay. Khuzaacah ayuu u dhashayna waa la yiri." Ibnu Al Athiir wuxuu Usudu Al Ghaabah ku yiri: "Wuxuu ka mid yahay kuwa horreeyey oo islaamka ku hormaray, iyo kuwa Ilaahay daraadiis loo cathaabay. Wuxuu ahaa kan lixaad oo islaamay. Mujaahid wuxuu yiri: "Kan ugu horreeyey oo islaannimadiisa soo bandgigay oo muujiyay wuxuu ahaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Abuu Bakr iyo Khabbaab, iyo Suhayb, iyo Bilaal, iyo Cammaar, iyo Sumayyah. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Ilaahay ku ilaaliyey oo gaalada uga celiyey adeerkiis Abuu Dhaalib, Abuu Bakarna waxaa ka celiyey tolkiis, inta kalese waxay u labbiseen cambuur bireed markaasey qorraxda ku wareen, oo ay sidaas ku dhibtoodeen intuu Ilaahay doono kulaylka qorraxda iyo birta." Al Shacbiyyu wuxuu yiri: "Khabbaab waa adkaystay oo gaalada ma uusan siin waxay doonayeen, oo ah inuu Diinta islaamka ka baxo, markaasey intay dhagax kululeeyaan ayay hilbaha dhabarkiisa ku dhejiyaan, oo uu uu hilibkiisu sidaas ku gaabtay kuna tegey, oo dhabarkiisu hilib ma lahayn, oo kuma uusan harin. Khabaab ayaa wuxuu yiri: "Waxaan usoo ashtakoonnay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo go' uu leeyahay barkan oo harka Kacbada jiifa. Markaasaan waxaan ku niri: "Noo gargaar weydii (Ilaahay)" Markaasuu soo fariistay isagoo wajigiisu guduutay, wuxuuna yiri: **"Qad kaana min qablikum yu'khathu al rajutu fayuxfaru tahu fii al ardi, thumma yujaa'u bi at miishaari fa yujcalu fawqa ra'sihi, maa yasrifuhu can diinihi, wa yumshidhu bi amshaadhi al xadiidi maa duuna laxmihi min cithaamin wa casabin, maa yasrifuhu can diinihi. Wa la yutimanna Allaahu haathaa al amra xattaa yasiira al rraakibu min Sancaa'a ilaa Xadramuut laa yakhshaa illaa Allaaha Cazza wa Jalla wa al th'iba calaa ghanamihi wa laakinnakum tacjiluunna."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaa dhacday adinka hortiin in ninka lasoo qabto oo dhulka god looga qodo, kaddibna miishaar la keeno oo madixiisa la dul saaro, taasina ayan diintiisa ka

leexinayn. Markaasaa waxaa loogu shanleeyaa shanlo bir ah oo la geliyaa inta hilibkiisa ka sokeysa oo laf iyo xidid ah, markaaseeyan taasi diintiisa ka leexinayn. Ilaahayna amarkaan (oo ah Diinta islaamka oo uu uu isagu keenay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) wuu taam yeelayaa oo uu faafayaa oo xidideysanayaa ilaa heer uu musaafirku isaga goosho Sancaa' iyo Xadramuut dhexdooda isagoo aan ka baqayn axad aan Ilaahay ahayn iyo dhurwaa oo arigiisa uga baqo mooyee. Adinkuse waad degdegeysaan." Khabbaab wuxuu ahaa tumaal seefaha sameeya, Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, meeshuu ka shaqeeyo ayuu ugu imaan jiray oo uu qalbigiisa soo jiidan jiray. Markaasaa waxaa taas loo sheegay haweentii lahayd (ahaydna Ummu Anmaar, oo gaalad weyn ahayd hodanna ah, maalkeedana la dahgaallanka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku bixin jirtay, sida maalgelinta duullaanka Uxud oo ay gaaladu Makkah ka duuleen. Waxayna ahayd haweeneyda Makkah gabdhaha ku gudda). Markaasey intay bir soo qaadato oo ay dabka geliso, ayay markay caddaato Khabbaab madaxa uga dhejin jirtay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uga ashtakooday, oo yiri: **"Allaahumma ansur Khabbaaban",** oo macneheedu yahay: "Ilaahayow Khabbaab u hiilli oo libta sii." Markaasaa haweentaas madaxa cudur ka galay oo ay u qaylin jirtay sida eeyaha oo kale. Markaasaa waxaa lagu yiri, oo ay takhaatihtu ku yiraahdeen inay daawadeedu tahay: "Is gub". Markaasey Khabbaab amartay oo intuu bir dabka geliyo uu markay caddaato madaxa uga dhejiyaa. Khabbaab wuxuu ka qayb galay Badar iyo Uxud iyo dhammaan mashaahidda uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, goob joogga ka ahaa. Khabbaab wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa salaad tukaday oo ku dheeraaday. Markaasey waxay yiraahdeen: "Rasuulka Ilaahayow, ma waxaad tukatay salaad aadan tukan jirin?" Wuxuu yiri: **"Ajal, innahaa salaatu raghbatin wa rahbatin. Innii sa'altu Allaaha Cazza wa Jalla fiihaa thalaathan, fa acdhaanii ithnatayni wa manacanii waaxidatan. Sa'altuhu an laa yahlika ummattii bi sanatin fa acdhaaniihaa, wa sa'altuhu an laa yusallidha calayhim caduwwan min ghayrihim, fa acdhaaniihaa. Wa sa'altuhu an laa yuthiiqa bacduhum ba'sa bacdin famanacaniihaa."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Haa, waana salaad wax ku doonid iyo cabsiba. Ilaahay, Cazza wa Jalla, waxaan dhexdeeda ku weydiistay saddex arrimood, markaasuu labana i siiyey, midna iga reebay. Waxaan weydiistay inuusan ummaddeyda abaar guud oo wada saameysa ku halaagin, wuuna i siiyey oo iga yeelay. Waxaan kaloo weydiistay inuusan ummaaddeyda cadaw aaan ayaga ahayn uusan ku sallidin, waana iga yeelay. Waxaan kaloo weydiistay inuusan qaarkood qaarka kale la dagaallamin oo ay xarbigooda iyo xooggooda dhedhensiiyaan, waana iga reebay." Meeshuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, salaaddaas ku tukaday waa Masjidu Al Ijaabah, oo Masjidka Nabiga ee Al Madiinah Al Munawwarah shan boqol iyo saddex iyo sideetan mitir u jira. Xadiithka oo faahfaasanna waxaa wariyay Saxiix Muslim, waana midka labo iyo kontonaad iyo laba kun iyo si deed boqol iyo sagaashanaad. Khabaab wuxuu kaddib degay Al Kuufah ee dalka Ciraaq, ayaduuna ku dhintay oo lagu duugay isagoo saddex iyo todobaatan jir ah sanadka toddoba iyo soddon ee Hijrada, waxaana ku tukaday Calii bin Abii Dhaalib, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Da' daas ka duwan iyo sanad taas ka duwanoo kalena waa la sheegay.
(Saddex iyo toban) Cumayr bin Abii Waqqaas, Sacd bin Abii Waqqaas walaalkiis.

Afar iyo toban. Cabdu Allaahi bin Mascuud Al Huthalii

Cabdu Allaahi bin Mascuud bin Al Xaarith bin Shamkh bin Makhzuum bin Saahilah bin Kaahil bin Al Xaarith bin Tamiim bin Sacd bin Huthayl, oo reer Banuu Zuhrah xilfi la lahaa. Ibnu Al Athiir wuxuu Usudu Al Ghaabah ku wariyay tarjamada Cabdu Allaahi

bin Mascuud, wuxuu wariyayna waxaa ka mid ah: "Sababta islaamiddisana waxay ahayd inuu yiri: "Waxaan ahaa kuray dhulka xoogaa kor uga kacay waxaanna la joogay ari uu leeyahay Cuqbah bin abii Mucaydh oo aan raacayay. Markaasaa waxaa yimid Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uuna la socdo Abuu Bakr, markaasuu wuxuu yiri: **"Yaa ghulaam, hal macaka min laban?"** oo macneheedu yahay: "Wiilow, caano ma haysaa?" Markaasaan iri: "Haa, waase la igu aammaaneystay." Markaasuu wuxuu yiri: "**i'itinii bishaatin lam yanzu calayhaa al faxlu"**, oo macnihiisu yahay: "Waxaad ii keentaa ceesaan uusan orgi boodin, oo ugub ah weeye." Markaasaan waxaan u keenay waxar, ama ceesaan yar. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, labadeeda addin oo dambe labadiisa lugood dhexdooda ku qabtay, oo uu markaas candhadeeda salaaxay oo uu duceeyey ilaa ay ka dararto. Markaasuu Abuu Bakr wuxuu u keenay weel oo uu ku lisay, kaddibna uu Abuu Bakr ku yiri: "**Ishrab**", oo ah "cab". Markaasuu Abuu Bakr cabbay, dabadiisna uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, cabbay. Kaddibna wuxuu candhaca ku yiri: "**Aqlis**", oo ah: "lsku imow." Markaasuu isku soo noqday oo siduu hore u ahaa kusoo laabtay. Markaasaan u imid oo aan ku iri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hadalkaan wax iga bar, uuna ka wado Quraanka Kariimka ah." Markaasuu madaxa ii salaaxay, uuna yiri: "**Anta ghulaamun mucallimun**", oo macneheedu yahay: "Adigu waxaad tahay wiil arday ah, durbaba wax baranaya." Waxaan sidaas (afkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,) uga bartay toddobaatn Suuradood, uusan qof bashar ah igu haysan." Cabdu Allaahi bin Mascuud waa kan ugu horreeyey (Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kaddib) oo Quraanka gaalada hortooda kor ugu akhriya oo maqashiiya, wuxuuna akhriyay Suuratu Al Raxmaan. Markaasey garaaceen, oo si xun u dileen. Markuu islaamay Cabdu Allaahi Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa qaatay, oo uu u adeegi jiray, wuxuuna ku yiri: "**ithnuka calayya an tasmaca siwaadii wa yurfaca al xijaabu",** oo macneheedu yahay: "Waxaan kuu oggolaaday inaad sirtayda maqashid oo xijaabka, waa daaha qolka saarane, aad qaado", oo marka uu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qof la faqayo, isaga waa loo oggolaa inuu goob joog ka ahaado. Nabiguu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qolkiisa ugu soo geli jiray, kabahana u labbisi jiray, la socon jiray, oo uu hortiisa socon jiray, oo markuu qubaysanayo asturi jiray, markuu seexdo hurdada ka kicin jiray, saxaabaduna waxay u yiqiinneen "Midka sirta iyo cadayga iyo kabaha saaxiibka u ah", oo wuxuu hayn jiray cadayga iyo kabaha Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, (markuu Masjidka galo). Cabdu Allaahi labada hijraba wuu hijrooday, oo kala ah arliga xabashada iyo Al Madiinah, labada qiblaba wuu u tukaday, wuxuuna goob joog ka ahaa Badr iyo Uxud iyo Al Khandaq iyo baycatu al ridwaan iyo dhammaan mashaahidda uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka qayb galay, isagaana maalinta Badr Abuu Jahl madaxa kasoo gooyey. Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu uga marag kacay inuu ehelu jannada yahay. Cabdu Allaahi wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa wuxuu igu yiri: **"Iqra' calayya Suurata Al Nisaa'i",** oo ah: "Igu akhri Suuradda Al Nisaa'i". Waxaan iri: "Ma kugu akhriyaa adigoo ayadaba adiga korkaaga lagu soo dejiyay?" Wuxuu yiri: "**Innii uxibbu an asmacahu min ghayrii**", oo macneheedu yahay: "Waxaan jeclahay inaan Quraanka ghayrkay ka maqlo." Markaasaan ku kor akhriyay ilaa aan ka gaaro **"Fa kayfa ithaa ji'naa min kulli ummatin bishahiidin wa ji'naa bika calaa haa'ulaa'i shahiidan",** oo macneheedu yahay: "Oo sideebay ahaan doontaa markaan ka keenno ummad kasta marag oo aan adigana kuu keenno adigoo kuwaas marag korkooda ku ah?" Markaasey indhihiisu (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) ilmeeyeen." Cabdu Allaahi wuxuu ku dhintay Al Madiinah, isagoo dhawr iyo lixdan jir ah, waxaana ku tukaday Cuthmaan, waxaana la duugay habeennimo, siduu uga dardaaramay sanadka labo iyo soddon ee Hijrada, zamanka Cuthmaan.

Cabdu Allaahi wuxuu leeyahay siiro qurxoon oo lagu daydo, waaba tuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Wa tamassakuu bi cahdi ibnu ummi Cabdin",** oo macneheedu yahay: "Kuna dhagganaada oo haysta wuxuu idinkula dardaarmo ibnu ummu Cabd oo ah koofaarta Cabdu Allaahi bin Mascuud Allaha raalli ka noqdee." Wuxuu kaloo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Radiitu li ummatii maa radiya lahaa ibnu ummi Cabdin**", oo macneheedu yahay: "Waxaan ummaddeyda raalli uga ahay (inay ahaato oo ku sugnaato) wuxuu ibnu ummi Cabdi raalli uga yahay." Cabdu Allaahi bin Mascuud waan jedahay, Ilaahayna wuxuu iigu nicmeeyey inaan ku riyooday, mahadi ha ka gaartee.
(**Shan iyo toban**) Mascuud bin Al Qaarii, magaciisuna yahay Mascuud bin Rabiicah bin Camr bin Sacd bin Cabdu Al Cuzzaa bin Xamaalah bin Ghaalib bin Muxallim bin Caa'ithah bin Subayc bin Al Huun bin Khuzaymah oo qabiilka Al Qaarah ka tirsan." Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Al Qaarah waa koofaar, waxayna ahaayeen qabiil raggoodu nishaab badan yihiin."
(Lix iyo toban) Salaydhu bin Camr bin Cabdu Shams bin Cabdu Al Wuddi bin Nasr bin Maalik bin Xisli bin Caamir bin Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr.
(**Toddoba iyo toban)** Cayyaash bin Abii Rabiicah bin Al Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum bin Yaqthah bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy iyo haweentiisa **(Sideed iyo toban)** Asmaa'a bintu Sallaamah bin Mukharribah al Tamiimiyyah. **(Sagaal iyo toban)** Khunays bin Xuthaafah bin Qays bin Cadiyyi bin Sacd bin Sahm bin Camr bin Husays bin Kacb bin Lu'ayy.
(**Labaatan**) Caamir bin Rabiicah bin Canz bin Waa'il oo axdi la lahaa Al Khadh-dhaab bin Nufayl bin Cabdu Al Cuzzaa". Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Canz bin Waa'il waa walaalka Bakr bin Waa'il, kana tirsan qabiilka Rabiicah bin Nizaar."
(Kow iyo labaatan) Cabdu Allaahi bin Jaxsh bin Ri'aab bin Yacmar bin Murrah bin Kabiir bin Ghanm bin Duudaan bin Asad bin Khuzaymah, ayna dhashay Umaymah bintu Cabdu Al Mudh-dhalib eedada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo la dhalatay aabihiis Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Mudh-dhalib. Cabdu Allaahi bin Jaxsh walaashiisna waa Ummu Al Mu'miniina Zaynab bintu Jaxsh, haweenta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo walaalkiis
(Labo iyo labaatan) Abuu Axmad bin Jaxsh, labadooduna ay axdi la lahaayeen reer Banuu Umayyah bin Cabdi Shams.

Saddex iyo labaatan. Jacfar bin Abii Dhaalib

Jacfar bin Abii Dhaalib, ina adeerka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lana yiraahdo Jacfar Al Dhayyaar. Jacfar wuxuu ahaa ninka dadka ugu ekaansho badan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xagga abuurista iyo xagga khuluqdaba. Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Jacfar ku yiri: **"Wa ammaa anta yaa jacfaru fa ashbabta khalqii wa kbuluqii, wa anta min citratii allatii anaa minhaa",** oo macneheedu yahay: "Adiguse, Jacfarow waad ii egtahay xagga abuurista iyo khuluqdaba, waxaadna ka mid tahay nasabkeyga aan anigu ka dhashay". Jacfar, isagoo ay la socdaan asxaab kale ayaa wuxuu kasoo noqday arliga xabashada oo uu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu yimid Khaybar maalintuu degmadaas yuhuudda ka furtay. Markaasuu intuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Jacfar ugu sare kacay, oo uu luqunta luqunta u geliyay labada indhood dhexdooda ka dhunkaday, uuna yiri: **"Maa adrii bi ayyihimaa anaa ashaddu farxan, bi quduumi Jacfar am bi fatxi Khaybar?"** oo macneheedu yahay: "Ma ogsooni middaan labadooda ku farax badanahay: ma imaatinka Jacfar ama furashada Khaybar?." Markaasuu farax daradiis Jacfar raqsiyey, oo uu hore iyo dib isku ruxay, Nabigoo, Sallaa Allaahu Calayhi

Wasallam, fiirinaya, aanna diidin oo aan ka reebin: taas ayaa ah asalka xadrada wadaadada suufiyada ah ayaa la yiri, oo ay sidaasoo kale hore iyo gadaal isugu ruxaan. Al Nasaa'ii wuxuu Cabdu Allaahi bin Jacfar ka wariyay inuu yiri: "Markii Jacfar la dilay ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Udcuu ilayya banii akhii,"** oo ah: "iigu yeera wiilasha walaalkey". Markaasaa naloo keenay, annagoo aad caruurta digaagga na moodid. Markaasuu midka timaha xiira amray oo timaha madaxa nalaga wada xiiray, kaddibna wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Ammaa Muxammad fa yashbahu cammanaa Abaa Dbaalib. Wa ammaa Cabdu Allaahi fa yashbahu khalqii wa khuluqii wa ammaa Cawn fa fa yashbahu khalqii wa khuluqii**" oo macneheedu yahay: "Muxammadna wuxuu u egyahay adeerkeen Abuu Dhaalib, Cabdu Allaahi se aniguu ii egyahay xagga abuuritaanka iyo dabeecadaba. Cawnsee aniguu ii egyahay xagga abuuritaanka iyo dabeecadaba." Kaddib intuu gacanta iga qabtay oo uu leexiyay, kaddibna uu yiri: **"Allaahumma akhluf fii Jacfaran fii ahlihi waa baarik li Cabdu Allaabi fii safqati yamiinihi",** oo macneheedu yahay: "Ilaahayow Jacfar ehelkiisa u tarmi, Cabdu Allaahina ganacsigiisa u barakee." Wuxuu kaloo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Lam yakun qablii Nabiyyun illaa qad ucdhiya sabcata rufaqaa'a, nujabaa'a wuzaraa 'a, wa innii ucdhaytu arbacata cashra: Xamzah, wa Jacfar, wa Calii, wa Xasan, wa Xusayn, wa Abuu Bakr, wa Cumar, wa Al Miqdaadu, wa Xuthayfah, wa Salmaan, wa Cammaar wa Bilaal**", oo macneheedu yahay: "Ma uusan ahaanin hortey Nabi ee waa ilaa kan la siiyey toddoba rafiiq, oo kariimiin ah oo loo xulay, ahna wasiirradiisa culayska la qaada, anigase waxaa la i siiyey afar iyo toban oo kala ah Xamzah iyo Jacfar iyo Calii iyo Xasan iyo Xusayn iyo Abuu Bakr iyo Cumar iyo Al Miqdaadu iyo Xuthayfah iyo Salmaan iyo Cammaar iyo Bilaal" Jacfar waxaa shahiidnimo loogu dilay duullaanka Mu'tah ee dalka Urdun, dagaalkaasoo labada gacnoodba looga gooyey. Markaasuu Ilaahay wuxuu ugu beddelay labo baal oo uu Malaa'igta kula duulo jannada dhexdeeda. Markii Jacfar la dilay, ayay haweentiisu Asmaa'a bintu Cumays tiri, waxaa guriga iigu soo galay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, anigoo cajiinteyda cajiintay, wiilasheydana u qubeeyey una subkay, nadiifiyayna, markaasuu wuxuu yiri: **"i'itinii bi banii Jacfar"**, oo macneheedu yahay: "ii keen wiilasha Jacfar". Markaasaan u keenay. Markaasuu carafsaday labadiisa indhoodna ay ilmeeyeen. Markaasaan waxaan iri: "Rasuulka Ilaahayow, maxaa kaa boohinaya? Ma waxbaa kaa soo gaaray Jacfar iyo asxaabtiisa?" Wuxuu yiri: **"Nacam, usiibuu haathaa al yawma",** oo macneheedu yahay: "Haa, maanta ayaa la dilay." Markaasaan qayliyay ay haweenkuna isu yimaadeen. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ehelkiisa u noqday, wuxuuna yiri: **"Laa tughfiluu Aala Jacfar, fa innahum qad shughiluu",** oo macneheedu yahay: "Ha moogaanina reer Jacfar (oo cunno u sameeya) maxaa yeelay waa la mashquuliyey". Markaas la dilay wuxuu ahaa kow iyo afartan jir, tira kalena waa la sheegay. Iyo haweentiisa Asmaa'u bintu Cumays.

Afar iyo labaatan. Asmaa'u bintu Cumays

Asmaa'u bintu Cumays bin Al Nucmaanu bin Kacb bin Maalik bin Quxaafah, una dhalatay qabiilka Khathcam. Ibnu Al Athiir wuxuu Usudu Al Ghaabah ku yiri: "Hooyadeedna waa Hind bintu Cawf bin Zuhayr bin Al Xaarith Al Kinaaniyyah. Asmaa' waxay islaamtay mar hore, waxayna u haajirtay arliga xabashada ayadoo la socota ninkeeda Jacfar bin Abii Dhaalib, halkaas ayayna waxay ugu dhashay Cabdu Allaahi iyo Cawn iyo Muxammad. Kaddibna waxay u haajirtay Al Madiinah. Markaasaa marka Jacfar bin Abii Dhaalib laga dilay ayaa waxaa guursaday Abuu Bakr Al Siddiiq, waxayna u dhashay Muxammad bin Abii Bakr Al Siddiiq. Markaasuu Abuu

Bakr ka dhintay, waxaana kaddibna guursaday Calii bin Abii Dhaalib oo ay u dhashay Yaxyaa, oo aan la isku khilaafsanayn. Asmaa'u waxay walaalo yihiin oo la dhashay Maymuunah bintu Al Xaarith, haweenta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Ummu Al Fadl, haweenta Al Cabbaas, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, adeerkiis. Waxayna ahaayeen toban gabdhood oo isku hooyo ah. Waxaana la yiri waxay ahaayeen sagaal gabdhood. Walaasheed kalena, oo magaceedu yahay Sulmaa bintu Cumays, waxay u dhaxday Xamzah bin Cabdu Sal Mudhalib, adeerka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Asmaa'u waxay ahayd haweenta dadka ugu xidid kariimsan, oo dumaashiyaalkeed waxaa ka mid ahaa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Xamzah iyo Al Cabbaas, Allaha dhammaantood raalli ka noqdee iyo ghayrkoodba. Waxaa la wariyay inay Asmaa'u Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalla, ku tiri: "Ilmaha Jacfar waa la ilaystaa dhakhseyna ishu u qabataa ee ma ka qaadaa oo daaweeyaa (waa afa'astarqii lahum)?" (waana Quraan iyo duco Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga bartay). Markaasuu wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: "**Nacam**", oo ah "Haa". Walaasheed afaraadna waa Lubaabah Al Sughraa, Al Kubraa-na waa la yiri, waana hooyada dhashay Sayfu Allaahi Al Masluul Khaalid bin Al Waliid bin Al Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar Al Makhzuumii." Tobankaas (ama sagaalkaas) gabdhood oo wada dhashay waa kuwuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka yiri: **“Al Akhwaatu mu'minaatun**", oo macneheedu yahay: "Gabdhaha walaalaha ahi waa mu'minaat, rumeeyey." Allow u naxariiso oo raalli ka noqo Asmaa'u bintu Cumays iyo walaaleheed.

(Shan iyo labaatan) Xaadhibu bin Al Xaarith bin Macmar bin Xabiib bin Wahb bin Xuthaafah bin Jumax bin Camr bin Husays bin Kacb bin Lu'ayy, iyo haweentiisa:

(Lix iyo labaatan) Faadhimah bintu Al Mujallal bin Cabdu Allaahi Abii Qays bin Cabdu Al Wuddi bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir bin Lu'ayy bin Ghaalib bin bin Fihr, iyo walaalkiis:

(Toddoba iyo labaatan) Khadh-dhaab bin Al Xaarith iyo haweentiisa:

(Sideed iyo labaatan) Fukayhah bintu Yasaar.

(**Sagaal iyo labaatan**) Macmar bin Al Xaarith bin Macmar bin Xabiib bin Wahb bin Xuthayfah bin Jumax bin Camr bin Husays bin Kacb bin Lu'ayy.

(Soddon) Al Saa'ibu bin Cuthmaan bin Mathcuun bin Xabiib bin Wahb**.**

(Kow iyo soddon) Al Mudhalib bin Azhar bin Cabdi Cawf bin Cabd bin Al Xaarith bin Zulu-ah bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bib Lu'ayy, iyo haweentiisa:

(Labo iyo soddon) Ramlah bintu Abii Cawf bin Subayrah bin Sucayd bin Sacd bin Sahm bin Camr bin Husays bin Kacb bin Lu'ayy.

(Saddex iyo soddon) Al Naxxaamu, oo magaciisu yahay Nucaym bin Cabdu Allaahi bin Asiid, walaalka Banii Cadiyyi bin Kacb bin Lu'ayy. Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Magaciisu waa Nucaym bin Cabdu Allaahi bin Asiis bin Cabdu Allaahi bin Cawf bin Cubayd bin Cuwayj bin Cadiyyi bin Kacb bin Lu'ayy, waxaana Al Naxxaamu loogu bixiyey ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **“La qad samictu naxmahu fii al Jannati",** oo macneheedu yahay: "Waxaan Jannada dhexdeeda ka maqlay codkiisa" Al Suhaylii wuxuu yiri: "Al naxmu waa qufaac dheer, oo bakhaylkana waxaa la yiraahdaa naxama ayadoo uu marka wax la weydiiyo qufoco oo uu qufacaas isku mashquuliyo."

Afar iyo soddon. Caamir bin Fuhayrah

Caamir bin Fuhayrah, mawlaha Abii Bakr Al Siddiiq, Allaha raalli ka noqdee. Waana isla saxaabiga u adeegayey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, intuu hijrada ku jiray. Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Caamir bin Fuhayrah waxaa dhalay laba

addoon oo ka mid ah kuwa u dhashay Al Asd, wuxuuna ahaa nin madow, markaasuu Abuu Bakr Al Siddiiq ka gatay". Al Suhaylii wuxuu yiri: "Fuhayrah waa hooyadiis oo ah Fihr oo la yareeyey, wuxuuna ahaa addoon madow oo uu lahaa Al Dhufaylu bin Al Xaarith bin Sakhrah, waxaana ka gatay Abuu Bakr oo xoreeyey, wuxuuna islaamay ka hor intuusan Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gelin Daaru Al arqam. Caamir bin fuhayrah waxaa dilay Caamir Al Dhufayl Maal-inta Bi'ru Macuunah. Markaasuu markuu waranka geliyey waxaa meeshuu ka geliyey kasoo baxay nuur. Markaas kaddib ayuu Caamir bin Al Dhufayl wuxuu oranjiray: "Waa kee ninka markaan waran geliye (oo uu dhintay) Samada kor loogu qaaday ilaa uu dhexdeeda ka galay oo ayba ka soka martay?" Taasina waa riwaayada Al Bakkaa'ii oo uu ka wariyay ibnu Isxaaq. Riwaayada Yuunus bin Bukayr oo uu ibnu Isxaaq ka wariyeyna waxay leedahay inuu Caamir bin Al Dhufayl Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, weydiiyey, markuu u yimid (oo uu islaamay) oo uu yiri: "Muxammadow (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam), waa kee ninka asxaabtaada ka mid ah oo markaan waranka geliyey Samada kor loogu qaaday?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: "**Huwa Caamir bin Fuhayrah**", o ah "Waa Caamir bin Fuhayrah". Hishaam bin Curwah wuxuu aabihiis ka wariyay inuu Caamir bin Fuhayrah laga dhex raadiyay maydka dadka maalintaas la dilay oo laga waayey. Markaasey waxay u arkeen inay Malaa'igtu Samada kor ugu qaaday ama ay duugtay. Waxaa wariyay ibnu Al Mubaarak." Waa intaas warka Al Suhaylii. An'inkaan Caamir bin Fuhayrahna wuxuu ku xusan yahay Xadiithka afar kun iyo saddex iyo sagaashan ee Al bukhaarii.

(Shan iyo soddon) Khaalid bin Saciid bin Al Caas bin Umayyah bin Cabdu Shams bin Cabdu Manaaf bin Qusayy bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy, iyo haweentiisa:
(**Lix iyo soddoon**) Umaynah bintu Khalaf bin Ascad bin Caamir bin Bayaadah bin Subayc bin licthimah bin Sacd bin Mulayx bin Camr, oo Khuzzaacah u dhalatay." Ibnu Hishaam wuxuu yiri: “Waxaa kaloo la yiri inuu magaceedu yahay Humaynah bintu Khalaf."
(**Toddoba iyo soddon**) Xaadhib bin Camr bin Cabdi Shams bin Cabdu Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir bin Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr.
(**Sideed iyo soddon**) Abuu Xuthayfah, oo magaciisu yahay Mihshamun, siduu ibnu Hishaam u yiri, bin Cuthbah bin Rabiicah bin Cabdi Shams bin Cabdi Manaaf bin Qusayy bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy.
(Sagaal iyo soddon) Waaqidu bin Cabdu Allaahi bin Cabdi Manaaf bin Cariin bin Thaealabah bin Yarbuuc bin Xanthalah bin Maalik bin Zayd Manaat bin Tamiim, oo reer Banuu Cadiyyi bin Kacb axdi la lahaa." lbnu Hishaam wuxuu yiri: "Waaqid waxaa keentay (Suuqa) qabiilka Baahilah oo markaasuu Al Khadh-dhaab bin Nufayl ka gatay, oo uu ka wiil yeeshay. Markaasaa markay soo degatay Aayadda shanaad ee Suuradda Al Axzaab oo ka cunug yeelashada xaaraantimeyneysa "**Adcuuhum liaabaa'ihim**", oo ah "Ugu yeera kuwaas aabayaalkooda" ayuu wuxuu yiri: "Anigu waxaan ahay Waaqid bin Cabdu Allaahi ", siduu u yiri Abuu Camr Al Madanii".
(**Aafartan**) Khaalid bin Bukayr bin Cabdi Yaalayl bin Naashib bin Ghiyarah, una dhashay Banii Sacd bin Layth bin Bakr bin Cabdi Manaat bin Kinaanah, xulafada reer Banii Cadiyyi bin Kacb, iyo walaalkiis:
(**Kow iyo afartan**) Caamir, iyo walaalkiis:
(Labo iyo afartan) Caaqil iyo walaalkiis:
(**Saddex iyo afartan)** Iyaas.

Afar iyo afartan. Cammaar bin Yaasir

Cammaar bin Yaasir, oo reer Banuu Makhzuum bin Yaqthah axdi la lahaa." Ibnu

Hishaam wuxuu yiri: "Cammaar bin Yaasir waa cansiyyun, oo qabiilka Cans oo Mathxij ka tirsan ayuu u dhashay." Cammaar wuxuu u dhashay qabiilka Cans ee dalka Yaman dega. Al Nawawii wuxuu yiri: "Cammaar wuxuu ka mid ahaa saabiqiinta islaamka u hormaray, oo isaga iyo aabihiis iyo hooyadiis Sumayyah waxay ka mid ahaayeen kuwa bilawgaba islaamay. Cammaar waxay isku mar islaameen Suhayb, intuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Daaru Al Arqam ku jiray, soddon iyo dhawr nin gadaashood. Waxaa Mujaahid laga soo wariyay in qofka ugu horreeyey oo islaamnimadiisa muujiya ay ahaayeen Abuu Bakr iyo Bilaal iyo Khabaab iyo Suhayb iyo Cammaar iyo hooyadiis Sumayyah. Cammaar iyo aabihiis iyo hooyadiis Ilaahay Tacaalaa daraadiis ayaa loo cathaabi jiray. Markuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo agmaro ayagoo la cathaabayana wuxuu ku yiraahdaa: **"Sabraan Aala Yaasir, fa inna mawcidakumu Al Jannah"**, oo macneheedu yahay: "Reer Yaasirow sabra oo adkeysta, ballankiinuna waa Jannada." Abuu Jahal ayaana dilay hooyadiis Sumayyah, oo sidaasay ku tahay Shahiidada ugu horreysey ee islaamka. Cammaar aabihii waa Carab, sidaan usoo sheegnay, hooyadiis Sumayyana waxay ahayd addoon uu leeyahay Abii Xuthayfah bin Abii Xuthayfah bin Al Mughiirah Al Maghzuumii, kanoo Yaasir axdi la yeeshay, ayadana uu guuriyey. Markaasey waxay u dhashay Cammaar, markaasuu xoreeyey. Sidaas ay ay mawlihiisa ku yihiin. Cammaar Al Madiinah ayuu u haajiray, wuxuuna goob joog ahaa Badr iyo Uxud iyo Al Khandaq iyo mashaahidda oo idil. Wuxuu ahaa nin madow oo dheer, cirridana aan midabeyn jirin. Waxaa la dilay isagoo ciidan Imaam Calii ka mid ah, intaan la dilinna wuxuu yiri: "ii keena xoogaa caano ah oo aan cabo, oo waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo leh: **“Aakhiru sharbatin tashrabuhaa mina al dunyaa sharbatu labanin"**, oo macneheedu yahay: "Waxa ugu dambeeya oo aaad addunkaan ku cabtid waxaa weeye cantuugo caano ah." Waxay Al Bukhaarii iyo Muslim wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calyhi Wasallam, yiri: **“Wayxa Cammaar, taqtuluhu al fi'atu al baaghiyatu**", oo macneheedu yahay: "Allaw u naxariiso Cammaar, oo waxaa dilaysa kooxda xadgudubtay (oo gardaran)".

Shan iyo afartan. **Suhayb bin Sinaan Al Ruumii**

Suhayb bin Sinaan Al Ruumii, una dhashay Al Namri bin Qaasidh bin Rabiicah bin Nizaar. Waxaa kaloo la yiri inuu u dhashay Afsaa bin Ducmiyyi bin Jadiilah bin Asad. Waxaa kaloo la yiri: Suhayb waa mawlaha Cabdu Allaahi bin Judcaan bin Camr bin Kacb bin Sacd bin Taym. Waxaa kaloo la yiri inuu roomaan yahay. Kuwa yiri wuxuu u dhashay Al Namiri bin Qaasidh waxay yiraahdeen: arliga ruumaanka wuxuu ku joogay qafaal ahaan, markaasaa halkaas laga soo gatay. Waxaana Xadiithka kusoo arooray inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Suhaybu saabiqu Al Rruumi"**, o macneheedu yahay: "Suhayb waa kan roomaanka islaamka ugu soo horreeyey." Ibnu Al Athiir wuxuu Usudu Al Ghaabah ku yiri: "Hooyadiisna waa Salmaa bintu Qaciid ibnu Mahiis bin Khuzaaciyyi bin Maazin bin Maalik bin Camr ibnu Tamiim, kuniyadiisuna waa **Abuu Yaxyaa**, uuna u bixiyey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Waxaa Al Ruumii loogu bixiyey ayadoo ay ciidammo roomaan ah ay soo qafaaleen isagoo yar, aabihiis iyo adeerkiisna waxay Guddoomiye ka ahaayeen gobolka Al Ubullah ee dalka Ciraaq, ayagoo wakiil uga ahaa Kisraa Boqorka Furus. Degmadooda iyo beesha ay degaanna waxay ku yiilleen jinka wabiga Dijlah magaalada Al Muusil agagaarkeeda. Waxaa kaloo la yiri waxay beeshoodu saarneyd wabiga Furaat ee arliga Jaziirada. Markaasaa waxaa soo weeraray roomaanka oo Suhayb qafaashay isagoo yar. Sidaas ayuu wuxuu ugu koray arliga roomaanka. Markaasaa waxaa halkaas ka gadatay qabiilka Kalb oo intay Makkah Al Mukarramah keeneen ku iibiyey, uuna ka gatay Cabdu Allaahi bin Judcaan Al Taymii, oo xoreeyey. Markaasuu

la joogay ilaa uu Cabdu Allaahi bin Judcaan ka dhintay. Suhayb ehelkiisa iyo dhashiisa iyo Muscab Al Zubayrii waxay yiraahdeen inuu roomaanka kasoo cararay markuu weynaaday oo uu garaadsaday, oo uu markaas Makkah yimid uuna Cabdu Allaahi bin Judcaan xilfi la galay, lana uu joogay ilaa uu ka dhintay. Markaasuu marka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lasoo diray uu rumeeyey oo raacay, oo sidaasuu wuxuu ka mid ahaa kuwaa saabiqiinta islaamka ku hormaray. Al Waaqidii wuxuu yiri: "Suhayb iyo Cammaar isku maalin ayay islaameen." Suhayb wuxuu ka mid ahaa kuwa la taag darraystay oo Makkah dhexdeeda lagu cadaabi jiray markay islaameen. Suhayb wuxuu ahaa kuwaa dadka ugu dambeeya oo Al Madiinah usoo haajiray, wuxuuna lasoo haajiray Calii bin Abii Dhaalib, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, bartamaha bisha Rabiicu Al Awwal ayadoo uu markaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Qubaa' ku sugan yahay oo uusan weli ka baxin, oo uusan Al Madiinah Al Munawwarah u guurin. Suhayb markuu Makkah ka haajirayey ayaa waxaa raad raacay koox gaalada ka mid ah. Markaasuu intuu gabooyihiisa fallaaraha ku jiray hortiisa uga soo daadiyey ayuu wuxuu ku yiri: "Ragga Qurayshow, waad ogsoon tihiin inaad idiinku nishaab badanahay, oo wa Allaahi inaydnaan isoo gaarayn ka hor jeer aan fallaar kasta mid idinka mid ah aan ku dhejiyo. Markaas kaddib ayaan seefteyda idinkula dagaallamayaa, intay gacantayda wax uga haraan. Haddaad waxaad doneysaan maalkeyga uu yahayna waan idiin sheegayaa meeshuu yaallo." Waxay yiraahdeen: "Maalkaagu meeshuu yaallo noo sheeg, adigana waan iska kaa deyneynaa." Sidaas ayayna cahdi ku kala qaateen. Markaasuu u sheegay meeshuu maalkiisu (waana dahab) Makkah ka yaallo. Markaasu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka daba tegey oo u tegey. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: "**Rabixa al baycu Abaa Yaxyaa**", oo macneheedu yahay: "Ganacsigu waa ribxay, oo laga faaiiday", ayadoo uu maalkiisa uu Diintiisa ku gatay. Markaasaa waxaa kusoo degatay Aayadda laba boqol iyo toddoba ee Suuratu Al Baqarah: **"Wa mina al nnaasi man yashrii nafsahu ibtighaa'a mardaati Allaahi wa Allaahu ra'uufun bi alcibaadi."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Dadkana waxaa ka mid ah mid naftiisa gadaya, isagoo ku doonaya raalli ahaanshaha Ilaahay, Ilaahayna wuu u naxariistaa addoommada." Suhayb wuxuu ka qayb galay Badr iyo Uxud iyo Al khandaq iyo mashaahidda uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, goob joogga ka ahaa oo idil. Darajadiisa sarreysa wuxuu ku darsaday khuluq fiican iyo kaftan, waxaana la wariyay inuu yiri: "Waxaan Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u imid isagoo Qubaa' jooga, ay hortoodana taallo rudhab iyo timir, aniguna aan daaf qabo. Markaasaan cunay. Markaasuu wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Ata'kulu al tamra wa anta armad?",** oo macneheedu yahay: "Ma timir ayaad cuneysaa adigoo daafsan?" Markaasaan waxaan iri: "Bal waxaan ku cunayaa nuska ishayda fiyow (xigta)". Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qoslay ilaa ay dhoolashiisu ka muuqdaan." Suhayb wuxuu ku dhintay Al Madiinah sanadka saddex iyo soddon, waxaa kaloo la yiri sagaal iyo soddon isagoo saddex iyo toddobaatan jir ah, waxaana kaloo la yiri toddobaatan jir ah, waxaana lagu duugay Al Madiinah. Cumar bin Al Khadh-dhaab aad ayuu Suhayb u jeclaa, wuxuuna ka dardaarmay, marka la dooxay, inuu Suhayb ku tukado, uuna muslimiinta imaam u noqdo tujiya saddex maalmood inta Madaxweynihii isaga ku xigay la dooranayo. Allow u naxariiso Suhayb bin Sinaan Al Ruumii.

Muujinta islaamka ee Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaabu Calayhi Wasallam, uu tolkiis usoo bandhigay

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Intaas kaddib ayuu dadku si is daba joog ah oo xoog leh

islaamka usoo galay, rag iyo haweenba, oo uu sidaas islaamku ugu faafay Makkah dhexdeeda oo lagu sheekeystay. Markaas kaddib ayuu Ilaahay Cazza wa Jalla, Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, amray inuu daboolka ka qaado oo uu caddeeyo waxa xaqqa iyo baadhilka kala saaraya oo uu xaggiisa ka keenay, iyo inuu dadka u sheego amarkiisa, uuna ugu yeero Ilaahay. Marka uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arrinkiisa qariyey oo uu sireeyey, oo uu asturay, ilaa goorta uu Ilaahay Tacaalaa amray inuu muujiyo Diintiisa, waxaa u dhexeysey saddex sano, sida isoo gaartay, laga bilaabo marka lasoo diray. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: **"Fa asdac bimaa tu'maru wa acrid cani al mushrikiina**(94)." Waana Aayadda afar iyo sagaashanaad ee Suuratu Al Xijri, macneheeduna uu yahay: "Muujina waxa lagu farayo, oo ah dadka oo lslaamka loogu yeero, iskagana jeeso gaalada(94)", kaddibna ay Aayadda dagaalku nasakhday, waa isaga jeesigee," Wuxuu kaloo Ilaahay Tacaalaa yiri: **"Wa akhfid janaaxaka limani ittabacaka mina al mu'miniina**(215)**Fa in casawka faqul innii barii'un mimmaa tacmaluuna**(216)**Wa tawakkal calaa Al Caziizi Al Rraxiimi**(217)**".** Aayadaha, oo ah kuwa laba boqol iyo shan iyo toban iyo lix iyo toban iyo toddoba iyo toban ee Suuratu Al Shucaraa' macnohoodu waxaa weeye: "Una raarici garabkaaga oo u naxariiso cidda ku raacda oo mu'miniinta ah(215)Hadday ku diidaanna, waa gaaladee, waxaad ku tiraahdaa: anigu dambi laawe ayaan ka ahay waxaad falaysaan(216)Waxaadna talo saarataa Lagama adkaadaha Naxariista miiran ah(217)."

Tukashada Salaadda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo asxaabtiisa ee buuraha dhexdooda

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markay doonayaan inay Salaadda tukadaan waxay aadi jireen buuraha dhexdooda, halkaasoo ay ku tukan jireen ayagoo salaaddooda tolkooda ka qarinaya. Markaasaa maalin ayadoo uu Sacad bin Abii Waqqaas oo ay wehliyaan koox asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ay buuraha Makkah dhexdooda ku tukanayaan, ayaa waxaa kusoo baxay rag gaalada ka mid ah, Markaasey salaadda ka carqaladeeyeen, ayna ku caayeen waxay sameynayaan. Markaasey dagaallameen. Markaasuu Sacd bin Abii Waqqaas wuxuu maalintaas nin gaalada ka mid ah ku dhuftay lafta qalka rati, oo uu sidaas ku dhaawacay. Kaasaa wuxuu ahaa dhiigga ugu horreeyey oo islaamka dhexdiisa lagu daadiyey.

Colaadinta gaalada ee Rasuulka Ilaahay

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, tolkiis u muujiyey oo uu islaamka usoo bandhigay, siduu Ilaahay ugu amray, tolkiis kama uusan fogaan, umana ayan jawaabin, ilaa markuu ilaahyadooda ka warramay oo uu ceebeeyey. Markuuse sidaas yeelay, way la weynaatay, wayna colaadiyeen, waxayna ku heshiiyeen inay khilaafaan ayna colaadiyaan. Sidaas ayayna yeeleen, intaan ka ahayn inta islaamtay oo uu Ilaahay islaamka ku ilaaliyey, kuwaanoo tiro yar, isqarinayayna. Adeerkiis, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Abuu Dhaalib ayaa u qalbi iyo beer jilcay oo daafacay, ayagana ka celiyey. Sidaas ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, amarka Ilaahay ugu qumay, isagoo amarkiisa soo bandhigay, ayanna jirin wax taas ka reebaya. Markaasey Qurayshi markay aragtay inuusan wax ka yeeleyn, ayagana uu dhinac iyo gooni uga baxay, ilaahyadoodiina caayey, adeerkiis Abuu Dhaalibna uu u beer jilcay, kuna hagoogtay oo ay u dhaafi waayeen difaaciisa, una diiday inuu ayaga gacanta u geliyo, ayay colaadiyeen."

Kulanka koowaad ee Abuu Dhaalib iyo Quraysh

lbnu lsxaaq wuxuu yiri: "Markaasey rag Quraysh ka mid ihi, oo madaxdooda ka mid ah waxay u tageen Abuu Dhaalib. Raggaas waxaa ka mid ahaa Cutbah bin Rabiicah bin Cabdi Shams bin Cabdi Manaaf bin Qusayy bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy bin Ghaalib iyo walaalkiis Shaybah; iyo Abuu Sufyaan bin Xarb bin Umayyah bin Cabdi Shams bin Cabdi Manaaf bin Qusayy bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr.”

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Abuu Sufyaan rnagaciisu waa Sakhr." Ibnu Isxaaq “Wuxuu yiri: "Iyo Abuu Al Bakhtariyyu, magaciisuna waa Al Caas bin Hishaam bin Al Xaarith bin Asad bin Cabdu Al Cuzzaa bin Qusayy bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy."

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Abuu Al Bakhtariyyu magaciisu waa Al Caas bin Haashim." Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Iyo Al Aswadu bin Al Mudhalib bin Asad bin Cabdu Al Cuzzaa bin Qusayy bin KiIaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy; iyo Abuu Jahl, rnagaciisuna waa Camr, waxaana lagu koofaari jiray Abaa Al Xakam oo ah xikmada aabeheed, ibnu Hishaam bin Al Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum bin Yaqthah bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy; iyo Al Waliidu bin Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum bin Yaqthah bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy; iyo Nubayh iyo Munabbih wiilasha Al Xajjaaj bin Caamir bin Xuthayfah bin Sacd bin Sahm bin Camr bin Husays bin Kacb bin Lu'ayy; iyo Al Caas bin Waa'il."

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waa Al Caas bin Waa'il bin Haashim bin Sucayd bin Sahm bin Camr bin Husays bin Kacb bin Lu'ayy."

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Iyo inta kale oo raacday oo la socotay. Markaasey markay u yimaadeen waxay yiraahdeen: "Abuu Dhaalibow, wiilka walaalkaa dhalay ilaahyadeennii ayuu caayey, diinteennana wuu ceebeeyey, yididiilladeelmana wuxuu ka dhigay mid maangaabnimo, aabayaalkeelma wuu baadiyeeyey. Marka, ama naga jooji oo ha ka haro waxaas uu nagu falayo, ama annaga iyo isaga isaga kaayo dhex bax, maxaa yeelay adigu waxaad ku dul sugantahay diinteelma, isagaadna tiisa ku khilaafsan tahay, markaas annagaa isaga filnaaneynee." Markaasuu Abuu Dhaalib wuxuu raggaas ku yiri hadal wanaagsan iyo jawaab qabow oo qurxoon oo nabadeed. Markaasey ka gaddoomeen.

Kulanka labaad ee Abuu Dhaalib iyo Quraysh

Ibnu lsxaaq wuxuu yiri: "Sidaas ayuuna Rasuulka llaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sii watay wuxuu ku taagnaa, isagoo Diinta Ilaahay soo bandhigaya oo caddeynaya, dadkana ugu yeeraya. Kaddib isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo ayaga dhexdooda waxaa kasii dhalatay shar, uuna raggu ku kala tegey, oo uu ku kala fogaaday, iskuna colaadiyey. Qurayshna waxay badisay ka hadalkeeda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ay ku wada hadleen, ayna isku booriyeen colaadintiisa iyo colaaddiisa. Markaasey mar labaad Abuu Dhaalib isu raaceen oo ay u (tageen, waxayna ku yiraahdeen: "Abaa Dhaalibow, agteenna waxaad ku leedahay da'weyni iyo sharaf iyo madaxtinnimo iyo makaan. Annaguna waxaan kaa codsannay inaad wiilka walaalkaa dhalay naga reebtid, nagamana aadan celin, annaguna wa Allaahi inaanan kan ku sabrayn, isagoo aabayaalkeen caayey, yididiilladeennana ka dhigay mid maangaabnimo, ilaahyadeenana ceebo u yeelay. Waxaan ku weydiisaneynnaa inaad naga celisid, ama aan adiga iyo isaga oo dhinac ah iyo annaga oo dhinac ah dagaallanno, ilaa labada qolo midkood halaagsanto." Ama siday yiraahdeen. Kaddibna way ka gaddoomeen. Markaasaa waxaa Abuu Dhaalib la

weynaatay ka go'idda tolkiis iyo colaaddooda, naftiisuna way yeeli weydey inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaga gacanta u geliyo oo uu garabkiisa ka baxo oo uu hoojiyo.

Kulanka saddexaad ee Abuu Dhaalib iyo Quraysh

lbnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markay Qurayshi warkaas ku tiri ayuu Abuu Dhaalib Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u ciddiray, markuu u yimidna uu ku yiri: "Wiilka walaalkeeyow, ragga tolkaa ayaa ii yimid, waxayna igu yiraahdeen sidaas iyo sidaas, oo wuxuu u sheegay waxay ku yiraahdeen. Marka, anigana iiga tur, adiguna isaga tur, hana igu xambaarin waxaanan qaadi karin." Markaasuu Rasuulka llaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u maleeyey inuu adeerkiis is tusay inuu garabkiisa ka baxo isagoo taageeridiisa kala noqonaya, oo uu ayaga gacanta ka saarayo, uuna garabsiintiisa iyo u hiillintiisa iyo u kicidda difaaciisa uu ka taagdarraaday. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Yaa camm, wa Allaahi law wadacuu al sh-shamsa fii yamiinii wa al qamara fii yasaarii calaa an atruka haathaa al amra xattaa yuth-hirahu Allaahu aw ahlika fiihi maa taraktuhu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Adeerow, wa Allaahi hadday qorraxda midigta ii saari lahaayeen, dayaxana bidixda si aan amarkaan uga tago jeer uu Ilaahay libta iyo guusha i siiyo ama aan anigu anigoo ku dhex jira amarkaan dhinto, yeeli mayo oo ka tegi mayo." Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu booyay, oo ay ilmadu hoortay. Kaddibna fadhiguu ka kacay. Markaasuu markuu gaddoomay si uu u baxo, ayuu Abuu Dhaalib u yeeray, kuna yiri: "Kaalay wiilka walaalkeeyow." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kusoo noqday. Markaasuu Abuu Dhaalib wuxuu ku yiri: "Soco, wiilka walaalkeeyow, oo wa Allaahi inaanan ebedkey cidna kuu dhiibeyn oo gacantooda ku gelineyn."

Kulanka afaraad ee Abuu Dhaalib iyo Quraysh

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasey Qurayshi markay ogaatay inuusan Abuu Dhaalib Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hillintiisa iyo difaaciisa ka noqoneyn oo uusan garabkiisa ka baxayn si loo hoojiyo, uuna diiday inuu ayaga gacanta u geliyo, uuna goostay inuu taas daraadeed ayaga ka go'o oo uu colaadiyo, way u tageen, ayagoo wada ninka la yiraahdo Cumaarah bin Al Waliidu bin Al Mughiirah, waxayna ku yiraahdeen, sida isoo gaartay: "Abuu Dhaalibow, kani waa Cumaarah bin Al Waliid, waana ninka Quraysh ugu xoog badan, uguna quruxsan ee isaga qaado, adigaana iska leh diyadiisa iyo hiilkiisaba, wiilna ka dhigo oo adigaa iska leh, annagana waxaad gacanta noo soo gelisaa wiilkaan walaalkaa dhalay oo diintaada khilaafay oo ka leexday iyo diinta aabayaalkaagii hore, midnimada tolkaana kala firdhiyey, yididiiladoodana xumeeyey, si aan u dilno, oo waa nin nin kale la dhaafsaday." Markaasuu wuxuu yiri: "Wa Allaahi wax xun ayaad igu malayseen oo aad ila dooneysaan. Ma waxaad i siineysaan wiilkiinna si aan cunno idiinku siiyo oo u koriyo, aniguna waxaan idin siiyaa wiilkeyga si aad u dishaan? Wa Allaahi inayan taasu weligeed ahaaneyn." Markaasu Al Mudhcimu bin Cadiyyi bin Nawfal bin Cabdu Manaaf bin Qusayy wuxuu yiri: "Wa Allaahi Abaa Dhaalibow, tolkaa way kuu garsooreen, waxayna ku dadaaleen inay kaa duwaan waxaad kahato, umase jeedo inaad waxna ka oggolaaneysid." Markaasuu Abuu Dhaalib wuxuu Mudhcim ku yiri: "Wa Allaahi inayan ii garsoorin, laakiin adigu waxaad goosatay inaad ragga ugu hiillisid hoojinteyda, ee waxaad doontid fal." Ama siduu yiriba. Markaasuu arrinku kululaaday oo xarbi la isku diyaariyey, ragguna uu kala fogaaday oo is colaadiyey, colaadana isku

muujiyey."

Ku ololeynta muslimiinta

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Kaddib Qurayshi waxay ku ololeysey kuwa qabaa'ilkooda ka midka ah o islaamay oo asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, noqday. Markaasuu qabiil walba ku booday oo weeraray kuwa muslimiinta ah oo ku jira, oo ay cathaabaan, ay diintoodana ka fitneeyeen si ay uga baxaan. Ilaahayna wuxuu Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku ilaaliyey Abuu Dhaalib, isagoo uu Abuu Dhaalib markuu arkay wax ay Qurayshi faleyso, reer Banuu Haashim iyo reer Al Mudh-dhalib isugu yeeray, uuna ku amray inay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gaashaan u noqdaan aan loo soo dhaafi karin, siduu isaga laftiisu ugu yahay oo kale. Markaasey sidaas ku heshiiyeen oo ay u goosteen, ayna la safteen, kana yeeleen wuxuu ugu yeeray, intaan aka ahayn Abuu Lahb, cadawga Ilaahay oo malcuunka ah. Markaasuu Abuu Dhaalib markuu tolkiis ka arkay wax farax geliyay, o ah go'aankooda inay heegan u yihiin, una beer jilceen difaaca Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayuu ammaanay, xusayna aabayaalkoodii hore iyo fadliga Rasuulka llaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo makaankuu dhexdooda ku leeyahay, isagoo xoojinaya amarkooda iyo amarkiisa, iyo inay u beer jilceen." Gabay ayuuna halkaas ka tiriyey.

Mawqifka Al Waliidu bin Al Mughiirah ee Quraanka

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxaa Al Waliidu bin Al Mughiirah agtiisa isugu yimid, isagoo agtooda makaan iyo madaxtinnimo iyo da' weyniba ku lahaa, rag Quraysh ah, ayadoo markaas muusimka Xajka la joogo. Markaasuu wuxuu raggaas ku yiri: "Ragga Qurayshow, waxaa la gaaray waqtiga Xajka, waxaana soo cocda oo idiin imaanaya wufuudda Carabta, ayagoo saaxiibkiinnaan -uuna ka wado Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam- warkiisa maqlay. Marka hal ra'yi ku heshiiya oo aad ku tiraahdaan, oo intaad aragtiyo kala duwan ka bixisaan adinku ha is khilaafina, yuusan qaarkiinna qaarka kale beenin, oo ay hadalladiinna qaarkood qaarka ka horyimaadaan." Waxay yiraahdeen: "Hadaba adigu, Cabdi Shams aabihiisow, dheh oo ra'yi keen aan Carabta ku niraahno." Wuxuu yiri: "Mayee, bal adinku ra'yi keena, aniguna waan idin dhegeysanayaa." Waxay yiraahdeen: "Waxaan leennahay waa kaahin, oo ah faaliye." Wuxuu yiri: "Wa Allaahi maya inuusan kaahin ahayn. Kuhaanta waa naqaannaa oo aan aragnay, isaguna kuhaanta hoos u hadliddooda iyo nuunaaskooda daciifka ah ma laha iyo hadalladooda isku miisaaman." Waxay yiraahdeen: "Hadaba waxaan leenahay wuu waalanyahay." Wuxuu yiri: "Maya, oo ma waalna, o dadka waalan waan aragnay oo naqaannaa, isaguna sidoodoo kale hadalka ku ceegsami mayo, firgashadooda iyo guryankooda iyo hoos u hadalkooda midna ma laha." Waxay yiraahdeen: "Waxaan leenahay waa gabayaa." Wuxuu yiri: "Gabayaa ma uusan aha, oo gabayada anwaacdooda oo idil waa naqaannaa iyo miisaankoodaba." Waxay yiraahdeen: "Waxaan leenahay waa saaxir." Markaasuu wuxuu yiri: "Isagu saaxir ma ah, oo waan aragnay oo naqaannaa kuwa wax sixra iyo sixirkoodaba, isaguna ma laha wax tuftufiddooda iyo wax guntintoodaba." Waxay yiraahdeen: "Hadaba, Cabdu Shams aabihiisow, maxaan niraahnaa?" Wuxuu yiri: "Wa Allaahi hadalkiisu -wuxuuna ka wadaa Quraanka Kariimka ah- wuxuu leeyahay macaan, oo asalkiisu, waa jirriddiisee, waa geed timireed, (oo siduu Al Suhaylii u macneeyey waa xoog badan yahay oo uu sugan yahay), faraciisuna waa macaan yahay (oo ah siduu Al Suhaylii u macneeyey waa macaanka markay timirtu geedka laamihiisa ku taalla ay bislaato)."
Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waxaa la yiraahdaa oo kale: "Asalkiisu la ghadhaqun" (oo

siduu Al Suhaylii ku macneeyey ah biyaha badan, oo sidaasaa nin ka mid ah adeerrada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, loo oran jiray Al Ghaydaaqu, looguna bixiyey deeqsinnimadisa iyo siday u badnaayeen wuxuu bixin jiray. Ninka candhuuf tufidda badanna waxaa la yiraahdaa ghaydaqa al rajulu, oo ah candhuuf tufiddiisa ayaa badatay). Al Waliidu bin Al Mughiirah oo hadalkiisa sii wata wuxuu yiri: "Mid ka mid ah intaasoo idil haddaad tiraahdaanna waxaa la ogaanayaa inuu warkiinnu been yahay. Hadalka ugu dhow inaad ku tilmaantaanna waa inaad tiraahdaan waa saaxir, oo wuxuu la yimid sixir uu ku kala geynayo ninka iyo aabihiis, iyo ninka iyo walaalkiis iyo ninka iyo haweentiisa iyo ninka iyo cashiiradiisa, oo ah tolkiis." Taas ayayna qaateen oo ay fadhigaas kula kala tageen. Markaasey waxay dadka Carabta ah oo Xajka u yimid u fariisteen jidadka Makkah soo gala oo idil, oo qofka soo marana waxay uga digi jireen Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arrinkaas ay ku heshiiyeenna way u sheegi jireen."

Quraanka Al Waliidu bin Al Mughiirah kasoo degay

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "'Fadhigaas dabadiis wuxuu Ilaahay Tacaalaa Al Waliidu bin Al Mughiirah kasoo dejiyay Aayadaha kow iyo toban ilaa shan iyo labaatan ee Suuratu Al Mudath-thir**: "Tharnii wa man khalaqtu waxiidan**(11)**Wa jacaltu labu maalan mamduudan**(12)**Wa baniina shuhuudan**(13)**Wa mahhadtu lahu tamhiidan(**14)**Thumma yadhmacu an aziida**(15)**Kallaa innahu kaana li aayaatinaa caniidan**(16)**Sa urhiquhu sacuudan**(17)**Innahu fakkara wa qaddara**(18)**Faqutila kayfa qaddara**(19)**Thumma qutila kayfa qaddara**(20)**Thumma nathara**(21)**Thumma cabasa wa basara**(22)**Thumma adbara wa istakbara**(23)**Faqaala in haathaa illaa sixrun yu'tharu**(24)**In haathaa illaa qawlu al bashari**(25)**.**" Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Isu kaaya daaya Aniga iyo midkaan abuuray isagoo keligiis ah(11)Aanna u yeelay maal badan(12)Iyo wiilal Makkah goobjoog ka ah(13)Aanna rizqiga u waasiciyay(14)Oo hadana damcaya inaan usii badiyo(l5)Sidaas uu doonayo ma ah, oo isagu wuxuu diiday aayaadkeenna(16)Waxaan ku cadaabaya cadaab adag(17)Isagu wuu fakaray, waxbuuna goostay(18)Lacnad korkiisa ha ahaatee sideebuu uu u goostay wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Quraanka ka oran lahaa(l9) Lacnad korkiisa ha ahaatee sideebuu uu u goostay wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Quraanka ka oran lahaa(20)Kaddibna wuxuu fiiriyey wuxuu Quraanka ku celin lahaa(21)Kaddibna wajiguu kaduuday oo uu aruuriyey(22)Markaasu dib u jeestay oo uu is kibriyey(23)Markaasuu yiri: Quraankaanu ma aha waxaan sixir ahayn lasoo guuriyey oo sixirka ka warramaya(24)Kani ma aha waxaan hadal dad ahayn(25)." Ibnu lsxaaq wuxuu yiri: "Ilaahay Tacaalaa wuxuu Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kusoo dejiyay iyo raggii Al Waliidu bin Al Mughiirah la joogay oo hadalka u hindisay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo waxay Quraanka ku tilmaameen Aayadaha sagaashan iyo labo iyo sagaashan iyo saddex iyo sagaashan ee Suuratu Al Xijri: **"Kamaa anzalnaa calaa al muqtasimiina**(90)**Allathiina jacaluu Al Qur'aana cidiina**(91)**Fawa Rabbika lanas'alannahum ajmaciina**(92)**Cammaa kaanuu yacmaluuna**(93)**."** Aayada macnohoodu waxaa weeye: "Sidaan ugu soo dejinnay cadaab kuwii isku dhaarsaday (dhibidda xaqqa)(90)Ee ka yeelay Quraanka qaybo(91)Rabbigaa ayaan ku dhaartaye waa la weydiinayaa dhammaantood(92)Waxay falayeen(93)."

Warka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo dalalka Carabta ku faafay

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Raggaas Al Waliidu bin Al Mughiirah la shiray hadalkaas ayay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku tilmaameen, ayna u sheegeen dadkay la kulmaan oo Xajka u yimid. Sidaas ayuu dadkii Carabta ahaa ee Makkah Xajka u yimid waxay dalalkooda dib ugu laabteen ayagoo xogogaal u noqday amarka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo sidaasuu warkiisu dhammaan dalalka Carabta ugu faafay."

Islaamidda Xamzah

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo buurta Al Saffaa ag fadhiya, ayaa waxaa soo maray Abuu Jahl. Markaasuu dhib u geystay oo uu caayey, uuna u geystay wuxuu kahdo oo cayda Diintiisa ah, uuna doonayo inuu ku wiiqo amarkiisa. Markaasuusan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, juuq u oran oo uusan la hadlin. Intaas waxaa dhegeysaneysa haweeney mawle u ah Cabdu Allaahi bin Judcaan bin Camr bin Kacb bin Sacd bin Taym bin Murrah, ayadoo gurigeeda ku dhex jirta. Markuu intaas u geystay ayuu ka tegey, wuxuuna aaday naadi Quraysheed oo Kacbada agteeda ku yiillay, oo uu ragga halkaas ku sugnaa la fariistay. In yar kaddibba waxaa bartaas soo maray, waana meeshuu Abuu Jahl Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calyhi Wasallam, ku aflagaadeeyey, Xamzah bin Cabdu Al Mudh-dhalib, Allaaha raalli ka noqdee, isagoo ay qaansadiisu garabka u suran tahay, oo ugaarsi uu ku maqnaa kasoo laabtay, wuxuuna ahaa nin fallaarta uu qaansada ka gano ku ugaarsada. Xamzah caadadiisuna waxay ahayd in markuu ugaarsi ka soo laabto uusan gurigiisa tegin jeer uu Kacbada ku dhawaafo. Markuu Kacbda ku dhawaafo kaddib ayuu markuu naadi Qurayshi leedahay ag maraba intuu la joogsado ayuu ragga halkaas fadhiya salaamaa, oo uu la sheekeystaa. Xamzah wuxuu ahaa ninka Quraysh ugu xoog badan, uguna go'aan adag oo aan la liicin karin adayggiisa. Markaasuu markuu haweentaas soo ag maray, ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gurigiisa u laabtay, ayay waxay ku tiri: "Cumaarah aabihisow, miyaad ogtahay wuxuu wiilka walaalkaa dhalay uu haddeer kala kulmay Abuu Al Xakam bin Hishaam? Wuxuu ka helay isagoo halkaan fadhiya, markaasuu dhibaato u geystay, uuna caayey, uuna ku falay wuxuu kahdo. Markuu intaas ku falay kaddibna wuu ka tegey. Muxammadna (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) lama uusan hadlin." Markaasey Xamzah caro qaadday, ayadoo uu Ilaahay doonayo inuu karaameeyo daraadeed. Markaasuu orday, uusanna axadna ag istaagin, isagoo doonaya inuu Abuu Jahl ciqaabo. Markaasuu markuu Masjidka galay wuxuu arkay isagoo rag la fadhiya, oo uu markaas isaga soo aaday. Markuu dul yimid ayuu intuu qaansadiisa kor u qaaday madaxa uga dhuftay, uuna dhaawac xun gaarsiiyey, kaddibna uu yiri: "Ma waxaad caayeysaa (waa Nabigee, Sallaa Alalaahu Calayhi Wasallam) anigoo Diintiisa ku taagan, hadalkeyguna uu hadalkiisa yahay? Car wax igu dhufo haddaad kartid." Markaasaa waxaa Xamzah usoo kacay rag reer Banii Makhzuum ah (waana tolka Abuu Jahl), doonayana inay Abuu Jahl u hiilliyaan. Markaasuu Abuu Jahl wuxuu raggaas ku yiri: "Cumaarah aabihiis iska daaya, oo anigu wa Allaahi waxaan wiilka walaalkiis dhalay ku caayey cay xun." Sidaas ayuu Xamzah ku islaamay, islaannimadiisuna ay taam noqotay, uuna ku sugnaaday, Allaaha raalli ka noqdee, awaamirta Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu u hoggaansamay. Markuu Xamzah islaamay waxay Qurayshi ogaatay inuu RasuuIka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu noqday mid caziiz ah oo aan laga adkaan karin oo ilaalsan, Xamzahna uu ilaalinayo oo daafacayo. Markaasey waxay u geysan

jireen qaarkood ka hareen.

Xamzah

Ibnu Al Athiir wuxuu Usudu Al Ghaabah ku yiri: "Xamzah bin Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim bin Cabdu Manaaf bin Qusayy, kuniyadiisuna waa Abuu Yaclaa, waxaana kaloo la yiri waa Abuu Cumaarah, oo Cumaarah waa wiil uu dhalay oo uu Al Nawawii yiri waxaa u dhashay haweeney reer Banii Al Najjaar ah. Xamzah hooyadiisna waa Haalah bintu Wahiib (Uhaybna waxaa yiri Al Nawawii iyo ghayrkiisba) bin Cabdi Manaaf bin Zuhrah, ahna ina adeerta Aaminah bintu Wahab bin Cabdi Manaaf, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hooyadiisa dhashay. Xamzah waxay isku hooyo yihiin iyo isku aabeba Safiyyah bintu Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim hooyada dhashay Al Zubayru ibnu Al Cawwaamu. Xamzah waa adeerka Rasuulka Ilaahau, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, iyo walaalkiis xagga nuugmada, ayadoo ay wada nuujisay Thuwaybah mawladii Abuu Lahab, taasoo nuujisay oo kale Abuu Salamah bin Cabdi Al Asad. Xamzah wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka weynaa labo sano. Waxaa kaloo la yiri afar sano, tan hore ayaana sax ah (Siiradaanna waxaan ku aragnay inuu Xamzah Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku fac yahay oo ay mar naas wada nuugeen). Xamzah waa sayyidka madax u ah shuhadaa'da islaanka. Xamzah wuxuu islaamay sanadka labaad ee Bicthada." Usudu Al Ghaabah warkaas islaamidda Xamzah wuxuu ku kordhiyay in markuu Abuu Jahl dhaawacay, sidaan usoo aragnay, inay raggaas usoo kacay inay u hiilliyaan ay Xamzah ku yiraahdeen: "Xamzow diintaada ayaad ka leexatayl" Markaasuu Xamzah wuxuu yiri: “Oo maxaa taas iga hortaagan kaddib markuu amarku ii caddaaday? Anigu waxaan marag ka ahay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yahay, wuxuu leeyahayna uu xaq run ah yahay. Marka wa Allaahi inaanan ka harayn, ee adinku iga reeba haddaad run sheegeysaan." Xamzah wuxuu u haajaray Al Madiinah, wuxuuna goob joog ka ahaa Badr, halkaasoo uu balaayo weyn gaalada ku dhigay oo la wada ogsoon yahay, isagoo dilay Shaybah bin Rabiicah bin Cabdi Shaams, kana qayb galay dilka Cutbah bin Rabiicah, ayna diliddiisa isaga Cubaydah bin Al Xaarith iyo Calii bin Abii Dhaalib wadaageen. Wuxuu kaloo dilay Dhucaymah bin Cadiyyi bin Nawfal bin Cabdi Manaaf oo ah walaalka la dhashay Al Mudhcim bin Cadiyyi. Calanka duullaan oo ugu horreyey oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, guntay wuxuu u guntay Xamzah, una diray xeebta Badda Cas ee arliga Juhaynah. Waxaana khilaafay ibnu Isxaaq oo yiri calanka ugu horreeyey wuxuu u guntay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Cubaydah bin Al Xaarith bin Al Mudh-dhalib. Markuu xarbi gelayo Xamzah wuxuu isku calaamadeyn jiray isagoo surta baal goroyo. Maalinta Badr wuxuu ku dagaallamay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Aallaahu Calayhi Wasallam, hortiisa isagoo laba seefood ay gacanta ugu jiraan. Nin ka mid ah gaaladii la qafaalay ayaa wuxuu yiri: "Waa kee ninka baalka goroyo ku calaamadeysnaa?" Waxay yiraahdeen: "Xamzah", Allaha raalli ka noqdee. Wuxuu yiri: "Waa nikaas ninka waxa weyn nagu falay oo dhibaatada noo geystay." Xamzah wuxuu goob joog ahaa duullaanka Uxud, halkaasoo lagu dilay maalinta sabti ee nuska bisha Shawwaal. Intaan la dilin ka hor wuxuu gaalada maalintaas ka dilay kow iyo soddon nin, uuna ka mid ahaa Subaac Al Khuzaacii oo uu Xamzah ku yiri: "Aniga ii kaalay midkay dhashayow midda kintirrada goysow", kaasoo ay hooyadiis gabdhaha Makkah ku gudi jirtay. Markaasuu dilay. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Maalintaas Xamzah wuxuu ku dagaallamayey laba seefood. Markaasuu nin wuxuu yiri: "Xamzah waa libaax!" Markaasuu isagoo dagaallamaya uu turaanturrooday oo uu markaas xagga dhabarkiisa u dhacay. Markaasaa cambuur bireedkuu xirnaa wuxuu ka faydmay calooshiisa. Markaasuu Waxshiyyu, mawlaha Jubayr bin Mudhcim, waran caloosha ka geliyay, oo

uu sidaas ku dilay. Markaasey gaaladu thakarkana ka gooyeen iyo labada dhegood iyo sanka, Hindana intay calooshiisa dillaacisay ay beerkiisa soo bixisay oo ay inatay cad ka goosatay qaniintay oo ay calaalisay, kaddibna ay soo matagtay. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Law dakhala badhnahaa lam tamassahaa al Nnaaru**", oo macneheedu yahay: "Hadduu caloosheeda geli lahaa, waa cadkaas beerka Xamzah oo ay afka gashataye, Naarta ma ayan gasheen, maxaa yeelay, siday riwaayad kale noo caddeysay, Ilaahay agtiisa Xamzah waa ka karaamo badan yahay inuu cad hilibkiisa ka mid ah uu Naarta geliyo." Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Xamzah sidaas ku arkay ayuu aad u carooday, uuna yiri: **"La in thafartu la amthilanna bi sabciina minhum",** o macneheedu yahay: "Haddaan gaalada reer Makkah ka adkaadu waxaan sidaas oo kale u googoynayaa toddobaatan ayaga ka mid ah." Markaasuu Ilaahay Subxaanahu wa Tacaalaa wuxuu soo dejiyay Aayadaha boqol iyo lix iyo labaatan iyo toddoba iyo labaatan ee Suuratu Al Naxli: **"Wa in caaqabtum facaaqibuu bimithli maa cuuqibtum bihi wa la'in sabartum lahuwa khayrun lilsaabiriina**(126)**Wa asbir wa maa sabruka illaa bi Allaahi wa laa taxzan calayhim wa laa taku fii dayqin mimmaa yamkuruuna**(127)**"**. Labada Aayadood macnohoodu waxaa weeye: "Haddaad wax ciqaabeysaan waxaad u ciqaabtaan in la mid ah inta adinka la idinku ciqaabay, haddaad sabartaanna sabarkaa u khayr badan kuwa sabra(126)Sabar, mana aha sabarkaagu Ilaahay daraadiis mooyee, hana ka murugoon, hana ka ciriiryamin waxay dhagar falayaan(17)." Abuu Hurayrah wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu dul istaagay Xamzah oo jirkiisa wax laga googooyeey, taasoo aan la arag wax qalbigiisa uga xanuun badan, markaasuu wuxuu yiri: **"Raximaka Allaahu, ay camm, falaqad kunta wusuulan lilrraximi facuulan lilkhayraati",** oo macnihiisu yahay: "Allaha kuu naxariisto adeerow, waxaa hubaal ah inaad ahayd mid riximka xiriiriya khayraadkana suubiya." Xamzah koofaartiisuna waa Libaaxa Ilaahay iyo Libaaxa Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaas la dilay Xamzah waa toddoba iyo konton jir, ama sagaal iyo konton jir hadba hadduu Rasuulka Ilaahay, SalIaa Allaahu Calayhi Wasallam, labo ama afar sano ka da' weynaa. Xamzah iyo shuhada'ada Uxud waxaa ku tukaday Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalla." Waa intaas warkaan kasoo guurinnay Usudu Al Ghaabah. Xamzah, siduu Al Nawawii Tahthiibu Al Asmaa'i wa Al Lughaati ku yiri, ciribi kama ayan harin.

Dadkuu Abuu Bakr Al Siddiiqu gatay uuna xoreeyey

Bilaal kaddib, Abuu Bakr Al Siddiiqu wuxuu intuu dadkii lahaa ka gatay uu xoreeyey, intuusan Al Madiinah u haajirin, si deed qof oo kale, Bilaalna uu ku sagaalyahay. Dadkaasu waxay kala yihiinyahay:

(Kow) Caamir bin fuhayrah, oo aan kitaabkeenna Nuurka Islaamka uga soo warbixinnay.

(Labo) Ummu Cubays, ahna haweenta Kurayz bin Rabiicah bin Xabiib bin Cabdu Shams, una dhashay wiil la yiraahdo Cubays. Ummu Cubays islaamka bilawgiisay islaamtay, taasna waa lagu cathaabay, waxayna addoon u ahayd reer Banii Jumax bin Murrah. Waxaa kaloo uu Cabdu Al Razzaaq wariyay in laga lahaa reer Banii Zuhrah, uuna cathaabi jiray Al Aswadu bin Cabdi Yaguuth.

(Saddex) Zinnirah. Al Zarqaawii wuxuu soo guuriyay oo uu yiri: "Cumar wuxuu lahaa addoon isga hortiis islaamtay, Iana yiraahdo Zinniirah. Markaasuu islaamiddeeda ku dili jiray. Gaalada Qurayshna waxayba oran jireen: "Hadduu islaamku khayr leeyahay Zinniirah noogama ay hormarteen." Markaasuu Ilaahay Tacaala wuxuu soo dejiyay Aayadda kow iyo tobnaad ee Suuratu Al Axqaafi: **"Wa qaala allthiina kafaruu lillathiina aamanuu law kaana khayran maa sabaquunaa ilayhi wa**

ith lam yahtaduu bihi fa sayaquuluuna haathaa ifkun qadiimun." Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Gaaladii waxay ka yiraahdeen kuwa rumeeyey: "Hadday Diinta Muxammad (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) khayr leedahay hebel iyo hebel noogama ay hormareen. Markay ku hanuuni waayeen Quraankana, siday ugu hanuuneen kuwa rumeeyey, waxay yiraahdeen: "Kani waa beenihii hore." Ibnu Sacadna sidoo kale ayuu wariyay. Markay islaantay kaddib ayay Zinniirah indho beeshay. Markaasey gaaladu waxay yiraahdeen: "Waxaa indho tiray Al Laata iyo Al Cuzzaa." Abuu Jahalna wuxuu ku yiri: "Al Laata iyo Al Cuzzaa waxay kugu faleen waad u jeeddaa." Markaasey waxay tiri: "WaAllaahi inayan sidaas ahayn, oo Al Laata iyo Al Cuzzaa kuwa caabudaba kama ay warhayaan, laakiin waxaan igu dhacay waa amar Samada ka yimid. Rabbigayna wuu awoodaa inuu araggayga ii soo celiyo." Markaasuu Ilaahay subixii habeenkaas ku xigay araggeeda usoo celiyay. Markaasey Qurayshi wax ay tiri: "Kani waa sixirka Muxammad (Sallaa Allaahi Calayhi Wasallam)." Markaasuu Abuu Bakr Al Siddiiqu gatay, uuna xoreeyey. Ibnu Athiir wuxuu Usudu Al Ghaabah ku yiri: "Waa Zinniirah Al Ruumiyyah, oo roomaanka ahayd, oo ka mid ah kuwa horeba islaamka ugu horreeyey, waxayna addoon u ahayd reel' Banii Makhzuum, oo sidaasuu Abuu Jahl ku cathaabi jiray. Waxaa kaloo la yiri waxaa lahaa reer Banii Cabdu Al Daar."

Al Ssaxxaar wuxuu kitaabkiisa “Muxammadun Rasuulu Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wa allathiina macahu” ku yiri: "Zinniirah magaceedu waa Nawwaar bintu Numayrah ibnu Xaabis bin Thaclabah, siday addoon ku notayna waa sidatan. Miyigaas Makkah hareerihiisa ah waxaa degganaa ninka la yiraahdo Thaalim bin Cadiyyi oo u dhashay qabiilka wayn ee Banuu Tamiim, tolkiisna madax u ahaa. Thaalim iyo raggiisu waxay ilaalo ahaan u raaci jireen oo ay burcadda ka ilaalin jireen labad safar ee Quraysh. Thaalim wuxuu lahaa in ka badan boqol haween oo u dhalay boqol wiil, gabdhaha u dhashana wuu duugi jiray, oo sidaasuusan gabarna ku lahayn. Haweenta wiil u dhasha wuxuu siin jiray khaymad fiican oo meel fiican ku taalla iyo dameer ay fuusho iyo addoon u adeega. Haweenta gabadha dhasha iyo middaan waxba dhalinna waxaa la dejin jiray saxrada, gaadiid iyo adeege midna lama siin jirin. Wuxuu qabiil kale ka gursaday haweeney la yiraahdo Bu'aysah bintu Xaabis bin Thaclabah, markaasay gabar u dhashay. Markaasuu gabadha nolol ku duugay. Markaasay hadana uur yeelatay o isagoo maqan ay gabar kale dhashay. Waxayna ka baqday inuu Thaalim markuu soo noqdo uu duugo. Markaasay hooyadeed u dhiibtay inay u koriso, isagana markuu soo noqday waxay u sheegtay inay wiil mayd ah dhashay. Markaasuu wuxuu yiri: "haweenta dhasha wiil mayd ah way dhali kartaa wiil nool." Markaasaa waxaa gabadheeda cunug ka dhigtay Bu'aysah walaalkeed Numayrah, wuxuuna u bixiyay Murayyah, oo macnihiisu yahay "geed yar." Bu'aysah waxay Thaalim u dhashay oo kale laba wiil oo midkood Thu'ayb la yiraahdo, kan kalena Faatik. Markay Murayyah ilaa toban ku dhowaatay ayay waxay Bu'asah ka bariday inay gabadheeda u keento si ay u aragto, wayna yeeshay. Markaasaa ayadoo khaymaddeeda la joogta ayaa waxaa usoo galay Thaalim oo inta u bogay sheegay inuu guursanayo. Markaasay soddohdiis waxay ku tiri: "tolkeed ka doon." Wuxuu yiri: "tolkeed waa kee?" Waxay tiri: "waa annaga tolkeen." Markaasuu tuuladooda yimid isagoo gabadhaas ka doonaya. Markaasuu seedigiisa Bu'aysah la dhashay Numayrah wuxuu ku yiri: "gabdhaan ma guursan kartid." Wuxuu yiri: "maxaana dhacay?" Wuxuu yiri: "adigaa dhalay." Markaasuu waxa dhacay o idil u sheegay. Thaalim wuxuu gacanta ku dhegay gabadhiisa si uu usoo duugo. Gabdhaas waxaa raacday oo ay is jeclaayeen oo ay saaxiib ahaayeen gabadha uu dhalay Numayrah oo magaceedu yahay Nawwaar. Markaasuu gabdhiisa duugay, Nawaarna uu meeshaas uga tegay. Nawwaar way luntay oo tuuladeeda aqoon wayday oo waxay ahayd dhawr sano jir. Nawwaar aabeheed markuu gabadhiisa waayay ayuu wuxuu u maleeyey inuu Thaalim ayadana dilay oo

duugay. Markaasuu wuxuu tegay tuulada Thaalim oo uu guriga walaashiis ayadoo uu Thaalim u jeedo iyo walaashiis Bu'aysah ayuu Faatik oo labada wiil oo walaashiis dhashay midkood halkaas ku gawracay, isagoo Nawwaar uga aar goosanaya. Markaasuu Thaalim ciidan soo watay oo uu tuuladooda gubay dadkeeda o idilna wada dilay. Markaasay Nawwaar waxay usoo noqotay tuuladeeda oo la gubay axad noolna uusan joogin. Markaasay halkaas fariisatay ayagoo booyeysa. Markaasna way ka yartahay toban sano oo lix ama toddoba ayay jirtaa. Markaasaa waxaa halkaas soo maray safar oo inta qaatay Makkah addoon ahaan ugu gatay. Maadaama ayan gabadha iyo ninka soo helayba ayan wadan warqad caddayneysa inaan gabadhaas lasoo xadin, oo sidaas qofka gata uu uga baqayo in markuu lacagteeda bixiyo hadana laga daba yimaado oo laga ceshado, waxaa gadatay haweenay saaxirad iyo kaahinad ah oo magaceedu yahay Ummu Jaxdar. Sidaasay kaahinad iyo saaxirad ku noqotay.

Markaasaa marka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lasoo diray ay rumaysay oo raacday oo muslimad noqotay. Markaasaa la cathaabay.

Waxaa gatay oo xoreeyey Abuu Bakar Al Ssiddiiqu.

Thu'ayb ayaa walaalkiis Cadiyyi usoo dhiibay saddex boqol oo Diinaar oo meherkeeda ah inuu u guuriyo, wuuna u guuriyay. Markaasuu waday oo uu arliga xabashada ugu geeyey. Haweeney magaceedu ahaa Saarrah oo yuhuudda Banii Al Nnadiir u dhalatay oo Makkah guri lagu dhillaysto oo khamrada lagu cabo lahayd ayaa waxay ka daba dirtay walaalkood Shaddaad bin Thaalim si uu Cadiyyu u dilo. Markaasuu mindi ku tuuray, waxaana isaga dhigay oo naftiisa ku furtay Thu'ayb oo halkaas ku dhintay. Markaasay Cadiyyi iyo Nawwaar Makkah kusoo laabteen. Markaasaa waxaa dhacay Al Israa'u wa Al Micraaju.

Waxaa guursaday Khabbaab bin Al Arat, saxaabiga wayn Allaha raalli ka wada noqdee.

(Afar iyo shan) Al Nahdiyyah iyo gabadheeda ay dhashay. Labadoodana waxaa lahayd haweeney reer Banii Cabdu Al Ddaar u dhalatay. Markaasuu Abuu Bakr Al Siddiiqu soo maray ayadoo labadooda u dirtay oo ay sidaan badar lasoo shiidayo, ayaduna ay leedahay: "Wa Allaahi inaanan weligay idin xoreeneyn." Markaasuu Abuu Bakr, Allaha raalli ka noqdee, wuxuu ku yiri: "Hebel hooyadiisey, sidaas ha oran! Ka xalaalow dhaartaada oo ka noqo." Markaasey waxay tiri: "Waa ka noqday, adigaana labadoodaba fasaadiyeye hadaba xoree." Wuxuu yiri: "Meeqaad labadoodaba ku dooneysaa?" Waxay tiri: "Intaas iyo intaas." Wuxuu yiri: "Waa ku qaatay labadoodaba. Labadooduna waa xor." Markaasuu wuxuu labadooda ku yiri: "u celiya badarkeeda." Waxay yiraahdeen: "Mase hawshaan usoo dhammaynnaa Abuu Bakarow, kaddibna aan badarkeed oo shiidan u celinnaa?" Wuxuu yiri: "Waa haddaad adinku doontaan oo keli ah." Labadoodaaas waxaa kaloo la yiri inuu lahaan jiray Al Waliidu bin Al Mughiirah, oo si xun u cathaabi jiray. Al Nahdiga loo nisbeeyayna waa qabiil Carbeed oo Yaman degah.

(Lix) Addoomad ay lahaayeen reer Banii Mu' ammal, o ah jilib ka tirsan reer Bani Cadiyy bin Kacb, oo muslimad ahayd, uuna Cumar cathaabi jiray si ay islaamka uga baxdo, uuna garaaci jiray ilaa uu ka daalo. Markaasuu wuxuu ku yiraahdaa: "Waxaan garaacidda kaaga joojiyay maxaa yeelay waan daalay." Markaasey waxay tiraahdaa: "Ilaahay sidaad ii gashay oo kale ha kuu galo." Markaasuu Abuu Bakr Al Siddiiqu gatay oo uu xoreeyey.

(Toddoba) Bilaal hooyadiis, siduu ibnu Cabdu Al Barr u wariyay, magaceeduna uu ahaa **Xamaamah**.

(Sideed) Abuu Fukayhah, ayna lahaayeen reer Banii Cabdu Al Daar, siduu ibnu Athiir u yiri: "Waxaa la yiraahdaa inuu qabiilka Carbeed ee Azd u dashay. Waxay usoo bixin jireen dhagaxda kulul ee Makkah, isagoo ay lugta silsilad bir ahi uga xirantahay, o inta dhar loo labbiso ayaa waxaa la dhebbiciyaa dhagaxda kulul korkooda. Markaasaa waxaa lasoo qaadaa dhagax dhardhaar ah oo wayn oo dhabarkaa laga saaraa ilaa uu

caqilgu ka tago oo uu isku dardarsamo. Sidaas ayuu ku sugnaa ilaa ay asxaabta Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arliga xabashida u haajireen marka labaad, markaasuu raacay. Ibnu Isxaaq iyo Al Dhabarii waxay wariyeen inuu lahaa Safwaan bin Umayyah bin Khalaf al Jumaxii, wuxuuna islaamay markuu Bilaal islaamay. Markaasu Umayyah intuu soo qabtay ayuu lugta bir uga xiray oo intuu amray dhulka lagu jiiday, kaddibna dhagaxda kulul ku kor tuuray. Markaasaa waxaa soo ag maray doorshaan, markaasuu Umayyah wuxuu ku yiri: "Soo kani Rabbigaa ma aha?" Markaasuu wuxuu yiri: "llaahay ayaa ah aniga Rabbigay iyo adiga Rabbigaaba." Markaasuu si xoog ah u ceejiyay ayadoo uu ag taagan yahay walaalkiis Ubayyah bin Khalaf oo ku leh: "U kordhi cathaabta." Sidaas ayay ku hayeen ilaa ay ka maleeyeen inuu dhintay. Markaasaa waxaa soo maray Abuu Bakr Al Siddiiqu oo ka gatay, oo xoreeyey. Abuu Fukayha Al Madiinah ayuu u haajiray, wuxuuna dhintay Badr hortiis."

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Islaamidda Cumar bin Al Khadh-dhaab

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markay Camr bin Al Caas iyo Cabdu Allaahi bin Abii Rabiicah Quraysh dib ugu soo laabteen ayagoo gaari waayey waxay la dooneen asxaabta Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, Al Najaashiyyuna uu lasoo celiyay waxay kahdaan, Cumar bin Al Khadh-dhaabna uu islaamay, kanoo ahaa nin xoog badan oo karti leh, dadka ka dambeeyana oo asxaabtiisa ah aan lagu dhicin in wax loo geysto, ayay asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, cudud ku yeesheen oo ay ku xoogeysteen isaga iyo Xamzah, oo ay sidaas Quraysh gacanta sare uga heleen. Cabdu Allaai bin Mascuud wuxuu yiri: "Ma aanan awoodi jirin inaan Kacbada agteeda ku tukano jeer uu Cumar bin Al Khadh-dhaab ka islaamay. Markaasuu markuu islaamay Quraysh la dagaallamay, uuna la dagaallamayey ilaa uu Kacbada dhinaceeda uga tukado. Markaasaan annaguna la tukannay. Islaamidda Cumarna waxay ahayd kaddib markay intii baxday ee ka mid ahaa asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ay arliga xabashada aadeen." Al Bakkaa'ii wuxuu yiri: "Waxaa ii warramay Miscaru bin Kidaam oo ka wariyay Sacd bin Ibraahiim oo yiri: "Cabdu Allaahi bin Mascuud wuxuu yiri: "Islaamidda Cumar waxay islaamka iyo muslimiinta u ahayd liibaan, hijradiisuna guul, amiirnimadiisuna waxay ahayd raxmad. Kumana aanan tukan jirin Kacbada agteeda jeer uu Cumar islaamay. Markaasuu markuu islaamay Quraysh la dagaallamayay ilaa uu Kacbada agteeda uga tukado. Markaasaan annaguna la tukannay."

Cumar iyo Ummu Cabdu Allaahi

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Umu Cabdu Allaahi bin Abii Xathmah waxay tiri: "WaAllaahi, annagoo isku diyaarineynna inaan arliga xabashada u baxno, uuna Caamir, oo ah ninkeeda, guriga uga baxay inuu soo qabto xaajo aan lahayn o aan u baahnayn, ayaa waxaa yimid Cumar bin Al Khadh-dhaab, oo isoo dul istaagay, isagoo weli gaal ah. Cumarna waxaan kala kulmi jirnay belaayo iyo dhib adag. Markaasuu wuxuu yiri: "Cabdu Allaahi hooyadiisey, ma la tegayaa?" Waxay tiri: "Haa, waAllaahi, waxaan aadeynnaa arliga Ilaahay, oo adinku waad na dhibaateyseen oo aad na qaharteen. Halkaas ayaanna ku maqnaaneynnaa ilaa uu Ilaahay faraj nooga furo." Markaasuu wuxuu yiri: "Allaha idinla jiro".Waxaanna ka arkay qalbi jileec aanan hore uga arki jirin. Kaddibna wuu gaddoomay, isagoo ka tiiraanyooday inaan dalka ka qaxaynno. Markaasaa waxaa soo laabtay Caamir oo wuxuu noo doonay sida. Markaasaan waxaan iri: "Cabdu Allaahi aabihisow, haddaad arki lahayd beer jileeca mar dhoweyd iyo

tiiraanyada Cumar uu noo qabo markuu arkay inaan qaxaynno?" Wuxuu yiri: "Ma waxaa damac kaa galay inuu islaamo?" Waxaan iri: "Haa." Wuxuu yiri: "Midkaad aragtay islaami uu mayo jeer uu dameerka (aabihiis) Al Khadh-dhaab uu islaamo." Wuxuuna sidaas u yiri quusasho uu ka quustay, kaddib wuxuu ku arkay oo qalbi adayg ah iyo adaygga uu islaamka u qabo."

Cumar iyo walaashiis Faadhimah

Ibnu Isxaaq wuxu yiri: "Islaamidda Cumar, sida isoo gaartay, waxay ahayd sidatan soo socota. Cumar walaashiis Faadhimah bintu Al Khadh-dhaab, una dhaxday Saciid bin Zayd bin Camr bin Nufayl hore ayay u islaamtay. Ninkeeda Saciid bin Zaydna isaguna wuu islaamay. Labadooduna inay islaameen way qarinayaan, waxayna ka qarinayaan Cumar. Ninka la yiraahdo Nucaym bin Cabdu Allaahi Al Naxxaam wuxuu ahaa reer Makkah, wuxuuna u dhashay tolka Cumar ee Qurayshta reer Banii Cadiyy bin Kacb, oo uu sidaas qaraabo kula ahaa. Ninkaasna wuu islamay, oo isaguna wuxuu islaamiddiisa u qarinayey cabsi uu tolkiis ka qabo daraadeed. Saxaabiga Khabbaab bin Al Aratt wuxuu gurigeeda ugu imaan jiray Faadhimah bintu Al Khadh-dhaab, uuna Quraanka bari jiray. Markaasuu Cumar maalin soo baxay isagoo ay seeftiisu garabka u suran tahay, doonayana Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo koox asxaabtiisa ka mid ah, oo la sheegay inay ku kulansan yihiin guri buurta Al Saffaa agteeda ku yaalla, tiradooduna ay u dhawdahay afartan oo rag iyo haweenba isugu jira. Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa la jooga adeerkiis Xamzah bin Cabdu Al Mudhalib iyo Abuu Bakr bin Abii Quxaafah Al Siddiiqu iyo Calii bin Abii Dhaalib, oo ka mid ah rag muslimiinta ka mid ah ee kuwa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kula sugnaaday Makkah ah, aanna raacin kuwa arliga xabashada aaday. Markaasuu Cumar, isagoo u socda ayuu wuxuu la kulmay Nucaym bin Cabdu Allaahi, oo ku yiri: "Xaggee baad u socotaa Cumarow?" Markaasuu wuxuu yiri: "Waxaan doonayaa Muxammad (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam), ninka diinteenna ka leexday, oo amarka Quraysh kala firdhiyey, hab nololeedkeennana iyo yididiilladeennaba wax xun ka dhigay, diinteennana cebeeyey, ilaahyadeennana caayey, si aan u dilo." Markaasuu Nucaym wuxuu ku yiri: "WaAllaahi naftaadaa ku dagtay oo been kuu sheegtay Cumarow! Ma waxaad u malaysay inay reer Cabdi Manaaf kuu daynayaan inaad arliga ku kor socotid kaddib markaad Muxammad (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) dishid? Waxaa taas kuu dhaama inaad qoyskaaga dib ugu noqotid oo aad ayaga amarkooda suubisid oo toosisid." Cumar wuxuu yiri: "Waana kuwee kuwaas qoyskeyga ahi?" Wuxuu yiri: "Waa seedigaa Saciid bin Zayd bin Camr iyo adiga walaashaa Faadhimah bintu Al Khadh-dhaab, oo waAllaahi labadooduba way islaameen, waxayna ku raaceen Muxamad (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) Diintiisa. Marka labadoodaas wax ka qabo." Wuxuu yiri: "Markaasuu Cumar dib u laabtay, uuna aaday xagga walaashiis iyo seedigiis. Markaas ayada ahna waxaa labadooda la jooga Khabbaab bin Al Aratt oo sida kitaab ay ku dhigan tahay Suuratu Dhaa-haa, oo uu labadoodaas barayo. Markaasuu Cumar albaabka guriga yimid oo uu kusoo garaacay si looga furo. Markaasey markay codka Cumar maqleen ayuu Khabbaab wuxuu ku dhuuntay qolka yar oo dharka la dhigto iyo mataaca kaleba, ama meel un guriga ka mid ah. Faadhimah bintu Al Khadh-dhaabna waxay qaaday kitaabka oo ay bawdadeeda hoosteeda gelisay. Cumar markuu albaabka usoo dhowaaday ayuu wuxuu maqlay akhrinta uu Khabbaab labadooda Quraanka u akhrinayey. Markaasuu markuu guriga soo galay ayuu wuxuu yiri: "Maxay tahay hunnu' hunnu'da aan maqlay?" Waxay yiraahdeen: "Waxba ma aadan maqal." Wuxu yiri: "Bal waa maqlay, oo waAllaahi waxaana la ii sheegay inaad labadiinnuba Muxammad (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) Diintiisa ku raacdeen." Markaasuu

Cumar wuxuu soo qabtay seedigiis Sacid bin Zayd. Markaasaa waxaa usoo sara kacday walaashiis Faadhimah bintu Al Khadh-dhaab si ay ninkeeda uga daafacdo. Markaasuu walaashiis wajiga ku dhuftay oo uu dhaawacay. Markuu sidaas yeelay ayay walaashiis iyo seedigiis ku yiraahdeen: "Haa, waan islaannay, aan aaminnay Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee waxaad doonto samee." Markaasuu Cumar markuu arkay dhiigga walaashiis ayuu wuxuu falay ka shallaayey, oo intuu dib u istaagay ayuu walaashiis ku yiri: "Kitaabkaan mar dhow maqlay adinkoo akhrinaya i sii, si aan u arko wuxuu Muxammad (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) la yimid." Cumar wuu yiqinnay sida wax loo dhigo, loona akhriyo. Markaasey waxay ku tiri: "Waan kaaga baqaynnaa." Wuxuu yiri: "Ha baqin", wuxuuna ugu dhaartay ilaahyadiisa in markuu akhristo uu dib ugu soo celinayo. Markuu sidas yiri ayaa waxaa ayada damac ka galay inuu walaalkeed islaamo. Markaasey waxay ku tiri: "Walaalkeeyow adigu waxaad tahay nijaaso, waxaadna ku taagan tahay gaalnimadaada, kitaabkana ma uu taaban karo qof aan daahir ahayn." Markaasuu Cumar sara kacay oo uu soo weyseystay. Markaasey kitaabka siisay, ayna ku dhigan tahay Suuradda Dhaa-Haa. Markaasuu akhristay. Markuu inta hore akhriyey, ayuu wuxuu yiri: "Maxaa ka fiican hadalkaan oo ka kariimsan!" Markaasuu markuu taas maqlay, ayuu Khabbaab meeshuu ku dhuuntay uga soo baxay, uuna ku yiri: "Cumarow! WaAllaahi waxaan rajeynayaa inuu Ilahay kaa dhigo kan gooni loo siiyey ducada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo waxaan shalay maqlay isagoo leh: **"Allaahumma ayyid al islaama bi Abii Al Xakam bin Hishaam aw bi Cumara bin Al Khadh-dhaab"**, o macneheedu yahay: "Ilaahayow! Ku xooji islaamka Abii Xakam bin Hishaam ama Cumar bin Al Khadh-dhaab." Marka, Cumarow Ilaahay ka dhawrso." Markaasuu Cumar wuxuu yiri: "Khabbaabow, marka i tus meeshuu Muxammad (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) joogo, si aan ugu tago oo aan u islaamo." Khabbaab wuxuu ku yiri: "Wuxuu joogaa guri Al Saffaa agteeda ah, waxaana la jooga koox asxaabtiisa ah." Markaasuu Cumar seeftiisa qaatay oo uu garabka surtay, kaddibna uu xagga Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aaday iyo asxaabtiisa. Markaasuu albaabka kusoo garaacay. Markaasey markay codkiisa maqleen ayaa waxaa u kacay nin asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, ka mid ah, oo albaabka jeexiisa ka fiiriyey, arkayna isagoo seeftiisu garabka u suran tahay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dib ugu soo laabtay, isagoo baqanaya, uuna yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, waa Cumar bin Al Khadh-dhaab oo seeftiisu garbka u suran tahay." Markaasuu Xamzah bin Cabdu Al Mudh-dhalib wuxuu yiri: "Ka fur albaabka oo soo geli, oo hadduu u yimid isagoo khayr doonayana waan siineynnaa, waana wanaajinaynnaa. Hadduu xumaan doon yahayna seeftiisaan ku dileynnaa." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"A'thin lahu"**, oo macneheedu yahay: "U oggolow inuu soo galo oo soo geli." Markaasuu ninku Cumar albaabka ka furay oo uu soo geliyay. Markaasaa waxaa u kacay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo qolka albaabku u furmo uga hortegey. Markaasuu wuxuu ku dhegay guntiga, ama meeshay labada daraf ee go'iisu isugu yimaadaan oo dhuuntiisa ku beegan, oo uu si xoog leh usoo dhuftay, kuna yiri: **"Maa jaa'a bika yaa bin Al Khadh-dhaab? Fa waAllaahi maa araa an tantahii xattaa yunzila Allaahu bika qaaricatan!"** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Maxaa ku keenayna ina Al Khadh-dhaabow? Oa waAllaahi inaadan ka harayn dhibidda muslimiinta jeer uu Ilaahay cathaab kugu soo dejiyo." Markaasuu Cumar wuxuu yiri: "Rasuulka Ilahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan kuugu imid inaan rumeeyo Ilaahay iyo Rasuulkiisa iyo wuxuu xagga Ilaahay kala yimid." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, takbiirsaday (oo wuxuu yiri weeye **Allaahu Akbar**), takbiir ay dadka guriga ku jiraa ee asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka mid ihi ku ogaadeen inuu

Cumar islaamay. Markaasey asxaabta Rasuulka Ilaahay, meeshaas ku kala tageen ayagoo u naftooda cizzi, waa xoogee, galay markuu Cumar islaamay, oo islaamidda Xamzah ku biirtay, waxayna ogaadeen inay labadoodaasi Rasuulka Ilaaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xumaanta lala doonayo ka daafacayaan, ayna cadawgooda, ayaguna, ay labadoodaas cadaalad uga helayaan. Tani waa riwaayada dad Al Madiinah dega ee islaamidda Cumar bin Al Khadh-dhaab, markuu islamay." Waxaa la wariyay inuu ninka Cumar albaabka ka furay uu ahaa Bilaal.

Inta u dhexeysa islaamidda Xamzah iyo Cumar

Al Qasdhalaanii wuxuu wariyay inuu Cumar islaamay saddex maalmood kaddib islaamidda Xamzah bin Cabdu Al Mudh-dhalib, siduu uga wariyay Abuu Nucaym oo ka wariyay ibnu Cabbaas, oo siduu Al Zarqaaanii u wariyay uu yiri: "Waxaan Cumar weydiiyey islaamiddiisa wuxuuna yiri: "Saddex maalmood islaamidda Xamzah kaddib ayaan soo baxay…" Markaasuu qisada aan kor kusoo sheegnay u sheegay."

Riwaayada reer Makkah ee islaamidda Cumar

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Reer Makkah, siday isaga laftiisa uga wariyeen, islaamidda Cumar waxay ahayd sidatan, o ah inuu isaga laftiisu yiri: "Islaamka aad ayaan uga fogaa, zamanka jaahiliyadana khamrada ayaan cabbi jiray, waana jeclaa oo ku farxi jiray. Waxaan lahayn majlis ku yaalla (suuqa Makkah oo hadda dhulkiisa Xarmka Makkah lagu daray oo uu Msjidka ka mid yahay) **Al Xazwarah** oo ay rag Quraysh ah isugu imaan jireen, daaraha reer Cumar bin Cabdi bin Cimraan Al Makhzuumii agtooda. Markaasan habeen gurigayga kasoo baxay, aanna so aaday xagga majliskooda, anigoo doonaya raggaan wada fariisan jirnay. Markaasaan majliska imid, kamase aanan helin axad raggii ka mid ah. Markaasaan waxaan is iri: "Maan u tago hebel, kan khamrada gada, oo Makkah dhexdeeda khamrada ku gadi jiray, ayadoo ay dhici karto inaan agtiisa khamro ka helo oo aan markaas cabbo." Markaasaan soo baxay oo aan u imid. Markaasaan waayey, oo ma uusan joogin. Markaasaan waxaan is iri: "Maan Kacbada tago oo aan toddoba ama toddobaatan ku dhawaafo." Markaasaan Masjidka imid, anigoo doonaya inaan Kacbada ku dhawaafo. Mase waaba Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo taagan oo salaad tukanaya. Waxayna ahayd in markuu tukanayo, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu xagga waqoyi ee Shaam u jeesan jiray, uuna Kacbada isaga laftiisa iyo Shaam dhexdooda yeeli jiray, wuxuuna ku tukan jiray Rukniga Madow (oo ah midkuu Xajarul Aswadku jiro) iyo Rukniga Al Yamaanii dhexdooda. Markaasaan markaan arkay waxaan is iri: "WaAllaahi caawa waxaan dhegeysanayaa Muxammad (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam), si aan u maqlo wuxuu leeyahay." Waxaan kalo is iri: "Haddaanse u dhowaado si aan u dhegeysto, waxaa dhici karta inuu i dareemo (oo uu markaas Quraanka hoos u akhriyo)." Markaasaan waxaan uga imid xagga Xijriga, oo aan markaas marada Kacbada hoos galay, oo aan si aayar aayar ah usoo socday, ayadoo uu Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayi Wasallam, tukanayo oo uu Quraankana akhrinayo, ilaa aan hortiisa iyo Qibladiisa kasoo istaagay anigoo kusoo jeeda, ayanna aniga iyo isaga noo dhexeyn marada Kacbada mooyee. Markaasaan markaan Quraanka maqlay uu qalbigaygu jilcay, oo aan markaas ooyay, uuna islaamku i galay. Sidaas ayaanna meeshaas u tagnaa ilaa uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, salaaddiisa ka dhammaystay, kaddibna uu gaddoomay. Markuu xagga gurigiisa u gaddoomana wuxuu ag mari jiray daarta ibnu Abii Xusayn oo dariiqiisa ku tiillay, ilaa uu ka gooyo Al Mascaa (oo ah inta u dhexeysa labada buurood oo Sacyiga loo kala socdo ee Al Saffaa iyo Al Marwah). Kaddib wuxuu qaadi jiray inta u dhexeysa daarta Cabbaas bin Cabdi Al Mudh-dhalib

iyo daarta Azhar bin Cabdu Cawf Al Zuhriyyi. Kaddibna wuxuu mari jiray daarta Al Akhnas bin Shariiq. Markaasuu gurigiisa geli jiray. Wuxuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, degganaa daarta la yiraahdo (waana markaan dambe ee uu Cumar ka warramayo magaca loo yiqiin) Al Rraqdaa'a, taasoo kaddibna gacanta Muwaawiyah bin Abii Sufyaan gashay.(Gurigaas oo loo yiqiinnay **"Mawlidu Faadhimah"** oo ah "Gurigay Faadhimah ku dhalatay" waxay ahayd daarta uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la degganaa haweentiisa Ummu Al Mu'miniina Khadiijah, Allaha raalli ka noqdee, waxayna ku tiillay dariiqa la oran jiray Zuqaaqu Al Xajari" oo ah "Dariiqa Dhagaxa" looguna bixiyay inuu halkaas oolli jiray dhagaxa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, salaamay. Kaddibna waxaa loo bixiyay "Zuqaaqu Al Saaghah". Ilaa dhawr sano ka horna waxay ahayd dugsi Quraanka lagu xifthiyo. Warkaasna waxaan kasoo qaatay kitaabka "Daliilu Al Xaajji Al Musawwar uuna dhigay Saalix Muxamad Jamaal Allaha u naxariistee. Daartaas waa la dumiyay oo dhulkeeda Masjidka Kacbada lagu daray marka la ballaarinayey waa dhoweyd)" Cumar wuxuu yiri: "Markaasaan daba galay, oo markuu galay daarta Cabbaas iyo daarta Azhar dhexdooda ayaan gaaray. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Caayhi Wasallam, wuxuu u maleeyey inaan usoo raacay inaan dhibaateeyo. Markaasuu si xoog leh ii xaarxaariyey, kaddibna uu yiri: **"Maa jaa'a bika yaa bin Al Khadh-dhaab haathihi al saacata?"** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Maxaad la socotaa oo aad dooneysaa ina Al Khadh-dhaabow saacadaan?" Wuxuu Cumar yiri: "Waxaan iri: "Waxaan u imid inaan aamino Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo wuxuu xagga Ilaahay kala yimid." Wuxuu yiri: "Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ilaahay ku xamdiyay kaddibna uu yiri: **"Qad hadaaka Allaahu yaa Cumaru"**, oo macneheedu yahay: "Ilaahay wuu ku hanuuniyay Cumarow!" Kaddibna gacantiisuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laabta iga mariyay, wuxuuna iigu duceeyey sugnaasho. Markaasaan Rasuulka Ilaaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka gaddoomay, Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu gurigiisa galay." Suuqa Al Xazwarah iyo inta guri oo uu xusayba inta la dumiyay ayaa dhulkooda Xaramka lagu daray oo ay dhulkiisa lagu tukado ka mid yihiin.

Cumar, Kacbada iyo Quraysh

Ibnu Isxaaq wuxuu wariyay inuu ibnu Cumar yiri: "Aabahay Cumar markuu islaamay ayuu wuxuu yiri: "Ninkeebaa Quraysh warka ugu faafin og?" Waxaa la yiri: "Jamiil bin Macmar Al Jumaxii." Wuxuu yiri: "Markaasuu waabarigii u tegey." Cabdu Allaahi bin Cumar wuxuu yiri: "Markaasaan daba galay oo aan raadkiisa ku joogsaday, si aan u arko wuxuu falayo. Aniguna markaas waxaan ahay wiil garanaya wuxuu arko. Markaasuu u yimid, uuna ku yiri: "Jamiilow, ma laguu sheegay inaan islaamay oo aan Diinta Muxammad (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) galay?" Wuxuu ibnu Cumar yiri: "WaAllaahi inuusan hadalna kusoo celin, ee intuu istaagay ayuu dhaqaaqay isagoo go'iisa dhulka ku jiidaya. Markaasuu Cumarna isaga daba galay. Aniguna aan aabahay daba galay. Markaasuu Jamiil markuu albaabka Masjidka tegey ayuu codkiisa ugu dheer kula qayliyay oo yiri: "War hooy ragga Qurayshow!", ayagoo markaas naadiyadooda Kacbada hareereheeda ah fadhiya, "Cumar bin Al Khadh-dhaab diintiinna wuu ka leexday!" Cabdu Allaahi bin Cumar wuxuu yiri: "Intaas Cumarna Jamiil gadaashiisu wuxuu ka leeyahay: "Been ayuu sheegay, laakiin anigu waan islaamay oo aan ashahaatay, oo aan marag ka ahay Ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa anna Muxammadan cabduhu wa Rasuuluhu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Markaasey soo keceen oo ay ku boodeen oo ay la dagaallameen, isaguna uu la dagaallamay, ayna wada dagaallamayeen ilaa ay qorraxdu madaxdooda ka dul

istaagtay." Wuxuu yiri: "Markaasuu Cumar daalay, oo uu markaas fariistay, ayaguna ay dul istaageen isagoo leh: "Waxay idinla noqoto yeela, waxaanse ku dhaartay Ilaahay in haddaan saddex boqol oo nin ahaan lahayn si siman ayaan u dagaallami lahayn, oo midkeen ayaa adkaan lahaa." Ayagoo ay xaaladdoodu sidaas tahay ayaa waxaa u yimid oday Quraysh ah oo labbisan laba go' oo Yaman lagu sameeyey iyo khamiis dun lagu tolay lagu daabacay. Markaasuu soo dul istaagay, uuna yiri: "Maxaa dhacay?" Waxay yiraahdeen: "Cumar diinteenna ayuu ka baxay." Markaasuu wuxuu yiri: "Haduu yeelayna? Waa nin isagu naftiisa amar u doortay ee maxaad adinku ka dooneysaan? Ma waxay idinla tahay inay reer Banii Cadiyy bin Kacb ninkaan gacanta idiin gelinayaan? Iska daaya ninka!" Ibnu Cumar wuxuu yiri: "Markaasey waAllaahi waxay uga kala tageen sida maro laga siibay oo kale." Wuxuu yiri: "Markaasaan waxaan aabahay ku iri markuu Al Madiinah u haajiray: "Aabow, keebuu ahaa ninka ragga kaa reebay maalintaad islaamtay oo aad Makah joogtay ayagoo kula dagaallamaya?" Markaasuu wuxuu yiri: "Wiilkeygow, ninkaasu waa Al Caas bin Waa'il Al Sahmii." Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Nin caalin ah ayaa wuxuu ii wariyay inuu Cabdu Allaahi bin Cumar yiri: "Aabow, keebuu ahaa ninka ragga kaa reebay maalintaad islaamtay ayagoo kula dagaallamaya, Ilaahay khayr ha uga abaal mariyee?" Cumar wuxuu yiri: "Wiilkeygow, kaasu waa Al Caas bin Waa'il, Ilaahay khayr ugama abaal mariyee." Al Caas bin Waa'il Al Sahmii waxaa lagu dilay duullaanka Badr isagoo gaal ah.

Cumar iyo Abuu Jahl

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Cumar wuxuu yiri: "Markaan habeenkaas islaamay ayaan waxaan is iri: "Ninkeebaa reer Makkah Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu cadawnimo badan, si aan ugu tago, aanna u sheego inaan islaamay?" Markaasaan waxaan iri: "Abuu Jahl." (Cumarna waxaa dhashay Khatmah bintu Hishaam bin Al Mughiirah oo Abuu Jahl waa abtigiis hooyadiis la dhashay). Markaasaan markaan waabariistay u imid oo aan albaabkiisa ku garaacay. Markaasuu ii soo baxay Abuu Jahl, uuna yiri: "Marxaban wa ahlan, soo dhowow oo ehelkaagaad u timid wiilka walaasheeyow. Maxaadna dooneysaa?" Waxaan ku iri: "Waxaan kuugu imid inaan kuu sheego inaan aaminay Ilaahay iyo Rasuulkiisa Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aanna rumeeyey oo qiray wuxuu la yimid." Wuxuu yiri: "Markaasuu albaabka wajiga iiga dhiftay, uuna yiri: "Allaha ku dulleeyo, waxaad la timidna dulleeyo."

Ku daridda Al Suhaylii ee islaamidda Cumar

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Ibnu Sunjur wuxuu wariyay wax ziyaado ku ah islaamidda Cumar, wuxuuna yiri: "Cumar bin Al Khadh-dhaab wuxuu yiri: "Waxaan soo baxay anigoo doonaya Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waana ka hor intuusan islaamin. Markaasaan waxaan arkay isagoo, Sallaa Allaahu Calayhi wasallam, Masjidka iiga hormaray. Markaasaan dhabarkiisa istaagay. Markaasuu wuxuu akhriyay Suuratu Al Xaaqah bilowgeeda. Markaasaan waxaan la yaabay macaanka Quraanka. Markaasaan waxaan is iri: "WaAllaahi kani waa gabayaa, siday Qurayshi u tiri." Markaasuu wuxuu akhriyay: **"Innahu la qawlu Rasuulin kariimin**(40)**Wa maa huwa biqawli shaacirin qaliilan mmaa tu'minuuna**(41)**"**, ahna Aayadaha afartan iyo kow iyo afartan ee Suuratu Al Xaaqqah oo macnohoodu yahay: "Quraanku waa hadalka Ilaahay, uuna akhrinayo Rasuul kariim ah(4)Hadal gabayaana ma aha, wayna yartahay intaad rumeyneysaane(41)." Cumar wuxuu yiri: "Waxaan is iri: "Ninku waa kaahin, waa faaliyee, oo waxa nafteyda galay ayuu ogaaday." Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu akhriyay: **"Walaa biqawli kaahinin qaliilan**

mmaa tathakkaruuna", oo ah Aayadda labo iyo afartanaad ee isla Suuraddaas, macneheeduna u yahay: "Mana aha hadalka kaahin faaliye ah, wayna yartahay intaad waantoobeysaane" ilaa Suuradda dhammaadkeeda". Cumar wuxuu yiri: "Markaasuu islaamku qalbigayga mel kasta uga dhacay oo ka galay."

Cumar waan ku riyooday

In door ah ayuu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, iigu nicmeeyey inaad Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, riyo ku arko, oo aan la hadlay, isaguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ila hadlay. Meeleheeda ayaanna riyoonkaas uga warrami doonaa, inshaa'aAllaahu. Kaddib markaan Abuu Bakr Al Siddiiqu iyo Imaam Calii bin Abii Dhaalib ku riyooday ayaan waxaan ka calool xumaaday inaanan Cumar arag. Markaasaan Ilaahay, Cazza wa Jalla, ka baryay inuu i tuso. Markaasaan Cumar o keligiis ah mar ku riyooday, riyadana waxaa ka mid aha intaan: "Guriga Cumar ayaan joogay, kuna yaalla meel geed timireed badan, waxaan ila jooga dad aan ka badnayn saddex ama afar qof. Guriguna wuxuu saaran yahay meel taag ah. Markaasaa waxaa dariiqa hoosteenna ah, oo aan kor uga jeedno, ahna dariiq ciid ah oo bus leh, soo maray Cumar oo fatuurad wata. Cumar wuxuu ahaa nin aad u dheer, aadna u jir weyn, oo markuu ragga la socdo ayagoo wada lugaynaya aad mooddo inuu isagu faras saaran yahay oo uu siddas cad uga wada dheer yahay. Baabuurkaas uu saaran yahayna waxaa jirkiisa ka dhex galay ilaa miskaha iyo inta ka hooseysa. Inta miskaha ka korreysana fatuuradda ayay ka korreysaa isagoo baabuurkaas wada, oo shukaantiisa labadiisa gacnood ku haya, waana farxaan, wuuna heesayaa. Cumarna wuxuu ka yimid xagga bidixdeenna ah, wuxuuna u socdaa xagga midigteenna ah. Markaasan waxaan anigu iri: "Sidaasoo ay tahayna labo sano kaddibna Cumar waa la dilayaa oo toorrey baa lagu dooxayaa." Markaasuu qof dadkii ila joogay ka mid ihi uu hadalkeygaas igu inkiray. Markaasey haweenta Cumar waxay tiri: "Waa runtiis, oo Cumar ayaa anigaba ii sheegay." Allow Amiiru Al Mu'miniina Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab, oo aan jeclahay, u naxariiso, wuxuu Ummadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u galayna sida ugu fiican uga abaal mari.

Cumar

Ibnu Al Athiir wuxuu Usudu Al Ghaabah siirada Cumar ka yiri waxaa ka mid ah: "Waa Cumar bin Al Khadh-dhaab bin Nufayl bin Cabdu Al Cuzzaa bin Riyaax bin Cabdu Allaahi bin Qurdh ibnu Razaax bin Cadiyy bin Kacb bin Lu'ayy Al Qurashii Al Cadawii, Abuu Xafs. Hooyadiisna waa Xantamah bintu Haashim bin Al Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum. Waxaa kaloo la yiri Xantamah bintu Hishaam ibnu Al Mughiirah, oo hadday sidaas tahay ay ahaaneyso Abuu Jahl walaashiis; hadday sida hore tahayna waa ina adeertiis. Cumar wuxuu dhashay saddex iyo toban sano maroodiga dabadiis, waxaana Cumar laga wariyay inuu yiri: "Waxaan dhashay afar sano kaddib Xarbu Al Fijjaari Al Actham." Cumar wuxuu ka mid ahaa madaxda Quraysh, wuxuuna hayey, waa islaamka hortiise, **Al Safaarah**, oo ah Danjirennimada, oo hadday Quraysh qabiil kale dagaallamaan ama Quraysh dhexdeeduba ay dagaallanto, isagay Danjirennimo ugu diri jireen oo u kala dhex socon jiray, si nabad loo helo. Hadday qolo kalena Quraysh xagga nasabka ama si kaleba ugu faantana isagay u diri jirtay, wuxuu falana raalli ayay ku noqon jirtay. Cumar wuxuu ahaa qofka afartanaad ee islaama, ayadoo ay markaas jiraan saddex iyo soddon nin iyo lix haweeney oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la islaamay. Markaasuu markuu Cumar islaamay Jibriil wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kusoo dejiyay korkiisa: **"Yaa ayyuhaa Al Nabiyyu xasbuka Allaahu wa**

mani ittabacaka mina al mu'miniina", ahna Aayadda afar iyo lixdanaad ee Suuratu Al Anfaal, macneheeduna yahay: "Nabiyow,, Ilaahay ayaa kugu filan iyo inta ku raacdayba ee mu'miniinta ahba." Nasabka Cumar wuxuu ka galaa midka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Kacb bin Lu'ayy, oo ah awoowaha toddobaad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam iyo kan sideedaad ee Cumar. Ibnu Al Athiir wuxuu yiri: "Rasulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Inna Allaaha jacala al xaqqa calaa lisaani Cumar wa qalbihi, wa huwa Al Faaruuqu: farraqa bayna al xaqqi wa al baadhili."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu xaqqa yeelay carrabka Cumar korkiisa iyo qalbigiisaba, isaguna waa Al Faaruuqu, ahna kan kala saaray, oo wuxuu kala saaray xaqqa iyo baadhilka, runta iyo beenta, samaanta iyo xumaanta." Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Law kaana bacdii Nabiyyun lakaana Cumara bini Al Khadh-dhaab"**, oo macnihiisu yahay: "Haddu aniga dabaday Nabi ahaan lahaa, wuxuu ahaan lahaa Cumar bin Al Khadh-dhaab." Cumar wuxuu ahaa khaliifka labaad ee Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna hoggaanka ummaddiisa hayey toban sano iyo shan bilood iyo kow iyo labaatan maalmood. Cumar waxaa dooxay addoon iiraani ahaa oo magaciisu ahaa Abuu Lu'lu'ah, uuna lahaa Al Mughiirah bin Shucbah, kanoo Cumar ka baryay in loo oggolaado inuu Al Madiinah Al Munawwarah keeno, oo uu ku shaqeysto, wuxuuna samayn jiray shiidka badarka lagu shiido. Markuu Cumar salaadda subax u istaagay ayuu isaguna dhabarkiisa istaagay. Markaasuu markuu Cumar Allaahu Akbar yiri oo uu salaadda galay ayuu lix goor toorreey laba afley ah ku dhuftay. Addoonkaasna wuxuu ahaa kan ugu horreeyey oo aan Carab ahayn oo Al Madiinah loo oggolaaday inuu soo galo oo dego. Zamanka Cumar waxaa la furtay dalalka Masar, Shaam, oo hadda la isku yiraahdo Suuriya iyo Falasdhiin iyo Lubnaan iyo Urdun; iyo Ciraaq, Diyaari Bakr, Armiiniyah, Azerbijaan, Iiraan, iyo kuwo kaleba. Cumar waxaa la dooxay maalin arbaco ah oo ay afar habeen ka hareen bisha Thuu Al Xijjah ee sanadka saddex iyo labaatanaad ee Hijrada, waxaana la duugay subaxa ay dhalatay bisha Muxarram ee sanadka afar iyo labaatanaad ee Hijrada, waxaana qabrigiisa galay oo bud dhige u ahaa wiilkiisa caabidka ummaddaan ah Cabdu Allaahi bin Cumar iyo Cuthmaan bin Caffaan iyo Saciid bin Zayd iyo Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf. Cumar wuxuu ka idan qaatay Caa'ishah in labadiisa saaxiib qolka lala duugo, ayaduna way u oggolaatay, oo qolku waa qolka Caa'ishah." Cumar waa soddogga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ay gabdhiisa Xafsah bintu Cumar u dhaxday. Cumar wuxuu ahaa ninkuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ragga ugu jecel yahay Abuu Bakr Al Siddiiqu dabadiis. Cumar wuxuu guursaday Ummu Kulthuum bintu Faadhimah bintu Rasuuli Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxayna u dhashay wiil Zayd la yiraahdo iyo gabar Ruqayyah loo bixiyey. Cumar caruur badan ayuu dhalay, wayna tarmeen, Allaha u wada naxariisto dhammaantoode. Siirada Cumar kutubbo waaweyn ayaa laga qoray, aniguna markaan intaas ayaan uga baxayaa, oo kitaabkaani ma aha siirada Cumar. Allow Cumar darajo sarreysa sii, ummaddana wuxuu u galay uga abaal gud.

La kulankiisa Sallaa Allahu Calayhi Wasallam arijirka madow

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu jeclaa oo uu ku dadaalay inuu qof kasta oo dadka ka mid ihi uu islaamo oo uu sidaas naarta uga badbaado, oo axadna iskalama waynayn inuu diinta islaamka u sheego Quraanna ku dul alhriyo, haba ahaado addoon madow oo ari jir ahe. Intuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dariiqa Hijrada ku jiray isagoo uu saaxiibkiis Abuu Bakr Al Ssiddiiqu la socdo wuxuu meel dariiqa ka mid ah kula kulmay ari jir madow.

Al Bayhaqii wuxuu kaloo ka wariyay Qays bin Al Nnucmaanu inuu yiri: "Markay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Abuu Bakar tageen ayagoo dhuumanaya ayaa waxay mareen addoon (madow) oo ari la jira. Markaasey weydiisteen inuu caano waraabiyo. Markaasuu wuxuu yiri: "Ma hayo ri' la maalo. Waxaase jirta ri'daas oo sanad ka hor dhashay cunug an nooleyn, caanana kuma harin." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu ku yiri: **"Adcu bihaa"**, oo macnihiisu yahay: "U yeer." Markaasuu u yeeray. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, labadeeda lugood labadiisa lugood dhex geliyay, oo uu naaseheeda gacanta mariyay uuna duceeyey. Markaasey darartay oo ay caano kusoo degeen. Markaasuu Abuu Bakar wuxuu keenay gaashaan. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku lisay. Markaasuu Abuu Bakar waraabiyay. Kaddibna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar kale ayuu maalay oo uu arijirka siiyey. Markaasuu, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, mar saddexaad maalay oo uu isagu cabay. Markaasuu ari jirku wuxuu yiri: "BiAllaahi kumaad tahay adigu? Oo waAllaahi inaanan adigoo kale hore u arag." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Awataraaka taktumu calayya xattaa ukhbiraka?"** oo macnihiisu yahay: "Haddaan kuu sheego ma qarinaysaa ciddaan ahay?" Wuxuu yiri: "Haa." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Fa innii Muxammadun Rasuula Allaahi"**, oo macnihiisu yahay: "Anigu waxaan ahay Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Markaasu wuxuu yiri: "Ma waxaad tahay ninkay Qurayshi leedahay inuu diintooda ka baxay?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Innahum la yaquuluuna thaalika"**, oo macnihiisu yahay: "Sidaas ayay leeyihiin", oo Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, weligiis diintoodaba hore uma gelin si uu uga baxo, oo been ayay sheegeen. Wuxuu yiri: "Waxaan marag ka ahay inaad Nabi tahay, iyo in waxaad la timid ay xaq run ah yihiin. Waxaad samayseyna ma uu samayn karo axad aan Nabi ahayn. Aniguna haddaaban ku raacayaa." Mana aha raaciddu raacid uu islaamka ku raacayo intuu islaamay, ee waa arigaan waan ka tegayaa oo adigaan ku raacaya. Markaasu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Innaka lan tastadhiica thaalika yawmaka, fa ithaa balaghaka annii qad thahartu fa 'atinaa."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Adigu maantadaan taas ma awoodid, ee markaad maqashid inuu amarkaygu soo bannaan baxay markaas noo imow." Sababtuna waxay tahay in hadduu hadda raaco oo dadkiisu soo daba gelayo ayna ka hor istaagayaan inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam raaco, wayna ciqaabayaan, tasoo uu uga turayey.

Addonka madow ee Xadiithka Khaybar

Qisadaanna waxay dhacday intuu Sallaa Allaahu Calyhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ku jiray Duullaanka Khaybar oo uu dul fadhiyay.

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Xoolo jirka madow Xadiithkiisu waa sidatan. Xoolo jir madow ayaa wuxuu u yimid Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo qalcadaha Khaybar middood ku hareereysan, isagoo wada ari uu la jiro, uuna ijaar ugu ilaalinayay nin yuhuudda ka mid ah. Markaasuu wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, islaamka ii soo bandhig." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam u sheegay wuxuu islaamku yahay, una soo jeediyay inuu islaamo. Markaasuu islaamay. Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ninna uma yasi jirin inuu ugu yeero islaamka, wuuna usoo bandhigi jiray oo uga warrami jiray. Markaasuu markuu islaamay wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan u ijaarnaa ninka arigaan leh, ammaanuuna arigu igu yahay. Maxan ka yeelaa?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Adrib fii wujuuhihaa fa innahaa sa tarjicu ilaa rabbihaa."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Wajiyadooda ku dhufo ee markaasay ninka leh u noqonayaane." Markaasuu

cantoobo quruurux ah qaatay oo uu wajiyadooda ku tuuray, uuna ku yiri: "Ninka ku leh u noqo oo wa Allaahi inaanan waligay dambe ku raacayne." Markaasay dhaqaaqeen ayagoo uruursan sida ayagoo uu xoolo jir la socdo oo kale, oo qalcadda galeen. Markaasuu addoonka madoobi ciidanka hortiisa tegey safka ugu horreeya, si uu dadka qalcadda ula dagaallamo isagoo muslimiinta la jira. Markaasaa waxaa ku dhacay dhagax lagu soo tuuray oo dilay, isagoo aan salaad keli ah tukan. Markaasaa loo keenay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo uu dhabarkiisa dhigay, lana huwiyay maro uu watay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xaggiisa u jeestay, ayadoo ay la joogaan koox asxaabtiisa ka mid ah, kaddibna uu kasoo jeestay. Markaasay waxay yiraahdeen: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maxaad uga soo jeesatay?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri**: "inna macahu al aana zawjatayhi mina al xuuri al cayni"**, oo macnihiisu yahay: "Waxaa hadda la jooga labadiisa haweeney ee xuuru al ciinta ah."
Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Shahiidka marka la dilo waxaa u imaanaya labadiisa haweeney ee xuurul ciinta oo wajigiisa ciidda ka tirtiraya ayagoo leh: "Ilaahay ha ciideeyo wajiga kuwa ku ciideeyey, hana dilo kan ku dilay."

Juzka Saddexaad

Gaarsiinta Risaalada Qabaa'ilka Carbeed

Rasuulka Ilahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo qabaa'ilka Carbed isu soo bandhigay

Markuu adeerkiis Abuu Dhaalib dhintay isagoo ahaa gaashaankiisa ka daafici jiray gaalada Makkah, ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu tegey Dhaa'if, isagoo qabiilka halkaas dega ee la yiraahdo Thaqiif, ilaa maantana dega, weydiisanaya inay islaamaan oo ay isagana gaashaan u noqdaan si uu Risaalada Ilaahay Tacaalaa dadka ugu gudbiyo, markaasay diideen ayna xumeeyeen.
Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, kaddib wuxuu soo galay Makkah ayadoo uu tolkiis colaad xoog leh u qabaan taagdarraystay oo ka mid ah kuwa rumeeyey. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, muusinka Xajka iyo kuwa suqyada la isugu yimaadaba qabaa'ilka Carbeed isu soo bandhigaa, isagoo dadkaas Ilaahay xaggiisa ugu yeeraya, una sheegaya inuu Nabi Mursal ah yahay oo la soo diray, weydiisanayana inay rumeeyaan oo ay rumaystaan, ayna gaashaan daafaca u noqdaan, si uu Ilaahay wuxu lasoo diray u caddeeyo."
Ibnu isxaa wuxuu yiri: "Waxaa ii warramay Xusayn bin Cabdu Allaahi bin Cubaydu Allaahi bin Cabbaas oo yiri: "Waxaan maqlay Rabiicah bin Cibaad oo uu aabahay u warramayo oo leh: "Anigoo ah wiil dhallinyaro ah oo aabahay la socda, joogana Mina ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu istaagaa degmooyinka qabaa'ilka Carabta, waana Xajka marka Mina la deggan yahay, wuxuuna yiraahdaa: **"Yaa Banii Fulaan inii Rasuulu Allaahi ilaykum, ya'murukum an tacbuduu Allaaha wa laa tushrikuu bihi shay'an, wa an takhlacuu maa tacbuduuna min duunihi min haathihi al andaadi, wa an tu'minuu bii, wa tusaddiquu bii, wa tamnacuunii, xattaa ubayyina cani Allaahi maa bacathanii bihi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Reer hebelow, anigu waxaan ahay Rasuulka Ilaahay oo adinkaa la ii kiin soo diray. Ilaahay wuxuu idin amrayaa inaad Ilaahay caabudaan, aydnaanna shayna shariik uga yeelin ilaahnimada la wadaaga. Wuxuuna idin amrayaa inaad ka fuqdaan oo ka hartaan waxaad sokadiisa caabudaysaan

oo asnaamtaani ka mid yihiin. Wuxuu kaloo Ilaahay idin amrayaa inaad aniga i aamintaan inaan Rasuulka Ilaahay ahay oo aad i raacdaan, iyo inaad rumaysaan waxaan xagga Ilaahay idiinka keenay inay Ilaahay xaggiisa ka yimaadeen. Wuxuu kaloo idin amrayaa inaad i difaacdaan oo aad gaashaan ii noqotaan si aan wuxuu Ilaahay ila soo diray dadka ugu caddeeyo." Intaas uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, degmooyinka qabaa'ilka hadba mid uu tegayo oo uu la hadlayo waxaa daba socda nin indhihiisa inta madawna aad u madawdahay inta cadna ay aad u caddahay, quruxsan, lehna laba raamood oo timihiisa oo la isku dabay oo soo laadlaada, labbisanna laba go' oo Cadan lagu soo sameeyey. Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hadalkiisa dhammaysto uu qabiilkaas kula hadlayey iyo wuxuu ugu yeerayba, ayuu ninkaanu wuxuu yiraahdaa: "Reer hebelow, ninkaanu (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) wuxuu idiinku yeerayaa ma aha waxaan ahayn inaad ka furataan oo aad caabudidda Al Laata iyo Al Cuzaa ka tagtaan iyo xulafadiinna jinniga ah ee reer Banii Maalik bin Uqaysh, aadna ka diin yeelataan waxaan bidcada ah ee cusub oo uu isagu (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) la yimid iyo baadinnimada. Marka ha ka yeelina ee ha adeecina, hadalkiisana haba dhegeysannina." Markaasaan waxaan aabahay ku iri: "Aabow, midkaan daba socda, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo hadalkiisa beeninaya waa kuma?" Wuxuu yiri: " Kaasu waa adeerkiis Cabdu Al Cuzzaa bin Cabdu Al Mudh-dhalib, Abuu Lahab."

Qabiilka Kindah

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ugu yimid qabiilka Kindah degmadooda Mina. Ragga qabiilkaas ka joogay waxaa ka mid ahaa nin madaxdooda ah oo la yiraahdo Mulayx. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qabiilkaas Ilaahay xaggisa ugu yeeray iyo inay islaamaan, laftiisana wuu usoo bandhigay. Markasey ka diideen."
Al Suhaylii wuxuu yiri: "Kindah waa Banuu Thawr bin Murrah bin Udad bin Maysic bin Camr bin Cariib bin Zayd bin Kahlaan bin Saba'. Waxaa ninkaas Kinadh loogu bixiyey isagoo "kanada abaahu ay caqqahu" oo ah isagoo aabihiis caasiyey.

Qabiilka Banuu Kalb

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ugu yimid qabiilka Banuu Kalb degomadooda Mina, waxayna ahaayeen jilib qabiilkaas ka mid ah oo la yiraahdo Banuu Cabdu Allaahi. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam xagga Ilaahay ugu yeeray isaguna isu soo bandhigay. Wuxuu kaloo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku yiri: **"Yaa Banii Cabdu Allaahi inna Allaaha Cazza wa Jalla qad axsana isma abiikum"**, o macnihiisu yahay: "Reer Banuu Cabdu Allaahiyow, Ilaahay Cazza wa Jalla, wuuu qurxiyay magaca aabihiin." Markaaseeyan waxba ka yeelin wuxuu usoo bandhigay."

Qabiilka Banuu Xaniifah

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Banuu Xaniifah ugu yimid degmadooda Mina. Markaasuu xagga Ilaahay ugu yeeray, naftiisana usoo bandhigay. Markaasuusan Carabta ku jirin axad uga jawaab xumaa iyo siday u diideen."
Al Suhaylii wuxuu yiri: "Aabohood Xaniifah magaciisu waa Uthaal bin Lujaym ibnu Sacb bin Calii bin Bakr bin Waa'il, waxaana Xaniifah loogu bixiyey qallooc labadiisa

lugood ku jiray. Banuu Xaniifah waxay degaan gobolka Al Yamaamah, waana dadkuu ka dhashay Musaylimah Al Kath-thaab."

Qabiilka Banuu Caamir

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u yimid reer Banuu Caamir bin Sacsacah, markaasuu xagga Ilaahay iyo inay islaamaan ugu yeeray, naftiisana uu usoo bandhigay. Markaasuu nin ayagaas ka mid ahi oo la yiraahdo Bayxarah bin Firaas wuxuu ku yiri: "WaAllaahi haddaan ninkaan Quraysheed (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) qaadan lahaa Carab oo idil ayaan ku cuni lahaa." Kaddibna wuxuu yiri: "Bal ka warran haddaan amarkaagaan kugu raacno oo uu markaas Ilaahay libta kaa siiyo iyo gacanta sare inta ku khilaaftayba, adiga dabadaa amarkaani, oo ah Nabinimada iyo madaxtinnimada, annaga ma noo soo wareegayaa?" Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalla, wuxuu yiri: **"Al Amru liAllaahi yadacuhu xaythu yashaa'u"**, oo macnihiisu yahay: "Amarka Ilaahay ayaa iska leh, meeshuu doono ayuuna dhigayaa." Markaasuu wuxuu ninkaasu ku yiri: "Ma luqumeheenna ayaan intaan ka dhigno bartay Carabtu fallaarohooda kusoo nishaabayaan si aan kuu ilaalinno oo kuu daafacno oo markaas markuu Ilaahay libta ku siiyo ayuu amarku ghayrkeen u wareegayaa? Hadaba amarkaagaan xaajo kama lihin." Sidaas ayay ku diideen." Markaasuu markuu dadka Xajka ka kala tegey ayay reer Banuu Caamir markay arligooda ku laabteen ayay waxay u tageen oday madaxdooda ahaa oo da'diisu weynaatay ilaa heer uu Xajka u raaci waayey. Markaasey markay laabtaan waxay uga warrami jireen dhacdooyinkii muusinkaas. Markaasey markay sanadkaas soo laabteen uu ka wareystay waxay muusinkaas la kulmeen. Markaasey waxay yiraahdeen: "Waxaa noo yimid nin Quraysh ah, kana sii ah reer Cabdu Al Mudh-dhalib oo leh inuu Nabi yahay, wuxuuna noogu yeeray inaan gaashaan u noqonno ilaaliya oo aan la safanno, aanna dalkeenna usoo wadanno." Markaasuu odagu labdiisa gacnood madaxiisa saaray, kaddibna uu yiri: "Reer Banuu Caamirow! Sidaas aad yeesheen soo lagama maarmin? Waxa tegeyna ma lasoo celin karaa? Hore uma dhicin inuu nin dhasha Ismaaciil ahi Nabinnimo been ah sheegto. Wuxuu idiin sheegayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wa run. Xaggeebuu garadkiinnu jiray?"

Isu soo bandhigidda Carabta

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Sidaas ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, amarkiisu ahaa, oo mar kasta oo dadi isku yimaado muusinka wuu u yimaadaa isagoo qabaa'ilka Ilaahay iyo islaamka ugu yeeraya, naftiisana isu soo bandhigaya, iyo waxa xagga Ilaahay uga yimid ee hanuun iyo naxariis ah. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, markuu maqlo inuu Makkah soo galay nin Carab ah oo magac iyo madaxtinnimo leh wuu u tagaa oo uu Ilaahay ugu yeeraa, una soo bandhigaa waxa agtiisa yaalla oo uu hayo."

Qabiilka Thahli iyo qabiilka Shaybaan

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Qaasim bin Thaabit iyo Al Khadhaabii waxay wariyeen inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, naftiisa usoo bandhigay qabiilka reer Banuu Thahli bin Thaclabah, kaddibna qabiilka Banii Shaybaan bin Thaclabah. Al Khadhaabii iyo Qaasinba waxay wariyeen hadalkay is dhaafsadeen Abuu Bakar Al Siddiiqu iyo ninka la yiraahdo Daghfal bin Xanthalah Al Th-thuhlii. Qaasim wuxuu yiri: "Markaasaan majlis kale tagnay ayagoo, waa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi

Wasallam, iyo saaxiibkiis Abuu Bakr Al Siddiiqu, ay xasillooni iyo haybad iyo weynaan ku dheehan tahay. Markaasuu Abuu Bakr hadalka ku hormaray oo uu salaamay. Abuu Bakarna wuxuu ahaa kan ku horreeya khayr kulligiis. Markaasuu wuxuu yiri: "Raggu yuu u dhashay?" Waxay yiraahdeen: "Waxaan ka dhalannay Shaybaan bin Thaclabah." Markaasuu Abuu Bakar xagga Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u jeestay uuna ku yiri: "Aabahay iyo hooyaday ayaan kugu furanayaaye kuwaani waa madaxda tolkooda." Raggaasna waxaa ka mid ahaa Mafruuq bin Camr iyo Haani' bin Qabiisah iyo Muthannaa bin Xaarithah iyo Al Nucmaanu bin Shurayk. Raggaas waxaa dhammaantood ugu qurxoonaa Mafruuq bin Camr, uguna af tahansanaa, wuxuuna lahaa laba saymood oo timihiisa ah oo la isku tidcay oo laabtiisa kusoo dhacaya, isagaana ragga majliska meeshuu ka fadhiyo Abuu Bakar ugu dhowaa. Markaasuu Abuu Bakar wuxuu yiri: "Tiradiinu waa intee?" Mafruuq wuxuu ugu jawaabay: "Kun waa ka badannahay, kun ninna tiro yaraan loogama adkaado", uuna ka wado ma tiro yarin, ragna waa iska dhicin karnaa. Markaasuu Abuu Bakar wuxuu ku yiri: "Xooggiinna iyo cududdiinnu waa sidee?" Markaasuu Mafruuq wuxuu yiri: "Markaan dagaal geleynno annagaa dadka ugu xanaaq badan, waxaanna markaan rag dagaal isugu nimaadno ugu xoog badannahay markaan xanaaqsannahay. Waxaanna caruurteenna uga roonnahay fardaha, hubkana uga roonnahay geela, guushuna xagga Ilaahay ayay ka timaaddaa oo marna annaguu guusha na siiyaa marna kuwa kale oo naga hela gacanta sare. Adiguna ma walaal Quraysh ah ayaad tahay?" Markaasuu Abuu Bakar wuxuu yiri: "Ma idin soo gaartay inuu isagu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yahay? Isagiina waaba kanaa." Markaasuu Mafruuq wuxuu yiri: "Waa nasoo gaartay inuu isagu sidaas leeyahay (Sallaa Allaahu CalayhiWasallam) ee maxaad noogu yeereysaa walaalka Quraysheedow?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hadlay, wuxuuna yiri: **"Adcuu ila shahaadata an laa ilaaha illaa Allaahu Waxdahu laa shariika lahu wa annii Rasuulu Allaahi, wa ilaa an tu'wuunii, wa tansuruunii, fa inna Qurayshan qad thaaharat calaa amri Allaahi, wa kathabat Rasuuluhu, wa istaghnat bi al baadhili cani al xaqqi, wa Allaahu Huwa Al Ghaniyyu Al Xamiidu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaan dadka ugu yeerayaa inay ku dhawaaqaan shahaadada inuusan jirin ilaah aan Ilaahay ahayn oo uu Keligiis Ilahay yahay oo uusan lahayn cid ilaahnimada la wadaagta, iyo inaan anigu ahay Rasuulka Ilaahay iyo inaan idiin dumo oo aan arligiinna idiin raaco oo i dejisaan, aadna ii hiillisaan ayadoo ay Qurayshi amarka Ilaahay colaadisay, Rasuulkiisana beenisay, runtiina ay been iyo wax xun uga kaaftoomeen oo ku beddesheen, Ilaahay ayaana ah Al Ghaniyu, Midka Hodanka ah iyo Xamiidu oo ah Kan la Mahdiyo." Markaasuu Mafruuq wuxuu kaloo yiri: "Walaalka Qurayshow, maxaad kaloo dadka ugu yeereysaa?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu akhriyey Aayadda boqol iyo kow iyo kontonaad ee Suuratu Al Ancaam: **"Qul tacaalaw atlu maa xarrama Rabbukum calaykum allaa tushrikuu bihi shay'an wa bi al waalidayni ixsaanan wa laa taqtuluu awlaadakum mmin imlaaqin Naxnu narzuqukum wa iyyaahum wa laa taqrabuu al fawaxisha maa thahara minhaa wa maa badhna wa laa taqtuluu al nnafsa allatii xarrama Allaahu illaa bi al xaqqi thaalikum wassaakum bihi lacallakum tacqiluuna."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Waxaa tiraahdaa: "Kaalaya aan idiin akhriyee wuxuu Rabbigiin idinka xaaraantimeeyey (kow) Inaydnaan Isaga shay'na shariik Ilaahnimada la wadaaga u yeelin, (Labo) Inaydnaan labadiinna waalid caasiyin ee aad u sama fashaan, (Saddex) Inaydnaan caruurtiinna dilin cabsi aad ka qabtaan saboolnimo oo aad weydaan waxaad siisaan: Annagaa adinka idin rizqiyeyna iyo ayagaba, (Afar) Waxa xun oo idil ha u dhawaanina, kuwooda muuqda iyo kuwa qarsoonba, (Shan) Ha dilina nafta uu Ilaahay dilkeeda

xaaraanta ka dhigay, inaad xaq ku dileysaan mooyee (Taasoo uu kusoo arooray Xadithka ay wariyeen Al Bukhaarii -lixkun iyo afar boqol iyo afar iyo sideetan- iyo Muslim -kun iyo lix boqol iyo lix iyo toddobaatan- lafdiga Bukhaarii waa kan**: "Laa yaxillu damu imri'in muslimin yash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa annii Rasuulu Allaahi illaa bi ixdaa thalaathin:** (1) **Al Thayyibu al zzaanii,** (2) **wa al nnafsu bi al nnafsi,** (3) **wa al taariku lidiinihi al mufaariqu lil jamaacati."** Xadiithka oo ibnu Mascuud laga wariyay macnihiisu waxaa weeye: "Qof muslim ah ku ashahaadanaya laa Ilaaha illaa Allaahu iyo anigaan anigu ahay Rasuulka Ilaahay dhiiggiisu xalaal ma aha saddex xaaladood mooyee: (Kow) Qof hore u guursaday oo dhillaystay, (Labo) Qof naf muslim ah dilay oo kas iyo ula kac u gooyey oo qisaas loo dilayo, (Saddex) Qof muslin ahaa oo murtad noqday oo diinta ka baxay, gaalnimadiisana ku taagnaaday.) Kas ayuu Ilaahay idin amrayaa, waxaad mudan tihiin inaad wax kastaane." Markaasuu Mafruuq wuxuu yiri: ""Walaalka Qurayshow, maxaad kaloo dadka ugu yeereysaa?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu akhriyey Aayadda sagaashanaad ee Suuratu Al Naxli: **"Inna Allaaha ya'muru bi al cadli wa al ixsaani wa iitaa'i thii al qurbaa wa yanhaa cani al faxshaa'i wa al munkari wa al baghyi yacithukum lacallakum tathakkaruuna."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Ilahay wuxuu amrayaa in garta la sooro oo caddalad la sameeyo, dadkana loo sama falo, qarabadan la xiriiriyo, wuxuuna idinka reebayaa waxa xun oo idil, ha ahaado hadal ama ficil iyo waxa la inkiraba oo la diidaba, iyo kibirka iyo dulmiga. Ilaahay waa idin waaninayaa, waa intasoo aad ku waano qaadataane. Ibnu Mascuud wuxuu yiri: "Waa Aayadda ku jirta Quraanka oo wax walba kulmisay." Markaasuu Mafruuq wuxuu yiri: "WaAllaahi walaalka Qurayshow, waxaad dadka ugu yertay akhlaaqda fiican iyo acmaasha fiican, oo waAllaahi been ayay sheegeen qawm ku beeniyey oo ku colaadiyey." Markaasaad waxaad mooddaa inuu ninka la yiraahdo Haani'u bin Qabiisah doonayo inuu hadalka la wadaago. Markaasuu Mafruuq wuxuu yiri: "Kanina waa Hani' bin Qabiisah, odageenna iyo madaxdeenna iyo madaxa diinteenna mamula." Markaasuu Haani' wuxuu yiri: "Waan maqlay waxaad tiri walaalka Qurayshow, aniguna waxaan u arkaa in inaanan diinteenna ka tagno oo aan Diintaada kugu raacno hal fadhi oo aad nala fariistay dabadeed ay tahay sibxasho aragtiyeed iyo fiiro yari llo qaabo caaqibada u dambeysaa amarkaan. Simbirixashadu waxay ka timaaddaa degdegidda, waxaana naga dambeeya rag aan kahaneynno inaan la'aantood heshiis ayagana saameeya galno. Marka markaan iska laabo, annaguna waan laabaneynnaa, arrinkana ka fiirso annaguna waan ka fiirsaneynnaa." Intaas kaddib ayuu wuxuu jeclaystay inuu ninka la yiraahdo Al Muthannaa hadalka la wadaago, markaasuu yiri: "Kanina waa Al Muthannaa bin Xaarithah, odageenna iyo madaxa xarbigeenna u taliya." Markaasuu Al Muthannaa wuxuu yiri: "Waan maqlay waxaad tiri walaalka Quraysheedow, jawaabtuna waa sidatan: waa jawaabta Haani' bin Qabiisah inaan diinteenna ka tagno oo aan Diintaada raacno ku timaaddo hal fadhi oo aad nala fariisatay, anna bilowna lahayn dhammaadna lahayn. Annaguna waxaan degnaa mel u dhexeysa Saryaan-ta ku taalla Al Yamaamah iyo Al Ssamawah." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Ma haathaa Al Saryaanu?"** oo macnihiisu yahay: "Oo Saryaantaanna maxay tahay?" Wuxuu yiri: "Waa wabiyada Kisraa iyo biyaha ceelasha Carabta. Wabiyada Kisraa inta ku saabsan dambiga labadiisa saaxiib lama dhaafin, cuthur daarkiisana lama aqbalin. Inta ceelasha Carabta ku saabsanna dambigiisa waa la dhaafay, cudur daarkiisana waa la aqbalay. Waxaan dhulkaasna ku degnay heshiis uu naga qaaday Kisraa inaan halkaas waxba ku samayn, mid wax soo samayeyna anan hoy ku siin. Aniguna waxaan u arkaa amarkaan aad noogu yeereysid waa mid ay boqorradu neceb yihiin. Marka haddaad dooneysid inaan hoy ku siinno oo aan arligeenna ku dejinno, aanna kaaga hiillinno

inta soo xigta biyaha Carabta waa yeeleynnaa." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Maa asa'tum fii al raddi, ith afsaxtum bi al ssidqi, wa inna Diina Allaahi laa yansurahu illaa man xaadhahu min jamiici jawaanibihi. Ara'aytum in lam talbathuu illaa qaliilan xattaa yuurithukumu Allaahu ardahum wa amwaalahum wa yufrishakum nisaa'ahum: a tusabbixuuna Allaaha wa tuqaddisuunahu?"** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Jawaabta ma aydnaan xumayn, waxaadna caddeyseen oo ku hadasheen runta. Diinta Ilaahayna uma gargaaro oo uma uu hiilliyo cid aan ahayn kuwo dhinacyadiisa oo idil ka koobay oo hareereeyey mooyee. Balse ka warrama hadday adinkoo aan in badanba joogin oo mar dhow ah uu Ilaahay arligooda idin dhaxalsiiyo iyo maalalkoodaba, haweenkoodana uu gogol idiinka dhigo. Markaas Ilaahay ma hufaysaan oo u tasbiixsaneysaan aadna weyneysaan oo daahirineysaan?"
Markaasuu Al Nucmaanu bin Shariik wuxuu yiri: "Ilaahayow, kaas Adigaa leh oo ay kuu sugnaatay." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu akhriyay Aayadaha shan iyo afartan iyo lix iyo afartanaad ee Suuratu Al Axzaab: **"Yaa ayyuhaa Al Nabiyyu Innaa arsalnaaka shaahidan wa mubash-shiran wa Nathiiran**(45)**Wa daaciyan ilaa Allaahi bi ithniHi wa siraajan muniiran**(46)**".** Aayadaha macnohoosu waxaa weey: "Nabigaanow, waxaan ku dirnay adigoo markhaati Rususha kale u ah inay Risaaladii loo soo dhiibay gaarsiiyeen oo gudbiyeen, ahna kan Jannada ugu bishaareeya kuwa muslima oo aamina, naartana uga diga kuwa Aayaadka Ilaahay diida(45)Iyo adigoo ah mid dadka Ilaahay midnimadiisa iyo adeeciddiisa ugu yeeraya adigoo amarkiisa fulinaya, iyo adigoo ah misbaax iftiimeysa, oo mugdiyada laga iftiinsado(46)." Kaddibna Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, fadhiguu ka kacay, aniguuna gacanta i qabsaday, uuna yiri: **"Yaa Abaa Bakr, yaa Abaa Xasan ayyatu akhlaaqin fii al jaahiliyyah. Maa ashrafahaa bihaa, yadfacu Allaahu ba'sa bacdahum can bacdin, wa bihaa yataxajazuuna fiimaa baynahum."** Xadiithka macnihiisu waxa weeye: "Abaa Bakarow, Abaa Xasanow, waa akhlaaq fiican oo jaahiliyada dhexdeeda ah ee maxaa ka sarreeya oo ka sharaf badan. Akhlaaqdaas ayuu Ilaahay ku celinayaa dagaalka ay qaarkood qaarka kale u geysanayaan. Akhlaqdaas ayayna dhexdooda isku ilaaliyaan oo isku gaashaamaan." Wuxuu yiri: "Kaddib waxaan tagnay fadhiga Al Aws iyo Al Khazraj. Fadhigooda intaanan ka kicin ayay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, baayaceen oo ay heshiis la galeen oo way islaameen, waxayna ahaayeen runlowyaal adkeysi iyo sabir badan." Wuxuu kaloo isla Xadithkaan oo uu dariq kale ku tiirinayo ku yiri: "Waxaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arkay laba goor: waxaan ku arkay Suuqa Thii Al Majaaz isagoo qabaa'ilka naftiisa u bandhigaya oo leh**: "Yaa ayyuhaa al nnaasu quuluu laa ilaaha illaa Allaahu tuflixuu."** Xadiithkaan macnihiisu waxaa weeye: "Dadkaanow, waxaad tiraahdaan laa ilaaha illaa Allaahu markaas waad liibaaneysaane." Markaasna waxaa gadaashiisa socda nin laba raamood leh oo dhagax la dhacaya ilaa uu canqawyadiisa dhiig uga keenay, isla markaasna leh: "Dadow warkiisa ha dhegeysannina, maxaa yeelay waa beenaale." Markaasaan ka wareystay ninkuu yahay, waxaana la i yiri: "Waa wiilka Cabdu Al Mudh-dhalib, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Markaasaan waxaan iri: "Ninka dhagaxa la dhacayana yuu yahay?" Waxaa la i yiri: "Waa adeerkiis Cabdu Al Cuzzaa Abuu Lahab." Xadiithkana waxaa kaloo wariyay Al Daaraqudhniyyu.

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo Al Dhaa'if tegey

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markuu Abuu Dhaalib dhintay, waxay Qurayshi u geysatay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dhibaatooyin ayan u geysan jirin

intuu adeerkiis noolaa. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, magaalda Al Dhaa'if tegey isagoo qabiilka Thaqiif hiil ka doonaya iyo inay gaashaan u noqdaan tokiis ka celiya, iyo rajo uu ka qabo inay wax ka yeelaan wuxuu ka keenay xagga Ilaahay Cazza wa Jalla."

Al Dhaa'if

Al Dhaa'if waa magaalo Makkah Al Mukarramah ka xigta xagga qorrax kasoo bax, una jirta sagaal iyo sagaashan kiilomitir. Degmadaasu waxay saarantahay buuraaley, waxayna badda ka korreysaa kun iyo lix boqol iyo soddon mitir. Al Dhaa'if waxay leedahay waadiyo la beerto sida Wajjun iyo Al Caqiiqu iyo waadi Al Maxram iyo waadi Layyah, waxaana ka mid ah waxa lagu beero rumaan caan ah iyo canab macaan. Waadiyaanna waxaa deggan laba qabiilo oo kala ah Cutaybah iyo Thaqiif. Waxaana la dega Quraysh badan. Waxaan warkaas kasoo qaadannay Mucjamu Macaalimi Al Xijaaz ee Caatiq bin Ghayb Al Balaadii, juzka shanaad, waana toban juz kitaabkaas dhammaantiis. Waxaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la socday oo keli ah Zayd bin Xaarithah.

Mawqifkay Thaqiif ee Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, Al Dhaa'if tegay, wuxuu doonay oo uu u tegey rag Thaqiif u dhashay oo markaas madaxda Thaqiif ah, ahna saddex nin oo wada dhashay oo walaalo ah, lana kala yiraahdo (Kow) Cabdu Yaa Layl bin Camr bin Cumayr iyo (Labo) Mascuud bin Camr bin Cumayr iyo (Saddex) Xabib bin Camr bin Cumayr bin Cawf bin Cuqdah bin Ghiirah bin Cawf bin Thaqiif. Mid saddexdaas nin ka mid ahna waxaa u dhaxda haweeney Quraysh ah oo reer Banii Jumax ka dhalatay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la fariistay oo uu Ilaahay ugu yeeray, waana kala hadlay wuxuu ugu yimid oo ah inay islaamka u hiilliyaan, ayna isaga garabkiisa istaagaan, kalana soo horjeestaan kuwa tolkiis ah oo khilaafay. Markaasuu raggaas midkood wuxuu ku yiri inuu "Marada Kacbada jeexjeexayo hadduu Ilaahay kusoo diray". Mid kalena wuxuu yiri: "Miyuu Ilaahay waayey axad aan adiga ahayn ee uu soo diro?" Midkooda saddexaadna wuxuu yiri: "WaAllaahi inaanan weligay kula hadlayn, oo haddaad Rasuulka Ilaahay tahayna, sidaad leedahay adigu waad ka weynaan badan tahay inaan kuu jawaabo. Haddaad Ilaahay ku been abuuraneysidna iima habboona inaan kula hadlo." Markaasuu Rasuulka Ilaaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, agtooda ka kacay isagoo qabiilka Thaqiif ka quustay. Markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sida la ii wariyay, ku yiri**: "Ithaa facaltum fa aktumuu cannii."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Haddaad sidaas fasheen, hadaba waxaan is niri qariya oo ha sheegina", oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu kahday inay taasi tolkiisa gaarto oo ay markaas colaadintiisa kusii dhiirranaadaan. Mase ayan yelin ee maangaabtooda iyo addoommadooda ayay ku direen ayagoo caayaya oo ku qaylinaya ilaa ay dadkuba isugu yimaadeen Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu wuxuu dhibkoda ka galay beer ay leeyihiin Cutbah bin Rabiicah iyo Shaybah bin Rabicah, ayna markaas labadooduba beerta ku dhex jiraan. Markaasey maangaabta Thaqiif iyo kuwii daba socdayba ka gaddoomeen. Markuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam beerta dhex galay ayuu wuxuu hoos fariistay harka geed canab, ayagoo ay labada nin oo ilmo Rabiicah ay u jeedaan oo u fiirsanayaan, ayna u jeedaan wuxuu maangaabta Thaqiif kala kulmay. Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sida la ii wariyay, wuxuu la kulmay haweentaas Qurayshta reer Banii Jumax u dhalatay, wuxuuna ku yiri: **"Maathaa laqiinaa min axmaa'iki"**. Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Maxaan dumaayshiyaalka, waa xididkaaye kala kulannay."

Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam u baxay Al Dhaa'if saddex bilood kaddib dhimashada Khadiijah, ayadoo ay dhawr habeen ka hareen bisha Shawwaal ee sanadka tobanaad ee Nabinnimad." Wuxuu kaloo yiri: "Waxaa la socday Zayd bin Xaarithah. Markaasuu Al Dhaa'if bil joogay isagoo madaxda Thaqiif xagga Ilaahay ugu yeeraya, ayguna ay ka diideen. Muusaa bin Cuqbah wuxuu yiri: "Cirbahay dhagax kala dheceen Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ilaa ay kabihiisu bdhiiggiisa la guduutaan. Sulaymaan Al Taymiyyi wuxuu intaas ku daray oo yiri: "Markay dhagaxdu xanuujiso Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dhulkuu fariistaa. Markaasey intay labada cududood qabtaan ayay istaajiyaan. Markaasuu markuu socdo ayay dhagax la dhacaan ayagoo qoslaya. Intaas oo idilna Zayd bin Xaarithah naftiisa ayuu dhagaxda uga celinayaa, ilaa ay madaxa dhaawacyo ka gaaraan oo jeexaan." Waa intaas warka Al Qasdhalaanii.

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xasilay wyuu wuxuu yiri: **"Allaahumma Ilayka ashkuu dacfa quwwatii wa qillata xiilatii, wa hawaanii calaa al nnasi, Anta Arxamu Al Rraaximiina. Anta Rabbu al mustadcafiina, wa Anta Rabbii. Ilaa man takilunii? Ilaa baciidin yatajahammunii? Am ilaa caduwwin mallaktahu amrii? In lam yakun biKa calayya ghadabun falaa ubaalii, wa laakin caafiyataka hiya awsacu lii. Acuuthu bi Nuuri Wajhika Allathii ashraqat Lahu al th-thulumaatu, wa salaxa calayhi amru al dunyaa wa Al Aakhirati min an tunzila bii ghadabuka, aw yaxilla calayya sukhdhuka. Laka al cutbaa xattaa tardaa, wa laa xawla wa laa quwwata illaa biKa."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahayow Adigaan kaaga ashtakoonayaa taagdarrada xooggeyga iyo yaraanta xeeladeyda iyo sidaan dadka ula yaraaday. Adigaa ah Arxamu Al Rraaximiina, Kan ugu naxariis badan inta naxariisata. Adigu waxaad tahay Rabbiga kuwa la taagdarraysto, Adigaana ah Rabbigay. Yaad ii wakiilatay? Ma mid fog oo igu xaqdarrooda? Mase cadaw ayaad amarkayga gacanta u gelisay? Haddaadan Aidgu ii caraysnayn wax kale dan kama lihi. Laakiin cafintaada ayaa aniga igu filan. Waxaan Nuurka Wajigaaga oo ay mugdiyadu ku iftiimeen ayna ku ssubanaadeen umuurta addunka iyo kuwa Aakhiraba ka magan galay inay caradaadu igu soo degato. Waxaad leedahay raalli gelin ilaa aad raalli ka noqotid. Xeelad iyo itaalna ma jiraan inay Adiga kaa yimaadaan mooyee." Markaase markay Cutbah bin Rabiicah iyo walaalkiis Shaybah bin Rabiicah arkeen wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam la kulmay, ayaa waxaa dhaqdhaqaaqay riximka ka dhexeeya -oo waxay labadooduba u dhasheen Qurayshta reer Banii Cabdi Shams bin Cabdi Manaaf, oo wuxuu nasabkoodu kula kulmaa midka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Cabdi Manaaf oo ah awoowihiisa saddexaad, isagoo uu wiilasha uu Cabdi Manaaf dhalay shantaan kala ahaayeen: Haashim bin Cabdi Manaaf oo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, awoowihiisa labaad ah, iyo Cabdi Shams bin Cabdi Manaaf oo ay Cuthmaan bin Caffaan Thuu Al Nurayn iyo labadaan walaalaha ahi ku abtirsadaan iyo Al Mudha-dhalib bin Cabdi Manaaf oo uu ku abtirsado Al Imaamu Al Shaaficii, iyo Nawfal bin Cabdi Manaaf iyo Cubayd bin Cabdi Manaaf-. Markaasey waxay u yeereen nin addoon ah oo ay lahaayeen oo krishtaan ah, lana yiraahdo Caddaas, waxayna ku yiraahdeen: "Gacan canab ah qaad, waxaadna saartaa saxankaan, kaddibna waxaad u geysaa ninkaas, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaadna ku tiraahdaa inuu ka cuno." Markaasuu Caddaas sidaas yeelay oo uu canabkii saxanka saaray oo uu soo qaaday oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo hordhigay, kaddibna uu ku yiri: "Cun." Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gacantiisa saaray ayuu wuxuu yiri**: "Bismi Allaahi"**, kaddibna wuu cunay. Markaasuu Caddaas wajiga Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, fiiriyay kaddibna uu yiri: "WaAllaahi inayan dadka beledkaani warkaas ku hadlin." Markaasuu Rasuulka

Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Wa min ahli ayya al bilaadi anta yaa Caddaas, wa maa diinuka?"** Xadiithka macnihiisu waxaa weey: "Oo adigu beledkee ka timid, diintaaduna waa maxay Caddaasow?" Wuxuu yiri: "Diinteydu waa krishtaan, waxaanna ahay nin ka mid ah dadka Niinaawii degah." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Min qaryati al rajuli al ssaalixi Yuunus bin Mattaa?"** oo macnihiisu yahay: "Ma waxaad ka timid magaalada ninka suuban oo ah Yuunus bin Mattaa?" Markaasuu Caddaas wuxuu ku yiri: "Oo yaa kuu sheegay wuxuu yahay Yuunus bin Mattaa?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Thaaka akhii, kaana Nabiyyan wa anaa Nabiyyun"**, o macnihiisu yahay: "Kaasu waa walaalkay oo isaguna wuxuu ahaa Nabi, aniguna waxaan ahay Nabi." Markaasuu Caddaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo uu hortiisa taagnaa ku foorarsaday isagoo dhunkanayaa madiiisa iyo labadiisa gacnood iyo labadiisa cagoodba. Markaasuu mid ka mid ah labada wada dhashay oo ilmo Rabiicah ah wuxuu kan kale ku yiri: "Addoonkaaga ayuu kaa fasaadiyey." Markaasuu markuu Caddaas labadooda u yimid ayay waxay ku yiraahdeen: "War hooy hoogee maxaad leedahay Caddaasow, maxaa dhacay oo aad ninkaan labadiisa gacnood iyo labadiisa cagood u dhunkaneysaa?" Caddaas wuxuu yiri: "Sayyidkeygow! Ma uu saarna adduunkaan korkiisa wax ninkaan ka khayr badan, oo wuxuu ii sheegay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arrin uusan ogayn Nabi mooyee." Waxay ku yiraahdeen: "Is jir Caddaasow oo yuusan diintaada kaa leexin, maxaa yeelay diintaada ayaa ka khayr badan Diintiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam."

Al Suhaylii wuxuu Al Taymiyyi ka wariyay inuu Caddaas markuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka maqlay magaca Nabi Yuunus bin Mattaa uu yiri: "WaAllaahi waxaan Niinaawaa kasoo baxay ayadoo ayan ku jirin toban qof oo taqaanna Yuunus bin Mattaa. Marka adigu sideebaad ku ogaatay Yuunus bin Mattaa adigoo ummi ah lana nool ummad ummi ah?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Thaaka akhii, kaana Nabiyyan wa anaa Nabiyyun"**, o macnihiisu yahay: "Kaasu waa walaalkay oo isaguna wuxuu ahaa Nabi, aniguna waxaan ahay Nabi." Markay Qurayshi Badar u baxaysay ayay labadaas walaalaha ahi waxay Caddaas ku amreen inuu dagaalka u raaco. Markaasuu wuxuu labadooda ku yiri: "La dagaallami mayo ninkii aan beertiinna dhexdeeda ku arkay oo waAllaahi inayan buuruhu iska celin karin." Markaasey waxay ku yiraahdeen: "War hoy is jir Caddaasow, wuxuuna kugu sixray carrabkiisa, waa hadalkiisee." Waa iantaas warka Al Suhaylii.

Cutbah bin Rabiicah iyo Shaybah bin Rabiicah

Labadaas walaalaha ahba waxaa lagu dilay duullaanka Badar ayagoo gaalo ah, oo Cutbah bin Rabiicah bin Cabdi Shams waxaa dilay Cubaydah bin Al Xaarith bin Al Mudh-dhalib, waxaana la dilay, kaddib marka Cubaydah iyo Cutbah dhaawacyo culus is gaarsiiyeen Xamzah bin Cabdu Al Mudh-dhalib. Cutbah walaalkiis Shaybah bin Rabiicah bin Cabdi Shams waxaa dilay Sayyidu Al Shuhadaa'i Xamzah bin Cabdi Al Mudh-dhalib bin Haashim bin Cabdi Manaaf Al Qurayshiyyi Al Haashimiyyi, adeerka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Masjidka Caddaas

Al doktoor Shawqii Abuu Khaliil wuxuu kitaabkiisa Adhlasu Al Siirati Al Nabawiyyah ku dhigay masawirka Masjidu Caddaas, oo ku yaalla dariiqa Al Dhaa'if,

waana meesha beertaas dhexdeeda ahayd oo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, fariistay oo uu caddaas canabka ugu keenay.

Aswaaqda Carabta: Cukaath, Thuu Al Majannah, Thuu Al Majaaz

Aswaaqda Carabta waxaa ugu caansanaa saddexdaan: **Cukaath** oo ugu muhimsanaa oo furnaan jiray labaatanka maalmood oo ugu horreysa bisha Thuu Al Qacdah kaddibna loo guuri jiray **suuqa Thuu Al Majannah** oo furnaan jiray tobanka maalmood oo bishaas Thuu Al Qacdah ugu dambeysa, isagaana ku xigay Cukaath, kaddibna sideeda maalmood oo bisha **Thuu Al Xijjah** ugu horreysana waxaa loo guuri jiray suuqa **Thuu Al Majaaz**: Thuu Al Majaaz waxay ku taallaa waadiga kasoo gaddooma buurta la yiraahdo Kabkab galbeedkeeda kuna soo biyo shuba Waadii Curanah ee darafta Bari ee Al Mughammas. Waadigaasu wuxuu xuduudka Xaramka Makkah u jiraa sideed kiiloomitir xagga bari. Saddex kiiloomitir waadigaas dhexdiisa waxaa ku yiillay Suuqa Thuu Al Majaaz. Suuqaanna wuxuu Carafah ka xigaa dhanka bari, wuxuuna u dhexeeyaa Carafo iyo **Xunayn** oo maanta **Al Sharaa'ic** la yiraahdo. Suuqaas waxaa iska lahaa oo uu ku yiillay arliga qabiilka Huthayl, Al Mughammasna waxaa degta Quraysh, siduu Caatiq bin Ghayth Al Balaadii u sugay)

Islaamidda Al Dhufaylu bin Camr Al Dawsii

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, in kastoo ay tolkiis ku faleen waxay u geysteen, hadana wuxuu ku dadaali jiray u naseexeyntooda, wuxuuna ugu yeeri jiray waxay uga badbaadi lahaayeen waxay ku dul taagnaayeen, oo gaalnimo ah. Markaasey Qurayshi, markuu Ilaahay ka ilaaliyey, ayay waxay bilaabeen inay dadka uga digaan iyo Carabta kaleba ee Makkah timaadda. Al Dhufaylu bin Camr wuxuu oran jiray inuu Makkah yimid ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhexdeeda ku sugan yahay. Markaasaa waxaa u yimid rag Quraysh ah -oo Al Dhufaylu wuxuu ahaa nin madax gabayaa ah, caqlina badan- waxayna ku yiraahdeen: "Dhufaylow, beledkeennaad timid, ninkaan nala joogana dhibaato weyn ayuu noo geystay, oo midnimadeenna ayuu kala firdhiyay, amarkeennana uu kala dhanbalay. Hadalkiisuna waa sixir uu ku kala geynayo ninka iyo aabihiis iyo ninka iyo walaalkiis iyo ninka iyo haweentiisa. Annaguna waxaan adiga iyo tolkaa uga baqaynnaa wuxuu annaga noo keenay. Marka ha la hadlin, wuxuu leeyahayna waxba ha ka dhegeysanin." Al Dhufaylu wuxuu yiri: "WaAllaahi sidaas ayay igu sii adkeynayeen oo ay ku celcelinayeen ilaa aan ka goostay inaanan wuxuu leeyahay waxba ka dhegeysan. Markaasaan markaan Masjidka aadayey ayaan waxaan labadeyda dhegood ku gufeeyey cudbi si uusan hadalkiisa waxba iiga soo gaarin, aananna dooneyn inaan maqlo. Markaasaan Masjidka aaday, mase waaba Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo taagaan dhexdiisa oo ku tukanaya Kacbada agteeda. Markaasaan agtiisa istaagay. Markaasuu Ilaahay diiday waxaan ahayn inuu wuxuu leeyahay qaarkood i maqashiiyo mooyee. Markaasaan waxaan maqlay hadal fiican. Markaasaan waxaan is iri:: "Hooyaday ha gablantee! WaAllaahi anigu waxaan ahay nin caqlilow ah oo gabayaa ah, ayanna isaga kay qasmeen waxa fiican iyo waxa xun. Marka, maxaa ii diidaya inaan ninkaan wuxuu leeyahay dhegeysto? Oo hadduu wuxuu leeyahay ay suuban yihiinna waan qaadanayaaa, hadduu xun yahayna waan ka tegayaa." Markaasaan joogay oo sugnaaday, aanna dhegeysanyey Quraanka uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, akhrinayey, ilaa uu gurigiisa uga gaddomay. Markaasaan daba galay oo markuu gurigiisa galay aan la galay. Markaasaan waxaan iri: "Muxammadow! Tolkaa waxay i yiraahdeen sidaas iyo sidaas -uuna u

sheegay waxay ku yiraahdeen- oo waAllaahi way iga kaa cabsi geliyeen ilaa heer aan labadeyda dhegood cudbi ku gufeeyey si aanan waxaad leedahay u maqal. Ilaahayse ayaa diiday waxaan ahayn inuu waxaad leedahay i maqashiiyo mooyee. Waxaanna maqlay inuu hadal fiican yahay. Marka ii sheeg wuxuu arrinkaagu yahay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, islaamku wuxuu yahay ii sheegay, Quraanna uu igu dul akhriyey, oo waAllaahi inaanan weligay hadal ka fiican maqal iyo amar ka caadilsan. Markasaan islaamay, oo aan shahaadada xaqqa ah ku ashahaatay, kaddibna waxaan iri: "Nabiga Ilaahayow (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) waxaan ahay nin uu tolkiis u hoggaansan yahay, ayagaanna u noqonayaa waxaanna ugu yeerayaa islaamka. Marka Ilaahay ii bari inuu i siiyo Aayad waa calaamad igu caawinta waxaas aan ugu yeerayo." Markaasuu wuxuu Sallaa Allaahu Calayi Wasallam yiri: **"Allaahumma ijcal lahu aayatan"**, oo macneheedu yahay: "Ilaahayow calaamad sii." Markaasaan xagga tolkay soo aaday oo markaan marayo jiir aan dusheeda ka arkay degmadeenna oo hoosteyda ah, ayaa nuur wuxuu ahaaday oo ka dhashay labadeyda indhood dhexdooda, sida misbaax oo kale. Markaasaan waxaa iri: "Ilaahayow, nuurka meel aan wajigayga ahayn ka yeel, oo waxaan ka baqayaa inay nuurkaas wajigayga kasoo baxaya u qaataan inuu ugu dhacay diintooda aan ka leexday daraadeed." Markaasuu nuurku wuxuu u wareegay madaxa karbaashkeyga. Markaasey dadka degmada ku sugani waxay nuurka karbaashkeyga u arkeen sida faynuus soo laadlaadda oo kale, anigoo kasoo deganayey jiirta. Markaasaan waabarigii degmada ugu imid."

Islaamidda Al Dhufaylu aabihiis iyo haweentiisa

Al Dhufaylu wuxuu yiri: "Markaasaan markaan gurigeyga ku degay ayaa waxaa ii yimid aabahay, oo oday da' weyn ahaa. Markaasaan waxaan ku iri: "Ha ii soo dhowaan oo iga fogow aabow oo waxba kuuma ihi, adiguna waxba iima tihide." Wuxuu aabahay yiri: "Maxaana u sabab ah wiilkeygow?" Waxaan iri: "Waan islaamay, waxaanna raacay Diinta Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Wuxuu aabahay yiri: "Maandhow, Diintaydu waa Diintaada." Markasaan waxaa iri: "Hadaba tag oo soo qubayso, dharkaagana soo dhaq, kaddibna ii imow si aan kuu baro waxa la isoo baray." Markaasuu tegay oo uu soo qubaystay, dharkiisana soo dhaqay, kaddibna uu ii yimid. Markaasaan islaamka usoo jeediyay, wuuna islaamay. Kaddibna waxaa ii timid haweenteyda, waxaanna ku iri: "Ha ii soo dhowaan oo iga fogow oo waxba kuuma ihi, adiguna waxba iima tihide." Waxay tiri: "Maxaana u sabab ah aabahay iyo hooyaday ayaan kugu furanayaaye?" Waxaan ku iri: "Diinta islaamka ayaa na kala geysay, waxaanna raacay Diinta Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Waxay tiri: "Diinteydu waa Diintaada." Waxaan ku iri: "Hadaba waxaad tagtaa meeshuu yaallo Thii Al Sh-sharaa (oo ah sanam uu qabiilkiisa Daws caabudi jireen) soona qubayso (oo halkaas waxaa ku yiillay biyodhac oo ahayd meel ay biyuhu kasoo hoobtaan oo buurta kasoo daataan). Waxay tiri: "Aabahay iyo hooyaday ayaan kugu furanayaaye, soo Thii Al S-shiraa caruurta ugama baqaysid inay wax uga yimaadaan?" Waxaan iri: "Maya, anigaa taas dammaano qaaday." Markaasey aaday oo ay soo qubaysatay, kaddibna ay soo laabatay. Markaasaan islaamka usoo jeediyay, wayna islaamtay.

Ducada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ee qabiilka Daws iyo islaamiddoda

Wuxuu yiri: " Markaasaan tolkay Daws islaamka ugu yeeray wayna iga soo gaabiyeen inay yeelaan. Markaasaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Makkah ugu imid, waxaanna ku iri: "Nabiga Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Daws waxaa iiga adkaaday zinada, marka habaar." Markaasuu Nabigu,

Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Allaahumma ahdi Dawsan! Arjic ilaa qawmika fa adcuhum wa arfuq bihim."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahayow Daws hanuuni! Tolkaa u laabo islaamkana si jilicsan ugu yeer, una tur, una dul qaado."

Sidaas ayaan arliga Daws u joogay, aanna islaamka ugu yeerayey ilaa uu Rasulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Al Madiinah u haajiray, ayna gudbeen Badr iyo Uxud iyo Al Khandaq. Markaas kaddib ayaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u imid anigo wada inta tolkay ka islaantay, waxaanna nimid ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Khaybar jiro. Markaasaan waxaan Al Madiinah dejiyay toddobaatan ilaa sideetan qoys oo Daws ah, kaddibna waxaan uga daba tagnay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Khaybar, oo uu markaas ghaniimada sahamkeenna naga siiyey sida muslimiinta kaloo kale. Sidaas ayaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ula joogay ilaa markuu Ilaahay Makkah u furay. Markaas kaddib ayaan waxaan iri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaad ii dirtaa Thii Al Kaffayni, sanamka Camr bin Xumaamah, si aan usoo gubo." Markaasuu sanamkaas aaday. Markaasuu Al Dhufaylu sanamkaas dab ku shiday isagoo leh:

"Thaa Al Kaffaynow, kuwa ku caabuda ka mid ma ihi/dhalashadeenna ayaa dhalashadaada ka fac weyn oo ka horreysey/Qalbigaaga ayaanna dab ka buuxiyey."

Gubidda sanamkaas kaddib Dhufayl wuxuu usoo laabtay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna degganaa Al Madinah ilaa uu Ilaahay Ruuxa Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qabtay. Markaasuu markay Carabtu Diinta ka noqotay ayuu muslimiinta mujaahidiinta ah raacay oo uu jihaadka la galay ilaa ay Dhulayxah kasoo jeesteen iyo arliga Najd dhammaanteedba. Kaddib mujaahidiinta muslimiinta ayuu wuxuu u raacay Al Yamaamah, isagoo uu la socdo wiilkiisa Camr bin Al Dhufayl. Isagoo xagga Al Yamaamah u socda ayuu riyo ku riyooday. Markaasuu wuxuu saaxibbadiis ku yiri: "Riyaan ku riyooday ee ii cabira. Waxaan arkay ayadoo timaha madaxa la iga xiiray, afkeygana uu shimbiri kasoo baxay, ayna ila kulantay haweeney oo ay markaas farjigeeda i gelisay. Waxaanna arkay inuu wiilkeygu si xoog leh ii raadinayo, kaddibna la iga celiyay, oo la iga xabbisay." Waxay yiraahdeen: "Waa riyo khayr ah." Wuxuu yiri: "Anigu waAllaahi riyadaas waan fasirtay." Waxay yiraahdeen: "Maxaadna ku fasirtay?" Wuxuu yiri: "Timaha madaxa la iga xiiray waa madaxayda dhigiddiisa (goyntiisa). Shimbirka afkayga kasoo baxayna waa ruuxeyga. Haweeneyda farjigeeda i gelisayna waa dhulka oo la ii qodayo oo la igu duugayo. Raadinta uu wiilkeygu i raadinayana iyo in la iga celinayay waxaan u arkay inuu jihaadayo uuna ku dadaalayo inay ku dhacaan waxa aniga i haleelay oo kale." Al Dhufaylu waxaa shahiidnimo loogu dilay Al Yamaamah, Allaha u naxariistee, wiilkiisana waxaa gaaray dhaawac weyn, uuse ka bogsooday, waxaana lagu dilay duullaanka Maalinta Al Yarmuuk, zamanka Cumar, Allaha raalli ka noqdee, isagoo shahiid ah."

Qisada Al Acshiyyu bin Qays bin Thaclabah

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Nin qabiilka Ashcaa bin Qays bin Thaclabah bin Cukaabah bin Sacb bin Caliyyi bin Bakr bin Waa'il ibn Qaasidh bin Hinbi bin Afsaa bin Ducmii bin jadiilah bin Asad bin Rabiicah bin Nizaar u dhashay ayaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo aaday, isagoo doonaya inuu islaamo. Markaasuu gabay dheer tiriyey uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku ammaanayo. Markaasuu markuu Makkah yimid ama uu usoo dhowaaday ayaa waxaa la hadlay nin Quraysh ah oo gaal ah, uuna ka wareystay wuxuu u socdo. Markaasuu u sheegay inuu u socdo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, si uu u islaamo. Markaasuu

ninku wuxuu ku yiri: "Abaa Basiirow (ninkaad u socotid) wuxuu xaaraantimeeyey zinada." Markaasuu ninka reer Al Acshaa u dhashay wuxuu ku yiri: "WaAllaahi kaasu waa arrin aanan anigu xaaju ka lahayn." Markaasuu wuxuu ku yiri: "Abaa Basiirow, wuxuu kaloo xaaraantimeeyey cabidda khamrada." Markaasuu al ashciyyu wuxuu yiri: "Midkaanse waAllaahi naftu inay cabtay dooneysaa. Marka dib ayaan u noqonayaa oo aan sanadkaan ka dhergayaa, kaddibna aan usoo laabanayaa oo islaamayaa." Markaasuu dib u gaddoomay uuna isla sanadkaasba dhintay, isagoo aan Rasulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, usoo noqon."

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Dadku waxay isku raacsan yihiin inuusan xaaraantimaynta khamrada Quraan kusoo degan Al Madiinah mooyee, kaddib markay gudbeen Badar iyo Uxud, waxaana lagu xaaraantimeeyey Suuratu Al Maa'idah, oo ah kuwa ugu dambeeyey oo soo dega…Abuu Xaatimna wuxuu ka wariyay Abuu Cubaydah oo yiri: "Al Ashciyyu wuxuu kula kulmay Caamir bin Al Dhufayl arliga Qays, isagoo usoo socda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu wuxuu u sheegay inuu khamrada xaaraantimeeyey. Markaasuu dib u laabtay." Tanaana sawaabta mudan." Hadaba al ashciyyigana "waxaan ka dhergayaa sanadkaan kaddibna waan kusoo laabanayaa oo aan islaamayaa, waxaa la isku raacay inayan gaalnimada ka saarayn. Al Isfaraayiinii wuxuu caqiidadiisa ku yiri: "Hadduu mu'minku yiraahdo waan gaaloobayaa berrito ama saa dambe isla markiiba waa gaaloobayaa, sida la isku raacay. Hadduu gaalku yiraahdana berrito ama saadambe ayaan mu'min noqonaya, gaalnimadiisuu ku taagan yahay, oo waxaa xukunka gaalnimada ka saaraya oo keli ah inuu islaamo oo uu mu'min noqdo." Arrinkaan khilaaf kama taagna. Runtana Rabbi ayaa og." Waa intaas warka Al Suhaylii.

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam oo Rukaanah la legdamay si uu ku islaamo

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rukaanah bin Cabdi Yaziid bin Haashim bin Cabdu Al Mudh-dhalib bin Cabdi Manaaf wuxuu ahaa ninka Quraysh ugu xoog badan. Markaasuu wuxuu maalin maalmaha ka mid ah bananka Makkah midkood kula kulmay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Yaa Rukaanah, alaa tattaqii Allaaha wa taqbila maa adcuuka ilayhi?"** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Rukaanow, maad Ilaahay ka dhawrsatid oo aad waxaan kuugu yeerayo yeeshid?" Rukaanah wuxuu yiri: "Haddaan ogaan lahaa inay waxaad iigu yeereyso run yihiin waan ku raaci lahaa." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Afara'ayta in saractuka ataclamu anna maa aquulu xaqqun?"**, oo macnihiisu yahay: "Bal ka warran, haddaan legdanno oo aan ku legdo ma ogaaneysaa markaas inay waxaan leeyahay run yihiin?" Rukaanah wuxuu yiri: "Haa". Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Faqum xattaa usaaricaka."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Hadaba sare joogso si aan kuula legdamo." Markaasuu Rukaanah usoo istaagay si uu ula legdamo. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, intu qabtay legday oo uu dhulka dhigay, isagoo uu Rukaanah xoog uu isaga celiyo iska waayey. Markaasuu Rukaanah wuxuu yiri: "Muxammadow (Sallaa Aallaahu Calayhi Wasallam) mar kale iigu celi." Markaasuu ugu celiyey oo uu hadana intuu legday dhulka dhigay. Markaasuu wuxuu yiri: "Muxammadow (Sallaa Allaahu Calayhi wasallam), waAllaahi kani waa arrin yaab leh, inaad i legedid." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Wa acjabu min thaalika in shi'ta an uriikahu, in ittaqayta Allaaha wa atbacta amrii."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaan ku tusayaa mid taas kasii yaab badan haddaad Ilaahay ka dhawrsato oo aad

amarkeygaan, oo ah Diinta Islaamka, soo raacdid." Rukaanah wuxuu yiri: "Waana maxay?" Wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Adcuu laka haathihi al shajarata allatii taraa fa ta'tiinii."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaan kuugu yeerayaa geedkaas aad u jeedid, markaasuu ii imaanayaa." Wuxuu yiri: "U yeer." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam u yeeray. Markaasuu geedku soo kacay oo uu soo socday ilaa uu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hortiisa soo istaagay. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu geedka ku yiri: **"Irjicii ilaa makaaniki"**, oo macnihiisu yahay: "Meeshaadii dib ugu laabo." Markaasuu geedku meeshiisii dib ugu noqday. Intaas kaddib ayuu Rukaanah tolkiis u tegey wuxuuna ku yiri: "Reer Banii Cabdi Manaafow, saaxiibkiinnaan (waana Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) saaxirnimada kula tartama dadka adduunkoo idil, oo waAllaahi inaanan weligay qof sixirka ka badiya arag." Intaas kaddibna wuxuu tolkiis u sheegay wuxuu arkay oo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo isaga dhexmaray iyo wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sameeyey."

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Rukaanah wuxuu ka mid ahaa dadka marka Makkah la furtay islaamay, wuxuuna dhintay khilaafada Mucaawiyah. Rukaanah waana isla ninka haweentiisa saddexdii dalaaqoodba isku raaciyay oo furay, markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, weydiiyey waxa niyadiisa ku jiray markuu sidaas yeelayay, wuxuuna yiri: "Waxaan doonayey inaan hal dalaaq ku furo". Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, haweentiisa usoo celiyey (waana Xadiithka laba kun iyo saddex boqol iyo saddex iyo todobaatanka ee Abuu Daauud oo wariyay). Rukaanah Xadiithkiisa uu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyay waxaa kaloo ka mid ahaa inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Inna li kulli diinin khuluqan, wa khuluqu haathaa Al Diini al xayaa'u."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Din walba waxay leedahay khuluq, waa dhaqane, ayada u gaar ah, khuluqda Diintaanna waa xishoodka." Rukaanah wiilkiisa Yaziid-na wuxuu ahaa saxaabi. Yaziid bin Rukaanah waxaa ka wariyay wiilkiisa Calii bin Yaziid bin Rukaanah, kanoo la siiyey xoog aan cid kale la siin, uuna ka dhaxlay awoowihiis Rukaanah. Xoogiisaasna waxaa lagu wariyay akhbaar uu xusay Al Faakihii (oo ah Muxammad bin Isxaaq Al Faakihii, oo dhintay sanadka laba boqol iyo labo iyo toddobaatanka Hijriga, kitaabkiisana taariikhda Makkah ku saabsanna waxaa la yiraahdaa Akhbaaru Makkah fii Qadiimi Al Dahri wa Xadiithihi), ayna ka mid tahay waxa dhex maray isaga iyo Yaziid bin Mucaawiyah, midkaan damboo ragga Carabta kuwooda ugu xoog badan ka mid ahaa (Yaziid aabihiis Mucaawiyah bin Abii Sufyaan wuxuu noqday boqorka dawladda Islaamka, wiilkiisa Yaziidna waxaa la boqray oo la caleemo saaray kaddib dhimashada aabihiis. Mucaawiyah wuxuu boqor ahaa labaatan sano oo ka bilaabatay sanadka afartanaad ee Hijrada wuxuuna dhintay sanadka lixdanaad, wuxuuna ku duugan yahay Dimishaq, arliga Suuriya. Wiilkiisa Yaziid bin Mucaawiyah wuxuu boqor ahaa saddex sano iyo bilo, isaga dabadiis. Isagana waxaa boqornimada ka dhaxlay wiilkiisa Mucaawiyah bin Yaziid bin Mucaawiyah oo boqor ahaa afartan maalmood, kaddibna wuu dhintay isagoo saddex iyo labaatan sano jir ah sanadka afar iyo lixdan ee Hijrada). Markaasuu Yaziid bin Mucaawiyah maalin wuxuu la legdamay Calii bin Yaziid bin Rukaanah. Markaasuu ina Rukaanah wuxuu legday Yaziid bin Mucaawiyah oo uu dhulka u dhigay si aan ayadoo kale hore loo arag. Markaasuu Yaziid bin Mucaawiyah wuxuu Calii saaray faras adag oo aan la fuuli karin oo haddii la fuulana aan soconayn oo qofka saaran dushiisa ka tuuraya. Markaasuu Calii wuxuu gartay waxa lala doonayo. Markaasuu markuu farasku damcay inuu dushiisa ka rido ayuu faraska labadiisa bawdo xoog ugu qabtay oo uu xooggaas uu ugu qabtay daradiis farasku dhintay. Al Faakihii wuxuu kaloo xusay inuu Calii bin Yaziid bin Rukaanah uu laba nin mid walba mid ka mid ah labadiisa kilkilood

geliyay oo uu isagoo sidaas u sida la orday, uuna la ordayey ilaa ay ka qayliyaan oo ay yiraahdaan: "Waan dhimaneynnaayeey! Waan dhimaneynaayey!" Markaasu sii daayey." Waana intaas warka Al Suhaylii.
Al Nawawii wuxuu legdinta markuu xusay ka sokow yiri: "Rukaanah wuxuu yiri: "Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo oranaya: **"Farqu maa baynanaa wa bayna al mushrikiina al camaa'imu calaa al qalaanisi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Farqiga annaga iyo gaalada noo dhexeeya oo na kala saara waa cimaamadaha koofiyaha korkooda lagu duubto." Haweentiisa uu saddexdaas ku furayna waxaa magaceedu ahaa Suhaymah bintu Cuwaymir." Waa intas warka Al Nawawii.

Juzka Afaraad

Gaarsiinta islaamka qaaradda Afrika iyo Soomaaliya

Hijrada Al Xabashah

Al Xabashah waxaa la oran jiray boqortooyo ku tiillay Waqooyi/Bariga Afrika oo dhulkeedu ahaa qiyaas saddex boqol oo kiiloomitir oo dhererka ah iyo boqol iyo lixdan ballaca ah, siduu u sheegay kitaabka General History of Africa II, Ancient Civilizations of Africa, boogga saddex boqol iyo saddex iyo lixdan , ayna daabacday UNESCO International Scientific Committee for the Drafting of a General History of Africa. Qiyaas laba boqol oo sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa waxaa kula jabay xeebtaas Badda Cas markab uu wax ka saarnaa ninka Suuriya u dhashay oo magaciisu ahaa Frumentius, ahaana krishtaan. Frumentius, oo kaniisadda amxaarada laga yiraahdo Abba Selama ama Kessate Brhan, oo macneheedeu yahay aabaha nabadda, wuxuu noqday la taliyaha iyo khasnajiga boqorka dalkaas oo lagu wado inuu magaciisu ahaa Ella Amida, aabaha dhalay boqorka Ezana. Frumentius wuxuu kaloo macallin u noqday wiilka uu boqorku dhalay. Sidaas ayay diinta krishtaanku kusoo gashay gobolkaas. Kaddib waxaa gobolkaas daris la noqday boqortooyin toddoba ah oo muslinliini deggantahay, oo ay qaarkood boqorro u yihiin rag u dhashay reer Banii Haashim iyo reer Banii Makhzuum iyo kuwo kaleba. Boqortooyinkaas waxaa la kala oran jiray, siduu Muxammad Maxmuud Axmad Muxamadiin ku wariyay kitaabkiisa Diraasaatun fii Al Adabi Al Ssuumaalii ee lagu daabacay Al Majlisu Al Aclaa liricaayati Al Funuuni wa Al Adab wa Al Culuumi Al Ijtimaaciyyah, boogga saddex iyo labaatan: (Kow) Awfaat, (Labo) Daawaruu, (Saddex) Arbiinii, (Afar) Hadyah, (Shan) Sharkhah, (Lix) Baalii iyo (Toddoba) Daawarah. Dawladdaasi markay krishtaanka noqotay waxay gaashaanbuur la noqotay dawladaha krishtaanka ah ee qaaradda yurub ku yaalla, ayada dawrkeeduna wuxuu noqday, ilaa maantana yahay, la dagaallanka Diinta Islaamka iyo Muslimiintaba, Kacbadana, siduu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay waxaa aakhiru zamanka dumin doona nin ayaga amxaarada ah ka dhashay. Kaddibna boqortooyadaasi way fidday, oo ay boqortooyooyinkii kale iyo qawmiyadihii kale leqday. Markay Muhaajiriinta asxaabta Nabi Muxmnmad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arligaas imaanayaan, si day rag muslimiin ah ee dalkaas u dhashay ii sheegeen, magaalo madaxda boqortooyadaasi uuna Al Najaashiyyu degganaa waxay ahayd magaalada la yiraahdo Cadigrat, oo ilaa dhawr kiiloomitir u jirta Akasuum, buuraha dushoodana ku taalla. Dadka Muslimiinta ah ee dawladdaas degganaana waxaa la oran jiray **Jabarti**, sidaan

annagu dadkaan muslinka ahayn **gaalo** u niraahno oo kale. Jabarti waxaa loogu bixiyay inay degi jireen magaalo arligaas ku taalla oo Jabarta la oran jiray, kuna tiillay Bariga gobolka Shoa, kaddibna **Harar** loo bixiyay, siduu Mordechai Abir ugu wariyay Ethiopia and the Red Sea boogga kow iyo toban; J. Spencer Trimingham sidaas ayuu isaguna ku wariyay kitaabkiisa Islam in Ethiopia, oo lagu daabacay Frank Cass & CO. Ltd. Oxford University Press ee dalka Ingiriiska, 1965 bogga boqol iyo konton, uuna ku yiri: " ... the Muslim historians spoke of the territory of Zaila as the land of Jabarta; then the term was extended to all the Muslim Kingdoms of Southern Ethiopia, and, finally to all Ethiopian Muslims. It must be clearly understood that in no sense is it the ethnic name of a people", oo macneheedu yahay: "Mu' arrikhiinta muslimiinta ahi waxay ku tilmaameen beledka Zaylac inuu yahay beledka ama waddanka Jabarta; Markaas kaddib ayaa eraygaas waxaa loogu yeeri jiray muslimiinta Boqortootyinka ku yiillay koofurta Ethiopia, kaddibna looguba yeeri jiray muslimiinta Ethiopia oo idil. Waa in si caddaan ah loo gartaa inuusan eraygaani sina u ahayn magaca qabiil.". Sidoo kale fiiri Enrico Cerulli "Gli Emiri di Harar dal secolo XVI alla conquista Egiziana (1875)", laguna daabacay Roma-La Libreria dello Stato-1942-XX, kuna dhigan afka Carabiga iyo talyaanigaba, kana koobanba kow ama dhawr iyo labaatan warqadood. Afka Dawladda Islaamka ah ee Hararna Guddoomiyaha Gobolka waxaa la oran jiray **Garaad**, kan Degmadana **Malaaq**.

Al Sayuudhii wuxuu kiutaabkiisa Rafcu Sha'ni Al Xubshaani, oo Jaamacadda Al Azhar ay daabacday, uuna hubiyey Dr. Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl oo macallin ka ah Jaamacadda Al Azhar ee Qaahira, bogga kow iyo lixdanaad wuxuu Samurah bin Jundub ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Saam abuu Al Carabi wa Yaafith abuu Al Rruumi wa Xaam abuu Al Xabash."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Saam (waa ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay Carabta, Yaafith (ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay roomaanka, Xaamna (ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay xabshada." Waxaa wariyay Al Tarmathii, yirina waa Xadiith Xasan Waxaa kaloo wariyay Ibnu Sacad, ibnu Kathiir oo Al Bidaayah iyo Nihaayah ku wariyay, iyo Imaam Axmad iyo Al Dhabarii iyo kuwo kaleba. Al Sayuudhii wuxuu kaloo bogga afar iyo lixnadaad ee isla kitaabkiisaas Abuu Hurayrah uga wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Walada Nuuxun Saam wa Xaam wa Yaafith. Fa walada Saam Al Carab wa Faaris wa Al Ruum wa al khayru fiihim. Wa walada Yaafith Ya'juuj wa Ma'juuj wa al turka wa al Saqaalibata wa laa khayra fiihim. Wa walada li Xaamin Al Qibdhu wa al Barbaru wa Al Suudaanu."** Xadiithka maenihiisu waxaa weeye: "Nuux wuxuu dhalay Saam iyo Xaam iyo Yaafith. Markaasuu Saam wuxuu dhalay Carabta iyo Faaris (oo ah iiraaniyiinta) iyo Roomaanka, khayrkuna ayaguu ku jiraa. Yaafithna wuxuu dhalay Ya'juuj iyo Ma'juuj iyo Turkiga iyo Al Saqaalibah, khayrna ma laha, Xaamna waxaa loo dhalay Al Qibdhu (oo ah dadka Masar degah) iyo Barbarta iyo dadka madow." Xadiithka waxaa kaloo uu Ibnu Xajar Al Casqalaanii ku wariyay Fatxu Al Baarii, kaddibna ku daray oo yiri: "silsiladdiisana taag darro ayaa ku sugan." Waxaa kaloo wariyay ibnu Kathiir (Al Bidaayah wa al Nihaayah).

Al Mascuudii wuxuu Muruuju Al Thahab ku sheegay inayan dadka wax baara isku khilaafsanyihiin inuu Yaafith ina Nuux yahay kan ugu yar ee wiilasha Nuux, iyo inay dhashiisa ka mid yihiin Al Afranjah (oo ah dadka Yurub degah qaarkood) iyo al Saqaalibah iyo Al Nuukubard iyo Al Ashbaan iyo Ya'juuj iyo Ma'juuj iyo Turkiga iyo Al Khazar (oo ah dadka degah dhulka Bari iyo Waqooyi ka xigah dalka Turgiga oo buuraaleyda Al Qawqaaz kasii dambeeya iyo Badda Caspian, ayna magaalo madax u ahaan jirtay Itiil, lehnaq indhaha yar sida shiinaha, siduu Lisaanu Al Carab u

yiri). Al Saqaalibah waa dhasha Maar bin Yaafith bin Nuux isagayna ka farcameen dhammaan jinsiga Saqaalibada, waxayna degaan Al Judaa ilaa ay kala xiriiraan Al Maghrib, waana jinsiyo kala duwan oo ay dagaallo dhex yaallaan, qaarkoodna ay Nasraaniyada ka diin yeeshaan, qaaraana ayan Kitaab lahayn." (Muruuju Al Thahab mujalladka labaad bogga laba iyo soddon ilaa afar iyo soddon)

Ibnu Kathiir wuxuu Al Bidaayah wa Al Nihaayah (mujalladka labaad bogga boqol iyo toban) ku yiri: "Yaafith ayaa dhalay Turkiga. Ya'juuj iyo Ma'juuj waa qayb turkiga ka mid ah waana dadka la yiraahdo Maghuul (oo hadda la yiraahdo Mongol oo shiinaha la dariska ah, ama kaba tirsan). Turkigana waxaa magacoodaan ah turki loogu bixiyay ayadoo markuu Thuu Al Qarnayn biyo xireenka dhisay, uuna Ya'juuj iyo M'ajuuj uu gadaashiisa ku takooray waxaa ka hartay koox aan fasaadkooda oo kale gaarin, markaasay ka tageen, markaasaa turki lagu magacaabay, oo ah kuwa laga tegey."

Quudh bin Xaam wuxuu guursaday gabadha la yiraahdo Bukht uuna dhalay Bitaawiil, markaasey waxay u dhashay wiil uu u bixiyay Qibdh, oo ay Masaaridu ka farcamdeen. Wiilka kale ee Xaam, magaciisuna yahay Kancaan wuxuu guursaday Bukht ina Bitaawiil walaasheed magaceedu yahay Artiil, markaasey waxay u dhashay wiilasha ay dadka madow oo idil ku abtirsadaan, ayna ka mkid yihiin Nuubah (oo ah aabaha dadka Suudaan degah oo Nuubiyiinta la yiraahdo) ihyo Fazaan.

"Erayga Al Xabashah", ayuu Dr. Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl yiri, "waa eray Carabi ah oo macnihiisu yahay jinsiyada isku darsamay." Taasi waxaa weeye dad kala qabiil iyo jinsi ah oo dal ku wada nool oo sidaas isugu darsamay. Dr. Muxammad wuxuu yiri: "Wax ay bilaabatay in dalkaas magacaas loo bixiyay oo loogu yeeri jiray tan iyo waagay bilaabatay inay si is daba joog dalkaas ugu guuraan dad Carab ah oo ka haajaray Jaziiradda Carabta guud ahaan, gaar ahaanna Yaman ka guuray qarniga tobanaad (waa kun sano ka hor) dhalashada Nabi Ciise. Bilawga arrinkana waxaa magacaas loogu yeeli jiray Carabtaas guurtay. Markayse dalkaas ku bateen, wax ku oolnimadooduna ay kororтay, ayna ka kor mareen oo ay ka gacan sarraadeen dadkii arligaas hore u degganaa, ayaa erayga "Al Xabashah" waxaa loo bixiyay gobolkaas oo idil. Sidaas ayay dadkii arligaas u hijrooday oo asalkooduna Saam ku abtirsan jiray waxay ku qasmeen oo ay is dhex galeen kuwii Xaam ku abtirsanayey. Arliga Xabashadana waxaa loo yaqaanna waxa la yiraahdo "Beesha Geeska Afrika."

Al Sayuudhii wuxuu boogga saddex boqol iyo shan ee isla kitaabkiisa ku dhigay: "Waxaa arliga Xabashada Nabiga, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, uga yimid oo asxaabtiisa ka mid noqday (ragga la kala yiraahdo) Thuu Mikhbar, iyo Thuu Duujan iyo Thuu Manaaxib waxaa kaloo la yiraahdaa Thuu Mataadix. Markaasuu Nabigu, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Intasabuu",** oo macneheedu yahay: "Nasabkiinna sheega, ama abtirsada". Markaasuu Thuu Mihdam wuxuu gabay ku yiri:

1. Zamankii Thuu Al Qarnayn seefeheennu waxay ahaayeen
Kuwo a fbadan birta xooga lehna kala dhanbala
2. Huudna (waa Nabi Huud) waa aabeheen, aabaha dadkoo idil Zamanka Al
Axqaaf (kuna xusan Suuratu Al Axqaat), xoog iyo ammaanba
3. Qofka aabihiis ka indha la' oo moog yeelkiise annagu
Waxaan leenahay aabe cizzi iyo xusid leh.

Intaas kore waa warka Al Sayuudhii. Dr Muxammad oo baytka labaad ee qasiidadaa sharxayana wuxuu yiri: "Gabaygaanna wuxuu ayyidayaa abtirsiga ay qabaa'ilka amxaarada ee arliga xabashada ay ku abtirsadaan qabiilada Ximyar Al Qaxdhaaniyyah (oo Qaxdhaan ku abtirsata) oo degtah koofurta Jaziirada Carabta,

ayadoo ay Boqortooyada Ximyar koobi jirtay arliga xabashada marka Baabu Al Mandab tillaabo. Taasina waxay noo cilleyneysaa oo ay noo sheegeysaa sababta xiriirka dhabiiciga ah ee xoogga badan ee ka dhexeeya Jaziirada Carabta iyo xabshada, iyo xiriirka adag oo faca wayn oo tan iyo waayihii hore iyo burburka biyo xireenka Ma'rib. Al Xaafith ibnu Xajar Al Qasdhalaanii wuxuu kitaabkiisa taraajimta ah ee Tahthiibu Al Tahthiib markuu ka warramayo ninka xabashada u dhashay oo magaciisu yahay Mamdhuur abuu Salaam Al Xabashii yiri: "Waxaa al Xabash loo yiri ayadoo loo nisbeeyey jilib qabiil Ximyar ka mid ah" (Ximyar waa qabiilka Carbeed oo Yaman degah). Wuxuu kaloo ibnu Xajar yiri: "Abuu Nasr ibnu Maakuulaa wuxuu yiri: "uma uusan dhalan (arliga) al xabashah, waxaase loo nisbeeyey jilib ka mid ah Ximyar; waxaana sidaas xusay ibnu Maciin iyo abuu Cubayd." Sidaas ayaa waxaa ku jira qabiil Carbeed oo Xabash la yiraahdo. Sidoo kale Al Sayuudhii markuu kitaabkiisa Rafcu Sha'ni Al Xubshaani, bogga saddex boqol iyo saddex iyo afartan ka warramayo isla ninkaas Mamdhuur Abuu Salaam Al Xabashii wuxuu yiri: "Kama uusan dhalan Al Xabashah (oo Afrika degah) waxaase loo nisbeeyey Xabsh oo ah badhn (jilib, ama laan) ka mid ah Ximyar.”

Hijrada koowaad ee Al Xabashah

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu arkay waxa dhibaato ah iyo imtixaan asxaabtiisa ku dhacaya, iyo siduu isaga laftiisu u caafimaad qabo, sababtuna ay tahay makaanka uu Ilaahay agtiisa ku leeyahay iyo ilaalinta adeerkiis Abuu Dhaalib, isaguna uusan awoodin inuu waxaas balaayo ah oo ay ku jiraan ka difaaco, ayuu wuxuu ku yiri: **"Law kharajtum ilaa ardi al xabashah, fa inna fiihaa malikun laa yuthlamu cindahu axadun, wa hiya ardu sidqin, xattaa yajcala Allaahu lakum farajan mimmaa antum fiihi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaad aadaan arliga xabashada, halkaasoo uu madax u yahay boqor aan agtiisa axadna lagu dulmin, waana arli fiican, halkaasna ku sugnaada ilaa uu Ilaahay xaaladdaan aad ku sugan tihiin faraj idiinka furo." Markaasey muslimiinta asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ahi u bexeen arliga xabashada, cabsi ay ka qabaan in hadday Makkah sii joogaan Diintooda laga fitneeyo oo laga saaro, iyo carar ay Diintooda la cararayaan. Taasi waxay ahayd hijradii ugu horreysey ee islaamka." Hijraduna waa in dalkaaga laga tago oo laga guuro oo dal kale loo guuro, oo halkaas nolol cusub laga bilaabo, mudana lagu sugnaado in kastaba ha le'ekaatee.

Dekadday ka dhoofeen muhaajiriintu

Muhaajiriintu waxay si qarsoodi ah uga bexeen Makkah, ayagoo intooda badani lugeynayaan, in yarna ay daabad saaran yihiin, siduu Al Zarqaani kutubbada Xadiithka uga wariyay, waxayna yimaadeen dekaddii waagaas ee Makkah, magaceeduna ahaa Al Shucaybah, oo koofur ka xigtay Jeddah. Halkaasey waxay ka heleen laba doon oo ganacsi u socday. Markaasey waxay ku ijaarteen nus Diinaar oo lagu qaaday. Al Shucaybah waxaa la yiraahdaa waadiga bartaas ku taalla. Qurayshi markay bixiddooda ka war heshay ayay raadkooda soo raaceen si ay u celiyaan, waxayse dekadda yimaadeen ayagoo dhoofay, xamdiga Ilaahay.

Asxaabta Hijrada koowaad hijrooday

Kuwa ugu horreeyey oo muslimiinta ka mid ah oo hijrooday waxay ahaayeen:

Reer Banii Umayyah bin Cabdu Shams

(Kow) Cuthmaan bin Caffaan bin Abii Al Caas bin Umayyah bin Cabdi Shams bin Cabdi Manaaf bin Qusayy bin Kilaab bin Murrah bin Kacb Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr ayna la socoto haweentiisa Ruqayyah gabadha uu dhalay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Reer Banii Cabdi Shams bin Cabdi Manaaf

(Labo) Abuu Xuthayfah bin Cutbah bin Rabiicah bin Cabdi Shams ayna la socoto haweentiisa Sahlah bintu Suhayl bin Camr, una dhalatay Qurayshta Banii Caamir bin Lu'ayy, uguna dhashay arliga xabashada Muxammad bin Abii Xuthayfah.

Reer Banii Asad bin Cabdu Al Cuzzaa bin Qusayy

(Saddex) Al Zubayru bin Al Cawwaamu bin Khuwaylid bin Asad

Reer Banii Cabdu Al Ddaar bin Qusayy

(Afar) Muscab bin Cumayr bin Haashim bin Cabdi Manaaf bin Cabdu Al Ddaar.

Reef Banii Zuhrah bin Kilaab

(Shan) Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf bin Cabdi Cawf bin Cabdu Al Xaarith bin Zuhrah.

Reer Banii Makhzuum bin Yaqthah bin Murrah

(lix) Abuu Salamah bin Cabdu Al Asad bin Hilaal bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum, ayna la socoto haweentiisa Ummu Salamah bintu Abii Umayyah bin Al Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum.

Reer Banii Jumax bin Camr bin Husays bin Kacb

(Toddoba) Cuthmaan bin Mathcuun bin Xabiib bin Wahb bin Xuthaafah bin Jumax.

Reer Banii Cadiyy bin Kacb

(Sideed) Caamir bin Rabiicah, xaliifka Aali Al Khadh-dhaab, una dhashay Canz bin Waa'il, ayna la socoto haweentiisa Laylaa bintu Abii Xathmah bin Xuthayfah bin Ghaanim bin Caamir bin Cabdu Allaahi bin Cawfbin Cubayd bin Cuwayj bin Cadiyy bin Kacb.

Reer Banii Caamir bin Lu'ayy

(Sagaal) Abuu Sabrah bin Abii Ruhm bin Cabdu Al Cuzzaa bin Abii Qays bin Cabdu Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir. Waxaa kaloo la yiraahdaa bal waa Abuu Xaadhib bin Camr bin Cabdu Shams bin Cabdu Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir. Waxaana la yiraahdaa isagaa ugu horreyey qof yimaada.

Reer Banii Al Xaarith bin Fihr

(Toban) Suhayl ibnu Baydaa'a, ahna Suhayl bin Wahb bin Rabiicah bin Hilaal bin Uhayb bin Dabbah bin Al Xaarith.

Tobankaas nin ayaa ahaa kuwa muslimiinta ugu horreeyey oo arliga xabashada u baxa, sida isoo gaartay.
Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waxaana madax u ahaa Cuthmaan bin Mathcuun, sida uu nin caalin ahi ii sheegay."

Taariikhda Hijrada koowaad

Muhaajiriintu waxay dekaddaas ka dhoofeen habbenka ay taariikhdu tahay nuska bisha Rajab ee sanadka shanaad ee Nabinnimada, ayadoo ay habeenkaas dayax cadde tahay, waxayna arliga xaabshada joogeen bisha Shacbaan iyo bisha Ramadaan. Bisha Ramadaan ayayna ahayd warka dhacdada sujuudda, markaasey waxay Makkah kusoo noqdeen bisha Shawwaal ee sanadkaas shanaad ee Nabinnimada.

Hijrada labaad ee Al Xabashah

Ibnu lsxaaq wuxuu yiri: "Kaddibna waxaa baxay Jacfar bin Abii Dhaalib, Allaha raalli ka noqdee. Kaddibna muslimiintu si isku xiriirsan oo isdabajoog ah ayay u bexeen, ilaa ay arligaas xabashada isugu yimaadeen, ayna u degeen. Waxaa raggaas ka mid ahaa mid tegey isagoo ay haweentiisu la socoto, iyo mid naftiisa la tegey oo aan haweentiisa la socon. Muhaajiriintu waxay kala ahaayeen sidatan:

Muhaajiriinta reer Banii Haashim iyo Banii Umayyah bin Cabdu Shams bin Cabdi Manaaf

Muhaajiriinta reer Banii Haashim bin Cabdi Manaaf bin Qusayy bin Kilaab bin Murrah bin Kacb bin Lu'ayy bin Ghaalib bin Fihr waxaa ka mid ahaa:
(Kow) Jacfar bin Abii Dhaalib bin Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim, ayna wehliso haweentiisa Asmaa'u bintu Cumays bin Al Nucmaanu bin Kacb bin Maalik bin Quxaafah bin Khathcam, oo arliga xabashada ugu dhashay Cabdu Allaahi bin Jacfar. Waa nin.
(labo) Cuthmaan bin Caffaan bin Abii Al Caas bin Umayyah bin Cabdi Shams, ayna wehliso haweentiisa Ruqayyah bintu Rasuuli Allaahi, Sallaa Allaahu Calyhi Wasallam.
(Saddex) Camr bin Saciid bin Al Caas bin Umayyah, ayna la socoto haweentiisa Faadhimah bintu Safwaan bin Umayyah bin Muxarrath bin Xamali bin Shiqqi bin Raqabah bin Makhdij Al Kinaanii, iyo walaalkiis: (Afar) Khaalid bin Saciid bin Caas bin Umayyah, ayna la socoto haweentiisa Umaynatu bintu Khalaf bin Sacd bin Caamir bin Baydah bin Subayc bin Juthumah bin Sacd bin Mulayx bin Camr oo reer Khuzaacah u dhashay."
Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waxaa la yiraahdaa Humaynah bintu Khalaf."
Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxay arliga xabashada ugu dhashay Saciid bin Khaalid iyo Amata bintu Khaalid. Markaasaa kaddib Amata waxaa guursaday Al Zubayru bin Al Cawwaamu, waxayna u dhashay Camr bin Al Zubayr iyo Khaalid bin Al Zubayr.

Muhaajiriinta reer Banii Asad iyo reer Banii Cabdu Shams

Reerahaanna ayna wehilyaan xulafadooda reer Banii Asad bin Khuzaymah waxay

ahaayeen:
(Shan) Cabdu Allaahi bin Jaxsh bin Ri'aab bin Yacmar bin Sabirah bin Murrah bin Kabiir bin Ghanm bin Duudaan bin Asad, iyo walaalkiis: (Lix) Cubaydu Allaahi bin Jaxsh, ayna la socoto haweentiisa Ummu Xabiibah bin Abii Sufyaan bin Xarb bin Umayyah. (Toddoba) Qays bin Cabdu Allaahi , ahna nin u dhashay reer Banii Asad bin Khuzaymah, ayna la socoto haweentiisa Barakah bintu Yasaar, mawladda Abuu Sufyaan bin Xarb bin Umayyah. (Sideed) Mucayqiib bin Abii Faadhimah.
Intaasna waa qoyska Aalu Saciid bin Al Caas, waana toddoba qof."
Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Mucayqiib wuxuu u dhashay qabiilka Daws." Dawsna Yaman ayuu degaa, oo Abuu Hurayrah ayaa ka dhashay.
Ibnu Isxaaq wuxuu yiri:

"Reer Banii Cabdi Shams bin Cabdi Manaaf waxaa ka mid ahaa:

(Sagaal) Abuu Xuthayfah bin Cutbah bin Rabiicah bin Cabdi Shams.
(Toban) Abuu Muusaa Al Ashcariyyi, magaciisuna uu yahay Cabdu Allaahi bin Qays, oo xaliif la ahaa qoyska Aali Cutbah bin Rabiicah. Waana laba nin.

Muhaajiriinta reer Banii Nawfal iyo reer Banii Asad

Reer Banii Nawfal bin Cabdi Shams waxaa ka mid ahaa:
(Kow iyo toban) Cutbah bin Ghazwaan bin Jaabir bin Wahb bin Nasiib bin Maalik bin Al Xaal'ith bin Maazin bin Mansuur bin Cikrimah bin Khasafah bin Qays bin Caylaan, oo ayaga xaliifkooda ah. Waana nin.
Reer Banii Asad bin Cabdu Al Cuzzaa bin Qusayy waxaa ka mid ahaa (Labo iyo toban) Al Zubayru bin Al Cawwaamu bin Khuwaylid bin Asad. (Saddex iyo toban) Al Aswadu bin Nawfal bin Khuwaylid bin Asad. (Afar iyo toban) Yaziid bin Zamcah bin Al Aswad bin Al Mudhalib bin Asad. (Shan iyo toban) Camr bin Umayyah bin Al Xaarith bin Asad. Waana afar nin.

Muhaajiriinta reer Banii Cabdi bin Qusayy iyo reer Banii Cabdu Al Ddaar bin Qusayy

Reer Banii Cabdi bin Qusayy waxaa ka mid ahaa:
(Lix iyo toban) Dhulayb bin Cumayr bin Wahb bin Abii Kathiir bin Cabdi bin Qusayy. Waana nin.
Reer Banii Cabdu Al Ddaar bin Qusayy waxaa ka mid ahaa
(Toddoba iyo toban) Muscab bin Cumayr bin Haashim bin Cabdi Manaaf bin Cabdu Al Ddaar. (Sideed iyo toban) Suwaydh bin Sacd bin Xarmalah bin Maalik bin Cumaylah bin Al Sabaaq bin Cabdu Al Ddaar. (Sagaal iyo toban) Jahm bin Qays bin Cabdi Shuraxbiil bin Haashim bin Uqayshi bin Caamir bin Baydah bin Subayc bin Juthumah bin Sacd bin Mulayx bin Camr oo Khuzaacah u dhashay, iyo labadiisa wiil Camr bin Jahm iyo Khuzaymah bin Jahm. (Labaatan) Abuu Al Ruum bin Cumayr bin Haashim bin Cabdi Manaafbin Cabdu Al Ddaar. (Kow iyo labaatan) Firaas bin Al Nnadr bin Al Xaarith bin Kaladah bin Calqamah bin Cabdi Manaaf bin Cabdu Al Ddaar. Waana shan nin.

Muhaajiriinta reer Banii Zuhrah iyo Banii Huthayl iyo Bahraa'a Reer Banii Zuhrah bin Kilaab waxaa ka mid ahaa:

(Labo iyo labaatan) Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf bin Cabdi Cawf bin Cabdu Al

Xaarith bin Zuhrah. (Saddex iyo labaatan) Caamir bin Abii Waqqaas, Abuu Waqqaasna waa Maalik bin Uhayb bin Cabdu Manaaf bin Zuhrah. (Afar iyo labaatan) Al Mudh-dhalib bin Azhar bin Cabdu Cawf bin Cabdu Al Xaarith bin Zuhrah, ayna la socoto haweentiisa Ramlah bintu Abii Cawf bin Dubayrah bin Sucayd bin Sacd bin Sahm, waxayna arliga xabashada ugu dhashay Cabdu Allaahi bin Al Mudh-dhalib. Xulafadooda Huthayl ahna waxaa ka mid ahaa: (Shan iyo labaatan) Cabdu Allaahi bin Mascuud bin Al Xaarith bin Shamkh bin Makhzuum bin Saahilah bin Kaahil bin Al Xaarith bin Tamiim bin Sacd bin Huthayl, iyo walaalkiis: (Lix iyo labaatan) Cutbah bin Mascuud.

Qabiilka Bahraa'ana waxaa ka mid ahaa: (Toddoba iyo labaatan) Al Miqdaadu bin Camr bin Thaclabah bin Maalik bin Rabiicah bin Thumaamah bin Madhruud bin Camr bin Sacd bin Zuhayr bin Lu'ayy bin Thaclabah bin Maalik bin Al Sh-Shariid bin Abii Ahwaz bin Abii Faa'ish bin Draym bin Al Qayn bin Ahwad bin Barhraa'a bin Camr bin Al Xaaf bin Qudaacah."

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waxaana la yiraahdaa Hazl bin Faas bin Tharr iyo Dahiir bin Thawr."

Ibnu Isxaaq wuxu yiri: "Waxaana la oran jiray Al Miqdaadu bin Al Aswadu bin Cabdi Yaguuth bin Wahb bin Cabdu Manaaf bin Zuhrah, loona yiri inuu ka wiil yeeshay (Al Aswadu) islaamka hortiis, uuna axdi iyo xilfi la dhigtay. Waana lix nin.

Muhaajiriinta reer Banii Taym iyo Banuu Makhzuum

Reer Banii Taym bin Murrah waxaa ka mid ahaa:

(Sideed iyo labaatan) Al Xaarithu bin Khaalid bin Sakhr bin Caamir bin Camr bin Kacb bin Sacd bin Taym, ayna la socoto haweentiisa Raydhah bintu Al Xaarith bin Jabalah bin Caamir bin Kacb bin Sacd bin Taym, waxayna arliga xabashada ugu dhashay Muusaa bin Al Xaarith iyo Caa'ishah bintu Al Xaarith iyo Zaynab bintu Al Xaarith iyo Faadhimah bintu Al Xaarith. (Sagaal iyo labaatan) Camr bin Cuthmaan bin Camr bin Kacb bin Sacd bin Taym. Waana laba nin.

Reer Banii Makhzuum bin Yaqthah bin Murrah waxaa ka mid ahaa

(Soddon) Abuu Salamah bin Cabdu Al Asad bin Hilaal bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum, ayna la socoto haweentiisa Ummu Salamah bintu Abii Umayyah bin Al Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum, waxayna arliga xabashada ugu dhashay Zaynab bintu Abii Salamah. Abuu Salamah magaciisuna waxaa weeye Cabdu Allaahi, Ummu Salamah magaceeduna waa Hind. (Kow iyo soddon) Shammaas bin Cuthmaan bin Al Sh-shariid bin Suwayd bin Harmiyyi bin Caamir bin Makhzuum."

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Shammaas magaciisu waa Cuthmaan, waxaana Shammaas loogu bixiyey ayadoo uu wadaad krishtaan ahi Makkah soo galay waqtiga jaahiliyada islaamka ka horreysey, wuxuuna ahaa nin quruxsan. Markaasuu dadku quruxdiisa u bogay oo la yaabay . Markaasuu Cutbah bin Rabiicah, ahaana shammaas abtigiis, wuxuu yiri: "Anigaa idiin keenaya Shammaas isaga ka qurxoon." Markaasuu wuxuu keenay wiilka ay walaashiis dhashay Cuthmaan bin Cuthmaan, oo markaas loo bixiyey Shammaas. Waxaana wariyay Ibnu Shihaab iyo ghayrkiisba. Shammaas macnihiisuna waxaa weeyey "wadaad krishtaan ah." Ninka qurxoonna waa la yiraahdaa.

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "iyo:

(Labo iyo soddon) Habbaar bin Sufyaan bin Cabdu Al Asad bin Hilaal bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum, iyo walaalkiis: (Saddex iyo soddon) Cabdu Allaahi bin Sufyaan. (Afar iyo soddon) Hishaam bin Abii Xuthayfah bin Al

Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum. (shan iyo soddon) Salamah bin Hishaam bin Al Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum. (Lix iyo soddon) Cayyaash bin Abii Rabiicah bin Al Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum. Muhaajiriinta xulafada reer Banii Makhzuum iyo kuwa reer Banii Jumax waxaa ka mid ahaa (Toddoba iyo Soddon) Mucattib bin Cawf bin Caamir bin Al Fadl bin Cafiif bin Kulayb Xabshiyyah ibnu Saluul bin Kacb bin Camr oo Khuzaacah u dhashay, waana isla midka la yiraahdo Cayhaamah. Waana sideed qof."

lbnu Hishaam wuxuu yiri: "Waxaana la yiraahdaa Xubshiyyah ibnu Saluul, waana midka la yiraahdo Mucattib bin Xamraa'a."

Ibnu Isxaaq, wuxuu yiri:

"Reer Banii Jumax bin Camr bin Husays bin Kacb waxaa ka mid ahaa:

(Sideed iyo soddon) Cuthmaan bin Mathcuun bin Xabiib bin Wahb bin Xuthaafah bin Jumax iyo wiilkiisa Al Saa'ibnu bin Cuthmaan, iyo walaalihiis: (Sagaal iyo soddon) Qudaamah bin Mathcuun, iyo: (Afartan) Cabdu Allaahi bin Mathcuun. (Kow iyo afartan) Xaadhib bin Al Xaarith bin Macmar bin Xabiib bin Wahb bin Xuthaafah bin Jumax, ayna la socoto haweentiisa Faadhimah bintu Al Mujallil bin Cabdu Allaahi bin Abii Qays bin Cabdu Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir, iyo labadiisa wiil Muxammad bin Xaadhib iyo Al Xaarithu bin Xaadhib, ayna labadoodaba u dhashay ina Al Mujallil, iyo walaalkiis: (Labo iyo afartan) Xadh-dhaab bin Al Xaarith, ayna la socoto haweentiisa Fukayhah bintu Yasaar. (Saddex iyo afartan) Sufyaan bin Macmar bin Xabiib bin Wahb bin Xuthaafah bin Jumax, ayna wehliyaan labadiisa wiil Jaabir bin Sufyaan iyo Junaadah bin Sufyaan, ayna la socoto haweentiisa Xasanah oo labadaas wiilba u dhashay, iyo wiil ay hooyadood nin kale u dhashay oo ah: (Afar iyo afartan) Shuraxbiil ibnu Xasanah, una dhashay reer Al Ghawth."

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waa Shuraxbiil bin Cabdu Allaahi oo reer Al Ghawth bin Mun-ah u dhashay, walaalka Tamiim bin Murrah."

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri:

Muhaajiriinta reer Bani Sahm iyo Banii Cadiyy iyo Banii Caamir

(Shan iyo afartan) Cuthmaan bin Rabiicah bin Uhbaan bin Wahba bin Xuthayfah. Waana kow iyo toban nin. Reer Banii Sahm bin Camr bin Husays bin Kacb waxaa ka mid ahaa: (Lix iyo afartan) Khunays bin Xuthaafah bin Qays bin Cadiyyi bin Sacd bin Sahm. (Toddoba iyo afartan) Cabdu Allaahi bin Al Xaarith bin Qays bin Cadiyyi bin Sacd bin Sahl. (Sideed iyo afartan) Hishaam bin Al Caas bin Waa'il bin Sacd bin Sahm."

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waa Al Cas bin Waa'il bin Haashim bin Sacd bin Sahm."

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: iyo (Sagaal iyo afartan) Qays bin Xuthaafah bin Qays bin Cadiyy bin Sacd bin Sahm. (Konton) Abuu Qays bin Al Xaarith bin Qays bin Xuthaafah bin Qays bin Cadiyy bin Sacd bin Sahm. (Kow iyo konton) Cabdu Allaahi bin Xuthaafah bin Qays bin Cadiyy bin Sacd bin Sahm. (Labo iyo konton) Al Xaarith bin Al Xaarith bin Qays bin Cadiyy bin Sacd bin Sahm. (Saddex iyo konton) Macmar bin Al Xaarith bin Qays bin Cadiyy bin Sacd bin Sahm. (Afar iyo konton) Bishr bin Al Xaarith bin Qays bin Cadiyy bin Sacd bin Sahm iyo walaalkiis ay hooyadiis dhashay oo reer Banii Tamiim ah, lana yiraahdo (Shan iyo konton) Saciid bin Camr. (Lix iyo konton) Saciid bin Al Xaarith bin Qays bin Cadiyy bin Sacd bin Sahm.

(Toddoba iyo konton) Al Saa'ibnu bin Al Xaarith bin Qays bin Cadiyy bin Sacd bin Sahm. (Sideed iyo konton) Cumayr bin Ri'aab bin Xuthayfah bin Muhash-shim bin Sacd bin Sahm. (Sagaal iyo konton) Maxmiyah bin Al Jazaa'a, oo xaliifkooda ahaa, una dhashay reer Banii Zubayd. Waana afar iyo toban nin.

Reer Banii Cadiyy bin Kacb waxaa ka mid ahaa

(Lixdan) Macmar bin Cabdu Allaahi bin NadIah bin Cabdu Al Cuzzaa bin Xurthaan bin Cawf bin Cubaydah bin Cuwayj bin Cadiyy. (Kow iyo lixdan) Curwah bin Cabdu Al Cuzzaa bin Xurthaan bin Cawf bin Cubayd bin Cuwayj bin Cadiyy. (Labo iyo lixdan) Cadiyy bin Nadlah bin Cabdu Al Cuzzaa bin Xurthaan bin Cawf bin Cubayd bin Cuwayj bin Cadiyy, iyo walaalkiis (Saddex iyo lixdan) Al Nucmaanu bin Cadiyy. (Afar iyo lixdan) Caamir bin Rabiicah oo qoyska Aali Al Khadh-dhaab xaliif la ah, una dhashay Canzi bin Waa'il, ayna la socoto haweentiisa Laylaa bintu Abii Xathmah bin Ghaanim. Waana shan nin.

Qurayshta reer Banii Caamir bin Lu'ayy waxaa ka mid ah

(Shan iyo lixdan) Abuu Sabrah bin Abii Ruhm bin Cabdu Al Cuzzaa bin Abii Qays bin Cabdu Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir, ayna la socoto haweentiisa Ummu Kulthuum bintu Suhayl bin Camr bin Cabdu Shams bin Cabdu Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir. (Lix iyo lixdan) Cabdu Allaahi bin Makhramah bin Cabdu Al Cuzzaa bin Abii Qays bin Cabdu Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir. (Toddoba iyo lixdan) Cabdu Allaahi bin Suhayl bin Camr bin Cabdi Shams bin Cabdu Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir. (Sideed iyo lixdan) Saliidh bin Camr bin Cabdu Shams bin Cabdu Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir, iyo walaalkiis (Sagaal iyo lixdan) Al Ssakraanu bin Camr, ayna la socoto haweentiisa Sawdah bintu Zamcah bin Qays bin Cabdu Shams bin Cabdu Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir. (Toddobaatan) Maalik bin Zamcah bin Qays bin Cabdu Shams bin Cabdu Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir, ayna la socoto haweentiisa Camrah bintu Al Ssacdiyyi bin Waqdaan bin Cabdi Shams bin Cabdu Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir. (Kow iyo toddobaatan) Xaadhib bin Camr bin Cabdi Shams bin Cabdu Wudd bin Nasr bin Maalik bin Xisl bin Caamir. (Labo iyo toddobaatan) Sacd bin Khawlah, oo xaliifkooda ah. Waana sideed nafar."
lbnu Hishaam wuxuu yiri: "Sacd bin Khawlah waa reer Yaman."

Qurayshta reer Banii Al Xaarith

lbnu lsxaaq wuxuu yiri: "Reer Banii Al Xaarith bin Fihr waxaa ka mid ahaa:
(Saddex iyo toddobaatan) Abuu Cubaydah bin Al Jarraax, ahna Caamir bin Cabdu Allaahi bin Al Jarraax bin Hilaal bin Uhayb bin Dabbah bin Al Xaarith bin Fihr. (Afar iyo toddobaatan) Suhayl ibnu Baydaa'a, waana Suhayl bin Wahb bin Rabiicah bin Hilaal bin Uhayb bin Dabbah bin Al Xaarith, waxaase nasabkiisa ka xoog batay hooyadiis, ayaadana loo nisbeeyaa, ayaduna waa Dacd bintu Jaxdam bin Unlayyah bin Tharibi bin Al Xaarith bin Fihr, waxaana loogu yeeri jiray Baydaa'a, oo ah caddey. (Shan iyo toddobaatan) Camr bin Abii Sarx bin Rabiicah bin Hilaal bin Uhayb bin Dabbah bin Al Xaarith. (Lix iyo toddobaatan) Ciyaad bin Zuhayr bin Abii Shaddaad bin Rabiicah bin Hilaal bin Uhayb bin Dabbah bin Al Xaarith. Waxaana kaloo la yiraahdaa bal waa Rabiicah bin Hilaal bin Maalik bin Dabbah bin Al Xaarith. (Toddoba iyo toddobaatan) Camr bin Al Xaarith bin Zuhayr bin Abii Shaddaad bin

Rabiicah bin Hilaal bin Maalik bin Dabbah bin Al Xaarith. (Sideed iyo toddobaatan) Cuthmaan bin Cabdu Ghanm bin Zuhayr bin Abii Shaddaad bin Rabiicah bin Hilaal bin Maalik bin Dhabbah bin Al Xaarith. (Sagaal iyo toddobaatan) Sacd bin Cabdi Qays bin Laqiidh bin Caamir bin Umayyah bin Tharibi bin Al Xaarith bin Fihr. Waana sideed nafar.

Tirada inta xabashada u haajirtay

Wadarta inta arliga xabashada tagtay, una haajirtay oo muslimiinta ka mid ah, ayanna ku jirin caruurta yaryar oo raacay iyo kuwa arliga xabashada ku dhashay waa saddex iyo sideetan nin hadduu Cammaar bin Yaasir ku jiray oo uu ka mid ahaa, isagoo shaki laga qabo."
Al Suhaylii wuxuu yiri: "Midda saxiixa ka ah culummada Siirada ku xeel dheer, sida Al Waaqidii iyo ibnu Cuqbah iyo ghyarkoodba, Cammaar kuma uusan jirin, oo arliga xabashada uma uusan haajirin."

Wafdigay Qurayshi u dirtay xabashada inay muhaajiriinta soo celiyaan

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markay Qurayshi aragtay oo ay u sugnaatay inay asxaabta Rasuulka Ilaaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ay nabadgelyo heleen, ayna ku xasileen arliga xabashada, halkaasna ay ka heleen waddan iyo meel lagu nagaado, ayay waxay goosteen inay Al Najaashiyyu u diraan laba nin oo karti leh oo Quraysh ah, si ay muhaajiriintaas dib ugu soo celiyaan si ay Diintooda uga saaraan, ayna uga soo saaraan waddankay amniga iyo xasilloonida ku heleen. Markaasey waxay direen Cabdu Allaahi bin Abii Rabiicah bin Al Mughiirah iyo Camr bin Al Caas bin Waa'il, waxayna labadoodaas usoo uruuriyeen hadiyooyin ay u diraan Al Najaashiyyu iyo madaxda ciidammadiisaba. Ummu Salamah bintu Abii Umayyah bin Al Mughiirah, haweenta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhu Wasallam, oo muhaajiriintaas ka mid ah, waxay tiri: "Markaan degnay arliga xabashada waxaan marti u noqonnay midka ugu khayr badan oo loo martiyo, ahna Al Najaashiyyu. Waxaan amni ku helnay Diinteenna, Ilaahay Tacaalaa ayaan caabudnay ayadoo aan wax dhib ah naloo geysanayn, dhegeheenana ayan ku dhacayn waxaaan kahanno. Markaasaa markay xaaladdennaasi Quraysh gaartay, ayay tashadeen, ayna goosteen inay Al Najaashiyyu usoo diraan laba nin oo ayaga ka mid ah oo karti badan, iyo inay Al Najaashiyyu hadiyad ahaan ugu geeyaan waxa ugu fiican oo laga soo xulay mataaca Makkah. Boqorku wuxuu ugu jec1aa in Makkah looga keenana waxay ahaayeen hargaha. Markaasey hargo badan usoo uruuriyeen isaga iyo janannada waa madaxdee ciidammadiisa u madax ahba., oo midkoodna kama ayan tegine dhammaantood hadiyad ayay usoo dhiibeen. Markaasey hadiyadahaas waxay usoo dhiibeen Cabdu Allaahi bin Abii Rabiicah iyo Camr bin Al Caas, ayna labadoodaas la dardaarmeen, kuna yiraahdeen: "Janan walba hadiyadiisa siiya ka hor intaydnaan Al Najaashiyyu la hadal. Markaas kaddib Al Najaashiyyu hadiyadihiisa siiya, kaddibna weydiista inuu kuwaas -waa muhaajiriintee- idiin dhiibo oo uu gacanta idiin geliyo, ka hor intuusan ayaga la hadlin." Ummu Salamah waxay tiri: "Markaasey labadoodaasi soo ambabaxeen oo ay Al Najaashiyyu u yimaadeen, annagoo agtiisa ka helnay deegaanka iyo degmada ugu khayr badan. Markaaseyan ka tegin mid keli ah oo janannadiisa ka mid ah ee waxay siiyeen hadiyada ay u sideen, ka horba intayan Al Najaashiyyu la kulmin oo ayan la hadalba. Markaasey waxay janan walba ku yiraahdeen: "Beledka boqorka waxaa usoo cararay oo hadda jooga wiilal maangaab ah oo aan dhalnay, oo diinta aabayaalkood ka baxay, diintiinana aan gelin, lana yimid diin cusub oo ay ayagu hindiseen, oo aanan annaguna aqoon, adinkuna aydnaan

aqoon. Annagana waxaa boqorka noo soo diray madaxda tolkooda si loogu celiyo. Marka, markaan boqorka arrinkooda kala hadalno, kula taliya inuu annaga gacanta noo soo geliyo, ayagana uusan la hadlin, maxaa yeelay tolkood ayaa isaga xaaladooda uga xoogogaalsan oo uga fiiro dheer iyo waxay bi'iyeenba." Markaasey janannadaasu waxay labadoodaas ku yiraahdeen: "Waa yahay." Markaas kaddib ayay Al Najaashiyyu hadiyadihiisa u keeneen, isaguna uu ka oggolaaday. Markaasey la hadleen, ayna ku yiraahdeen: "Boqorow, waxaa beledkaaga usoo qaxay wiilal aan annagu dhalnay oo maangaab ah, oo diinta aabayaalkood ka baxay, diintaadana aan gelin, lana yimid Diin cusub oo ay ayagu hindiseen, oo aanan annaguna aqoon, adinkuna aydnaan aqoon. Annagana waxaa noo soo kaa diray madaxda tolkood ee ah aabayaalkood iyo adeerradood iyo qaraabadoodaba, kaana doonaya inaad ayaga dib ugu celiso, ayagoo xaaladdooda xogogaal u ab, fiiro dheerna u leh iyo waxay bi’iyeenba oo lagu ceebeynayo oo lagu eedeynayo." Ummu Salamah waxay tiri: "Mana ayan jirin waxay Cabdu Allaahi bin Abii Rabiicah iyo Camr bin Al Caas ka neceb yihiin inuu boqorku muhaajiriinta wareysto oo uu hadalkoodana maqlo." Waxay tiri: "Markaasey madaxda ciidammadiisu, ay hareerihiisa ka yiraahdeen: "Labada nini run ayay sheegeen boqorow, oo tolkooda ayaa xogogaal u ah, una warhaya waxa lagu eedeynayo. Marka labadooda gacanta u geli, si ay tolkood iyo beledkooda dib ugu celiyaan." Ummu Salamah waxay tiri: "Markaasuu Al Najaashiyyu carooday, kaddibna uu yiri: "Wa Allaahi inaanan yeeleyn, o aanan labadooda gacanta u gelinayn, oo ma ahaaneyso inay dad aniga isoo magan galay, beledkeygana soo degay, inta kalena aniga iga doortay, jeer aan u yeero oo aan ka wareysto waxay labadaani leeyihiin. Markaas kaddib, hadduu arrinku yahay siday labadaani leeyihiin markaas ayaan gacanta u gelinayaa, tolkood ayaanna dib ugu celinayaa. Haddayan sidaas ahaynna waan ka celinayaa, si fiican ayaanna u magan gelinayaa intay magan gelyadeyda ku jiraan."

Wada hadalka Muhaajiriinta iyo Al Najaashiyyu

Ummu Salamah waxay tiri: "Markaasuu asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u ciddiray, uuna u yeeray. Markaasey markuu ergayga boqorku u yimid ayay muhaajiriintu shireen, ayna isku yiraahdeen: "Maxaan ninka ku leennahay markaan u tagno?" Waxay yiraahdeen: "Waxaan ku leennahay, wa Allaahi, waxaan ognahay iyo wuxuu Nabigeennu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, na amray. Intaas kaddibna wixii ahaanaya ha ahaadaan." Markaasey markay u yimaadeen, isagoo Al Najaashiyyu isaguna u yeertay culummada diintiisa krishtaanka ah, oo kutubbadooda hareerihiisa ku wada fidiyey, ayuu wareystay, wuxuuna yiri: "Maxay tahay diintaan aad daraadeed diinta tolkiin uga baxdeen, aydnaanna diinteyda soo gelin iyo diin ka mid ahba diimaha kale?" Ummu Salamah waxay tiri: "Markaasaa waxaa la hadlay Jacfar bin Abii Dhaalib, wuxuuna ku yiri: "Boqorow, waxaan ahayn dad jaahiliyad, waa cilmi darree, ku nool. Waxaan caabudi jirnay asnaamta. Waxaan cuni jirnay hilbaha xoolaha bakhtiyey, waxaanna suubin jirnay wax xun oo idil. Riximkana waan goyn jirnay, martidana waan xumayn jirnay. Keenna xoogga lehna wuxuu cuni jiray maalka kan taagta daran. Sidaas ayaan ku sugnayn oo aan u nooleyn ilaa uu Ilaahay noo soo diray Rasuul annaga naga dhashay, oo aan naqaanno nasabkiisa iyo runlownimadiisa iyo ammaanadiisa iyo naxariistiisaba. Markaasuu Ilaahay noogu yeeray inaan keligiis ilaahnimada ku koobno oo aan caabudno, aanna ka tagno waxaan caabudi jirnay annaga iyo aabayaalkeenba sokadiisa oo ahaa dhagax iyo asnaam. Wuxuu na amray inaan markaan hadlno aan runta ku hadalno iyo inaan ammaanada dhawrno, riximkana aan xiriirinno, martidana aan u samafalno, xaaraantana aan ka harno iyo daadinta dhiigga

(dadka dhiiggiisa). Wuxuu naga reebay fawaaxishta xun iyo inaan been ku hadalno iyo inaan maalka agoonta cunno, haweenka dhawrsanna aanan qadfin oo wax xumaan ah ku sheegin. Wuxuuna na amray inaan Ilaahay keligiis caabduno, aananna shariik u yeelin ilaahnimada la wadaaga. Wuxuu na amray inaan salaadda tukanno iyo inaan zakada bixinno iyo inaan bisha Ramadaan soonno." Ummu Salamah waxay tiri: "Markaasuu wuxuu u tiriyry oo uu u sheegay umuurta islaamka." Jacfar wuxuu yiri: "Markaasaan waxaan qirannay inuu run sheegayo, aanna aaminnay oo rumeynnay, waxaanna ku raacnay wuxuu xagga Ilaahay kala yimid. Markaasaan Ilaahay keligiis caabudnay oo aanan ilaahnimada axad kale la wadaajin. Waxaan xaaraan isaga dhignay wuxuu naga xaaraantimeeyey, xalaalna aan isaga dhignay wuxuu isagu noo xalaaleeyey. Markaasuu tolkeen na colaadiyay oo ay na cathaabeen, ayna Diinteenna naga fitneeyeen, si ay caabudidda asnaamta dib noogu celiyaan, oo aan taas dhaafsanno caabudidda Ilaahay Tacaalaa, iyo inaan xalaaleysanno wixii xumaa oo aan xalaaleysan jirnay. Markaasaan annagu markay na qahreen, ayna na dulmiyeen oo ay noloshii ciriiri nooga dhigeen, ayna annaga iyo Diinteenna nasoo kala dhex galeen si ay nooga duwaan, ayaan beledkaaga soo aadnay, adigaanna inta kula midka ah kaa doorannay, magan gelyadaadana aan soo galnay, aanna rajaynnay inaan agtaada nalugu dulmin boqorow." Ummu Salamah waxay tiri: "Markaasuu Al Najaashiyyu wuxuu Jacfar ku yiri: "Wuxuu Ilaahay xaggiisa ka keenay wax ma ka haysaa?" Waxay tiri: "Markaasuu Jacfar wuxuu yiri: "Haa." Markaasuu Al Najaashiyyu wuxuu yiri: "ii akhri hadaba." Waxay tiri: "Markaasuu wuxuu ku dul akhriyey inta hore ee KHYCS (Waa Suuratu Maryama). Markaasuu wa Allaahi Al Najaashiyyu booyay, uuna booyayey ilaa uu garkiisu qoyey. Culummadiisuna way booyeen ilaa ay ilmadoodu kutubbadooda qoysay, markay maqleen wuxuu ku dul akhriyay. Markaasuu Al Najaashiyyu wuxuu yiri: "Midkaan (waa Quraankee) iyo midkuu Ciise la yimid waxay kasoo wada bexeen isku daaqad keli ah. Iska taga, oo wa Allaahi inaanan idiin dhiibayn oo aanan gacanta idiin gelinayn. La idinmana khayaanayo." Ummu Salamah waxay tiri: "Markay labadoodii Al Najaashiyyu kasoo tageen ayuu Camr bin Al Caas wuxuu yiri: "Wa Allaahi waxaan berrito boqorka kuwaan uga keenayaa (waa muhaajiriintee) wuxuu xididdadooda kusoo siibo." Wax ay tiri: "Markaasuu Cabdu Allaahi bin Abii Rabiicah, oo labadooda annaga noo naxariis badnaa oo Ilaahay nooga baqayey, wuxuu yiri: "Sidaas ha yeelin, maxaa yeelay waxay nagu leeyihiin rixin, oo waa qaraabo, in kastoo ay na khilaafeen oo ay naga leexdeen." Camr wuxuu yiri: "Wa Allaahi waxaan boqorka u sheegayaa inay leeyihiin inuu Ciise ina Maryama addon yahay." Waxay tiri: "Markaasuu subixii dambe boqorka u tegey, uuna ku yiri: "Boqorow, ayagu waxay ka leeyihiin Ciise ina Maryama hadal wayn Marka u ciddir oo weydii waxay ka leeyihiin." Waxay tiri: "Markaasuu u ciddiray si uu Ciise ina Maryarna uga wareysto." Waxay tiri: "Taasoo kalena hore uguma dhicin muhaajiriinta. Markaasey markuu ergayga boqorku u yimid ayay shireen, ayna isku yiraahdeen: "Maxaad ka leedihiin Ciise ina Maryarna hadduu boqorku idinka wareysto?" Waxay yiraahdeen: "Waxaan ka leennahay, wa Allaahi, wuxuu Ilaahay ka yiri iyo wuxuu Nabigeemlu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, nooga keenay. Markaas kaddibna wixii dhacaya ha dhacaan." Waxay tiri: "Markaasey markay boqorka usoo galeen ayuu wuxuu yiri: "Maxaad ka leedihiin Ciise ina Maryama?" Waxay tiri: “Markaasaa Jacfar bin Abii Dhaalib wuxuu ku yiri: "Waxaan ka leennahay wuxuu Nabigeennu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, noola yimid, oo ah inuu yahay addoon llaahay iyo Rasuulkiisa iyo Ruuxiisa iyo Kalimadiisa uu ku riday Maryama, miidda bikrada ahayd oo cibaadada Ilaaheed u go'day." Waxay tiri: "Markaasuu Al Najaashiyyu gacantiisa dhulka ku dhuftay, uuna qori yar kasoo qaaday, kaddibna uu yiri: “Wa Allaahi inuusan Ciise ku darin intaad tiri wax qorigaan le'eg." Waxay tiri: "Markuu boqorku sidaas yiri ayay culummadiisu

hareerihiisa ka sharqameen oo ay sanankooda ka dhawaaqeen. Markaasuu wuxuu boqorku culummadaas ku yiri: "Wa Allaahi waana sidaas, inkastoo aad sanankiinna ka dhawaajisaan." Markaasuu Muhaajiriinta wuxuu ku yiri: "Iska taga oo arligayga waxaad ku leedihiin amni. Qofka idin caayana waa la ganaaxayaa, qofka idin caayana waa la ganaaxayaa, qofka idin caayana waa la ganaaxayaa. Ma jecli in la isiiyo buur dahab ah oo aan dhaafsado in nin adinka idinka mid ah dhibaato loo geysto." Kaddibna boqorku wuxuu yiri: "Labadaanna hadiyadday keeneen u celiya, anigu xaajo kama lihiye, oo wa Allaahi inuusan Ilaahay laaluush iga qaadan markuu boqortooyadeyda ii soo celiyay, oo aan markaas anigu hadda laaluush boqornimada ku qaato wuxuusan doonayn. Ilaahayna dadku waxay ila doonayeen kama uusan yeelin, oo marka aniguna aan dadku waxay Ilaahay la doonayaan oo xun ka yeelo." Waxay tiri: "Markaasey labadoodu agtiisa kasoo tageen ayagoo dullaysan, waxay keeneenna oo hadiyad ahaa dib loogu soo celiyay. Sidaas ayaan Al Najaashiyyu agtiisa waxaan ku nooleyn arliga ugu khayr badan iyo martisoorka ugu khayr badan." Al Thahabii wuxuu Siiradiisa Siyaru Aclaamu Al Nubalaa'i, mujalladka koowaad bogga boqol iyo toddoba iyo labaatan, ku wariyay oo yiri, waana markuu Al Najaashiyyu qoriga dhulka kasoo qaatay:
"Culummadaan iyo wadaadadaanow, kuwaasu waxay leeyihiin kuma kordhineysaan culayska qorigaan. Marka soo dhowaada, waa muhaajiriintee, waxaanna soo dhoweynayaa waxaad agtiisa kala timaaddeen, aniguna waxaan marag ka ahay inuu Nabi yahay. Waxaanna jeclaan lahaa inaan agtiisa joogo oo aan markaas kabahiisa u qaado, ama wuxuu yiri aan u adeego. Marka dega meeshaad doontaan ee arligayga ka mid ah." Xadiithkana waxaa wariyay Al Bayhaqii oo Dalaa'ilu Al Nubawwah ku wariyay mujalladka labaad bogga toddoba iyo lixdan. Xadiithkana waxaa la yiraahdaa Xadiithka Xudayj, oo ah ninka wariyay. Al Thahabii wuxuu Siiradiisa ku wariyay in ay hadiyada ay boqorka u keeneen ahayd faras iyo jubbad xariir ah.

Muhaajiriinta iyo guusha Al Najaashiyyu

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Ummu Salamah waxay tiri: "Wa Allaahi annagoo xaaladdaas ku sugan, ayaa nin xabashada u dhashay uu Al Najaashiyyu ku kacdoomay oo uu xukunka iyo boqomimada ku qabsaday. Wa Allaahi inaanan ogayn tiiraanyo ka wayn oo nooga adag sidaan markaas u tiiraanyoonnay, cabsi aan ka qabno inuu ninkaasu Al Najaashiyyu ka adkaado, oo uu markaas boqor noqdo nin aan xaqqeenna ka aqoon intuu Al Najaashiyyu ka yiqiin." Waxay tiri: "Markaasuu Al Najaashiyyu ninkaas ku duulay, ayadoo uu labadooda wabiga Niil u dhexeeyey." Waxay tiri: "Markaasey asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay yiraahden: "Ninkee baa tegeya oo soo arkaya siday dhacdadu noqoto, waa dagaalkee, kaddibna warka noo keenaya?" Waxay tiri: "Markaasuu Al Zubayru bin Al Cawwaamu wuxuu yiri: "Aniga." Waxay yiraahdeen: "Hadaba adigu aad." Isagaana ragga ugu da' yaraa." Waxay tiri: "Markaasey sibraar u buufiyeen oo ay neef geliyeen, ayna laabta ugu xireen, oo sidaasuu wabiga ku kor dabaashay oo uu jinka kale uga baxay, jinka ay labada ciidan isaga hor imaanayeen. Kaddibna wuu socday oo uuba u tegey." Waxay tiri: “Markaasaan waxaan Ilaahay Tacaalaa ka barinnay inuu Al Najaashiyyu libta ka siiyo cadawgiisa, uuna beledkiisa gacantiisa ku sugo." Waxay tiri: "Wa Allaahi annago sidaas ku sugan oo dhawreynna waxa dhaca, ayaa waxaa nagu soo baxay Al Zubayru oo ordaya oo go'iisa haadinaya isagoo leh: "Bishaareysta! Waxaanna guusha helay Al Najaashiyyu, Ilaahayna cadawgiisa waa dilay, beledkiisana wuu u sugay." Waxay tiri: "Wa Allaahi inaanan ogayn farax kaas la mid ah oo aan u faraxnay." Waxay tiri: "Kaddibna waxaa soo laabtay Al Najaashiyyu, ayadoo uu Ilaahay cadawgiisa halaagay, beledkiisana u sugay, xukunka

xabashada iyo madaxdiisuna ay u hoggansameen. Sidaas ayaan agtiisa xaalad khayr leh ugu sugnayn ilaa aan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uga nimaadno isagoo Makkah jooga."

Siddu Al Najaashiyyu boqor ku noqday

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "AI Zuhriyyu wuxuu yiri: "Curwah bin Al Zubayr ayaa waxaan u wariyay Xadiithka Abii Bakr bin Cabdu Al Raxrnaan, uuna ka wariyay Ummu Salamah, haweenta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna yiri: "Ma ogtahay macnaha wuxuu Al Najaashiyyu ula dan lahaa markuu yiri "wa Allaahi inuusan Ilaahay laaluush iga qaadan markuu boqortooyadeyda ii soo celiyay, oo aan markaas anigu hadda laaluush boqornimada ku qaato wuxuusan doonayn. Ilaahayna dadku waxay ila doonayeen kama uusan yeelin, marka aniguna aan dadku waxay Ilaahay la doonayaan oo xun ka yeelo."?" Wuxuu yiri: "Maya." Wuxuu yiri: "Ummu Al Mu'miniina Caa'ishah ayaa waxay ii sheegtay inuu Al Najaashiyyu aabihiis ahaa boqorka dalkiisa, mana uusan lahayn wiil aan Al Najaashiyyu ahayn. Al Najaashiyyu wuxuu lahaa adeer lahaa labo iyo toban wiil oo uu isagu dhalay, waxayna ka wada tirsanaayeen qoyska boqortooyada Al Xabashah. Markaasey ragga xabashadu ku wada hadleen oo ay isku yiraahdeen: "Haddaan boqorkaan dilno, isagoo aan caruur aan wiilkaan ahayn lahayn, aanna walaalkiis boqorno oo caleemo saarno, midkaanoo laba iyo toban wiil oo uu dhalay leh oo isaga dabadiis boqornimada iska dhaxla, boqortooyada xabashadu way raageysaa oo sugnaaneysaa, zaman dheerna way soconeysaa." Markaasey intay boqorka ku jarmaadeen ay dileen, ayna walaalkiis boqreen. Al Najaashiyyu, oo markaas yaraa, wuxuu la koray adeerkiis, wuxuuna ahaa nin caqli badanoo kartina leh. Markaasuu wuxuu saameeyey hawsha adeerkiis oo uu nufuud ku yeeshay. Markaasey markay ragga xabashadu arkeen siduu gacan sare ugu yeeshay hawsha boqorka iyo makaankuu agtiisa ku leeyahay, ayay waxay is yiraahdeen: "Wa Allaahi wiilkaanu wuxuu gacanta sare ku yeeshay hawsha adeerkiis, waxaanna ka baqaynnaa inuu boqoor ahaan u caleemo saaro, oo uuba boqor nooga dhigo. Hadduu sidaas yeelana, dhammaanteen wuu na wada dilayaa, isagoo ogsoon inaan aabihiis dilnay."

Markaasey waxay u tageen adeerkiis, ayna ku yiraahdeen:

"Labo midkood soo gal: ama wiilkaan dil ama dalkeenna nooga saar, maxaa yeelay nafteennaan uga cabsannay." Wuxuu yiri: "War maxaad leedihiin, hoogee? Shalay ayaan aabihiis dilay, isagana ma maantaan dilaa? Bal beledkiinnaan idiinka saarayaa." Waxay tiri: "Markaasey intay wiilka soo qabteen ayay suuqa keeneen, oo ay markaas nin ganacsade ah lix boqol oo dirham ka siisteen. Markaasuu intuu doontiisa saartay la tegey. Markaasey markay isla maalintaas casirkii tahay ayay daruurihii dayrtu cirka kasoo buuxsameen. Markaasuu adeerkiis, waa boqorkiiye, gurigiisa kasoo baxay si uu roobdoon ugu Alle baryo, oo uu daruurahaas hoostooda istaagay. Markaasey daruurtaas biriqi kasoo baxday oo ay isaga ku dhacday, ayna dishay." Waxay Caa'ishah tiri: "Markaasey raggi xabashadu waxay si degdegsiimo leh ugu yimaadeen wiilkiisa, si ay u boqraan. Mase wiilku waaba doqon aan caqli lahayn. Waxayna arkeen inay wiilashiisa oo idili sawirro yihiin, ayanna khayr lahayn. Markaasey xabashada arrinkoodu ka murgay. Markaasey markay xaaladday ku sugan yihiin ciriiri iyo culays ku noqotay, ayay waxay isku yiraahdeen: "Wa Allaahi waad ogsoontihiin inuu boqorkiinna oo uusan isaga la' aantisu dalkiinnu idiin xasilayn oo uusan arrinkiinnu idiin hagaageyn uu yahay midkaad saaka iibiseen. Marka, haddaad mustaqbalka iyo amarka al xabashah dan ka leedihiin, hadder ka daba taga oo soo

ceshada." Waxay tiri: "Markaasey raadiyeen isaga iyo ninkay ka gateenba, ilaa ay ka daba tageen. Markaasey kasoo qaateen, ayna kala soo noqdeen. Markaasey carshiga ku fariisiyeen,. ayna taajka madaxa u saareen oo ay boqreen. Markaasaa waxaa raggaas u yimid ninkay wiilka ka gateen, ayna kala soo noqdeen, wuxuuna ku yiri: "Ama maalkeyga ii soo celiya, ama arrinkaan boqorka ayaan kala hadlayaa." Markaasey waxay ku yiraahdeen: "Waxba ku siin maynno." Wuxuu ninku yiri: "Hadaba wa Allaahi isagaan la hadlayaa." Waxay yiraahdeen: "Waa kaas haddaad dooneysid." Waxay tiri: "Markaasuu u yimid oo uu hortiisa fariistay, uuna ku yiri: "Boqorow! Rag ayaan waxaan addoon uga gatay lix boqol oo dirham. Markaasey addoonkeyga gacanta ii geliyeen, lacagteydana ay qaateen. Markaan addoonkeyga la tegayna way iga daba yimaadeen oo ay addoonkeyga iga qaateen lacagteydiina ii diideen." Waxay tiri: "Markaasuu Al Najaashiyyu wuxuu raggii ku yiri: "Ama lacagtiisaad siineysaan, ama addoonkiisuu inta gacanta ku dhego uu meeshuu doono la aadayaa." Waxay yiraahdeen: "Bal lacagtiisaan siineynnaa." Waxay tiri: "Taas weeye markuu leeyahay oo "Wa Allaahi inuusan Ilaahay laaluush iga qaadan markuu boqortooyadeyda ii soo celiyay, oo aan markaas anigu hadda laaluush boqornimada ku qaato wuxuusan doonayn. llaahayna dadku waxay ila doonayeen kama uusan yeelin, marka aniguna aan dadku waxay Ilaahay la doonayaan oo xun ka yeelo." Waxay tiri: "Taasaa ugu horreysey waxa laga wariyay sugnaanta go'aankiisa Diinta iyo caadilnimada xukunkiisa." Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Caa'ishah waxay tiri: "Markuu Al Najaashiyyu dhintay waxaa lagu sheekeysan jiray oo la wariyay in qabrigiisa korkiisa lagu arki jiray nuur, oo uusanna ka tegi jirin."

Islaamidda Al Najaashiyyu iyo Janaazada lagu tukaday

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Xabashada ayaa kulantay, markaasey waxay Al Najaashiyyu ku yirahdeen: "Diinteenna waad ka baxday", wayna ku kacdoomeen. Markaasuu u ciddiray Jacfar iyo asxaabtiisa, wuxuuna u diyaariyay doonyo, wuxuuna ku yiri: "Fuula doonyahaan, dushoodana ku sugnaada. Haddii la i jebiyo oo la iga adkaado dhaqaaqa oo socda ilaa aad ka gaartaan meeshaad dooneyseen. Haddaan libta helana, oo aan adkaado, joga." Markaasuu warqad soo qaatay uuna ku dhigay: "Isagu wuxuu marag ka yahay: Ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa anna Muxammadan Cabduhu wa Rasuuluhu, wuxuuna marag ka yahay inuu Ciise ina Maryama addoonkiisa iyo Rasuulkiisa iyo Ruuxiisa iyo Kalimadiisa uu Maryama ku ganay yahay." Markaasuu warqaddaas wuxuu geliyay khamiiskiisa hoostiisa, garabkiisa midig. Markaasuu xabashada usoo baxay, kuwaasoo u saftay la kulankiisa, wuxuuna ku yiri: "Soo anigu dadka idiinkuma xaq badni?" Waxay yiraahdeen: "Haa." Wuxuu yiri: "Sidee baad ugu jeeddaan inuu hab nololeedkeygu yahay iyo boqornimadeydu?" Waxay yiraahdeen: "Habka ugu khayr badan!" Wuxuu yiri: "Hadaba maxaa idinku dhacay oo idin haya oo aad u kacdoonteen?" Waxay yiraahdeen: "Diinteennaad ka baxday, waxaadna tiri inuu Ciise addoon yahay!" Wuxuu yiri: "Adinku maxaad Ciise ka leedihiin?" Waxay yiraahdeen: "Waxaan leennahay waa wiilka Ilaahay." Markaasuu Al Najaashiyyu wuxuu yiri, isagoo gacantiisa khamiiskiisa iyo laabtiisa kor saaray inuu isaguna marag ka yahay inuu Ciise ina Maryama uusan taas waxba ku siyaadin, isagoo ula dan leh oo ay niyadiisa ku jirto wuxuu isaga laftiisu warqadda ku dhigay ayna gacantiisu kor saaran tahay. Markaasey sidaas raali ku noqdeen, oo ay ka kala tageen. Markaasuu amarkaasu gaaray Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo uu markaas markuu Al Najaashiyyu dhintay salaatu al janaazah Al Baqiic kula tukaday, Ilaahayna uu dambi dhaafid u weydiiyey, waxaana sare loogu soo qaaday nacashkiisa yiillay arliga xabashada oo uu arkay isagoo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Al Madiinah jooga.

Markaasey munaafiqiintu hadleen oo ay yiraahdeen: "ma gaalkuu ku tukanayaa?" Markaasuu Ilaahay Tacaalaa soo dejiyay Aayadda boqol iyo sagaal iyo sagaashan ee Suuratu Aali Cimraana: **"Wa inna min ahli al Kitaabi laman yu'minu bi Allaahi wa maa unzila ilaykum wa maa unzila ilaybim**(199)**",** oo macneheedu yahay: "Ehelu Kitaabka waxaa ka mid ah mid rumaynaya Ilaahay iyo waxa adinka la idiin soo dejiyay iyo waxa ayaga loo soo dejiyay(199)". Al Najaashiyyu wuxuu dhintay bisha Rajab ee sanadka sagaalaad ee Hijrada, Rasuula Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaana geeridiisa dadka u sheegay maalintuu dhintayba." Al Suhaylii wuxuu kaloo yiri: "Abaa Nayzar mawlaha Calii bin Abii Dhaalib, uu ahaa wiil uu dhalay Al Najaashiyyu, Calina uu ka helay Makkah isagoo ah addoon uu leeyahay nin ganacsade ah. Markaasuu ka gatay, uuna xoreeyey, abaalgudid wuxuu aabihiis muslimiinta u galay. Dhimashada Al Najaashiyyu kaddibna amarka xabashadu wuu murgay, markaasey Abii Nayzar wafdi usoo direen si ay boqorkooda uga dhigtaan, taajna ay madaxa u saaraan, ayagoo dhammaantood isku waafaqay arrinkaas. Abuu Nayzarna wuxuu markaas la nool yahay Calii bin Abii Dhaalib.Markaasuu codsigoodaas diiday, oo uu yiri: "Ma ihi kan boqornimo doonaya, kaddib markuu Ilaahay islaamka igu mannaystay." Abuu Nayzar dadkuu ugu dheeraa, uguna waji qurxoonaa, midabkiisuna ma ahayn kan xabashada oo kale, haddaad aragtidna waxaad oran lahayd waa nin Carab ah." Waa intaas warka Al Suhaylii. Al Najaashiyyu magaciisu wuxuu ahaa Asxamah bin Abjar ama Abxar.

Al Najaashii

Al Najaashiyyu waa eray Carabi ah, siduu u xusay Imaam Al Nawawii, iyo Al Dhabarii iyo Lisaanu Al Carab, oo yiri: "Najasha waxaa weeye waa faafiyay warka. Al Najaashiyyu waa ninka ugaarta meel ku jirta kasoo saara si ay kuwa gaadaya usoo hormarto oo ay sidaas ku qabsadaan. Waxaa kaloo la yiraahdaa qofka waxa daboolan fayda oo soo saara. Xagga ganacsigana waxaa la yiraahdaa qofka badeecada iibka loo keenay sheega inuu sicir sarreeya ku gadanayo, aanse dooneyn inuu gato, si uu qof kale sicirkaas sarreeya ugu gato. Midka sidaas yeela iyo kan badeecada iska lehba dambiga way wadaagaan, ayadoo ayan taasi shareecada ku bannaaneyn. Ibnu Qutaybah wuxuu yiri: "Al Najshu waa khatasha iyo dagidda, sidaas ayaan kan ugaarta soo didiya si loo qabsado loo yiri naajish." Al Najaashiyyu waa, isla markaas eray xabashi ah oo waa magaca uu qaato nin kasta oo arliga xabashada boqor u noqda, sida ninka Soomaaliya madaxda u noqda loo yiraahdo Madaxweyne, kuu doono ha ahaadee; midka Masar u talin jiray oo walbana Fircoon loo oran jiray, kan Rooma u taliyana Qaysar loo oran jiray.

Ruqayyah bintu Rasuuli Allaahi Sallaa Allaahu Calayhim Wa Calaa Aalihim Wa Sallam ayaa islaamka Soomaaliya gaarsiisay iyo Afrikaba

Al Sheekh Cabdu Al Raxmaan Al Najjaar oo ahaa Guddoomiyaha Bicthada Azharka ee Soomaaliya wuxuu kitaabkiisa Al Islaamu fii Al Suumaali ee ay daabacday Jamhuuriyatu Misr Al Carabiyyah, Al Majlisu Al Aclaa lilshu'uuni Al Islaamiyyah, Lajnatu Al Tacriifi bi Al Islaami bisha Rajab ee kun iyo saddex boqol iyo saddex iyo sagaashan, una dhigantah Agoosto ee kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo toddobaatanka, bogga labo iyo lixdan ku yiri: "Soomaaliaya wuxuu islaamku gaaray intuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, noolaa, markuu kasoo baxay Jacfar bin Abii Dhaalib Makkah, uuna soo aaday Al Xabashah, hijrada kuway gaaladu dhibeen iyo fidinta dacwada islaamka. Waxay soo gooyeen Badda Cas ayagoo soo maray Baabu Al Mandab, una socda al xabashah, waxaana dhici karta

inay ku degeen ayaamo arliga Soomaaliya markay usii socdeen al xabashah iyo markay kasoo laabteenba. Caqli galna ma aha inay Carab muslimiin ah ay arliga Soomaaliya soo maraan sii socod iyoo soo socodba ayadoo uusan axad soomaali ihi islaamka wax ka ogaan, waliba haddii la tixgeliyo inayan Carabta muhaajiriinta ahi u imaan beeshaan ganacsi ama dalxiis, ayse u yimaadeen ayagoo sida Diinta daraadeed loo dhibaateeyey, ahna Diinta Tawxiidka iyo walaaltinnimada iyo sinnaantaba. Marka, laabudda waa kuwa dadka soomaalida ah kala sheekeystay Diintaan: sidaas ayay Soomaaliya waxay ku ahaaneysaa miduu islaamku gal ay bilowgiisaba, uuna gaarayba sideed sano ka hor intuusan gaarin Al Madiinah". Sheekhu wuxuu warkaasna kasoo qaatay Kitaabka la yiraahdo Al Suumaal qadiiman wa xadiithan uuna dhigay Al Istaathu Xamdii Al Sayyid Saalim, juzkiisa koowaad. Sheekhoo hadalkiisa sii watana wuxuu yiri: "Aniguna waxaan u jalleecaa aragtidaan. Inay sidaas tahayna waxaa u daliil ah inay soomaalidu yihiin kuwa dadka ugu xamaso badan Diinta Islaamka iyo fidintiisaba, waxayna islaameen waagii ugu horreeyey, waana muslimiin boqolkiiba boqol. Siday ugu dheggan yihiin Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa si ka sarreysa in la tilmaami karo. Tusaale ahaan marka magaca RasuuIka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lagu soo qaado khudbo ama darsiba makaankoo idil wuxuu la gariirayaa ku sallintiisa iyo salaamiddiisa." Intaas ayaan warka sheekhaas uga baxaynnaa markaan. Wargeyska la yiraahdo Al Muslimuuna, oo kasoo bixi jiray dalka boqortooyada Sucuudigana, tirsigiisa soo baxay maalinta jumcada ah ee toddobada bisha Rabiicu Al Awwal ee sanadka kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhigantah kow iyo tobanka luulyo ee kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashanka, wuxuu booggiisa tobanaad ku daabacay maqaalad dheer oo uu dhigay Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shaykh oo ay warkeeda ka mid tahay: "Harar iyo Zaylac waxay islaamka galeen oo ay ku islaameen gacanta Amiiru Al Mu'miniina Cuthmaan bin Caffaan iyo haweentiisa Ruqayyah bintu Rasuuli Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayna labadooda la socdaan afar iyo toban muhaajir sanadka lix boqol iyo shan iyo toban, taasoo Hijrada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Yathrib sideed sano ka horreysey. Waxay muhaajiriintu joogeen Zaylac iyo Harar afar bilood: Rajab iyo Shacbaan iyo Ramadaan iyo Shawwaal. Kaddibna waxay u laabteen Makkah Al Mukarramah, kaddib markay maqleen inay Qurayshi islaamtay. Markay Makkah Al Mukarramah usoo laabteenna waxay arkeen inuusan warkuu sax ahayn. Markaasey hadana al xabashah isla sanadkaasba usoo haajireen, ayadoo uu madax u yahay Jacfar bin Abii Dhaalib, oo ay tobannaano muhaajiriin abi la socdaan." Warka Yuusuf Cabdu Al Raxmaanna intaasaan uga baxaynna markaan.

Kitaabu Al Zzunuuji

Ninka talyaaniga u dhashay oo la oran jiray Enrico Cerulli, ahaana guddoomiyaha Soomaaliya intay ahayd mustacmarad talyaani, Soomaaliyana joogay markay ku jirtay gumaysiga talyaaniga, wuxuu dhigay kitaabka la yiraahdo **"Somalia, scritti vari editi ed inediti, Storia della Somalia, l'Islam in Somalia, Il Libro dei Zengi**, primo volume, a cura dell'Amministrazione Fiduciaria Italiana della Somalia", laguna daabacay Istituto Poligrafico dello Stato P.V. Roma kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo konto. Cerulli wuxuu bogga laba boqol iyo kow soddon ee kitaabkiisaas ku sheegay inuu gacantiisa soo galay kitaabka la yiraahdo **Kitaabu Al Zunuuji**. Cerulli wuxuu sheegay inay kitaabkaas laba nuskho ama namuunad ka jiraan oo kala ah mid uu Qaalliga degmada Kismayo ee kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo labaatan lahaa, oo uu isaga laftiisu nuskhad ka helay Madaxa Qaalliyada degmada Muqdisho oo magaciisu ahaa Sheekh Abuu Bakar ibnu Muxyiddiin Mukarram. Nuskhadda labaad

waxaa haysay, ayuu yiri, "Professor Alice Werner o igala soo socodsiisay, iina soo marisay Ergada ingiriiska ee Ethiopia…Warka nuskhada kitaabkaan ku dhiganna wuxuu la mid yahay warka aan kutubbada kale ka helnay." Intaas waxaa ku eg warkii Cerulli. Kitaabkaan ah Kitaabu Al Zunuuji, o afka Carabiga ku dhigan, wuxuu koobayaa taariikhda Soomaalida, meeshay ka yimaadeen, Carabnimadooda iyo siday Soomaaliya kusoo degeen, dadkii degganaan jirayna ay uga kiciyeen. Kitaabu Al Zunuuji oo aan la magacaabin ninka dhigay, kana kooban sideed iyo toban bog, kuna dhigan afka Carabiga waa kanaa.

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi Isagaanna la kaashanaynnaa kitaabkaan Kitaabu Al Zzunuji iyo akhbaartooda ee xeebta galbeed ee Badda Hindiga. Al xamdu li Allaahi Al Khaaliqi Al Baari'i Al Waduudi Thuu Al Fadli wa Al Karami wa Al Juudi Midka khalqigiisa midabyo u yeelay ee caddaan iyo guduud iyo madaw, qaarkoodna qaarka kale wax dheereysiiyey ugana kor mariyay inuu ka dhigay madax iyo hoggaamiyayaal, iyo dhererka iyo nolosha fiican, kuna xukumay midkuu aabihiis habaaray inuu wajigiisu madoobaado dhashiisuna ay u noqoto dhasha labadiisa wiil oo kale addoommo. Wa Al Ssalaatu wa Al Ssalaamu calaa Al Musdhafaa Al Maxmuudi wa calaa Aalihi wa Asxaabihi kuwa ah ehelka rukuuca iyo sujuudda. Intaas kaddibna. Waxaan soo gaabinnay akhbaarta zunuujta, (zinji waa jiil ka mid ah dadka madow, oo ah dadka madow oo qaaradda Afrika degah oo sananka bagafsan iyo timahana adag oo jareerta ah leh, siduu Al Rraazii u yiri) ee ku nool daanta galbeed ee Badda Hindiya iyo diillinta adduunka kala barta, oo ah Eqwaatooraha, annagoo caddeyneynna wuxuu Ilaahay ku abuuray oo zunuujta ah oo ku noolaa Jubba oo afka Carabiga ah oo asliga ah Kashuur lagu yiraahdo, afka sawaaxiligana lagu yiraahdo Wanyika. Sidoo kale akhbaarta Carabta yimid beledka zunuujta, oo beledka camiray oo degay iyo degmooyinka iyo tuulooyinkaba, degeyna laga soo bilaabo zamanka jaahiliyada, kuna yimid talada boqorka Tubbac Al Ximyarii Al Akbar. Sidoo kale akhbaarta Banuu Qays Caylaan (oo hore loo oran jiray Galla, hadana la yiraahdo Oromo) oo yimid beledka zunuujta, kana yimid arliga Carabta, kuna yimid sababta qisada ku jirta Abraha Al Ashram amiirka al najaashii al xabashii sanadka maroodiga. Markaasey waxay degeen meel la yiraahdo Jubba. Iyo akhbaarta ka guuridda zunuujta ay Jubba uga guureen, una guureen meel la yiraahdo Ghariyaamaa oo ku xigta Muughiya. Waxayna halkaas uga guureen Qays Caylaan daraadood oo ay ka carareen, oo sidaas daraadeed loogu bixiyey Kashuur. Sidoo kale akhbaarta kuwa dega Al Bakuum, dhinaca wabiga la yiraahdo hadda Mutu Taana. Sidoo kale akhbaarta Carabta ka timid Cumaan ugana timid dagaallada dalkaas ka socda badnidooda, oo halkaan uga raaxaystay dagaalladaas, degeyna arliga Aamu. Sidoo kale akhbaarta Carabta ayaguna Cumaan ka yimid, yimidna Mumbaasah, una yimid ganacsi wax gadasho iyo wax iibsi ah, xeeladaysanayana oo eegaya siday dariiqyada Mumbaasah lagu galo sanadka hortiis. Sidoo kale akhbaarta xarbiga iyo ka bixidda Mumbaasah ee burtuqiiska. Iyo akhbaarta mudaday Carabtu Mumbaasah degganaayeen, ayna madax u ahaayeen Al Mazaaric qoyska la yiraahdo iyo siday isaga cazileen oo uga baxeen, taasoo ahayd taariikhda kun laba boqol afar iyo konton. Sidoo kale akhbaarta Saciid bin Suldhaan iyo Mazruuciyiinta iyo xarbigooda iyo waxa ku dhacay oromada iyo sida suuqa loogu gatay. Iyo umuur kaloo intaasba ka duwan oo dhacay. Marka waxaan leeyahay, Tawfiiqduna Ilaahay ayay ka timaaddaa, inuu Xaam wiilka Nabiga Ilaahay Nuux ibnu Lamik Calayhi Al Ssalaatu wa Al Ssalaamu, isaagana ah aabaha dhalay dadka madow, saddexda wiil ee Nuuxna ugu yar. Xaam wuxuu lahaa afar wiil oo kala ah Misr iyo Kancaan iyo Kuush iyo Quudh. Al xabashah, waxay ka mid yihiin dhashay Kuush bin Xaam. Al Nuubah iyo al zinji waxay ayagu ka mid yihiin dhashay Kancaan bin Xaam. Xaam wuxuu ahaa nin qurxoon oo wajigiisu kaahayo. Markaasuu Ilaahay wuxuu beddelay midabkiisa iyo

midabka dhashiisaba, kuna beddelay habaar uu aabihiis habaaray, kuna habaaray inuu wajigiisu madoobaado iyo wajiyada dhashiisuba iyo inay dhashiisu addoommo u noqdaan dhasha wiilashiisa kale Saam iyo Yaafith. Markaasuu Ilaahay badiyay oo ay tarmeen, qisadooduna waxay ku taallaa kutubbada taariikhda ayadoo tifaftiran, siduu ugu xusay kitaabka Sabaa'iku Al Th-thahabi. Markaasuu markuu Nabiga Ilahay Nuux arliga wiilashiisa u qaybiyay ayay Afrika ku beegantay Xaam, oo ay wiilashiisu caruur madmadow dhaleen, o ayan timohoodu dhegohooda dhaafin, sidaan hadda u aragnaba. Markaasay arliga ku faafeen oo ay buuxiyeen oo ay degeen. Markaasey qawm ayagaas ka mid ahi waxay degeen daanta galbeed ee Badda Hindiga, diillinta arliga kala barta ee Equaatoraha (waxayna martaa tuulada Zunguuni ee koofurta Soomaaliya ku taalla, kana fogayn wabiga Jubba) dhexdeeda iyo Jubba. Equatoorahana waxaa afka kashuurta lagu yiraahdaa Waamaa. Qawmkaasna waxaa afka Carabiga lagu yiraahdaa Al Kashuur xagga macnaha, haddana waxaa la yiraahdaa Wa-Nyiika. Zamankaasna ummad kale oo aan ayaga ahayn halkaas ma degganayn. Laba iyo toban maalin socodna marka halkaas laga tago waxaa la gelayaa arliga xabashada. Al Kashuur waxay ahaayeen xoolo dhaqato waxayna dhaqan jireen ari iyo lo' iyo digaag, waxayna beeran jireen gallayda iyo digirta iyo mesaggada, mana ayan lahay fawaakih aan ahayn (mooska, Al Buubar, Al Qalc). (Cerulli wuxuu yiri: "Zamankaasu wuxu ku aadan yahay shan iyo labaatanka sano oo ugu horreeya qarniga toddoba iyo tobnaad, waana kun lix boqol shan iyo labaatanka Miilaadiga ah). Magaaladooda ugu caan san waxaa la oran jiray Shungwaayah. Ninka madaxda u ahna waxaa la oran jiray Mze Shaaghawambe Mkawmaa, caasimaddooduna waxay ahayd Shugwaayah, sharciyadooduna caan ayay ahaayeen. Caadada Al Kashuur waxay ahayd in markay abaareystaan oo gaajoodaan oo ay baahdaan inuu ninku gabadhiisa rahmo ama walaashiis ama haweentiisa oo uu wax la isla og yahay soo dhaafsado, dayntaasna ay ahaato muddoo la isla ogyahay oo ay markaas gabadha ama ghayrkeeda la rahmay ay soo noqoneyso. Hadduu daynta gudi waayana gabadhaasu waxay noqoneysa addoon la leeyahay oo ayan doodi ka imaan karin. Waxaaba dhici karta in gabadha ama haweenta kaloo la rahmay suuqa lagu gato haduu aabeheed ama walaalkeed ama ninkeedu daynsan yahay oo uusan daynta gudi karin. Ninku wuxuu haweenta u guursan jiray inay u adeegto ayadoo aan muddo la ogyahay ku xirnayn. Waagi horese ragga aan haysan waxay meher u bixiyaan waxay ku guursan jireen inay u adeegto toddoba sano. Al Kashuurtuna haddeer waxay isku guursadaan adeegga. Ninka qaba haween uusan meher siin oo uusan u hayn hadday gabar u dhasho oo ay qaan gaarto oo ay guursato meherkeeda waxaa qaadanaya aabaha dhalay gabadha hooyadeed, ama waxaa qaadanaya aabeheed hadduu hooyadeed hore meher u siiyey, siduu la isku waafaq sanyahay. Taasaa waxay ahaaneysaa oofin meherka lagu lahaa oo uu ku guursaday. Adeegga uu adeegayna waxay faaiido u noqoneysaa aabaha haweenta dhalay. Markuu ninku dhinto uuna hanti iyo haween ka tago ninka walaalkiis ayaa dhaxlaya haweenta, wiilkiisuna wuxuu dhaxlayaa hantida, sida la isku waafaq sanyahay. Xukunkoodu wuxuu ugu adag yahay tuugga oo tuuggu hadduu saddex goor wax xado waa dilayaan.

Al Kashuur

Al Kashuur waa laba iyo toban qabiil: (Kow)Mdbighu, (Laba) Mshamba, (Saddex) Mluughu, (Afar) Msiifii. Afartaasu wuu kuwa ka carary Shugwaayah marka hore markay arkeen inay Al Ghaylaanu ku cathaabayaan anwaac kala duwan oo cathaab ah. Waxayna u carareen cabsi ay ayagaas ka qabaan. Waxaa kaloo cabsi ay ka qabaan u cararay (Shan) Mghirayaamaa, (Lix) Mshuunii, (Toddoba) Mkamba, (Sideed) Mriibi, (Sagaal) Mjibaana, (Toban) Mtiita, (Kow iyo toban) Mkathiyaaru, (Laba iyo

toban) Mdaara. Laba iyo tobankaas dhammaantoodna waxay degganaayeen jiinka wabiga Jubba iyo hareerihiisa iyo dushiisaba tan iyo maalintuu Ilaahay Tacaalaa abuuray.

Hijrada Carabta ee Geeska Afrika ee Tubbac Al Ximyarii

Markaasey markay Carabtu ka timid Sancada Yaman ku taalla, waana qawmka boqorka Tubbac Al Ximyarii, taasoo ahayd zamanka jaahiliyada siduu tafsiirkiisa ugu xusay Qataadah ee Aayadda: **"Ahum khayrun ama qawmu Tubbacin"** ahna Aayadda toddoba iyo soddonaad ee Suuratu Al Dukhaan oo macneheedu yahay: "Ma ayagaa khayr badan ama qawmka Tubbac?" ayuu Qataadah wuxuu yiri: "Waa Tubbac Al Ximyarii", oo ciidammadiisa watay socdayna ilaa uu ka kharaabiyo oo burburiyo Al Xiirah (oo ku taalla Ciraaq), uuna ka dhisay Samarqand. Wuxuuna ka mid ahaa boqorrada Yaman. Abuu Xaatim wuxuu Al Rafaashii ka wariyay inuu yiri: "Wuxuu Abuu Kalb Ascadii Al Ximyarii ka mid ahaa Tubaabicada boqorrada Yaman, wuuna aaminay Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi wasallam, wuxuuna boqor ahaa konton sano sida ugu xusan kitaabka Sabaa'iku Al Th-thahabi. Aayaddu waxaa daliil u tahay inuu Tubbac Al Ximyarii noolaa zamanka Nabi Muuse Calayhissalaamu, waxaana u daliil ah Aayadda taas aan soo sheegnay oo Tubbac xusaysa ka horreysa oraneysana: **"Wa laqad najjaynaa Bani Israa'iila mina al cathaabi al muhiini**(30) **min Fircawna innahu kaana caaliyan mmina al musrifiina**(31) **wa laqad ikhtarnaahum calaa al caalamiina**(32)**."** Waana Aayadaha soddon ilaa laba iyo soddon ee Suuratu Al Dukhaan oo macnehoodu yahay: "Waxaan reer Bani Israa'iil ka badbaadinnay cathaab wax dulleeya(30)Waxaan ka korinnay Fircoon, wuxuuna ahaa mid isla weyn oo kuwa xad gudba ka mid ah(31)Banii Israa'iilna waxaan ka doorannay dadka waqtigooda joogay annagoo u cilmi leh(32)". Waxaana hubaal inaan doorannay macneheedu waxaa weeye "Waxaan doorannay Muuse iyo Banii Israa'iil." Waxayna degeen oo cammireen Muqdisho reer Tubbac, waana magaalada ugu horreysey oo ay degaan. Kaddibna waxay degeen Busaasah, oo asalkeedu Carab yahay, looguna bixiyey Busaasah ayadoo ay dadka degah ka yimaadeen Al Xijaaz, laguna khasbay inay dalkooda kasoo tagaan. Markaasey Kuniyada Makkah Al Mukarramah u bixiyeen, siduu shaacirku u yiri: "Busaasah hiya kuniyyatu Ummi Al Quraa samma bihaa ahla Al Xijaazi muqaaman" oo macneheedu yahay: "Busaasah waa kuniyada, waana koofaarta, Ummu Al Quraa, oo ah Makkah Al Mukarramah, waxaana ku magacaabay dadka Xijaaz ka yimid oo degay."

Tubbac Al Ximyarii wuxuu kaloo dhisay Kilwaa, kaddibna Patee iyo Siiwii, Aamu iyo Ghaamaa. Ghaamaa waxay ahayd magaalo ku taalla jaziirad u dhexeysa Kilifi iyo wabiga Taana, hadana waxaa la yiraahdaa Ghamiini. Waxayna ahaan jirtay jaziirad camiran oo dhsimaha guryeheedu adag yahay laguna adkeeyey dhagax iyo nuuriyad. Badda ayaana burburisay oo xoogaa xoogaa uga goosatay. Markaasey dadkeeda biyuhu ka go'een. Markaasey waxay u guureen Ozi. Markaasey guryeheedu badda galeen, haddana waxaa baddaas loo yaqaanna Badda Ghaamaa lehna hirar aad u waaweyn oo laga cabsado. Qofka doon saaranna hadday halkaas la timaaddo wuu arkayaa dhismaha guryaha darbiyadooda iyo darbiga ku wareegsanba. Markaasuu dhagaxdeeda halkaas ka gurtaa si uu ugu gato suuqyada Maliindi iyo Mambruy markay tahay waqtiga Al Artab oo ah markay socoto dabayshi munsuunka waqooyi/bari. Tubbac Al Ximyarii wuxuu doonayey wuxuu ahaa dahab. Markaasuu dahab qoday, wuxuuna helay wuxuu helay. Kaddibna Carabtu way faaftay oo kala tageen ayna degeen inta u dhexeysa Muqdisho iyo Mumbaasah, Markah iyo Baraawe. Markaasey markay Carabtu gaartay Jubba, ayna zunuujtu ka carareen ayay kuwaas carary waxay ku magacaabeen Kashuur oo macnihiisu yahay kan cararay. Kaddibna

Carabtu waxay ku dadaaleen la kulankooda, waxayna la kulmeen laba bilood kaddib. Markaasey u arra tireen ayna wax la bixiyo oo kala duwan siiyeen. Markaasey cabsiday qabeen ka tagtay ayna dhexdooda ka abuurantay xiriir wanaagsan. Markaasey zunuujtu Carabta jeclaadeen jeceyl aan ilaa haddeer ka tegin. Carabtuna markaas waxay ahaayeen gaalo oo axkaamta zunuujta kama ayan hor imaan. Kaddibna waxay Carbtu degtay inta u dhexeysa Jubba iyo Mumbaasah iyo Kisimaayo oo dadkeedu Masar ka yimid beled la yiraahdo Baanah, waana Baajuunta. Kaddibna Carabtu waxay degeen Faazah iyo Siiwi oo dadkeedu Cumaan ka yimaadeen. Waxaana halkaas ku yaalla gacan ilaa maantana ay ku taallo magaalo la yiraahdo Siiwi dadkeeduna yahay Banuu Sacd. Kaddibna waxay degeen Patee, waxaana degay dad ka yimid Al Shaam. Aamu waxaa degay dad ka yimdi Ciraaq, gaar ahaan Al Kuufah. Sidoo kale dadka dega Malindi waxay ayaguna ka yimaadeen Al Kuufah ee Ciraaq. Degmada Yuumbu ayaduna waa Carabiyad sababtuna tahay inay dadka deggani Yaman ka yimaadeen degmada Yuum ee Yaman ku taalla. Degmada Kilfii magaceedu waa magaca qabiil ku abtirsata Caamir bin Al Xaarith. Degmada Al Madhaafii waxaa degay dad ka yimid Al Dhaa'if. Dadka Mumbaasah degana waxay ka yimaadeen Al Xijaaz sidaan hore usoo sheegnay, qaarkoodna waxay ka yimaadeen Cumaan una dhasheen qabiilka Julandaanii, waana kuwa la yiraahdo sida qalad weyn ah kilindiini, ayagoo ah dhasha Julandu bin Karkarah oo ay ku abtirsadaan Julandaanii qabiil Cumaan degta oo ilaa haddeer jooga. Dadka Mumbaasah degah qaarkoodna waxay ka yimaadeen Yaman iyo Al Jawf, waana Al Taghmaa qabiil ka tirsan Mahrah ibnu Xaydaan, qofka ku abtirsadana la yiraahdo Al Taghmaawii oo khilaaf la'aan Carab ah. Al Jawf waxaa la yiraahdaa gobolka u dhexeeya Casiir iyo Sancaa' ee arliga Yaman, kumana gooni ah qabiil keligiis ee waa qabaa'il kala duwan. Degmada Dhiiwii waa Carabiyad asalkeedu, dadka degana waxay ka yimaadeen Dhiiwii iyo Fanj ee arliga Cumaan. Degmada Waasiin ayaduna waa Carabiyad asalka macneheeduna waa "kuwa tiiraanyeysan" ayadoo uu dadka dega Fanj ay halkaas dadka ku xabbisi jireen.

Markaasaa waxaa arligaas ka dhacay daacuun iyo cudurro kala duwan. Markaasaa waxaa kharaabay oo burburay magaalooyinka iyo tuulooyinka iyo degmooyinka qaarkood. Inta kalena ilaa maanta ayay jiraan. Carabtuna waxay degeen xeebta Badda Hindiga, waxayna badankoodu ku imaan jireen doonyo, qaar kalena barriga. Carabtuna waxay u imaan jireen sababta xarbiyada, kana imaan jireen xagga Sawaakin iyo Barbarah. Markaasay xiddiga Al Qudhb xagga koofureed usoo raacaan ayagoo dhabarradoodana xijinaya waqooyiga. Markaasey hoos ugu degayaan Muqdisho iyo ghayrkeedba. Caadada zinjigu waxay waayahaas ahayd inay muraadkooda ka dhammaystaan abaankooda, oo zinji walba wuxuu lahaa abaan zinji ah, oo abaanku waa ninka kan kale magan geliya oo uu geeskiisa magaalada ku daaqo. Markaasuu markuu nin Carab ahi magaalada zinjiga yimaado wuxuu ku hoos jirayaa magan gelyada iyo ilaalinta abaankiisa iyo qabiilka abaankiisa hadduu axad kale oo zinji ah wax la doono. Sidoo kalena Carabtu waxay zinjiga ka magan gelin jireen oo ka ilaalin jireen umuurta xarbiga iyo ghayrkoodba. Hadduu Carabku dayn ka qaato kashuurka, uuna ka maqnaado, zinjigu wuxuu ka qaadan jiray maalka nin kaloo Carab ah, uuna u sheegayaa: "hebel ina hebel ayaa halkaan joogay wuuna naga safray, waxaana lagu leeyahay intaas iyo intaas. Marka maalkaagaanu wuxuu ku xiran ninkaas. Marka ninka noo soo celi si aan maalka lagu leeyahay uga oofsanno, oo aan adiga sidaas kuula wadaagno."

Kitaabka Al Ilmaamu bi Akhbaari Man bi Ardi Al Xabashah min Muluuki Al Islaami

Kitaabka la yiraahdo **Al Ilmaamu bi Akhbaari Man bi Ardi Al Xabashah min Muluuki Al Islaami** waxaa allifay Abuu Al Cabbaas **Al Xusaynii** Al Cubaydii Axmad bin Calii bin Cabdu Al Qaadir ibnu Muxammad Taqiyyu Al Ddiini **Al Maqriizii**, taariikh yahanka arliga Masar, asalkiisuna uu yahay gobolka Bacalbak ee Lubnaan, looma nisbeeyey tuulada Al Maqaarizah, siduu Al Zereklee wariyay. Wuxuu ku dhashay, wax ku bartay kuna dhintay Al Qaahirah, arliga Masar, halkaasoo uu xilal badan oo diini ah ka qabtay, sida Imaamnimada, Khadhiibnimada iyo kuwo kaleba. Sanadka sideed boqol iyo toban wuxuu tegey Dimishiq isagoo uu la socdo wiilkiisa Al Naasir, halkaasoo loogu soo jeediyey inuu Qaallinnimada Dimishiq qabto, uuna diiday. Wuxuu noolaa inta u dhexeysa toddoba boqol iyo lix iyo toddobaatanka ilaa sideed boqol iyo shan iyo afartanka Hijriga ah, una dhigantah kun iyo saddex boqol iyo shan iyo lixdan ilaa kun iyo afar boqol iyo kow iyo afartan miilaadiga. Ilaa laba boqol oo kutub ayuuna allifay. Al Maqriizii waa dhashay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo ku abtirsada Al Xusayn bin Faadhimah, Sallaa Allaahu Calayhim Wasallam. Kitaabkaan waxaa lagu daabacay sanadka miiladiga ah ee kun iyo sideed boqol iyo shan iyo sagaashan madbacada Madhbacatu Al Ta'liif ee Al Qaahirah, arliga Masar, waana kitaab yar oo ka kooban toddoba iyo labaatan bog. Al Maqiizii wuxuu kitaabkaas ku yiri:

Warka dalka Zaylac

Arliga Zaylac dhererkiisu xagga barriga iyo baddaba waxaa loo kala socdaa laba bilood, ballaciisana in ka badan laba bilood. Dhulkeeda intiisa badanna waa saxra lama degaan ah. Inta la deggan yahayna dhererkeeda waxaa loo kala socdaa saddex iyo afartan maalmood, balleceedana afartan maalmood. Arliga Zaylac waxay u qaybsantahay toddoba boqortooyo, o kala ah: **(Kow)**Boqortooyada **Uufaat** oo dhererkeeeda shan iyo labaatan maalmood loo kala socdo, balleceedana labaatan maalmood, waana la wada deggan yahay, oo waxaa ku wada yaalla tuulooyin. Ascaartuna waa rakhiis, waxaana sidaas ii sheegay Al Shaykhu al mucammar al adiib al shaacir Shihaabu Al Diini Axmad bin Cabdu Al Khaaliq bin Muxammad Khalaf bin Muxammad Al Mujaasii Al Maghribii, midka dalmareenka ah, Allaha u naxariistee oo yiri: "Waxaan magaalada Uufaat ku arkay waaga la degganaa mooska oo lagu gadayo laantiiba rubuc Dirham, ayna ku yaalliin qiyaas boqol moos. Waxaanna arkay hilibka oo lagu gadayo daabiq walba ahna soddon rodol hal Dirham iyo nus. Boqorka Uufaat ayaa Zaylac xukuma. Dadka deggan intiisa badani waxay ku taagan yihiin math-habka shaaficiga. Zamankeennana waxaa ku batay math-habka Al Xanafiyyah. Dadkeeduna wuxuu ku hadlaa afka xaabshada, waxay kaloona ku hadlaan Carabiga. Boqortooyadaani waxay leedahay magaalooyin badan, boqorkeeduna wuxuu ku fariistaa kursi, wuxuuna daabadda fuulaa isagoo ay dad badani la socdaan muusikana lagu hortumayo. Waxay leeyihiin fawaakih iyo qasabka sokorta iyo dhir aan laga aqoon Masar iyo Shaam uuna ka mid yahay geed la yiraahdo Jaat oo aan miro dhalin, waxaana la cuna caleentiisa oo u eg caleenta geedka naarajiinta, Geedkaasu wuxuu badiyaa fahmada, waxaana marka la cuno lasoo xusuustaa waxyaalihi la halmaamay, waana la farxaa, wuxuuna yareeyey rabidda cunnada iyo gogol galka. Hurdaduna way yaraataa. Dadka baladkaan degganna aad ayay u jecel yihiin cunidda geedkaan, gaar ahaan culummada. Uufaat waxaa dahabka looga keenaa Daamuu iyo Suxaam oo ah laba meelood oo macdanta laga qodo oo arliga xabashada ku yaalla, waxayna wax ku kala gataan dahabka."

(Laba) Boqortooyada **Dawaaraa** oo dhererkeedu yahay shan maalin socod, ballaceeduna laba maalin socod. Dadkeedu waxay ku taagan yihiin math-habka Al Xanafiyyah. Lacagata ay wax ku kala gataanna waa lacag macdanta birta laga sameeyey, waxaana la yiraahdaa Xanukah, oo dhererkeedu la mid yahay cirbaddda ballaceeduna saddex cirbadood. Sacii waxaa lagu gataa shan kun oo xanukah, neefka ariga ahna saddex kun oo xanukah. Boqortooyadaan waxay daris la tahay Uufaat. **(Saddex)** Boqortooyada **Araabiinii**, oo dhererkeedu yahay afar maalmood ballaceeduna sidoo kale. Dadkeeduna waxay haystaan math-habka Al Xanafiyyah. Waxayna ku xigtaa Dawaaraa, dadkeeduna waa sidaa kuwaasoo kale xagga mucaamalada, waa wax kala gadashadee, iyo ghayrkeedba. **(Afar)** Boqortooyada **Hadyah**, oo dhererkeedu yahay sideed maalmood, ballaceeduna sagaal maalmood. Boqorkeeda ayaana dhammaantood ugu askar badan. Waxayna u labbistaan sida dadka Arabiinii, wax kala gadashaba ha ahaatee. Boqortooyadaan ayaa la keena ragga addoommada ah oo la dhufaanay oo arliga Masar looga yaqanno al dhawaashiyah oo midkoodba la yiraahdo dhawaashii. Boqorka amxaaradu wuxuu mamnuucay dhufaanidda addoomadda, si xoog leh ayuuna u diiday. Markaasey tuugadu waxay keenaan magaalada Washluu oo dadkeedu ay doqommo aan diin lahayn yihiin. Markaasaa halkaas addoommada lagu dhufaanaa, ayaadoo ayan magaalo kale oo arliga xabashada taas oggolayn. Markaasaa ragga la dhufaanay waxaa loo qaada boqortooyada Hadyah oo markaas mar kale mindi loo qaataa oo kaadi mareenka loo furaa ayadoo ay malaxi xirtay. Markaasaa la daaweeyaa ilaa ay ka bogsoodaan oo ay dhasha dadka deggan Hadyah sidaas baarri ugu noqdaan. Waxaana yar inta raggaas la dhufaanay ka noolaataa, ayadoo Hadyah loo soo qaado ayagoo aan la daaweyn. **(Shan)** Boqortooyada **Sharkhaa** oo dhererkeedu yahay sodoon maalmood, ballaceeduna afar maalmood. Dadkeeduna wuxuu haystaa math-habka Al Xanafiyyah. **(Lix)** Boqortooyada **Baalii**, oo dhererkeedu yahay labaatan maalmood, balleceeduna lix maalmood, ayadaana arliga Zaylac ugu barwaaqo badan. Waxayna wax ku kala gataan badeecado la is dhaafsado sida ariga iyo lo'da oo dhar la dhaafsado, iyo wax la mid ah. Dadkeeduna wuxuu haystaa math-habka Al Xanafiyyah. **(Toddoba)** Boqortooyada **Daarah**, oo dhererkeedu yahay saddex maalmood, balleceeduna saddex maalmood. Ayadaana ugu taag daran boqortooyinka ka jira arliga Zaylac. . Dadkeeduna wuxuu haystaa math-habka Al Xanafiyyah. Ayaguna waxay wax ku kala gataan badeecadaha. Dhammaan boqorrada boqortooyinkaan waxay Nuwaab (ku xigeen, wakiil) ka yihiin Al Xadhiyyu (oo ah boqorka amxaarada krishtaanka ah). Beledyadaan waxa daris la ah Naasic iyo Sawaakin iyo Dahlak oo dadkooduna waa muslimiin. Afafka ay dadka boqortooyinka Zaylac ku hadlaanna way kala duwan yihiin, waana ka badan yihiin konto af, o dhammaantoodna waxay wax ku dhigaan farta xabashada. Waxayna u dhigaan ayagoo midig ka bilaaba oo xagga bidix u socda (waana sida afka Carabiga oo kale). Fartaanna xuruufteedu waa lix iyo toban xaraf oo uu xaraf walba leeyahay toddoba farac oo ka baxa, o sidaasay wadarta xuruuftu waxay ku yihiin boqol iyo laba iyo toban xaraf, ayanna ku jirin xuruuf kale oo iskood u taagan, oo aan u baahnayn xaraf ka mid ah xuruufta lasoo sheegay, ayna isku xiraan xarakaat is haysta oo isku xiga oo aan ka go'nayn. Sidas ayuu ahaa siduu arligaani isugu xigo. Waxaana ka mid ah kuwo haray. Waxaana ka mid ah kuwo zuulay, kaddib markay zuushay dawladdi ayna dhalatay dawlad kale, taaso ah sunnada Ilahay ee ummadihii hore oo gudbay, una heli maysid sunnada Ilaahay beddelid, una heli maysid sunnada Ilaahay beddelaad.

Dawladda Awfaat/Jabarta/Harar iyo boqorkeeda Cumar Walashmac

Waana warinta dawladda ku dhisan la jihaadka krishtaanka amxaarada. Waxaad ogaataa inay dawladdaan ay dhiseen rag Quraysh ah, oo la yiri waxay u dhasheen Banii Cabdu Al Ddaar, lana yiri oo kale inay u dhasheen Banii Haashim, kana sii yihiin dhasha Caqiil bin Abii Dhaalib. Kooda ugu horreeyey wuxuu ka yimid Al Xjaaz waxayna degeen arliga Jabarah oo maanta loo yaqaanno Jabarta, kana mid ah arliga Zaylac. Halkaas ayay degeen oo ku xasileen, waxayna degeen magaalada Awfaat. Waxaana jamaaco ka mid ah lagu aqooday khayr, waxayna caan ku noqdeen suubanaan. Waxaana ka mid ahaa ninka la yiraahdo Cumar, waana midka la yiraahdo Walashmac (oo kaloo la yiri waa Wali Asma') oo uu al Xadhiyyu u xilsaaray magaalada Awfaat iyo tuulooyinka la xiriira. Markaasuu wuxuu xukumay muddo dheer, wuxuuna ku yeeshay xoog iyo itaal ciidammeed. Siiradiisuna waxay ahayd mid la mahdiyo ilaa uu ka dhinto. Wuxuuna ka tegey afar ama shan wiil oo uu dhalay oo Awfaat boqorro u wada noqday isaga dabadiis, oo uu mid walba kan kale dabadiis boqor noqday. Wiilashaasna waxaa ka mid ahaa Bazau iyo Xaqqu Al Ddiin Kan Koowaad, waxaana ugu dambeeyey Sabru Al Ddiini Muxammad bin Naxwii (ama Lakhwii) bin Mansuur bin Cumar Walashmac, oo Awfaat boqor u noqday qiyaas sanadka toddoba boqol ee Hijriga mudaduu xukunka hayeyna way dheereyd.

Barbara

Ibnu Saciid wuxuu yiri: "Magaalada Barabara waa magaalo madaxda Al Baraabir. Intooda badanna way islaameen, taas ayaana u sabab ah inaan ayagoo addoommo ah laga helin beledyada islaamka. (Al Baraabirah waana dadka maanta soomaalida la yiraahdo).

Muqdisho

Muqdisho waxay ku taalla Badda Hindiya, dadkeeduna waa muslimiin. Waxayna leedahay wabi weyn oo u eg wabiga Niil ee Masar, oo gu'ga biyihiisu bataan. Wuxuuna xusay inuu lasoo dhasho isagoo walaalkiis ah Niilka Masar, ayna kasoo baxaan bad yarada Kuuraa. Wuxuuna ku biyo shubaa Badda Hindiya meel aan Muqdisho ka fogayn, waxaana sidaas ku yiri Abuu Al Majd Al Muusilii kitaabka Maziili Al Irtiyaabi. Muqdisho waa magaalo weyn, una dhexeysa arliga amxaarada iyo kan zinjiga (oo ah dadka madmadow oo Afrika dega).
Waxaa intaas ku eg kitaabka Al Ilmaamu ee Al Maqriizii.

Juzka Shanaad

Islaamidda Ansaarta

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Waaa Calaa Aalihi Wa Sallam iyo Ansaarta Al Madiinah Al Munawwarah

Xadiithka Suwayd bin Saamit

Ibnu Isxaaq wxuu yiri: "Suwayd bin Saamit, akhuu Banii Camr bin Cawf ayaa wuxuu soo galay Makkah isagoo Xajka u socda iyo Cumraba. Suwaydna waxay dadkiisu ugu yeeri jireen "Al Kaamila" oo ah "Midka dhan", ayna ugu bixiyeen xooggiisa iyo

gabaygiisa iyo madaxtinnimadiisa iyo nasabkiisaba. Suwayd waa isla isaga sheegay inay isaga iyo nin u dhashay reer Banii Sulaym oo kasii ah reer Banii Zacbi bin Maalik isku qabsadeen boqol halaad oo geel ah. Markaasay waxay isula tageen kaahinad faaliyayaasha Carabta ka mid ah. Markaasey isaga u xukuntay. Markaasuu ka gaddoomay isagoo uu la socdo ninka reer Banii Sulaym, ayagoo ayan labadooda cid kale wehlin. Markay gaareen meeeshuu dariiqoodu ku kala leexanayo ayuu wuxuu ku yiri: "Maalkeyga i sii walaalkeyga reer Banii Sulaymow." Markaasuu wuxuu ugu jawaabay: "Waan kuu soo dhiibayaa." Markaasuu wuxuu ku yiri: "Yaa iga kaa siinaya haddaad ii soo dhiibi weydid oo kaa wakiil ah?" Wuxuu yiri: "Aniga." Wuxuu yiri: "Maya. Waxaan ku dhaartay Midkay Suwayd naftiisu Gacantiisa ku jirta inaadan iga tagayn jeer maalkeyga la i siiyo." Markaasuu inta qabtay dhulka ku legday, kaddibna uu xarig labada gacnood uga xiray, oo uu markaas arligiisa arliga reer Banii Camr bin Cawf la aaday. Sidaasuu agtiisa ugu xabbisnaa ilaa uu qabiilka reer Banii Sulaym usoo dhiibto xooluhuu lahaa.

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu imaatinkiisa Makkah ka war helay ayuu u yimid oo uu markaas Ilaahay iyo islaamka ugu yeeray. Markaasuu Suwayd wuxuu ku yiri: "Waxaa dhici karta inay waxaad hayso ay la mid yihiin waxaan hayo." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Wa maa allathii macaka?"** oo macnihiisu yahay: "Waana maxay waxaad haysid?" Wuxuu yiri: "Waa majallada, oo ah Xikmada Luqmaan." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Acridhaa calayya"** oo macnihiisu yahay: "Hadaba ii akhri." Markaasuu u akhriyay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Inna haathaa al kalaamu xasanun, wa allathii macii afdalu min haathaa: Quraanun anzalahu Allaahu calayya, huwa hudan wa nuurun".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Kani waa hadal fiican, midkaan anigu hayaase kan ka sarreeya, waana Quraan uu Ilahay igu soo dejiyay, oo ah hanuun iyo nuurba." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxu ku dul akhriyay Quraan, wuxuna ugu yeeray islaamka. Markaasuusan Suwayd ka fogaan oo diidin, wuxuuna yiri: "Kani waa hadal fiican." Kaddibna wuu ka tegey. Markasuu Al Madiinah tolkiis ugu yimid, in yar kaddibna waxaa dishay Al Khazraj. Markaasey ragga tolkiis waxay yiraahdeen: "Waxaan u aragnaa in la dilay isagoo muslim ah." Dilkiisuna wuxuu ahaa dagaalka la magac baxay Bucaath hortiis." Dagaalkaas ayaa lagu dilayna waa la wariyay.

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Suwayd magaciisu waa ina Al Ssalti bin Xawdh bin Xabib bin Cawf bin Camr bin Cawf bin Maalik bin Al Awsi. Hoyadiisna waa Laylaa bintu Camr Al Najjaariyyah, walaasha la dhalatay Salmaa bintu Camr bin Zayd bin Labiid bin Khidaash bin Caamir bin Ghanm bin Cadiyy bin Al Najjaar (Al Najjaar magaciisuna waaTaymu Allaahi bin Thaclabah bin Camr bin Al Khazraj), hooyada dhashay Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim (Awoowaha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam). Marka Suwaydkaan waxaa dhashay habaryarta Cabdu Al Mudh-dhalib. Gabdha Suwaydna waa hooyada dhashay Caatikah, walaasha la dhalatay Saciid bin Zayd bin Camr bin Nufayl una dhaxday Amiiru Al Mu'miniina Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee (uuna guursaday kaddib markuu ka dhintay Cabdu Allaahi bin Abuu Bakr Al Siddiiqu), oo sidaasuu Suwayd wuxuu ku yahay awooweheed hooyadeed la dhashay, hooyadeedna waxaa la yiraahdaa Zaynab, waxaana kaloo la yiri Jaalisah bintu Suwayd. Sidaasuuna u wariyay Al Zubayru ibnu Abii Bakr. Luqmaanna wuxuu ahaa Nuubi (Waana dadka madmadow oo Suudaan dega) degganaana Aylah (Waana magaalada maanta la yiraahdo Al Caqabah ee dalka Urdun ee Gacanka Al Caqabah ee Badda Cas ku taalla), magaciisuna waa **Luqmaan bin Canqaa'a bin Suruur**, sida loo wariyay. Wiilkiisa Quraanka lagu xusayna (Suuratu Luqmaan Aayadda saddex iyo tobnaad ilaa sagaal iyo toban) waxaa la yiraahdaa

Tha'raan, siduu u wariyay Al Zzajjaaju (Oo Tafsiirka leh) iyo ghayrkiisba. Luqmaan magaciisa si aan sidaas ahaynna waa loo sheegay, mana aha isagu Luqmaan bin Caad Al Ximyarii (ee Yamaneed)." Waa intaas warka Al Suhaylii.

Islaamidda Iyaas bin Mucaath iyo qisada Abii Al Xaysar

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markuu Abuu Al Xusayr Anas bin Raafic Makkah yimid isagoo ay la socdaan rag u dhashay reer Banii Cabdu Al Ash-hal (Kana mid ah Ansaarta Al Madiinah Al Munawwarah degah), uuna ka mid yahay Iyaas bin Mucaath, ayagoo doonaya inay Quraysh heshiis gaashaanbuureed la galaan oo qawmkooda Khazrajka ah ka dhan ah, ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, imaatinkooda iyo muradkoodaba maqlay. Markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid oo uu la fariistay, wuxuna ku yiri: **"Hal lakum fii khayri mimmaa ji'tum lahu?"** oo macnihiisu yahay: "Ma dooneysaan wax ka khayr badan waxaad u timaaddeen?" Markaasey waxay yiraahdeen: "Waana maxay?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Anaa Rasuulu Allaahi, bacathanii ilaa al cibaadi, adcuuhum ilaa an yacbuduu Allaaha waa laa yushrikuu bihi shay'an wa anzala calayya Al Kitaaba."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Anigu waxaan ahay Rasuulka Ilaahay, wuxuu ii soo diray addoommadiisa, anigoo ugu yeeraya inay Ilaahay caabudaan, ayanna shayna la wadaajin, wuxuuna korkayga kusoo dejiyay Kitaab." Kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam u sheegay islaamku wuxuu yahay, korkoodana wuxuu ku akhriyay Quraan. Markaasuu Iyaas bin Mucaath, oo ahaa wiil da' yar, wuxuu yiri: "Ragow, waAllaahi ka khayr badan waxaad daraadiis u timaaddeen." Markaasuu Abuu Al Xaysar Anas bin Raafic intuu dhulka cantoobo ciid ah kasoo qaaday uu Iyaas bin Mucaath wajiga uga dhuftay, uuna yiri: "Aamus oo na daa, oo Ilaahay ayaan ku dhaartaye waxaan tan ahayn ayaan u nimide." Markaasuu Iyaas aamusay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, agtooda ka kacay, ay ayaguna Al Madiinah u gaddoomeen. Waxaa markaas halkaas ka dhacay dagaalka Bucaath oo dhex maray Al Aws iyo Al Khazraj. In yar kaddibna Iyaas bin Mucaath wuu dhintay. Tolkiis waxay sheegeen inuu markuu dhimanayey ay ka maqli jireen isagoo leh laa ilaaha illaa Allaahu Tacaalaa iyo Allaahu Akbar iyo Al Xamdu liAllaahi iyo Subxaana Allaahi, uuna sidaas ku waday ilaa uu ka dhinto. Tolkiis shaki ugama jirin inuu dhintay isagoo muslin ah, oo wuxuu islaamka bartay fadhigaas , markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka maqlay wuxuu maqlay."

Rasuulka Ilaahy, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo rag Al Khazraj ah Al Caqabah kula kulmay

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markuu Ilaahay Cazza wa Jalla doonay inuu Diintiisa soo saaro oo muujiyo iyo inuu xoojiyo oo uu Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, libta siyo, una meel mariyo ballankuu ka qaaday, ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markay ahayd muusinka Xajka soo baxay, waana isla musinka uu kula kulmay kooxda ragga Ansaarta ah. Markaasuu naftiisa qabaa'ilka Carbeed u bandhigay, siduu muusin kasta yeeli jiray. Markaasuu Al Caqabah wuxuu kula kulmay rag Al Khazraj u dhashay oo uu Ilaahay khayr la doonay. Markaasuu wuxuu raggaas Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku yiri: **"Man antum?"** oo macnihiisu yahay: "Yaad tihiin?" Waxay yiraahdeen: "Rag Al Khazraj u dhashay." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Amin mawaalii yuhuud?"** oo macnihiisu yahay: "Ma waxaad tihiin kuwa yuhudda gaashaanbuursiga la leh?" Waxay yiraahdeen: "Haa." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Aflaa tajlisuuna**

ukallimukum?" oo macnihiisu yahay: "Maad fariisataan aan idinla hadlee?" Waxay yiraahdeen: "Waa yahay". Markaasey Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la fariisteen. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Ilaahay Cazza wa Jalla xaggiisa ugu yeray, wuxuuna usoo bandhigay islaamka, Quraanna wuu ku dul akhriyay. Waxyaaluhuu Ilahay ku mannaystay oo uu u suubiyay islaamiddooda waxaa ka mid ahaa inay beledkooda Al Madiinah Al Munawwarah yuhuudi la degganayd, kuwaasoo ahaa ehelu Kitaab, cilmina lahaa. Ayaga Al Khazrajna waxay ahaayeen gaalo asnaamta caabudda. Markaasey yuhuuddu beledkooda uga adkaadeen, o Al Khazraj ayaa gacanta sare lahaa. Markaasey hadday dhexdooda wax dhex maraan ayay yuhuuddu waxay yiraahdaan: "Hadda ayaa Nabi lasoo dirayaa oo zamankiisa ayaa nasoo hoosaasiyey. Markaasaan raaceynnaa oo aan markaas idin layneynnaa sida reer Caad iyo Iram loo laayey si la mid ah." Markaasey markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, raggaas la hadlay, uuna Ilaahay ugu yeeray ayay waxay qaarkood qaarka kale ku yirahdeen: "Ragow, waAllaahi waad ogtihiin inuu yahay Nabigay yuhuuddu idinku cabsiin jirtay oo ay ka digtay. Marka yeeyan idiinka hormarin." Markaasey wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam ugu yeeray ka yeeleen oo way rumeeyeen wuxuu usoo bandhigayna way ka aqbaleen oo islaamka ah, waxayna yiraahdeen: "Waxaan ka nimid tolkeen oo sharka iyo cadaawada dhexdooda taalla iyo qaybsanaantooda aan qawm kale dhex oollin. Marka waxaaba dhici karta inuu Ilaahay adiga ku kulmiyo oo ay isku yimaadaan. Marka ayagaas ayaan u tegeynnaa oo aan amarkaaga ugu yeereynnaa, adiguna aad markaas u bandhigeysaa waxaan aan annagu kaa yeelnay oo Diintaan ah. Hadduu Ilaahay agtaada isugu keenana nin kaa xoog badan ma jiro." Markaasey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka gaddoomeen oo ay beledkooda ku laabteen ayagoo mu'miniin ah oo rumeeyey."

Al Aws iyo Al Khazraj

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Ansaar hore looma oran jirin zamanka jaahiliyada, ee waxaa u bixiyey Ilaahay markay islaameen. Labadaas qabiilna waxaa la kala yiraahdaa reer Al Aws iyo reer Al Khazraj. Al Khazraj macnihiisu waxaa weeye oo la yiraahdaa dabaysha qabow oo koofur ka timaadda. Labada nin oo ay ku abtirsadaanna oo kala ah Aws iyo Khazraj waa walaalo wada dhashay oo isku hooyo iyo isku aabe ah, aabohoodna waxaa la yiraahdaa Xaarithah bin Thaclabah bin Camr Muzayqiyaa'a bin Caamir Maa'u Al Samaa'i bin Xaarithah Al Ghadhriif bin Imri'u Al Qays bin Thaclabah bin Maazin bin Al Azdii, oo uu laba qawl midkood yiri waana aabaha dhalay qabiilka Khuzaacah. Labadaas nin hooyadoodna waa Qaylah bintu Kaahil bin Cuthrah, waxayna u dhalatay qabiilka Qudaacah." Waa intaas warka Al Suhaylii.

Magacda Khazrajiinta Rasulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la kulmay

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxay ahaayeen, sida la ii wariyay, lix nin oo Khazraj u dhashay, kana sii ah reer Banii Al Najjaar, kana sii ah reer Banii Maalik bin Al Najjaar bin Thaclabah bin Camr bin Al Khazraj bin Xaarithah bin Camr bin Caamir, waxayna kala ahaayeen:

(Kow) Ascad bin Zuraarah bin Cudas bin Cubayd bin Thaclabah bin Ghanm bin Maalik bin Al Najjaar, kuniyadiisuna ay tahay **Abuu Umaamah**. Ascad bin Zuraarah wuxuu ka qayb galay Caqabada koowaad iyo Caqabada labaad, wuxuuna ahaa Naqiib, Madax ka mid ah laba iyo tobanka Naqiib, sidaan u arki doonno inshaa'aAllaahu. Ascad wuxuu dhintay sanadka koowaad ee Hijrada bisha Shawwaal Badar horteed oo bisha Ramadaan ahayd, ayadoo Masjidka la dhisayo, wuxuuna u dhintay cudurka la

yiraahdo Al Th-thubxah (oo laabta ku dhacda oo afka takhtarrada lagu yirahdo angina pectoris). Markuu bukooday ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gacantiisa ku gubay oo shiilo qabadsiiyey, siduu ibnu Al Athiir ugu wariyay Usudu Al Ghaabah.

(Labo) Cawf bin Al Xaarith bin Rufaacah bin Sawaad bin Maalik bin Ghanm bin Maalik bin Al Najjaar, loona yaqaan **Ibnu Cafraa'a** oo hooyadiis ah. Ibnu Sacad wuxuu yiri: "Hooyadiisna waa Cafraa'u bintu Cubayd bin Thaclabah bin Cubayd bin Thaclabah bin Ghanm. Wuxuu ka qayb galay Caqabada koowaad iyo Caqabada labaad, duullanka Badar, isaga iyo labadiisa walaal ee Mucaath iyo Mucawwith. Muxammad bin Isxaaqna wuxuu ku kordhiyay walaal saddexaad oo sidaasey afar walaalo ah Badar uga wada qayb galeen. Cawf bin Al Xaarith waxaa shahiidnimo loogu dilay Maalinta Badar, waxaana dilay Abuu Jahal bin Hishaam, kaddib markay isaga iyo walaalkiis Mucawwith Abuu Jahal ku dhufteen dhaawac ay la dhigeen oo ay fariisiyeen." Abuu Jahal waxaa dilay oo madaxa kasoo gooyey Cabdu Allaahi bin Mascuud, Allaha raalli ka noqdee, oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo hordhigay.

(Saddex) Raafuc bin Maalik bin Al Cajlaan bin Camr bin Caamir bin Zurayq oo u dhashay reer Banii Zurayq bin Caamir bin Zurayq bin Cabdu Xaarithah bin Maalik bin Ghadh bin Jusham bin Al Khazraj. Kuniyadiisuna waa Abaa Maalik, waxaana kaloo la yiri waa Abaa Rufaacah. Ibnu Athiir wuxuu Muusaa bin Cuqbah ka wariyay inuu ka qayb galay Badar, iyo inuu ka qayb galay Caqabada koowaad iyo Caqbada labaad wuxuuna ahaa Naqiib. Waxaana shahiidnimo loogu dilay Maalinta Uxud. Raafic wuxuu ahaa kan ugu horreeyey oo Al Madinah keena Suuratu Yuusuf.

(Afar) Qudhbatu bin Caamir bin Xadiidah bin Camr bin Ghanm bin Sawaad, oo u dhashay reer Banii Salimah bin Sacd bin Caliyyi bin Saaridah bin Taziid bin Al Khazraj, kana sii ah reer Banii Sawaad bin Ghanm bin Kacb bin Salimah. Wuxuu ka qayb galay Caqabada koowaad iyo Caqabada labaad, Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq iyo dhammaan duullimaadyada Rasuulka Ilaaay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Maalinta furashada Makkahna isagaa siday calanka reer Banii Salimah. Maalinta Uxud waxaa ku dhacay toddoba dhaawac isagoo labada saf dhexdooda ku sugnaaday, yirina: "Carari mayo jeer uu dhagaxaani cararo." Wuxuu dhintay khilaafada Cuthmaan Allaha labadoodaba u naxariistee.

(Shan) Cuqbah bin Caamir bin Naabii bin Zayd bin Xaraam, oo u dhashay rer Banii Xaraam bin Kacb bin Ghanm bin Kacb bin Salamah. Wuxuu ka qayb galay Caqabada koowaad iyo Badar iyo Uxud iyo duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo idil. Waxaa shahiidnimo loogu dilay Maalinta Al Yamaamah.

(Lix) Jaabir bin Cabdu Allaahi bin Ri'aab bin Al Nnucmaan bin Cubayd, oo u dhashay reer Banii Cubayd bin Cadiyy bin Ghanm bin Kacb bin Salamah. Wuxuu ka qayb galay Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq iyo dhammaan inta kale ee duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam.

Markaasey markay raggaasu Al Madiinah tolkood ugu yimaadeen ayay waxay uga warrameen Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxayna tolkooda ugu yeereen islaamka. Markaasuu islaamku dhexdooda ku faafay, oo uusan harin guri guryaha Ansaarta ka mid ah ee wa kan illaa inuu dhexdiisa ku jiro warka Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam."

Baycatu Al Caqabah Al Uulaa

Marka la gaaray sanadka kaas ku xigay ayaa waxaa Ansaarta kasoo xajjiyay laba iyo toban nin. Markaasey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Caqabah kula kulmeen, waana Al Caqabah Al Uulaa/Caqabada koowaad. Markaasey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, halkaas ku baayaceen, kulana baayactameen

"Baycatu Al Nisaa'i" "Baycada haweenka", oo ku xusan Aayadda laba iyo tobnaad ee Suuratu Al Mumtaxinah: **"Yaa ayyuhaa Al Nabiyyu ithaa jaa'aka al mu'minaatu yubaayicnaka calaa an llaa yushrikna biAlaahi shay'an walaa yasriqna walaa yazniina walaa yaqtulna awlaadahunna walaa ya'tiina bibuhtaanin yaftariinahu bayna aydiihinna wa arjulihinna walaa yacsiinaka fii macruufin fabaayichunna wa istaghfir lahunna innaa Allaaha Ghafuurun Rraxiimun."** Aayadda macnheheedu waxaa weeye: "Nabigaanow, markay kuu yimadaan haween mu'minaat ah kuguna baayacaan inayan Ilaahay shayna shariik uga yeeleyn, ayan wax xadayn, ayan zinaysanayn, ayan dhashooda dilayn, ayanna been abuur la imaanayn, oo ah inay ninkeeda usoo geliso cunug uusan isagu ka dhalin ayna tirahdo "adigaa dhalay", ayanna amarkaaga diidin, markaas la baayactan, oo ah la heshii, Ilaahayna dambi dhaafid u weydii oo Ilaahay waa Midka dambi dhaafidda iyo naxariista miiran ah."

Raggaas laba iyo tobanka ahi markaas ay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, baycada haweenka la gelayaan waxay ahayd ka hor intaan xarbi iyo jihaad korkooda lagu fardi yeelin. Laba iyo tobankaas nini waxay kala ahaayeen:

(Kow) Ascad bin Zuraarah bin Cudsa bin Cubayd bin Thaclabah bin Ghanm bin Maalik bin Al Nnajjaar, oo u dhashay reer Banii Al Nnajjaar, kana sii ah Banii Maalik bin Al Nnajjaar, kuniyadiisuna waa Abuu Umaamah. Kor ayaanna wax yar uga soo sheegnay taariikhdiisa.

(Labo) Cawf bin Al Xaarith bin Rifacah bin Sawaad bin Maalik bin Ghanm bin Maalik bin Al Nnajjaar, una dhashay reer Banii Al Nnajjaar, kana sii ah Banii Maalik bin Al Nnajjaar, hooyadiisna Cafraa'u bintu Cubayd bin Thaclabah bin Cubayd bin Thaclabah bon Ghanm. Wuxuu kaloo ka qayb galay Caqabada koowaad iyo tan labaad iyo Badar maalintaasoo shahiidnimo loo dilay, waxaana dilay Abuu Jahl, ciribna waa ka hartay; iyo walaalkii isaga la dhashay oo ah:

(Saddex) Mucaath bin Al Xaarith. Hooyadoodna waxaa la yiraahdaa Cafraa'a. Wuxuu isaguna ka wayb galay, sidaas walaalkiis, Badar. Kaddibna wuxuu ka qayb galay Uxud iyo Al Khandaq iyo duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo idil, siduu Usudu Al Ghaabah u wariyay.

(Afar) Raaficu bin Maalik bin Al Cajlaan bin Camr bin Caamir bin Zurayq, oo u dhashay reer Banii Zurayq bin Caamir. Isagana hore ayaan wax uga soo sheegna.

(Shan) Thakwaan bin Cabdi Qays bin Khaladah bin Mukhlid bin Caamir bin Zurayq, oo u dhashay reer Banii Zurayq bin Caamir. Usudu Al Ghaabah wuxuu yiri: "Koofaartiisuna waa Abaa Sabc, wuxuuna ka qayb galay Caqabada koowaad iyo Caqabada labaad. Kaddib markuu Al Madiinah ku soo laabtay wuxuu usoo noqday Makkah Al Mukarramah isagoo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, usoo haajiray, oo sidaasaa loo yiraahda "Ansaarii Muhaajirii" oo ah "Ansaarii soona Haajiray". Wuxuu ka qayb galay Badar waxaana shahiidnimo loo dilay Maalinta Uxud, waxaan dilay Abuu Al Xakam bin Al Akhnas bin Shariiq, markaasaa waxaa kusoo qaaday Calii bin Abii Dhaalib, isagoo faras saaran markaasu lugta seef uga dhuftay oo uu ka gooyey bawdada dhexdeeda. Kaddibna wuu dilay."

(Lix) Cubaadah bin Al Ssaamit bin Qays bin Asram bin Fihr bin Thaclabah bin Ghanm, oo u dhashay reer Banii Cawf bin Al Khazraj. Ibnu Al Athiir wuxuu yiri: "Wuxuu ka qayb galay Al Caqabah tan koowaad iyo Caqbada labaad, wuxuuna ahaa Naqiib. Wuxuu ka qayb galay Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq iyo duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo idil. Zamanka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ansaarta shan nin ayaa Quraanka wada xifthi sanayd: Mucaath bin Jabal iyo Cubaadah bin Al Ssaamit iyo Ubayyah bin Kacb iyo Abuu Ayyuub iyo Abuu Al Dardaa'. Cubaadah wuxuu Quraanka bari jiray Ahlu Al Suffaah, waana Asxaabta saboolka ahaa o Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, degganaa. Markii Shaam la furay Cumar bin Akl Khadh-dhaab ayaa wuxuu macallin

Quraan ahaan iyo qaalliba ugu diray Shaam. Wuxuu ku dhintay Falasdhiin sanadka afar iyo soddon ee Hijrada. Wuxuu ahaa nin dheer oo hilbo badan oo qurux badan (oo madow badan)." Muxammad Ridaa wuxuu kitabkiisa "Al Faaruuqu Cumar bin Khadh-dhaab" bogga laba boqol iyo afar iyo afartan iyo inta ka dambeysa ku wariyay inuu Cubaadah bin Al Ssaamit afhayeen iyo madax u ahaa tobanka nin oo uu Camr bin Al Caas u diray boqorka Masar oo kasoo dalbaday inuu u diro wafdi uu la xaajoodo si dagaalka lagu dhammayn lahaa markay muslimiintu hareereeyeen Qaahirah sanadka labaatanaad ee Hijrada, una dhigantah lix boqol iyo afartan Miilaadiga. Sidaasuu Boqorka Masar isu dhiibay, kuna oggolaaday inuu Jizyo bixiyo, uuna Dawladda Islaamka siiyo. Wada hadalka boqorka Masar iyo Cubaadah bin Al Ssaamit waxaa ku jira meelo qosol miiran ah kuna saabsan siduu boqorku ninkaan madow oo weyn uga baqay iyo warkuu Cubaadah ugu jawaabay. Cubaadah waxaa u dhaxday Ummu Xaraam bintu Milxaan bin Khaalid bin Zayd bin Xaraam bin Hundab bin Caamir bin Ghanm ibnu Cudaa bin Al Nnajaar Al Ansaariyyah Al Khazrajiyyah, waana habaryarta Anas bin Maalik oo ay dhashay Ummu Xaraam bintu Milxaan. Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu karaamayn jiray, gurigeeduuna ugu imaan jiray oo duhurka kaddib seexan jiray, ayadoo ahayd habaryartiis, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xagga nuugmada, wuxuuna ugu bishaareeyey in shahiidnimo lagu dilo doono: ayadoo ninkeeda Cubaadah jihaad kula jirtay furashada jaziirada Qubrus ayaa baqal ay saarnayd tuurtay oo ay qoorta ka jabtay oo dhimatay. Qabrigeedu Jaziiraddaas ayuu ku yaalla oo la yaqaannaa.

(Toddoba) Abuu Cabdu Al Rraxmaan Yaziid bin Thaclabah bin Khazmah bin Asram bin Camr bin Cammaarah, una dhashay reer Banii Ghusaynah min Baliyyi, xilfina la leh reer Banii Cawf bin Al Khazraj. Usudu Al Ghaabah wuxuu wariyay: "Wuxuu ka qayb galay Caqabada koowaad, Caqabada labaad iyo Badar iyo Uxud."

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waxaana reerkaan loo yiri Al Qawaaqila ayadoo hadday nin magan geliyaan ay fallaar siiyaan oo gacanta u geliyaan oo ay ku yiraahdaan: "Qawqil, oo ah meeshaad doonto Yathrib kala mar." Wuxuu kaloo ibnu Hishaam yiri: "Al Qawqalatu" waa nooc socodka ka mid ah."

(Sideed) Al Cabbaas bin Cubaadah bin Nadlah bin Maalik bin Al Cajlaan, oo u dhashay rer Banii Saalim bin Cawf bin Camr bin Al Khazraj, kana sii ah reer Al Cajlaan bin Zayd bin Ghanm bin Saalim. Usudu Al Ghaabah wuxuu wariyay: "Al Cabbas bin Cubaadah wuxuu ka qayb galay Caqabada koowaad, Caqabada labaad. Waxaa shahiidnimo loo dilay Maalinta Uxud."

(Sagaal) Cuqbah bin Caamir bin Naabii bin Zayd bin Xaraam, oo u dhashay reer Banii Salimah bin Sacd bin Caliyyi bin Asad bin Saaridah bin Taziid bin Jusham bin Al Kazraj, kana sii ah reer Banii Xaraam bin Kacb bin Ghanm bin Salimah. Hore ayaan taariikhdiisa wax uga soo sheegnay.

(Toban) Qudhbah bin Caamir bin Xadiidah bin Camr bin Ghanm bin Sawaad, oo u dhashay reer Banii Sawaad bin Ghanm bin Kacb bin Salimah. Hore ayaan isagana taariikhdiisa wax uga soo sheegnay.

(Kow iyo toban) Abuu Al Haytham bin Al Ttiyyihaanu oo magaciisu yahay Maalik, una dhashay reer Al Aws bin Xaarithah bin Thaclabah bin Camr bin Caamir, kana sii ah reer Banii Cabdu Al Ash-hal bin Jushum bin Al Xaarith bin Al Khazraj bin Camr bin Malik bin Al Aws.

Al Suhaylii wuxuu ku daray oo yiri: "Wuxuu la jiray oo la socday Calii oo uu goob jood ahaa Siffiin, halkaasoo lagu dilay, Allaha u naxariistee. Waxaan kaloo ka helay gabayga Cabdu Allaahi bin Rawaaxah inuu Abuu Al Haytham ku marti sooray gurigiisa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, oo ay la socdaan Abuu Bakar iyo Cumar oo uu markaas nayl u gawracay, uuna u keenay gacan timir qoyaan

ah." Waa intaas warka Al Suhaylii, qisaduna Siiraday nagu soo mari doontaa inshaa'aAllaahu.

Usudu Al Ghaabah wuxuu wariyay oo yiri: "Wuxuu ka qayb galay Caqabada koowaad iyo Caqabada labaad, wuxuuna ahaa Naqiibka reer Banii Cabdu Al Ash-hal isaga iyo Usayd bin Xudayr. Wuxuu ka qayb galay Badar iyo Uxud iyo dhammaan duullaannada Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Wuxuu ku dhintay Al Madiinah, Khilaafada Cumar sanadka labaatanaad ee Hijrada. Si kalena waa la yiri." Usudu Al Ghaabah markuu wariyay martisoorkiisa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ay la socdaan Abuu Bakar iyo Cumar, wuxuu yiri: "Kaddib markay cuneen oo ay biyo macaan cabbeen oo qabow, ayuu Nabigu, Sallaa Allaau Calayhi wasallam, wuxuu yiri: **"Haathaa wa Allathii nafsii bi Yadihi al nnaciimu allathii tus'aluuna canhu Yawma Al Qiyaamati: Thillun baaridun, wa rudhabun dhayyibun, wa maa'un baaridun."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaan ku dhaartay Midkay naftaydu Gacantiisa ku jirto waa kan nicmooyinka Maalinta Qiyaame la idin waydiin doono xaggooda: har qabow leh, timir qoyan oo fiican iyo biyo qabaw." Xadiithkana waxaa Al Istiicaabu ku wariyay ibnu Cabdu Al Baaru.

(laba iyo Toban) Cuwaym bin Saacidah, oo u dhashay reer Banii Camr bin Cawf bin Maalik bin Al Aws. Usudu Al Ghaabah wuxuu wariyay oo yiri: "Wuxuu ka qayb galay Caqabada koowaad iyo Caqabada labaad iyo Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq iyo duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, oo idil. Wuxuu dhintay khilaafada Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka wada noqdee."

Baycada/Heshiiska Al Caqabah

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Cubaadah bin Al Ssaamit waxaa laga wariyay inuu yiri: "Waxaan ka mid ahaa dadka Caqabada koowaad ka qayb galay oo goob joogga ahaa, waxaanna ahayn laba iyo toban nin. Markaasaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan ku baayacnay baycada haweenka, taasoo ahayd ka hor intaan xarbiga/jihaadka fardi laga dhigin. Baycadu waxay ahayd sidatan: (Kow) inaanan Ilaahay shayna shariikh uga yeelin, (Labo) inaanan wax xadin, (Saddex) inaanan zinaysan, (Afar) inaanan caruurteenna dilin (oo qabaa'il Carbeed ayaa diidi jiray inay gabdho dhalaan oo markay gabar u dhalato ayay ayadoo nool duugi jireen taasoo islaamku xaaraantimeeyey), (Shan) inaanan been abuurad la imaanin, (Lix) iyo inaanan amarkiisa Sallaa Allaahu Calayhi wasallam diidin. Markaasuu wuxuu Nabigu yiri: **"Fa in waffaytum fa lakum Al Jannah. Wa in ghashiitum min thaalika shay'an fa amrukum ilaa Allaahi Cazza wa Jalla in shaa'a cath-thaba wa in shaa'a ghafara."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Haddaad intaas oofisaan oo meel marisaan waxaad leedihiin oo aad geleysaan Jannada. Haddaad intaas wax ka mid ah khilaaftaanse oo waxaas la idinka reebay wax ka sameysaanse amarkiinnu Ilaahay Cazza wa Jalla ayuu jiraa oo siduu doono ayuu ka yeelayaa, oo hadduu doono qofka ku kacay wuu cathaabayaa, hadduu doonana wuu u dambi dhaafayaa."

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Cubaadah bin Al Ssaamit wuxuu yiri: "Habeenka Caqabada koowaad waxaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku baayacnay inaan Ilaahay Shariik u yeelin, aanan wax xadin, aanan caruurteenna dilin, aanan been aan abuurannay la imaan iyo inaanan amarkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam diidin. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu intaas kaddib yiri: **"Fa in wafaytum fa lakum Al Jannah, wa in ghashiitum min thaalika shay'an fa ukhithtum bi xaddihi fii al dunyaa fa huwa kaffaaratun lahu, wa in sutirtum calayhi ilaa Yawmi Al Qiyaamati fa amrukum ilaa Allaahi Cazza wa Jalla: in shaa'a cath-thaba wa in shaa'a ghafara."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Haddaad oofisaan waxaad leedihiin Jannada, haddaad intaas wax ka

khilaaftaan oo aad sameysaanna oo markaas addunka xadka la idiinka gooyo, oo ciqaabtiisa la idin mariyo weeye, taasaa kafaaro gud u ah (oo dambi la idiin dhigi mayo weeye). Haddiise dambigiinnaas ilaa Maalinta Qiyaame la idiin asturo, amarkiinnu markaas Ilaahay Cazza wa Jalla ayuu jiraa, o hadduu doono waa cathaabayaa, hadduu doonana waa dhaafayaa."

Muscab bin Cumayr iyo Wafdiga Al Caqabah

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasey markay raggaasu ka tageen ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku daray Muscab bin Cumayr bin Haashim bin Cabdu Manaaf bin Cabdu Al Ddaar bin Qusayy, uuna ku amray inuu Quraanka baro, uuna islaamka baro, Diintana si qoto dheer u baro, una garansiiyo. Taas ayaa u sabab ah in Muscab bin Cumayr lagu oran jiray Al Madiinah **Al Muqri'a** oo ah macallinka Quraanka. Muscab markuu Al Madinah yimid wuxuu ku degay Ascad bin Zuraarah bin Cudas oo kuniyadiisu Abuu Umaamah tahay. Muscab isagaa Salaadda wada tujin jiray ayadoo ay labada qabiil ee Al Aws iyo Al Khazraj mid walba kahaneysey inuu nin cidda kale ah imaam u noqdo.

Muscab bin Cumayr

Ibnu Al Athiir wuxuu Usudu Al Ghaabah ku yiri waxaa ka mid ah: "Muscab bin Cumayr wuxuu ka mid akhyaarta Saxaabada iyo kuwooda sarreeya, islaamkana ku horreeyey, wuxuuna islaamay intuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku jiray Daaru Al Arqam. Islaannimadiisana wuu qarinayey cabsi uu hooyadiis iyo tolkiis ka qabo daraadeed, o si sir ah ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu tegi jiray. Markaasaa waxaa arkay Cuthmaan bin Dhalxah Al Cabdarii, oo ay isku tol yihiin, isagoo tukana. Markaasuu hooyadiis iyo tolkiis u sheegay. Markaasay xabbiseen ilaa uu arliga xabashada uga haajiro. Arliga xabashada wuu kasoo laabtay oo Makkah ayuu kusoo noqday kaddibna wuxuu u haajiray Al Madiinah Caqabada koowaad kaddib, si uu dadka Quraanka u baro, Salaadana uu tujiyo. Isagaa ugu horreeyey mid Salaadda Jumcaha dadka isku keena Al Madiinah oo tujiya. Wuxuu ka qayb gala Badar iyo Uxud isagoo sida calanka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Waxaa shahiidnimo loogu dilay maalinta Uxud waxaana dilay ibnu Qami'ah Al Llaythii, isagoo markaas afartan sano jira. Waxaana la yiri isagay kusoo degatay Aayadda saddex iyo labaatanaad ee Suuratu Al Axzaabi**: "Mmina al mu'miniina rijaalun sadaquu maa caahaduu Allaaha calayhi faminhum mman qadaa naxbahu wa minhum mman yantathiru wa maa baddaluu tabdiilan."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Mu'mininta waxaa ka mid ah rag rumeeyey ballankay Ilaahay ka qaadeen oo oofiyey. Raggaas waxaa ka mid ah kuwo oofiyey oo ku shahiiday Badar iyo Uxud, waxaana ka mid ah kuwo kuwo sugaya inay oofiyaan, aanna cahdiga beddelin." Muscab wuxuu ka dhashay qoys hodan ahaa, markaasuu markuu islaamay la dayriyey oo uu sabool noqday. Maalintaas Uxudu lagu dilay wuxuu xirnaa qayd keli ah. Markaasuu markuu dhintay asxaabtu damceen inay kafan uga dhigaan, markaasey deeqi weyday oo ka yaraatay. Markaasey waxay u yimaadeen Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayna u sheegeen in hadday madaxa ka saaraanna ay luguhu qaawanaanayaan, hadday lugaha ka saaraanna uu madaxu qaawanaanayo. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Ghadh-dhuu ra'sahu wa ijcaluu calaa rijlayhi al ithkhara."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Madaxiisa ku daboola, lugihiisana waxaad ku dabooshaan caleemaha geedka la yiraahdo al ith-khar." Marka la dilay Muscab bin Cumayr ayaa waxaa soo dul istaagay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu

Calayhi Wasallam, isagoo wajigiisu ciidda ku jiro, markaasuu wuxuu yiri: **"Mmina al mu'miniina rijaalun sadaquu maa caahaduu Allaaha calayhi faminhum mman qadaa naxbahu wa minhum mman yantathiru wa maa baddaluu tabdiilan." Inna Rasuula Allaahi yash-hadu calaykum annakum shuhadaa'u cinda Allaahi Yawma Al Qiyaamati."** Thumma aqbala calaa al naasi faqaala: **"Ayyuhaaa al nnaasu, i'tuuhum fazuuruuhum, wa sallimuu calayhim. Fa waAllathii nafsii biyadihi, laa yusallimu calayhim axadun ilaa Yawmi al Qiyaamati illaa radduu calayhi al ssalaama."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: ""Mu'miniinta waxaa ka mid ah rag rumeeyey ballankay Ilaahay ka qaadeen oo oofiyey. Raggaas waxaa ka mid ah kuwo oofiyey oo ku shahiiday Badar iyo Uxud, waxaana ka mid ah kuwo kuwo sugaya inay oofiyaan, aanna cahdiga beddelin." Rasuulka Ilaahay wuxuu Ilaahay hortiisa markhaati idiin furayaa Maalinta Qiyaame inaad shuhada tihiin." Kaddibna dadkuu kusoo jeestay wuxuuna yiri: "Dadow, u imaada oo soo ziyaartay, salaamana, oo waxaan ku dhaartay Midkay naftaydu Gacantiisa ku jirto qofkii salaama ayaguna salaanta way usoo celinayaan oo salaamayaa, oo sidaasay ahaaneysaa ilaa Maalinta Qiyaame." Markaan intas ayaan uga baxaynnaa taariikhda Muscab bin Cumayr, Allaha u naxariistee.

Jumcaha ugu horreeyey oo Al Madiinah lagu tukaday

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Cabdu Allaahi bin Kacb bin Maalik wuxuu yiri: "Aabahay Kacb bin Maalik ayaan wadi jiray marku indha beelay. Markaasuu markaan Salaadda jumcaha u wado oo uu aathaanka maqlo ayuu wuxuu u Alle baryaa oo u duceeyaa Abuu Umaamah Ascad bin Zuraarah. Sidaas ayuuna mudoo yeeli jiray, oo markuu aathaanka jimcaha maqlo ayuu u duceeyaa oo uu dambi dhaafidna u weydiiyaa. Markaasaan waxaan is iri: "Ma garanayo sababtuu sidaas u yeelayo ee maan weydiiyo sababtuu markuu aathaanka jimcada u maqlo uu Abuu Umaamah Ascad bin Zuraarah ugu duceeyo?" Markaasaan maalin jimce ah soo waday sidaan yeeli jiray. Markaasuu markuu aathaanka jimcaha maqlay u duceeyey oo uu dambi dhaafid u baryay. Markaasaan waxaan ku yiri: "Aabow, maxaa u sabab ah in markaad aathaanka jimcaha maqashid aad Abuu Umaamah ugu ducaysid?" Wuxuu yiri: "Maandhow isagaa ugu horreeyey nin Al Madiinah isugu kaaya keena meesha la yiraahdo **Hazma al Nabiiti** ee xaafadda reer Banii Bayaadah, lana yiraahdo **Naqiicu al Khadimaati**." Waxaan iri: "Meeqaad markaas ahaydeen?" Wuxuu yiri: "Afartan nin." Xadiithkaan waxaa kaloo wariyay Abuu Daauud (tirsiga 1069).

Hazma al Nabiiti iyo Naqiicu al khadimaati

Dr. Muxmmad Ilyaas Cabdu Al Ghanii wuxuu kitabkiisa Al Masaajidu Al Athariyyah fii Al Madiinati Al Nabawiyyah ku yiri: "Al hazmu waa afka kuwa ka shaqeeya wax duleelinta iyo qodiidda godadka, waxayna ixtimaaleysaa inay tahay meesha lagu jebiyay qabiilka Al Nabiit ee Al Aws ka tirsan ayna jebisay Banii Bayaadah ee Al Khazraj ka tirsan, duullaanka Bucaath hortiis, oo sidaasaa bartaas sidaas loo yiqiinnay hazmi al Nabiiti… Naqiicu Al Khadamaati waa meel Al Madiinah u dhow oo uu Cumar Allaha raalli ka noqdee u gooyey fardaha muslimiinta, waana waadi ka mid ah waadiyada Xijaaz oo Al Madiinah kusoo biyo shuba…Waana tuulada reer Banii Bayaadah oo Al Madinah agteeda ah, oo hal mayl u jirta degmada reer Banii Salamah, waana taas muraadka Xadithkaani." Waa intaas warka Dr. Ilyaas Muxammad Cabdu Al Ghanii, Allaha dambigiisa dhaafee.

Islaamidda Sacd bin Mucaath iyo Usayd bin Xudayr

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Ascad bin Zurarah wuxuu soo waday Muscab bin Cumayr, lana soo aaday xagga degmada reer Banii Cabdu Al ash-hal iyo degmada reer Banii Thafar, oo dhaammaantood Al Madiinah ka tirsan maanta. Ninka la yiraahdo Sacad bin Mucaath bin Al Nucmaanu bin Imri'u Al Qays bin Zayd bin Cabdu Al Ash-hal waxaa dhashay habaryarta Ascad bin Zuraarah. Markaasuu Ascad bin Zuraarah wuxuu Muscab bin Cumayr lasoo galay beer ka mid ah beeraha reer Banii Thafar."
Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Ninkuu qabiilkaani ku abtirsado oo la yiraahdo Thafar magaciisu waa Kacb bin Al Xaarith bin Al Khazraj bin Camr bin Maalik bin Al Aws."
Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Beertaas waxaa ku yiillay dhexdeeda ceel la yiraahdo Bi'ru Maraq. Markaasey beertaas dhexdeeda fariisteen, waxaana agtooda isugu yimid rag hore u islaamay. Maalintaasna Sacad bin Mucaath iyo Usayd bin Xudayr ayaa ah madaxda tolkooda reer Banii Cabdu Al Ash-hal, labadooduna waa gaalo, waxayna ku taagan yihiin diinta gaalnimada ee tolkooda. Markaasey markay labadoodu maqleen inay Ascad bin Zuraarah iyo Muscab bin Cumayr beerta dhexdeeda fadhiyaan ayuu Sacad bin Mucaath wuxuu Usayd bin Xudayr ku yiri: "Aabe waaye, dhaqaaqoo labadas nin u tag, kuwaasoo degmadeenna u yimid inay kuweenna taagta daran lumiyaan. Marka canaano, kana reeb inay degmadeenna mar damce yimaadaan. Hadduusan Ascad bin Zuraarah ii ahaan lahayn waxaad ogsoontahay, anigaa kaaga filnaan lahaa, oo habaryartay ayaa dhashay oo kuma dhaco."

Islaamidda Usayd bin Xudayr

Markaasuu Usayd bin Xudayr wuxuu qaatay warankiisa, uuna xagga labadooda aaday. Markaasuu Ascad bin Zuraarah markuu arkay ayuu wuxuu Muscab bin Cumayr ku yiri: "Kani waa hoggaamiyaha tolkiis oo kuu yimid, ee xagga Ilaahay runta uga sheeg, oo si run ah ula hadal." Muscab wuxuu yiri: "Hadduu fariisto waan la hadlayaa." Markaasuu labadooda soo dul istaagay isagoo caraysan, wuxuuna yiri: "Maxaa noo kiin keenay labadiinnaan oo aad kuweenna taagta daran u baadiyeyneysaan! Haddaad naftiinna xaajo ka leedihiin naga taga." Markaasuu Muscab wuxuu ku yiri: "Ama fariiso oo na dhegeyso, oo haddaad waxaad maqasho raalli ku noqotidna qaado, haddaad kahatana waa lagaa deynayaa waxaad kahatay." Wuxuu yiri: "Waad garsoortay." Markaasuu intuu warinkiisa dhulka ku muday ayuu la fariistay. Markaasuu Muscab Islaamka uga warramay, Quraanna ku dul akhriyey. Markaasey labadoodu waxay yiraahdeen, sida la iiga wariyay: "WaAllaahi islaamka wajigiisa ayaan ka garannay intuusan hadlinba horteed, ayadoo uu wajigiisu nuuray, uuna dabcay." Kaddibna wuxuu yiri: "Fiicanaa hadaalkaanu oo qurxoonaa. Maxaad samaysaan markaad doontaan inaad Diintaan gashaan?" Waxay ku yiraahdeen: "Soo qubeyso oo soo weyso qaado, dharkaagana dhaq oo daahiri, kaddibna ku dhawaaq shahaadada xaqqa ah, kaddibna tuko." Markaasuu kacay oo uu qubaystay, uuna weyso qaatay, dharkiisana uu dhaqay oo daahiriyey, uuna shahaadada xaqqa ah ku dhawaaqay (Oo ah **ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa ash-hadu anna Muxammadan Rasuulu Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam**), kaddibna intuu istaagay uu laba rakcadood tukaday, kaddibna uu labadooda ku yiri: "Waxaa iga dambeeya nin hadduu idin raaco uusan tolkiis midna ka harayn. Haddaana idiin soo dirayaa, waana Sacad bin Mucaath."

Islaamidda Sacad bin Mucaath

Kaddibna wuxuu qaatay warankiisa wuxuuna u gaddoomay xagga Sacad bin Mucaath iyo tolkiis oo nadiyadooda fadhiya. Markaasuu markuu Sacad bin Mucaath arkay

isagoo soo socda ayuu wuxuu yiri: "Ilaahay ayaan ku dhaartaye Usayd wuxuu idiinla yimid waji aan ahayn midkuu idinkala tegey." Markaasuu markuu soo dul istaagay ayuu Sacad wuxuu ku yiri: "Maxaad soo sameysay?" Wuxuu yiri: "Labada nin waan la hadlay, oo waAllaahi inaanan wax xun ku arag, waana u sheegay inay naga haraan, waxayna yiraahdeen: "Waxaad jeceshahay ayaan yeeleynnaa." Waxaana la ii sheegay inay reer Banii Xaarithah usoo bexeen inay Ascad bin Zuraarah dilaan, ayna u yeelayaan inay ogaadeen inay habaryartaa dhashay, si ay cahdigaaga markaas u jebiyaan iyo magantaada." Markaasuu Sacad islam markiiba fadhiga ka kacay isagoo caraysan, kana baqaya inay dhacaan waxa reer Banii Xaarithah looga sheegay. Markaasuu waranka gacanta Usayd bin Xudayr kala baxay uuna ku yiri: "WaAllaahi uma jeedo inaad waxba tartay." Markaasuu xagga labadooda aaday. Markaasuu Sacad markuu arkay labadooda oo deggan ayuu wuxuu gartay inuu Usayd bin Xudayr ujeedadiisu ahayd inuu labadaan nin u yimaado oo uu dhegeysto waxay leeyihiin. Markaasuu isagoo caraysan soo dul istaagay. Markaasuu Ascad bin Zuraarah wuxuu ku yiri: "Abaa Umaamow, haddayan dhexdeenna jiri lahayn qaraabannimo, tan igama aadan hesheen, oo maxaad noogu imaaneysaa guryeheenna oo aad noogu keeneysaa waxaan kahanno?" Markuu xaggooda usoo socday ayuu Ascad bin Zuraarah wuxuu Muscab bin Cumayr ku yiri: "Muscabow, waAllaahi waxaa kuu yimid hoggaamiyaha uu tolkiis ka wada dambeeyo oo hadduu isagu ku raaco ayan labana tolkiis kaa harayn." Markaasuu Muscab wuxuu Sacad bin Mucaath ku yiri: ""Ama fariiso oo na dhegeyso, oo haddaad waxaad maqasho raalli ku noqotidna qaado, haddaad kahatana waa lagaa deynayaa waxaad kahatay." Wuxuu yiri: "Waad garsoortay." Markaasuu intuu warinkiisa dhulka ku muday ayuu la fariistay. Markaasuu Muscab Islaamka uga warramay, Quraanna ku dul akhriyey. Markaasey labadoodu waxay yiraahdeen, sida la iiga wariyay: "WaAllaahi islaamka wajigiisa ayaan ka garannay intuusan hadlinba horteed, ayadoo uu wajigiisu nuuray, uuna dabcay." Kaddibna wuxuu labadooda ku yiri: "Maxaad fashaan haddaad islaantaan oo aad Diintaan gashaan?" Waxay ku yiraahdeen: "Soo qubeyso oo soo weyso qaado, dharkaagana dhaq, kaddibna ku dhawaaq shahaadada xaqqa ah, kaddibna laba rakco tuko." Markaasuu kacay oo uu qubaystay, dharkiisana uu dhaqay, shahaadada xaqqa ahna ku ashahaatay, laba rakcana uu tukaday.

Islaamidda reer Bani Cabdu Ash-hal

Intaas kaddib warankiisuu qaatay wuxuuna soo aaday nadiga tolkiis isagoo uu la socdo Usayd bin Xudayr. Markaasuu ragga tolkiis markay arkeen isagoo xaggooda usoo socda ayay waxay yiraahdeen: "Ilaahay ayaan ku dhaarannaye ee Sacad wuxuu idiinla soo noqday waji ka duwan midkuu agtiinna kala tegay." Markaasuu markuu soo dul istaagay ayuu wuxuu yiri: "Reer Banii Cabdu Al Ash-halow! Sideebaad igu taqaanniin oo aan dhexdiinna ku ahay?" Waxay yiraahdeen: "Waxay tahay hoggaamiyeheenna iyo keenna noogu talo fiican iyo keenna noogu gallad badan madaxdeenna." Wuxuu yiri: "Hadaba hadalka raggiinna iyo haweenkiinnu waa iga xaaraan jeer aad rumaysaan Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Labadoodu waxay yiraahdeen: "WaAllaahi inayan degmada reer Banii Cabdu Al Ash-hal habeenkaas ku hoyan nin iyo haween aan muslin ahayn, oo way wada islaameen." Markaasey Ascad bin Zuraarah iyo Muscab bin Cumayr waxay usoo laabteen guriga Ascad bin Zuraarah. Sidaas ayuu Muscab gurigaas u degganaa isagoo dadka islaamka ugu yeeraya ilaa ayan ka harin daar daaraha ansaarta ka mid ah ee waa kan illaa ay ku jiraan rag iyo haween muslimiin ah, intaan ka ahayn degmada reer Banii Umayyah bin Zayd iyo Khadhmah iyo Waa'il iyo Waaqif, kuwaaso la isku yiraahdo Awsu Allaahi, kana dhashay Aws bin Xaarithah. Waxaana islaamid la'aantooda u sabab ahayd inuu ka mid ahaa ninka la yiraahdo Abuu Qays bin Al Aslat, magaciisuna yahay Sayfii bin Al Aslat, wuxuuna

ahaa gabayaagooda iyo madaxdooda ay maqlaan oo adeecaan. Markaasuu islaamka ka reebay. Sidaas ayayna ahaayeen ilaa uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah usoo haajiro, ayna ka gudbaan Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq."

Amarka Al Caqabah Al Thaaniyah/Caqbada labaad

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaas kaddib Muscab bin Cumayr wuxuu usoo laabtay Makkah, waxaana soo raacay oo Xajka usoo baxay muslimiinta Ansaarta ah oo soo raacay xujayda tolkooda oo gaalada ah. Markaasey markay Makkah yimaadeen Rasuulka Ilaahau, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kula ballameen Al Caqabah, maalinta dhexe ee saddexda maalmood ee Ayyaamu Al Tashriiqi (Oo macnohoodu yahay maalmaha hilbaha la warto oo la cuno) oo Ciidu Al Adxaa ku xigta, markuu Ilaahy la doonay wuxuu la doonay ee karaamadiisa ka midka ah iyo guusha Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo sare marinta islaamka iyo muslimiinta iyo dullaynta gaalnimada iyo gaalada."

Al Baraa'u bin Macruur iyo Saladdiisa xagga Kacbada

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Cabdu Allaahi bin Kacb bin Maalik wuxuu ka mid ahaa kuwa Ansaarta ugu cilmi badan, wuxuuna sheegay inuu aabihiis Kacb bin Maalik u wariyay, Kacabna wuxuu ka mid ahaa ragga ka qayb galay oo goob joogga ka ahaa heshiiska Al Caqabah oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku baayacay, wuxuuna yiri: "Waxaan isi soo wada raacnay xujayda tolkeen ee gaalada ah, annago hore u tukannay, Diintana sii fiican u garannay, uuna nala socdo Al Baraa'u bin Macruur, oo ah hoggaamiyeheenna iyo keenna noogu wayn. Markaasaan markaan safarkeenna galnay, oo aan Al Madiinah ka baxnay, ayuu Al Baraa'u bin Macruur nagu yiri: "Ragow, anigu waxaan is tusay talo oo waAllaahi ma ogi inaad igu raacaysaann iyo in kale." Waxaan niri: "Oo maxay tahay?" Wuxu yiri: "Waxaan u arkay inaanan Kacbada dhabrkeyga u jeedin oo aan ayada xaggeeda u tukado." Markaasaan waxaan ku niri: "WaAllaahi inayan nasoo gaarin waxaan ahayn inuu Nabigeennu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xagga Shaam u tukanayo waxaan ahayn, mana dooneynno inaan khilaafno." Wuxuu yiri: "Anigu ayadaan u takanayaa.". Markaasaan waxaan ku niri: "Annaguse sidaas yeeli maynno." Markaasey markay Salaaddu soo gasho ayaan annaguna waxaan u takannaa xagga Shaam, isaguna wuxuu u tukadaa xagga Kacbada. Sidaas ayayna ahayd ilaa aan Makkah ka nimaadno. Isagana waxaan ku ceebeyn jirnay wuxuu falay, wuuse diiday waxaan taas ahayn. Markaasaan markaan Makkah nimid ayuu wuxuu yiri: "Walaalow na keen aan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u tagnee, si aana uga wareysanno waxaan safarkeygaan soo sameeyey, oo waAllaahi nafteydey wax ka galeen, kaddib markaan arkay sidaan idiin khilaafay." Markaasaan baxnay annagoo dadka weydiineynna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, annagoo aanan aqoon, horena u arag. Markaasaan nin reer Makkah ah la kulannay oo aan xagga Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wareysannay. Markaasuu wuxuu yiri: "Ma taqaanniin?" Waxaan niri: "Maya." Wuxuu yiri: "Adeerkiis Al Cabbaas bin Cabdu Al Mudh-dhalib wa taqaanniin?" Waxaan niri: "Haa", oo Al Cabbaas waa niqiinnay isagoo ganacsato ayuu noo imaan jiray. Wuxuu yiri: "Markaas Masjidka gashaan waa ninka Al Cabbaas la fadhiya." Markaasaan masjidka galnay, waxaanna aragnay Al Cabbaas oo dhex fadhiya, Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu la fadhiyo. Markaasaan salaanay, aanna la fariisannay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Al Cabbaas ku yiri: **"Hal tacrifu haathayni al rajulayni yaa Abaa Al Fadl?"** Xadiithka

macnihiisu waxaa weeye: "Labadaan nin ma taqaanna Abaa Al Fadliyow, oo ahayd kuniyada Al Cabbaas?" Wuxuu yiri: "Haa. Kani waa Al Baraa'u bin Macruur, hoggaamiyaha tolkiis, kanna waa Kacb bin Maalik." WaAllaahi inaanan halmaamayn hadalka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu yiri oo ahaa **"Al Shaacir?"** oo ah "Gabayaagaa?" Wuxuu yiri: "Haa". Markaasuu Al Baraa'u bin Macruur wuxuu yiri: "Nabiga Ilaahayaow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, socdaalkeygaan ayaan soo galay ayadoo uu Ilaahay islaanka igu hanuuniyay. Markaasaan waxaan u arkay inaanan Gurigan dhabarkeyga xijin. Markaasaan xaggiisa usoo tukaday, asxaabteydana taas wey igu khilaafeen, taasoo qabligayga wax gelisay. Sideebaad hadaba u aragtaa Rasuulka Ilaahayow?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Qad kunta calaa Qiblatin, law sabarta calayhaa"**, oo macnihiisu yahay: "Waxaad lahayd Qiblo ee maxaad dusheeda ugu taagnaan weyday oo ugu sabri weyday?" Markaasuu Al Baraa'u dib ugu soo laabtay Qiblada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uuna xagga Shaam noola tukaday. Ehelkiisuna waxay leeyihiin inuu xagga Kacbada u tukanayey ilaa uu ka dhinto, mana ay aha siday leeyihiin, oo annagaa ayaga uga ogaan badan."

Islaamidda Cabdu Allaahi bin Camr bin Xaraam

Ibnu Isxaaq wuxu yiri: "Kacab bin Maalik wuxuu yiri: "Marakaasaan xajka u baxnay, waxaanna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam kula ballannay Al Caqabah maalinta u dhexeysa Ayyaamu Al Tashriiqi. Markaasaan markaan Xajka kasoo jeesannay ayna noqotay habeenkaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la ballannay, uuna nala socdo Cabdu Allaahi bin Camr bin Xaraam, Jaabir aabihiis, ahna madax madaxdeenna ka mid ah iyo hoggaamiye hoggamiyayaalkeenna ka mid ah, ayaan isagana soo wadannay, annagoo tolkeenna gaalada ah amarkeenna ka qarinaynna, isagana waxaan ku niri: "Abaa Jaabirow, waxaad ka mid tahay odayadeenna iyo madax ka mid ah madaxdeenna, annaguna waan ku jecelnahay oo ma dooneynno inaad berrito qoryaha Naarta lagu shido noqotid." Kaddibna islaamka ayaan ugu yeernay, waxaanna u sheegnay ballankeenna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aan Al Caqabah kula leenahay. Markaasuu islaamay, Al Caqabna uu nagala qayb galay. Wuxuuna ahaa Naqiib ka mid ah laba iyo tobanka nin oo uu tolkood habeenkaas Ansaarta ugu xil saaray."

Labada haween oo baycada ka qayb galay

Kacab bin Maalik wuxuu yiri: "Markaasaan habeenkaas dadkeenna degmadeenna kula hoyannay. Markaasuu markuu habeenka dalool gudbay ayaan degmadeenna uga soo baxnay ballankaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la lahayn, annago sida mukulaalaha aayar u siibaneynna oo dhuumaneynna. Markaasaan waxaan ku kulannay jiirta Al Caqabah annagoo saddex iyo toddobaatan nin ah. Waxaana nala socotay laba haween ah oo haweenkeenna ka mid ah oo kala ah Nusaybah bintu Kacab kuniyadeeduna tahay **Ummu Cumaarah**, oo ah Cumaarah hooyadiis oo u dhalatay reer Banii Maazin bin Al Nnajjaar iyo Asmaa'u bintu Camr bin Cadiyy bin Naabii, oo u dhalatay reer Banii Salamah **Ummu Maanic**, oo ah Maanic hooyadiis."
Al Suhaylii wuxuu yiri: "Ummu Cumaarah Nusaybah bintu Kacab, haweeneyda u dhaxda Zayd bin Caasim waxay ka qayb gashay Baycatu Al Caqabah iyo Baycatu Al Ridwaan iyo duullaanka Maalinta Al Yamaamah oo ay dagaalka si toos ah lafteedu uga qayb gashay, ayna la wadaagtay wiilkeeda Cabdu Allaahi dilidda Musaylimah. Maalintaas gacanta ayaa laga gooyey, waxaana ku dhacay laba iyo toban dhaawac. Markaas kaddib ayay waqti dheer nooleyd. Markaasey dadku bukaankooda u keeni

jireen, si ay bogsiimo ugu Alle barido. Markaasey gacanteeda qallalan inta mariso qofka buka ayay u duceysaa, waana yar yahay qof buka oo ay gacanteeda marisay oo aan bogsoon." Maxaa la ii wariyay inay Ummu Cumaarah Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku tiri: "Waxaan arkay in wax walba ragga la siiyey, haweenkana aan shayna la siin." Markaasuu Ilaahay Tacaalaa kasoo dejiyay Aayadda shan iyo soddonaad ee Suuratu Al Axzaabi: **"Inna al muslimiina wa al muslimaati, wa al mu'miniina wa al mu'minaati, wa al qaanitiina wa al qaanitaati, wa al ssadiqiina wa al ssadiqaati, wa al ssaabiriina wa al ssaabiraati, wa al khaashiciina wa al khaashicaati, wa al mutasaddiqiina wa al mutasaddiqaati, wa al ssaa'imiina wa al ssaa'imaati, wa al xaafithiina furujahum wa al xaafithaati, wa al th-thaakiriina Allaaha kathiiran wa al th-thaakiraati acadda lahum mmaghfiratan wa ajran cathiiman."** Aayadda macnheedu waxaa weeye: "Ragga muslimiinta ah iyo haweenka muslimaatka ah, iyo ragga mu'miniinta ah iyo haweenka mu'minaatka ah, iyo ragga Ilaahay adeeca iyo haweenka Ilaahay adeeca, iyo ragga runlowyaalka ah iyo haweenka runlowyaalka ah, iyo ragga sabra iyo haweenka sabra, iyo ragga Ilaahay isku jejebiya iyo haweenka Ilaahay isku jejebiya, iyo ragga wax sadaqaysta iyo haweenka wax sadaqaysta, iyo ragga sooma iyo haweenka sooma, iyo ragga farjiyadooda dhawra iyo haweenka dhawra, iyo ragga in badan Ilaahay xusa iyo haweenka Ilaahay in badan xusa, intaasoo idilba wuxuu Ilaahay u diyaariyay dambi dhaafid iyo ajar wayn." Waa intaas warka Al Suhaylii.

Al Cabbaas iyo Ansaarta

Kacab bin Maalik wuxuu yiri: "Markaasaan jiirta isugu nimid annagoo dhawraynna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aanna sugaynnay ilaa uu nooga yimaado isagoo uu la socdo Al Cabbaas bin Cabdu Al Mudha-dhalib, isagoo maalintaas diinta tolkiis ku taagan, jecleystayse inuu goob joog ka ahaado amarka wiilka walaalkiis, uuna xarig adag u xiro, waa ballan iyo cahdiyee. Markaasuu markuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam fariistay, kan ugu horreeya oo hadla wuxuu ahaa Al Cabbaas bin Cabdu Al Mudh-dhalib, wuxuuna yiri: "Ragga Khazrajow -ayadoo ay Carabtu Ansaarta ugu yeeri jirtay Al Khazraj, ha ahaadaan Al Khazraj ama Al Awse-Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu agteenna ka yahay waad ogsoon tihiin, annagaana ka celinnay tolkeen oo ah kuwo ka qaba aragtidaan ka qabno oo kale, oo isku diinta nahay. Marka, isagu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu haystaa difaaca tolkiis oo aan loo soo dhaafi karin iyo difaaca uu ku haysto beledkiisa. Isaguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu diiday waxaan ahayn inuu adinka idinku soo wareego, idinkuna soo biro. Marka haddaad u aragtaan inaad u oofineysaan waxaad ugu yeerateen, aadna ka difaaceysaan kuwa khilaafa, taasi adinkay idin jirtaa iyo xilka aad qaadeen oo aad xambaarteen. Haddaadse u aragtaan inaad cadawgiisa u dhiibeysaan oo gacanta u gelineysaan oo aad garabkiisa ka baxaysaan kaddib markuu idiin yimid, hadaba iska daaya, isagoo hadda cizzi ku haysta oo aan laga adkaan karin tolkiisa dhexdiisa iyo beledkiisaba." Markaasaan waxaan niri: "Waan maqalnay waxaad tiri, marka Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hadal, una shardi naftaada iyo Rabbigaaba waxaad jeceshahay."

Cahdiga Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi wasallam, oo ay Ansaartu qaadeen iyo Qoraalka Heshiiska Caqabada Labaad

Kacab bin Maalik wuxuu yiri: "Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hadlay, Quraanna uu akhriyay, Ilaahay ayuuna dadka ugu yeeray, islaamkana ku boorriyay, kaddibna wuxuu yiri: **"Ubaayicukum calaa an tamnacuunii**

mimmaa tamnacuuna nisaa'akaum wa abnaa'akum." Xadiithka macnihiisu waxaa weey: "Waxaan idin kula heshiinayaa inaad iga daafacdaan waxaad ka daafacdaan haweenkiinna iyo caruurtiinna." Markaasuu Al Baraa'u bin Macruur gacantiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam qabtay, kaddibna uu yiri: "Haa, waxaan ku dhaartay Midka runta kula soo diray, waxaan kaa daafacaynnaa waxaan ka daafacno haweenkeenna. Marka Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, nagula heshii, oo waAllaahi waxaan nahay rag xarbiga yaqaanna iyo hubkaba oo uu facba faca ka horreeyey ka dhaxlay." Markaasaa isagoo Al Baraa'u weli Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la hadlayo, ayaa waxaa hadalka kasoo dhex galay Abuu Al Haytham bin Al Tayyihaan oo yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, annaga iyo ragga waxaa naga dhexeeya heshiisyo, waana goyneynnaa heshiisyadaas -waana yuhuudda Al Madiinah la deggan-. Marka haddaan sidaas yeelno, oo uu Ilaahay libta ku siiyo ma dhici kartaa inaad tolkaa u laabatid oo aad annaga naga tagtid?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ilko caddeeyey, kaddibna uu yiri: **"Bal al ddamu al ddamu wa al hadmu al hadmu. Anaa minkum wa antum minni. Uxaaribu man xaarabtum wa usaalimu man saalamtum."** Xadiithka oo Axmad wariyay macnihiisu waxaa weey: "Dhiigeygu waa dhiiggiinna oo macneheedu yahay inay Carabtu oran jirtay markay heshiis gasho: "Dhigaygu waa dhiigginna, dhiiggaad qiimo tirtaanna aniguna waan qiimo tirayaa." Anigu anikaan idinka mid ahay, adinkuna anigaad iga mid tihiin. Ciddaad la dagaallantaanna waan la dagaallamayaa, ciddaad nabad gelisaanna aniguna waan nabad gelinaya."

Laba iyo tobanka Naqiib/Madax

Kacab bin Maalik wuxuu yiri: "Markaas kaddib ayuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Akhrijuu ilayya minkum ithnatay cashra naqiiban, li yakuunuu calaa qawmihim bimaa fiihim."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Dhexdiina iiga soo saara laba iyo toban nin oo madax ah oo arrimaha tolkood u xilsaaran."

Magacda laba iyo tobanka Naqiib

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Al Khazraj waxaa ka mid ahaa:
(Kow) Abuu Umaamah Ascad bin Zuraarah bin Cudas bin Cubayd bin Thaclabah bin Ghanm bin Maalik bin Al Nnajjaar, oo ah Taymu Allaah bin Thaclabah Camr bin Al Khazraj (bin Xaarithah), hore ayaanna wax uga soo sheegnay.
(labo) Sacad bin Al Rabiic bin Camr bin Abii Zuhayr bin Maalik bin Imri'u Al Qays bin Maalik bi Thaclabah bin kacab bin Al Khazraj bin Al Xaarith bin Al Khazraj. Usudu Al Ghaabah wuxuu yiri: "Wuxuu ka qayb galay Al Caqabada koowaad iyo tan labaad iyo Badar, wuxuuna ahaa Naqiib, waxaana shahidnimo loo dilay Maalinta Uxud. Jaahiliyadana wuxuu ahaa kaatib wax dhiga oo akhriya." Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Maalinta Uxud ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Man rajulun yanthuru lii ilaa maa facala Sacadu bin Al Rabiic? Afii al axyaa'i huwa am fii al amwaati?"** oo macnihiisu yahay: "Ninkeebaa ii soo fiirinaya wuxuu falay Sacad bin Al Rabiic? Ma inta nool ayuu ka mid yahay mase inta dhimatay?" Markaasuu nin wuxuu yiri: "Anigaa kuu soo fiirinaya Rasuulka Ilaahayow." Markaasuu tegey oo uu maydka ku dhex wareegay, markaasuu Sacad oo weli naftu ku jirto helay, wuxuna ku yiri: "Waxaan ka mid ahay inta dhimatay. Marka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, salaan iga gaarsii, waxaadna ku tiraahdaa: "Sacad ibn Al Rrabiic wuxuu ku leeyahay: "Ilaahay ha kaaga abaal mariyo tan ugu khayr badan oo uu

Nabi ummaaddisa ka abaal mariyay". Tolkaana waxaad iga gaarsiisaa salaan waxaadna ku tiraahdaa: "Sacad ibn Al Rrabiic wuxuu idin leeyahay: "Cudur daar ma lihidin Ilaahay agtiisa in Nabigiinna lasoo gaaro adinkoo weli indho qoyan leh (Oo maalintaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa dhool laga jebiyay, wajigiisana dhaawac gaaray oo dhiig ka yimid)." Kaddibna isagoo ninku weli la taagan yahay ayuu dhintay."

(Saddex) Cabdu Allaahi bin Rawaaxah bin Thaclabah Imri'u Al Qays bin Camr bin Imri'u Al Qays bin Maalik (Al Aghar) bin Thaclabah bin Kacb bin Al Khazraj bin Al Xaarith bin Al Khazraj. Wuxuu ahaa gabayaaga Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Wuxuu ka qayb galay Al Caqabah, wuxuuna ahaa Naqiib, iyo Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq iyo Al Xudaybiyyah iyo Khaybar iyo Cumratu Al Qadaa' iyo duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calyhi Wasallam, oo idil. Wuxuu ahaa nin ka mid ah saddex amiir ee duullaanka Mu'tah (ee dalak Urdun), halkaasoo shahiidnimo loogu dilay bisha Jamaadu Al Uulaa ee sanadka sideedaad ee Hijrada, Allaha u naxariistee, darajadiisana kor u qaadee. Isagoo masjidka dibaddiisa fadhiya ayuu wuxuu maqlay Nabigoo, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, masjidka gudhiisa ku jira oo amraya in la fariisto. Markaasuu meeshiisii fariistay, halkaasna uu fadhiyay ilaa uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, khudbadiisa dhammaysto. Markaasuu markuu wuxuu falay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gaaray wuxuu ku yiri: **"Zaadaka Allaahu xirsan calaa dhawaaciyati Allaahi wa dhawaaciyati Rasuulihi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Allaha kuu kordhiyo dadaalkaaga adeecidda Ilaahay yo adeecidda Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam."

(Afar) Raafic bin Maalik bin Al Cajlaan bin Camr bin Caamir bin Zurayq bin Cabdu Xaarithah bin Maalik bin Ghadb bin Jusham bin Al Khazraj. Taariikhdiisa hore ayaan wax uga soo sheegnay.

(shan) Al Baraa'u binMacruur bin Sakhr bin Khansaa' bin Sinaan bin Cubayd bin Cadiyyi bin Ghanm bin Kacb bin Salamah bin Sacad bin Caliyyi bin Asad bin Saaridah bin Taziid bin Jusham bin Al Khazraj. Wuxuu ka dardaarmay dalool maalkiisa, wuxuuna dhintay bilowga islaamka cahdiga Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo safar ku jira bil ka hor hijrada uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah ugu soo haajiray. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah yimid uu qabrigiisa tegey isagoo ay asxaabtiisu la socdaan oo afar takbiir kula tukaday. Wuxuu ku dardaarmay in marka la duugayo Kacbada loo jeediyo, taasoo la yeelay. Warkaanna waxaan kasoo qaadannay Usudu Al Ghaabah.

(Lix) Cabdu Allaahi bin Camr bin Xaraam binThaclabah bin Xaraam bin Thaclabah bin Xaraam bin Kacb bin Ghanm bin Kacab bin Salamah bin Sacad bin Caliyyi bin Asad bin Saaridah bin Taziid bin Jusham bin Al Khazraj. Wuxuu ka qayb galay oo kale Badar, wuxuuna ahaa Naqib. Maalinta Uxud ayaa shahiidnimo loo dilay. Cabdu Allaahi waa Jaabir aabihiis, qisadiisuna waxay nago soo mari doontaa, inshaa'aAllaahu Siirada, gaar ahaan Maalinta Uxud, wuxuuna leeyahay siiro qiimo badan. Allow u naxariis Jaabir aabihiis Cabdu Allaahi bin Camr bin Xaraam.

(Toddoba) Cubaadah bin Al Ssaamit bin Qays bin Asram bin Fihr bin Thaclabah bin Ghanm bin Saalim bin Cawf bin Camr bin Cawf bin Cawf bin Al Khazraj. Siiradiisa waxbaan kasoo sheegnay, Allaha u naxariistee.

(Sideed) Sacad bin Cubaadah bin Dulaym bin Xaarithah bin Abii Khuzaymah bin Thaclabah bin Dhariif bin Al Khazraj bin Saacidah bin Kacb bin Al Khazraj. Kuniyadiisuna siduu u sheegay Usudu Al Ghaabah waa Abaa Thaabit. Wuxuu kaloo ka qayb galay Badar. Wuxuu ahaa nin madax ah oo deeqsi ah, isagaana duullaan walba sidi jiray calanka Ansaarta, wuxuuna maalin walba u keeni jiray Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xeero hilib iyo cuno ka buuxdo, uuna ugu geyn jiray meeshuu hadba joogo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Usudu Al Ghaabah wuxuu

Sacad wiilkiisa Qays bin Sacad ka wariyay inuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa gurigeenna nagu soo booqday, markaasuu wuxuu yiri: **"Al Ssalaamu calaykum wa raxmatu Allaahi."** Markaasuu Sacad cod hooseeya isaguna ku salaamay. Markaasaan waxaan (aabahay) ku iri: "Maad u oggolaaatid Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, inuu guriga soo galo?" Wuxuu yiri: "Daa salaanta (waa ducee) ha nagu badiyee." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Al Ssalaamu."** Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu gaddoomay, Sacadna wuu daba galay, wuxuuna ku yiri: "Rasuulka Ilaahayow, salaantaada waan maqlayey waanna kuugu jawaabayay si hooseysa si aad salaamiddeenna u badisid. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi wasallam, lasoo noqday. Markaasuu Sacad wuxuu amar ku bixiyey in Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qubays loo diyaariyo, markaasuuna qubaystay. Kaddibna wuxuu siiyey maro culus oo zacfaraan ama waras dhirta la yiraahdo lagu midabeeyey, oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, huwaday, kaddibna uu labadiisa gacnood kor u qaaday isagoo leh: **"Allaahumma ijcal salawaatuka wa raxmatika calaa aali Sacad bin Cubaadah"**, oo macnihiisu yahay: "Ilaahayow, dambi dhaafiddaada iyo naxariistaada yeel qoyska Sacad bin Cubaadah korkooda." Marka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la oofsaday ayaa Sacad waxaa damac ka galay inuu Khaliif noqdo, uuna doonay in la baayaco. Umase ayan ahaan. Kaddib wuxuu u guuray Shaam, degmada Xawraan halkaaso uu ku dhintay sanadka shan iyo tobnaad. Allow u naxariis Sacad bin Cubaadah, saaxiibka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

(sagaal) Al Munthir bin Camr bin Khunays bin Xaarithah bin Lawthaan bin Cabdi Wadd bin Zayd bin Thaclabah bin Al Khazraj bin Saacidah bin Kacb bin Al Khazraj. Ibnu Hishaamna wuxuu yiri: "Waxaa la yiraahdaa ibnu Khunaysh."

Wuxuu ka qayb galay oo kale Badar iyo Uxud, wuxuuna ahaa Naqiib. Waxaana shahiidnimo loo dilay Maalinta Bi'ru Macuunah, oo ka dambeysey qiyaas afar bilood duullaanka Uxud, ahaydna bilowga sanadka afaraad ee Hijrada. Ciribna kama harin. Sidaas ayuu yiri Usudu Al Ghaabah. Allow u naxariiso shahiidka Bi'ru Macuunah, saaxiibka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Munthir bin Camr.

Saddexda Naqiib ee Al Aws

(Toban) Usayd bin Xudayr bin Simaak bin Catiik bin Raafic bin Imri'u Al Qays bin Zayd bin Cabdu Al Ash-hal bin Jusham bin Al Xaarith bin Al Khazraj bin Camr bin Maalik bin Al Aws bin Xaarithah. Kuniyadiisuna waa Abaa Yaxyaa. Waa la isku khilaafsan yahay, ayuu Usudu Al Ghaabah yiri, inuu ka qayb galay Badar iyo in kale. Wuxuuna ka qayb galay duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo idil iyo furashada Cumar ee Baytu Al Maqdis. Usudu Al Ghaabah wuxuu ibnu Casaakir ka wariyay Usayd bin Xuday, oo ka mid ahaa kuwa dadka ugu cod qurxoon markuu Quraanka akhrinayo, inuu yiri: "Habeen ayaan Suuratu Al Baqarah akhriyay, ayadoo uu faras aan leeyahay xiran yahay, wiilkeyga Yaxyaana uu agteeda jiifo isagoo kuray ah. Markaasuu farasku diday. Markaasaan istaagay anigoo aan wax kale danayneyn waxaan wiilkeyga ahayn. Markaasaan akhrinta sii waday. Markaasuu farasku diday. Markasaan istaagay anigoo aan wax kale danayneyn waxaan wiilkeyga ahayn. Markaasaan akhrinta sii waday. Markaasuu farasku diday. Markaasaan madxayga kor u qaaday, waxaanna arkay wax u eg daruur oo ama dallad oo kale oo masaabiix ku dhex jirta oo Samada kasoo socda. Markaan cabsaday. Markaaaan aamusay. Markaasaan markaan waabariistay u tegey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aanna wixii dhacay u sheegay. Markaasuu wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Iqra' yaa Abaa Yaxyaa"** oo macnihiisu yahay: "Akhri

Quraanka Yaxye aabihiisow." Markaasaan waxaan iri: "Waan akhriyay. Markaasuu farasku diday. Markaasaan istaagay anigoo aan wax kale danayneyn waxaan wiilkeyga ahayn. Markaasuu wuxuu igu yiri Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam: **"Iqra' yaa Abaa Yaxyaa"** oo macnihiisu yahay: "Akhri Quraanka Yaxye aabihiisow." Markaasaan waxaan iri: "Waan akhriyay. Markaasuu farasku diday." . Markaasuu wuxuu igu yiri Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam: **"Iqra' yaa Abaa Yaxyaa"** oo macnihiisu yahay: "Akhri Quraanka Yaxye aabihiisow." Markaasaan waxaan iri: "Waan akhriyay. Markaasaan madxayga kor u qaaday, waxaanna arkay wax u eg daruur oo ama dallad oo kale oo masaabiix ku dhex jirta oo Samada kasoo socda. Markaasaan cabsaday. Markaasuu wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Tilka al malaa'ikatu danuu li sawtika, wa law qara'ta xattaa tusbixa la asbaxa al naasu yanthuruuna ilayhim."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaas aad aragtay waxay ahaayeen malaa'ig una soo dhowaatay quruxsamida codkaaga daraadiis. Haddaadna sii wadi lahayd akhrinta Quraanka ilaa uu waagu ka baryana, dadkaa wuxuu waabariisan lahaa ayagoo malaa'igtaas u jeeda." Usayd bin Xudayr wuxuu dhintay sanadka labaatanaad ee Hijrada, waxaana nacashkiisa qaaday Cumar bin Al Khadh-dhaab oo xabaalaha Al Baqiic ku duugay. Wuxuu u dardaarmay Cumar, kanoo ogaaday in lagu leeyahay afar kun oo Diinaar oo dayn ah. Markaasuu geed timireedkiisa afar sano oo isku xigta gadayey uuna ka helay afar kun oo Diinaar oo uu daynta uga guday. Allow u naxariis Usayd bin Xudayr, saaxiibka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

(kow iyo toban) Sacad bin Khaythamah bin Al Xaarith bin Maalik bin Kacb bin Al Nnaxxaadh bin Kacb bin Xaarithah bin Ghanm bin Al Ssalam bin Imri'u Al qays bin Thaclabah bin Camr bin Cawf bin Maalik bin Al Aws bin Xaarithah. Wuxuu kaloo ka qayb galay Badar, halkaasoo shahiidnimo loogu dilay. Ciribna kama harin. Waxaa la sheegay inuu Rasuulka Ilaaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu hijrada Al Madiinah soo galay uu ku degay guriga Sacad bin Khaythamah. Waxaa kaloo la yiri: bal wuxuu kusoo degay guriga Kulthuum bin Al Hidm, dadkana wuxuu u fariisan jiray guriga Sacad, o doob ahaa, oo la oran jiray guriga doobabka. Allow u naxariiso Sacad bin Khaythamah, saaxiibka Nabi Muxammad, sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

(Labo iyo Toban) Rifaacah bin Cabdu Al Munthir bin Zubayr bin Zayd bin Umayyah bin Zayd bin Maalik bin Cawf bin Camr bin Cawf bin Maalik bin Al Aws. Wuxuu ka qayb galay Badar. Allo u naxariiso Rifaach bin Cabdu Al Munthir, saaxiibka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Xilka laba ito tobanka Naqiib

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu laba iyo tobankaas Naqiib ku yiri: **"Antum calaa qawmikum bimaa fiihim kufalaa'u ka kafaalati al Xawwaariyyiina li Ciisaa ibna Maryama, wa anaa kafiilun calaa qawmii** -yacnii al muslimiina." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaad kafiil u tihiin, waa damiine, oo aad u xilsaarantihiin, waxa tolkiin loo xilsaaray, si la mid ah siday Xawaariyiintu Ciise in Maryama kafiil uga ahaayeen oo xilka uga qaadeen. Aniguna waxaan kafiil u ahay dadkeyga -oo ah muslimiinta oo idil." Waxay yiraahdeen: "Waa yahay."

Al Cabbaas bin Cubaadah wuxuu Al Khazraj ku yiri heshiiska hortiis

Ibnu Isxaaw wuxuu yiri: "Markuu raggu isugu yimid inay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, heshiis la galaan, ayuu Al Cabbaas bin Cubaadah bin Nadlah Al Ansaariyu akhuu Banii Saalim bin Cawf wuxuu yiri: "Ragga Al Khazrajow, ma ogsoontihiin waxaad ninkaan, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kula

heshiineysaan?" Waxay yiraahdeen: "Haa." Wuxuu yiri: "Waxaad kula heshiineysaan, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la dagaallanka dadka kuwooda cad iyo kuwooda madawba. Marka haddaad u aragtaan in marka xoolihiinna dhibaato la gaarsiiyo, madaxdiinana la dilo aad cadawgiisa gacanta u gelineysaa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,, taasoo idiin noqoneysa hoogid adduun iyo mid Aakhiraba, haddeerba iska daaya. Haddaadse u aragtaan inaad heshiiska u oofineysaan iyo waxaad ugu yeerateenba in kastoo xoolihiina ay dhibaato gaarto, madaxdiinana la laayo, taasoo waAllaahi idiin ah sharaf adduun iyo mid Aakhiraba, qaata Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Waxay yiraahdeen: "Waxaan ku qaadaneynnaa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam musiiba ku dhacda xoolaha iyo dilidda madaxdaba. Hadaba haddaan sidaas yeelno oo oofinno maxaan annaguna leennahay Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam?" Wuxuu Sallaa Allaahu calayhi Wasallam yiri: **"Al Jannah"** oo ah "Jannada." Waxay yiraahdeen: "Soo fidi gacantaada." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gacantiisa u fidiyey, markaasey heshiiskaas ku gacan qaadeen, nin nin oo ay heshiiska la galeen. Caamir bin Cumar bin Qataadah wuxuu yiri: "Al Cabbaas warkaas uma oran waxaan ahayn inuu xarigga heshiiska Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu korkooda ugu sii adkeeyo mooyee." Cabdu Allaahi bin Abii Bakarse wuxuu yiri: "Al Cabbaas warkaas uma uusan oran waxaan ahayn inuu heshiiska habeenkaas dib uga dhigo, isagoo ka rajo qaba inuu kasoo qayb galo Cabdu Allaahi bin Ubayya bin Saluul, oo uu heshiisku sidaas ugu noqdo mid ayaga dantooda xoojiya." Ilaahay ayaana u cilmi leh midday ahayd."

Saxaabiga ugu horreeyey oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gacanta geliya

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Reer Banii Al Nnajjaar waxay leeyihiin inuu Abuu Umaamah Ascad bin Zuraarah ahaa kan ugu horreeyey oo gacantiisa gacanta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, geliya. Reer Banii Cabdu Al Ash-halna waxay leeyihiin inuu ahaa Abuu Al Haytham bin Al Tiyyihaan. Kacb bin Maalikna wuxuu yiri: "Kan ugu horreeyey oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gacan qaada wuxuu ahaa Al Baraa'u bin Macruur, kaddibna ragga intiisa kale ayaa baayacay."

Shaydaanka iyo heshiiska Al Caqabah

Kacab bin Maalik wuxuu yiri: "Markaan kasoo jeesannay heshiiska Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayuu shaydaanku wuxuu kula qayliyay jiirta dusheeda codka ugu dheer oo aan weligayba maqlay, wuxuuna yiri: "Dadka degmooyinka Mina degganow, ogaada inuu Muthammam (uuna ka wado Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Qurayshna waxay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu yeeri jirtay Muthammam oo ay ku caayi jireen. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu oran jiray: **"Alaa tacjabuuna limaa yasrifu Allaahu cannii athaa Qurayshin, yasubbuuna wa yahjuuna Muthammaman, wa anaa Muxammadun"** oo macnihiisu yahay: "Soo lama yaabtaan siduu Ilaahay dhibka Quraysh iiga duway? Waxay caayayaan oo ay habaarayaan nin la yiraahdo Muthammam, aniguna waxaan ahay Muxammad." Muthammam macnihiisu waxaa weeye "Kan la eedeeyo oo dulliga ah", Muxammadna waa "Kan lagu xamdiyo oo la wada mahdiyo.") iyo kuwa diintooda ka leexday oo la jira ay xarbigiinna ku heshiiyeen." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Haathaa Azabbu Al Caqabah, haathaa ibnu Azbab"**, oo macnihiisu yahay: "Kani waa shaydaanka la yiraahdo Azabbu Al Caqabah, waana midkuu dhalay Azbab."

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Ibnu Azyab, istamic ay caduwwa Allaahi, amaa wa Allaahi la afrighanna laka"**, oo macnihiisu yahay: "Wa Ibnu Azyab ee i dhegeyso cadawga Ilaahayow, oo waAllaahi waan kuu soo jeesanayaa." Waxaana Xadiithka wariyay Axmad.
Al Suhaylii wuxu yiri: "Abuu Al Ash-hab wuxuu Al Xasan ka wariyay inuu yiri: "Marka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Mina heshiiska lagula galay, ayuu shaydaanku qayliyey. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Haathaa Abuu Lubaynaa, qad anthara bikum, fa tafarraquu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Kani waa Lubaynaa aabeheed, oo dadka xaalkiinna uga digay ee kala taga." Lubaynaa waa gabarta magaceedu yahay Lubnaa oo la yareeyey, waana gabadha uu Ibliis dhalay."

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo aan Ansaarta xarbi u oggolaan

Kacab bin Maalik wuxuu yiri: "Markaas kaddib ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Irfadduu ilaa rixaalikum"**, oo macnihiisu yahay: "Degmooyinka dib ugu laabta." Markaasuu Al Cabbaas bin Cubaadah bin Nadlah wuxuu ku yiri: "Waxaan ku dhaartay Midka runta kugu soo diraye, haddaad doontid haddeer ayaan dadka Mina deggan berrito seefeheenna kula waabariisaneynnaa, oo aan la dagaallameynnaa weeye." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Lam nu'mar bi thalika, wa laakin irjacuu ilaa rixaalikum."** Xadiithka macnihiisu waxaa weey: "Taas nalama farin, laakiin degmooyinkiinna ku laabta." Markaasaan gogosheennii ku laabannay oo aan hurudnay ilaa aan ka waabariisanno."

Doodda Quraysh iyo Ansaarta ee heshiiska

Kacb bin Maalik wuxuu yiri: Markaan waabariisannay ayaa waxaa aroortii noo yimid madaxda Quraysh, oo degmooyinkeenna noogu yimid, waxayna yirahdeen: "Ragga Khazrajow, waxaa nasoo gaartay inaad u timaaddeen saaxiibkeennaan (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) si aad dhexdeenna ugala baxdaan oo aad kula heshiiseen xarbigeenna. Waxaan ku dhaarannay Ilaahay inuusan jirin qabiil Carbeed oo aan ka neceb nahay inuu xarbi na dhex maro anaga iyo ayaga oo aan adinka ahayn." Markaasaa waxaa la hadlay gaalada tolkeen oo ugu dhaartay inayan waxaas wax ka jirin, ayanna kaba warqabin. Runta ayayna sheegeen oo waxba kama ayan ogayn. Annaguna qaarkeenba wuxuu fiiriyaa qaarka kale. Markaasey raggu fadhiga ka kaceen, uuna ka mid yahay Al Xaarith bin Hishaam bin Al Mughiirah Al Makhzuumii oo xiran laba kabood oo cusub. Markaasaan eray ku iri, sida anigoo doonaya inaan ragga la qabo waxay yiraahdeen. Markaasuu nin raggeenna ka mid ihi wuxuu yiri: "Jaabir aabihiisow, miyaad kari wayday inaad yeelato, adigoo oday odayadeenna ka mid ah, laba kabood oo la mid ah kabaha ninkaan dhallinyarada ah ee Quraysh?" Markaasuu Al Xaarith warkaas maqlay. Markaasuu intuu kabaha soo siibay ayuu aniga ii soo tuuray, wuxuuna yiri: "WaAllaahi inaad gashaneysid." Markaasuu Abuu Jaabir wuxuu yiri: "Aayar, oo waAllaahi waad ka careysiisay ninka dhallinta yar ee labadiisa kabood u celi." Waxaan iri: "Mayoo waAllaahi inaanan u celinayn, oo waAllaahi waa yididiilo ama odorosid suuban, oo hadday run tahay anigaa ninkaan furan doona (waana marka dagaal la isaga horyimaado oo qofka laga adkaado oo la dilo wixiisoo idil laga qaato, gaadiid iyo hub iyo dhar iyo maalba)."
Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasey waxay u yimaadeen Cabdu Allaahi bin Ubayya bin Saluul, oo ay ku yiraahdeen hadalkii Kacab oo kale. Markaasuu wuxuu yiri: "Kani

waa arrin wayn, mana ayan ahayn inuu tolkay arrin goosto ayagoo aan ila tashan, mana ogi inay hore u sameeyeen." Markasey kala tageen.

Quraysh oo Ansaarta raad raacday iyo qafaalidda Sacad

Markaasey dadku Mina ka guureen. Markaasey reer Makkah warka heshiiska si qoto dheer u baareen, waxaana u sugnaatay in heshiisku dhacay oo la guntay. Markaasey Ansaarta raad raaceen oo daba galeen waxayna uga daba tageen Sacad bin Cubaadah iyo Al Munthir bin Camr akhaa Banii Saacidah bin Kacb bin Al Kjazraj meesha la yiraahdo **Athaakhir**. Labadoodaasna waxay ahaayeen Naqiib. Qurayshi way gaari weyday Al Munthir oo wuu ka baxsaday, Sacadse way qabteen oo gacantay ku dhigeen. Markaasey waxay labadiisa gancood ku xireen xarigga ratigiisa oo ay markaas qoortiisa kula xireen, soona wadeen oo ay sidaas Makkah kusoo geliyeen, ayagoo garaacaya oo ka jiidaya guudka timihiisa, wuuna timo badnaa.

Sii daynta Sacad bin Cubaadah

Sacad bin Cubaadah wuxuu yiri: "Anigoo waAllaahi gacnohooda ku jira ayaa waxaa igu soo baxay koox rag Quraysh ah, uuna ka mid yahay nin qurxoon oo cad o dheer oo nin macaan ah. Markaasaan waxaan is iri: "Hadduu raggaan mid khayr leh ku jiro hadaba waa ninkaan." Markaasuu markuu ii soo dhowaaday ayuu inta gacantiisa kor u qaaday ayuu si xoog leh feer iigu dhiftay. Markaasaan waxaan is iri: "WaAllaahi inuusan ragga midkaan dabadiis khayri ku jirin." WaAllaahi anigoo gacantooda ku jira oo ay i jiidayaan ayuu nin ka mid ahi ii beer jilcay, uuna yiri: "War maxaad leedahay! Miyuusan adiga iyo nin Quraysh ahi wax heshiis ah idinka dhexeyn iyo wax magan gelyo ah?" Waxaan iri: "Haa, oo waAllaahi waxaan magan gelin jiray safarka ganacsi ee Jubayr bin Mudhcim bin Cadiyy bin Nawfal bin Cabdu Manaaf, oo aan beledkeyga ka celin jiray cidda dulmi la dooneysa. Sidoo kale waxaan u magan gelin jiray safarka ganacsi ee Al Xaarith bin Xarb bin Umayyah bin Cabdu Shams bin Cabdi Manaaf." Wuxuu yiri: "War maxaad leedahay!Labadaas nin magacdooda ku dhawaaq, xusna waxa idinka dhexeeya." Markaasaan sidaas yeelay. Markaasuu ninkasu labadaas raadiyay, wuxuuna ka helay Masjidka dhexdiisa, Kacbada agteeda, wuxuuna ku yiri: "Nin reer Al Khazraj ah oo hadda waadiga Makkah lagu garaacayo ayaa labadiinna magac ku dhawaaqaya." Waxay labadoodu yiraahdeen: "Waana kee?" Wuxuu yiri: "Sacad bin Cubaadah." Waxay yiraahdeen: "WaAllaahi run ayuu sheegay oo wuxuu magan gelin jiray safarkeenna ganacsi, oo uu ka difaaci jiray in beledkiisa lagu dulmiyo." Markaasey soo keceen oo ay yimaadeen meesha lagu garaacayey oo ay Sacad gacnohooda kuwa haystay kala baxeen. Markaasuu Sacad iska tegey oo uu dalkiisa ku laabtay. Ninka Sacad feerayna wuxuu ahaa Suhayl bin Camr akhuu Banii Caamir bin Lu'ayy." Al Siirah Al Xalabiyyah waxay warisay inuu ninkaas u beer jilcay ahaa Abuu Al Bakhtarii bin Hishaam oo gaalnimo ku dhintay (Fiiri mujalladka labaad, bogga sagaal iyo tobnaad)."

Athaakhir

Caatiq bin Ghayth Al Balaadii wuxuu yiri: "Ath-khar waa geed la yaqaanno oo Makkah ka baxa magaciisa, athaakhirna waa geedahaasoo badan. Athaakhir waa buur Makkah ku taalla oo kusoo uga foorarta xagga waqooyi waadiga **Al Abdhax** dhanka sare **Al Mucallaah** ka tirsan. Waadigaasu wuxuu maraa Al Munxanaa ilaa Al Xajuun (Oo ah buurta ay salkeeda ku yaallaan xabaalaha Makkah oo ay Ummu Al Mu'miniina

Khadiijah ku dugan tahay) . Waadigaas waxaa ku xiga midka la yiirahdo **Al Badh'xaa'u** oo ah kan mara inta u dhexeysa Al Xajuun iyo Al Masjidu Al Xaraamu. Wadada halkaas martana waxaa la yiraahdaa Shaaricu Al Abdhax, waana dariiqa ay xujaydu qaadaan markay Masjidu Al Xaraamu ka yimaadaan oo ay Mina u socdaan. Waxaa buurtaas Athaakhir ku yaalla jiir loo yaqaanno **Thaniyyatu Athaakhir**, caammaduna u taqaanno **Riicu Thaakhir**, o ah midda kusoo foorarta beerta la oran jiray Khurmaan. Jiirtaas ayuuna Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kasoo galay Maalinta Furashad Makkah. Buurtaas salkeedana waxaa ku yaalla qabriga Cabdu Allahi bin Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha labadoodaba raalli ka noqdee. Maantana jiirtaas qiyaas dhammaanteed laga dhisay Xarunta Magaalo Madaxda "Amaanatu Al Caasimah", oo ku taalla dariiqa Shaaricu Al Xaram, oo kasoo baxa guriguu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku dhashay. Makkah siday waagaasy ahayd iyo siday ahayd markuu Al Balaadii kutubadiisa dhigayey midna ma aha, oo buuro badan ayaa qaar laga gooyey, jiiro badanna waa lawada gooyey oo dariiqyo iyo xaafado la dego ay u noqdeen. Magacda hadda la yiraahdana waxaa un yaqaanna dadka Makkah degah, Allaha u naxariistee, dambigoodana dhaafee.

Qisada sanamka Camr bin Al Jamuux

Markaasey markay Al Madiinah yimaadeen ayay Ansaarta heshiiska Al Caqabah soo galay waxay muujiyeen islaannimadooda, ayadoo ay weli odayadooda ka hareen kuwo weli ku taagan diintooda gaalnimada ah, uuna ka mid yahay Camr bin Al Jamuux bin Zayd bin Xaraam bin Kacb bin Ghanm bin Kacb bin Salamah, oo uu wiilkiisu Mucaath bin Camr Al Caqabah ka qayb galay, halkaasna uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi wasallam, ku baayacay. Camr bin Jamuux wuxuu ahaa oday ka mid ah odayada reer Banii Salamah iyo nin madaxdooda ka mid ah. Camr waxaa gurigiisa dhexdiisa u yiillay sanam qori laga sameeyey oo la yiraahdo Manaat, siday madaxdoodu yeeli jireen oo inta yeeshaan sanam ay ka ilaah yeeshaan ayay weyneyn jireen oo daahirin jireen. Markaasey markay islaameen dhallinyarada reer Banii Salamah oo Al Caqabah ka qayb gakay, ayna ka mid yihiin Mucaath bin Jabal iyo isaga wiilkiisa uu dhalay Mucaath bin Camr, ayay waxay habeenkii usoo xaluushaan sanamka Camr bin Al Jamuux. Markaasey intay qaadaan ayay god ku yaalla degmada reer Banii Salamah ku dhex tuuraan, halkaasoo ay yaallaan saxaro dadeed, godkeyna ku foorariyaan oo madixiisa hoos mariyaan. Markaasuu Camr markuu waabariisto, oo uu sanamkiisa waayo, ayuu wuxuu yiraahdaa: "Hoogee, yaa xalay ilaahyadeenna soo weeraray?" Markaasuu sanamkiisa raadiyaa ilaa uu kasoo helo. Markaasuu dhaqaa oo daahiriyaa oo uu cadar u mariyaa, kaddibna wuxuu yiraahdaa: "WaAllaahi haddaan ogaan lahaa cidda waxaan kugu fashay waan hoojin lahaa." Markaasuu markuu habeenku dumo oo uu Camr seexdo, ayay hadana usoo xaluushaan oo ay sidii oo kale hadan ku falaan. Markaasuu isaguna waabarigii sidii oo kale u raadiyaa, oo markuu soo helo sidii oo kale hadana falaa oo uu dhaqaa oo daahiriyaa oo cadriyaa. Markaasey hadana habeenkii usoo xaluushaan oo sidii oo kale yeelaan. Markaasey markay in badan sidaas ku faleen, ayuu wuxuu maalin sanamka kasoo bixiyey godkay ku dhex tuureen. Markaasuu dhaqay oo daahiriyey oo cadriyey, markaasuu soo qaatay seeftiisa oo uu sanamka qoorta u suray, kaddibna uu ku yiri: "Anigu waAllaahi ma ogi cidda waxaas kugu fasha. Marka haddaad wax khayr ah leedahay iska celi oo seeftaan ayaad haysataaye." Markaasey markuu habeenku dumay, Camr-na seexday ayay kusoo duuleen sanamka oo ay seefta luquntiisa kala bexeen. Markaasey waxay soo qaateen ey bakhtiyey oo ay xarig sanamka iskula xireen, o ay markaas god godadka reer Banii Salamah ka mid ah oo ay saxaro ku jirto iskula tuureen. Markaasuu Camr bin Jamuux markuu waabariistay sanamkiisa meeshuu yiillay ka waayey.

Islaamidda Camr bin Jamuux

Markaasuu soo raad raacay, uuna ka helay isagoo madaxu u hooseeyo oo ey bakhti ah ku xiran oo godkaas xun ku jira. Markaasuu markuu sidaas u fiiriyey oo uu arkay, rag tolkiis ahna oo islaamay islaamka kala hadleen, ayuu Ilaahay isagana u naxariistay oo uu islaamay, islaamiddiisuna ay suubanaatay."

Shuruudaha heshiiska Caqabada labaad

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Heshiiskaan wuxuu ahaa mid dagaal, kaddib markuu Ilaahay u oggolaaday Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dagaalka. Waxaana heshiiskaan ku jiray shuruudo aan heshiiska Caqabada koowaad ku jirin, oo taas koowaadi waxay ahayd "heshiiska haweenka", ayadoo uusan markaas Ilaahay u oggolaan Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dagaalka. Caqabada labaadna wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kula heshiiyey la dagaallanka dadka cadcad iyo kuwa madowba, isaguna shuruuduhu doonayey ku daray, Rabbigiisna uu Ansaarta shuruudo u yeelay, Ansaartana hadday ofiyaan u sheegay inay Jannada leeyihiin." Cubaadah bin Al Ssaamit wuxuu yiri: "Waxaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayi Wasallam, kula heshiinnay xarbi, iyo inaan maqalno wuxuu na leeyahay Rasuulka Ilaaahy, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aanna adeecno markaan ciriiri ku jirno iyo markaan barwaaqo ku sugannahayba, kuna adeecno waxaan jecelnahay iyo waxaan kahaneynaba, iyo inaan adeeciddiisa ka hormarinno nafteenna, iyo inaanan amarka ku qabsan dadka iska leh, iyo inaan runta sheegno meel kastoo aan joogno, iyo inaan adeecidda Ilaahay uga baqan eedeynta mid wax eedeeya."
Bayco taas ayaa la yiraahda, oo waa wax la is dhaafsanayo oo lagu heshiinayo. Maantana waa isla sidii, oo dawladaha islaamka ah markay ama Madaxweynaha ama Golayaasha Shacbiga la dooranayo waxaa codka loo siinayaa inay shacbiga ku dhaqaan Kitaabka Ilaahay iyo Sunnada Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Hadday madaxdu sidaas yeelaanna ay ayaguna u hoggaansamayaan oo adeecayaan. Hadday madaxdu Kitaabka Ilaahay iyo Sunnada Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam khilaafaanna si ula kac ah, shacbiga adeecid kuma laha, taasoo dariiq shareecada ku xusan loo maro leh.

Magacda dadka Caqabada labaad ka qayb galay

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Kuwaanna waa magacda dadka ka qayb galay Al Caqabah oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kula heshiiyey, kana dhashay Al Khazraj iyo Al Aws, waxayna ahaayeen saddex iyo toddobaatan nin iyo laba haweeney: Qabiilka Al Aws bin Xaarithah bin Thaclabah bin Camr bin Caamir, kana sii ah Banii Cabdu Al Ash-hal bin Jusham bin Al Xaarith bin Al Khazraj bin Camr bin Maalik bin Al Aws waxaa kasoo qayb galay:
(Kow) Usayd bin Xudayr bin Simaak bin Catiik bin Rafic bin Imri'u Al Qays bin Zayd bin Cabdu Al Ash-hal, oo Naqiib ahaa, Badarna aan ka qayb gelin. **(labo) Abuu Al Haytham bin Al Tiyyihaanu**, magaciisuna waa Maalik. Wuxuu kaloo ka qayb galay Badar. **(Saddex) Salamah bin Salaamah bin Waqsh** bin Zughbah bin Zacwaraa'u bin Cabdu Al Ash-hal, kana qayb galay Badar. Waa saddex nin.
Reer Banii Xaarithah bin Al Xaarith bin Al Khazraj bin Camr bin Maalik bin Al Aws waxaa kasoo qayb galay: **(Afar) Thuhayr bin Raafic bin Cadiyy** bin Zayd bin Jusham bin Xaarithah, iyo **(Shan) Abuu Burdah bin Niyaar**, magaciisuna waa Haani' bin Niyaar bin Camr bin Cubayd bin Kilaab bin Duhmaan bin Ghanm bin Thubyaan bin Humaym bin Kaahal bin Thuhl bin Duhnii bin Baliyyi bin Camr bin Al Xaafi bin

Qudaacah, oo ayaga xaliif la ah, kana qayb galay Badar**. (Lix) Nuhayr (Abuu Buhayr) bin Al Haytham**, o u dhashay Banii Naabii bin Majdacah bin Xaarithah. Waana saddex nin.

Reer Banii Camr bin Cawf bin Maalik bin Al Aws waxaa kasoo qayb galay: (**Toddoba) Sacdu bin Khaythamah bin Al Xaarith** bin Maalik bin Kacb bin Al Nnaxxaadh bin Kacb bin Xaarithah bin Ghanm bin Al Ssalam bin Imri'u Al Qays bin Maalik bin Al Aws, oo Naqiib ahaa, kana qayb galay Badar, oo maalintaas isagoo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la jira shahiidnimo loo dilay. **(Sideed) Rifaacah bin Cabdu Al Munthir bin Zanbar** bin Zayd bin Umayyah bin Zayd bin Zayd bin Maalik bin Cawf bin Camr, oo Naqiib ahaa, kana qayb galay Badar. **(Sagaal) Cabdu Alllaahi bin Jubayr** bin Al Nnucmaan bin Umayyah bin Al Burak, Burak magaciisuna waa Imri'u Al Qays bin Thaclabah bin Camr, kana qayb galay Badar, shahiidnimona loogu dilay Maalinta Uxud, isagoo uu Rasuulka Ilaahay maalintaas amiir uga dhigay ciidanka fallaraleyda ah oo uu saaray buurta Jabalu Al Rumaati ama Jabalu Caynayn. **(Toban) Macan bin Cadiyy** bin Al Jaddu bin Al Cajlaan bin Xaarithah bin Dubaycah bin Xaraam min Baliyyi, kana qayb galay Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq iyo dhammaan duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Waxaa shahiidnimo loo dilay Maalinta Al Yamaamah, khilaafada Abuu Bakr Al Siddiiqu, Allaaha raalli ka noqdee. **(Kow iyo toban) Cuwaym bin Saacidah**, kana qaybgalay Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq. Waana shan nin.

Sidaas ayay dadka Al Aws uga qayb galay Caqabada labaad ay kow iyo toban nin u yihiin.

Qabiilka Al Khazraj bin Xaarithah bin Thaclabah bin Camr bin Caamir, kana sii ah Banii Al Nnajjaar oo ah Taymu Allaahi bin Thaclabah bin Camr bin Al Khazraj waxaa ka qayb galay oo goob joog ahaa:

(Labo iyo toban) Abuu Ayuub, oo ah Khaalid bin Zayd bin Kulayb bin Thaclabah bin Cabdu Cawf bin Ghanm bin Maalik bin Al Najjaar, kana qayb galay Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq iyo dhammaan duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Wuxuu ku dhintay magaalada Istanbuul ee arliga Turkiga, halkaasoo qabrigiisu caan yahay oo xaafad dhanba lagu sammiyay, isagoo jihaad ku jira zamanka Mucaawiyah bin Abii Sufyaan. **(saddex iyo toban) Mucaath bin Al Xaarith bin Rifaacah** bin Sawaad bin Maalik bin Ghanm bin Maalik bin Al Nnajjaar, kana qayb galay Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq iyo dhammaan duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waana ina Cafraa'u, iyo walaalkiis **(Afar iyo toban) Cawf bin Al Xaarith**, kana qayb galay Badar, halkaasoo shahiidnimo loogu dilay, isagaana dilay Abuu Jahal bin Hishaam bin Al Mughiirah, isaguna waa ina Cafraa'u. **(Shan iyo toban) Rifaacah bin Al Xaarith bin Sawaad**, siduu ibnu Hishaam u yiri. **(lix iyo toban) Cumaarah bin Xazm** bin Zayd bin Lawthaan bin camr bin Cabdi Cawf bin Ghanm bin Maalik bin Al Nnajjaar, kana qayb galay Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq iyo dhammaan duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Waxaa shahiidnimo loo dilay Maalinta Al Yamaamah, khilaafada Abuu Bakar Al Siddiiqu, Allaha raalli kanoqdee. **(Toddoba iyo toban) Ascad bin Zuraarah** bin Cudas bin Cubayd bin Thaclabah bin Ghanm bin Maalik bin Al Nnajjaar, ahaana Naqiib, wuxuuna dhintay Badar horteed, ayadoo Masjidka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la dhisayo. Waa lix nin.

Reer Banii Camr bin Mabthuul, Mabthuulna waa Caamir bin Maalik bin Al Nnajjaar waxaa ka qayb galay: **(Sideed iyo toban) Sahl bin Catiik bin Nucmaan** bin Camr bin Catiik bin Camr, kana qayb galay Badar. Waa nin.

Reer Banii Camr bin Maalik bin Al Nnajjaar, ahna Banuu Xudaylah bintu Maalik bin Zayd bin Manaat bin Xabiib bin Cabdu Xaarithah bin Maalik bin Ghadb bin Jusham bin Al Khazraj siduu ibnu Hishaam u yiri waxaa kasoo qayb galay: **(Sagaal iyo toban)**

Aws bin Thaabit bin Al Munthir bin Xaraam bin Camr bin Zayd Manaat bin Cadiyy bin Camr bin Maalik, kana qayb galay Badar. **(labaatan) Abuu Dhalxah Zayd bin Sahl** bin Al Aswad bin Xaraam bin Camr bin Zayd Manaat bin Cadiyy bin Camr bin Maalik, kana qayb galay Badar. Waana laba nin.

Reer Banii Maazin bin Al Nnajjaar waxaa kasoo qaybgalay **(Kow iyo labaatan) Qaysu bin Abii Sacsacah**, Abuu Sacsacahna waa Camr bin Zayd bin Cawf bin Mabthuul bin Camr bin Ghanm bin Maazin, kana qayb galay Badar, ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam duullaankaas u xilsaray dhabarka ciidanka. **(Labo iyo labaatan) Camr bin Ghuzayyah bin Camr** bin Thaclabah bin khansaa'a bin Mabthuul bin Camr bin Ghanm bin Maazin. Waana laba nin. Sidaas ayay wadarta ragga uga qayb galay oo goob joogga ka ahaa Caqabada labaad reer Banii Al Nnajjaar waxay ahaayeen kow iyo toban nin. Ibnu Hishaamna wuxuu yiri: "Camr bin Ghuzayyah bin Camr bin Thaclabah bin Khansaa'a uu Ibnu Isxaaq xusay waxaa la yiraahdaa Ghuzayyah bin Cadhiyyah bin Khansaa'u."

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Qabiilka reer Balxaarith bin Khazraj waxaa goob joog ka ahaa: **(Saddex iyo labaatan) Sacdu bin Al Rabiic bin Camr** bin Abii Zuhayr bin Maalik bin Imri'u Al Qays bin Maalik Al Aghar bin Thaclabah bin Kacb bin Al Khazraj bin Al Xaarith, oo ahaa Naqiib, kana qayb galay Badar, Maalinta Uxudna shahiidnimo lagu dilay. **(afar iyo labaatan) Khaarijah bin Zayd bin Abii Zuhayr** bin Maalik bin Imri'u Al Qays bin Maalik bin Al Aghar bin Thaclabah bin Kacb bin Al Khazraj bin Al Xaarith, kana qayb galay Badar, Maalinta Uxudna shahiidnimo lagu dilay. **(Shan iyo labaatan) Cabdu Allaahi bin Rawaaxah** bin Thaclabah bin Imri'u Al Qays bin Camr bin Imri'u Al qays bin Maalik bin Al Aghar bin Thaclabah bin Kacb bin Al Khazraj bin Al Xaarith, oo Naqiib ahaa, kana qayb galay Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq iyo duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi wasallam, oo idil intaan ahayn Furashada Makkah iyo intii ka dambeysey, waxaana shahiidnimo loogu dilay duullaanka Mu'tah, isagoo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi wasallam, ciidankaas amiir uga ah. **(Lix iyo labaatan) Bashiir bin Sacad bin Thaclabah bin Al Julaasa** bin Zayd bin Maalik Al Aghar bin Thaclabah bin Kacb bin Al Khazraj bin Al Xaarith aabaha dhalay Al Nucmaanu bin Bashiir, wuxuuna ka qayb galay Badar. **(Toddoba iyo labaatan) Cabdu Allaahi bin Zayd** bin Thaclabah bin Cabdu Rabbih bin Zayd Manaat bin Al Xaarith bin Al Khazraj bin Xaarithah, oo Badarna ka qayb galay, waana kan riyada lagu tusay sida Salaadda loogu aathaamo, oo uu inta markaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ula yimid, uuna amray in sidaas loo aathaano. **(Sideed iyo labaatan) Khallaad bin Siwayd bin Thaclabah** bin Camr bin Xaarithah bin Imri'u Al Qays bin Maalik bin Al Aghar bin Thaclabah bin Kacb bin Al Khazraj bin Al Xaarith bin Al Khazraj, kana qayb galay Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq, waxaana shahiidnimo loo dilay Maalinta reer Banii Quraythah, ayadoo darbi korkiisa dhagax weyn looga soo riday oo uu dhaawac xun gaarsiiyey, uuna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi wasallam, yiri, sida la wariyay: **"Inna lahu la ajra shahiidayni"**, oo macnihiisu yahay: "Wuxuu leeyahay ajarka laba shahiid." **(Sagaal iyo labaatan) Cuqbah bin Camr bin Thaclabah** bin Usayrah bin Cusayrah bin Jadaarah bin Cawf bin Al Xaarith bin Al Khazraj, waana Abuu Mascuud, isagaana ugu da' yaraa inta Al Caqabah ka qayb gashay. Badarna kama uusan qayb gelin, wuxuuna dhintay ayaamaha Mucaawiyah. Waana toddoba nin

Reer Banii Bayyaadah bin Caamir bin Zurayq bin Cabdu Xaarithah bin Maalik bin Ghadbi bin Jusham bin Al Khazraj waxaa ka qayb galay: **(Soddon) Ziyaadu bin Labiid bin Thaclabah** bin Sinaan bin Caamir bin Cadiyy bin Umayyah bin Bayyaadah, kana qayb galay Badar. **(Kow iyo soddon) Farwah bin Camr bin Wathafah** bin Cubayd bin Caamir bin Bayyaadah, kana qayb galay Badar. Waxaana la yiraahdaa Wadfah ayuu ibnu Hishaam yiri. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: " iyo **(Labo iyo soddon)**

Khaalid bin Qays bin Maalik bin Al Cajlaan bin Caamir bin Bayyaadah, kana qayb galay Badar. Waana saddex nin.

Reer Bani Zurayq bin Caamir bin Cabdu Xaarithah bin Maalik bin Ghadbi bin Jusham bin Al Khazraj waxaa kasoo qayb galay: **(Saddex iyo soddon) Raafic bin Maalik bin Al Cajlaan** bin Camr bin Caamir bin Zurayq, oo Naqiib ahaa**. (Afar iyo soddon) Thakwaan bin Cabdu Qays bin Khaldah** bin Mukhallad bin Caamir bin Zurayq bin Caamir bin bin Zurayq bin Cabdu Xaarithah, kanoo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah uga yimid, Makkahna la joogay, kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah ugu soo haajiray, markaasaa waxaa la oran jiray Muhaajirii Ansaarii. Wuxuu ka qayb galay Badar waxaana Maalinta Uxud loogu dilay shahiidnimo. **(Shan iyo soddon) Cubaad bin Qays bin Caamir bin Khaldah** bin Mukhallad bin Caamir bin Zurayq, kana qayb galay Badar. **(Lix iyo soddon) Al Xaarith bin Qays bin Khaalid** bin Mukhallad bin Caamir bin Zurayq, waana Abuu Khaalid, aabaha Khaalid dhalay, wuxuuna ka qayb galay Badar. Waana afar nin.

Reer Banii Salimah bin Sacd bin Caliyyi bin Asad bin Saaridah bin Taziid bin Jushum bin Al Khazraj, kanii sii ah Banii Cubayd bin Cadiyy bin Ghanm bin Kacb bin Salimah waxaa kasoo qayb galay: **((Toddoba iyo soddon) Al Baraa'u bin Macruur bin Sakhar** bin Khansaa'u bin Sinaan bin Cubayd bin Cadiyy bin Ghanm, ahaana Naqiib, waana midkay reer Banii Salimah leedahay inuu isagu ugu horreeyey qof Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gacanta geliya shardigiisana yeelay, isagana shuruudo u gudbiyay. Wuxuu dhintay intuusan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah imaanin. **(Sideed iyo soddon) Wiilkiisa Bishr bin Al Baraa'u bin Macruur** wuxuu ka qayb galay Badar iyo Uxud iyo Al Khandaq wuxuuna ku dhintay Khaybara una dhintay luqmad uu kala cunay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sabeentii la sumeeyey, waana midkuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri, markuu reer Banii Salimah weydiiyey: **"Man sayyidukum yaa Banii Salimah?"** oo macnihiisu yahay: "Yaa madax idiin ah reer Banii Salimahow?" Markaasey yiraahdeen: "Al Jaddu bin Qays, waana bakhiil." Markaasuu Rasulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Wa ayyu daa'in akbaru mina al bukhli? Sayyidu Banii Salimah al abyadu al jacdu Bishru binu Al Baraa'i bin Macruur."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Oo miyuu jiraa cudur bakhiilnimada ka weyni? Bal waxaa madax idiin ah midka cad oo timaha adag Bishru binu Al Baraa'i bin Macruur." **(sagaal iyo soddon) Sinaanu bin Sayfii bin Sakhr** bin Khansaa'u bin Sinaan bin Cubayd, oo Badar ka qayb galay. **(Afartan) Al Dh-dhufaylu bin Al Nnucmaanu** Khansaa'a bin Sinaan bin Cubayd, kana qayb galay Badar, Maalinta Al Khandaqna shahiidnimo loo dilay. **(Kow iyo afartan) Macqil bin Al Munthir bin Sarx** bin Khunaas bin Sinaan bin Cubayd, oo Badar ka qayb galay. **(Labo iyo afartan) Yaziid bin Al Munthir bin Sarx** bin Khunaas bin Sinaan bin Cubayd, oo Badarna ka qayb galay. (**Saddex iyo afartan) Mascuud bin Yaziid bin Subayc** bin Khansaa'u bin Sinaan bin Cubayd. **(afar iyo afartan) Al Daxxaaku bin Xaarithah bin Zayd** bin Thaclabah bin Cubayd, kana qayb galay Badar. **(Shan iyo afartan) Yaziid bin Khidaam** ama ibnu Xaraam ama khudaarah bin Subayc bin Khansaa'u bin Sinaan bin Cubayd. **(Lix iyo afartan) Jubaar bin Sakhr bin Umayyah** bin Khansaa'u bin Sinaan bin Cubayd ibnu Cadiyy bin Ghinm bin Kacb bin Salimah, kana qayb galay Badar. Waxaana la yiraahdaa, ayuu ibnu Hishaam yiri Jabbaar bin Sakhri bin Umayyah bin Khunas. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Iyo **(Todooba iyo afartan) Al Dh-dhufaylu bin Maalik bin Khansaa'u** bin Sinaan bin Cubayd, oo ah ina adeerka Al Dh-dhufaylu bin Al Nnucmaanu bin Khansaa'u bin Sinaan, kana qayb galay Badar. Waana kow iyo toban nin.

Reer Banii Sawaad bin Ghanm binKacb bin Salimah, kana sii ah Banii Kacb bin Sawaad waxaa ka qayb galay: **(Sideed iyo afartan) Kacb bin Maalik bin Abii Kacb** bin Al Qayn bin Kacb. Nin.

Reer Banii Ghanm bin Sawaad bin Ghanm bin Kacb bin Salimah waxaa kasoo qayb galay: **(Sagaal iyo afartan) Sulaym bin Camr bin Xadiidah** bin Camr bin Ghanm, kana qayb galay Badar. **(Konton) Qudhbah bin Caamir bin Xadiidah** bin Camr bin Ghanm, kana qayb galay Badar. **(Kow iyo konton) Yaziid bin Caamir bin Xadiidah** bin Camr bin Ghanm, waana Abuu Al Munthir, Al Munthir aabihiis, wuxuuna ka qayb galay Badar. **(Labo iyo konton) Abuu Al Yasar,** magiisuna waa **Kacb bin Camr bin Cabbaad** bin Camr bin Ghanm bin Sawaad bin Ghanm bin Kacb bin Salimah, kana qayb galay Badar. **(Saddex iyo konton) Sayfiyyu bin Sawaad bin Cabbaad** bin Camr bin Ghanm. Waana shan nin. Ibnu Hishaamna wuxuu yiri: "Waxaa la yiraahdaa Sayfiyyu bin Aswad bin Cabbaad bin Camr bin Ghanm bin Sawaad, Sawaadna ma laha wiil la yiraahdo Ghanm."

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Reer Bani Naabii bin Camr bin Sawaad bin Ghanm bin Kacb bin Salimah waxaa kasoo qayb galay: **(Afar iyo konton) Thaclabah bin Ghanamah bin Cadiyy** bin Naabii, kana qayb galay Badar, Maalinta Al Khandaqna shahiidnimo lagu dilay. **(Shan iyo konton) Camr bin Ghanamah bin Cadiyy** bin Naabii. **(Lix iyo konton) Cabsa bin Caamir bin Cadiyy** bin Naabii, oo Badar ka qayb galay. **(Toddoba iyo konton) Cabdu Allaahi bin Unays**, oo Qudaacah u dhashay ayagana xaliif la ahaa. **(Sideed iyo konton) Khaalid bin Camr bin Cadiyy** bin Naabii. Waana shan nin.

Rerr Banii Xaraam bin Kacb bin Ghanm bin Kacb bin Salimah waxaa kasoo qayb galay: **(Sagaal iyo konton) Cabdu Allaahi bin Camr bin Xaraam** bin Thaclabah bin Xaraam, oo Naqiib ah, kana qayb galay Badar, Maalinta Uxudna shahiidnimo lagu dilay, iyo wiilkiisa **(Lixdan) Jaabir bin Cabdu Allaahi**. **(Kow iyo lixdan) Mucaath bin Camr bin Al Jamuux** bin Zayd bin Xaraam, kana qayb galay Badar. **(Labo iyo lixdan) Thaabit bin Al Jithci**, Al Jithci magaciisuna waa Thaclabah bin Zayd bin Al Xaarith bin Xaraam, kana qayb galay Badar, laguna dilay Al Dhaa'if isagoo shahiid ah. **(Saddex iyo lixdan) Cumayr bin Al Xaarith bin Thaclabah** bin Zayd bin Al Xaarith bin Xaraam. Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waa Cumayr bin Al Xaarith bin Labdah bin Thaclabah." Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Iyo **(Afar iyo lixdan) Khadayj bin Salaamah bin Aws** bin Camr bin Al Furaafiri (ama Al Quraaqiri) xaliifkooda una dhashay reer Baliyyi. **(Shan iyo lixdan) Mucaath bin Jabal** bin Camr bin Aws bin Caa'ith bin Cadiyy bin Kacb bin Camr bin Uadayy bin Sacd bin Caliyyi bin Asad, waxaana la yiraahdaa Asad bin Saaridah bin Taziid bin Jusham bin Al Khazraj, wuxuuna ka mid ahaa reer Banii Salimah, wuxuuna ka qayb galay Badar, iyo dhammaan duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna ku dhintay Cimwaas oo arliga Falasdhiin ku taalla , sanadka uu daacuunku Shaam ka dillaacay khilaafada Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaaha raalli ka noqdee. Reer Banii Salimah waxay u sheegteen isagoo ahaa walaalka Sahal bin Muxammad Al Jiddi bin Qays bin Sakhr bin Khansaa'u bin Sinaan bin Cadiyy bin Ghanm bin Kacb bin Salimah oo ay isku hooyo dhahshay. Waana toddoba nin. Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Aws waa ina Cabbaad bin Cadiyyi bin Kacb bin Camr bin Udayy bin Sacd."

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Reer Banii Cawf bin Al Khazraj, kana sii ah Banii Saalim bin Cawf bin Camr bin Cawf bin Al Khazraj waxaa ka qayb galay: **(Lix iyo lixdan) Cubaadah bin Al Ssaamit bin Qays** bin Asram bin Fihr bin Thaclabah bin Ghanm bin Saalim bin Cawf, ahna Naqiib, kana qayb galay Badar iyo duullaannada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi wasallam, oo idil." Ibnu Hishaamna wuxuu yiri: "Wa Ghanm bin Cawf akhuu Saalim bin Cawf bin Camr bin Cawf bin Al Khazraj." Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Iyo **(Toddoba iyo lixdan) Al Cabbaasu bin Cubaadah bin**

Nadlah bin Maalik bin Al Cajlaan bin Zayd bin Ghanm bin Saalim bin Cawf, wuxuuna ka mid ahaa ragga Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Makkah ugu haajiray, kaddibna Al Madiinah usoo haajiray, markaasaa waxaa la oran jiray Muhaajiriyyi Ansaariyyu, waxaana shahiidnimo lagu dilay Maalinta Uxud. **(sideed iyo lixdan) Abuu Cabdu Al Raxmaan Yaziid bin Thaclabah** bin Khazmah bin Asram bin Camr bin Cammaarah, oo xaliifkooda ah una dhashay reer Banii Ghusaynah min Baliyyi. **(Sagaal iyo lixdan) Camr bin Al Xaarith bin Labdah** bin Camr bin Thaclabah. Waana afar nin, waana kuwa la yiraahdo Al Qawaaqili.
Reer Banni Saalim bin Ghanm bin Cawf bin Al Khazraj, waana kuwa la yiraahdo reer Banii Al Xublaa. Ibnu Haashim wuxuu yiri: "Al Xublaa waa Saalim bin Ghanm bin Cawf waxaana al Xublaa oo macneheedu yahay xaamilada uurka leh looguna bixiyey waynaanta calooshiisa, waxaa ka soo qaybgalay: **(Toddobaatan) Rifaacah bin Camr bin Zayd** bin Camr bin Thaclabah bin Maalik bin Saalim bin Ghanm, kana qayb galay Badar, waana Abuu Al Waliid. Ibnu Hishaamna wuxuu yiri: "Rifaacah waxaa la yirahda ibnu Maalik, Maalikna waa ibnu Al Waliid bin Cabdu Allaahi bin Maalik bin Thaclabah bin Jusham bin Maalik bin Saalim." Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Iyo **(Kow iyo toddobaatan) Cuqbah bin Wahb bin Kaladah** bin Al Jacd bin Hilaal bin Al Xaarith bin Camr bin Cadiyy bin Jusham bin Cawf bin Buhthah bin Cabdu Allaahi bin Ghadhafaan bin Sacd bin Qays bin Caylaan, oo xalifkooda ah, kana qayb galay Badar, wuxuuna ka mid ah kuwa Al Madiinah Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo Makkah weli jooga usoo haajiray oo markaas la oran jiray Mujaajirii Ansaarii. Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waa laba nin."
Reer Banii Saacidah bin Kacb bin Al Khazraj, ayuu Ibnu Isxaaq yiri, waxaa kasoo qayb galay: **"(Labo iyo toddobaatan) Sacad bin Cubaadah** bin Dulaym bin Xaarithah bin Abii Khuzaymah bin Thaclabah bin Dhariif bin Al Khazraj bin Saacidah, ahna Naqiib. **(Saddex iyo toddobaatan) Al Munthiru bin Camr bin Khunays** bin Xaarithah bin Lawthaan bin Cabdu Wudd bin Zayd bin Thaclabah bin Jusham bin Al Khazraj bin Saacidah, ahna Naqiib, kana qayb galay Badar iyo Uxud, shahiidnimana lagu dilay Maalinta Bi'ru Macuunah, isagoo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, amiir uga ah ragga la socday. Waana isaga la yiraahdo acnaqa li yamuuta oo ah wuxuu u dedegay inu dhinto."

Wadarta dad Caqabada labaad baayactamay

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Wadarta inta ka qayb gashay Al Caqabah ee Al Aws iyo Al Khazraj waa saddex iyo toddobaatan nin iyo labo haweeney ah, oo ay leeyihiin ayaguna way baayactmaeen, Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam haweenka gacanta ma gelin jirin, markayna baayacaan oo shuruudaha qirtaan ayuu wuxuu yiraahdaa: **" Ith-habna fa qad baayactukunna"**, oo macnihiisu yahay: "Iska tagay waan idinla heshiiyeye."

Labada haweeney

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Reer Baii Maazin Al Nnajjaar waxaa ka mid **ahaa (Kow) Nusaybah bintu Kacb** bin Camr bin Cawf bin Mabthuul bin Camr bin Ghanm bin Mazin bin Al Nnajjaar, waana Ummu Cummaarah, waxayna jihaadka kala qayb gashay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo walaasheed, iyo ninkay u dhaxday Zayd bin Caasim bin Kacb iyo labadeeda wiil Xabiib bin Zayd iyo Cabdu Allaahi bin Zayd. Wiilkeeda Xabiib waa midkuu qabsaday Musaylimah al khath-thaab Al Xanafiyyu ee arliga Al Yamaamah. Markaasuu wuxuu ku yiraahdaa: "Marag ma ka tahay inuu Muxammad (Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) Rasuulka Ilaahay yahay?"

Markaasuu wuxuu yiraahdaa: "Haa." Markaasuu wuxuu yiraahdaa: "Hadaba marag ma ka tahay inaan anigu Rasuulka Ilaahay ahay?" Wuxuu yiraahdaa: "Ma maqlayo." Markaasuu xubin xubin u googooyey, ilaa uu gacantiisa uga dhinto, isagoo aan hadalkaas waxba ku darayn, oo marka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lasoo qaadana rumeeya kuna salliya, markuu Musaylimah Rasuulnimo u sheegtana yiraahda: "Ma maqlayo." Markaasey Nusaybah muslimiinta Al Yammamah jihaadka u aaday raacday oo ay dagaalka ka qayb gashay, ayna dagaallameysey ilaa uu Ilaahay Musalimah ka dilo. Ayadana waxaa gaaray laba iyo toban dhaawac oo isugu jirah waran lagu muday iyo seef lagu dhuftay. **(Labo)** Reer Banii Salamah waxaa ka mid ahaa **Ummu Maanic** oo magaceedu yahay **Asmaa'u bintu Camr bin Cadiyy** bin Naabii bin Camr bin Sawaad bin Ghanm bin Kacb bin Salamah, waana ina adeerta Mucaath bin Jabal

Al Caqabah iyo Masjidu Al Baycah

Barta ay Ansaartu kula baayactameen Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa laga dhisay Masjid la yiraahdo Masjidu Al Baycah. Masjidkaanu hadda laguma tukado, saqafna ma laha. Dhererkiisu waa soddon mitir, ballaciisuna lix iyo toban sidaan aniga lafteydu u tillaabeeyey. Midabka darbiyadiisu waa hurdi, minaaradna ma laha. Dhexdiisana waxaa ka baxay dhir qodxa leh. Dhulkiisa waxaa yaalla quruurux, waana lagu tukan karaa. Masjidkaasu wuxuu ku yaalla marka Mina laga yimaado oo Makkah loo socdo oo saddexda Jamraat la dhaafo ayna ugu dambeyso Jamratu Al Caqabah, oo ah tan wayn ooba lagu magacaabo bartaas, ayuu midigta kaa qabanayaa, laamigana waxaa ka xiga saf guryo ah, meesha isaga ku beeganna way bannaantahay oo la arkayaa, waxaana ku wareegsan darbi isla midabkaas leh, madaxana wuxuu uga egyahay Masjidka Arbaca Rukun ee Muqdisho. Qofka Makkah ka yimaadana wuxuu Masjidku ka qabanayaa gacanta bidix intaan jamrada wayn la gaarin. Jamradu waxay Kacbada u jirtaa afar kiiloomitir, waxayna ka tirsan tahay, waa Mina oo idile, Xaramka Makkah. Masjidkaas wuxuu Jamratul Caqabah u jiraa saddex boqol oo mitir, oo uu xagga midigta ka qabanayaa qofka Makkah u socda. Masjidkaas waxaa dhisay Abuu Jacfar Al Mansuur sanadka boqol iyo afar iyo afartan, una dhigantah toddoba boqol iyo kow iyo lixdan Miilaadiga, waana masjid gaaban midabkiisuna hurdi yahayuna eg masjidkii Muqdisho ee Arbaca Rukun.Mina Taxanahaan ayaan uga soo hadalnay oo looma baahna inaan dib ugu noqonno, wa al xamdu liAllaahi Rabbi al caalamiina mana uu jiro ilaah kale oo aan Isaga ahayn, wa Sallaa Allaahu Calaa Sayyidinaa wa Mawlaanaa Muxammadin wa calaa Aalihi wa Saxbihi wa sallim tasliiman kathiiran.

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo idanka dagaalku kusoo degay

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Clayhi Wasallam, heshiiska Al Caqabah hortiis looma oggolaan xarbi, dhiiggana looma xalaaleyn, waxaase la amri jiray inuu Ilaahay baryo oo ducaysto, dhibkana uu ku sabro iyo inuu jaahiliyiinta iska cafiyo. Qurayshna way dhibtay kuwa isaga raacay oo muhaajiriinta ka midka ah ilaa heer ay qaarkood Diintooda ka saaraan, ayna wadankooda ka eryaan. Markaasey kuwii Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, raacay waxay noqdeen saddex qaybood: (Kow) Qaar ay Diintooda islaamka ka saareen, iyo (Labo) Kuwo ay gacantooda ku cathaabaan, iyo (saddex) Kuwa waddankoodaba uga cararay, oo ay qaarkood arliga xabshada tageen, qaarna Al Madiinah, iyo ay meel walba u carareen. Markaasey Qurayshi Ilaahay ku madax adkaatay oo ay amarkiisa diiday, ayna ka diideen wuxuu karaameyn la doonayey, ayna Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi

Wasalam, beeniyeen, ayna cathaabeen ama musaafiriyeen addoommadiisa Isaga keligiis cabuday oo Nabigiisana, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rumeeyey oo Diintiisa inta ku dhegey isku ilaaliyey. Markaasuu Ilaahay Cazza wa Jalla Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u oggolaaday dagaalka iyo inay iska dhiciyaan kuwa dulmiyey oo ku xad gudbay. Sida iga soo gaartay Curwah bin Al Zubayr iyo culummo kaleba Aayadda ugu horreysey oo kusoo degata Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo xarbiga u oggolaaneysa, dhiigana u xalaaleysay iyo dagaalkaba waxay ahayd Aayadaha sagaal iyo soddon ilaa kow iyo afartan ee Suuratu Al Xajji**: "Uthina lillathiina yuqaataluuna bi annahum thulimuu wa inna Allaaha calaa nasrihim laqadiirun**(39)**Allathiina ukhrijuu min diyaarihim bi ghayri xaqqin illaa an yaquuluu Rabbunaa Allaahu wa law laa dafcu Allaahi al nnasa bacdahum bibacdin llahuddimat sawaamicu wa biyacun wa salawaatun wa masaajidu yuthkaru fiimaa Ismu Allaahi kathiiran wa layansuranna Allaahu man yansuruhu inna Allaaha la Qawiyyun Caziizun**(40)**Allathiina in makkannaahum fii al ardi aqaamuu al Ssalaata wa wa aatawuu al zzakaata wa amaruu bi al macruufi wa nahaw cani al munkari wa liAllaahi caaqibatu al umuuri**(41)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Waxaa loo oggolaaday kuwa lala dagaallamayo inay ayaguna dagaallamaan oo ku jihaadaan maxaa yeelay waa la dulmiyey, Ilaahayna inuu u gargaaro waa karaa(39)Waana kuwa laga saaray guryohooda iyo dalkooda si xaqdarro ah iyo inay yiraahdeen: "Ilaahay ayaa Rabbigeen ah". Haddayana ahaan lahayn inuu Ilaahay dadka qaarkood qaar kale ku celin, xagga jihaadka iyo xuduudda marinteeda, waxaa la dumin lahaa macaabidda ruhbaanta, oo ah guryahay isku takooraan oo ay yiraahdaan krishtaanku waxaan ku cabudeynnaa Ilaahay, iyo kaniisadaha krishtaankaba iyo kaniisadaha yuhuudda, iyo masaajidyada muslimiintaba oo Magaca Ilaahay in badan lagu xuso dhexdeeda. Ilaahayna wuxuu u gargaaraa kuwa Diintiisa islaamka iyo Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u gargaara. Ilaahayna waa Xoog Badane aan laga adkaan karin(40)Waana kuwa markaan arliga ku wanaagga fara xumaantana ka reeba. Ilaahay ayaana iska leh ciribta umuuraha oo idil(41)."

Mar dambena wuxuu Tabaaraka wa Tacaalaa soo dejiyay Aayadda boqol iyo saddex iyo sagaashanaad ee Suuratu Al Baqarah: **"Wa qaatiluuhum xattaa laa takuuna fitnatun wa yakuuna al Ddiinu Lillaahi fa ini intahuu falaa cudwaana illaa calaa al th-thaalimiina."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Lana dagallama gaalada ilaa ayan gaalnimo ka jirin, Diintuna u ahaato Ilaahay Keligiis oo la caabudo. Hadday ka haraanna la colaadin mayo ciddaan daallimiin ahayn." Cabdu Allaahi bin Cumar bin Al Khadh-dhaab wuxuu yiri: "Sidaas ayaan falnay cahdiga Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallm, intuu nala joogay weeye, markay msulimiintu tiro yaraayeen, ninkana Diintiisa laga fitneynayey oo laga saarayey ayadoo la dilayo ama la cathaabayo, ilaa uu islaamku ka bato oo ayan markaas fitno jirin." Sidaas Al Baghawii ayaa tafsiirkiisa ku wariyay. Al Imaamu Al Shaaficii, Allaha raalli ka noqdee, wuxuu kitaabkiisa Axkaamu Al Quraani uuna isku keenay Al Imaamu Al Bayhaqii, ku yiri: "Aayaadka Jihaadka oo idil waxaa lagu nasakhay Aayaddaan, oo ah inaan la dagaallamin jeer muslimiinta lasoo weeraro. Aayaddaanna way ka dambeysey fardi yeelidda jihaadka." Fiiri mujalladka labaad bogga afar ito toban ee kitaabkaas.

Juzka Lixaad

Nuurka Nabinnimada Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam iyo dugsiga Masjidkiisa ee Al Madiinah Al Munawwarah

Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam ee Al Madiinah Al Munawwarah wuxuu ahaa barta uu kasoo kaaho nuurkiisa iyo dugsiga uu dadka ku baro diinta islaamka, ha ahaadaan asxaabtiisa ama dadka gaalada ah oo dibadda uga yimaadaba. Habeen iyo maalin wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam asxaabtiisa ku dul akhrin jiray Quraanka kusoo dega uuna u macnayn jiray, gaar ahaan kaddib marka shanta salaadood la tukado. Masjidku wuxuu ahaa xafiiskiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam uu muslin iyo gaalba ku qaabili jiray, wuxuuna ahaa dugsiga uu dadka wax ku baro rag iyo dumar, mid yar iyo mid waynba.

Juzka Toddobaad

Jihaadkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Rasuulka Ilaahay, Nabi Muxammad, bi abii huwa wa ummii, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuu jihaaday jihaad dhab Ilaahay Tacaalaa daraadiis si uu Risaalada khalqiga ugu gudbiyo. Waxaan Ilaahay Tacaalaa ka baryayaa inuu uga abaal mariyo sida ugu fiican oo uu Nabi ummaddiisa khayrku u keenay uga abaal mariyay. Jihaadkiisu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu ahaa mid hubaysan iyo mid aan hubaysnaynba, waxaana tafaasiisha noocyadaas jihaadka ahba laga helayaa kutubbada siirada, qaarkoodna kitaabkaan ayayba ku xusan yihiin. Muslimiintuna taas marag ayay ka wada yihiin.

Juzka Sideedaad

Ka guursigiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam qabaa'il Carab ah

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu ka guursaday qabiilooyin kala duwan oo Carab ah naxariis uu u qabo oo ah inay soo islaamaan. Qabaa'ilka uu ka guursadana islaamkay soo geli jireen. Waxaan halkaan kusoo qaadanaynnaa qabiilka Banuu Al Musdhaliq oo ay ka dhalatay Ummu Al Mu'miniina Juwayriyyah bintu Al Xaarith bin Diraar Al Musdhaliqiyyi. Qisadeeduna waxay ahay sidatan.

Duullaanka Banii Al Musdhaliq/Shacbaan sanadka lixaad

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Al Madiinah ku sugnaaday inta ka hartay Jamaadu Al Aakhirah iyo Rajab, kaddibna wuxuu ku duulay qabiilka Banii Al Musdhaliq oo ka tirsan Khuzaacah bisha Shacbaan ee sanadka lixaad.

Sababta duullaanka

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo gaartay inay Banii Al Musdhaliq ciidan uruurinayaan isaga kusoo duula, uuna oday u yahay Al Xaarithu bin Abii Diraar, Juwayriyyah bintu Al Xaarith aabeheeda dhalay, haweenta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu warkaas maqlay ayuu ku duulay, uuna kula kulmay ceel ceelashooda ka mid ah oo la yiraahdo **Al Muraysiic**, oo ku yaalla degmada Qudayd ee xeebta badda (Al Madiinah u jirta boqol iyo labaatan kiiloomitir, kuna taalla dariiqa Makkah, maantana Khuzaacah lagama yaqaanno, waxaana dega Sulaym, siduu Al Balaadii yiri). Markaasay labada ciidan isku yimaadeen oo ay dagaallameen, Ilaahayna uu Banii Al Musdhaliw jebiyay, inta laga dilayna laga dilay, Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ay usoo wareegeen oo qafaashay caruurtooda iyo haweenkooda iyo maalkoodaba, uuna fay uga dhigay. Maalintaas waxaa la dilay nin muslimiinta ka mid ah, una dhashay Banii Kalb bin Cawf bin Caamir bin Layth bin Bakr oo la yiraahdo Hishaam bin Subaabah, waxaana dilay nin Ansaarta ka mid ah oo tolka Cubaadah bin Al Ssaamit ka mid ah, isagoo u maleeyey inuu cadawga ka mid yahay, oo uu markaas qalad u dilay.

Fitno

Isagoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ceelkaas deggan yahay ayay ragga muslimiinta biyaha usoo dhaamiya ceelka yimaadeen. Cumar bin Al Khadh-dhaab waxaa u shaqeeyey oo uu soo ijaartay nin Banii Ghifaar u dhashay oo la yiraahdo Jahjaah bin Mascuud oo fariskiisa wada, oo markaas ceelka yimid. Markaasaa waxaa ceelka isku ciriiryay Jahjaah iyo Sinaanu bin Wabar Al Juhanii, oo xaliif la ah Banii Cawf bin Al Khazraj. Markaasay dagaallameen. Markaasuu ninka reer Juhaynah la qayliyay: "Ragga Ansaartow ii gargaara!" Jahjaahna wuxuu isaguna la qayliyay: "Ragga Muhaajiriintow ii gargaara!" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu warkaasu gaaray wuxuu yiri: "**Dacuuhaa, fa innahaa muntinatun**", oo amcnihiisu yahay: "Iska daaya oo ayadu way qurmoontahaye", waana qabiil iyo habar wacadka. (Fuqahadu waxay qofka habarwacda ama qabiil u qaylo dhaansada ka yiraahdeen saddex war: (Kow) Midka hub la yimaada isagoo habar wacadkaas ku yimid waxaa lagu dhufanayaa oo ay ciqaabtiisu tahay konton ulood, ama karbaash, siduu yeelay Abuu Muusaa Al Ashcarii, uuna u karbashay Al Nnaabighah Al Ssacdiyyi oo yiri: "Yaa li Caamir!" oo qabiil u qaylo dhaansaday, oo ay rag tolkiis ah yimaadeen ayagoo hubaysan. Waana qaylo dhaanka zamanka jaahiliyada islaamka ka horreeyey. (Laba) Waxaa lagu dhufanayaa toban ulood ka yar waxa xad laga goynayo mooyee. (Saddex) Imaamkaa ku ijtihaadaya si xumaanta iyo fitnada albaabkeeda loo xiro, oo u door leh inuu waaniyo, ama xabbiso ama karbaasho."). Markaasuu Cabdu Allaahi bin Ubayya bin Saluul carooday, isagoo ay la joogaan rag tolkiis ah, ayna ka mid yihiin Zayd bin Arqam oo wil yar ah. Markaasuu wuxuu yiri: "Oo ma saasey faleen oo ay isu qaylo dhaansadeen? Dalkeennay nagula tartameen, ayna nooga bateen dalkeenna, oo wa Allaahi inuusan u dhigmin annaga iyo qaxootiga Quraysh waxaan ahayn waxa hore loo yiri oo ah: "ayga haddaad cayiliso adiguu ku cunayaa." Wa Allaahi markaan Al Madiinah ku laabanno kuweenna xoogga leh waxay ka saarayaan kuwa duuliga ah." Intaas markuu yiri kaddib ayuu ragg la fadhiya kusoo jeestay, uuna ku yiri: "Waa kaas waxaad naftiinna ku fasheen, oo waxaad u xalaalayseen inay beledkiinna degaan, maalkiinnana aad la qaybsateen oo wax ka siiseen. Wa Allaahi haddaad gacnihiinna ka laabataan, oo aydnaan waxba siin, dalkiinna way ka tegayaan oo ka wareegayaan."

Markaasuu Zayd bin Arqam hadalkaas maqlay. Markaasuu u tegey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, taasna ay ahay kaddib markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, cadawgiisa kasoo jeestay, oo uu markaas warka u sheegay, ayadoo uu markaas la fadhiyo Cumar bin Al Khadh-dhaab, oo yiri: "Amar Cabdu Allaahi bin Bishr inuu dilo." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Fa kayfa yaa Cumaru ithaa taxaddatha al nnaasu anna Muxammad yaqtulu asxaabahu? Laa, wa laakin ath-thin bi al rraxiili."** oo macnihiisu yahay: "Bal ka warran Cumarow, in haddii sidaas la yeelo oo dadku ku sheekeystaan inuu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam asxaabtiisa dilo? Mayee, bal dadka u sheeg in la guurayo." Taasna waxay ahayd saacad uusan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, safri jirin. Markaasu dadku guuray oo la dhaqaaqay.

Fitnada ibnu Ubayya iyo nifaaqiisa

Cabdu Allaahi bin Ubayya bin Saluul markuu maqlay inuu Zayd bin Arqam Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay wuxuu yiri, ayuu u yimid, wuxuuna ku dhaartay Ilaahay: "ma oran wuxuu yiri, kumana hadlin." Tolkiis dhexdiisana wuxuu ku ahaa madax weyn. Markaasay Ansaarta tolkiis ah oo markaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la fadhiday waxay yiraahdeen: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa dhici karta inuu wiilku hadalkiisa si qalad ah u gartay, uusanna xafidin wuxuu ninku yiri", ayagoo ibnu Ubayya u beer jilcay oo daafacaya. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu socdaalka ku sugnaaday ayuu wuxuu la kulmay Usayd bin Xudayr oo salaanta Nabinnimada ku salaamay, kaddibna ku yiri: "Nabiga Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaad safartay saacad la inkiro oo aadan ayadoo kale safri jirin." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Awa maa balaghaka maa qaala saaxibukum?"** oo macnihiisu yahay: "oo kuma soo gaarin miyaa wuxuu saaxiibkiin yiri?" Wuxuu yiri: "Waana saaxiibkee Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Cabdu Allahi bin Ubayya."** Wuxuu yiri: "Muxuuna yiri?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri**: "Zacama in rajaca ilaa Al Madiinati la yukhrijanna al acazzu minhaa al athalla"**, oo macnihiisu yahay: "Wuxuu leeyahay in markuu Al Madiinah ku laabto uu kan xoogga lihi ka saari doono midka dulliga ah ee taagta daran." Wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahyow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wa Allaahi adiga ka saaraya haddaad doontid, oo wa Allaahi isagaa dulliga ah, adiguna kan xoogga leh oo caziizka ah". Kaddibna wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u tur, oo wa Allaahi Ilaahay wuxuu noo kaa keenay ayadoo ay tolkiis taajkay ku boqri lahaayeen u diyaariyeen. Markaasuu wuxuu u arkaa inaad boqornimadiisa ka xayuubsatay." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dadka waday maalintaas oo idil ilaa ay galab ka noqotay iyo habeenkoo idil ilaa waaga dambe ka baryay iyo inta hore oo maalinta labaad ilaa ay qorraxdu ka dhibto. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dadka dejiyay, oo markay dhulka taabteenba ay hurdo la wada dhaceen. Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu sidaas u yeelay inuu dadka ka mashquuliyo warkii shalay dhacay ee Cabdu Allaahi bin Ubayya bin Saluul uu yiri. Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dadkuu waday, wuxuuna dhex qaaday Xijaaz ilaa uu uga dego ceel Xijaaz ku yaalla oo Naqiic dhankiisa ku yaalla oo la yiraahdo **Baqcaa'** (**Al Naqiic** oo uu Al Balaadii yiri waa waadi ka mid ah waadiyada Al Madiinah oo la yiraahdo **Waadii Al Naqiic** ilaa uu kasoo gaaro ceelka **Bi'ru Al Maashii** oo Al Madiinah sideed iyo

soddon kiiloomitir koofur ka xiga, kaddibna la yiraahdo **Waadii Al Xasaa** ilaa uu ka gaaro Thii Al Xulayfah -ahna meesha laga soo ixraamto oo maanta la yiraahdo Abyaaru Calii-, kaddibna la yiraahdo **Caqiiqu Al Madinah** ilaa uu uga biyo shubo Idam. Marka waadigaas **Al Naqiicu** wuxuu ugu dhow yahay Al Madiinah meel u jirta qiyaas afartan kiiloomitir xagga koofureed dariiqa **Al Furuc**, wuxuuna ugu fog yahay boqol iyo labaatan kiiloomitir Al Furuc agteeda). Markaasay markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhaqaaqay waxaa dadka ku kacday dabayl xoog leh oo dhibtay oo ay ka cabsadeen. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Laa takhaafuuhaa, fa innamaa habbat li mawti cathiimin min cuthamaa'i al kuffaari"**. Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ha ka baqannina oo waxay u kacday dhimashada mid weyn oo madaxda waawayn oo gaalada ka mid ah." Markaasay markay Al Madiinah yimaadeen ayay waxay arkeen inuu Rifaacah bin Zayd bin Al Ttaabuut, oo yuhuudda Banii Qaynuqaac u dhashay uu maalintaas dhintay."

Quraanka kasoo degay ibnu Ubayya

Suuradda Al Munaafiquuna oo munaafaqiinta ka hadlaysa waxay kasoo degatay ibnu Ubayya iyo inta amarkiisoo kale ku taagnaa. Markaasay markay soo degatay Suuraddu ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu qabtay dhegta Zayd bin Arqam, uuna yiri: **"Haathaa allathii awfaa bi uthinihi"** oo macnihiisu yahay: "Waa kan midkay dhegtiisu oofisay."

Mawqifka Cabdu Allaahi ee aabihiis

Cabdu Allaahi bin Cabdu Allaahi bin Ubayya bin Saluul waxaa gaaray amarka aabihiis, markaasuu wuxuu u yimid Rasuulka Ilaahay, sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uuna ku yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa isoo gaartay inaad dooneysid inaad dishid aabahay Cabdu Allaahi bin Ubayya, sababtuna ay tahay waxa kaa soo gaaray. Marka haddaad laabudda taas yeeleysid aniga i amar, anigaa madixiisa anigoo sida kuu keenayee. Wa Allaahi Al Khazraj way ogtahay inuusan jirin nin aabihiis aniga iiga baarrisan, waxaanna ka baqayaa in intaad nin kale amartid inuu dilo, uu dilo oo ay markaas naftaydu i siin weydo inaan arko ninka Cabdu Allaahi bin Ubayya dilay o dadka dhex socda oo aan markaas dilo, oo aan markaas nin mu'min ah u dilo gaal uu dilay, oo aan markaas naarta galo." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri**: "Bal nataraffaqu bihi wa nuxsinu suxbatahu, maa baqiya macanaa."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Bal waan u turaynnaa, saaxiibtinnimadiisana wanaajinaynnaa intuu nala joogo." Markaas kaddib Cabdu Allaahi bin Ubayya bin Saluul hadduu wax sameeyo ragga tolkiis ah ayaa eedeyn jiray, oo ku qaban jiray oo canaan jiray. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu Cumar bin Al Khadh-dhaab ku yiri markuu dhaqankoodaas arkay: **"Kayfa taraa yaa Cumaru, amaa wa Allaahi law qataltuhu yawma qulta lii aqtulhu, la arcidat lahu aanufun law amartahaa al yawma bi qatlihi la qatalatlu!"** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Maxay kula tahay Cumarow, oo wa Allaahi haddaan dili lahaa maalintaad i tiri inaan dilo waxaa caroon lahaa madax tolkiis , kuwaasoo haddaan maanta ayaga amro inay dilaan ay dili lahaayeen!" Markaasuu Cumar wuxuu yiri: "Wa Allaahi waan ogahay inuu amarka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu ka barako badan yahay amarkayga."

Imaatinka Maqyas oo muslin ah

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxaa Makkah ka yimid Maqyas bin Subaabah oo muslim ah, siduu muujiyay, wuxuuna yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan kuu imid anigoo muslin ah, waxaanna kuu imid anigoo doonayaa diyada walaalkay oo qalad loo dilay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, amar ku bixiyay in la siiyo diyada walaalkiis Hishaam bin Subaabah. Markaasuu Rasulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, agtiisa joogay in aan badnayn, kaddibna uu weraray ninka walaalkiis dilay oo uu dilay. Kaddibna wuxuu u noqday Makkah, isagoo murtad ah oo Diinta ka noqday."

Halhayska muslimiinta

Ibnu Hishaan wuxuu yiri: "Halhayska muslimiintu Maalinta Banii Al Musdhaliq wuxuu ahaa "Yaa Mansuur amit, amit" oo macnihiisu yahay: "Midka Guulaystayow, lay, lay!"

Ragga laga dilay Banii Al Musdhaliq

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Banii Al Musdhaliq waxaa maalintaas laga dilay rag. Calii bin Abii Dhaalib wuxuu ka dilay laba nin oo ah Maalik iyo wiilkiisa. Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf wuxuu isaguna ka dilay nin fardooleydooda ka mid ah oo la yiraahdo Axmar ama Uqaymir."

Amarka Juwayriyah bintu Al Xaarith

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Banii Al Musdhaliq kasoo qafaalay qafaal badan oo muslimiinta loo qaybiyay. Dadka maalintaas lasoo qafaalayna waxaa ka mdi ahayd Juwayriyyah bintu Al Xaarith bin Abii Diraar, haweenta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Caa'ishah waxay tiri: "Markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qafaalka Banii Al Musdhaliq qaybiyay, Juwayriyyah bintu Al Xaarith waxay gashay sahamka Thaabit bin Qays bin Al Sh-shammaas, ama ina adeerkiis. Markaasay weydiisatay inuu u sheego intay lacag ah oo madaxeeda ku furan karto. Markaasuu u sheegay. Waxayna ahayd haweney aad u qurxoon oo macaan oo qofka arkaba jeclaado. Markaasay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u timid ayadoo la kaashanaysa maalkay isku furan lahayd. Wa Allaahu markaan ku arkayba albaabka qolkayga ayaan kahday, waxaanna gartay inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam isaguna ku arki doono waxaan aniguba ku arkay. Markaasay u gashay ayna tiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, anigu waxaan ahay Juwayriyyah bintu Al Xaarith bin Abii Diraar, oo ah odayga tolkiis, waxaanna i gaartay balaayada adiga aan kaa qarsoonayn. Markaasaan waxaan galay sahamka Thaabit bin Qays Al Sh-shammaas, ama ina aderkiis. Markaasaan weydiistay inaan madaxayga lacag ku furto. Marka waxaan kuugu imid anigoo kaa kaashanaya lacagtaan isku furan lahaa." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Fa hal laka fi khayri min thaalika?"** oo macnihiisu yahay: "Taas mid ka khayr badan ma dooneysaa?" Waxay tiri: "Waana maxay Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Aqdi canki kitaabataki wa atazawwajuki!"**, oo macnihiisu yahay: "Lacagtaad isku furanaysid ayaan kaa bixinayaa kaddibna waan ku guursanayaa!" Waxay tiri: "Waa yahay Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi

Wasallam yiri: **"Qad facaltu"**, oo macnihiisu yahay: "Waa yeelay." Markaasuu warku baxay oo uu dadka gaaray inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Juwayriyyah bintu Al Xaarith bin Abii Diraar guursaday. Markaasay dadku waxay yiraahdeen: "Waa xididka iyo seediyaalka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam", oo ay markaas ay kuway qafaalka addoon ahaan sahamka uga heleen xoreeyeen oo sii daayeen. Sidaasaa guursashadadeeda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa lagu xoreeyey boqol qoys oo reer Banii Al Musdhaliq ah, mana ogi haweeney tolkeeda uga barako badan."

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Juwayriyyah magaceedu wuxuu ahaa Barrah, markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u bixiyay Juwayriyah. Sidoo kale Maymuunah bintu Al Xaarith iyo Zaynab bintu Jaxsh oo magacdoodu Barrah ahaayeen wuu beddelay una kala bixiyay Maymuunah iyo Zaynab."

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waxaa la yiri in markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kasoo gaddoomay duullaanka Banii Al Musdhaliq, ayna la socoto Juwayriyyah bintu Al Xaarith, uuna ku sugan yahay meesha la yiraahdo Thaatu Al Jayshi uu Juwayriyyah nin Ansaarta ka mid ah wadiico ahaan, waana ammaanee, ugu dhiibtay, uuna ku amray inuu ilaaliyo. Markaasuu Rasuulka Ilahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah yimid. Markaasaa waxaa soo kacay aabeheed Al Xaarithu bin Abii Diraar oo madax furashada gabadhiisa wada, oo markuu Al Caqiiq marayo uu fiiriyay geela uu madax furashadeeda u waday, uuna markaas laba rati kala haray, oo uu ban bananka Al Caqiiq ka mid ah ku qariyay, kaddibna uu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid oo yiri: "Muxammadow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaad soo qafaasheen gabadhayda , kanna waa madax furashadeeda." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: **"Fa ayna al baciirayni allathaani ghayyabtuhumaa bi al Caqiiqi fii shicbi kathaa wa kathaa?"** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Meeyana labada rati oo aad ku qarisay Al Caqiiqi, banka sidaas iyo sidaas?" Markaasuu Al Xaarithu wuxuu yiri: "Ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa annaka Muxammadun Rasuulu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo wa Allaahi taas ma uusan ogayn Ilaahay mooyee." Markaasu Al Xaarithu islaamay, ayna la islaameen laba wiil oo uu dhalay iyo dad tolkiis ka mid ahba. Markaasuu labadii rati u ciddiray oo uu keenay oo uu geelana Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u dhiibay, isagana gabadhiisa Juwayriyyah la siiyey. Markaasay islaamtay, islaannimadeeduna u suubanaaday. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, aabeheed ka doonay oo uu u guuriyay. Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mehher ahaan u siiyay afar boqol oo Diraham."

Meherkuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Juwayriyah siiyey wuxuu ahaa shan boqol oo Dirham.
Muslim wuxuu Caa'ishah ka wariyay inay tiri: "Kaana sadaaquhu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam li azwaajihi ithnatay cashrata awqiyatan wa nashan. A Tadrii maa al nashu?" Qultu: "Laa." Qaalat: "nisfu awqiyatin wa thaalika khamsa mi'atin Dirhamin." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Meherka uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam haweenkiisa oo idil siiyay wuxuu ahaa laba iyo toban wiqiyadood oo dahab ah iyo nash. Ma ogtahay wuxuu nash yahay?" Waxaan iri: "Maya." Waxay tiri: "Waa wiqiyad nuskeed. Qiimohooduna waa shan boqol oo Dirham."

Quraanka kasoo degay Al Waliidu bin Cuqbah

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Islaamiddooda kaddib ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Banii Al Musdhaliq u diray Al Waliidu bin Cuqbah bin Abii Mucaydh (inuu zakada maalkooda kasoo qaado). Markaasay markay maqleen inuu soo socdo ayay fardo soo fuuleen oo ay usoo baxeen. Markaasuu markuu isaguna maqlay soo bixiddooda ayuu ka baqay oo uu Rasuuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam usoo noqday una sheegay inay damceen inay dilaan. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calyhi Wasallam, ku hammiyay inuu ku duulo. Ayadoo ay weli xaaladdaan ku sugan yihiin ayuu wafdigoodu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid, waxayna yiraahdeen: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan maqlnay inaad ergay noo soo dirtay, markaasaan ka hortagnay oo usoo baxnay si aan u karaameynno, aanna u dhiibno zakada nalagu leeyahay. Markaasuu degdeg u noqday, waxaanna nasoo gaartay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri inaan usoo baxnay inaan dilno. Annaguna wa Allaahi inaanan taas usoo bixin." Markaasuu Rasuulka Ilaahay kasoo dejiyay isagaas iyo ayagaba Aayadaha lix ilaa sideed ee Suuratu Al Xujuraati: **"Yaa ayyuhaa allathiina aamanuu in jaa'akum faasiqun bi naba'in fa tabayyanuu an tusiibuu qawman bi jahaalatin fa tusbixuu calaa maa facaltum naadimiina**(6)**Wa aclamuu anna fiikum Rasuula Allaahi law yudhiicukum fii kathiirin mmina al amri lacanittum wa laakinna Allaaha xabbaba ilaykumu al iimaana wa zayyanahu fii quluubikum wa karraha ilaykumu al kufra wa al fusuuqa wa al cisyaana uulaa'ika humu al rraashiduuna**(7)**Fadlan mina Allaahi wa nicmatan wa Allaahu Caliimun Xakiimun**(8)**."** Aayadaha macnohoosu waxaa weeye: "Kuwiinna rumeeyeyow, hadduu idiin yimaado nin faasiq ah oo uu war idin keeno, warkaas caddaysta oo hubsada si aydnaan qawm ugu duulin oo u layn adinkoo war la'aan ah, oo aad markaas kaddib ka shallaydaan waxaad fasheen(6)Waxaadna ogaataan inuu dhexdiinna ku jiro Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo haddu idinku adeeco umuur badan aad dambaabeysaan oo halaagmaysan. Laakiin Ilaahay wuxuu idiin jeclaaday iimaanka oo uu quluubtiinna u qurxiyay, idiinna kahday gaalnimada iyo ka bixidda daacaddiisa oo ah fisqiga, iyo cisyaanka oo ah diididda awaamirtiisa. Kuwaas ayaan ah kuwa hanuunsan(7)Kaasna waa deeq Ilaahay ka timid iyo nicmo, Ilaahayna waa Caliimuun, wax walba ogsoon, Xakiimun, xikmo miiran ah oo wax walba meeshooda dhigaya(8)."

Juzka Sagaalaad

Sanadka wufuudda ee hoggaansiga Carabta/sanadka sagaalaad ee Hijrada

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Makkah furtay, Tabuukna kasoo jeestay, Thqiifna ay islaamtay oo baayacday, ayay wufuudda Carabtu jiha kasta uga timid (oo uu ibnu Hishaam yiri: "Taasuna waxay ahayd sanadka sagaalaad oo lagu magacaabo sanadka wufuudda."). Carabtu waxay u fiirsanayeen oo dhawrayeen siduu noqdo xaalka ka dhexeeya Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, iyo Quraysh, ayadoo ay Qurayshu ahayd imaamka dadka iyo murshidkooda iyo Ehelu Baytu Allaahi Al Xaraami, iyo dhasha la hubo ee Ismaaciil bin Ibraahiim, Calayhimussalaamu, iyo hoggaamiyayaasha Carabta, taasoo loo wada aqoonsan yahay oo aan lagu haysan. Qurayshi waxayna ahayd midda Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, xarbi kala hor tagtay oo khilaaftay.

Markaasaa markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Makkah furtay, Qurayshna ay hoggaansantay, ayna islaamtay, ayay Carab ogaatay inayan lahayn xoog ay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xarbi ugala hortagaan, iyo colaaddiisaba. Markaasay Diinta Ilaahay soo galeen, siduu Ilaahay Cazza wa Jalla u yiri afwaajan, oo ah kooxo kooxo is daba socda, ayna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam uga yimaadeen jiha kasta. Waaba ayada uu Ilaahay Tacaalaa Nabigiisu ku yiri: **"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Ithaa jaa'a nasru Allaahi wa al fatxu**(1)**Wa ra'ayta al nnaasa yadkhuluuna fii Diini Allaahi afwaajan**(2)**Fasabbix bi xamdi Rabbika wa istaghfirHu innaHu kaana Tawaabaa**(3)**."** Waana Suuratu Al Nnasr oo macneheedu yahay: " Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Markuu gargaarka Ilaahay yimaado iyo furashaduba(1)Aadna aragtid dadka oo Diinta Ilaahay usoo gelaya kooxo kooxo is daba jooga(2)Markaas ku tasbiixso xamdiga Rabbigaa, dambi dhaafidna weydiiso oo Isagu waa Midka tawbadda aqbalee(3)."

Wafdiga Banii Tamiim

Markaasay Wufuudda Carabtu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u timid, uuna u yimid Cudhaarid bin Xaajib bin Zuraarah bin Cudus Al Tamiimiyyi, oo ay madaxda Banii Tamiim la socdaan, uuna ka mid yahay Al Aqracu bin Xaabis Al Tamiimii, iyo Al Zzibriqaanu bin Badr Al Tamiimii oo u dhashay Banii Sacd, iyo Camr Al Ahtam, iyo Al Xabxaabu bin Yaziid." Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Ma aha Al Xabxaabu ee waa Al Xuttaatu, waana midka Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, uu walaaleeyey isaga iyo Mucaawiyah bin Abii Sufyaan, ayadoo uu Rasuulka Ilahaay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, walaaleeyey rag asxaabtiisa Muhaajiriinta ka mid ah, oo uu Abuu Bakr iyo Cumar walaaleeyey, iyo Cuthman bin Caffaan iyo Cabdu Al Rraxmaanu bin Cawf, iyo Dhalxah bin Cubaydu Allaahi iyo Al Zzubayru bin Al Cawwaamu, iyo Abuu Tharr Al Ghifaariyyi iyo Al Miqdaadu bin Camr Al Bahraanii, iyo Mucaawiyah bin Abi Sufyaan iyo Al Xattaatu bin Yaziid Al Mujaashicii. Markaasuu Al Xattaatu Mucaawiyah agtiisa ku dhintay inta khilaafadiisu socotay, oo uu Mucaawiyah dhaxlay wuxuu ka tegey walaalayntaas daraadeed." Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Ragga kaloo wafdiga Banii Tamiim ku jiray waxay ahaayeen Nucaym bin Yaziid iyo Qays bin Al Xaarith iyo Qays bin Caasim oo u dhashay Banii Sacd, oo la wada socda wafdi weyn ee Banii Tamiim." Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Iyo Cudhaarid bin Xaajib, oo u dhashay Banii Daarim bin Maalik bin Xanthalah bin Maalik bin Zayd bin Manaat bin Tamiim, iyo Al Zzibriqaanu bin Badr oo u dhashay Banii Bahdalah bin Cawf bin Kacb bin Sacd bin Zayd Manaat bin Taym, iyo Camr bin Al Ahtam oo u dhashay Banii Minqar bin Cubayd bin Al Xaarith bin Camr bin Kacb bin Sacd bin Zayd Manaat bin Tamiim, iyo Qays bin Caasim oo u dhashay Banii Minqar bin Cubayd bin Al Xaarith." Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxaana la socday Cuyaynah bin Xusn bin Xuthayfah bin Badr Al Fazaariyyu, oo Al Aqracu bin Xaabis iyo Cuyaynah bin Xisn waxay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasllam, kala qayb galeen duullaannada Furashada Makkah iyo Xunayn iyo Al Dhaa'if."

U qaylintooda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Mrkaasay labadoodaasu la socdeen wafdiga Banii Tamiim oo ay la yimaadeen. Markaasuu markuu wafdiga Banii Tamiim masjidka galay, ayay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo gurigiisa ku jira u qayliyeen, oo ay yiraahdeen: "Muxamadow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, noo soo bax." Markaasay taasu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhibtay, oo ah qayladooda, oo uu

usoo baxay. Markaasay waxay yirahdeen: "Muxammadow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan kuugu nimid inaan kula faantanno, ee u oggolow gabayaageenna iyo khadhiibkeenna." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Qad athintu li khadhiibikum fal yaqul"**, oo macnihiisu yahay: "Waan u oggolaaday khadhiibkeenne, waana ninka ugu af tahansans oo u hadlee, ee ha hadlo." Markaasuu Cudhaarid bin Xaajib kacayoo uu yiri: "Waxaa mahadda le Ilaaha korkeenna yeelay deeq iyo gallad, taasna wuu mudan yahay oo ehel u yahay. Midka naga dhigay boqorro, noona hibeeyey maalal aad u weyn oo aan ku sama falno, nagana dhigay kuwa ugu xoog badan dadka qorrax kasoo bax dega, uguna tiro badan, uguna hub badan. Marka, yaa dadka nagala mid ah? Soo madaxda dadka ma ihin iyo kuwooda ugu sarreeya? Marka, qofka nala faantamaa ha tiriyo wax la mid ah waxaan tirinnay oo kale. Annaguna haddaan doonnana hadalka waan badin karnay, waxaanse ka xishoonnay inaan wax badan ka sheegno wuxuu na siiyay. Taasna waa nalugu yaqaanna. Anigu taasaan iri, adinkuna aad la timaaddaan waxaan iri oo kale iyo amar ka sarreeya amarkeenna." Kaddibna wuxuu fariistay.

Jawaabta Thaabit

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Thaabit bin Qays Al Sh-shammaas, oo u dhashay Banii Al Xaarith bin Al Khazraj, ku yiri: **"Qum, fa ajibi al rrajula fi khudhbatihi"**, oo macnihiisu yahay: "Kac oo nin khudbadiisa uga jawaab." Markaasuu Thaabit kacay uuna yiri: "Waxaa mahadda iska leh Ilaaha ay Samaawaatka iyo arligu abuuriddiisa yihiin, oo uu xukunkiisa ku fuliyay, Kursigiisuna uu cilmigiisa ka mid yahay, uusan shayna ku ahaan deeqdiisa mooyee. Waxay hadana ka mid ahayd qudraddiisa inuu boqorro naga dhigay, uuna kuwa ugu khayr badan khalqigiisa ka dhex doortay Rasuul, nasab ahaanna, uguna kariimsan, uguna runlowsan, uguna laan dheer oo ugu gobsan. Markaasuu wuxuu kusoo dejiyay Kitaabkiisa, wuxuuna ku aaminay khalqigiisa. Sidaasuuna wuxuu ku ahaa kuu Ilaahay caalamiinta ka doortay. Markaasuu dadka iimaanka ugu yeeray. Markaasaa waxaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aaminay Muhaajiriinta tolkkiis iyo qaraabadiisa, oo dadka ugu gobsan, dadkana ugu wajiyo qurxoon, dadkana ugu camal fiican. Markaas kaddibna waxaa khalqiga ugu horreeyey oo yeela, Ilaahayna yeelay markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu yeeray waa annaga. Marka annagu waxaan nahay kuwa Ilaahay u gargaaray iyo waziirrada Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo culayska la qaaday. Dadkaan la dagaallannaa ilaa ay Ilaahay ka aaminaan. Cidda aaminta Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay nooga ammaan heleen maalkooda iyo dhiiggoodaba. Cidda gaalo noqotana Ilaahay daraadiis ayaan weligeen kula jihaadeynnaa, diliddisuna way noo sahlan tahay. Intaasaan iri, Ilaahay ayaanna dambi dhaafid u wediisanayaa aniga iyo mu'miniinta oo idil iyo mu'minaatkaba. Wa Al Ssalaamu calaykum ." Gabayaaga Banii Tamiim wuxuu ahaa Al Zzibriqaanu, kan Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, Xassaan bin Thaabit, oo maqnaa oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u ciddiray oo yimid."

Islaamiddooda iyo hadiyadaha la siiyay

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markuu Xassaan bin Thaabit gabaygiisa tiriyay oo markuu ka baxay uu Al Aqracu bin Xaabis yiri: "Aabahay ayaan ku dhaartaye, ninkaanu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa lala jiraa oo la taageeraa, oo khadhiibkiisu waa ka aftahansan yahay khadhiibkeenna, gabayaagiisuna gabayaageenna, codadkoduna waa

ka macaan yihiin codadkeenna. Markaasay islaameen, Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu hadiyadu siiyay, uuna hadiyado fiican siiyay."

Camr bin Al Ahtam

Wafdigu wuxuu Camr bin Al Ahtam uga soo tegey gaadiidkooda, isagaana ugu da' yaraa. Markaasuu Qays bin Caasim, oo Camr bin Ahtam necbaa, wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, nin ayaan gaadiidkenna uga soo tagnay, waana wiil yar," uuna waxaan fiicnayn ka sheegay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu isagana siiyay wax la mid ah wuxuu ragga kale siiyay. Wafdigaan ayayna kusoo degatay Suuratu Al Xujuraatu Aayaddeeda afaraad: **"Inna allthinna yunaaduunaka min waraa'i Al Xujuraati akh-tharuhum laa yacqiluuna**(4)**"**, oo macneheedu yahay: "Kuwa kaaga qaylinaya guryaha gadaashooda intooda badani caqli ma alaha."

Qisada ibnu Al Dhufayl iyo Arbad iyo wafdiga Banii Caamir

Waxaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid wafdiga Banii Caamir, ayna ka mid yihiin Caamir bin Al Dhufayl iyo Arbad bin Qays bin Jaz' bin Khaalid bin Jacfar, iyo Jabbaar bin Salmaa bin Maalik bin Jacfar, saddexdaas ayaana wafdiga madax u ahaa iyo shayaadiintoodaba. Markaasuu cadawga Ilaahay Caamir bin Al Dhufayl Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, u yimid isagoo doonaya inuu khayaano ku dilo. Tolkiis wuxuu Caamir ku yiri: "Caamirow, dadku wuu islaamay ee adiguna islaan." Markaasuu wuxuu yiri: "Waxaan ku dhaartay inaanan joogasan ilaa ay Caraboo idili isoo raacdo oo aan u taliyo, ninkaan Quraysheedna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, raaci mayo." Kaddibna wuxuu Arbad ku yiri: "Markaan ninka u tagno, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, , anigaa isaga kaa mashquulinaya wajigiisa oo hortiisaan fariisanayaa ee markaan sidaas yeelo seeftaada ku dhufo." Markaasay markay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimaadeen, ayuu Caamir bin Al Dhufayl wuxuu yiri: "Muxammadow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, keligay gooni iila bax oo labadeenna oo keli meel na gee." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri**: "Laa wa Allaahi xattaa tu'mina bi Allaahi Waxdahu"**, oo macnihiisu yahay: "Maya wa Allahi jeer aad rumaysid Ilaahay Keligiis". Markaasuu hadana wuxuu yiri: "Muxammadow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, keligay gooni iila bax oo labadeenna oo keli meel na gee." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri**: "Laa wa Allaahi xattaa tu'mina bi Allaahi Waxdahu"**, oo macnihiisu yahay: "Maya wa Allahi jeer aad rumaysid Ilaahay Keligiis", oo sidaasuu ula hadlayay isagoo dhawraya inuu Arbad ku dhaqaaqo wuxuu ku amray. Markaasuusan Arbad farna dhaqaajin. Markaasuu Caamir markuu arkay wuxuu falay ayuu wuxuu yiri hadana: "Muxammadow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, keligay gooni iila bax oo labadeenna oo keli meel na gee." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri**: "Laa wa Allaahi xattaa tu'mina bi Allaahi Waxdahu"**, oo macnihiisu yahay: "Maya wa Allahi jeer aad rumaysid Ilaahay Keligiis". Markaasuu Markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka diiday ayuu wuxuu yiri: "Wa Allaahi magaaladaan ayaan fardooley kaaga soo buuxinayaa iyo ragba." Markaasuu markuu tegey ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Allaahumma akfinii Caamira bin Al Dhufayl"**, oo macnihiisu yahay: "Ilaahayow iiga filnow Caamir bin Al Dhufayl." Markaasay markay kasoo tegeen Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayuu Caamir wuxuu Arbad ku yiri: "War hooge Arbadow, mee waxaan ku amray inaad samaysid? Wa Allaahi inuusan ku sugnaan jirin arliga korkiisa nin aan adiga uga cabsi

badanahay naftayda. Wa Allaahi inaan maanta kaddib kaa baqanayn." Wuxuu yiri: "Aabe waaye, ha igu degdegin, oo wa Allaahi markaan damcaba inaan ku kaco waxaad i amartay ee isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku saabsan, adigaa aniga iyo ninka nasoo dhex gala, oo aanan uba jeedin waxaan adiga ahayn. Marka ma seeftaan kugu dhuftaa?" Markaasay dalkooda u gaddoomeen oo markay meel dariiqa ka mid ah marayaan ayuu Ilaahay wuxuu Caamir bin Al Dhufayl kusoo diray daacuun dhuunta ka galay, kuna dilay guri haweeney Banii Saluul u dhalatay. Markaasay markay duugeen ayay saaxibbadiisu tageen oo ay yimaadeen arligooda, arliga Banii Caamir ayadoo ay xilliga qaboobaha tahay. Markaasuu tolkood u yimid oo yiraahdeen: "Arbadow noo warran?" Wuxuu yiri: "Wa Allaahi waxba ma jiraan, wuxuuna noogu yeeray, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, inaan wax caabudno. Wa Allaahi waxaan jeclaan lahaa inuu hadda ila joogo, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo aan fallaar ku dhejiyo oo dilo." Markuu warkaas yiri kaddib maalin ama laba maalmood isagoo ratigiisu daba socdo ayuu Ilaahay isaga iyo ratigiisaba biriq usoo diray oo labadoodaba gubtay. Arbad bin Qays wuxuu ahaa Labiid bin Rabiicah walaalkiis oo hooyaa wada dhashay." Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Ilaahay wuxuu Caamir iyo Arbad kasoo dejiyay Aayadda saddex iyo tobnaad ee Suuaratu Al Rracdi: **"Wa yursilu al ssawaaciqa fa yusiibu man yashaa'u wa hum yujaadiluuna fii Allaahi wa Huwa shadiidu al mixaali**(13)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Wuxuuna soo diraa birqo oo uu ku dhuftaa cidduu doono ayagoo Ilaahay ku murmaya. Ilaahayna wuxuu leeyahay qabasho, waa cadaabe, xoog badan(13)."

Dimaamu iyo wafdiga Banii Sacd bin Bakr

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Banii Sacd bin Bakr waxay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, usoo direen wafdi nin ka kooban oo la yiraahdo Dimaamu bin Thaclabah oo u yimid. Markaasuu ratigiisa fariisiyay masjidka albaabkiisa, uuna dabray, kaddibna uu masjidka soo galay isagoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, asxaabtiisa la fadhiyo. Dimaam wuxuu ahaa nin xoog leh oo timo badan oo laba raamood leh. Markaasuusoo socday oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, iyo asxaabtiisa soo dul istaagay, uuna yiri: "Waa kiinnee in Cabdu Al Mudh-dhalib?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Anaa ibnu Cabdu Al Mudh-dhalib"**, oo ah: "Waa aniga ina Cabdu Al Mudh-dhalib." Markaasuu wuxuu yiri: "Ma Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, baad tahay?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Nacam"**, oo ah: "Haa." Wuxuu yiri: "Ina Cabdu Al Mudh-dhalibow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxbaan ku weydiinayaa, su'aashana aan kugu badinayaa ee ha iga caroon." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Laa ajidu fii nafsii, fa sal cammaa badaa laka"**, oo macnihiisu yahay: "Ma caroonayo ee waxaad doontid weydii." Wuxuu yiri: "Waxaan kugu dhaariyay Ilaahaaga iyo Ilaaha kuwa adiga kaa horreeyeyba iyo Ilaaha inta gadaashaa ahaan doontaba ee ma Ilaahay ayaa Rasuul ahaan kuu soo diray?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Allaahumma nacam"**, oo macnihiisu yahay: "Ilaahayow haa." Wuxuu yiri: ""Waxaan kugu dhaariyay Ilaahaaga iyo Ilaaha kuwa adiga kaa horreeyeyba iyo Ilaaha inta gadaashaa ahaan doontaba ee ma Ilaahay ayaa ku amray inaan Keligiis caabudno, aanna shayna shariik ula yeelin, aanna ka fuqno asnaamta ay aabayaalkeen la caabudi jireen?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Allaahumma nacam"**, oo macnihiisu yahay: "Ilaahayow haa." Wuxuu yiri: ""Waxaan kugu dhaariyay Ilaahaaga iyo Ilaaha kuwa adiga kaa horreeyeyba iyo Ilaaha inta gadaashaa ahaan doontaba ee ma Ilaahay ayaa ayaa ku amray inaan shantaan saladood tukanno?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Allaahumma nacam"**, oo macnihiisu yahay: "Ilaahayow haa."

Markaasuu sidaasoo kale faraa'idka islaamka oo idil Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, mid mid u weydiiyay, zakada, soonka, xajka, shareecada islaamkoo idil, isagoo mar walba ku dhaarinaya siduu tan ka horreysa ugu dhaariyay oo kale, ilaa uu kasoo jeestay dhammaantood, oo uu markaas yiri: "Ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa sh-hadu anna Muxammad Rasuulu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Faraa'idkana wa la imaanayaa, waxaad iga reebtayna waan ka fogaanayaa, intaasna waxba ku dari mayo, kana naaqusin mayo." Kaddibna wuxuu u gaddoomay xagga ratigiisa oo uu dalkiisa ku laabtay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"in sadaqa Thuu al caqiisatayni dakhala al jannah"**, oo macnihiisu yahay: "Hadduu run sheegay midka labada raamood leh jannaduu gelayaa."

Dadkiisuu islaamka ugu yeeray

Markuu ratigiisa u yimid dabarkuu ka furay wuuna soo dhaqaaqay oo uu tolkiis u yimid. Markaasay usoo shireen oo ay agtiisa isugu yimaadeen. Waxa ugu horreeyey oo uu yirahdana waxay ahayd: "al laata iyo al cuzzaa waa xun yihiin." Waxay yiraahdeen: "Aayar Dimaamow, oo ka baq inuu baras kugu dhaco iyo juudaan iyo waalashaba." Wuxuu yiri: "Hooga! Wa Allaahi inayan labadoodu waxna dhibin, waxna anficin. Ilaahay wuxuu soo diray Rasuul, wuxuuna kusoo dejiyay Kitaab, uuna idiinka badbadiyay waxaad ku sugnaydeen. Aniguna waxaan marag ka ahay inuusan jirin ilaah aan Ilaahay ahayn keligiis oo shariik ma laha iyo inuu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhiu Wasallam addoonkiisa iyo Rasuulkiisa yahay, waxaanna xaggioisa idiinka keenay wuxuu idin amray inaad yeeshaan iyo wuxuu idinka reebay." Wa Allaahi inaan galabtii la gaarin ee nin iyo haweeney kasta oo beeshaas ka tirasanaa way wada islaameen. Cabdu Allaahi bin Cabbas wuxuu yiri: "ma anan maqal wafdi ka sarreeya Dimaam bin Thaclabah."

Al Jaaruudu iyo wafdiga Cabdu Al Qays

Ibnu Isxaaq wuxu yiri: "Waxaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid isaguna Al Jaaruudu bin Camr bin Xanash oo u dhashay Cabdu Al Qays. Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid ayuu la hadalay, Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu islaamka usoo bandhigay, uguna yeeray inuu islaamo, kuna dhiirri geliyay. Markaasuu wuxuu yiri: "Muxammadow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, anigu diin ayaan ku taaganahay. Marka diintayda waan ka tegayaa oo Diintaadaan gelayaa ee daynta la igu leeyahay ma iga bixineysaa?" Wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Nacam, anaa daaminun an qad hadaaka Allaahu ilaa maa huwa khayrun minhu"**, oo macnihiisu yahay: "Haa, waxaanna ku dammaano qaadaya inuu Ilaahay kuu soo hanuuniyay Diin diintaada ka fiican." Markaasuu islaamay, ay ragga la socdayna islaameen. Kaddiba wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, weydiistay inuu gaadiid uu fuulo siiyo, wuxuuna yiri: **"Wa Allaahi maa cindii maa axmilukum calayhi"**, oo macnihiisu yahay: "Wa Allaahi ma hayo waxaan idinku qaado." Markaasuu wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, halkaan iyo arligeenna waxaa joogs geel baadi ah oo dad ka lumay, arligeenna ma ku gaarnaa?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Laa, iyyaaka wa iyaahaa! Fa innamaa tilka xaraqu al nnaari"**, oo macnihiisu yahay: "Maya, ee ka fogow kuwaas, maxaa yeelay baadidaas waxay kuu jiidaysaa gubidda naarta!"

Markaasuu Al Jaaruudu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka gaddoomay oo u tolkiis u laabtay, islaannimadiisuna way fiicnayd, Diintiisana xoog ayuu ugu dhegganaa ilaa uu ka dhinto. Wuxuuna soo gaaray riddada. Markaasay dad tolkiisa ka mid ah oo hore u islaamay ay diintoodii hore dib ugu noqdeen, ayagoo raacay Al Gharuuru bin Al Munthir bin Al Nnucmaanu bin Munthir. Markaasuu Al Jaaruudu tolkiis dhex istaagay, uuna hadlay. Markaasuu shahaadada xaqqa ah ku ashahaatay, uuna tolkiis islaamka ugu yeeray, uuna yiri: "Dadow, anigu waxaan marag ka ahay inuusin jirin ilaah aan Ilaahay ahayn iyo inuu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, addoonkiisa iyo Rasuulkiisa yahay. Qofka intaas marag ka ahaynna waxaan leeyahay waa gaal." (oo uu ibnu HIshaam yiri: "wuxuu yiri: "anna waan ka goostay xiriirka qofkaan sidaas ka marag kicin."). Al Jaaruudu wuxuu ahaan jiray krishtaan."

Islaamidda ibnu Saawaa

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu furashada Makkah horteed Al Cala'u bin Al Xadramii u diray Saawaa Al Cabdii, oo islaamay, oo ay islaamiddiisuna suubanaatay. Wuxuuna dhintay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dabadiis, iyo ka hor intayan reer Baxrayn islaamka ka noqon, ayadoo uu Al Calaa'u agtiisa joogo isagoo ah amiirka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ee Baxrayn."

Wafdiga Banii Xaniifah iyo Musaylimah al kath-thaab

Waxaa ayaguna Rasuulka Ilahaay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid wafdiga Banii Xaniifah, uuna ka mid yahay Musaylimah bin Xabiib Al Xanafiyyi al kath-thaab beenlowga (oo u ibnu Hishaam yiri: "Magaciisu waa Musaylimah bin Thumamah, koofaartiisuna waa Abaa Thumaamah."), waxayna degeen daarta haweenta la yiraahdo bintu Al Xaarith, haweeney Ansaarta ka mid ah (oo uu Al Suhaylii yiri: "magaceedu waa Kayyisatu bintu Al Xaarith bin Kurayz bin Xabiib bin Cabdu Shams, waxayna u dhixi jirtay Musaylimah al kath-thaab, waxaana uga dambeeyey Cabdu Allaahi bin Caamir bin Kurayz. Ibnu Isxaaqna wuxuu yiri: "magaceedu waa Zaynab, taas ayaana sawaabta ah."), kana sii ah Banii Al Nnajjaar. Banii Xaniifah waxay Rasuulka Ilaahay,, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimaadeen ayagoo Musaylimah maryo ku daboolay oo huwiyay, isagoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, asxaabtiisa la fadhiyo, gacantana u kuhaysto laan geed timireed oo darafteeda hore ay xoogaa caleemo ah ku yaallaan. Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid ayagoo isaga maro huwiyay, ayuu la hadlay oo uu waxna weydiistay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Law sa'altanii haathaa al casiiba maa acdhaytakahu"**, oo macnihiisu yahay: "Haddaad laantaan i weydiisato kuma siin lahayn."
Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Wafdiga Banii Xaniifah waxay yiraahdeen inay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimaadeen ayagoo Musaylimah meeshay degeen uga yimid. Markaasay markay islaameen xuseen meeshuu joogo, oo ay yiraahdeen: "Rasuulka Ilaahayow, Saallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan degmadeenna iyo gaadiidkeenna uga soo tagnay nin nala socday oo noo ilaaliya." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, amar ku baxshay in isaga la siiyo waxa ayaga la siiyay oo kale, wuxuuna yiri: **"amaa innahu laysa bi sharrikum makaanan"**, oo macnihiisu yahay: "meeshuu joogo tiinna kama xuma, oo wuxuu ilaalinayaa alaabta asxaabtiisa."

Musaylimah oo Nabinnimo sheegtay

Markaasay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kasoo gaddoomeen, ayna Musaylimah u keeneen hadiyaduu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, siiyay. Markaasa markay arligooda Al Yamaamah tageen ayuu cadawga Ilaahay Musaylimah Diinta ka baxay oo uu nabinnimo sheegtay, ayagan uu been u sheegtay, uuna yiri: "Nabinnimada ayaa isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la ila wadaajiyay", wuxuuna ragga wafdiga la ahaa ku yiri: "Soo markaad aniga xaalkayga u sheegteen ma uusan oran: **"amaa innahu laysa bi sharrikum makaanan"**, oo macnihiisu yahay: "meeshuu joogo tiinna kama xuma, oo wuxuu ilaalinayaa alaabta asxaabtiisa."? Taas uma uusan oran waxaan ahayn inuu ogyahay in nabinnimada isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la ila wadajiyay!" Markaasuu gabayo tiriyaa uuna la mid dhigayo Quraanka, uuna yiri: "Qad ancama Allaahu calaa al xublaa, akhraja minhaa nasmatan tascaa min bayni sifaaqin wa xashaa", oo macneheedu yahay: "Ilaahay wuu u nicmeeyey haweenka uurka leh,oo wuxuu kasoo bixiyay qof nool oo soconaya haraggooda iyo calooshood dhexdooda." Markaasuu khamrada u xalaaleeyey iyo zinadaba, salaadana ka daayey. Isagoo intaas sameeyey ayuu hadana leeyahay inuu Rasuul Ilaahay iyo Nabi yahay. Markaasay Banii Xaniifah amarkaas ku raaceen. Labadaas midday ahaydna Ilaahay ayaa og."

Zaydu Al Khayli iyo wafdiga Dhayyi'i

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa u yimid wafdiga Dhayyi', uuna ka mid yahay Zaydu Al Khayli, oo ah odagooda. Markaasay markay u yimaadeen Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la hadleen, uuna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, islaamka usoo bandhigay, ayaguna ay islaameen, islaamkooduna noqday mid fiican. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Maa thukira lii rajulun mina Al Carabi bi fadlin thumma jaa'anii illaa ra'aytuhu duuna maa yuqaalu fiihi, illaa Zaydu Al Kahyli, fa innahu lam yablugh kulla maa kaana fiihi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Nin kasta oo Carab oo deeq la iigu sheegay, waana tilmaamo wanaagsan oo uu leeyahay uuna dadka dheer yahaye, kaddibna aniga ii yimid, waxaan arkay inuusa deeqda lagu sheegay wada lahayn, intaan ka ahayn Zaydu Al Khayli oo deeqda lagu sheegay ay ka yartahay deeqduu leeyahay." Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u bixiyay Zaydu Al Khayri, wuxuuna u gooyey dhulka Fayd iyo Ardiin, sidaas ayuuna qoraal ugu siiyay. Markaasuu Zaydu Al Khayri Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam kasoo tegay isagoo tolkiis usoo laabanaya iyo arligiisa. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wsallam, yiri**: "in yanju Zaydu min xummaa Al Madiinah"**, oo macnihiisu yahay: "Haduu Zayd ka badbaado qandhada Al Madiinah." Wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu qandhada ku magacaabay magac aan xummaa ahayn, aanna Ummu Maldam ahayn, waanse illoobay." Markaasuu markuu gaaray magaalo ku taalla Najd iyo ceel ceelashooda ka mid ah oo la yiraahdo Fardah ayay qandho ku qabatay oo uu dhintay. Markaasuu markuu dhintay ay haweentiisu qaadatay qoraalkuu soo siiyay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ay dab ku gubtay."

Amarka Cadiyy bin Xaatim

Cadiyy bin Xaatim wuxuu yiri: "Ma jiro nin Carab ah oo aniga iga necbaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markaan maqlay. Aniguna waxaan ahaa nin

madax ah oo krishtaan ah, tolkayna xoolahay dagaal kusoo furtaan waxaan ku lahaa al mirbaca oo ah rubuca xoolahaas oo ah marka afar meelood loo qaybiyo meel. Sidaasaan waxaan ku lahaa diin, waxaanna ahaa boqorka tolkay. Markaasaan markaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maqlay ayaan nacay. Markaasaan wiil addoonkayga ahaa oo Carab ah geelana ii raaci jiray ayaan waxaan ku iri: "Aabe waaye, waxaad iiga diyaarisaa geeleyga awr hayyin ah oo buubuuran, meel ii dhowna ku hay. Markaas haddaad maqashid inuu jayshka Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, cagta soo dhigay arligenna ii soo sheeg." Markaasuu sidaas yeelay, oo subax ayuu ii yimid, uuna yiri: "Cadiyyow,, waxaad fali lahayd hadday fardooleyda Muxammad, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, ku dul yimaaadaan fal, oo anigu waxaan araky calammo. Markaasaan wareystay waxaana la yiri: "Kuwaanu waa ciidanka Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Markaasaan ku iri: "Hadaba awrtayda ii keen." Markaasuu keenay oo aan haweenkeyga iyo caruurtayda saaray, aanna is iri: "waxaan u tegayaa dadkaan isku diinta nahay oo ah krishtaanka Shaam." Markaasaan waxaan qaaday dariiqa Al Jawshiyyah (oo uu ibnu Hishaam yiri: "waa Al Xawshiyyah."). Waxaanna uga tegey degmadeenna gabar uu Xaatim dhalay, waana walaashiis oo Xaatim waa isaga aabihiis. Markaasaan Shaam imid oo degay. Markaasay fardooleyda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, i daba mareen oo ay ina Xaatim qafaasheen oo qafaalkooday ka mid noqotay. Markaasaa ayadoo ku dhex jirta qafaalka Dhayyi' ayaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, loo keenay, ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam gaaray warkayga iyo inaan Shaam u cararay. Markaasaa ina Xaatim waxaa la geliyay xero qafaalka la gelin jiray oo masjidka albaabkiisa ku taalla. Markaasaa waxaa soo ag maray Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ay markaas u kacday, waxayna ahayd haweeney edeb fiican leh, waxayna ku tiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aabahay wuu dhintay, midka xilkayga hayayna wuu tegey, ee sii dayn igu mannayso, Ilaahay ha kugu mannaystee." Wuxuu Sallaa Allaahu calayhi Wasallam yiri: **"Wa man waafiduka?"** oo macnihiisu yahay: "Waana kee kan xilkaga hayay?" Waxay tiri: "Cadiyy bin Xaatim." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Al faarru mina Allaahi wa RasuuliHi?"** oo macnihiisu yahay: "Ma midka ka cararay Ilaahay iyo Rasuulkiisaa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam?" Markaasuu Sallaa Allaau Calayhi Wasallam ka tegey, igana tegey. Maalinta taas ku xigta ayuu hadana Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam isoo ag maray oo aan intii oo kale ku iri, isaguna intuu shalay yiri oo kale maantana igu yiri. Markaasuu hadana maalinta taas labaad ku xigtay isoo ag maray anigoo ka quustay. Markaasuu nin gadaashiisa socda ii tilmaamay: "Kac oo la hadal!" Markaasaan u kacay Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo aan ku iri: ""Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aabahay wuu dhintay, midka xilkayga hayayna wuu tegey, ee sii dayn igu mannayso, Ilaahay ha kugu mannaystee." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri: **"Qad facaltu. Fa laa tacjalii bi khuruujin xattaa tajidii min qawmiki man yakuunu lahu thiqqatun, xattaa yuballighaki ilaa bilaadiki. Thumma aathaniinii."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waa yahay, hana ku degdegin tegiddaada jeer aad ka heshid rag tolkaa ah oo lagu kalsoon yahay oo beledkaaga ku gaarsiiyay. Markaad heshid ii soo sheeg." Markaasaan waxaan dadka weydiiyay midkuu ahaa ninka ii tilmaamay inaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la hadlo. Waxaana la yiri: "Waa Calii bin Abii Dhaalib, Allaha raalli ka noqdee." Sidaasaan ku joogay ilaa u ka yimaado safar u dhashay Baliyy ama Qudaacah, aniguna waxaan rabay inaan walaalkay Shaam ugu tago. Markaasaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u imid, aanna iri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, waxaa yimid rag tolkay ah oo kalsooni lagu qabo iyo gaarsiinba." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ii arratiray, gaadiid

aan raacana i siiyay, maalna uu i siiyay. Markaasaan safarkaas soo raacay oo aan Shaam la imid." Cadiyy wuxuu yiri: "Wa Allaahi anigoo gurigayga fadhiya ayaan waxaan arkay haweeney rati saaran oo ii soo socota, markaasaan waxaan iri: "Tani waa ina Xaatim." Mase waaba ayadii. Markaasay markay isaoo dul istaagtay ayay i liidday oo tiri: "Waa midka riximka gooyey oo daallinka ah, oo waxaad soo qaadatay haweenkaaga iyo caruurtaada, waxaadna ksooa tagatay cawrada (waa gabadhee) aabahaa!" Waxaan iri: "Walaalay waxaan fiicnayn ha oran, oo wa Allaahi inaanan cudur daar lahayn, waxaad sheegtayna waan falay." Markaasay degtay oo ay agteyda iyo gurigeyga ila degtay. Markaasaan waxaan ku iri, waxayna ahayd haweeney fiiro dheer leh iyo go'aanba: "Amarka ninkaanu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, muxuu kula yahay?" Waxay tiri: "Waxay ila tahay wa Allaahi inaad degdeg ugu tagtid, oo hadduu Nabi yahayna kuwa ugu horreeya oo rumayntiisa ugu horreeya waxay leeyihiin deeq ay inta kale dheer yihiin, hadduuse boqor yahay ku dullobi maysid Cizziga Yaman, adigoo adiga ah." Waxaan iri: "Wa Allaahi taas weeye taladu."

Islaamidda Cadiyy bin Xaatim

Markaasaan soo dhaqaaqay oo aan Rasuulka Ilaahay, Sllaa Allaahu Calayhi Wasalllam, Al Madiinah ugu imid, oo aan usoo galay isagoo masjidkiisa ku dhex jira oo aan salaamay. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Mani al rrajulu?"** oo macnihiisu yahay: "Kumaad tahay?" Waxaan iri: "Cadiyy bin Xaatim." Markaasuu Rasuulka Ilaahy, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo kacay oo uu xagga gurigiisa ila aaday, oo wa Allahi isagoo ila sii socda ayaa waxaa ka hortimid haweeney taag daran oo da' awyn oo istaajisay. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam waqti dheer la taagnaa, ayaduna ay amarkeeda kala hadlaysay." Markaasaan waxaan naftayda iska iri: "Wa Allaahi inuusan kani boqor ahayn." Kaddibna wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Clayhi Wasallam ii waday gurigiis oo i geliyay. Markaasuu wuxuu soo qaaday barkin harag ah oo caleemaha timirta laga buuxiyay oo uu ii soo tuuray, uuna yir: **"ajlis calaa haathihi"**, oo macnihiisu yahay: "Middaan ku fariiso." Waxaan iri: "Bal adigu ku fariiso." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Bal anta"**, oo ah: "Bal adigu ku fariiso". Rasuulka Ilaahyna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dhulkuu fariistay. Markaasaan naftayda waxaan iska iri: "Wa Allaahi inuusan kani boqor ahayn wuxuu boqor sameeyo." Kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"iih yaa Cadiyyu bin Xaatim! Alam takun rakuuziyyan?"** Oo macnihiisu yahay: "Cadiyy bin Xaatimow! Soo ma ihid nin diinta rakuuziyyah ku jira?" Waxaan iri: "Haa." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Awalam takun tusiiru fii qawmika al mirbaaci?"** oo macnihiisu yahay: "oo soo tolkaa kama qaadatid rubuca xoolahay soo furtaan?" Waxaan iri: "Haa." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"fa inna thalika lam yakun yuxillu fii diinika"**, oo macnihiisu yahay: "hadaba kaasu diintaada xalaal kuuguma aha inaad qaadatid." Waxaan iri: "Haa wa Allaahi, iiguma aha." Markaasaan waxaan ogaaday inuu Nabi Mursal ah oo lasoo diray yahay oo uu ogyahay wuxuu dadku jaahil ka yahay. Kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"lacallaka yaa Cadiyyu innamaa yamnacuka mina al ddukhuuli fii haathaa Al Ddiini maa taraa min xaajatihim. Fa wa Allaahi la yuushikanna al maalu an yafiida fiihim xattaa laa yuujada man ya'khuthahu. Wa lacallaka innamaa yamnacuka min dukhuulin fiihi maa taraa min kathrati caduwwihim wa qillata cadadihim. Fa wa Allaahi layuushikanna an tasmaca bi al amr'ati takhruju mina Al Qaadisiyyati calaa baciirihaa tazuuru haathaa Al Bayti, laa takhaafu. Wa lacallaka innamaa yamnacuka min dukhuulin fiihi annaka taraa anna al mulka wa al ssuldhaana fii ghayrihim. Wa aymu Allaahi la yuushikanna an tasmaca bi al qusuuri al biidi min arli Baabil qad**

futixat calayhim." Xadithka macnihiisu waxaa weeye: "Cadiyyow waxaa dhici karta inuu kaa hortaagan yahay gelidda Diintaan waxaad muslimiinta uga jeedid oo danyar nimo ah, laakiin wa Allaahi mar dhow maalkuu dhexdooduu ka burqanayaa oo ku badanayaa ilaa lagaba waayo qof doonaya oo qaata. Waxaaba dhici karta inay geliddiisa kaa hartaagan tahay waxaad ka aragtid fara badnida cadawgooda iyo ayaga tiro yaridooda. Wa Allaahi mar dhow waxaad maqli doontaa haweeney Al Qaadisiyyah, oo ah magaalo ku taalla arliga Ciraaq, ratigeeda kasoo raacday oo Kacbada u timaadda ama Xajj ama cumro ayadoo aan baqanayn. Waxaaba dhici karta oo kale inay geliddiisa kaa hortaagan tahay inaad u jeedid inay boqortooyadu iyo saldanadu ku jirto muslimiinta ghayrkood. Wa Allaahi waxaad dhowaan maqli doontaa inay muslimiintu qusuurta cadcad ee arliga Baabil , ee Ciraaq, loo furay." Markaasuu islaamay. Cadiiy wuxuu yiri: "Laba waan arkay oo ay gudbeen, waxaana hartay midda saddexaad, oo wa Allaahi ahaanaysa. Waxaan arkay qusuurta cadcad ee Baabil oo la furtay. Waxaanna arkay haweeney ratigeeda Al Qaadisiyyah kasoo baxday ayadoo aan axadna ka cabsanayn oo Kacbada usoo xajjiday. Wa Allaahi tan saddexaadna way ahaan doontaa, oo maalku uu dureerayaa oo badanayaa ilaa lagaba waayo qof raba oo qaata."

Farwah bin Musayk Al Muraadii

Ibnu isxaaq wuxuu yiri: "Waxaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, u yimid Farwah bin Musayk Al Muraadii, isagoo kasoo go'ay boqorrada Kindah, kana soo tegay. In yar ka hor islamkana waxaa qabaa'ilka Muraad iyo Hamdaan dhex maray dagaal, ayna Hamdaan ka dileen Muraad waxay doonaan, ayna dhiiggooda daadiyeen oo laayeen maalin la yiraahdo Yawmu Al Rradmi. Hamdaan waxaa hoggaamiye u ahaa Al Ajdacu bin Maalik maalintaas (oo uu ibnu Hishaam yiri: "Waxaa hoggaamiye u ahaa maalintaas Maalik bin Xariim Al Hamdaanii."). Markuu Farwah Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid , ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: **"Yaa Farwah hal saa'aka maa asaaba qawmaka Yawma Al Rradmi?"** oo macnihiisu Yahay: "Farwow, ma ka xumaatay waxa tolkaa ku dhacay maalinta Yawmu Al Rradmi?" Wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa kee midka uu tolkiis ku dhaco wax la mid ah waxa tolkay ku dhacay maalinta Yawmu Al Rradmi oo aan ka xumaanayn?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Amaa inna thaalika lam yazid qawmaka fii al islaami illaa khayran"**, oo macnihiisu yahay: "Taasu tolkaa uma kordhin islaamka dhexdiisa waxaan khayr ahayn." Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u dhiibay xilka Muraad iyo Zubayd iyo Mathxij kulligeed, wuxuuna ku daray Khaalid bin Saciid bin Al Caas oo zakada u xil saaran, arligiisana la jooga ilaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la oofsaday."

Imaatinka Camr bin Macdi Yakriba iyo Banuu Zubayd

Waxaa kaloo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid Camr bin Macdi Yakriba oo ay la socdaan dad reer Banii Zubayd , wuuna islaamay. Markuu gaaray warka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayuu Camr bin Macdi Yakriba wuxuu Qays bin Makh-shuux Al Muraadiyyi ku yiri: "Qaysow, adigu waxaad tahay odaga tolkaa, waxaana naloo sheegay inuu nin Quraysh u dhashay oo Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la yiraahdo, uu Xijaaz kasoo baxay isagoo leh inuu Nabi yahay. Marka ina keen aan u tagnee si aan cilmigiisa ku ogaanno, oo hadduu Nabi yahay siduu leeyahay taasu ka qarsoomi mayso, oo aan markaan la kulanno aan raacno. Hadday si kale tahayna cilmigiisaan ogaaneynnaa." Markaasuu

Qays taas ka diiday, taladiisana uuba mid maangaabnimo ka dhigay. Markaasuu Camr bin Macdi Yakriba soo baxay oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid, oo uu islaamay, Nabigana, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rumeeyey oo uu aaminay. Sidaasuu Camr bin Macdi Yakriba tolkiis Banii Zubaydah kula joogay, ayagoo uu xilkooda hayo Farwah bin Musayk. Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la oofsaday Camr bin Macdi Yakriba Diinta ka noqday oo u murtad noqday."

Imaatinka Al Ashcathu iyo wafdiga Kindah

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa u yimid Al Ashcathu bin Qays oo uu la socdo wafdiga Kindah, oo ahaa sideetan nin oo daabado saaran. Markaasay Rasuulka iLahaay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu soo galeen masjidkiisa ayagoo timaha guudadkooda soo shanleeyey, soona indha kuushay, labbisanna jubbadaha Yaman lagu sameeyo ee Al xibarah oo xariir aarad uga dhigay. Markaasay markay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, usoo galeen ayuu wuxuu ku yiri: **"Alam tuslimuu?"** oo macnihiisu yahay: "oo soo ma aydnaan islaamin?" Waxay yiraahdeen: "Haa." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"fa maa baalu al xariiri fii acnaaqikum?"** oo macnihiisu yahay: "Hadaba maxay tahay xariirta luqumaha idiinku xirani?" Markaasay kasoo siibeen oo ay tuureen. Kaddibna Al Ashcathu bin Qays wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahyow, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, annagu waxaan nahay dhasha Aakilu Al Muraari, adiguna waxaad tahay wiilka Aaakilu Al Muraari!" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ilko caddeeyey uuna yiri: **"naasibuu bi haathaa al nnasabi Al Cabbaasa bin Cabdu Al Mudh-dhalib wa Rabiicah bin Al Xaarith"**, oo macnihiisu yahay: "nasabkaan kula nasab sheegata Al Cabbaas bin Cabdu Al Mudh-dhalib iyo Rabiicah bin Al Xaarith." Al Cabbaas iyo Rabiicah waxay ahaayeen laba nin oo ganacsato ah, o markay galaan arliga Carabta qaarkeed oo la weydiiyo: "Yaad tihiin?" waxay yiraahdaan: "waxaan nahay dhasha Aakili Al Muraari", ayagoo nasabkaas isku xoojinaya, ayadoo ay Kindah boqorro ahaayeen. Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"bal naxnu Banuu Al Nnadr bin Kinaanah, laa naqfuu ummanaa walaa nantafii min abiinaa"**, oo macnihiisu yahay: "Bal annagu waxaan nahay ubadka Al Nnadru bin Kinaanah, hooyadeenna kuma abtirsanno, aabeheenna kama tagno." Markaasuu Al Ashcathu bin Qays wuxuu yiri: "Ma dhammayseen ragga Kindow? Wa Allaahi ninkaan ka maqlo isagoo leh maanta kaddib sideetan ulood ayaan ku dhufanayaa.""

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Al Ashcathu bin Qays wuxuu ku abtirsadaa Aakilu Al Muraari xagga hooyada. Aakilu Al Muraari waa Al Xaarithu bin Camr bin Juxr bin Camr bin Mucaawiyah bin Al Xaarith bin Mucaawiyah bin Thawr bin Murattic bin Mucaawiyah bin Kindiyyi, lana yiraahdo Kindah. Sababta loogu bixiyay Aakilu Al Muraari waxay ahayd sidatan: "Camr bin Al Habuulah Al Ghassaanii ayaa degmadooda soo weeraray, ayadoo uu Al Xaarithu ka maqnaa. Markaasuu xoolohoodana qaatay, haweenkooda iyo caruurtoodana qafaashay. Dadka u qafaashayna waxaa ka mid ah Ummu Unaas bintu Cawf bin Muxallam Al Shaybaanii oo ah haweenta Camr bin Al Xaarith bin Camr. Markaasay intay xagga Shaam usii socdeen waxay ninka qafaalay ee ah Camr ku tiri: "Waxaan u jeedaa nin dheer oo madow oo aad bashiihiisa mooddo bashimaha geel cunay geedka muraar oo qoortana kugu dhegay", ayna ka waddo ninkeeda Al Xaarithu, oo markaas Aakilu Al Muraari loo bixiyay. Al Murarna waa magaca geed . Markaasuu Al Xaarithu markuu degmadiisa kusoo laabtay oo uu arkay waxa dhacay, ayuu isagoo wata rag Banii Bakr bin Waa'il radkiisa kusoo dhacay o intuu ka daba yimdi dilay, haweentiisana uu sidaas

ku badbaadiyay iyo qafaalka iyo xooluhuu bililiqaystaba. Waxaa kaloo la yiri in Aakilu Al Muraari uu yahay Xujr bin Camr bin Mucaawiyah, oo ah ninka Xadiithkaan wariyay, looguna bixiyay Aakilu Al Muraari isagoo isaga iyo asxaabtiisu ay duullaankaan cuneed geed la yiraahdo Al Muraaru."

Surudu bin Cabdu Allaahi iyo wafdiga Al Azd

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: : "Waxaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid Surud bin Cabdu Allaahi Al Azdiyyu, wuuna islaamay, oo ay islaannimadiisu wanaagsanaatay, isagoo la socda wafdiga Al Azd. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi wasallam, amiir uga dhigay inta tolkiis ka islaamtay, wuxuuna ku amray inuu la jihaado isagoo wata inta tolkiis ka islaamtay gaalada arliga kala dariska ah ee ku dheggan aa arliga Yaman."

Siduu Surud dadka Jurash u laayay

Markaasuu Surud bin Cabdu Allaahi kusoo duulay amarka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo uu Jurash ku degay, ayadoo waagaas ah magaalo darbi ku wareegsan yahay, ayna deggan yihiin qabaa'ilka reer Yaman ah. Waxaan ayagaaas usoo cararay oo magaaladooda lasoo galay qabiilka Khathcam, lana soo galay markay maqleen inay muslimiintu soo socdaan. Markaasay ku hareereysnaayeen muddo bil ah, ayaguna ay magaaladooda isaga ilaaliyeen. Kaddibna Surud wuu ka gaddoomay, oo markuu marayo buur agtooda ah oo la yiraahdo Shakr, ayay reer Jurash waxay u maleeyeen inuu ka tegey isagoo baqday. Markaasay raadkiisa kusoo joogsadeen, ayago doonaya inay laayaan. Markaasuu markay ka daba yimaadeen xaggooda soo aaday oo uu laayay layn xoog badan.

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo wafdiga Jurash

Reer Jurash waxay hore Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ugu soo direen laba nin oo ka dhashay oo Al Madiinah ugu yimid si ay usoo indha indheeyaan, ayna soo eegaan. Markaasaa ayagoo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la jooga, ayna galab tahay kaddib salaadda casar ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri: **"Bi ayyi biladi Allaahi Shakr?"**, o macnihiisu yahay: "Halkeebay arliga Ilaahay Shakr uga taallaa?" Markaasay labad nin ee reer Jurash ah u keceen ayna yiraahdeen: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, beledkeenna waxaa ku yaalla buur la yiraahdo Kushr!" Sidaasayna reer Jurash ugu yeeraan buurtaas. Markaasu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri**: "innahu laysa bi Kushr, wa laakinnahu Shakr"**, oo macnihiisu yahay: "Ma ha Kushr ee waa Shakr." Waxay yiraahdeen: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maxaadna usoo qaaday?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"inna budna Allaahi la tunxaru cindahu al aana"**, oo macnihiisu yahay: "Tuludaha Ilaahay ayaa agtiisa lagu gawracayaa haddeer." Markaasay labada nin waxay ag fariisteen Abuu Bakr ama Cuthmaan, oo labadooda ku yiri: "War maxaad leedihiin! Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu idiin sheegay in tolkiin la laynayo, ee u kaca Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, weydiistana inuu Ilaahay ka baryo inuu tolkiin dilidda ka dul qaado." Markaasay keceen oo ay taas weydiisteen, uuna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Allaahumma irfac canhum"**, oo macnihiisu yahay: "Ilaahayow ka dul qaad." Markaasay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam kasoo gaddoomeen, oo ay dalkooda usoo noqdeen, waxayna arkeen in

tolkood uu Surud bin Cabdu Allaahi ka laayay maalintuu ka laayey, ahna maalintuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu ka yiri wuxuu ka yiri iyo saacadduu u shegeyba."

Islaamidda reer Jurash

Markaasaa waxaa soo baxay wafdiga Jurash oo Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah ugu yimid. Wayna islaameen, wuxuuna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam u xiray daaqsiin magaaladooda ku hareereysan, oo calanno la yaqaannu lagu muday, una kala soocan faraska iyo awrta gaadiidka ah iyo dibida beeraha fasha iyo lo'da beerta lagu falo. Dadkii kale oo daaqsintaas xoolohooda daqsadana maalkoodu waa dambi."

Wafdiga boqorrada Ximyar

Waxaa kaloo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah ugu yimid qoraalka boqorrada Ximyar markuu Tabuuk kasoo laabtay iyo ergaygay usoo direen inay islaameen boqrrada Al Xaarithu bin Cabdu Kulaal iyo Nucaym bin Cabdu Kulaal iyo Al Nnucmaanu Qayli Thii Rucayn wa Macaafira wa Hamdaana. Wuxuuna usoo diray Zurcah Thuu Yazin Maalik bin Murrah Al Rrahaawii inay islaameen, ayna shirkiga iyo ehelkiisaba ka tageen.

Qoraalkuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u dhigay

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, u dhigay qoraalkaan: **"Bismi Allaahi Al Rarxmaani Al Rraxiimi. Min Muxmmadin Rasuula Allaahi ilaa Al Xaarithu bin Cabdu Kulaal, wa ilaa Nucaym bin Cabdu Kulaal wa ila Al Nucmaanu Qayli Thii Rucayn wa Macaafira wa Hamdaan. Ammaa bacda thaalikum, fa inni axmadu ilaykumu Allaaha Allathii laa ilaaha illaa Huwa. Ammaa bacdu, fa innahu qad waqaca binaa rasuulukum munqalabanaa min ardi al rruumi, fa laqiinaa bi Al Madiinati. Fa ballagha maa arsaltum bihi, wa khabbaranaa maa qibalakum, wa anba'anaa bi islaamikum, wa qatlakumu al mushrikiina, wa anna Allaaha qad hadaakum bihudaaHu, in aslaxtum wa adhactumu Allaaha wa Rasuulaha, wa aqamtumu al ssalaata, wa aataytymu al zzakaata, wa acdhaytum mina al ghanaa'imi khumusu Allaaha wa sahma al Rrasuuli wa safiyyihi, wa maa kutiba calaa al mu'miniina mina al ssadaqati mina al caqaari, cushruhu maa saqat al caynu wa saqati al Ssamaa'u, wa calaa maa saqaa al gharbu nisfu al cushri. Wa anna fii al ibili al arbaciina ibnatu labuunin, wa fii thalaathiina mina al ibili ibnu labuunin thakarin, wa fii kulli khamsin mina al ibi shaatun, wa fii kulli cashrin mina al ibili shaataani. Wa fii kulli arbaciina mina al baqari baqaratun, wa fii kulli thalaathiina mina al baqari tabiicun jathacun aw jathacatun, wa fii kulli arbaciina mina al ghanami saa'imatin waxdahaa shaatun. Wa annahaa fariidatu Allaahi allatii faradahaa calaa al mu'miniina fii al sadaqati. Fa man zaada khayran fa huwa khayrun lahu, wa man addaa thaalika wa ash-hada calaa al islaamihi wa thahara al mu'miniina calaa al mushrikiina, fa innahu mina al mu'miniina, lahu maa lahum, wa calayhi maa calayhim, wa lahu thimmatu Allaahi wa thimmata RasuuliHi. Wa innahu man aslama min yahuudiyyin aw nasraayyin fa innahu mina al mu'miniina, lahu maa lahum wa calayhi maa calayhim. Wa man kaana calaa yahuudiyyatihi aw nasraaniyyatihi fa innahu laa yuraddu canhaa, wa calayhi al jizyatu, calaa kulli xaalimin thakarin aw unthaa, xurrin aw cabdin, Diinaarun waafin min qiimati Al**

Macaafiri aw ciwaduhu thiyaaban. Fa man addaa thaalika ilaa Rasuuli Allaahi fa inna lahu thimmatu Allaahi wa thimmatu RasuuliHi. Wa man manacahu fa innahu caduwwun Lillaahi wa li RasuuliHi. Ammaa bacdu. Fa inna Rasuula Allaahi Muxammadan Al Nabiyyi arsala ilaa Zurcah Thii Yazin an ithaa ataakum rusulii fa uusiikum bihim khayran: Mucaath bin Jabal wa Cabdu Allaahi bin Zayd wa Maaliku bin Cubaadah, wa Cuqayl bin Nimr, wa Maalik bin Murrah wa asxaabuhum, wa an ajmacuu maa cindakum mina al ssadaqaati wa al jizyata min mukhaaliifakum, wa ablighuuhaa rusulii. Wa anna amiiruhum Mucaathu bin Jabalu. Fa laa yanqalibanna illaa raadiyan. Ammaa bacdu. Fa inna Muxammadan yash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa annahu cabduHu wa RasuuluHu. Thumma inna Maalika bin Murrah Al Rrahawii qad xaddathanii annaka aslamta min awwali Ximyara, wa qatalta al mushrikiina, fa abshir bi khayrin, wa aamuruka bi Ximyara khayran. Wa laa takhuunuu, wa laa takhaathaluu, fa inna Rasuula Allaahi huwa waliyyu ghaniyyikum wa faqiirikum, wa inna al ssadaqata la taxillu li Muxammadin wa laa li Ahli Baytihi, innamaa hiya zakaatun yuzakkaa bihaa calaa fuqaraa'i al muslimiina, wa ibna al ssabiili. Wa in kaana Maalikan qad ballagha al kahabara, wa xafitha al ghayba, wa aamurukum bihi khayran. Wa inni qad arsaltu ilaykum min saalixi ahlii wa uulii Diinihim wa uulii cilmihim, wa aamurukum bihim khayran. Fa innahum manthuurun ilayhim. Wa al ssalaamu calaykum wa raxmatu Allaahi wa barakaatuHu."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Muxammad, Nabiga, waxayna u socotaa Al Xaarithu bin Cabdu Kulaal iyo Nucaym bin Cabdu Kulaal iyo Al Nnucmaanu Qayli Thii Rucayn wa Macaafira wa Hamdaan. Intaas dabadeedna. Ilaahay ayaan adinka daraadiin ugu xamdinayaa, Ilaaha uusan jirin Isaga Ilaah aan ahayn. Intaas dabadeedna. Ergaygiinnu wuxuu noo yimid markaan ka nimid arliga ruumaanka, waxaanna kula kulannay Al Madiinah, waxaad lasoo dirteenna wuu nasoo gaarsiiyay, khabarkiinnana noo sheegay. Wuxuuna noo sheegay inaad islaamteen iyo inaad gaalada layseen, iyo inuu Ilaahay hanuunkiisa idinku hanuuniyay. Hadaba haddaad suubanaataan oo Ilaahay adeecdaan iyo Rasuulkiisaba, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,, salaaddana aad oogtaan, zakadana aad bixisaan, ghaniimada khumuska Ilaahay ka bixisaan iyo sahamka Rasuulka, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo safiyyigiisa, oo ah wuxuu naftiisa u doorto intaan la qaybin oo isaga u gaar ah, iyo waxa mu'miniinta waajib looga dhigay ee zakada beeraha oo ah cushur, oo ah tobankii meeloodba meel, beertay ili waraabiso iyo midday Samadu waraabiso, oo ah roob ku waraabta. Beerta wadaan lagu waraabiyana waxaa waajib ku ah cushur nuskiis, oo ah tobankii meeloodba meel nuskeed. Afartankii geela waa inaad ka bixisaan ibnatu labuun, oo ah neef geela oo dheddig ah oo laba sano u buuxsantay, gudana gashay sanadkii saddexaad oo cumrigeeda. Soddonka geelana aad ka bixisaan ibnatu labuunin oo labood ah. Shan halaad oo geela oo kastana aad ka bixisaan ri. Tobanka halaadna aad ka bixisaan laba riyood.. Afartankii lo'ahna aad sac ka bixisaan. Soddoonkii lo' ah oo kastana aad ka bixisaan Tabiic, oo ah neef lo'aad oo labood ama dheddig ah oo ay hal sano u buuxsantay, kuna dhex jira sanadka labaad ee cumrigiisa. Aadna kulli afartanka neef oo ari ahna oo keligeed daaqda aad ri ka bixisaan. Waana fardi zakadu, oo uu Ilaahy mu'miniinta korkooda ku fardi yeelay. Qofka intaas ka badan bixiyana isagay khayr u tahay, qofka intaas bixiyana islaannimadiisana ka marag kaca, mu'miniintana u hiilliya gaalada korkooda, kaasi sidaas yeela mu'miniintuu ka mid yahay, wuxuuna leeyahay

waxay leeyihiin, isagana waxaa korkiisa ah waxa ayagana korkooda ah oo kale (waana xuquuq iyo waajibaat), wuxuuna leeyahy ilaalinta Ilaahay iyo ilaalinta Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Yuhuudiga ama krishtaanka islaama wuxuu ka mid yahay mu'miniinta, wuxuuna leeyahay waxay ayaguna leeyihiin, isagana waxaa korkiisa ah wax la mid ah waxa ayagana korkooda ah oo kale. Qofka ku harase yuhiidinnimadiisa iyo krishtaannimadiisa, laga hor istaagi mayo, oo laga celin mayo, waxaana korkiisa ah oo laga qaadayaa jizyo, oo qof kasta oo qaan gaar ah, lab ama dheddig, xor ama adoon, jizyadu waa hal Diinaar oo buuxa, oo qiimaha Al Macaafir ah, ama qiimo u dhigma oo dhar ah. Qofkooda kaas u dhiiba Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu leeyahay ilaalinta Ilaahay iyo ilaalinta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,. Qofka diidana waa cadawga Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Intaas kaddibna. Rasuulka Ilaahay, Nabi Muxmamad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u diray Zurcah Thii Yazin in markay idiin yimaadaan rusushayda aan soo diray, waxaan idinkala dardaarmayaa inaad u samo fashaan, waana Mucaath bin Jabal iyo Cabdu Allahi bin Zayd iyo Maalik bin Cubaadah, iyo Cuqbah bin Nimr iyo Maalik bin Murrah iyo asxaabtooda. Soona uruuriya zakada agtiinna taalla iyo jizyada kuwa idin khilaafay oo yuhuudda iyo krishtaanka ah, una keenay rusushayda. Waxaana amiirkooda ah oo taladooda haya Mucaath bin Jabal, ee yuusan ii soo noqon isagoo raalli ah mooyee. Intaas dabadeedna. Muxammad, Sallaa Allaahu calayhi Wasallam, wuxuu ka marag kacay oo yiri ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu iyo inuu isagu yahay addoonkiisa iyo Rasuulkiisa. Maalik bin Murrah Al Rrahaawii wuxuu ii sheegay inaad tahay kan Ximyar ugu hor islaamay, gaaladana aad laysay. Marka ku bishaareyso khayr, waxaanna ku amrayaa inad Ximyar u sama fashid. Khayaanana ha la imaanina, gargaarkana ha iskala harina, oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa waliga kiinna hodanka ah iyo kiinna saboolka ahba. Zakada iyo sadqaduna u xalaal ma ah Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Ehelu Baytkiisaba, waa qoyskiisee, ee waa zaka lagu korinayo fuqarada muslimiinta iyo kuwooda musaafirka ah. Maalikna khabarka wuu nasoo gaarsiiyay, sirtana wuu dhawray, waxaanna idin amrayaa inaad isagana u sama fashaan. Aniguna waxaan idiin soo diray kuwo ka mid ah kuwa fiican ee Ehelkeyga iyo kuwa Diintoda ugu fiican, uguna cilmi fiican. Waxaanna idin amrayaa inaad u sama fashaan, oo ayaga waa in la xushmeeyaa. Wa al ssalaamu calaykum wa raxmatu Allaahi wa barakaatuHu."

Dardaaranka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Mucaath bin Jabal Yaman u diray

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Mucaath bin Jabal Yaman u diray wuu la dardaarmay, uuna awaamirtuu fulin lahaa siiyay, kaddibna uu yiri: **"yassir wa la tucassir, wa bashi-shir wa laa tunaffir. Wa innaka sataqdamu calaa qawmin min ahli al kitaabi, yas'aluunaka maa miftaaxu al jannati, fa qul: "Shahaadatu an laa ilaaha illaa Allaahu Waxdahu laa shariika laHu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Fududee umuurta oo ha adkayn, dadka u bishaaree oo waxay ku farxaan u sheeg, ee ha didin oo waxay ka cararaan ha usheegin. Adiguna waxaad u tegi doontaa dad ehelu kitaabka ka mid ah, waxayna ku weydiinayaan wuxuu yahay furaha jannadu. Waxaad tiraahdaa: "Furaha janadu waa: "Shahaadatu an laa ilaaha illaa Allaahu Waxdahu laa shariika laHu." Markaasuu Mucaath bin Jabal soo baxay oo markuu Yaman yimid uu u kacay fulinta wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo amray. Markaasaa waxaa u timid haweeney reer Yaman ah, waxayna tiri: "Saaxiibka Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, muxuu yahay xaqqa uu ninku haweentiisa ku leeyahay?"

Wuxuu yiri: "Hoy isjir oo maxaad leedahay! Haweentu maba awooddo inay xaqqa ninkeeda oofiso. Marka naftaada ku jihaad inaad xaqqiisa u oofi intaad ka kartid." Waxay tiri: "Wa Allaahi haddaad ahaan lahayd saaxiibka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waad ogtahay wuxuu xaqqa ninku uu haweentiisa ku leeyahay yahay." Wuxuu yiri: "Hoy, maxaad leedahay! Haddaad u imaan lahayd oo aad heli lahayd inay sankiisa kasoo burqanayaan malax iyo dhiig oo aad kasoo wada nuugto , oo ayan waxba uga harin, xaqqiisa maa aadan gudin."

Islaamidda Farwah bin Camr Al Juthaamii

Ibnu isxaaq wuxuu yiri: Farwah bin Camr Al Naafirah Al Juthaamii, kana sii ah Al Nnufathii, wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, usoo diray ergay u sheega inuu islaamay,wuxuuna hadiyad ahaan ugu soo dhiibay baqal cad. Farwah wuxuu ruumaanka u hayay xilka Carabta xigta, wuxuuna degganaa Macaan (oo hadda Dawladda Urdun ka mid ah), iyo inta hareereheeda ah ee arliga Shaam oo uu xilkeeda hayay. Markaasuu markuu roomaanka gaaray warkiisa ah inuu islaamay ayay soo raadiyeen oo ay qabten, oo ay arligooda ku xabbiseen, oo ay qoorta ka gooyeen, ayna markaas dabadeed qori ku xireen oo ay ku wareen ceel agtiisa."

Islaamidda Banii Al Xaarith

Ibnu Isxaaq wuxuu yir: "Kaddib Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu diray Khaalid bin Al Waliidu bisha Rabiicu Al Aakhir ama Jamaadu Al Uulaa ee sanadka tobnaad, una diray Banii Al Xaarith bin Kacb ee Najraan dega, wuxuuna ku amray inuu islaamka ugu yeero saddex maalmood ka hor intuusan la dagaallamin, oo hadday ka yeelaan uu isaguna ka yeelo. Haddayan yeelinna uu la dagaallamo. Markaasuu Khaalid soo baxay oo uu u yimid. Markaasuu fardooley dhan walba u diray ayaga islaamka ugu yeereysa oo leh: "Dadow, islaama waad nabad geleysaane." Markaasu dadku islaamay, ayna soo galeen sida loogu yeeray. Markaasuu Khaalid dhexdooda ku sugnaaday isagoo islaamka baraya iyo Kitaabka Ilaahay iyo Sunnada Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sidaasoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam kusoo amray inuu yeelo hadday islaamaan oo ayan dagallamin. Kaddibna Khaalid bin Waliidu wuxuu warqad usoo dhigay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uuna ku yiri: "Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Ku socota Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kana timid Khaalid bin Al Waliidu. Al Ssalaamu calayka yaa Rasuula Allaahi wa raxmatuHu wa barakaatuHu. Ilaahay ayaan adiga daraadaa ugu mahdinayaa, Ilaaha uusan jirin ilaah aana Isaga ahayn. Intaas dabadeedna, Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ilaahay korkaaga ha ku salliyee, adigu waxaad ii dirtay Banii Al Xaarith bin Kacb, waxaadna i amartay in markaan u imaado aanan saddex maalmood la dagaallamin, aanna islaamka ugu yeero, oo markaas hadday islaamaan aan dhex joogo, aanna ka aqbalo, aanna baro cilmiga islaamka iyo Kitaabka Ilaahay iyo Sunnada Nabigiis, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Hadday islaami waayaan aan la dagaallamo. Marka, waan u imid oo aan saddex maalmood islaamka ugu yeerayay, siduu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isoo amray, fardooley ayaanna u diray, kuna iri: "Banii Al Xaarithow islaama waad nabad geleysaane." Markaasay islaameen, mana ayan dagaallamin. Aniguna hada ayagaan la joogaa, anigoo ku amryaya wuxuu Ilaahay ku amray, kana reebaya wuxu Ilaahay ka reebay, cilmiga iyo islaamkana baraya, iyo Sunnada Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Sidaas ayaanna ahaanayaa ilaa uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi

Wasallam, iiga soo dhigo. Wa Al Ssalaamu calayka Rasuulka Ilaahayow wa raxmatu Allaahi wa barakaatuHu."

Warqadda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Khaalid

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Khaalid bin Al Waliidu warqaddaan usoo dhigay:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Al Nnabiyyi Rasuula Allaahi ilaa Khaalid bin Al Waliid. Salaamun calayka. Fa inni axmadu Allaaha ilayka, Allaaha Allathii laa ilaaha illaa Huwa. Ammaa bacdu, fa inna kitaabaka jaa'anii maca rasuulika tukhbiru anna Banii Al Xaarith bin Kacb qas aslamuu qabla an tuqaatilahum, wa ajaabuu ilaa maa dacawtahum ilayhi mina al islaami, wa shahiduu an laa ilaaha illaa Allaahu wa anna Muxamman Cabdu Allaahi wa RasuulaHu, wa an qad hadaahumu Allaahu bi hudaahu. Fa bash-shirhum wa anthirhum, wa aqbil walyqbil macaka wafduhum. Wa Al Ssalaamu calayka wa raxmatu Allaahi wa barakaatuHu."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Ka socota Nabi Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kuna socota Khaalid bin Al Waliidu. Salaamun calayka. Aniguna Ilaahay ayaan daraadaa ku xamdinayaa, Ilaaha uusa jirin ilaah aan Isaga ahayn. Intaas dabadeed. Qaraalkaagu wuu isoo gaaray iyo ergaygaad ii soo dirtayba, aadna ku sheegeysid inay Banii Al Xaaritha bin Kacb islaameen ka hor intaadaan la dagaallamin, ayna kaa yeeleen waxaad ugu yeertay oo islaamka ah, ayna ka marag kaceen inuusan jirin Ilaahay aan Ilaahay ahayn iyo inuu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, addoonka Ilaahay iyo Rasuulkiisaba yahay, iyo inuu Ilaahay hanuunkiisa ku hanuuniyay. Marka, u bishaaree, una dig. Adiguna soo noqo, hana kusoo raaco wafdigoodu. Wa Al Ssalaamu calayka wa raxmatu Allaahi wa barakaatuHu."

Imaatinka Khaalid iyo wafdigooda

Markaasuu Khaalid soo noqday, waxaana la yimid wafdiga Banii Al Xaarith bin Kacb, uuna ka mid yahay Qays bin Al Xusayn Thii Al Ghussah iyo Yaziid bin Cabdu Al Madaan, iyo Yaziid bin Al Muxajjal, iyo Cabdu Allaahi bin Qurad Al Ziyaadii, iyo Shaddaad bin Cabdu Allaahi Al Qanaanii, iyo Camr bin Cabdu Allaahi Al Dabaabii.

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo wafdiga Banii Al Xaarith

Markay yimaadeen oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arkay wuxuu yiri: **"Man haa'uulaa'i al qawmi allathiina ka'annahum rijaalu al hindi?"** oo macnihiisu yahay: "Waa kuwee raggaas aad moodid inay yihiin ragga hindiga?" Waxaa la yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kuwaasu waa ragga Banii Al Xaarith bin Kacb." Markaasay markay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo dul istaageen, ayay salaameen ayna yiraahdeen: "Waxaan marag ka nahay inaad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, tahay, iyo inuusan jirin ilaah aan Ilaahay ahayn." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Wa anaa ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa annii Rasuulu Allaahi"**, oo macnihiisu yahay: "Aniguna waxaana maraga k ahay

inuusan jirin ilaah aan ilaahay ahayn iyo inaan anigu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ahay." Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"antum allathiina itha zujiruu istaqdamuu?"** oo macnihiisu yahay: "Ma adinkaa kuwa marka la riixo hore usoo socda?" Markaasay aamuseen oo axad ka mid ahi uusan u jawaabin. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar labaad is hadalkaas ku celiyay. Markaasuusan axadna u jawaabin. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar saddexaad ku celiyay. Markaasuusan axadna u jawaabin. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar afaraad ku celiyay. Markaasuu Yaziid bin Cabdu Al Madaan wuxuu yiri: "Haa, Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo annagu waxaan nahay kuwa marka dib loo riixo, hore usoo socda." Sidaasuuna afar goor yiri. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Law anna Khaalidan lam yaktub ilayya annakum aslamtum wa lam tuqaatiluu la alqaytu ru'uusakum taxta aqdaamikum"**, oo macnihiisu yahay: "Hadduusan Khaalid ii soo dhigi lahayn inaad islaanteen, madaxdiinnaan goyn lahaa oo aan cagihiinna hoostooda ku tuuri lahaa." Markaasuu Yaziid bin Al Madaan wuxuu yiri: "Wa Allaahi inaanan kugu mahdin adiga, Khaalidna aanan ku mahdin." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Fa man xamidtum?"** oo macnihiisu yahay: "Yaadna ku mahdiseen?" Waxay yiraahdeen: "waxaan ku mahdinnay Ilaahay Cazza wa Jalla, Isagaana ah Midka adiga nagu kaa hanuuniyay Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: "**Sadaqtum"**, oo ah: "Run ayaad sheegteen." Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Bimaa kuntum taghlibuuna man qaatalakum fii al jaahiliyati?"** oo macnihiisu yahay: "maxaad uga adkaan jirteen kuw aidinla dagaallama zamanka jaahiliyada?" Waxay yiraahdeen: "Kuwa nala dagaallama waxaan uga adkaan jirnay Rasuulka Ilaahayow, annagoo midaysan oo aan kala dhanbalmin, axadna aan dulmi ku bilaabin." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Sadaqtum"**, oo ah: "run ayaad sheegteen." Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Banii Al Xaarith bin Kacb amiir uga dhigay oo uu xilkooda u dhiibay Qays bin Al Xusayn. Markaasuu wafdiga Banii Al Xaarith bin Kacb dib ugu noqdeen arligooda bisha Shawwaal inta ka hartay dhexdeeda, ama bilowga bisha Thuu Al Qacdah. Markay tolkood kusoo laabteen kaddib, ma ayan nagaadin afar bilood waxaan ahayn ee Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa la oofsaday, uuna Ilaahay u naxariistay oo barakeeyey, raallina ka noqday, una nicmeeyey.

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u diray Camr bin Xazm oo awaamiirtiisa sida

Markuu wafdigoodu ka gaddoomay, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u diray Camr bin Xazm, si uu Diinta u baro, una baro Sunnada iyo cilmiga islaamka, uuna zakadooda ka qaado, wuxuuna u dhiibay Qoraal uu ugu dhigay awaamirtiisa, uuna ku amray wuxuu ku amray. Qoraalkuna wuxuu ahaa sidatan:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathaa bayaanun mina Allaahi wa RasuuliHi: yaa ayuhaa allathiina aamanuu awfuu bi al cuquudi. Cahdun min Muxammadin Am Nnabiyyi Rasuula Allaahi li Camr bin Xazm, xiina bacathahu ilaa Al Yaman. Amarahu bi taqwaa Allaahi fii amrihi kullihi, fa inna Allaaha maca allathiina ittaqaw wa allathiina hum muxsinuuna. Wa amarahu an ya'khutha bi al xaqqi kamaa amarahu Allaahu, wa an yubash-shira al nnaasa bi al khayri, wa ya'murahum bihi, wa yucallima al nnaasa Al Quraana, wa yufaqqihihim fiihi, wa yanhaa al nnaasa, falaa yamussa Al Quraana insaanun

illaa wa huwa dhaahirun, wa yukhbira al nnaasa bi allathii lahum, wa allathii calayhim, wa yaliina lilnnaasi fii al xaqqi, wa yashaddu calayhim fii al thulmi, fa inna Allaaha kariha al th-thulma, wa nahaa canhu, fa qaala: "Alaa lacnatu Allaahi calaa al th-thaalimina." Wa yubash-shira al nnaasa bi al jannati wa bi camalihaa, wa yunthira al nnaasa al nnaara wa camalahaa, wa yasta'lifa al nnaasa xattaa yufaqqahuu fii Al Ddiini, wa yucallima al nnaasa macaalima al xajji wa sunnatahu wa fariidatahu wa maa amara Rasuulu Allaahi bihi. Wa Al Xajju Al Akbaru: Al Xajju Al Akbaru. Wa Al Xajju Al Asgharu huwa al Cumratu. Wa yanhaa al nnaasa an yusalliya axadun fii thawbin waaxidin saghiirin illaa an yakuuna thawban yathriya dharafayhi calaa caatiqayhi. Wa yanhaa al nnaasa an yaxtabii axadun fii thawbin waaxidin yufdii bi farjihi ilaa Al Ssamaa'i. Wa yanhaa an yacqisa axadun shacra ra'sihi fii qafaahu. Wa yanhaa ithaa kaana bayna al nnaasi hayjun cani al ducaa'i ilaa al qabaa'ili wa al cashaa'iri, wal yakun dacwaahum ilaa Allaahi Cazza wa Jalla Waxdahu laa shariika laHu. Fa man lam yadcu ilaa Allaahi wa dacaa ilaa al qabaa'ili wa al cashaa'iri fal yuqdhafuu bi al ssayfi, xattaa takuuna dacwaahum ilaa Allaahi WaxdaHu laa shariika laHu. Wa ya'muru al nnaasa bi isbaaghi al wuduu'i wujuuhahum wa aydiyahum ilaa al miraafiqi wa arjulihim ilaa al kacbayni, wa yamsaxuuna bi ru'uusihim kamaa amarahumu Allaahu. Wa amara bi al ssalaati li waqtihaa, wa itmaamu al rrukuuci wa al ssujuudi wa al khushuuci, wa yughallisa bi al ssubxi, wa yuhajjiru bi al haajirati xiina tamiilu al sh-shamsu. Wa salaatu al casri wa al sh-shamsu fii al ardi mudbiratun. Wa al maghribu xiina yaqbilu al llaylu, laa yu'akh-khiru xattaa tabduwa al nnujuumu fii Al Ssamaa'i. Wa al cishaa'u awwala al llayli. Wa amara bi al ssacyi ilaa al jumucati ithaa nuudiya lahaa. Wa al ghasli cinda al rrawaaxi ilayhaa. Wa amarahu an ya'khutha mina al maghaanimi khumusu Allaahi, wa maa kutiba calaa al mu'miniina fii al ssadaqata mina al caqari cushru maa saqat al caynu wa saqati Al Ssamaa'u, wa calaa maa saqaa al ghurbu nisfu al cushri. Wa fii kulli cashrin mina al ibili shaataani, wa fii kulli cishriina arbacu shiyaahin. Wa fii kulli arbaciina mina al baqari baqaratun. Wa fii kulli thalaathiina mina al baqari tabiicun jathacun aw jathcatun. Wa fii kulli arbaciina mina al ghanami saa'imatin waxdahaa shaatun. Fa innahaa fariidatu Allaahi allatii iftarada calaa al mu'miniina fii al ssadaqati. Fa man zaada khayran fa huwa khayrun lahu. Wa annahu man aslama min yahuudiyyu aw nasraaniyyu islaaman khaalisan min nafsihi wa daana bi Diini al islaami fa innahu mina al mu'miniina, lahu mithla maa lahum, wa calayhi mithla maa calayhim. Wa man kaana calaa nasraaniyatihi aw yahuudiyatihi fa innahu laa yuraddu canhaa. Wa calaa kulli xaalimin thakarin aw unthaa, xurrun aw cabdun Diinaarun waafin aw cawduhu thiyaaban. Fa man addaa thaalika fa inna lahu thimmata Allaahi wa thimmata Rasuulihi. Wa man manaca thaalika fa innahu caduwwun Lillaahi wa li Rasuulihi wa lil mu'miniina jamiican. Salawaatu Allaahi calaa Muxammadin, wa Al Ssalaamu Calayhi wa Raxmatu Allaahi wa Barakaatuhu."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Kanu waa caddayn ka timid Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Kuwiinna rumeeyeyow ballamada iyo heshiisyada oofiya oo meel mariya. Kanu waa ballan iyo cahdi uu Nabi Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu u dhigay Camr bin Xazm markuu Yaman u diray. Wuxuu ku ballamiyay inuu umuurtiisoo idil Ilaahay uga dhawrsado, maxaa yeelay Ilaahay wuxuu la jiraa kuwa dhawrsada iyo kuwa sama fala. Wuxuu ku amray inuu runta ku dhaqmo siduu Ilaahay ugu amray, dadkana uu khayr

ugu bishaareeyo, uuna ku amro inay wax fiican suubiyaan, iyo inuu dadka Quraanka baro, uuna si qoto dheer u garansiiyo. Wuxuuna amray inuu dadka ka reebo waxa laga reebay oo uusan qofna Quraanka taaban isagoo aan daahir mooyee, oo weyso qaba. Wuxuu kaloo ku amray inuu dadka u sheego waxay leeyihiin oo xuquuq ah iyo waxa waajibaad ah oo ayaga lagu leeyahay. Iyo inuu dadka u jilicsanaado markay xaqqa ku taagan yihiin, kuna adkaado markay dulmi ku taagan yihiin., oo Ilaahay dulmiga waa neceb yahay, dadkana wuu ka reebay oo wuxuu yiri: "**"Alaa lacnatu Allaahi calaa al th-thaalimina"**, oo macneheedu yahay, waana Aayadda sideed iyo tobnaad ee Suuratu Huud: "Warhoy! Lacnadda Ilaahay ha ahaato korka kuwa daallimiinta ah." Iyo inuu dadka jannada ugu bishaareeyo iyo camalka lagu galaba. Dadkana uu uga digo naarta iyo camalka lagu galaba. Iyo inuu dadka quluubtooda iyo jeceylkooda iyo saaxiibtinnamoodaba u kasbo si uu Diinta si qoto dheer ugu baro. Iyo inuu dadka axkaamta xajka baro iyo sunnooyinkiisa iyo waajibaaadkiisa iyo wuxuu Ilaahay amray in la sameeyo xajka dhexdiisa. Al Xajju Al Akbaru waa Al Xajju Al Akbaru, Al Xajju Al Asgharuna waa Cumrada. Iyo inuu dadka ka reebo inuusan axadna qayd yar keligiis isagoo xiran ku tukado, inuu yahay mooyee go' uu labadiisa daraf labadiisa garab iyo luquntiisa la isku dhaafiyo oo laga xirto. Iyo inuu dadka ka reebo inuu kadaloobsado isagoo go' keli ah xiran oo uu markaas farjigiisu Samada u muuqdo. Iyo inuu ka reebo inuusan ninna timaha madaxiisa tidcin oo uusan qadaadkiisa ku galaamin oo ku dhejin. Inuu dadka ka reebo markuu khilaaf dhex maro inay u yeertaan qabiil iyo cashiirad, ayse u yeertaan Ilaahay Cazza wa Jalla Keligiis oo aan shariik lahayn. Qofkaan Ilaahay u wacanna oo qabiil iyo cashiirooyin u yeerta ha lala dhaco sefo oo qoorta looga gooyo ilaa uu wacadkoodu Ilaahay keligiis oo aan shariik lahayn noqdo. Iyo inuu dadka amro inay weysada kaamil ka dhigaan oo ay dhammaystiraan oo xubintiiba ay saddex goor dhaqaan weeye, wajiyadooda iyo gancohooda ilaa suxulladooda, iyo lugohooda ilaa canqawyada, iyo inay madaxdooda biyo u mariyaan siduu Ilaahay u amray. Iyo inuu amro in salaadda waqtigeeda lagu tukado oo rukuuca iyo sujuudda loo dhammaystiro iyo khushuucaba. Salaadda subaxna uu tujiyo markuu gudcurka habeenku dhammad yahay oo uu iftiinka waabarigu ku darsamo oo soo dhex galo. Salaadda duhurna uu tujiyo durbadiiba markay qorraxdu beerka Samada ka iilato. Salaadda casarna markay qorraxdu arliga kasii jeesanayso. Maghribkana markuu habeenku soo galo, uusanna dib u dhigayn ilaa ay xiddiguhu Samada ka muuqdaan. Cishana uu tujiya habeenka bilowgiisa. Wuxuuna amrya in salaadda jimcaha loo degdego marka loo aathaano, lana qubaysto marka la aadayo. Wuxuuna ku amray inuu maghaanimta ka qaado khumuska Ilaahay, mu'miniintana uu ka qaado zakada lagu fardi yeelay, oo ah sidatan: beerta ay ili waraabiso ama Samada ka waraabta, waa roobkee, waxaa lagu leeyahay cushur miraha ka baxa, oo ah tobankii meeloodba meel, beerta wadaani waraabisana waxaa lagu leeyahy cushur nuskiis. Tobankii geelaba waxaa lagu leeyahay laba riyood, labaatankiina afar riyood. Afartanka lo'a ahna sac. Kulli soddonkii lo' ahna waxaa lagu leeyahay tabiicu oo ah labood ama dheddig, oo ah neef labood ama dheddig ah oo ay hal sano u buuxsantay, kuna dhex jira sanadka labaad ee cumrigiisa. Afartanka ari ah oo keligood daaqana waxaa lagu leeyahay ri. Taas weeyey fariidada uu Ilaahay ku fardi yeelay mu'miniinta oo zako ah. Qofka intaas ka badan oo khayr ah bixiyana, isagay khayr u tahay. Hadduu islaamo yuhuudi ama krishtaan si khaalis ah oo naftiisa kasoo go'day, uuna Diinta islaamka ka Diin yeesho, wuxuu ka mid yahay mu'miniinta, oo wuxuu leeyahay waxay ayaguna leeyihiin, waxaana korkiisa ah oo lagu leeyahay waxa ayaga korkooda ha oo lagu leeyahay. Qofka ku hara krishtaannimadiisa iyo yuhuudnimadiisana laga celin mayo, ee mid kastoo kuwaas ka mid ah oo qaan gaaray, ha ahaado lab ama dheddig, xor ama addoon, waxaa lagu leeyahay oo uu bixinayaa hal Diinaar oo buuxa, ama wax qiimihiisa u dhigma oo dhar ah. Qofka ayaga ka mid ah oo bixiya wuxuu leeyahay ilaalinta Ilaahaay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi

Wasallam, iyo mu'miniinta dhammaantood. Salawaatka Ilaahay ha ahaadaan Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, korkiisa, wa Al Ssalaamu iyo raxmada Ilaahay iyo barakadiisuba."

Imaatinka Rifaacah bin Zayd Al Juthaamii

Intuu heshiiska Al Xudaybiyyah socday waxaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid, waana duullaanka Khaybar hortiis, Rifaacah bin Zayd Al Juthaamiyyi, kana sii ah Al Ddubaabiyyi, wuxuuna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u hadiyeeyey addoon, wuuna islaamay, islaannimadiisuna ay suubanaatay. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu tolkiis u dhigay qoraal, ay ku dhignayd: **"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathaa kitaabun min Muxmmadin Rasuuli Allaahi li Rifaacah bin Zayd. Innii bacath-tuhu ilaa qawmihi caammatan, wa man dakhala fiihim, yadcuuhum ilaa Allaahi wa ilaa RasuuliHi. Fa man aqbala minhum fa fii xizbi Allaahi wa xizba RasuuliHi. Wa man adbara fa lahu amaanu shahrayni."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Kanu waa qoraal uu Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u dhigay Rifaacah bin Zayd. Waxaanna u diray tolkiis guud ahaan iyo inta soo dhex gashayba, inuu ugu yeero Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Kuwooda ka oggolaada waxay ka mid yihiin xizbiga Ilaahay iyo xizbiga Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Kan kasii jeesta oo diidana wuxuu leeyahay laba bilood oo nabadgelyo ah." Markaasay markuu Rifaacah bi Zayd tolkiis u yimid ka yeeleen oo islaameen, kaddibna ay u guureen Al Xarrata, **Xarrata Al Rrajlaa'a** oo ay degeen (oo Al Madiinha iyo Shaam u dhexeysa)."

Wafdiga Hamdaan

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa u yimid wafdiga Hamdaan, uuna ka mid yahay Maalik bin Namadh iyo Abuu Thawr oo ah Thuu Al Mishcaar, iyo Maalik bin Ayfac, iyo Dimaamu bin Maalik Al Ssalamaanii, iyo Camiiratu bin Maalik Al Khaarifiyyi. Markaasay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la kulmeen markuu Tabuuk kasoo noqday, ayagoo labbisan dharka xubaraatka ah ee Yaman lagu sameeyo iyo cimaamadahooda Cadan lagu sameeyey oo saaran awrta Al Mahriyyah iyo Al Arxabiyyah oo ay kooro qori ah u saaran yihiin, ayadoo ay Maalik bin Namadh iyo nin kale gabyayaan oo isu jiibinaayaan, ayna qabiilkooda faaninayaan. Markaasaa waxaa kacay Maalik bin Al Namadh oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hortiisa istaagay yirina: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, akhyaarta Hamdaan, kuwooda degan iyo kuwooda reer guuraa ahba ayaa kuu yimid, ayagoo saaran awr fiican oo dheereysa iskulana xiriirsa xarigga islaamka. Ilaahayna ka leexin mayo cabsi ay ka qabaan mid wax eedeeya eediisa, kana yimid degmooyinka **Khaarif** iyo **Yaam** iyo **Shaakir** ragga awrta iyo fardahaba, waxayna yeeleen u yeeridda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxayna ka tageen ilaahyada asnaamta ah iyo dhagaxda wax loogu bireeyaba. Cahdigooda iyo heshiiskooda islaamiddana ma jabayo oo burayo intay buurta **Laclac** meesheeda ku taallo, iyo intuu biciidka yari buurta **Sullac** ku kor ordayo." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qoraalkaan soo socda u dhigay:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathaa kitaabun min Rasuuli Allaahi Muxammadin li mikhlaafi khaarifin wa ahla janbi al hadbi wa xiqaafu al rramli,

maca wafdihaa Thii Al Mishcaari Maalik bin Namadh wa man aslama min qawmihi, calaa anna lahum firaacahaa wa wihaadhahaa, maa aqaamuu al ssalaata wa atawu al zzakaata, ya'kuluuna cilaafahaa wa yarcawna caafiyahaa. Lahum bi thaalika cahdu Allaahi wa thimmata Rasuulihi. Wa shahidahum Al Muhaajiruuna wa Al Ansaara."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Kanu waa qoraal uu dhigay Rasuulka Ilaahay Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, una dhigay degmada Khaarif iyo dadka dhulkooda korreeya deggan iyo buuraha ciidda ah iyo ergaygooda Thii Al Micshaar Maalik bin Namadh iyo inta tolkiisa ah oo muslimiinta ah. Ayagaa iska leh arliga korreeya iyo kan hooseeyaba intay salaadda oogayaan, zakadana bixinayaan, waxayna leeyihiin oo cunayaan daqeeda iyo cawskeedaba. Waxayna sidaas ku leeyihiin ballan iyo cahdiga Ilaahay iyo ilaalinta Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam. Waxaana ka marag ah oo goob joog ah Muhaajiriinta iyo Ansaartaba."

Labada beenlow ee Musaylimah iyo Al Aswadu Al Cansiyyi

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxaa cahdiga Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, been ku hadlay oo been sheegtay Musaylimah bin Xabiib, una dhashay Banii Xaniifah oo Al Yamaamah dega, iyo Al Aswadu bin Kacb Al Cansiyyi, oo Sanca arliga Yaman dega. "

Riyada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee labada beenlow

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Abiii Saciid Al Khudriyyi wuxuu yiri: "Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo dadka u khudbeynaya, isagoo minbarkiisa saaran oo leh: **"ayuuhaa al nnaasu, innii qad ra'aytu Laylata Al Qadri thumma unsiituhaa, wa ra'aytu fii thiraacayya siwaarayni min thahabin fa karihtuhumaa. Fa nafakhtuhumaa fa dhaaraa. Fa awwaltuhumaa haathayni al kath-thaabayni, saaxiba Al Yaman, wa saaxiba Al Yamaamah."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Dadow anigu waxaan arkay oo aan ku riyooday Laylu Al Qadri, kaddibna waa la i halmaansiiyay habeenkay ahayd. Waxaan kaloona ku riyooday ayadoo ay labadayda diraac oo ah dhudhun laba dugaagadood oo dahab ah suran yihiin. Markaasaan labadoodaba kahday. Markaasaan afuufay oo ay duuleen. Waxaanna u fasirtay labadaan beenlow oo ah midka Yaman jooga iyo kan Al Yamaamah jooga."

Xadiithka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee dijjaaliinta

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Abuu Hurayrah wuxuu yiri: "Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo leh: **"Laa taquumu al saacatu xattaa yakhruja thalaathuuna dajjaalan kulluhum yaddacii Al Nnubuwwata"**, oo macnihiisu yahay: "Saacaduu dhici mayso jeer ay soo baxaan soddon dajjaal oo kulligood Nabinnimo sheeganayaan."

Bixidda amiirrada iyo kuwa zakada loo xil saaray iyo magacdooda

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu diray amiirradiisa iyo ragguu u xil saaray zakada maalka dhammaan dalalka uu

islaamku galay, oo wuxuu Al Muhaajiru bin Abi Umayyah bin Al Mughiirah u diray Sancaa' ee arliga Yaman halkaasoo uu ku kacay Al Cansiyyu isagoo halkaas jooga. Wuxuuna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Ziyaadah bin Labiid, oo u dhashay Banii Bayaadah Al Ansaarii u diray Xadramuut amiir ahaan iyo isagoo zakadana u xil saaran isla markaas. Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Cadiyy bin Xaatim amiir uga dhigay tolkiis Dhayii'i iyo zakadoodaba iyo Banii Asad. Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Maalik bin Nuwayrah (oo uu ibnu Hishaam yiri: "Al Yarbuucii.") u xil saaray zakada Banii Xanthalah. Wuxuuna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam zakada Banii Sacd u kala xil saaray laba nin oo wuxuu Al Zibirqaanu bin Badr u diray degmo ka mid ah, Qays bin Caasimna degmo kale. Wuxuuna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Al Calaa'u bin Al Xadramii amiir uga dhigay Baxrayn, Calii bin Abii Dhaalibna, Allaaha raalli ka noqdee, dadka Najraan si uu zakadooda usoo uruuriyo, uuna u keeno jizyadooda.

Warqadduu Musaylimah Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam usoo diray iyo jawaabteeda

Musaylimah bin Xabiib wuxuu warqad usoo dhiibay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu ku yiri: "Waxay ka socotaa Musaylimah Rasuulka Ilaahay, una socotaa Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Salaami korkaaga ha ahaato. Intaas dabadeedna. Aniga waxaa la ila kaa wadaajiyay Rasuulnimada, oo annagu waxaan leenahay arliga nuskiis, Qurayshna arliga nuskiis. Laakiin Quraysh way xad gudbayaan." Markaasaa waxaa warqaddaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u keenay laba nin oo ergo ah. Markaasuu marka warqadda loo akhriyay ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu labadoodaas ku yiri**: "Fa maa taquulaani antumaa?"** oo macnihiisu yahay: "Labadiinuna maxaad leedihiin?" Waxay yiraahdeen: "Waxaan leenahay waxa la mid ah siduu isagu yiri." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Amaa wa Allaahi law laa anna Al Rrusula laa tuqtalu la darabtu acnaaqakumaa"**, oo macnihiisu yahay: "Wa Allaahi haddayan ahaan lahayn inaan Danjirayaalka la dilin, qoortaan idinka goyn lahaa." Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Musaylimah u diray warqaddaan:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuuli Allaahi ilaa Musaylimah al kath-thaab. Al Ssalaamu calaa mani ittabaca al hudaa. Ammaa bacdu. Al Ardu li Allaahi yuurithuhaa man yashaa'u min cibaadiHi wa al caaqibatu lil muttaqiina."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxayna u socotaa Musaylimah kan beenloga ah. Nabadi waxay korkiisa tahay kan hanuunka raaca. Intaas dabadeedna. Arliga waxaa iska wada leh Ilaahay, wuxuuna dhaxalsiiyaa kuwuu doono oo addoommadiisa ka midka ah. Ciribsamidana waxaa iska leh kuwa muttaqiinta ah, oo Ilaahy ka dhawrsada."

Juzka Tobanaad

Gaarsiinta Risaalada Jinniga

Jinniga

Erayga jinni wuxuu ka yimid oo kasoo askumay erayga ah jannana ama janna, oo uu Al Rraazii yiri inuu macnihiisu yahay: " loomana jeedo, oo waa kaa qarsoon yahay". Sidoo kale ayuu erayga janno, oo ah midduu Ilaahay muslimiinta ka ballaan qaaday, halkaas ka yimid oo macnihiisu yahay beer geedo badan oo geedeheedu madaxa is gashadeen oo waxa dhexdeeda ku jira qariyay oo aan loo jeedin. Cunugga caloosha hooyadiis ku jirana sidaasaa loo yiraahdaa janiin, oo looma jeedo, siduu Ilaahay Tacaala Aayadda laba iyo soddonaad ee Suuratu Al Nnajmi**: "wa ith antum ajinnatun fii budhuuni ummahaatikum**(32)**"**, oo macneheedu yahay: "adinkoona ku ah ajinnatun, kuwa ku qarsoon, caloosha hooyooyinkiin dhexdooda(32)." Jinnigu wuxuu ka mid yahay makhluuqaatka Ilaahay Tacaalaa uu abuuray. Ilaahay Subxaanahu wa Tacaalaa wuxuu Aayadda toddoba iyo labaatanaad ee Suuratu Al Xijri ku yiri: **"Wa al jaanna khalaqnaahu min qablu min nnaari al ssamuumi**(27)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "jinnigana hore, waana Aadan hortiis, ayaan ka abuurnay dab kulayl badan. Al Ssamuumu waxaa la yiraahdaa dabayl kulayl badan oo intay dadka daloollada jirka ka gasho disha. Waana dab aan qiiq lahayn. Halkaas ayayna kasoo degaan biriqdu, waana dab yaalla inta u dhexeysa Samada iyo Xijaabka, siduu Al Baghawii u sharxay(27)." Ibnu Cabbaas wuxuu yiri: "Ibliis waa aabaha jinnigoo idil dhalay, siduu Aadan dadkoo idil u dhalay. Jinnigu wuxuu leeyahay muslimiin iyo gaalo, kuwa gaalada ahna waxaa la yiraahdaa shaydaan. Jinnigu way nool yihiin, wayna dhintaan. Jinnigu cunnada ayuu cunaa, wax buu cabaa, wuxuu leeyahay labood iyo dheddig, wayna is dhalaan sida dadka.

Cunnada jinniga

Al Qasdhalaanii wuxuu kitaabkiisa Al Mawaahibu ku yiri: "Markuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Nakhlah ku degay, wuxuu Ilaahay xaggiisa usoo duway toddoba nin oo jinniga Nasiibiin ah oo Carab ah (oo jinni walba dalkuu deggan yihay ayuu ka tirsan yahay, afkoodana uu ku hadlaa oo jinniga, tusaale ahaan Soomaaliya deggan waa soomaali wuxuuna ku hadlaa afka soomaaliga), ayadoo uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam habeen barkii salaad u istaagay. Markaasay dhegeysteen isagoo, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Suuratu Al Jinni akhrinaya (waxaa kaloo la yiri Suuratu Al Rraxmaani, waxaana kaloo la yiri Iqra'). Al Bukhaarii wuxuu wariyay inuu ahaa geed -oo uu Al Zarqaanii yiri waa geedka noociisu yahay Samurah, kana mid ah geedaha Al Dhalxu- kan Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay joogitaanka jinniga. Markaasay waxay weydiisteen inay cunnadoodu tahay waxa banii aadanka kasoo hara, ama, siduu Al Zarqaanii u yiri waxay weydiisteen waxa u xalaasha ah iyo waxa xaaraanta ka ah. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri: "**kullu cathamin thukira Ismu Allaahi calayhi yaqacu fii yadi axadikum awfara maa kaana laxman. Wa kullu bacrin calafun li dawaabikum.**" Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "cunnadiinnu waa laf kasta oo marka la cunayo bisinka Ilaahay loo qabtay. Markay laftaasu gacantiinna soo gasho waxaa kasoo buuxsamaya hilib ka fara badan midka hore ugu yiillay. Saalada xooluhuna waxay calaf, waa cunnee, u tahay xoolihiinna, oo waxay u noqonaysaa xoolihiinna dhir cagaaran." Xadiithkaanna wuxuu daliil u yahay inuu jinnigu wax cuno

waxna cabbo, wuxuuna beeninayaa kuwa yiraahda inayan jinnigu wax cunin waxna cabbin, oo laftu waxay hilib u noqonaysaa waa in run ahaantii la cuno hilibkaas. Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"inna al sh-shaydhaana ya'kulu bi shimaalihi wa yashrabu bi shimaalihi"**, oo macnihiisu yahay: "shaydaanku wuxuu wax ku cunaa gacantiisa bidix, wuxuuna wax ku cabbaa gacantiisa bidix."

Jinnigu caruur ayuu dhalaa

Jinnigu waa sida dadkoo kale oo waxay u qaybsan yihiin rag iyo haween, waana is guursadaan, caruurna ay dhalaan. Kitaabka Aakaamu al murjaani fii axkaami al jaanni wuxuu bogga lix iyo konton ku wariyay: "Ilaahay Tacaalaa wuxuu yiri: **"lam yadhmith-hunna insun qablahum wa laa jaannun**(65)**."** Waana Aayadda shan iyo lixdanaad ee Suuratu Al Rraxmaani oo macneheedu yahay: "uusanna ayaga hortood la gogol gelin insi iyo jinni toona. (65)." Ilaahay wuxuu Aayadda kontonaad ee Suuratu Al Kahfi ku yiri**: "Wa ith qulnaa lilmalaa'ikati usjuduu li Aadama fa sajaduu illaa ibliisa kaana mina al jinni fa fasaqa can amri RabbiHi a fa thattakhithuunahu wa thurriyatahu awliyaa'a min duunii wa hum lakum caduwwu bi'sa lilth-thaalimiina badalan**(50)**."**
Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Xus markaan malaa'igta ku niri: "u sujuuda Aadan", oo ay sujuudaan intaan ibliis ka ahayn, isagoo ka mid ah jinniga, oo diiday amarka Rabbigiis. Marka, ma isagaasaad iyo dhashiisaad ka dhiganaysaan gargaarayaal, Aniga sokadayada, ayagoona adinka cadaw idiin ah? Waxaa xumaatay dhaafsiga ay daallimiintu daacada Ilaahay ku beddesheen daacadda Ibliis!(50)." Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aayadda toddoba iyo labaatanaad ee Suuratu Al Acraafi ku yiri: **"Innahu yaraakum huwa wa qabiiluhu mi xaythu laa tarawnahum**(27)**."**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
"Shaydaanku wuu idiin jeedaa, isaga iyo qabiilkiisuba oo uu Cabdu Allaahi bin Cabbaas yiri: "waa caruurtiisa", adinkuna uma jeedaan oo ma arki kartaan. Maalik bin Diinaar wuxuu yiri: "cadaw kuu jeeda, adiguna aadana u jeedin waa culays badan yahay oo dhib badan yahay qofkuu Ilaahay ka ilaaliyo mooyee(27)."

Anwaacda jinniga

Al Zarqaanii wuxuu yiri: "ibnu Xibbaan iyo Al Xaakim waxay ka wariyeen Abii Thaclabah Al Khushanii inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Al jinnu thalaathatu asnaafin. Sinfun lahum ajnixatun yadhiiruuna fii al hawaa'i. Wa sinfun xayyaatun wa caqaariba. Wa sinfun yaxilluuna wa yathcanuuna wa yarxaluuna."**
Xadiithka macnihiisu waxaa weeyey: "jinnigu waa saddex nooc, oo kala ah: (Kow) nooc baalal leh oo hawada ku duula. (Laba) Nooc labaad oo ah abeesooyin iyo hangaralle. (Saddex) iyo nooc dadka ku dega oo gala, oo dura oo dhiba, oo socdaala."
Waaba ayaduu Ilaahay Tacaalaa Aayadda afar iyo lixdan ee Suuratu Al Israa'i ku yiri: **"Wa istafziz mani istadhacta minhum bi sawtika wa ajlib calayhim bi khaylika wa rajilika wa shaarikhum fii al amwaali wa al awlaadi wa cidhum wa maa yaciduhumu al shshaydhaanu illaa ghuruuran**(64)**."**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:
"ugana nixi oo ku cabsii codkaaga kuwa ayaga banii aadanka ka midka ah oo aad awoodid oo uu ibnu Cabbaas yiri: "ugu yeer caasiyidda Ilaahay, oo axad kasta oo dadka ugu yeeray in Ilaahay la caasiyo oo amarkiisa la diido wuxuu ka mid yahay askarta Ibliis." Imaam Caashuur wuxuu yiri: "waa dadka nafafkooda waswaasi." Korkoodana

isugu keen oo adeegso fardooleydaada iyo ciidankaaga lugtaba, kulana qayli baadiyentooda. Kulana shirkow oo la wadaag maalalkooda, ayagoo si xaaraan ah ku kasbanaya ayna ribadu ka mid tahay oo ah faa'iidada bangiyada, si xaaraan ah ku bixinaya. Caruurtoodana la wadaag oo shirko kula noqo, oo uu ibnu Cabbaas yiri: "waa gabdhaha ayagoo nool la duugi jiray islaamka hortiis." Mujaahid iyo Al Ddaxxaak waxay yiraahdeen: "waa caruurta zinada ka dhasha." Al Xasan iyo Qataadah wacxay yiraahdeen: "waa ayagoo caruurtooda ka dhiga yuhuud, ama krishtaan ama majuus." Waxaa kaloo la yiri waa caruurtooda oo ay ku magacaabaan inay asnaamta addoon u yihiin, sida Cabdu Al Cuzzaa, Cabdu Manaat, iyo wixii la midka ah. Waxaa kaloo Jacfar bin Muxammad laga wariyay inuu shaydaanku uu ninka thakarkiisa ku fariisto oo hadduusan Bismi Allaahi oran markuu haweentiisa u tegayo uu isaguna haweentiisa la wadaagayo, uuna farjigeeda ku biyo keenayo siduu ninku ugu biyo keeno oo kale." Una yabooh inay waxay doonayaan helayaan, oo ay adiga ku adeecaan. Shaydaanna u yaboohi mayo waxaan dagmo ahayn, ahna inuu waxa xun u qurxiyo oo uu wax fiican uga dhigo(64)."

Jinnigu waa dhintaa

Jinnigu markuu cimrigiisu dhammaado wuu dhintaa, oo waaba ayada uu Ibliis ka baryayo Ilaahay inuusan dilin ilaa maalinta qiyaame, siduu Ilaahay noogu sheegay Aayadda lix iyo soddon ee Suuratu Al Xijri: **"Qaala Rabbi fa anthirnii ilaa yawmi yubcathuuna(36)." Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Rabbiyow ii kaadi, oo ha i dilin ilaa maalinta qiyaame, oo midkaan xuni wuxuu doonayaa inuusan dhimanba oo ilaa maalinta qiyaame uu noolaado, kaddib marka malagga dadka naftaba ka qabta laftiisaba la dilay intaas ka hor, oo inta suuradda wan loo soo yeelay la gawracay. Doqonku wuxuuba damcay inuu Ilaahay Tacaalaa siro**(36)**."** Ilaahay Tacaala wuxuu Aayadda sideed iyo tobnaad ee Suuratu Al Axqaafi ku yiri: "Uulaa'ika allathiina xaqqa calayhimu al qawlu fii umamin qad khalat min qablihim mmina al jinni wa al insi innahum kaanuu khaasiriina(18)." Aayadda macneheedu waxaa weeye: "kuwaasu waa kuway korkooda cadaabi ku dhabawday kana mid ah ummado adinka hortiin gudubtay oo ka mid ah jinniga iyo insiga, waxayna ahaayeen kuwa khasaaray(18)." Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aayadda boqol shan iyo sideetan ee Suuartu Al Ancaami ku yiri: **"Kullu nafsin thaa'iqatu al mawti**(185)**"**, oo macneheedu yahay: "Kulli naf walaba waa midda geerida dhedhemisa oo dhimata(185)."

Al Imaamu Axmad wuxuu Cabdu Allaahi bin Cumar ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"A ra'aytum laylatikum haathihi? Fa inna calaa ra'asi mi'ati sanatin la yabqii mimman huwa al yawma calaa thahri al ardi axadun."** Xadiithka macnihiisu waxaa aweeyey: "Ma aragtaan habeenkiinnaan caawa ah?

Boqol sano oo gaw ah markay kasoo wareegato axadna ka hari mayo oo way wada dhimanayaa inta arliga dushiisa maanta saaran." Al Imaamu Axmad wuxuu kaloo Jaabir bin Cabdu Allaahi ka wariyay inuu yiri inuu maqlay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo leh**: "Aqsimu bi Allaahi maa calaa al ardi nafsun manfuusatun al yawma ya'tii calayhaa mi'atu sanatin."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "waxaan ku dhaartay Ilaahay inayan arliga korkiisa ku sugnayn naf nafi ku jiro oo neefsanaysa maanta oo boqol sanoo kale noolaanaysa." Jinniguna waa naflay nafi ku jirto. Labada Xadiithna waxaan kasoo qaatay Al Nihaayah ee ibnu Kathiir. Kitaabka axkaamu al jaanni wuxuu bogga laba boqol sideed iyo soddon ku yiri: "nin ayaa ibnu Cabbaas wuxuu ku yiri: "jinnigu ma dhintaa?" wuxuu yiri: "haa, intaan ibliis ahayn."

Malakul Mawtku waa Malagga qabta, arwaaxda oo idil kuwa jinniga iyo insiga iyo bahaa'inka xoolaha ah iyo makhluuqaatka oo idil. Nin baa wuxuu Imaam Maalik weydiiyay: "Xasharaadtka ruuxooda ma waxaa qabtah Malakul Mawtka?" Markaasuu Imaam Maalik cabbaar aamusnaa oo uu fakarayey, kaddibna wuxuu yiri: "Naf ma leeyihiin?" Wuxuu ninkii yiri: "Haa". Imaam Maalik wuxuu markaas yiri: "Hadaba Malaku al Mawti ayaa ruuxooda qabanaya, oo nafta ka qaadaya. Ilaahay ayaana oofsada nafta markay dhimaneyso". Imaam Maalik wuxuu daliil ka dhigtay Aayadda labo iyo afartanaad ee Suuratu Al Zumar oo oraneysa**: "Allaahu yatawaffaa al anfusa xiina mawtihaa(42)", oo, macneheedu yahay: "Ilaahay ayaa oofsada nafta markay dhimaneyso**(42)**"**. Waxaa wariyay Al Khadhiibu, waxaana ayyida Xadiithka kale oo ay wariyeen Al Dhabraanii iyo Ibnu Mandah iyo abuu Nucaym, oo oranaya inuu Malag Cazraa'iii Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: ”Wallaahi haddaan doonayo inaan qabto ruuxa kaneeco, ma karo jeer uu Ilaahay ithmo qabashadeeda."

Degmada jinniga

Jinnigu wuxuu degaa musqulaha, iyo inta u dhexeysa buuraha iyo badda, oo qaalli Badru Al Ddiini wuxuu bogga laba iyo afartanaad ee kitaabkiisa “Kitaabu Axkaamu Al Jinni” ku wariyay inu Bilaal bin Al Xaarith yiri: "Annagoo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, safar ula soconna ayaan meel ku degnay, oo uu markaas musqal aaday, markuu musqul aadana wuu fogaan jiray. Markaasaan waxaan u keenay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, weel biyo ku jiraan. Markaasuu dhaqaaqay, markaasaan agtiisa ka maqlay muranka rag murmaya iyo codad caraysan oo xoog leh, aanan codad ka dhawaaq badan hore u maqal. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri**: "ikhtasama al jinnu al muslimuuna wa al jinnu al mushrikuuna, fa sa'aluunii an uskinahum, fa askantu al muslimiina al jalasa wa askantu al mushrikiina al ghawra."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "waxaa dacwooday oo murmay jinniga muslimiinta ah iyo jinniga gaalada ah, markaasay waxay i weydiisteen inaan kala dejiyo. Markaasaan muslimiinta waxaan dejiyay tuulooyinka iyo buuraha, gaaladana aan dejiyay dhulka u dhexeeya buuraha iyo badda." Kathiir, oo wariya yaalka Xadiithkaan ka mid ah, wuxuu yiri: "qof kastoo ay tuulooyinka iyo buuraha wax ku gaaraan wuu badbaadaa, midkayse buuraha iyo badda dhexdooda wax ku gaaraan wuxuu u badan yahay inuusan badbaadin." Anas wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, musqusha ka yiri: **"haathihi muxdaratun fa ithaa dakhala axadukum al khalaa'a fal yaqul: "Bismi Allaahi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "meeshaan waa la deggan yahay, ee markuu midkiin musqasha galo ha yiraahdo Bismi Allaahi." Riwaayad kalena wuxuu ku daray: " Al Bukhaarii iyo Muslim waxay wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, intuusan musqusha gelin oran jiray: **"Allaahumma innii acuuthu bika mina al khubthi wa al khabaa'ithi"**, oo macnihiisu yahay: "Ilaahayow, Adigaan kaa magan galay shayaadhiinta ragga ah iyo shayaadhiinta dheddigga ahba", ayadoo ay musqusha deggan yihiin shayaadhiin, sidaan annagu guryeheenna u deggannahay oo kale. (waana xadiithka Al Bukhaarii ee boqol laba iyo afartan iyo Muslim xadiithka saddex boqol shan iyo toddobaatan). Axaadiith kalena waxay noo sheegeen inuusan jinnigu albaabka musqusha iska furin karin oo uu sidaas guryeheenna noogu soo geli karin, ee adigu ha ka furin oo yuusan sidaas gurigaga kuula joogin! Albaabbada musqulaha mar walba ha xirnaadaan! Al Bukhaarii iyo Muslim waxay kaloo wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri**: "Fa inna al sh-shaydhaana laa yaftaxu ghalqan."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "oo shaydaanku albaab xiran ma furi karo." Hana u oggolaan jinniga inuu cawradaada arku markaad musqusha gashid ee iska xijaab, oo Al Tirmithii wuxuu Calii bin Abii

Dhaalib ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"sitru maa bayna acyuni al jinni wa cawraati ummatii ithaa dakhala axadukum al khalaa'a an yaquula Bismi Allaahi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Asturka u dhexeeya oo kala qarinaya indhaha jinniga iyo cawraadka ummaddayda markay musqusha galaan waa inay yiraahdaan Bismi Allaahi."

Shayadiintu markay Qurraxdu dhacdo ayuu hawl usoo baxaan

Maalin walba markay qorraxdu dhacdo oo habeenku dumo, ayay ibliis iyo ubadkiisu usoo yaacaan inay dadka badiyeeyaan, oo fitneeyaan oo waxa xun u qurxiyaan. Al Bukhaarii iyo Muslim waxay Jaabir bin Cabdu Allaahi ka wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"ithaa kaana janaxa al laylu wa amsaytum fa kaffuu sibyaanakum, fa inna al sh-shaydhaana yantashiru xiina'ithin. Fa ithaa thahaba saacatan mina al layli fa khalluuhum wa aghlaquu al abwaaba, wa uthkuruu Isma Allaahi Tacaalaa, wa khammiruu aaniyatukum wa uthkuruu Isma Allaahi Cazza wa Jalla, wa law an tucriduu calayhaa shay'an, wa adhfi'uu masaabiixakum."** Riwaayad kale ay warisay: "Fa inna al shshaydhaana laa yaftaxu ghalqan." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Markuu habeenku soo galo oo ay habeen noqoto shantaan waxyaalood yeela: (Kow) Caruurtiinna celiya oo guryahihiinna ku haya oo yeeyan dibadda u bixin, ayadoo uu markaas shaydaanku soo faafayo oo soo hawl galayo, kuwa jinniga iyo kuwa insigaba, oo ay markaas caruurta, oo caqligoodu yaryahay, oo aragga aabe iyo hooyo ka fog, dhibaato u geysan karaa, ayna ka mid tahay cay, dharbaaxid, garaacid, dafid, iyo wixii la midka ahba. Marka, markay habeenka in yar ka gudubto, guryaha ku haya. (Laba) Albaabbadana hoos ka soo xirta, waana si ayan idiinku soo gelin dugaag, xoolo iyo tuugaba, iyo shaydaanba iyo cirfiidyada muruxsan oo madaxa adag. Waxaadna xustaan Ilaahay Tacaalaa magaciisa. (Saddex) Weelashiinna biyaha iyo waxa la cabbo ku jiraan daboola. Waxaana laga daboolayaa shaydaanka. Magaca Ilaahay Cazza wa Jallana xusa, oo Bismi Allaahi dhaha. (Afar) Weelasha cunnadu idiinku jirtana daboola oo aabur saara. (Shan) Faynuusyadiinnana damiya markaad seexanaysiin. Sababtana riwaayad kale ayaa sheegtay, waana cabsi laga qabo inay doolli iyo mukulaal intay gaddiyaan uu dabkeedu guriga iyo dadka ku jiraba gubo." Riwaayad kalena waxay warisay: "oo shaydaanku albaab xiran ma furi karo."

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, jinnigana waa loo diray

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa loo diray jinniga iyo insigaba. Ilaahay Tacaalaa wuxuu Suuratu Al Axqaafi ku yiri**: "Wa ith sarafnaa ilayka nafaran mina al jinni yastamicuuna Al Qur'aana falammaa xadaruuhu qaaluu ansituu falammaa qudiya wallaw ilaa qawmihim mmunthiriina**(29)**Qaaluu yaa qawmanaa innaa samicnaa Kitaaban unzila min bacdi Muusaa musaddiqan lima bayna yadayhi yahdii ilaa al xaqqi wa ilaa dhariiqin mmustaqiimin**(30)**Yaa qawmanaa ajiibuu daaciya Allaahi wa aaminuu bihi yaghfir lakum mmin thunuubikum wa yujirkum mmin cathaabin aliimin**(31)**."** Aayadaha oo ah kuwa sagaal iyo labaatanaad, sodoon iyo kow iyo soddon ee Suuratu Al Axqaafi macnohoodu waxaa weeye: "Bal xusuuso markaan xaggaaga usoo duwnay koox jinni ah oo ay Quraanka dhegeysteen. Markaasey markay yimaadeen meesha lagu akhrinayey waxay isku yiraahdeen: "Aamusa oo dhegeysta". Markii akhrinta Quraanka la dhammeeyeyna waxay u gaddoomeen xagga tolkooda ayagoo u digaya(29) Waxayna yiraahdeen markay tolkood u tageen: "Tolkeenow annagu waxaan maqalnay Kitaab

lasoo dejiyay Muuse dabadiis, rumaynayana kutubbadii isaga ka horreeyey, runtana u hanuuninaya qofka rumeeya oo raaca iyo dariiqa toosan(30)Waxayna yiraahdeen markay u tageen: "Tolkeenow yeela wuxuu idiinku yeerayo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu idiinku yeerayana rumeeya. Markaasuu Ilaahay dambiyadiinna dhaafayaa, wuxuuna idinka korinayaa cathaab xanuun badan(31)." Al Baghawii wuxuu yiri: "jamaaco waxay tiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa la amray inuu jinniga u digo, uuna Ilaahay xaggiisa ugu yeero, Quraanna uu ku dul akhriyo. Markaasuu xaggiisa usoo duway rag jinni ah oo ah kuwa dega arliga Niinawaa, uuna u kulmiyay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"innii umirtu an aqra'a calaa al jinni al llaylata, fa ayyukum yattabicunii?"** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "aniga waxaa la igu amray inaan caawa jinniga Quraan ku dul akhriyo, ee kiinnee baa i raacaya?" Markaasay aamuseen. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar labaad weydiiyay kooda raacaya. Markaasay aamuseen. Markaasuu mar saddexaad Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam weydiiyay kooda raacaya. Markaasay aamuseen. Markaasaa waxaa raacay Cabdu Allaahi bin Mascuud. Cabdu Allaahi wuxuu yiri: "umana uusan raacin oo lama joogin, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aniga ghayrkay. Markaasaan dhaqaaqnay oo markaan Makkah tagnay ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu galay ban la yiraahdo shicbu al xajuun, oo uu markaas halkaas diillin (goobaabin) ah dhulka iigu jeexay, kaddibna uu i amray inaan dhexdeeda fariisto, wuxuuna yiri: **"laa takhruj minhu xattaa acuuda ilayka"**, oo macnihiisu yahay: "diillintaas dhexdeeda ha kasoo bixin jeer aan kaaga soo laabto." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dhaqaaqay oo uu socday ilaa uu ka istaago, oo uu markaas Quraanka akhriyay. Markaasaan waxaan arkay muqaallo u eg gorgorka oo soo deganaysa, waxaanna maqlay codad xoog badan ilaa aanba Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u baqay, oo waxaaba daboolay madow xoog badan oo aniga iyo isaga na kala dhex galay, oo aan codkiisaba maqli waayay. Markaas kaddib ayay kala googo'een, una kala tageen sida daruuraha oo kale. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu kasoo jeestay waabariga, oo uu xaggayga soo aaday oo u ii yimid, yirina: **"a nimta?"** oo macnihiisu yahay: "ma seexatay?" Waxaan iri: "maya wa Allaahi Rasuulka **Ilaahayow**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaanba ku sigtay intaasoo goor inaan dadka ka gargaar dalbo, ilaa aan ka maqlay adigoo ushaada ku garaacaya oo leh: **"ajlisuu"**, oo ah: "fariista." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"law kharajta lam aamin calayka an yatakhadh-dhafuka bacduhum"**, oo macnihiisu yahay: " haddaad diillinta kasoo bixi lahayd kama aanan amni heli lahayn inay qaarkood ku dafaan", kaddibna wuxuu yiri: **"hal ra'ayta shay'an?"** oo macnihiisu yahay: "wax ma aragtay?" Waxaa iri: "haa Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo waxaan arkay rag madmadow o dhar cadcad guntan." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"uulaa'ika jinnu Nasiibiin, sa'aluunii al mataaca, wa al mataacu al zaadu. Fa mattactuhum bi kulli cathamin xaa'ilin wa rawthatin wa bacratin. Fa qaaluu: "Yaa Rasuula Allaahi taqthiruhaa al nnaasu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "kuwaasu waa jinniga Nasiibiin, waxayna i waydiisteen cunnadooda, waxaanna cunno uga dhigay laf kasta oo is haysata iyo saalada iyo digada geela, lo'da iyo ariga." Markaasay waxay yiraahdeen: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dadkaa wasakheeya." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dadka ka reebay inay ku istinjoodaan, oo ay xaarka isaga tiraan, lafaha iyo saaladaba." Markaasaan waxaan iri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kuwaasu maxayna tarayaan?" Wuxuu Sallaa Allaahu calayhi Wasallam yiri: **"innahum laa yajiduuna cathaman illaa wajaduu calayhi laxmahu yawma uklihi, wa laa rawthatan illaa wajaduu fiihaa xabbahaa yawma ukilat."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeyey:

"laftay helaanba waxay korkeeda ka helayaan hilibka ku yiillay korkeeda maalinta la cunay. Mana helayaan saalo iyo digaba ee waxay helayaan ayadoo ay ku yaallaan badarkii ku yiillay maalinta la cunay." Waxaan iri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan maqlay cod xoog badan ee muxuu ahaa?" Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri: **"inna al jinna tadaara'at fii qatiilin qutila baynahum, fa taxaakamuu ilayya fa qadaytu baynahum bi al xaqqi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: " waxay jinnigu isku qabsadeen qof ay iska dileen, markaasay iga codsadeen inaan kala xukumo, markaasaan ugu garsooray si xaq iyo caddaaladi ku jirto." Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu xaaray, oo intuu markaas ii soo noqday ayuu wuxuu yiri: **"hal macaka maa'?"** oo macnihiisu yahay: "biyo ma wadataa?" Waxaan iri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan wataa weel ay ku jiraan xoogaa biyo ah oo timir lagu miiray." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam keen igu yiri, oo aan gacantiisa ku shubay, uuna weysaystay, kaddibna uu yiri: **"tamratun dhayyibatun wa maa'un dhahuurun"**, oo macnihiisu yahay: "waa timir xalaal ah oo wanaagsan iyo biyo daahir ah."

Xadiithka Calii, Calayhissalaamu

Waxay ibnu Jariir iyo ibnu Kathiir Calii bin Abii Dhaalib, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyeen inuu yiri markuu fasirayey Aayadda kow iyo sideetanaad ee Suuratu Aali Cimraana oo oranaysa**: "Wa ith akhatha Allaahu miithaaqa al Nnabiyyiina lamaa aataytukum min kitaabin wa xikmatin thumma jaa'akum Rasuulun musaddiqun limaa macakum la tu'minunna bihi wa la tansurannahu qaala a'aqrartum wa akhathtum calaa thaalikum isrii qaaluu aqrarnaa qaala fa ash-haduu wa anaa macakum mina al sh-ahaahidiina**(81)**"**, oo macneheedu yahay: "Xusuuso markuu ka qaaday Ilaahay ballan adag Nabiyada waxaan idin siiyo oo kitaab iyo xikmo ah markaas uu idiin yimaado Rasuul rumaynaya una gargaartaan, kuna yiri: "Ma qirteen oo ma qaadeen arrintaas ballankayga ah oo ay yiraabdeen waan qirnay (oggolaannay) markaas ku yiri marag ka noqda, Anna la jirkiinna ayaan ka mid noqonayaa kuwa marag kacaya(81)", inuu yiri: "Ilaahay Nabi ma dirin, laga bilaabo Aadan iyo inta ka dambeysayba ee waa illaa kan ka qaaday cahdi iyo ballan adag oo ku saabsan Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, in haddii la soo diro ayagoo nool uu midka nolol kusoo gaara oo ayaga ka mid ihi uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rumaynayo oo uu u gargaarayo, ayna tahay inuu cahdigaasoo kale dadkiisa loo dirayna uga qaado." Xadiithkaas oo kalena waxaa kaloo laga wariyay ibnu Cabbaas , siduu tafsiirkiisa ugu xusay Al Cimaadu Al Xaafithu Ismaaciil bin Cumar ibnu Kathiir Al Qaysii Al Muftii Al Muxaddith, oo dhintay sanadka toddoba boqol iyo afar iyo toddobaatanka Hijriga. Sidoo kale waxaa wariyay ibnu Casaakir iyo Al Baghawii. Al Shaykhu Taqiyyu Al Diini Al Subkii wuxuu yiri: "Aayaddaan shariifka ah ee kow iyo sideetanaad ee Suuratu Aali Cimraana (oo aan kor kusoo xusnay) waxaa ku sugan dareen la is dareensiinayo oo la is tusayo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo waynayn qadarkiisa sarreeya oo aan la qarin Karin la waynaynayo. Waxaa kaloona ku sugan in la qadaray inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yimaado oo la soo diro zamankooda isagoo ayaga loo soo diray, oo ay Risaaladiisa iyo Nabinnimadiisu ku ahaato mid caam ah oo guud oo saamaysa khalqiga oo idil min Aadan ilaa maalinta qiyaame, ayna Anbiyada iyo ummadahoodu ay ummaddiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka mid ahaadaan. Sidaas ayuuna hadalkiisa uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri oo ahaa **"Wa bucithtu ilaa al nnaasi kaafatan"** oo macnihiisu yahay "Waxaana la ii diray dadka dhammaantood (Carab, cajam, madow, guduud, iwm)", ayna wariyeen Al Bukhaarii iyo Muslim,

wuxuu noqonayaa mid aan ku koobnayn oo keli ah dadka jiray laga bilaabo isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, zamankiisa ilaa yawmul qiyaamaha, ee balse wuxuu koobaya kuwa ayagana ka horeeyey. Muslim riwaayad uu wariyay wuxuuba Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: **"llaa al kha1qi kaafatan"**, oo macneheedu yahay: "Waxaa la ii diray khalqiga dhammaantiis", oo ah inta Ilaahay, Cazza wa Jalla, kazoo haratah, oo uu Isagu abuuray. Eraygaasna wuxuu koobayaa insiga, jinniga iyo malaa'igtaba.

Intaas aan soo sheegnay, oo ah inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Nabi yahay oo ay waagaas horreysey Nabinnimo u sugnaatay, oo Anbiyada kalena cahdi iyo ballan looga qaaday inay rumeeyaan oo raacaan, iyo in arwaaxda la abuuray ka hor intaan jirarka la abuurin, ayaa waxay macneyneysaa hadalkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu yiri oo ah **"kuntu Nabiyyan waa Aadamu bayna al ruuxi wa al jasadi"**, oo macneheedu yahay "Waxaan ahaa Nabi ayadoo uu Aadan ku sugan yahay xaalad u dhexeysa ruuxa iyo jirka. Taas macneheedu waxaa weeye inay xaqiiqadiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ay Nabinnimo u sugnaatay oo ay la muuqatay ka hor intaan Aadan la abuurin, oo uusan ruuxiisu jirkiisa dhex gelin. Marka haddaad taas ogaatay oo aad garatay, waxaad ogaatay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yahay Nabiga Anbiyada , oo ayagoo idilna loo diray, ayagoo ayaguna Nabinnimadooda ku sugan. Taas ayaana u sabab ah inay maalinta qiyaame Anbiyadoo idili calankiisa hoostiisa ku sugan yihiin, siduuba isagu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu yiri Xadiithka uu Axmad ka wariyay Anas: **"Wa bi yadii liwaa'u Al Xamdi Aadama fa man duunahu taxta liwaa'ii".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Gacantaydana waxaa ku jira Calanka Xamdiga, Aadan iyo inta ka sokeysana waxay yihiiin calankayga hoostiisa." Adduunkaanna waa sidaasoo kale, oo habeenka la dheelmiyay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu tujiyay oo uu imaam u noqday Anbiyada. Hadduu imaatinkiisa adduunkaanna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waafiqi lahaa oo uu ku beegnaan lahaa zamanka Aadan iyo Nuux iyo Ibraahiim iyo Muuse iyo Ciise, Calayhimussalaamu, waxaa dhammaantood waajib ku ahaan lahaa inay isaga rumeeyaan oo ay u garggaraan. Sidaas ayaana cahdiga iyo ballanka iyo xarigga adag looga qaaday,

Kuhaanta Carabta oo odorostay soo diridda Nabiga Salla Allaah u Calayhi Wasalalam

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Culummada yuhuudda iyo ruhbaanta krishtaanka iyo kuhaanta Carabtu waxay ka warrameen soo diridda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Bicthada horteed iyo intaan la soo dirin ka hor, waqtigiisuna uu soo dhowaaday. Culummada yuhuudda iyo kuwa krishtaanku waxay warkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka heleen kutubbadooda, oo tilmaamay isaga sifooyinkiisa iyo sifooyinka zamankiisa iyo siday Anbiyadoodu cahdi iyo ballan uga qaadeen in marka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la soo diro ay rumeeyaan oo ay raacaan, ayna u gargaaraan. Kuhaanta Carabtuse waxay ka ogaadeen shayaadhiinta ay xiriirka la lahaayeen. Shayaadhiintaasi waxay kuhaanta u keeni jireen waxay kasoo maqlaan Samada, ayagoo aan waagaas Samada looga reebin xiddigo ololaya oo lagu soo gano. Sidaas ayay kuhaanta ragga ah iyo kuhaanta haweenka ahba waxay ka maqli jireen waxa socda. Warkaas Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku saabsan oo ay shayaadhiinta ka maqlaanna, Carabtu dan kama yeelan jirin, ilaa uu Ilaahay kasoo diray, oo ay markaas dhaageen waxay u sheegi jireen. Markaasey aqoonsadeen." Al Suhaylii wuxuu yiri: "Waxaa akhbaarta lagu wariyay inuu Ibliis Ciise hortiis Samaawaadka dhex gooshi jiray. Markaasaa marka Ciise lasoo diray, ama markuu dhashay saddex Samo laga xijaabay oo laga reebay. Markuu Nabi Muxammad,

Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhashayna Samaawaadka oo idil ayaa laga xijaabay oo laga reebay, shayaadhiintuna markay u dhowaadaan xiddigo ololaya ayaa lagu soo ganaa. Markaasaa markay bateen xiddigaha lagu ganayo ayay Qurayshi waxay tiri: "Saacaddi ayaa kacday." Markaasuu Cutbah bin Rabiicah wuxuu yiri: "Waxaad fiirisaan xiddigga la yiraahdo Al Cayuuqu -oo ah xiddig wayn oo guduudan- oo haddii xiddiggaas la ganay, markaas kicidda Saacadda ayaa soo dhowaatay. Haddaan isaga la ganinna sooma ayaan dhowaan." Kuwa khabarkaan xusayna waxaa ka mid ah Al Zubayr bin Abii Bakr." Waa intaas warka Al Suhaylii. Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasaa, markuu amarka Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, soo dhowaaday, soo diriddiisana la gaaray, ayaa shayaadhiinta dhegeysiga laga reebay oo laga xijaabay, lana kala dhex galay ayaga iyo barahay Samada ka fariisan jireen si ay waxay Malaa'igtu ku wada hadleyso maqalka wax uga soo dafaan. Markaasaa waxaa lagu rajmiyay oo lagu ganay xiddigo. Markaasey jinniyadu waxay ogaadeen inay taasi sidaas ku ahaatay arrin uu Ilaahay addoommadiisa la doonayo daraadeed. Ilaahay T abaaraka wa Tacaalaa wuxuu Nabigiisa Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegayaa markuu soo diray, Isagoo uga warramaya marka jinniga laga xijaabay inay wax dhegeystaan, ayna ogaadeen waxay ogaadeen, ayanna waxaas oo idil midna ka inkirin oo diidin markay arkeen waxay arkeen: **"Qul uuxiya ilayya annahu istamaca nafarun mina at jinni faqaaluu innaa samicnaa Qur'aanan cajaban**(l)**Yahdii ilaa al rrushdi fa aamannaa bihi wa lan nushrika biRabbinaa axadan**(2)**Wa Annahu Tacaalaa Jaddu Rabbinaa maa ittakhatha saaxibatan wa laa waladan**(3)**Wa annahu kaana yaquulu safiihunaa calaa Allaahi shadhadhan**(4)**Wa annaa thanannaa an llan taquula al insu wa al jinnu calaa Allaahi kathiban**(5)**Wa annahu kaana rijaalun mina al insi yacuuthuuna bi rijaalin mina al jinni fazaaduuhum rahaqan**(6) **... Wa annaa kunnaa naqcudu minhaa maqaacida lilssamci faman yastamic al aana yajid lahu shihaaban rrasadan**(9)**Wa annaa laa nadrii asharrun uriida biman fii al ardi am araada bihim Rabbuhum rashadana**(10)**."** Aayadaha, oo ah Aayadaha kow ila lix iyo sagaal iyo toban ee Suuratu Al Jinni macnohoodu waxaa weeye: "Waxaad tiraahdaa, Nabiyow: "waxaa la ii waxyooday inay koox jinni ah dhegeysteen Quraanka, oo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, akhrinayo. Markaasey markay arligooda ku laabteen, waxay dadkooda ku yiraahdeen: "waxaan maqalnay Quraan balaaghadiisa iyo aftahannimadiisa lala yaabo, oo cajiib ah(1)Quraankaasoo dadka ugu yeeraya sawaabta oo ah tawxiidka iyo midaynta Ilaahay iyo iimaanka, markaasaan rumaynnay, cibaadadana Rabbigeen axadna la wadaajin mayno(2)Rabbigeenna Wayn oo Cathiimka ahna ma yeelan oo waa ka weynyahay inuu yeesho haweeney iyo ilmo midna(3)Keennii xumaana, oo ah ibliis, wuxuu ahaa kan Ilaahay been ka sheega, isagoo ku tilmaamay inuu shariik iyo ilmo leeyahay(4)Annaguna waxaan u maleyneynay inuusan insiga iyo jinniguba ayan Ilaahay been ka sheegayn, oo waxay noo sheegeen oo aan malayneyney waxay ahayd inuu Ilaahay haweeney iyo ilmo leeyahay ilaa aan Quraanka ka maqalno(S)Waxayna ahaayeen, islaamka hortiis rag Carab ahi markuu safar ku hjiro oo uu waadi ku hoydo, wuxuu sharta waadigaas ka magan geli jiray jinniga meeshaas deggan, ilaa uu ka waabariisto, taasoo jinniga kibir iyo xadgudub iyo dambi u siyaadisay, oo rahaqan waa dambiga iyo xadgudubka(6) ... Waxaanna ahayn kuwa Samada ka fariistah fariisimo si aan wax uga dhegeysanno. Haddase kii wax dhegeysta waxaa haleelaya danabyo lagu soo ganayo(9)." Markaasey jinnigu markay Qur' aanka maqleen waxay ogaadeen in dhegeysiga looga reebay si aan Waxyiga shayna ugu qasmin, Waxyigoo ah khabarka Samada ka yimaada, oo uu markaas dadka arliga deggan uu isaga qasmo waxa Ilaahay xaggiisa uga yimid, si ay xujjadu ugu caddaato, wax isku qasanna meesha laga waayo, oo uu amarku u caddaado. Markaasey aamineen oo ay rumeeyeen, kaddibna ay ku yiraahdeen tolkood, siday noo

warisay Aayadda soddonaad ee Suuratu Al Axqaaf: **"Qaaluu yaa qawmanaa innaa samicnaa Kitaaban unzila min bacdi Muusaa musaddiqan limaa bayna yadayhi yahdii ilaa al Xaqqi wa ilaa dhariiqin Mustaqiimin**(30)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Jinnigii Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Quraanka ka maqlayna markay tolkooda oo degmada Nasiibiin ee waqooyiga dalka Ciraq ku taalla dib ugu laabteen waxay ku yiraahdeen: "Tolkeenow! Waxaan maqalnay Kitaab, waa Quraankee, la soo dejiyay Muuse dabadiis, oo waxay ku taagnaayeen diinta yuhuudda, oo rumaynaya kutubbadii ka horreeyey, dadkana ku hanuuninaya Xaqqa iyo wadada toosan(30)." Oraahda jinniga oo ah **"Wa annahu kaana rijaalun mina al insi yacuuthuuna bi rijaalin mina al jinni fazaaduuhum rahaqan**(6)**"** waxaa weeye inay rag Carab ihi Quraysh iyo ghayrkoodba markuu socdaal ku jiroo uu waadi ama dooxo dhexdeeda oo arliga ka mid ah ku dego si uu ugu hoydo waadina waa dooxada ama banka intuu doono ha le'ekaadee buuro dhexdooda ku yaalla, oo ay buurahaasi biyaha roobka kusoo rogaanayuu wuxuu yiraahdaa: "Anigu waxaan caziizka -waa lagama adkaadehee- waadigaan ee jinniga ka mid ah ka magan galay caawa waxa shar ah ee dhexdiisa ku jira." Al Baghawii wuxuu tafsiirkiisa Aayadda lixaad ee Suuratu Al jinni uga wariyay Kardamu bin Abii Al Saa'ib Al Ansaarii inuu yiri: "waxaan u raacay aabahay Al Madiinah oo uu xaajo ka lahaa, markaasoo ahayd marka ugu horreysey oo Rasuulka Ilaahay, Saallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Makkah lagu xusay. Markaasaan waxaan la hoyanney nin ari raacanaya. Markaasey markuu habeenku kala barmay, ayaa waxaa yimid dhurwaa, markaasu wuxuu qaatay oo uu la tegey wan ariga ka mid ah. Markaasuu ninkii ariga la joogay booday, uuna yiri: "Kan waadiga degganow, magan gelyadaadaan ku jiraa!". Markaasaa waxaa dhawaaqay mid dhawaaqa oo aanan annagu u jeedin oo yiri: "Sarxaanow, sii daa." Markaasaa waxaa yimid wankii oo ordaya, oo ariga dhex galay ayadoo ayan xagtini gaarin." Markaasuu Ilaahay, Cazza wa Jalla, Rasuulkiisa, Saallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo Makkah jooga Aayaddaan **"Wa annahu kaana rijaalun mina al insi yacuuthuuna bi rijaalin mina al jinni fazaaduuhum rahaqan**(6)**"** kusoo dejiyay." Waa intaas tafsiirka Al Baghawi markaan.

Siday Carabtu zamanka jaahiliyada u haysatay xiddigaha la ganayo

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Carabta waxaa ugu horreeyey cid xiddigaha la ganayo ka naxda qolo ka mid ah qabiilka Thaqiif, oo Al Dhaa'if degta. Markaasey waxay u yimaadeen nin ayaga u dhashay, lana yiraahdo Camr bin Umayyah, kana sii ah reer Banii Cilaaj. Wuxuu yiri: wuxuuna ahaa ninka Carab ugu daahiyasan, waa caqli badnidee, uguna talo fiican. Markaasey waxay ku yiraahdeen: "Camrow, soo ma aadana arag waxa Samada dhexdeeda ka dhacay oo ah xiddigaha la ganayo?" Wuxuu yiri: "Haa, waan arkay ee marka adinkuna u fiirsada oo u kuur gala: hadday yihiin waxa la ganayo xiddigaha waaweyn oo lagu hanuuno marka barriga iyo badahaba la marayo, laguna kala yaqaanno xilliyada jiilaalka iyo gu' ga, ahna xiddigaha nolosha dadka u danta ah, hadday kuwaasi yihiin kuwa la ganayo, hadaba Wa Allaahi waa duubidda adduunka iyo dhammaadkiisa iyo halaagga khalqiga dhexdiisa ku suganba. Haddayse xiddigaha la ganayo xiddigo kale yihiin, ayaguna ay xaaladdooda lagu yaqaanno ku sugan yihiin, marka kaasi waa amar uu Ilaahay la doonay khalqigaan. Amarkaas-se muxuu yahay?" Ibnu Isxaaq wuxuu wariyay inay rag Ansaar ah sheegeen inuu Rasuulka Ilaahay, Saalla Allaahu Calayhi Wasallam, ayaga ku yiri: **"Maathaa kuntum taquuluuna fii haathaa al najmi allathii yurmaa bihi?"** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Maxaad ka oran jirteen xiddigahaan la ganayo?" Waxay yiraahdeen: "Nabiga Ilaahayow! Waxaan oran jimay markaan aragno ayadoo la ganayo: "waxaa dhintay boqor!", "Boqor ayaa la caleemo saaray", "wiil ayaa dhashay", "wiil

ayaa dhintay". Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Saalla Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Laysa thaalika kathaalika, wa laakinna Allaaha Tabaaraka wa Tacaalaa kaana ithaa qadaa fii khalqihi amran samicahu Xamalatu Al Carshi, fa sabbaxuu. Fa sabbaxa man taxtahum. Fa sabbaxa li tasbiixihim man taxta thaalika. Falaa yazaalu al tasbiixu yahbidhu xattaa yantahii ilaa Al Ssamaa'a al ddunyaa, fa yusabbixuu. Thumma yaquulu bacduhum li bacdin: "Mimmaa sabbaxtum?" Fa yaquuluuna: "Sabbaxa man fawqanaa, fa sabbaxnaa li tasbiixihim." Fa yaquuluuna: "Alaa tas'aluuna man fawqakum mimma sabbaxuu?" Fa yaquuluuna mithla thaalika, xattaa yantahuu ilaa Xamalati Al Carshi. Fa yuqaalu lahum: "Mimma sabbaxtum?" Fa yaquuluuna: "Qadaa Allaahu fii khalqihi kathaa wa kathaa" li amri allathii kaana. Fa yahbidhu bihi al khabaru min Samaa'in ilaa Samaa'in, xattaa yantahii ilaa al Ssamaa'i al ddunyaa. Fa yataxaddathuu bihi. Fa tastariquhu al shayaadhiinu bi al ssamci calaa tawahhumin wa ikhtilaafin. Thumma ya'tuu bihi al kuhaana min ahli al ardi. Fa yuxaddithuuhum bihi. Fa yakhdha'uuna wa yusiibuuna. Fa yataxaddathu bihi al kuhaanu. Fa yusiibuuna bacdan wa yakhdha'uuna bacdan. Thumma inna Allaaha Cazza wa Jalla xajaba al sh-shayaadhiina bi haathihi al nujuumi allatii yuqthafuuna bihaa. Fa inqadhacat al kuhaanatu al yawma. Falaa kuhaanata."** Waxaa isaguna Xadiithka wariyay Muslim, kuna wariyey Kitaabu Al Ssalaamu, tirada boqol iyo afar iyo labaatan, waxaana laga wariyay ibnu Cabbaas, Ilaahay isaga iyo aabihiisba raalli ha noqdee. Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Arrinku sidaas aad u sheegteen ma aha, ee laakiin waa sidatan: Markuu Ilaahay Cazza wa Jalla khalqigiisa amar xukunkiisa ah ku rido, waxaa maqasha Malaa'igta Carshiga Xambaarsan, oo la yiraahdo Xamalatu Al Carshi. Markaas ay maqlaan ayay tasbiixsadaan (oo waxay yiraahdaan Subxaana Allaahi). Markaasey malaa'igta hoostooda ahi ayaguna tasbiixsadaan. Markaasey markay malaa'igta ka hooseysa tasbiixdaas maqlaan ayay ayaguna la tasbiixsadaan. Sidaas ayay tasbiixsashadu hoos ugu soo degataa ilaa ay ka timaaddo Samada dhow ee adduunka soo xigta. Markaasey malaa'igta ayada ku sugani tasbiixsadaan, oo markaasey waxay qaarkood qaarka kale ku leeyihiin: "Maxaad ka tasbiixsateen?" Markaasey waxay leeyihiin: "Waxaa tasbiixsaday kuwa naga korreeya, markaasaan annaguna tasbiixdooda la tasbiixsannay". Markaasey waxay leeyihiin: "Maad kuwa idinka korreeya weydiisaan: "Maxaad ka tasbixsateen?" Markaasey sidaas oo kale leeyihiin. Markaasey qolaba kuwa ka korreeya sidaas oo kale u weydiinayaan ilaa ay gaaraan Xamalatu Al Carshiga. Markaasaa waxaa ayagana lagu leeyahay: "Maxaad ka tasbiixsateen?" Markaasey waxay leeyihiin: "Ilaahay ayaa khalqigiisa sidaas iyo sidaas ku xukumay" ayagoo amarkii ahaa sheegaya. Markaasuu khabarku soo deganayaa oo uu Samaba Samada ka hooseysa uga soo deganayaa ilaa uu ka yimaado Samada dhow oo adduunka soo xigta. Markaasey malaa'igtu amarkaas isaga ah ku sheekeysanayaan. Markaasey shayaadhiintu maqalkooda kusoo xadayaan oo ku dafayaan, si malo ku dhisan iyo ikhtilaafba. Markaasey waxay u imaanayan kuhaanta, waa faaliyayaashee, arliga jooga, markaasey uga warramayaan. Markaasey gafayaan, ayna haleelayaan (waxay malaa'igtu ku sheekeysanayeen). Markaasey faaliyayaalku ayaguna ka warramayaan oo ay dadka u sheegayaan. Markaasey qaarkiis haleelayaan, qaarkiisna ay gafayaan. Markaasuu Ilaahay Cazza wa Jalla shayaadhiinta ku xijaabay oo uu ku reebay xiddigahaan lagu ganayo (oo markay Samada u dhowaadaanba si ay malaa'igta warkooda wax uga soo maqlaan, ayaa xiddig ololaya lagu ganaa oo lagu eryaa. Dabkaasi markuu shaydhaanku ku dhaco wuu gubayaa dilise mayo, siduu Al Suhaylii u wariyay inuu ibnu Al Salaamu tafsiirkiisa ibnu Cabbaas uga wariyay). Sidaas ayay kuhaanadu, waa faalintee, ku go'day maanta, oo kuhaanana ma jirto."

Ganidda Shayaadhiinta

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Ibnu Isxaaq wuxuu baabkaan ku xusay sida shayaadhiinta xiddigo loogu ganay, si uusan Waxyiga wax ugu darsamin oo uusan ugu qaldamin, uuna sidaas ku ahaado xujjo cad iyo goynta shakigaba, waxa uu yirina waa run. Laakiin shayaadhiinta oo xiddigaha lagu gano markaas ka horna way jirtay, oo hore ayaa loogu gani jiray, sida ay ugu sugantahay gabayada gabayaalkii hore ee jaahiliyada, ayna ka mid yihiin Cawf bin Ajrac iyo Aws bin Xajar iyo Bishr bin abii Khaazin, oo dhammaantood zamanka jaahiliyada noolaa, waxayna wada sifeeyeen oo ay gabayadooda ku tilmaameen ganidda xiddigaha. Tixaha ay arrinkaas ka yiraahdeenna waxay ku xusan yihiin kitaabka Mushkili ee ibnu Qutaybah marka la fasirayo Suuratu Al Jinni. Cabdu Al Razaaqna wuxuu Tafsiirkiisa uga wariyay Macmar in ibnu Shihaab la weydiiyey ganiddaan xiddigaha oo la yiri: "Jaahiliyadana ma jiray?" Wuxuu yiri: "Haa, laakiin markuu islaamku yimid waa lasii adkeeyey, waana la xoojiyay." Hadalka Ilaahay ee ku xusan Aayadda sideedaad ee Suuratu Al Jinni oo ah: **"Wa annaa lamasnaa Al Ssamaa'a fawajadnaahaa muli'at xarasan shadiidan wa shuhuban**(8)**",** oo macneheedu yahay: "Waxaan doonnay Samada, waxaanna helnay ayadoo ay ka buuxdo ilaalin daran iyo danabyo(8)." Oo inuusan oran waxaa loo ratibay ilaalo waxay daliil u tahay inay hore wax uga jireen. Markaasaa marka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lasoo diray, Samada laga buuxiyay ilaalo xoog badan iyo dab ololaya, si amarka shaydhaanka loo gooyo iyo wax ku darkooda, oo Aayadduna ahaato mid cad, xujjaduna mid goysa oo af leh. Hadday ayaamahaan faaliyayaal ama kuhaani jirto, taasi reebi meyso khabarkuu Ilaahay noo sheegay, oo ah eryidda shayaadhiinta inay maqalkooda iyo dhegohooda wax kusoo xadaan, maxaa yeelay xoojinta iyo adkeynta Samada waxay ahayd zamanka Nabinnimada. Sidaas ayay dhegeysigaas wax yar uga hareen, ayna u daliil tahay inay kaahinnada zamannada qaarkood iyo dalalka qaarkood wax ka jiraan, naadirba ha ahaadaane. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa waxaa wax laga wareystay kuhaanta, markaasuu wuxuu yiri: **"Laysuu bi sha'in",** oo macneheedu yahay: "Waxba ma ayan aha." Markaasaa waxaa la yiri: "Ayagu waxbay sheegaan, markaasey siday u yiraahdeen u noqotaa." Markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Tilka al kalimatu mina al jinni yaxfathuhaa al jinniyyu, fa yuqirruhaa fii uthuni waliyyihi qarra al zzujaajati, fa yakhludhu fiihaa akthara min mi'ati kathibatin."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Taasi waa eray jinniga ka timid oo uu jinnigu soo xafithay, oo uu markaas ku shubayaa oo uu ku foorarinayaa dhegta waligiisa, oo ah faaliyaha isaga raacsan oo uu saaxiibka la yahay, sida quraaradda wax laga shubayoo oo kale (loo foorariyo). Markaasuu wuxuu ku darayaa oo uu kalimaddaas ku qasayaa in ka badan boqol beenood." Waxaa kaloo Xadiithka wariyay Al Bukhaarii mujalladka sideedaad, bogga sideed iyo konton, iyo Muslim Xadiithka boqol iyo saddex iyo labaatan ee kitaabu Al Ssalaami. Ibnu Salaam wuxuu tafsiirkiisa ibnu Cabbaas uga wariyay inuu yiri: "Marka dabka ololaya jinniga lagu soo gano, ma seegayo, wuxuuna ka gubayaa intuu ka haleelay, mase dilayo." Al Xasan-na waxaa laga wariyay inuu yiri: "Wuxuu haleelayaa si ilbiriqsi iyo dhakhsiiyo badan." Ibnu Salaam wuxuu kaloo tafsiirkiisa uga wariyay Qataadah in isagoo rag kale la jooga xiddig la ganay, oo uu markaas yiri: "Aaraggiinna ha raacinnina". Wuxuu kaloo tafsiirkiisaas uga wariyay Xafs inuu Al Xasan weydiiyey: "Xiddigaha aragga ma raacinnaa, waana intuu jinniga kusii socdo?" Markaasuu wuxuu yiri: "Subxaanahu wuxuu yiri: **"Wa jacalnaahaa rujuuman lilsh-shayaadhiini**(5)**",** waana Aayadda shanaad ee Suuratu Al Mulki oo macneheedu uu yahay: "Wuxuuna ka dhigay xiddigahaas kuwa lagu gano shayaadhiinta(5)." Wuxuu kaloo Cazza wa Jalla yiri: **"Awalam yanthuruu fii malakuuti al Ssamaawaati wa al ardi**(185)**",** oo ah Aayadda boqol iyo shan iyo

sideetan ee Suuratu Al Acraafi oo macneheedu yahay: "Miyeeyan fiirin xukunka Samooyinka iyo dhulka?(185)". Al Xasan wuxuu yiri, kaddib markuu labadaas Aayadood akhriyay: "Sidee baan ku ogaaneynaa hadaanan dhugan? Sidaas ayaan araggeyga u raacinayaa!" Waxaa wariyay Tafaasiirta Al Dhabarii, Ibnu Kathiir iyo Al Qurdhubii.

Jinniga Quraanka dhegeystay

Waxaa xuduudka Xaramka Makkah ka mid ah **Nakhlata** oo Kacbada saddex iyo toban kiiloomitir u jirta, una dhexeysa Makkah iyo Dhaa'if, ahna barta uu degay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Dhaa'if kasoo noqday sanadka tobanaad ee Nabinnimada, oo isagoo halkaas ku tukanaya ay maqleen koox Jinni ah isagoo Quraan akhrinaya, ayna kusoo degtay Suuradda Qul Uuxiya ama Suuratu Al Jinni, siduu Al Bukhaarii u wariyay (fiiri Fatxu Al Baarii mujalladka sideedaad bogga lix boqol iyo afar iyo toddobaatan) iyo Xadiithka afar kun iyo sagaal boqol iyo kow iyo labaatanba. Jinnigaas Nakhlah Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu yimid waxay ahaayeen jiiniga Nasiibiin (waa saad). Nasiibiin waa magaalo ilaa maantadaan Waqooyiga dalka Ciraaq ku taalla, galbeedna ka xigta magaalada Niinawaa oo ah magaalada Nabi Yuunus loo diray, iyo magaalada Al Muusal oo labadooduba ay saaran yihiin wabiga Dijlah. Nasiibiin waxay saaran tahay wabiga la yiraahdo Al Khaabuur oo ah laan ka mid ah wabiga Furaat, siduu ugu masawiray Dr. Shawqii abuu Khaliil kitaabkiisa Adhlasu Al Siirati Al Nabawiyyati. Jinnigaasu waxay u socdeen Yaman, markaasey ayagoo safarkoodaas ku jirah waxay soo mareen barta la yiraahdo Nakhlah, waxayna ahaayeen toddoba nin, oo yuhuud ahaa, ayagoo ku taagan shareecadii Muuse, magacdooduna waxay ahaayeen (1) **Shaasir** (waa saad), iyo (2) **Maasir** (waa saad), iyo (3) **Manshaa,** iyo (4) **Laashaa,** iyo (5) **Al Axqaab,** iyo (6) **Surraq,** iyo (7) **Camr bin Jaabir.** Cumar bin Cabdul Caziiz, Allaha raalli ka noqdee, ayaa la wariyay in isagoo meel lama degaan ah maraya uu arkay abeeso mayd ah. Markaasuu go'iisa qaar ka gooyey oo uu intuu ku kafnay duugay. Markaasuu wuxuu maqlay mid oranaya: "Surraqow marag ka ahow! Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo kugu leh: **"Sa tamuutu bi ardi falaatin, wa yadfinuka rajalun saalixun."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaad ku dhimanaysaa arli lama degaan ah, waxaana ku duugaya nin suuban." Markaasuu Cumar bin Cabdul Caziiz wuxuu yiri: "Kumaad adigu tahay, Allaha kuu naxariistee?" Markaasuu kii wuxuu yiri: "Waxaan ahay nin ka mid ah Jinnigii Quraanka ka maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kuwaasoo uusan ka harin cid aan aniga ahayn iyo Surraq. Surraqna waa kan oo dhintay." Cabdullaahi bin Mascuud, Allaha raalli ka noqdee, oo la socda rag asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka mid ah ayaa dabayli ku kacday, kaddibna dabayl tii hore ka xoog badan oo ka wayn. Kaddibna dabayshii way ka qaaday. Markaasey waxay arkeen abeeso mayd ah. Ibnu Mascuud wuxuu yiri: "Markaasuu nin naga mid ihi xaggeeda aaday oo uu intuu go'iisa dillaaciyay uu qaar abeesada kafan uga dhigay, uuna duugay. Markuu habeenkii dumay, oo ay gudcur noqotay, mase waa laba haween ah oo weydiinaya: "Kiinneebaa Camr bin Jaabir duugay?" Markaasaan waxaan niri: "Ma naqaanno Camr bin Jaabir qofkuu yahay." Markaasey waxay yiraahdeen: "Haddaad ajar ku dooneyseen, waad hesheen, waxaana dhacday inay kuwa faasiqiinta ah ee jinnigu la dagaallameen mu'miniintooda, markaasaa Camr la dilay, waana abeesada aad aragteen, wuxuuna ka mid yahay kuwa Quraanka ka maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kaddibna qawmkooda u digay." Nakhlata waa meesha lagu dilay gaalka ugu horreeyey Islaamka, magaciisuna ahaa Camr Al Xadramii, laguna qafaalay labadaii nin oo ugu horreysey oo Islaamka lagu qafaalo, kalana ahaa Cuthmaan bin Cabdullaahi iyo Al Xakamu bin

Kaysaan, laguna ghaniimeystay ghaniimada islaamka ugu horreysey. Asxaabta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo duullaankaas ku jirayna waxay ahaayeen sideed nin oo Muhaajiriin ah uuna amiir u yahay Cabdullaahi bin Jaxsh, Allaha dhammaantood raalli ka noqdee. Nakhlah waxaa kaloo ku yiillay sanamka wayn oo ay caabudi jireen oo magaciisu ahaa Al Cuzzaa, oo uu Ilaahay, Cazza wa Jalla, Ayadda sagaal iyo tobnaad ee Suuratu Al Najmi noogu sheegay, uuna furashada Makkah kaddib Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u diray Khaalid bin Al Waliid, Allaha raalli ka noqdee, inuu dumiyo, uuna dumiyay.

Go'idda kuhaanada

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Ibnu Isxaaq wuxuu xusay Xadiithka ibnu Cabbaas, ayna ka mid tahay "waxaan oran jiranay markaan aragno "waxaa dhintay qof wayn" ama "waxaa dhashay qof wayn". Taasna waxaa ku sugan daliil in waxaan hore usoo sheegnay oo ah inay ganidda xiddiguhu wax fac wayn oo horreeyey uu yahay, markiise Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, lasoo diray -siduu Al Zuhriyyu u yiri- Samada ilaalinteeda lagu kordhiyay oo la adkeeyey, xiddigaha la gano. Hadalkiisana, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, ku sugan Xadiithka dhammaadkiisa oo macnihiisu yahay "maantana kuhaanadii way go'day, kuhaannimana ma jirto" wuxuu tilmaamayaa inay go'iddaas buuxda ay zamankaas ku gooni ahayd. Waxase maantadaas go'ay, go'naanayana ilaa maalinta qiyaame, waa inay shayaadhiintu gaarto waxay gaari jirtay zamanka jaahiliyada ee islaamka hortiis ahayd, oo ay awoodi jirtay inay warka Samada maqlaan. Warka maalmahaan la maqlo, oo hadalka jinniga ka mid ah, lagana maqlo carrabka dadka waalan, waa war wuxuu jinnigu ku arko arliga dhexdiisa oo aanan annagu u jeedin, sida tuug wax xaday, ama waxaas u xuday uu meel qarsoon ku qarsado, iyo wax la mid ah. Haddayse sheegaan wax mustaqbalka ahaan doona, waa malo ay iska maleynayaan oo ay markaasna in yar haleelayaan, in badanna gafayaan. Waxaas yar oo ay haleelayaan waa waxay ku wada hadlayaan malaa'igta ku jira daruuraha roobka sida, siday ugu sugnaatay Xadiithka Al Bukhaarii. Markaasaa xiddigo lagu ganaa oo lagu eryaa. Markaasey eraygay malaa'igta ka maqleen waxay ku darayaan in ka badan boqol beenood, siduu ugu yiri, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, Xadiithka nasoo maray."

Kaahinadda Al Ghaydhalatu

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "haweeney (Qurayshta) reer banii Sahm u dhalatay, lana yiraahdo Al Ghaydhalatu, ayaa waaga jaahiliyada faaliso ahaan jirtay. Markaasuu habeen habeennada ka mid ah markuu u yimid shaydhaanka saaxiibkeed ahaa, ayuu hoosteeda kusoo degay, kaddibna wuxuu yiri: "adri maa adri", oo macneheedu yahay: "maalin cirbogoyn iyo gawricid." Markuu warkaasu Quraysh gaaray waxay yiraahdeen: "muxuu leeyahay?" Markaasuu hadana habeen kale u yimid oo hoosteeda kusoo degay, kaddibna uu yiri: "shucuubun maa shucuubu? Waxaa lagu dilayaa Kacb oo dhinaca loo ridiyaa." Markuu warkaasuu Quraysh gaaray, waxay yiraahdeen: "muxuu u dan leeyahay? Amarkaanu wuu ahaanayaaye, ee bal fiiriya wuxuu yahay." Amarkaasu wuxuu yahay ma ayan ogaan jeer ay dhacdada, waa duullaankee, Badar ahaatay iyo midka dooxada Uxud. Markaasay waxay ogaadeen wuxuu shaydaankaasi saaxiibbaddiis u keenay." Ibnu Hishaam iyo Al Suhaylii waxay yiraahdeen: "Al Ghaydhalatu waxay u dhalatay reer Banii Murrah bin Cabdu Manaat bin Kinaanah ee qabiilka Mudlij, waana Ummu Al Ghaydhalatu, midduu Abuu Dhaalib gabayadiisa ku xusay." Al Suhaylii wuxuu yiri: "shucuubun wa maa shucuubu waxaa lagu dilayaa Kacb oo dhinaca loo ridayaa waxaa weeye Kacb bin Lu'ayy, kuwa la dilay oo

dhinacyadooda loo daadiyayna Maalinta Badar iyo Uxud waxay ahaayeen madaxda Quraysh oo badankoodu yihiin dhashay Kacb bin Lu'ayy. Shucuub-na waa jamaca shicb, oo ah dooxo buuro dhinocooda ah, oo lama garan waxay tiri ilaa looga dilo kuwa lagu dilay Badar iyo Uxud dooxooyinkooda." Wuxuu kaloo xusay hadal shaydhaanka raacsan oo yiri: "adri maa adri", waxaana Abii Calii laga wariyay riwaayad kale oo uu shaydaanku ku yiri: "wa maa Badr?" oo ah: "Badarna maxay tahay?", tanoo ka cad riwaayadda hore. Al Suhaylii wuxuu kaloo ibnu Isxaaq ka wariyay inuu yiri: "Faadhimah bintu Al Nnucmaanu Al Nnajaariyyah waxay lahayd shaydaan raacsan, o jinniga ka mid ah, caadadiisuna waxahy ahayd inuu markuu u yimaado uu gurigeeda xoog kusoo galo. Markaasay markay ahayd Bicthada bilowgeeda ayuu u yimid. Markaasuu wuxuu fariistay darbiga daarta korkiisa, umana uusan soo gelin. Markaasay waxay tiri: "maxaad usoo geli weyday?" Markaasuu wuxuu yiri: "waxaa lasoo diray Nabi oo xaaraantimaynta zinada lala soo diray." Taasay ahayd marka ugu horreysey oo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah lagu xuso."

Khadhar: kaahinka Banuu Lihib

Al Suhaylii wuxuu yiri: "waxa ay fashay Thaqiif wax la mid ahna waxaa ayaguna faleen Banuu Lihib, markay ka naxeen xiddigaha la ganayo. Markaasay waxay isugu yimaadeen faaliye ayaga ka dhashay oo la yiraahdo Khadhar agtiisa. Markaasuu arrinka u caddeeyey iyo waxa ka ahaaday amarka Nabinnimada. Abuu Jacfar Al Caqiilii wuxuu Kitaabka Saxaabada ku wariyay nin u dhashay reer Banii Lihb, oo la yirahdo Lihbun ama Luhaybun, oo yiri: "waxaan la joogay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markaasaan waxaan xusay kuhaanada ama faalinta, waxaanna iri: "aabahay iyo hooyaday ayaan kugu furanayaaye, annagaa ugu horreyney kuwa aqoonsada ilaalinta Samada iyo eryidda shayaadiinta iyo ka reebiddooda inay maqalka wax kusoo xadaan marka xiddigaha lagu ganay. Taasina waxay ku ahaatay inaan isugu nimid kaahin aan lahayn oo la yiraahdo Khadhar bin Maalik agtiisa, ahaana oday da' wayn, jirsadayna laba boqol iyo sideetan sano, isagaana kuhaanteenna ugu cilmi badnaa. Markaasaan waxaan niri: "Khadharow! Cilmi ma u leedahay xiddigahaan la ganayo, taasoo annaguna aan ka baqnay, aanna ka baqannay cirib xumideeda?" Markaasuu wuxuu gabay ku yiri:

1. Berrito waqtiga suxuurta ii kaalaya.
2. Markaasaan warka idiin sheegayaa.
3. Inuu khayr yahay ama dhibaato.
4. Uuna yahay amni ama khatar.

Wuxuu yiri: "markaasaan ka gaddoonnay maalinteennaas. Markay maalinta taas ku xigtay ahayd , aroortii waqtiga suxuurta ayaan u nimid. Mase waaba isagoo soo jeeda oo labadiisa cagood ku taagan, Samadana kor u fiirinaya. Markaasaan u yeernay oo niri: "arrinku ma khatarbaa Khadharow?" Markaasuu madaxa noogu tilmaamay: "aamusa." Markaasaa waxaa kasoo hoobtay xiddig weyn Samada, oo uu markaas kaahinku qayliyay, oo uu tiriyay gabay uu ku sheegayo inuu xiddiggu shaydaanka ku dhacay oo uu haleelay, wuxuuna yiri:

1. Yaa macshara Banii Qaxdhaani
   ukhbirukum bi al xaqqi wa al bayaani.
2. Aqsamtu bin Al Kacbati wa Al Arkaani
   wa Al Baladi Al Mu'tamini Al Ssuldaani.
3. Laqad munica al ssamca cutaatu al jaani
   bi thiqaabin bin kaffi Thii Suldhaani.
4. Min ajli Mabcuuthin Cathiimi Al Shaani
   yubcathu bin Al Tanziili wa Al Quraani.

5. Wa bi al hudaa waa faasili Al Quraani
tabdhulu bihi cubaadatu al awthaani.

Gabayga macnihiisu waxaa weeye:

1. Ragga ah dhasha Qaxdhaanow
waxaan idiin sheegayaa runta oo cad.
2. Waxaan ku dhaartay Kacbada iyo Arkaanteedee
iyo Beledka Aaaminka ah oo loo adeego.
3. Waxaa dhegeysiga laga reebay jinniga kuwiisa xad gudbay
laguna reebay dab ololaya oo Mid suldaan ah Gacantiisa ku jira.
4. Waxaana loo reebay sababta mid lala soo diri doono arrin wayn
lalana soo dirayo mid lasoo dejiyay iyo Quraanka.
5. Iyo hanuun iyo Quraanka kala saariddiisa
waxaa ku buraya caabudidda asnaamta.

Wuxuu yiri: "markaasaan waxaan iri: "War is ilaali, oo maxaad leedahay! Khadharow, waxaad sheegeysaa amar wayn. Marka, maxaad kula talineysaa tolkaa?" Markaasuu wuxuu yiri:

1. Araa li qawmii maa araa li nafsii
an yatbacuu khayra Nabiyyi al insi.
2. Burhaanuhu mithlu shucaaci al shamsi
yubcathu fii Makkata daari al Xumsi.
3. Bi muxkami Al Tanziili ghayra allabsi.

Tixaha macnohoosu waxaa weey:

1. Waxaan tolkey u arkaa waxaan nafteyda u arko
oo ah inay raacaan midka ugu khayr badan Nabiyada insiga.
2. Burhaantiisu waxay la mid tahay kaaha shucaaca qorraxda oo kale
waxaana laga soo dirayaa Makkah, dalka Xumusta.
3. Lalana soo dirayaa Quraanka oo aan shaki iyo isku qasid lahayn.

Markaasaan waxaan ku niri: "Yuuna isagu u dhashay?" Markaasuu wuxuu yiri: "Waxaan ku dhaartay nolosha iyo cayshka, wuxuu u dhashay Quraysh, isagana turiddiisa iyo dulqaadkiisa kuma jirto leexasho, abuuristiisana kuma jirto wax xun, wuxuuna hoggaaminayaa ciidan, waana ciidan wayn, kana kooban ubadka Qaxdhaan (oo ah Ansaarta Al Madiinah Al Munawwarah oo Qaxdhaan ku abtirsada iyo Muhaajiriinta oo ayaguna Carab ah) iyo ubadka Aysh (oo ah qabiil jinniga mu'miniinta ah ka mid ah, oo ku abtirsada midka la yiraahdo Aysh)." Markaasaan waxaan ku iri: "Noo sii caddee, oo Qurayshteebuu ka dhashay?" Markaasuu wuxuu yiri: "Waxaan ku dhaartay Baytka Arkaanta (tiirarka) leh iyo Xajaru Aswadka iyo biyaha Zamzam ee wuxuu ka mid yahay wiilasha Haashim, kuwaasoo tol kariimiin ah, waxaana lala soo dirayaa dagaallo waaweyn iyo dilidda mid kastoo daallin ah." Kaddibna wuxuu yiri: "Taas weeye caddeyntu, waxaana ii sheegay madaxweynaha jinniga." Kaddibna wuxuu yiri: "Allaahu Akbaru, Xaqqa ayaa yimid (waa runtee) oo soo bannaan baxay, jinnigana waxaa ka go'ay warkii." Kaddibna wuu aamusay, wuuna gam'ay sida isagoo suuxay oo kale. Soomana uusan kicin saddex habeen kaddib mooyee, markaasuu wuxuu yiri: **"Laa ilaaha illaa Allaahu."** Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri**: "La qad nadhaqa can mithli Nubuwwatin, wa innahu la yubcathu yawma al qiyaamati ummatun waxdahu"**, oo Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "wuxuu ku hadlay warka Nabinnimada oo kale, waxaana lasoo saarayaa maalinta qiyaame isagoo ummad ah keligiis." Waxaa wariyay ibnu Xajar, kuna wariyay Al Isaabah, mujalladka saddexaad bogga saddex boqol kow iyo toddobaatan.

Kaahinka qabiilka Janb

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Qabiilka la yiraahdo Janb oo reer Yaman ah ayaa zamanka jaahiliyada waxay lahaayeen kaahin. Markaasaa marka la sheegay warka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo uu warkiisu Carabta dhexddeeda ku faafay, ayay Janb waxay kaahinkooda ku tiri: "Nooga faalli arrinka ninkaan", waxayna isugu yimaadeen salka buurta uu dusheeda degganaa. Markaasuu wuxuu usoo degay markay qorraxdu soo baxday. Markaasuu la istaagay isagoo qaansadiisa ku tiirsan, oo uu madaxiisa Samada kor ugu qaaday oo uu in dheer kor u fiirinayey. Markaasuu booday, kaddibna uu yiri: "Dadow, Ilaahay Muxammad wuu karaameeyey, wuuna doortay, wuuna daahiriyay qalbigiisa iyo uurkutaashiisaba. Intuu dhexdiinna joogana, dadow, way yartahay." Markaasuu buurtiisa xoog dib ugu cararay, kuna noqday meeshuu ka yimid."

Cumar iyo Sawaad bin Qaarib Al Dawsiyyi

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Cumar bin Al Khadh-dhaab ayaa isagoo Masjidka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhex fadhiya, ayaa waxaa masjidka soo galay nin Carab ah oo Cumar bin Al Khadh-dhaab doonaya. Markaasuu Cumar, Allaha raalli ka noqdee, markuu ninkaas arkay, ayu wuxuu yiri: "Ninkaanu wuxuu ku taagan yahay gaalnimadiisii, oo weli kama uusan tegin, ama zamanka jaahiliyada wuxuu ahaan jiray kaahin." Markaasuu ninku Cumar salaamay, kaddibna uu fariistay. Markaasuu Cumar, Allaha raalli ka noqdee, wuxuu ninka ku yiri: "Ma islaantay?" Markaasuu ninku wuxuu yiri: "Subxaana Allaahi Mu'miniinta Amiirkoodow! Xumaan ayaad igu tuhuntay, waxaadna iagala hortimid arrin aanan arag inaad axad raaciyadaada ka mid ah aadan ku oran tan iyo inta lagu saaray xilkaad qaadday." Markaasuu Cumar wuxuu yiri: "Allaahumma ghafran (oo ah Ilaahayow ii dambi dhaaf)! Zamanka jaahiliyada waxaan ku taagnayn wax middaan ka shar badan, oo asnaamtaan caabudi jimay, asnaamta ayaanna luqunta luqunta u gelin jimay, ilaa uu Ilaahay nagu karaameeyey Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Islaamka." Wuxuu yiri: "Haa, oo Wa Allaaahi, mu'miniinta Amiirkoodow, waxaa hubaal ah inaan kaahin faaliya ahaan jiray zamanka jaahiliyada." Markaasu Cumar wuxuu ku yiri: "iiga warran hadaba, wuxuu saaxiibkaagu (jinniga ah) kuu keenay." Ninku wuxuu yiri: "wuxuu ii yimid islaamka hortiis bil ama in bil wax yar ka yar, wuxuuna yiri: "so ma aadan arag jinniga iyo siday u wareersan yihiin, iyo siday diintooduna ay tahay quusasho iyo khayr laga samro, ayna ku dheggan yihiin reeryada awrtooda saaran?" Markaasuu Cumar bin Al Khadh-dhaab wuxuu yiri, isagoo dadka u warramaya: "WaAllaahi, anigoo ag jooga sanam asnaamtii jaahiliyada ka mid ah, ayna ila joogaan rag Quraysh ah, uuna nin Carab ahi sanamkaas dibi u gawracay, annaguna aan dhawraynno inuu hilbihiisa uu annagana qayb naga siiyo, ayaan uurka dibiga waxaan ka maqlay cod aanan hore u maqal cod ka dheer oo dhegaha ka geli og. Taasina waxay ahayd bil ama in bil xoogaa ka yar islaamka hortiis. Codkaasuna wuxuu leeyahay: "Thariixow, waa amar lagu libaano oo ahaaday, ahna nin la qaylinaya oo leh **"laa ilaaha illaa Allaahu**", siduu isaguna u wariyay Al Bukhaarii, Kitaabka Manaaqibta Ansaarta, Xadiithka saddex kun iyo sideed boqol iyo lix iyo lixdan. Ibnu Hishaamna wuxuu yiri: "waxaa la yiraahdaa inuu codkaasi lahaa "nin ku qaylinaya carrab iyo hadal faseex ah oo cad, lehna: **"Laa ilaaha illaa Allaahu."** Al Suhaylii wuxuu yiri: "codka uu Cumar dibiga ka maqlay oo ah "Yaa Jaliix", waxaan maqlay mid shuyuukhdeenna ka mid ah oo leh: "waa magaca shaydhaan". Siirada wuxuu ku yiri: "Yaariix", waxaadna mooddaa in loo dhawaaqayo dibiga la gawracay, ayadoo la yiraahdo axmarun thariixun, oo macneheedu yahay guduud badan, oo dhiigga la guduutay. Kan "Yaa Jaliixu" wariyayna wuxuu ula dan

leeyahay isla dibiga la gawracay, ayadoo dibiga la gawracay, oo julixa macneheedu waxaa weeye "haragga ayaa laga siibay". Wa Allaahu aclamu." Ninkaan kaahinka ahaan jirayna magaciisu waa Sawaad bin Qaarib Al Dawsiyyi, siduu ibnu Al Kalbii u yiri. Ghayrkiisna waxay yiraahdeen wuxuu u dhashay qabiilka Saduus."

Riwaayada Al Suhaylii ee Xadiithka Cumar iyo Sawaad

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Xadiithkaan Cumar waxaa kaloo wariyay ibnu Isxaaq ghayrkiis, una wariy si sidaan ka duwan, oo ah inuu Cumar ninka la kaftamay, uuna ku yiri: "Sawaadow, maxay ku dambeysey kaahinnimadaadii?" Markaasuu Sawaad carooday, wuxuuna yiri: "aniga iyo adigu waxaan ku sugnaan jirnay mid taas ka shar badan, oo ah caabudidda asnaamta iyo cunidda bakhtiqa xoolaha dhintay. Marka, ma waxaad igu ceebeyneysaa arrin aan ka tawbad keenay?" Markaasuu Cumar wuxuu yiri: "Allaahumma ghafran!", oo ah "Ilaahayow dambigayga dhaaf". Ibnu Isxaaq ghayrkiisna wuxuu Xadiithkaan u wariyay si qurxoon iyo ziyaado waxtar leh, wuxuuna xusay inuu Sawaad uu Cumar u sheegay inuu jinniga raacsani uu saddex habeen oo isku xigta u yimid, isagoo saddexdoodaba ku sugan xaalad uu u dhexeeyo mid hurda iyo mid soo jeeda, uuna ku yiri: "Sawaadow kac oo istaag, hadalkaygana dhegeyso, garana haddaad caqli leedahay. Waxaa lasoo diray Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, una dhashay Lu'ayy bin Ghaalib (oo ah awoowaha sideedaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam), dadkuuna ugu yeerayaa Ilaahay iyo inay Keligiis caabudaan." Markaasuu habeen walba oo saddexdaas habeen ka mid ah ku luqeeyey oo uu ku heesay tixo isku macne ah, qaafiyadeeduse ay is khilaafsan yihiin, ahna:

1. Cajibtu lil jinni wa tadhlaabihaa
Wa shaddihaa al ciisa bi aqtaabihaa.
2. Tahwii ilaa Makkah tabghii al hudaa
maa saadiqu al jinna ka kath-thaabihaa.
3. Fa arxal ilaa al safwata min Haashimi
laysa quddaamahaa ka adbaarihaa.

Tixaha macnohoodu waxaa weeye:

1. Waxaan u yaabay jinniga iyo waxay dooneyso
Siday awrta ugu adkehynayaan kooraha.
2. Ayna Makkah ugu soo aroorayaan ayagoo hanuun doon ah
jinniga kiisa runlowga ahi la mid ma aha beenlowgooda.
3. Marka awr usoo fuul midka ilmo Haashim laga doortay
horteeduna la mid ma aha saynteeda.

Habeenka labaadna wuxuu ku yiri:

1. Cajibtu liljinni wa iblaasihaa
wa shaddihaa al ciisa bi axlaasihaa.
2. Tahwii ilaa Makkah tabghii al hudaa
maa dhaahiru al jinni ka anjaasihaa.
3. Fa arxal ilaa Al Safwati min Haashimi
laysa thunaabaa al dhayri min ra'sihaa.

Tixaha macnohoosu waxaa weeye:

1. Waxaan u yaabay jinniga iyo quusashadiisa
iyo inay awrta xoog ugu soo fuulaan koorohooda.
2. Ayna Makkah kusoo degato ayagoo hanuun doon ah
jinnigana kiisa daahirka ahi la mid ma aha kiisa najaasada ah.
3. Awr usoo fuul marka kan la doortay oo ina Haashim ah
shimbiraha dabadoodu madaxooda ka mid ma aha.

Habeenka saddexaadna wuxuu ku yiri:
1. Cajibtu lil jinni wa tanfaarihaa
wa shaddihaa al ciisa bi akwaarihaa.
2. Tahwii ilaa Makkata tabghii al hudaa
maa mu'minu al jinni ka kuffaarihaa.
3. Fa arxal ilaa Al Atqiina min Haashimi
laysa qudaamuhaa ka adbaarihaa.
Tixaha macnohoodu waxaa weeye:
1. Waxaan u yaabay jinniga iyo gaddoonkiisa
iyo siday awrta xoog ugu soo fuulayaan iyo kooreheeda.
2. Kuna soo degeysa Makkah ayagoo hanuun doon ah
jinniga mu'minka ahna la mid ma aha kaafirkooda.
3. Awr usoo fuul ee u tag midka amarka sugay oo ina Haashim ah
horteedu la mid ma aha dabadeeda.
Intaas kaddib wuxuu wariyay inuu Sawaad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid, oo uu u tiriyey gabayguu jinniga saddexda habeen oo isku xigah u tiriyey. Sidaas ayayna tilmaameysaa gabayga uu ku leeyahay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hortiisa, oo ah:
1. Ataanii naajiyyii bacda had'in wa raqdatin
wa lam yaku fiimaa qad balawtu bi kaathibii.
2. Thalaatha liyaalin qawluhu kullu laylatin
ataaka Nabiyyun min Lu'ayyi bin Ghaalibi.
3. Fa rafactu athyaala al izaari wa shammarat
biyaal cirmisu al wajnaa hujuula al sabaasibi.
4. Fa ash-hadu anna Allaaha laa shay'a ghayruhu
wa annaka ma'muunun calaa kulli ghaa'ibi.
5. Wa annaka adnaa al Murasaliina wasiilatan
ilaa Allaahi yaa bini al karaamiina al adhaayibi.
6. Fa murnaa bimaa ya'tiika min Waxyi Rabbinaa
wa in kaana fiimaa ji'ta shaybu al thawaa'ibi.
7. Wa kun lii shafiican yawma laa thuu shafaacatin
bi mughnin fatiilan can Sawaadi bin Qaaribi.
Tixahaas macnohoodu waxaa weeye:
1. Waxaa ii yimid kan ila faqa xasilid iyo hurdo kaddib
mana uusan ahayn sidaan u tajaabiyay beenlow.
2. Saddex habeen hadalkiisu habeen kasta wuxuu ahaa:
waxaa kuu yimid Nabi ka dhashay reer Lu' ayy bin Ghaalib.
3. Markaasaan darafta hoose ee hoosguntiga kor usoo qaaday oo guntiga adkeeyey
ayna hasha xoogga badani igula socotay dhul lama degaan ah.
4. Waxaanna marag ka ahay inuusan shay kale (ilaah) jirin oo aan Ilaahay ahayn
iyo in adigana laguu aaminay inta ghayb ah(maqan) oo idil.
5. Iyo inaad adigu tahay kan Mursaliinta wasiilo ahaan ugu dhow
Ilaahay, midkaaga ah dhasha kuwa kariimiinta suuban ahow.
6. Na amar marka waxa kaaga imaanaya Waxyiga Rabbigeen
haba ka mid ahaado waxaad la timid wax cirroolaha waajib ku ah (maladayda).
7. Anigana shafiic ii ahow maalin uusan midaan shafeeco lahayni
uusan liifad wax le'eg u tari karin Sawaad bin Qaarib.

Arrinka jinniga Nasiibiin

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaas kaddib ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Al Dhaa'if kasoo dhaqaaqay isagoo xagga Makkah usoo gaddoomay, kaddib markuu qabiilka Thaqiif ka quustay. Markaasuu Markuu marayo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam tuulada la yiraahdo **Nakhah** ayuu habeen barkii hurdada kasoo kacay oo uu Salaad tukaday. Markaasaa waxaa soo maray kooxda jinniga ah oo ah kuwuu Ilaahay Tabaaraka wa Tacaalaa xusay, sida la ii wariyay, waxayna ahaayeen toddoba nin oo ka mid ah jinniga Nasiibiin. Markaasey Quraankuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam akhrinayo dhegeysteen. Markaasuu markuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Salaaddiisa kasoo jeestay ayay ayaguna xagga tolkooda u gaddoomeen ayagoo u digaya, rumaynayana waxay maqleen oo islaamay. Markaasuu Ilaahay warkooda Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay, wuxuuna Cazza wa Jalla ku yiri Suuratu Al Axqaaf: "**Wa ith sarafnaa ilayka nafaran mina al jinni yastamicuuna Al Qur'aana falammaa xadaruuhu qaaluu ansituu falammaa qudiya wallaw ilaa qawmihim mmunthiriina**(29)**Qaaluu yaa qawmanaa innaa samicnaa Kitaaban unzila min bacdi Muusaa musaddiqan limaa bayna yadayhi yahdii ilaa al xaqqi wa ilaa dhariiqin mmustaqiimin**(30)**Yaa qawmanaa ajiibuu daaciya Allaahi wa aaminuu bihi yaghfir lakum mmin thunuubikum wa yujirkum mmin cathaabin aliimin**(31)**."** Aayadaha oo ah kuwa sagaal iyo labaatanaad iyo sodoon iyo kow iyo soddon ee Suuratu Al Axqaafi macnohoodu waxaa weeye: "Bal xusuuso markaan xaggaaga usoo duwnay koox jinni ah oo ay Quraanka dhegeysteen. Markaasey markay yimaadeen meesha lagu akhrinayey waxay isku yiraahdeen: "Aamusa oo dhegeysta". Markii akhrinta Quraanka la dhammeeyeyna waxay u gaddoomeen xagga tolkooda ayagoo u digaya(29)Waxayna yiraahdeen markay tolkood u tageen: "Tolkeenow annagu waxaan maqalnay Kitaab lasoo dejiyay Muuse dabadiis, rumaynayana kutubbadii isaga ka horreeyey, runtana u hanuuninaya qofka rumeeya oo raaca iyo dariiq toosan(30)Waxayna yiraahdeen markay u tageen: "Tolkeenow yeela wuxuu idiinku yeerayo Rasulka Ilaahay, wuxuu idiinku yeerayana rumeeya. Markaasuu Ilaahay dambiyadiinna dhaafayaa, wuxuuna idinka korinayaa cathaab xanuun badan(30)." Wuxuu kaloo Ilaahay Tacaalaa Suuratu Al Jinni ku yiri**: "Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Qul uuxiya ilayya annahu istamaca nafarun mina al jinni fa qaaluu innaa samicnaa Qur'aanan cajabn**(1)**Yahdii ilaa al rushdi fa aamannaa bihi wa lan nushrika bi Rabbinaa axadan**(2)**Wa annahu Tacaalaa Jadduu Rabbinaa maa ittakhatha saaxibatan wa laa waladan**(3)**Wa annahu kaana yaquulu safiihunaa calaa Allaahi shadhadhan**(4)**Wa annaa thanannaa an llan taquula al insu wa al jinnu calaa Allaahi kathiban**(5)**Wa annahu kaana rijaalun mina al insi yacuuthuuna bi rijaalin mina al jinni fazaaduuhum rahaqan**(6)**Wa annahum thannuu kama thanantum an llan yabcatha Allaahu axadan(**7)**Wa annaa lamasnaa Al Ssamaa'a fawajadnaahaa muli'at xarasan shadiidan washuhuban**(8)**Wa annaa kunna naqcudu minhaa maqaacida lilssamci faman yastamic al aana yajid lahu shihaaban rrasadan**(9)**Wa annaa laa nadrii asharrun uriida biman fii al ardi am araada bihim Rabbuhum rashadan**(10)**Wa annaa minnaa al ssalixuuna waminnaa duuna thaalika kunnaa dharaa'iqa qidadan**(11)**Wa annaa thanannaa an llan nucjiza Allaaha fii al ardi wa lan nnucjizahu haraban**(12)**Wa annaa lammaa samicnaa al hudaa aamannaa bihi faman yu'min biRabbihi falaa yakhaafu bakhsan walaa rahaqan**(13)**Wa annaa minnaa al muslimuuna wa minnaa al qaasidhuuna faman aslama faulaa'ika taxarraw rashadan**(14)**Wa ammaa al qaashidhuuna fakaanuu lijahannama xadhaban**(15)**."** Aayadahaas oo ah kow ilaa shan iyo toban ee Suuratu Al Jinni macnohoodu waxaa weeye: "Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxaad

tiraahdaa Nabiyow: "Waxaa la ii waxyooday inay koox jinni ah dhegeysteen Quraanka, oo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, akhrinayo. Markaasey markay arligooda ku laabteen waxay dadkooda ku yiraahdeen: "Waxaan maqalnay Quraan balaaghadiisa iyo aftahannimadiisa lala yaabo oo cajiib ah(1)Quraankaasoo dadka ugu yeeraya sawaabta oo ah tawxiidka iyo Midnimada Ilaahay iyo iimaanka. Markaasaan rumaynnay, cibaadadana Rabbigeen axadna la wadaajin maynno(2)Rabbigeenna Wayn oo Cathiimka ahna ma yeelan oo waa ka wayn yahay inuu yeesho haweeney iyo ilmo midna(3)Keennii xumaana, oo ah Ibliis, wuxuu ahaa kan Ilaahay been ka sheega, isagoo ku tilmaamay inuu shariik iyo ilmo leeyahay(4)Annaguna waxaan u malayneynnay inuusan insiga iyo jinniguba ayan Ilaahay been ka sheegayn, oo waxay noo sheegeen oo aan malaynennay waxay ahayd inuu Ilaahay haweeney iyo ilmo leeyahay, ilaa aan Quraanka ka maqalno(5)Waxayna ahaayeen, islaamka hortiis, rag Carab ahi markuu safar ku jiro oo uu waadi ku hoydo wuxuu sharta waadigas ka magan geli jiray jinniga meeshaas deggan ilaa uu ka waabariisto, taasoo jinniga kibir iyo xadgudub iyo dambi u siyaadisay, o rahaqan waa dambiga iyo xadgudubka(6)Waxayna jinnigu u maleeyeen, sidaad u malaysen oo kale oo ah inuusa Ilaahay geeri kadib axadna soo nooleyneyn oo uusan bacthi jirin(7)Annaguna waxaan aadna xagga Samada adduunkaan waxaanna aragnay inay ka buuxdo ilaalo xoog leh, oo ay malaa'ig ilaalineyso, ayna leedahay danabyo ololaya oo lagu ganayo keenna u dhowaada(8)Waxaanna ahayn kuwo Samada ka fariista fariisimo si aan wax uga dhegeysanno. Haddase kii wax dhegeysta waxaa haleelaya danabyo lagu soo ganayo(9)Annagu mana ogin inay danabyadaan la ganayo tahay shar lala doonayo dadka dhulka ku nool ama inuu Rabbigood hanuun la doonayo key tahay(10)Annagana waxaa naga mid ah kuwo suuban oo muslimiin ah iyo kuwo aan suubanaynba oo gaalo ah, waxaanna nahay kooxo kala duwan, waana si dadkoo kale(11)Waxaanna hubsannay inaanan Ilaahay ka fakan karin arliga dhexdiisa hadduu wax nala doono, oradna ugama fakan karno hadduu na doonayo(12)Markaan maqalnay Hanuunka, oo ah Quraanka iyo waxa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la siiyey waan rumaynay. Qofka Rabbigiis rumeeyana ka biqi mayo in camalkiisa iyo ajarkiisaba laga naaqusiyo, kana biqi mayo dulmi midna(13)Annagana waxaa naga mid ah qaar muslimiin ah , ahna kuwa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rumeeyey iyo kuwo xad gudbay oo Ilaahay shariik u yeelay. Ruuxiise islaama waa kuwa ku dadala raadinta dariiqa xaqqa ah iyo hanuunka(14)Kuwase xadgudbay waxay ahaanayaan qoryaha Jahannama lagu shido(15)."

Nakhlah

Waxaa xududdka Xaramaka Makkah ka mid ah tuulada la yiraahdo **Nakhlah** oo Kacbada saddex iyo toban kiiloomitir u jirta, una dhexeysa Makkah Al Mukarramah iyo Al Dhaa'if, ahna barta uu degay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Al Dhaa'if kasoo noqday sanadka tobanaad ee Nabinnimada.

Nakhlah waa tuulada lagu dilay gaalkii ugu horreeyey oo islaamka dhexdiisa lagu dilo, magaciisuna ahaa Camr bin Al Xadramii, laguna qafaalay labadii nin oo ugu horreysey oo Islaamka lagu qafaalo, kala ahaa Cuthmaan bin Cabdu Allaahi iyo Al Xakamu bin Kaysaan, laguna ghaniimeystay ghaniimada islaamka ugu horeysey. Asxaabta Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo duullankaas ku jirayna waxay ahaayeen sideed nin oo Muhaajiriin ah oo ayan Ansaar la socon, waxaana amiir u ahaa Cabdu Allaahi bin Jaxsh, ina eedada Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo waxaa dhashay Umaymah bintu Cabdu Al Mudha-dhalib, eedada Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Allaha dhammantood raalli ka noqdee. Nakhlah waxaa ku yiillay sanamka wayn oo ay gaaladu caabudi jireen oo magaciisu ahaa Al Cuzzaa oo uu

Ilaahay, Cazza wa Jalla, noogu sheegayAayadda sagaal iyo tobnaad ee Suuratu Al Najmi. Furashada Makkah dabadeed wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u diray Khaalid bin Al Waliid inuu sanamkaas soo dumiyo, taasoo uu yeelay, Allaha raalli ka noqdee.

Jinniga Quraanka dhegeystay oo islaamay

Isagoo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam bartaas ku tukanaya ayaa waxaa maqlay koox jinni ah isagoo Qur'aan akhrinaya, siday noo warisay Suuradda Qul Uuxiya ama Suuratu Al Jinni. Waxaana Xadiithka dhacdadaas noo wariyay Al Bukhaarii, sida ugu xusan Fatxu Al Baarii, mujalladka sideedaad bogga lix boqol iyo afar iyo toddobaatan iyo Xadiithka afar kun iyo sagaal boqol iyo kow iyo labaatanaadba. Jinnigaas Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, ugu yimid Nakhlah waxay ahaayeen Jinniga degmada Nasiibiin (waana saad), oo ah, siduu Al Baghawii tafsiirka Aayadda sagaal iyo labaatanaad ee Suuratu Al Axqaafi ku yiri, ashraafta iyo madaxda iyo laan dheerta jinnigoo idil oo yiri: "Marka Samada xiddigo dab ah iyo danabyo looga soo celiyay ayuu Ibliis wuxuu kala diray cidammadiisa si ay warka arrinkaas kusoo helaan. Ergada ugu horreysey oo uu dirayna waxay ka koobnayd kuwa Nasiibiin dega, kuwaasoo ah madaxda jinniga iyo hoggaamiyaashoodaba. Wuxuuna u diray gobolka Tihaamah, oo ay Makah Al Mukarramah iyo Al Madiinah Al Munawwarah ku yaalliin, Yamanna ay ka mid tahay." Jinnigaasu waxay u socdeen Yaman, markaasey ayagoo safarkoodaas ku jirah ayay waxay soo mareen barta la yiraahdo ama tuulada Nakhlah, waxayna ahaayeen toddoba nin oo yuhuud ah, ayagoo ku taagnaa shareecada Muuse. Toddobadaas nin magacdoodu waxay ahaayeen: (Kow) **Shaasir** (Waana saad), (Labo) **Maasir** (Waana saad), (Saddex) **Manshaa**, (Afar) **Laashaa**, (Shan) **Al Axqaab**, (Lix) **Surraq** iyo (Toddoba**) Camr bin Jaabir.** Amiiru Al Mu'miniin Cumar bin Cabdu Al Caziiz, Allaha raalli ka noqdee, ayaa la wariyay in isagoo mel lama degaan ah maraya uu arkay abeeso mayd ah. Markaasuu go'iisa qaar ka gooyey oo uu intuu ku kafnay duugay. Markaasuu wuxuu maqlay mid oranaya: "Surraqow marag ka ahaw! Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo kugu leh: **"Sa tamuutu bin ardi falaatin wayadfinuka rajulun saalixun."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Waxaad ku dhimaneysaa arli lama degaan ah, waxaana ku duugaya nin suuban." Markaasuu Cumar bin Cabdu Al Caziiz wuxuu yiri: "Kumaad adigu tahay, Allaha kuu naxariistee?" Markaasuu kii yiri: "Waxaan ahay nin ka mid ah jinnigii Quraanka ka maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kuwaasoo uusan ka harin cid aan aniga ahayn iyo Surraq. Surraqna waa kan oo dhintay." Cabdu Allaahi bin Mascuud, Allaha raalli ka noqdee, oo la socda rag Asxaabtii Rasuulka Ilaahay, Sallaa Alaahu Calayhi Wasallam, ka mid ah ayaa dabayli ku kacday, kaddibna dabayl tii hore ka xoog badan oo ka wayn. Kaddibna dabayshii way ka qaadday. Markaasey waxay arkeen abeeso mayd ah. Ibnu Mascuud wuxuu yiri: "Markaasuu nin naga mid ihi xaggeeda aaday oo intuu go'iisa dillaaciyay uu qaar abeesadii kafan uga dhigay, uuna duugay. Markuu habeenkii dumay oo ay gudcur noqotay mase waa laba haween ah oo weydiinaya: "Kiinneebaa Camr bin Jaabir duugay?" Markaasaan waxaan niri: "Ma naqaanno Camr bin Jaabir qofkuu yahay." Markaasey waxay yiraahdeen: "Haddaad ajar ku dooneyseyn waad hesheen, waxaana dhacday inay kuwa faasiqiinta ah ee jinnigu la dagaallameen mu'miniintooda. Markaasaa Camr la dilay, waana abeesada aad aragteen, wuxuuna ka mid yahay kuwii Quraanka ka maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, kaddibna tolkooda u digay."

Cumar bin Cabdu Al Caziiz

Amiiru Al Mu'miniina Cumar bin Cabdu Al Caziiz waa Taabici, Allaha raalli ka noqdee, waxaana dhashay Xafsah bintu Caasim bin Cumar bin Khadh-dhaab, Allaha raalli ka wada noqdee, wuxuuna Boqorka Dawladda Islaamka ahaa laba sano iyo shan bilood, inta u dhexeysey sanadka sagaal iyo sagaashan iyo boqol iyo kow ee Hijrada. Awoowihiisa xagga hooyo waa Abuu Xafs Amiiru Al Mu'miniina Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee. Awoowihiisa xagga aabena waa Amiiru Al Mu'miniina Marwaan bin Al Xakam oo boqor ahaa hal sano iyo qiyaas toban bilood inta u dhexeysey sanadka afar iyo todobaatan iyo shan iyo toddobaatan ee Hijrada, sanadkaan damboo uuba dhintay. Cumar bin Cabdu Al Caziiz waxaa lagu magacaabaa "Kan shanaad ee Khulafaa'u Al Raashidiina" oo waxaa la raaciyay Abu Bakr Al Siddiiqu iyo Cumar bin Al Khadh-dhaab iyo Cuthmaan bin Caffaan iyo Calii bin Abii Dhaalib Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Al Thahabii wuxuu Siyaru Aclaamu Al Nubalaa'i siirada Cumar bin Cabdu Al Caziiz ku yiri: "Xarmalah wuxuu yiri: "Waxaan maqlay Al Shaaficii oo leh: "Khulafadu waa shan: Abuu Bakr, iyo Cumar, iyo Cuthmaan, iyo Calii, iyo Cumar bin Cabdu Al Caziiz. Riwaayad kalena wuxuu ku yiri: "Al Khulafaa'ud Al Raashiduuna wa shantaas."

Nasiibiin

Nasiibiin waa magaalo ilaa maantadaan waqooyiga dalka Ciraaq ku taalla, galbeedna ka xigta magaalada **Niinawaa**, oo ah magaalada Nabi Yunus, Calayhissalaamu, loo diray, iyo magaalada **Al Muusal** oo labadooduba saaran yihiin wabiga **Dijlah**. Nasiibiin waxay saaran tahay wabiga la yiraahdo **Al Khaabuur** oo ah laan ka mid ah wabiga **Al Furaat**, siduu ugu masawiray Adhlaskiisa aan soo sheegnay Dr. Shawqii. Al Balaadii wuxuu isaguna sheegay inay ahaan jirtay magaalo wayn oo beero badan, beereheeduna ay afartan kun oo beerood gaarayeen, ayna saaran tahay xuduudda Suuriya iyo Turkiga ay Ciraaq la leedahay.

Juzka Kow iyo tobanaad

Qoraallada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Qoraalka Kowaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalka Heshiiskuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u kala dhigay Muhaajiriinta iyo Ansaarta markuu Al Madiinah usoo haajiray

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waana markuu Al Madiinah Al Munawwarah soo galay isagoo Muhaajir ah, heshiis ayuu u kala dhigay Muhaajiriinta iyo Ansaarta. Heshiiskaas qoraalkiisu waa kanaa: "**Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathaa kitaabun min Muxammadin Al Nabiyyi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, bayna al mu'miniina wa al muslimiina min Qurayshin wa Yathrib, wa man tabicahum, fa laxiqa bihim, wa jaahada macahum. Innahum ummatun waaxidatun min duuni al nnaasi. Al Muhaajiruuna min Qurayshin calaa ribcatihim yatacaaqaluuna baynahum, wa hum yafduuna**

caaniyatuhum bi al macruufi wa al qisdhi bayna al mu'miniina. Wa Banuu Cawf calaa ribcatihim, yatacaaqaluuna macaaqilahum al uulaa. Kullu dhaa'ifatin tafdii caaniyahaa bi al macruufi wa al qisdhi bayna al mu'miniina. Wa Banuu Saacidah calaa ribcatihim, yatacaaqaluuna macaaqilahum al uulaa. Kullu dhaa'ifatin tafdii caaniyahaa bi al macruufi wa al qisdhi bayna al mu'miniina. Wa Banuu Al Xaarith calaa ribcatihim, yatacaaqaluuna macaaqilahum al uulaa. Kullu dhaa'ifatin tafdii caaniyahaa bi al macruufi wa al qisdhi bayna al mu'miniina. Wa Banuu Jusham calaa ribcatihim, yatacaaqaluuna macaaqilahum al uulaa. Kullu dhaa'ifatin tafdii caaniyahaa bi al macruufi wa al qisdhi bayna al mu'miniina. Wa Banuu Al Nnajjaar. Wa Banuu Camr bin Cawf calaa ribcatihim, yatacaaqaluuna macaaqilahum al uulaa. Kullu dhaa'ifatin tafdii caaniyahaa bi al macruufi wa al qisdhi bayna al mu'miniina. Wa Banuu Al Nnabiit calaa ribcatihim, yatacaaqaluuna macaaqilahum al uulaa. Kullu dhaa'ifatin tafdii caaniyahaa bi al macruufi wa al qisdhi bayna al mu'miniina. Wa Banuu Al Aws calaa ribcatihim, yatacaaqaluuna macaaqilahum al uulaa. Kullu dhaa'ifatin tafdii caaniyahaa bi al macruufi wa al qisdhi bayna al mu'miniina. Wa inna al mu'miniina laa yatrukuuna mufraxan baynahum an yucdhuuhu bi al macruufi fii fidaa'in aw caqlin. Wa an laa yuxaalifa mu'minun mawlaa mu'minin duunahu. Wa inna al mu'miniina al muttaqiina calaa man baghaa minhum, aw ibtaghaa dasiicata thulmin, aw ithmin aw cudwaanin, aw fasaadin bayna al mu'miniina, wa anna aydiyahum calayhi jamiican wa law kaana walada axadihim. Wa laa yaqtulu mu'minun mu'minan fii kaafirin. Wa laa yansuru kaafiran calaa mu'minin. Wa inna thimmatu Allaahi waaxidatun, yujiiro calayhim adnaahum. Wa innaa al mu'miniina bacduhum mawaaliya bacdin duuna al nnaasi. Wa innahu man tabicanaa min yahuuda fa inna lahu al nasra wa al uswata, ghayra mathluumiina, wa laa mutanaasiriina calayhim. Wa inna silma al mu'miniina waaxidatun: laa yusaalimu mu'minun duuna mu'minin fii qitaalin fii sabiili Allaahi illaa calaa sawaa'in wa cadlin baynahum. Wa inna kulli ghaaziyatin ghazat macanaa yucqabu bacduhaa bacdan. Wa inna al mu'miniina yubii'u bacduhum calaa bacdin bimaa naala dimaa'uhum fii sabiili Allaahi. Wa inna al mu'miniina al muttaqiina calaa axsani hadyin wa aqwamihi. Wa innahu laa yujiiru mushrikun maalan liQurayshin wa laanafsan wa laa yaxuulu duunahu calaa mu'minin. Wa innahu man ictabadha mu'minan qatlan can bayyinatin fa innahu qawdun bihi, illaa an yardaa waliyyu al maqtuuli. Wa innaa al mu'miniina calayhi kaafatan wa laa yaxillu lahum illaa qiyaamun calayhi. Wa innahu laa yuxillu li mu'minin aqarra bimaa fii haathihi al ssaxiifati wa aamana bi Allaahi wa Al Yawmi AlAakhiri an yansura muxdithan, wa laa yu'wiihi. Wa innahu man nasarahu aw aawaahu fa inna calayhi lacnata Allaahi wa ghadabihi Yawma Al Qiyaamati, wa laa yu'khathu minhu sarfun wa laa cadlun. Wa innakum mahmaa ikhtalaftum fiihi min shay'in fa inna maradduhu ilaa Allaahi Cazza wa Jalla wa ilaa Muxammadin Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam."

Xadithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Kani waa qoraal uu u kala dhigay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, muslimiinta Quraysh iyo kuwa Yathrib, iyo inta raacday, kana daba timid, lana jihaaday. Ayagaasu waa ummad mid keli ah dadka intiisa kale sokadiisa. Muhaajiriinta **Quraysh** waxay diyada u wada bixinayaan sida caadadooda hore ahayd iyo dhaqankooda ahayd ayaga dhexdooda. Dadka laga qafaashana waxay ku furanayaan si wanaagga iyo caddaaladda mu'miniinta ku salaysan. **Banuu Cawfna** waxay diyada u wada bixinayaan sida caadadooda hore ahayd iyo

dhaqankooda ahayd ayaga dhexdooda. Dadka laga qafaashana waxay ku furanayaan si wanaagga iyo caddaaladda mu'miniinta ku salaysan. Sidoo kale **Banuu Saacidah** waxay diyada u wada bixinayaan sida caadadooda hore ahayd iyo dhaqankooda ahayd ayaga dhexdooda. Dadka laga qafaashana waxay ku furanayaan si wanaagga iyo caddaaladda mu'miniinta ku salaysan. **Banuu Al Xaarith** waxay diyada u wada bixinayaan sida caadadooda hore ahayd iyo dhaqankooda ahayd ayaga dhexdooda. Dadka laga qafaashana waxay ku furanayaan si wanaagga iyo caddaaladda mu'miniinta ku salaysan. **Banuu Jusham** waxay diyada u wada bixinayaan sida caadadooda hore ahayd iyo dhaqankooda ahayd ayaga dhexdooda. Dadka laga qafaashana waxay ku furanayaan si wanaagga iyo caddaaladda mu'miniinta ka salaysan. **Banuu Camr bin Cawf** waxay diyada u wada bixinayaan sida caadadooda hore ahayd iyo dhaqankooda ahayd ayaga dhexdooda. Dadka laga qafaashana waxay ku furanayaan si wanaagga iyo caddaaladda mu'miniinta ku salaysan. **Banuu Al Nnaabit** waxay diyada u wada bixinayaan sida caadadooda hore ahayd iyo dhaqankooda ahayd ayaga dhexdooda. Dadka laga qafaashana waxay ku furanayaan si wanaagga iyo caddaaladda mu'miniinta ku salaysan. **Banu Al Aws** waxay diyada u wada bixinayaan sida caadadooda hore ahayd iyo dhaqankooda ahayd ayaga dhexdooda. Dadka laga qafaashana waxay ku furanayaan si wanaagga iyo caddaaladda mu'miniinta ku salaysan. Mu'miniintu ka tegi mayaan mid dayn badan lagu leeyahay oo ayaga ka mid ah inay si wanaagsan ku siiyaan maal uu ku bixiyo diyo ama furashada qafaalkiisa. Ma bannaana inuu mu'min xilfi la galo mu'min kale mawlihiisa oo isaga ka dhan ah. Mu'miniinta muttaqiinta ah waa ka wada dhan kan kusoo xad gudba ama doonaya inuu xaqdarro iyo dulmi faafiyo ama dambi ama colaad, ama fasaad mu'miniinta dhexdooda. Kan sidaas yeelana gacnohoodu waa ka wada dhan waana isaga korkiisa, haba ahaado wiiluu midkood dhalaybee. Ma bannaana inuu mu'minku dilo mu'min kale gaal daraadiis uu uga aargoynayo, oo waxaa weeye muslim gaal looma dili karo. Ma bannaana inuu mu'minku gaal ugu hiilliyo coladda mu'min kale. Thimmada Ilaahay, oo ah ilaalintiisu waa mid, kooda ugu hooseeya oo ugu itaal yar ayaa qof magan gelin kara, ayna tahay inay mu'miniintoo idili taas dhawraan. Mu'miniinta qaarkood ayaa qaarka kale gargaare u ah dadka intiisa kale sokadiisa. Cidda nasoo raacda oo yuhuudda ka mid ahna waxay leeyihiin u gargaarid iyo sinnaan, ayagoo aan dulmayn aanna cadawgooda korkooda loogu gargaareyn, oo waxaa weeye cadawgood looguma hiillin karo ayaga la dagaallankooda. Heshiiska nabadeed ee mu'miniintu waa mid keli ah oo aan qaybsamayn, oo ayadoo oo ayadoo jihaad jidka Ilaahay loogu jiro mu'miniinta qaarkood heshiis nabadeed oo gooni ah ma geli karaan inay u wada dhan yihiin oo u wada siman yihiin mooyee si caddaaladi ku jirto. Mujaahid kasta oo annaga jihaadka noo raacana ciribtiisa mid kale ayaa ku jooga (macnaha qodobkaan ma garan oo intaad Carabiga qaatatid bal adiguna isku day inaad fasirtid). Mu'miniintu way u aargoynayaan dhiigga qaarkooda kale oo jidka Ilaahay lagu daadiyay. Mu'miniinta Ilaahay ka dhawrsada waxay ku taagan yihiin hadyiga, waa hanuunkee iyo dariiqa, ugu fiican oo ugu toosan. Ma bannaana in gaal Quraysh ah maalkooda iyo naftoodaba magan gelyo la siiyo iyo inuu colaadintiisa mu'miniinta ugu hiilliyo. Qofka mu'min u dila sabab la'aan oo cad waxaa loogu dilayaa qisaas, inay qoyska kan la dilay ka cafiyaan mooyeee (oo ay diyo qaataan), mu'miniinta oo idilna ka dhan ayay yihiin kan wax dilay oo ay isugu tegayaan. Ayaga uma bannaana waxaan iskugu taggiisa ahayn, oo ay wax ka qabtaan. Uma bannaana mu'min qirtay oo oggolaaday qoraalka warqaddaan ku dhigan, aaminayna Ilaahay iyo Maalinta Aakhiro inuu u hiilliyo oo u gargaaro qof wax xun sameeyey iyo inuu hoy siiyo midna. Kii u hiilliya oo hoy siiyana waxaa korkiisa ah lacnadda Ilaahay iyo caradiisa Maalinta Qiyaame, lagana yeeli mayo tawbad iyo xaal uu ka bixiyo waxaas uu falay oo laga daayo ciqaabta ka ratibmaysa iyo inuu cawil celin bixiyo midna. Adinkuna wax kasta oo aad isku khilaaftaan waxaa dib

loogu soo celinayaa Ilaahay Cazza wa Jalla iyo Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam."

Qoraalka Labaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Heshiiska Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo yuhuudda Al Madiinah

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu nabadgelyo u fidiyey yuhuudda, uuna la dhigtay heshiis nabadeed, wuxuuna u oggolaaday inay diintooda ku taagnaadaan, maalkoodana ay hastaan, shuruudo labada dhinacba saameeya ayuuna la dhigtay. Qoraalka heshiiskuna waa kan:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathaa kitaabun min Muxammadin Al Nabiyyi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Wa inna al yahuuda yunfiquuna maca al mu'miniina maa daamuu muxaaribiina. Wa inna yahuudi Banii Cawf ummatun maca al mu'miniina. Lilyuhuudi diinahum wa lilmuslimiina Diinahum, mawaaliihim wa anfusahum. Illaa man thalama wa athama, fa innahu laa yuutighu illaa nafsahu wa ahla baytihi. Wa inna liyahuudi Banii Al Nnajjaar mithla maa liyahuudi Banii Cawf. Wa inna liyahuudi Banii Saacidah mithla maa liyahuudi Banii Cawf. Wa inna liyahuudi Banii Jusham mithla maa liyahuudi Banii Cawf. Wa inna liyahuudi Banii Saacidah mithla maa liyahuudi Banii Cawf. Wa inna liyahuudi Banii Al Aws mithla maa liyahuudi Banii Cawf. Wa inna liyahuudi Banii Thaclabah mithla maa liyahuudi Banii Cawf, illaa man thalama wa athama, fa innahu laa yuutighu illaa nafsahu wa ahla baytihi. Wa inna Jafnah badhnun min Thaclabah ka anfusihim. Wa inna liBanii Al Sh-shudhaybah mithla maa li yahuudi Banii Cawf. Wa inna al birra duuna al ithmi. Wa inna mawaalii Thaclabah ka anfusihim. Inna bidhaanata yahuuda ka anfusihim. Wa innahu laa yakhruju minhum axadun illaa bi ithni Muxammadin Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Wa innahu laa yanxajizu calaa th'ari jurxin. Wa innahu man fataka bi nafsihi fataka, wa ahla baytihi. Illaa man thalama. Wa innaa Allaaha calaa abarii haathaa. Wa inna calaa yahuudi nafaqatuhum wa calaa al muslimiina nafaqatuhum. Wa inna baynahum al nasra calaa man xaaraba ahla haathihi al saaxiifati. Wa inna baynahum al nnusxu wa al nnasiixatu. Wa al birru duuna al ithmi. Wa innahu lam ya'tham imri'un bixaliifihi. Wa inna al nnasra lil mathluumi. Wa inna al yahuuda yunfiquuna maca al mu'miniina maa daamuu muxaaribiina. Wa inna Yathriba Xaramun jawfuhaa li ahli haathihi al ssaxiifati. Wa inna al jaara ka al nafsi ghayra mudaarrin walaa aathimin. Wa innahu laa yujaaru xurmatun illaa bi ithni ahlihaa. Wa innahu maa kaana bayna ahli haathihi al ssaxiifati min xadathin aw ishtijaari yukhaafu fasaaduhu fa inna maradduhu ilaa Allaahi Cazza wa Jalla wa ilaa Muxammadain Rasuula Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Wa inna Allaaha calaa atqaa maa fii haathihi al ssaxiifati wa abarrahu. Wa innahu la tujaaru Qurayshun wa laa man nasarahaa. Wa inna baynahum al nnasru calaa man dahama Yathriba. Wa ithaa ducuu ilaa sulxin yusaalixuunahu wa yalbasuunahu fa innahum yuslaxuunahu wa yalbasuunahu. Wa innahum ithaa ducuu ilaa mithli thaalika innahu lahum calaa al mu'miniina. Illaa man xaaraba fii Al Ddiini. Calaa kulli unasin xissatuhum min jaanibihim allathii qibalahum. Wa inna yahuudi Al Aws, mawaaliihim wa anfusahum calaa mithla maa li ahli haathihi al ssaxiifati, maca al birri al maxaddi min ahli haathihi al ssaxiifati. Wa inna al birra duuna al ithmi. Laa yaksibu

kaasibun illaa calaa nafsihi. Wa inna Allaaha calaa asdaqa maa fii haathihi al ssaxiifati wa abarrahu. Wa innahu laa yaxuulu haathaa al kitaabu duuna thaalimin wa aathimin. Wa innahu man kharaja aaminun. Wa man qacada aaminun bi Al Madiinati. Illaah man thalama wa athama. Wa inna Allaaha jaarun liman barra wa ittaqaa, wa Muxammadun Rasuulu Allaahi."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraximi. Kani waa qoraal uu dhigay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Yuhuuduna intay xarbiga muslimiinta la dhan yihiin waxay ka qayb gelayaan bixinta lacagta xarbiga. **Yuhuudda Banuu Cawf** waxay ummad la yihiin mu'miniinta. Yuhuuddu waxay leeyihiin diintooda, muslimiintuna waxay leeyihiin Diintooda, iyo mawaalidooda iyo naftooda. Intaan ka ahayn kuwa dulmi falay oo dambaabay, kuwaasoo aan halaageyn waxaan naftooda ahayn iyo ehelka gurigiisa, waa qoyskiisee. **Yuhuudda Banuu Al Nnajjaar** waxay leeyihiin wax la mid ah waxay leeyihiin yuhuudda Banuu Cawf. **Yuhuudda Banuu Al Xaarith** waxay leeyihiin wax la mid ah waxay leeyihiin yuhuudda Banuu Cawf. **Yuhuudda Banuu Saacidah** waxay leeyihiin wax la mid ah waxay leeyihiin yuhuudda Banuu Cawf. **Yuhuudda Banuu Jusham** waxay leeyihiin wax la mid ah waxay leeyihiin yuhuudda Banuu Cawf. **Yuhuudda Banuu Al Aws** waxay leeyihiin wax la mid ah waxay leeyihiin yuhuudda Banuu Cawf. **Yuhuudda Banuu Thaclabah** waxay leeyihiin wax la mid ah waxay leeyihiin yuhuudda Banuu Cawf, intaan ahayn midka dulmi fala oo dambi fala, kaasna ma halaagayo waxaan ahayn naftiisa iyo dadka qoyskiisa iyo gurigiisa. **Jafnah** waa jilib Banuu Thaclabah waxayna leeyihiin wax la mid ah waxay ayagu leeyihiin. **Banuu Al Sh-shudhaybah** waxay leeyihiin wax la mid ah waxay leeyihiin yuhuuda Banuu Cawf. Baarrinnimaduna waxay qofkeeda ka xijaabtaa oo ka celisaa dambiga. Mawaalida Thaclabah waxay leeyihiin wax la mid ah waxay ayagu leeyihiin oo kale. Xulafada yuhuuduna waxay leeyihiin waxay ayaguleeyihiin, oo waa ayagoo kale. Ma bannaana inuu midkoodna xarbi u baxo inuu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u oggolaado mooyee. Lagana hor istaagi mayo inuu dhaawac la gaarsiiyey u aargoosto. Qofka gaadmo qof kale ku dila isagaa is dilay, dilayna qoyskiisa, hadduusan ahayn qof isaga dulmiyay, oo markaas Ilaahay wuu yeelayaa. Yuhuudda waxaa korkooda ah ayaga nafaqadooda, muslimiintana waxaa korkooda ah ayaga nafaqadooda, waxaana ka dhexeeya inay iskaga hiilliyaan axadka la dagaallama dadka qoraalkaan ku jira. Waxaana ka dhexeeya inay is waaniyaan iskuna naseexeeyaan oo ay wada tashadaan. Baarrinnimaduna waxay xijaabtaa dambi falidda. Axadna eed kuma laha dambiguu galo xaliifkiisu. Waxaana loo gargaarayaa kan la dulmiyey. Yuhuuddu waxay mu'miniinta la bixinayaan nafaqada intuu xarbigu socdo. Yathrib gudeheedana waa ka xaaraan dadka warqaddaan darafta ka ah. Qofka martida ahna wuxuu la mid yahay kuu u yimid, oo ma aha inuu dhibaato geysto oo uu dambaabo. Haweeney lama siin karo magan gelyo inuu qoyskeedu u oggolaado mooyee. Hadday dadka qoraalkaan ka dhex dhacaan oo uu dhex maro khilaaf laga baqayo inuu keeno fasaad, waxaa arrinkaas loo celinayaa Ilaahay Cazza wa Jalla iyo Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Ilaahay waa oggolyahay waxa fiican oo qoraalkaan ku dhigan. Quraysh magan gelyo lama siin karo iyo kuwa ayaga taageeraba. Dhinacyada qoraalkaanu saameeyo waxaa korkooda ah inay isaga hiilliyaan cidda Yathrib soo weerarta. Haddii loogu yeero heshiis nabadeed waa inay yeelaan, ayna meel mariyaan. Hadday ayaguna taas oo kale weydiistaan muslimiinta waa in la yeelaa. Intaan ka ahayn muslimiinta oo Diintooda xarbi jihaad ugu jira. Dad walba waxay u xilsaaran yihiin dhinocooda ayaga ku beegan (macnahaanna si fiican uma aanan garan). Yuhuudda Al Awsna iyo mawaalidooda iyo

nafafkooda waxay leeyihiin wax la mid ah waxay leeyihiin dadka warqaddaan dhigtay oo u haya daacad khaalis ah. Baarrinnimadu waxay xijaabtaa oo celisaa dambiga. Qofka wax kasbada wuxuu u kasbaa naftiisa. Ilaahay iyo xizbigiisa mu'miniinta ahi raalli ayay ka yihiin waxa warqaddaan ku dhigan. Qoraalkaanna daafici mayo daallin iyo dambiile. Qofka jihaad u baxa waa aamin. Qofka Al Madiinah joogana waa aamin. Intaan ahayn kan dulmi fala ama dambiilaha ah. Ilaahay ayaa magan gelyo siiya qofka fiican oo dhawrsada. Muxammad Waa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalla

Qoraalka Saddexaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Heshiiska Nabadeed ee Al Xudaybiyyah/Thuu Al Qacdah sanadka lixaad ee Hihrada

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Al Madiinah ku sugnaaday bisha Ramadaan iyo Shawwaal, markaasuu baxay Thuu Al Qacdah isagoo Cumro u socda, xarbinana aan doonayn (oo uu ibnu Hishaam yiri: "Numaylah bin Cabdu Allaahi Al Llaythii ayuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasalla xilka Al Madiinah u dhiibay)(Al Suhaylii wuxuu yiri: "Wuxuu cumrada ka xirtay Thuu Al Xulayfah", oo ah meesha maanta la yiraahdo Abyaaru Calii oo laba iyo toban kiiloomitir Al Madiinah u jirta). Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u yeeray Carabta hareerihiisa deggan iyo reer miyiga, inay soo raacaan, isagoo cabsi ka qaba waxay Quraysh falayso oo ah inay xarbi kala hor yimaadaan, ama ay Baytka ka celiyaan." Markaasaa waxaa kasoo gaabiyay in badan oo reer miyiga ah. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, watay inta la socota oo Muhaajiriin, Ansaar iyo inta Carabta uga timid, wuxuuna soo kexeeyey hadyi uu Kacbad u wado, wuxuuna u ixraamtay cumro, si ay dadku u ogaadaan inuusan xarbi u socon, uuna u socdo ziyaarada Baytka iyo waynayntiisa. Hadyiga uu wadayna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu ahaa toddobaatan halaad o geela, dadkuna waxay ahaayeen toddoba boqol , oo sidaasay tulud walba toban qof ku beegnayd. Jaabir bin Cabdu Allaahi wuxuu yiri: "Asxaabta Al Xudaybiyyah waxaan ahayn kun iyo afar boqol oo qof."

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu sii diray nin ilaalo ah, o u dhashay Khuzaacah, una diray Makkah, magaciisuna yahay Busr bin Safwaan bin Camr bin Cumayr Al Khuzaacii. Markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gaaray **Ghadiiru Al Ash-dhaadhi** (oo Cusfaan agteeda ah, oo ghadiir macnihiisu waa balli, maantana waa qallalanyahay, siduu Al Balaadii u sheegay. Cusfaan waxay Makkah u jirtaa sideetan kiiloomitir) ayaa waxaa u yimid ilaalkii uu Makkah u diray."

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo socday oo markuu Cusfaan yimid ayaa waxaa u yimid Bishr bin Safwaan Al Kalbii wuxuuna yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Qurashy way maqashay soo socdkaaga, markaasay soo bexeen ayagoo wata geelooda caanooleyda ah, oo ay caanohooda cabbayaan, waxayna labbisteen hargaha nimiriga (shabeelka) oo dagaal ayay diyaar u yihiin, waxayna ku degeen **Thuu Dhuwaa** (oo hadda Makkah dhexdeeda ka mid ah), ayagoo Ilaahay ka ballan qaaday inaadan weligaa Makkah ugu gelin. Waxaana soo baxay Khaalid bin Al Waliidu oo fardooleydooda wata, ayna soo hormariyeen, hadana ku sugan **Kuraacu Al Ghamiimi** (oo Makkah u jirta afar iyo lixdan kiiloomitir). Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa

Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Yaa wayxa Quraysha! La qad akalathumu al xarbu. Maa thaa calayhim law khalluu baynii wa bayna saa'iri Al Carabi, fa in hum asaabuunii kaana allathii araaduu, wa in ath-haranii Allaahu calayhim dakhaluu fii al islaami waafiriina. Wa in lam yafcaluu qaataluu wa bihim quwwatun. Fa maa tathunnu Qurayshu fa wa Allaahi laa azaalu ujaahidu calaa allathii bacathaniya Allaahu bihi xattaa yuth-hirahu Allaahu aw tanfarida haathihi al ssalifatu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Maxay leedahay Quraysh! Xarbi ayaa cunay! Maxaa ku dhici lahaa hadday isaga kaaya dhex bixi lahaaayeen aniga iyo Carabta inteeda kale, oo hadday kuwaasu i dilaan waa siday rabeen. Hadduu Ilaahay aniga libta iga siiyana, islaamkay u soo gelayaan kooxo kooxo. Haddayan sidaas yeelinna waxay dagaallamayaan ayagoo xoog leh. Hadaba Quraysh maxay u malayneysaa oo dooneysaa? Wa Allaahi aniguna waan ku jihaadayaa wuxuu Ilaahay igu soo diray ilaa uu Ilaahay islaamka ka siiyo guusha oo uu libta helo ama aniga la i dilo."

Heshiiska nabadeed ee Al Xudaybiyyah

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markaasay Qurayshi waxay usoo dirtay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Suhayl bin Camr oo u dhashay Qurayshta Banii Caamir bin Lu'ayy, waxayna ku yiraahdeen: "Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u tag, lana heshii. Heshiisna yuusan dhicin inuu sanadkaan naga gadoomo mooyee, oo wa Allaahi inayan Carabi ku sheekeysanayn inuu xoog noogu soo galay, weligeed." Markaasuu Suhayl bin Camr Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid. Markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Suhayl bin Camr arkay isagoo soo socda wuxu yiri**: "Qad araada al qawmu al sulxa xiina bacathuu haathaa al rajula"**, oo macnihiisu yahay: "Qawmku waxay doonayaa heshiis markay ninkaan soo direen." Markaasuu Suhayl bin Camr markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid ayuu la hadlay oo uu hadalka dheereeyey, ayna waanwaani dhex martay, kaddibna ay heshiiyeen. Markaasaa markuu la heshiiyay oo uusan harin in heshiiska la kala dhigto mooyee, ayaa waxaa soo booday Cumar bin Al Khadh-dhaab, oo Abuu Bakr u yimid, kuna yiri: "Abuu Bakarow, soo isagu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ma aha?" Wuxuu yiri: "Haa." Wuxuu yiri: "Soo annagu muslimiinta ma ihin?" Wuxuu yiri: "Haa." Wuxuu yiri: "Soo ayagu gaalada ma aha?" Wuxuu yiri: "Haa." Wuxuu yiri: "Maxaan hadaba wax Diinteenna hoos u dhigaya uga yeeleynnaa oo kula heshiineynnaa?" Abuu Bakr wuxuu yiri: "Cumarow, laazim oo ku dhegganow wuxuu Sallaa Alllaahu Calayhi Wasallam yiraahdo, oo anigu waxaan marag ka ahay inuu Rasuulka Ilahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yahay!" Cumar wuxuu yiri: "Aniguna waxaan marag ka ahay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yahay!" Kaddibna Cumar wuxuu u yimid Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, soo Rasuulka Ilaahay ma ihid?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Balaa"**, oo ah "Haa." Wuxuu yiri: "Soo annagu muslimiinta ma ihin?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Balaa"**, oo ah "Haa." Wuxuu yiri: "Soo ayagu gaalada ma aha?" uxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Balaa"**, oo ah "Haa." Wuxuu yiri: ""Maxaan hadaba wax Diinteenna hoos u dhigaya uga yeeleynnaa oo kula heshiineynnaa?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Anaa cabdu Allaahi wa Rasuulahu, lan ukhaalifa amraHu, wa lan yudayyicanii."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Anigu waxaan ahay addoonka Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, amarkiisana khilaafi mayo, Isaguna i lumin mayo." Cumar wuxuu oran jiray: "Waxaan ku taagnaa inaan sadaqo la baxo oo aan soomo oo aan addoomo xoreeyo waxaan falay daraaded

maalintaas, cabsida aan ka qabo hadalkayga aan ku hadlay daraadiis, ilaa ay rajo iga gashay inay xaaladdaydu khayr tahay."

Calii ayaa dhigay heshiiska

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Calii bin Abii Dhaalib, Allaha raalli ka noqdee, u yeeray, kuna yiri: **"Uktub: Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi"** oo macneheedu yahay: "Dhig: Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi". Markaasuu Suhayl wuxuu yiri: "Ma aqaanno kaas, waxaadse dhigtaa Bismika Allaahumma." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Uktub Bismika Allaahumma."** Oo ah: ": "Dhig Bismika Allaahumma." Markaasuu dhigay. Kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Uktub: haathaa maa saalaxa calayhi Muxammadun Rasuulu Allaahi Suhayl bin Camr"**, oo amcnihiisu yahay: "Dhig: kanu waa wuxuu Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Suhayl bin Camr kula heshiiyay." Markaasuu Suhayl bin Camr wuxuu yiri: "Haddaan marag ka ahay inaad Rasuulka Ilaahay tahay kulama dagaallameen. Laakiin waxaad dhigtaa magacaaga iyo magaca aabahaa." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Uktub: haathaa maa saalaxa calayhi Muxammadu bin Cabdu Allaahi Suhayl bin Camr"**, oo macnihiisu yahay: "Dhig: Kanu waa wuxuu Muxammad bin Cabdu Allaahi Suhayl bin Camr kula heshiiyay." Waxayna ku heshiiyeen in xarbiga dadka laga joojiyo muddo toban sano ah, uu dhexdooda dadku nabad ku helo, oo qaarkood ka haraan qaarka kale. Waxayna ku heshiiyeen inuu ninka Quraysh uga yimadaa Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la'aanta idanka waligiisa inuu usoo celiyo. Qofka ka yimaadana dadka Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la jirana hadduu Quraysh usoo galo u celin mayaan. Tobankaas sano dhexdeedana waa sida haan aaburan oo kale, oo ah inaan waxa dhexdeeda ku jira la arag, oo ah inaan colaad la is tusin oo aan la isu muujin, oo colaadda qalbiga ku jirta halkaas lagu hayo oo aan la muujin, iyo inan la is khayaanin, lana is xadin. Qabiilka kale oo doonayana inuu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gaashaanbuur iyo la dhan noqdana heshiiskaa ha la galo, cidda doontana inay Quraysh gaashaanbuur iyo la dhan noqotana heshiiskaan ha la gasho." Qoraalkiina waa midka soo sicda.

Qoraalka Heshiiska Nabadeed ee Al Xudaybiyyah

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Alaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu Calii bin Abii Dhaalib ku yiri: “

"Uktub: haathaa maa saalaxa calayhi Muxammadu bin Cabdu Allaahi Suhayl bin Camr, isdhalaxaa calaa wadca al xarbi cani al nnaasi cashara siniina ya’manu fiihinna al nnaasu, wa yakuffu bacduhum can bacdin, calaa annahu man ataa Muxammadan min Qurayshin bi ghayri ithni waliyyihi raddahum calayhim, wa man jaa’a Qurayshan mimman maca Muxammadin lam yarudduuhu calyhi, wa inna baynanaa caybatun makfuufatun, wa annahu laa islaala wa laa ighlaala, wa nnahu man axabba an yadkhula fii caqdi Muxammadin wa cahdihi dakhala fiihi, wa man axabba an yadkhula fii caqdi Qurayshin wa cahdihim dakhala fiihi.”

Xadiithkana kor ayaan kusoo macnaynnay, wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina wa Sallaa Alaahu Calaa Sayyidinaa wa Mawlaanaa Muxammadin Wa Calaa Aalihi Wa Sallam tasliiman kathiiran.

Al Xudaybiyyah/Al Shumaysii

Waxaa xuduudda Xaramka Makkah ka mid ah **Al Xudaybiyyah**, oo Kacbada labo iyo labaatan kiiloomitir u jirta, looguna magac daray ceel halkaas ku yiillay oo Al Xudaybiyyah la oran jiray, waxayna ku taallaa dariiqa hore oo Makkah iyo Jiddah isku xirah. Hadda waxaa la yiraahdaa **Al Shumaysii**, oo ayadana loogu magac daray ceel halkaas ku yaalla oo al Shumays la yiraahdo. Al Xudeybiyyah waa meesha uu ka dhacay Heshiiska Xudaybiyyah ee Sanadka lixaad ee Hijrada iyo Beecatu Al Ridwaan, oo ku xusan Suuratu Al Fatxi. Ceelkaas Al Xudaybiyyah weli waa jiraa, waana ceel af ballaaran oo dhowr mitir wareeggiisu yahay, salkiisuna aad u dheer yahay, oo aan arkiba waayay markaan ku foorarsaday. Waxaana ku ag yaalla oo dhowr tillaabo u jira ceel kale oo aad uga ka af yar oo xiran. Ceelkaan agtiisana waxaa ku suran calaamadda inay halkaasu tahay xuduudka Xaramka, oo labada ceelba dibadday ka yihiin. Tuulada afkeeda aan ceelka ka fogayn, oo loogaba jeedo, waxaa ku yaalla masjid la yiraahdo waxaa laga dhisay bartuu ku yiillay geedka hoostiisa heshiisku ka dhacay. Markaan imaamka masjidkaas weydiiyay wuxuu yiri: "Sidaasaa la yiraahdaa, runtana Rabbi ayaa og." Masjidka dhabarkiisa waxaa ku yaalla dhismo burburay oo masjid ahaan jiray, oo ay dadkuna yiraahdaan geedku bartaasuu ku yiillay. Runtana Rabbi ayaa og. Masjidkaas ayaa cumrada looga soo ixraamtaa, aniguna waan kasoo ixraamtay wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina wa ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa ash-hadu annaa Muxammadan, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, cabduhu wa Rausuuluhu.

Juzka Laba iyo tobanaad

Qoraallada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee boqorrada

Al Zarqaanii wuxuu yiri: “ibnu Sacad iyo ghayrkiisba waxay ibnu Cabbaas ka wariyeen inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Al Xudaybiyyah kasoo noqday bisha Thuu Al Xajjah ee sanadka lixaad uu warqad u dhigay roomaanka oo uu markaas damcay inuu u diro, markaasaa waxaa lagu yiri: “ayagu warqad aan shabbadi saarnayn ma akhriyaan.” Markaasuu Sallaa Allaahu Calyhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu samaystay faraa gashi qalin laga sameeyey.” Ibnu Cadiyyi wuxuu isaguna qisadaan ku wariyey “in loo sameeyey, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, fara gashi bir laga sameeyey, markaasaa waxaa u yimid Jibriil oo ku yiri: “fartaada ka siib oo tuur”, markaasuu ka siibay oo tuuray. Markaasaa waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam loo sameeyey fara gashi nuxaas ka sameysan, markaasuu Jibriil ku amray inuu siibo oo tuuro sidaas ayuuna yeelay. Markaasaa waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam loo sameeyey fara gashi qalin laga sameehyey markaasuu Jibriil taas u yeelay.”

Fara gashigaas wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam, ku naqshay saddex sadar oo ay ku qoran yihiin: Muxamaadun oo hal sadar ah, Rasuulu oo sadar ah iyo Allaahu oo sadar ah.

Muxammadun Rasuulu Allaahi oo fara gashiga ku dhigan ayaa shabbadiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ahayd oo u ku saxiixi jiray shabbadna u ahayd waraaqaha uu boqorrada iyo dadka kaleba u dhigay.

Shabbaddaas waxaa la yiraahdaa afka Carabiga “khaatim” oo inta warqadda, oo waagaas harag ka samaysnayd, la duubo ayaa lagu xirayaa xarig ama wax la mid ama xabag oo markaas shabbadda lagu kor dhufanayaa, si uu qofkay u socoto u ogaado inuusan sirtaas cid kale ogayn.

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu boqorrada u diray ergooyin ka mid ah asxaabtiisa, wuxuuna ugu dhiibay qoraallo uu u dhigay, uuna islaamka ugu yeerayo."
Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa maalin usoo baxay asxaabtiisa, ahaydna maalin ka dambeysey cumrada laga hor istaagay sanadka lixaad ee Maalinta Al Xudaybiyyah, wuxuuna yiri: **"Ayyuhaa al nnaasu, inna Allaaha bacathanii raxmatan wa kaaffatan, fa laa takhtalifuu calayya kamaa ikhtalafa al xawwaariyyuuna calaa Ciisaa ibna Maryama"**, oo Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Dadow, Ilaahay wuxuu isoo diray anigo ah naxariis, wuxuuna ii diray dadkoo idil. Marka, aniga ha isku kay khilaafina siday xawaariyyiintu isugu khilaafeen Ciise ina Maryama." Markaasay asxaabtiisu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam waxay yiraahdeen: "Sidee bay xawaariyyiintu isu khilaafeen Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"dacaahum ilaa allathii dacawtukum ilayhi. Fa ammaa man bacathahu mabcathan qariiban fa radiya wa salima. Wa ammaa man bacathahu mabcathan baciidan fa kariha wajhahu wa tathaaqala. Fa shakaa thaalika Ciisaa ilaa Allaahi. Fa asbaxa al mutathaaqaluuna wa kullu waaxidin minhum yatakallamu bi lughaati al ummati allatii bucitha ilayhaa."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "wuxuu ugu yeeray wax la mid ah waxaan anigu idiinku yeeray -oo ah inay qoraallo boqorroo ka gaarsiiyaan uu Diinta islaamka ugu sheegayo uguna yeerayo-. Markaasuu midkuu u diray meel dhow uu yeelay oo raalli ku noqday oo uu nabad galay. Midkuuse u diray meel fog wuu kahday meesha loo diray, wuuna ka culusaaday. Markaasuu Ciise Ilaahay taas uga dacwooday. Markaasay kuwii culusaaday waxay waabariisteen isagoo uu mid walba oo ka mid ahi ku hadlayo afka ummaadii loo diray."

Magacda ergayda iyo ciddda loo diray

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu ergo ahaan u diray rag ka mid ah asxaabtiisa, wuxuuna u dhiibay qoraallo uu boqorrada u dhigay, uu islaamka ugu yeerayo, wuxuuna (Kow) Dixyah bin Khaliifah Al Kalbiyyi u diray Qaysar boqorka roomaanka. (Laba). Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Cabdu Allaahi bin Xuthaafah Al Ssahmiyya u diray Kisraa boqorka Faaris. (Saddex) Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Camr bin Umayyah Al Ddamriyyi u diray Al Najaashiyyi, boqorka al xabashah. (Afar) Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Xadhib bin Abii Baltacah u diray Al Muqawqis, boqorka Al Iskandariyyah. (Shan) Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Camr bin Al Caas Al Ssahmiyyi u diray Jayfar iyo Cayyaad labada ilmo Al Julundii Al Azdiyyiina, labada boqor ee Cummaan. (Lix) Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Saliidh bin Camr oo u dhashay Qurayshta Banii Caamir bin Lu'ayy u diray Thumaamah bin Uthaal iyo Hawthah bin Caliyyi oo labaduba Banii Xaniifah u dhasheen, labada boqor ee Al Yamaamah. (Toddoba) Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Al Calaa'u bin Al Xadramii u diray Al Munthir bin Saawaa Al Cabdii, boqorka Baxrayn. (Sideed) Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Shujaac bin Wahb Al Asadii u diray Al Xaarith bin Abii Shimr Al Ghassaanii, boqorka gobolka Shaam."
Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Shujaac bin Wahb u diray Jabalata bin Al Ayham Al Ghassaanii wuxuuna Al Muhaajira bin Abii Umayyah Al Makhzuumiyyi u diray Al Xaarithu bin Cabdu Kulaal Al Ximyarii, boqorka Yaman."

Riwaayada ibnu Xabiib ee diridda ergayda

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Yaziid bin Abii Xabiib Al Misrii wuxuu ii sheegay inuu helay qoraal uu ku dhigan yahay ragguu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ergo ahaan u kala diray dalalka iyo boqorrada Carabta iyo cajamtaba iyo wuxuu asxaabtiisa ku yiri markuu dirayay. Markaasaan qoraalka u diray Muxammad bin Shihaab Al Zuhriyyi oo uu aqooday. Qoraalkana waxaa ku qornaa inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu asxaabtiisa usoo baxay, kuna yiri: **"inna Allaaha bacathanii raxmatan wa kaafatan, fa adduu cannii yarxamakumu Allaahu wa laa takhtakifuu calayya kamaa ikhtalafa al xawaariyyuuna calaa Ciisaa ibnu Maryama"** oo Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Dadow, Ilaahay wuxuu isoo diray anigo ah naxariis, wuxuuna ii diray dadkoo idil. Marka, aniga ha isku kay khilaafina siday xawaariyyiintu isugu khilaafeen Ciise ina Maryama." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"dacaahum li mithli maa dacawtukum lahu. Fa ammaa man qarraba bihi fa axabba wa sallama. Wa ammaa man bacida bihi fa kariha wa abaa. Fa shakaa thaalika Ciisaa minhum ilaa Allaahi. Fa asbaxuu wa kullu rajulin minhum yatakallamu bi lughati al qawmi allathiina wujjiha ilayhim"** oo Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "wuxuu ugu yeeray wax la mid ah waxaan adinka idiinku yeeray oo kale. Markaasuu midkuu meel dhow u diray wuu jeclaaday, wuuna badbaaday. Midkuuse meel fog u diray wuu kahday oo diiday. Markaasuu Ciise kuwaas Ilaahay uga dacwooday, oo uu markaas nin kastoo ka mid ihi waagu u baryay isagoo ku hadlaya afka dadkii loo diray."

Magacda ergayda Ciise

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Ragga xawaariyyiinta ka mid ah oo uu Ciise ina Maryama ergo ahaan u diray waxay ahaayeen Budhrus al xawaariyyu oo uu la socdo Buuluus, oo Buuluus wuxuu ahaa kuwa xawaariyyiinmta ku xigay oo xawaariyyiinta ka mid ma ahayn, wuxuuna u diray Ruumiyyah (oo ah siduu Dr. Khaliil Shawqii atlaskiisa ku yiri meeshay iska galaan oo ah xuduudda beledka muslimiinta iyo beledka ghayrkood iska galaan. Al Thaguuru Al Rruumiyyah iyo waxaa jiray Al Thuguuru Al Sh-shaamiyyah: Dhardhuus, Athanah, Al Musayyisah, Al Haaruuniyyah oo Marcash agteeda ah: fiiri bogga boqol iyo shan iyo soddon ee Al Atlasu fii taariikhi Al Carabi Al Islaamii. Waxaa kaloo la yiri inay Ruumiyyah Rooma lafteeda tahay ee dalka talyaaniga). Ciise wuxuu Andiraa'is iyo Muntaa u diray arliga uu dadkeedu dadka cuno. Wuxuu Tuumaas u diray arliga Baabil ee arliga bari. Filibis wuxuu u diray arliga Qardhaajah (Tuunis), waana Ifriiqiyyah. Yuxannas wuxuu u diray Ifsus, tuulada ragga asxaabu al kahfi, oo arliga Turkiga ku taalla. Yacquubus wuxuu u idray Uurashaliim (oo ah magaalada Qudus ee arliga Falasdhiin). Ibnu Thalmaa'a wuxuu u diray Xijaaz ee arliga Carabta. Siimuna wuxuu u diray arliga Barbarta. Yahuuthaa, oo aan xawaariyyinta ka mid ahayn, wuxuu u diray beledka Yuudis."

Qoraalka Aafaraad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam oo Labada warqadood u diray Hiraql boqorka Rooma

Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: “Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, markuu kasoo laabtay Al Xudaybiyyah, waana sanadka lixaad ee

Hijrada, wuxuu warqad u dhigay boqorka Roma, oo magaciisu ahaa Hiraqal. Markaasaa waxaa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam loo sheegay inayan roomaanku warqad akhrisan jeer ay saxiixan tahay oo shabbadi ku dheggan tahay. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu samaystay fara gashi qalin laga sameeyey laguna naqashay saddex sadar: sadar waxaa ku dhigan Muxammad, sadarna Rasuulu, sadarna Allaahi oo uu markaas qoraalka ku shabbadeeyey. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu warqad u dhigay Qaysa (Qaysar waxaa loogu yeeraa boqor kasta ee boqortooyada roomaanka sidaan annagu maanta qofkii dal madax u ahba loo yiraahdo Madaxweyne oo kale. Qaysarka ugu horreeyey waxaa magacaas loo siiyay isagoo ayan hooyadiis u dhali si caadi ah balse caloosheeda inta la dhanbalay halkaas laga soo bixiyay, taas ayaana u sabab ah in dhalmada sidaas ah maanta loo yiraahdo "caeserian" isaguna wuuba ku faani jiray oo wuxuu oran jiray inuusan isagu kasoo bixin oo uusan soo marin kaadi mareenka haweenka), midka la yiraahdo Hiraql boqorka roomaanka waagaas, markii qoraalka la dhigayna wuxuu yiri: **"man yandhaliqu bi kitaabii haathaa haathaa ilaa Hiraql wa lahu al jannah?"** oo macnihiisu yahay: "kuma warqaddaydaan la dhaqaaqaya oo u geynaya Hiraql oo jannada la gelinayaa?" Markaasay waxay yiraahdeen: "hadduu warqadda la dhaaqo oo uu gaari waayo –isagoo ama dariiqa ku dhinta ama ay wax kale ka hor istaagaan inuu gacanta ka saaro-jannada la leeyahay?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam yiri: **"wa in lam yasil"** oo manihiisu yahay: "haa wuu leeyahay xattaa hadduusan gaarin." Markaasaa waxaa warqadda qaaday Dixyah bin Khaliifah, oo ahaa saxaabi jaliil ah iyo nin aad u waji qurxoon, horena u islaamay, Dixyah waxaa afka reer Yaman lagu yiraahda Al Ra'iisu oo ah Madaxweyne. Markaasuu wuxuu ula kacay meeshuu joogay Hiraql oo ahayd Al Quddus, siduu Al Bukhaarii u wariyay. Al Bukhaarii wuxuu kaloo kitaabka Kitaabu Al Jihaadi ku wariyay in markuu Ilaahay Hiraql ka rogay ciidanka Faaris oo uu ka adkaaday ayuu wuxuu kasoo lugeeyey Xims ilaa uu lug uga yimaado Al Quddus isagoo taas ka dhigaya shrukrin uu Ilaahay ku shukrinayo.

Al Dhabarii iyo ibnu Cabdu Al Xakam waxay ayaguna wariyeen riwaayado is xoojinaya oo leh: Kisraa boqorka Faaris ayaa wuxuu ciidan u diray oo ku duulay boqortooyada Roomaanka arliga Hiraql, markaasay in badan oo arligaas ka mid burburiyeen oo kharaabiyeen. Markaasuu Kisraa wuxuu raagsaday soo noqoshada Taliyihii ciidankiisaas watay, markaasuu wuxuu damcay inuu dilo oo uu amiir kale ciidanka madax uga dhigo. Markaasuu taliyihiisaasu go'aankaas Kisraa ka war helay, markaasuu wuxuu sidaas ugu sheegay oo uu la saf noqday Hiraql oo uu la heshiiyay, oo uu markaas ciidankiisa ka hor wareejiyay oo uu sidaas Hiraql ku jebiyay oo uga adkaaday Kisraa, boqorka Faaris, oo ah Iraan maanta. Markaasuu shukri ahaan Hiraql Xims kasoo lugeeyey isagoo Ilaahay taas ugu shukrinaya libtaas uu Kisraa ka siiyay. Krishtaankuna waxay u xajjin jireen oo ay ilaa maanta u xajjiyaan Al Quddus.

Ibnu Isxaaq wuxuu Abuu Sufyaan bin Xarb ka wariyay inuu yiri: "markay ahayd zamanka heshiiska nabad gelyo ee Al Xudaybiyyah ayaan waxaan ganacsi ugu kici timay Shaam anigoo la socda koox rag Quraysh ah. Markaasuu Hiraql wuxuu ninka booliskiisa madaxda u ah ku yiri: "arliga Shaam oo idil fatash oo waxaad ii keentaa nin ka dhashay tolka ninkaan (waana Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam) si aan arrinkiisa uga wareysto. Markaasuu ninkaasu aniga iyo asxaabtayda oo Ghazzah joogna nagu soo duulay oo uu dhammaanteen Al Quddus noo kexeeyey." Markaasuu ibnu Isxaaq Xadiithka siduu ahaa u wada wariyay sida Al Bukhaarii ugu qoran oo kale iyo inay Al Quddus ugu yimaadeen ayagoo la wado. Markaasuu Hiraql majliskiisa ugu yeeray ay uguna yimaadeen ayadoo ay ku hareereysan yihiin madaxdii Rooma, taajkiisuna madaxa u saaran yahay. Kaddibna

wuxuu dhammaystiray Xadiithka inta ku saabsan su'aalaha Hiraql iyo jawaabaha Abuu Sufyaan.

Abuu Sufyaan iyo Hiraqal

Xadiithka intiisa kalena waa sidatan, aanna kasoo guurinnay kitaabka Cuyuunu Al Athar uuna dhigay al imaamu al xaafithu Fatxu Al Ddiini Muxammad bin Sayyidi Al Nnaasi al sh-shaaficii al macruufu bi "ibnu Sayyidi Al Nnaasi oo noolaa inta u dhexeysay sanadaha lix boqol kow iyo toddobaatan ilaa toddoba boqol afar iyo soddon Hijriga, boggiisa saddex boqol afar iyo labaatan:
Abuu Sufyaan wuxuu yiri: "markaasuu Hiraql wuxuu turjumaankiisa ku yiri: "waxaad raggaan waydiisaa midkooda nasab ahaan ugu dhow ninka nabinnimada sheegtay." Abuu Sufyaan wuxuu yiri: "markaasaan iri: "anigaaa nasab ahaan ugu dhow", ayadoo uusan ragga safarkaas ku jirin nin reer Cabdu Manaaf ah oo aan aniga ahayn." Qaysar wuxuu yiri: "ii soo dhoweeyey." Kaddibna amar ayuu ka baxshay oo markaasaa asxaabtayda dhabarkayga la yeelay, kaddibna wuxuu turjumaankiisa ku yiri: "waxaad asxaabtiisa u sheegtaa inaan midkaan hortiinna u istaajiyay si aan ninkaan uga waraysto sheeganaya inuu Nabi yahay, adinkana waxaan isaga dhabarkiisa idiin yeelay inaad ku beenisaan hadduu been sheego." Abuu Sufyaan wuxuu yiri: "wa Allaahi haddayan ahaan lahayn inaan ka xishooday inay asxaabtaydu been igu qabtaan been ayaan ka sheegi lahaa, laakiin waan xishooday oo aan runta sheegay anigoo kahanaya. Kaddibna wuxuu turjumaankiisa ku yiri: "waxaad tiraahdaa: "sidee buu nasabka ninkaanu ku yahay tolkiinna dhexdiisa?" Waxaan iri: "waa nin nasab fiican leh." Wuxuu yiri: "waxaad ku tiraahdaa: "hadalka uu ninkaanu leeyahay isaga hortiisa nin adinka idinka mid ahi ma yiri, oo Nabinnimo ma sheegtay?" Waxaan iri: "maya." Wuxuu yiri: "intuusan wuxuu yiri uusan oran ninka ma ku tuhmi jirteen inuu been sheego?" Waxaan iri: "maya." Wuxuu yiri: "aabayaalkiis ma ka mid ahaa nin boqor ah?" Waxaan iri: "maya." Wuxuu yiri: "ma dadka madaxdiisa ayaa raacay ama intooda taagta daran?" Waxaan iri: "bal intooda taagta daran." Wuxuu yiri: "miyay kordhayaan mase waa yaraanayaan dadka raacsani?" Waxaan iri: "bal way kordhayaan." Wuxuu yiri: "dadka raacay axadkoodna diintiisa ma ka noqdaa nacayb uu u qaaday daraadeed?" Waxaan iri: "maya." Wuxuu yiri: "miyuu dadka khayaanaa?" Waxaan iri: "maya, waqtigaanna waxaan kula jirnaa heshiis nabadeed, mana ogin wuxuu mudadaaas dhexdeeda fali doono." Wuxuu yiri: "dagaal ma la gasheen?" Waxaan iri: "haa." Wuxuu yiri: "sideebuu dagaalkiinna iyo dagaalkiisu ahaayeen?" Waxaan iri: "wuxuu ahaa is waydaarsi, oo marna isagaa gacanta sare leh marna annaga ayaa gacanta sare leh." Wuxuu yiri: "waana maxay wuxuu idin amrayaa?" Waxaan iri: "wuxuu na amrayaa inaan Ilaahay keligiis caabudno oo aanan waxna shariik ula yeelin, wuxuuna naga reebayaa waxay aabayaalkeen caabudi jireen, wuxuuna na farayaa inaan salaad tukanno, sadaqana bixinno, iyo inaan dhawrsanaanno, cahdigana aan oofinno amaanadana aan cidda leh u celinno." Markaasuu wuxuu turjumaankiisa ku yiri: "waxaad ku tiraahdaa: "waxaan ku waydiiyay nasabkiisa waxaad ii sheegtay inuu laan dheer yahay, Rusushuna waa sidaasoo kaloo waxaana loo diraa ayagoo leh nasabka tolkooda loo dirayo. Waxaan kaloo ku waydiiyay inuu axadna isaga hortiisa tolkiinna ku hadalay oo nabinnimo sheegtay isaga hortiis waxaadna tiri maya, oo hadduu axadna isaga hortiisa hadalkaas oo kale ku hadli lahaa waxaan oran lahaa: "waa nin ku dayanaya hadal hortiis la yiri." Waxaan kaloo ku waydiiyay inaad beenlownimo ku tuhmi jirteen ka hor intuusan oran wuxuu yiri, waxaadna tiri maya, sidaasaana waxaan ku ogaaday inuusan ka tegeyn inuu dadka been u sheego oo uu markaas Ilaahay been ka sheego. Waxaan kaloo ku waydiiyay inuu aabayaalkiisa boqor ku jiray waxaadna tiri maya, oo hadduu aabayaalkiis boqor ku jiray waxaan oran lahaa: "waa nin

boqortooyada aabihiis doonaya.” Waxaan kaloo ku waydiiyay inay raacaan dadka madaxdiisa ama kuwooda taagta daran waxaadna tiri kuwooda taagta daran, kuwaas ayaana ah kuwa Rususha raaca. Waxaan kaloo ku waydiiyay inay dadka raacsani kordhayaaan ama naaqusayaan waxaadna tiri inay kordhayaan, taasna waa xaaladda iimaanka jeer uu ka dhammaystirmo. Waxaan kaloo ku waydiiyay inuu dadkaas raacay midkoodna caro uu diintiisa u qabo uga baxo oo murtad noqdo kaddib markuu diintaas galay waxaadna tiri maya, waana sidaas markuu iimaanku ku darsamo oo dhexgalo faraxa qalbiga oo uusan markaas axadna ka caraysiin Karin. Waxaan kaloo ku waydiiyay inaad la dagaallanteen waxaadna tiri haa inuu xarbigiinnu darandoorri yahay oo uu marna isagu gacanta sare helayo marna aad adinku gacanta sare heleysaan, waana sidaasaa Rususha loo imtixaanaa, kaddibna ayaaga ciribta hela. Waxaan kaloo ku waydiiyay wuxuu idin farayo waxaadna sheegtay inuu idin farayo “wuxuu na amrayaa inaan Ilaahay keligiis caabudno oo aanan waxna shariik ula yeelin, wuxuuna naga reebayaa waxay aabayaalkeen caabudi jireen, wuxuuna na farayaa inaan salaad tukanno, sadaqana bixinno, iyo inaan dhawrsanaanno, cahdigana aan oofinno amaanadana aan cidda leh u celinno.”

Isaguna waa Nabi, waanna ogsoonaa inuu Nabi soo bixi doono umase moodayn inuu adinku idinka mid yahay. Waxa iga soo gaaray hadday run yihiinna mar dhowba arligaan aan ku taaganahay ayuu mulkin doonaa, haddaan ogahay inaan gaari karana waan ku dadaali lahaa oo dhib kasta u dul qaadan lahaa si aan ula kulmo. Markaan u tagana labadiisa cagood ayaan dhiqi lahaa.”

Abuu Sufyaan wuxuu yiri: “markaas kaddib ayuu dalbay oo loo keenay warqadda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo loo akhriyay, waxaana ku dhignaa: **"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuula Allaahi ilaa Hiraql, cathiimi Al Rruumi. Salaaman calaa man ittabaca al hudaa, ammaa bacdu. Fa innii adcuuka bi dicaayati al islaami. Aslim taslim, yu'tiika Allaahu ajraka marratayni. Fa in tawallayta fa inna calayka ithmu al ariisiyyina, waa yaa ahla al kitaabi tacaalaw ilaa kalimatin sawaa'in baynanaa wa baynakum an laa nacbuda illaa Allaaha wa laa nushrika bihi shay'an, wa laa yattakhitha bacdunaa bacdan arbaaban min duuni Allaahi. Fa in tawallaw fa quuluu ash-haduu bi annaa muslimuuna."**

Abuu Sufyaan wuxuu yiri: “markuu hadalkiisa dhammaystay oo warqaddana kasoo jeestay ayay codadka ragga hareerihiisa fadhiyaa kor u qaadmeen, mana garan waxay lahaayeen. Markaasuu Qaysar amar baxshay oo annaga dibadda naloo baxshay. Markaasaan markaan dibadda tagnay aniga iyo asxaabtaydu oo aan kaliyeysannay waxaan ku iri: “arrinka ibnu Abii Kabshah (oo uu ka wado Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam) kor ayuu ahaaday oo xoogeystay talinayaana ayadoo uu boqorka Banii Al Asfar, ahna boqorka roomaanka, kaba baqay.” Sidaasaan waxaan ku ahaa mid daliil ah oo huba inuu amarkiisu libta helayo ilaa uu Ilaahay islaamka qalbigayga geliyay.”

Al Israa’u wa Al Micraaju, Abuu Sufyaan iyo Hiraqal

Markuu intaas wariyay ayuu ibnu Sayyidi Al Nnaasi wuxuu yiri: “Xadiithkaa Abuu Sufyaan waxaa kaloo ka mid ah inuu Qaysar ku yiri markuu xagga Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ka waraystay: “boqorow, ma ku sheegaa dhacdo aan annagu ognahay inuu been ka sheegay?” Wuxuu yiri: “waana tee?” Waxaan iri: “wuxuu noogu andacooday inuu arligeenna ka baxay oo ah arliga Xaramka habeen oo uu isla habeenkaasba tegey masjidka Baytu Al Maqdis oo uu hadana isla habeenkaas annaga noo soo noqday intuusan waaguba baryin!” Wuxuu yiri: “wadaadka krishtaanka ah ee Baytu Al Maqdisna wuxuu ku sugan yahay Qaysar madixiisa agtiisa,

markaasuu yiri: “run ayuu sheegay.” Wuxuu yiri: “maxaana arrinkaan ku ogaysiiyay?” Wuxuu yiri: “anigu habeenna ma seexan jirin jeer aan xiro albaabbada masjidka. Markaasay markay habeenkaas ahayd ayaan albaabbada oo dhan xiray intaan ka ahayn hal albaab oo aan xiri waayay. Markaasaan xiriddiisa waxaan la kaashaday dadka ila joogay iyo kuwa ii shaqaynayayba markaasaan albaabkaas dhaqaajin waynnay, sida annagoo buur dhaqaajinaynna oo kale. Markaasaan waxaan u yeeray najaariinta oo markay fiiriyeen waxay yiraahdeen: “kani waa albaab oo uu kusoo kor dhacay oo uu ku fadhiyo dhismohoo idili marka ma dhaqaajin karno jeer aan waabariisanno oo aan aragno meeshuu ka yimid.” Markaasaan labada albaab ayagoo furan ka tegay, oo markuu waagu baryay aan kusoo jarmaaday. Markaasaan waxaan arkay in dhagaxa geeska masjidka yaalla la dalooliyay, ayna ku taallo raadka meesha daabadda lagu xiray. Markaasaan waxaan asxaabtayda ku iri: “xalay albaabkaani uma xirmi waayin waxaan Nabi ahayn, Nabigaasuu xaluu ku tukaday masjidkeennaan.”
Markaasuu Qaysar wuxuu qawmkiisa ku yiri: “ragga roomaankow, soo ma ogsoonidin inuu Ciise iyo saacadda u dhexeeyo Nabi uu Ciise ina Maryama idiinku bishaareeyey, aadna rajayneysaan inuu Ilaahay nin adinka idinka mid ah ka dhigo?” Waxay yiraahdeen: “haa.” Wuxuu yiri: “Ilaahay wuxuuse ka dhigay nin adinka ghayrkiin ah, tiro ahaanna adinka idinka yar, beled ahaanna adinka idinka wadan yar, waana raxmada Ilaahay oo uu dhigo meeshuu doono.”

Kaddibna Hiraql wuxuu dalbay warqadda Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam oo uu usoo dhiibay Dixyah bin Khaliifah Al Kalbiyyi oo uu Dixyah u dhiibay ninka Busraa madaxda ka ahaa oo magaciisu ahaa Al Xaarithu bin Abii Shimr Al Ghassaanii. Al Bazzaarna wuxuu wariyay inuu Dixyah laftiisu warqadda Hiraql gacanta ka saaray oo u dhiibay oo wuxuu wariyay inuu Dixyah yiri: “Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu ii diray Qaysar markaasaan u imid oo aan warqadda u dhiibay.” Markaasuu warqadda Hiraql u dhiibay, kanna uu akhristay.

Qoraalka Shanaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Warqadda koowaad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ee Hiraql boqorka Rooma

Al Bayhaqii wuxuu Dalaa’ilu Al Nubuwwah ku wariyay mujalladka afaraad bogga saddex boqol toddoba iyo toddobaatan, Al Bukhaariina Xadiithkiisa laba kun sagaal boqol kow iyo afartan ee kitaabka jihaadka ahna kitaabka lix iyo kontonaad; Muslimna kitaabkiisa laba iyo soddonaad waana Xadiithkiisa afar iyo toddobaatanaad ku wariyeen warqadda koowaad ee uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u diray boqorka Rooma ee Hiraql, naskeeduna uu yahay sidatan:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuula Allaahi ilaa Hiraql, cathiimi Al Rruumi. Salaaman calaa man ittabaca al hudaa, ammaa bacdu. Fa innii adcuuka bi dicaayati al islaami. Aslim taslim, yu'tiika Allaahu ajraka marratayni. Fa in tawallayta fa inna calayka ithmu al ariisiyyina, waa yaa ahla al kitaabi tacaalaw ilaa kalimatin sawaa'in baynanaa wa baynakum an laa nacbuda illaa Allaaha wa laa nushrika bihi shay'an, wa laa yattakhitha bacdunaa bacdan arbaaban min duuni Allaahi. Fa in tawallaw fa quuluu ash-haduu bi annaa muslimuuna."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeey:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, una socotaa Hiraql, madaxa roomaanka. Nabadgelyo waxay korkiisa tahay oo badbaadaya midka hanuunka raaca, oo cathaabta Ilaahay ka badbaadaya. Intaas dabadeedna, waxaan kuugu yeerayaa inaad ku dhawaaqdid erayada islaamka qofka u hoggaamiya oo ah ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa ash-hadu anna Muxammadan Rsuulu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ah inaad islaamka soo gashid oo aad muslin noqotid. Muslin noqo waad badbaadeysaaye. Haddaad islaantid Ilaahay wuxuu ku siinayaa laba ajar oo kala ah inaad Nabi Ciise raacday iyo inaad Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, raacday. Haddaad islaamka ka jeesatidna oo aad diidid, waxaa korkaaga ah oo laguu haystaa dambiyada dadkaad madaxda u tahay oo dalkaaga ku nool, oo ah boqortooyada roomaanka oo idil. Kuwiinna kitaabka la siiyow! Kaalaya oo aan isugu nimadno wax isku mid ah oo ayan Quraanka iyo Tawraadda iyo Injiilkuba isku khilaafsanayn oo ay isaga mid yihiin, oo ah inaanan caabudin Ilaahay keligiis mooyee, oo aan cibaadada Isaga keligiis ku gooni yeelno, oo aanan Ilaahnimada axad kale la wadaajin, oo ayan qaarkeen qaarka kale Rabbiyo ka dhigan, siday yuhuuddu u tiri inuu Cuzayr wiilka Ilaahay yahay, ayna u yiraahdeen inuu Ciise wiilka Ilaahay yahay, oo aynaan axbaarta ku raacin waxay ayagu hindiseen oo xalaal iyo xaaraan ah, ayagoo dad annagoo kale ah. Hadday markaas Midnimada Ilaahay iyo tawxiidka ka jeestaan oo diidaan, adinku, waana muslimiintee, waxaad tiraahdaan: "Markhaati ka noqda inaan annagu muslimiin nahay."

Qoraalka Lixaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Warqadda labaad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ee Hiraql boqorka Rooma

Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam intuu Tabuuk joogay wuxuu warqad labaad u diray boqorka Rooma ee magaciisu yahay Hiraql, wuxuuna ugu dhiibay isla saxaabiga tii koowaad u geeyey intuu heshiiska Al Xudaybiyyah socday, ahaana Dixyah bin Khaliifah Al Kalbiyyi.

Qoraalka warqadda labaad wa sidatan soo socota:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuula Allaahi ilaa Hiraql, cathiimi Al Rruumi. Salaaman calaa man ittabaca al hudaa, ammaa bacdu. Fa innii adcuuka bi dicaayati al islaami. Aslim taslim, yu'tiika Allaahu ajraka marratayni. Fa in tawallayta fa inna calayka ithmu al ariisiyyina, waa yaa ahla al kitaabi tacaalaw ilaa kalimatin sawaa'in baynanaa wa baynakum an laa nacbuda illaa Allaaha wa laa nushrika bihi shay'an, wa laa yattakhitha bacdunaa bacdan arbaaban min duuni Allaahi. Fa in tawallaw fa quuluu ash-haduu bi annaa muslimuuna."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeey:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, una socotaa Hiraql, madaxa roomaanka. Nabadgelyo waxay korkiisa tahay oo badbaadaya midka hanuunka raaca, oo cathaabta Ilaahay ka badbaadaya. Intaas dabadeedna, waxaan kuugu yeerayaa inaad ku dhawaaqdid erayada islaamka qofka u hoggaamiya oo ah ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa ash-hadu anna Muxammadan Rsuulu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ah inaad islaamka soo gashid oo aad muslin noqotid. Muslin noqo waad badbaadeysaaye. Haddaad islaantid Ilaahay wuxuu ku siinayaa laba ajar oo kala ah inaad Nabi Ciise raacday iyo inaad Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, raacday. Haddaad islaamka ka jeesatidna oo aad diidid, waxaa korkaaga ah oo laguu haystaa dambiyada dadkaad madaxda u tahay oo dalkaaga ku nool, oo ah boqortooyada roomaanka oo idil. Kuwiinna kitaabka la siiyow! Kaalaya oo aan isugu nimadno wax isku mid ah oo ayan Quraanka iyo Tawraadda iyo Injiilkuba isku khilaafsanayn oo ay isaga mid yihiin, oo ah inaanan caabudin Ilaahay keligiis mooyee, oo aan cibaadada Isaga keligiis ku gooni yeelno, oo aanan Ilaahnimada axad kale la wadaajin, oo ayan qaarkeen qaarka kale Rabbiyo ka dhigan, siday yuhuuddu u tiri inuu Cuzayr wiilka Ilaahay yahay, ayna u yiraahdeen inuu Ciise wiilka Ilaahay yahay, oo aynaan axbaarta ku raacin waxay ayagu hindiseen oo xalaal iyo xaaraan ah, ayagoo dad annagoo kale ah. Hadday markaas Midnimada Ilaahay iyo tawxiidka ka jeestaan oo diidaan, adinku, waana muslimiintee, waxaad tiraahdaan: "Markhaati ka noqda inaan annagu muslimiin nahay."

Al Zarqaanii wuxuu yiri: "Shiikhennu, Shaykhu Al Islaami, oo aan ka wado Al Balqiini, wuxuu yiri: "Al Xaafith ibnu Xajar Al Casqalaanii wuxuu yiri: "Kulli mid kasta oo ka diin yeesha diinta ehelu kitaabka wuxuu ku jiraa xukunkooda xagga nikaaxa iyo guurka iyo xoolahay gawracaan, maxaa yeelay Hiraql iyo dadkiisu waa roomaankee, umana ayan dhalan oo ka mid ma aha Banii Israa'iil, bal waxay ka mid yihiin kuwa diinta krishtaanka galay, kaddib marka Diinta Ciise la beddelay. Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku magacaabay oo ugu yeeray warqaddaan: "Yaa ahla al kitaabi" oo ah "kuwa kitaabka la siiyow", taasoo tusaysa inay ayaguna xukunkooda ku dhex jiraan."

Marka warqadda la akhriyay ayuu Hiraql walaalkiis nin uu dhalay caro aad u badan xanaaqay wuxuuna yiri: “warqadda i tus”. Markaasuu Hiraql wuxuu ku yiri: “oo maxaad ku suubineysaa?” Wuxuu yiri: “isagu warqadda laftiisu ku bilaabay, wuxuuna kugu magacaabay “saaxibu Al Rruumi” oo ah ‘saaxiibka roomaanka.” Markaasuu adeerkiis wuxuu ku yiri: “wa Allaahi taladaadu way taag daran tahay! Ma waxaad doonaysaa inaan tuuro warqad uu soo dhigay ninuu Jibriil u yimaado?” ama hadal sidaas oo kale ayuu yiri. Ama wuxuu yiri: “ma waxaad dooneysaa inaan tuuro warqad aanan ogayn waxa ku dhigan? Haduu Rasuulka Ilaahay yahay xaq ayuu u leeyahay inuu laftiisa iska bilaabo, run ayuuna sheegay oo anigu waxaan ahay saaxiibka roomaanka oo Ilaahay ayaa aniga iyo ayakaba na leh.”

Markaasuu wuxuu amar ku bixiyay in Dixyah la dejiyo oo la karaameeyo. Dixyah wuxuu yir: “markaasuu subixi dambe si sir iigu soo ciddiray , markaasuu wuxuu i dhex geliyay guri aad u wayn oo ay ku yaallaan saddex boqol iyo saddex iyo toban masawir, ahna masawirrada Anbiyada Mursaliinta ah. Markaasuu wuxuu yiri: “dhugo masawirradaan oo ii sheeg midkuu saaxiibkaa ka yahay!” Markaasaan waxaan arkay masawirka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, sida isagoo hadlayaba. Waxaan iri: “waa midkaan.” Wuxuu yiri: “run ayaad sheegtay.”

Kaddib Hiraql siday Al Bukhaarii iyo Abuu Nucaym iyo ghayrkoodba u wariyeen wuxuu u laabtay Xims, oo uu halkaas madaxda boqortooyada roomaanka guri uu halkaas ku lahaa isugu keenay uuna ku yiri: “madaxda roomaankoy, haddaad dooneysaan inaad liibaantaan oo aad hanuuntaan oo aad sidaas ebedkiin ahaataan iyo

inay boqortooyadiinnu sugnaato oo jirto Nabigaan baayaca oo raaca." Markaasay mar u wada carareen sida lo' dureedka oo kale oo ay xagga albaabada guriga aadeen, markaasay arkeen inay albaabadu wada xiran yihiin. Markaasuu wuxuu yiri: "ii soo wada celiya." Markaasuu wuxuu ku yiri: "anigu waxaan jarribayay sidaad diintiinna ugu dheggan tihiin, waxaanna idinka arkay waxaan jeclaado. Markaasay u wada sujuudeen, ayna raalli ka wada noqdeen."

Hiraql gaalnimuu ku dhintay

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Hiraql warqad labaad u diray intuu joogay Tabuuk, siduu u wariyay Fatxu Al Baarii ugana wariyay ibnu Xibbaan wuxuuna ugu dhiibay isla Dixyah bin Khaliifah Al Kalbiyyi uuna ugu yeerayo inuu islaamo. Markaasuu u dhowaaday inuu yeelo, mase yeelin, taasoo tilmaamaysa inuu ku kor taagnaa gaalnimadiisa." Imaam Axmad wuxuu Musnadkiisa ku wariyay inuu Hiraql inuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Asalihi Wa Sallam, usoo dhigay warqad uu ugu sheegayo uu ku leeyahay: "waxaan ahay muslim." Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu yiri: **"kathaba, bal huwa calaa nasraaniyatihi"**, oo macnihiisu yahay: "been ayuu sheegay oo wuxuu ku taagan yahay krishtaannimadiisa." Abuu Cubayd wuxuu isaguna wariyay inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallama yiri: **"kathaba caduwwu Allaahi laysa bi muslimin"** oo macnihiisu yahay: "been ayuu sheegay oo cadawga Ilaahay muslim ma aha." Hiraql hadduu dhaagi lahaa hadalka warqadda ku qoran oo ahaa "islaan waad badbaadaysaaye" oo sidaasaa isaga iyo boqortooyadiisuba u jiri lahaayeen wuu islaami lahaa, laakiin tawfiiqdu waxay ku jirtaa gacanta Ilaahay .

Warqadda koowaad wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u diray markuu Al Xudaybiyyah kasoo laabtay dhammaadka sanadka lixaad ee Hijrada, Dixyah wuxuu isaguna Hiraql u yimid oo uu warqadda u dhiibay bisha Muxarram ee sanadka toddobaad ee Hijrada, siduu Al Zarqaanii bogga sideedaad ee mujalladka shanaad ugu wariyay.

Warqadda labaadna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam uga diray Tabuuk sandka sagaalaad, oo duullaanku wuxuu ahaa bisha Rajab ee sanadka sagaalaad ee Hijrada.

Siday boqorrda Rooma warqaddaas u ilaaliyeen

Al Zarqaanii wuxuu bogga sideed iyo tobnaad ku yiri: "Shaykhu al islaami Abuu Al Fadli bin Xajar Allaha Tacaalaa u naxariistee wuxuu Fatxu Al Baarii ku wariyay oo la xiriirta Xadiithka Hiraql oo ka mid ah Bad'u Al Waxyi yiri: "waxaa noo warramay in mid ka badan oo nooga warisay Al Qaadii Nuuru Al Ddiini bin Al Saa'igh Al Dimashqii oo ka wariyay Sayfu Al Ddini Qalj –oo af turkiga ku ah sayf- Al Mansuurii, oo ahaa mid ka mid ah amiirrada dawladda Al Qalaawuuniyah inuu u yimid boqorka Maghrib uuna u keenay hadiyad uu usoo dhiibay boqorka Al Mansuur Qalawuun. Markaasuu boqorka Maghrib wuxuu isagaas u diray boqorka faranjiga (waanaa roomaanka) inuu uga soo shafeeco arrin uu dan ka lahaa. Markuu amiirku boqorka roomaanka u yimid wuu qaabilay uuna karaameeyey, wuxuuna usoo jeediyay inuu agtiisa joogo wuuse ka diiday, sida Fatxu Al Baariga ugu xusan. Markaasuu boqorka roomaanku wuxuu ku yiri: "waxaan kaaga farxinaya wax aad u qiimo badan, markaasuu wuxuu usoo bixiyay sanduuq dahab lagu dheehay, wuxuuna dhexdiisa kasoo bixiyay weel qaliimada lagu kaydsado oo dahab ka samaysan, markaasuu wuxuu kasoo dhex bixiyay warqad xuruufteeda inta badani ay tirtirmeen oo lagu dhejiyay maro xariir ah. Markaasuu wuxuu yiri: "kanu waa warqadduu Nabigiinnu, Sallaa

Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, usoo diray awoowahay Qaysar, oo sidaasaan isaga dhaxalnaa ilaa maanta. Aabayaalkeenna waxay nagula dardaarmeen ayagana aabayaalkooda sidaas oo kale kula dardaarmeen ilaa laga gaaro Qaysar in intaan warqaddaan haysanno ayan boqortooyadu annaga naga wareegayn oo aan haysanaynno. Marka siadaasaan u ilaalinnaa warqaddaan si aad u adag, waana weyneynaa, krishtaankana waan ka qarinnaa si ay boqortooyada weligeed aan annagu u lahaanno."

Wuxuu Fatxu Al Baarii ku yiri: "waxaa hadalkiisaas sii xoojinaya Xadiithka mursalka ah ee Cumayr bin Isxaaq oo xusay, iyo hadalkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam: **"innii katabtu ilaa saaxibikum bi saxiifatin, fa amsakahaa, famaa yazaalu al nnaasu yajiduuna ba'san maa daama fii al cayshi khayrun"**, oo macnihiisu yahay: "waxaan saaxiibkiin u dhigay warqad markaasuu haystay (oo ma jeexjeexin siduu Kisraa yeelay oo kale), sidaasay dadka uga baqi doonaan intay noloshu khayr leedahay."

Bal arag siday raggu u kala sarreeyaan oo ay u kala dun fiican yihiin xattaa markay gaalo yihiin, oo midkaanna warqadda Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuu karaameeyey oo uu ku liibaanay oo boqortooyadiisu u hartay, Kisraana wuu jeexjeexay oo ay boqortooyadu ka guurtay wiilkiisuna dilay.

Xadiithka Cumayr bin Isxaaq

Kitaabka "Al Amwaal" ee Abuu Cubayd wuxuu wariyay Xadiith mursal ah ee Cumayr bin Isxaaq oo yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu waraaqo u kala dhigay Kisraa iyo Qaysar. Markaasuu Kisraa markuu warqadda akhriyay jeexjeexay, Qaysarse markuu akhriyay ayuu duubay oo meel kore saaray. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu yiri: **"ammaa haa'ulaa'i fa yumazzaquuna, wa ammaa haa'ulaa'i fa sayakuunu lahum baqiyyatun."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "kuwaasna waa la jeexjeexayaa, kawaas kalena waxbaa ka haraya."

Dixyah iyo Hiraql

Al Ssuhaylii wuxuu yiri: "Dixyah markuu Hiraql u yimid wuxuu ku yiri: "Qaysarow, waxaa ii kaa soo diray mid adiga kaa khayr badan, Midka isaga soo dirayna isaga iyo adigaba waa idinka khayr badan yahay, marka isku dullee, waanadiisana yeel, maxaa yeelay adigu haddaadan is dullayn waxba ma aadan garan, haddaan lagu waaninna laguuma caddaalad falin." Wuxuu yiri: "soo daa." Wuxuu yiri: "ma ogtahay inuu Al Masiixu salaad tukan jiray?" Wuxuu yiri: "haa." Wuxuu yiri: "hadaba anigu waxaan kuugu yeerayaa Midka uu Al Masiixu u tukan jiray, waxaanna kuugu yeerayaa Midka dabbiray abuurista samaawaatka iyo arliga isagoo oo uu Al Masiixu ku jiro caloosha hooyadiis. Waxaan kaloo kuugu yeerayaa Nabigaan Ummiga ah, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo ah midkuu imaatinkiisa kusii bishaareeyey Muuse, isaga dabadiisna uu ku bishaareeyey Ciise. Arrimahaasna waxaad u leedahay cilmi kaaga filan inaad u baahato inaad indhahaaga ku aragtid ama aad khabar ahaan u saluugtid kaaga filan. Haddaad ajiibtid oo yeeshid yeeriddaan waxaad heleysaa adduun iyo aakhiraba. Haddaadse diidid aakhiro waad seegeysaa, addunkana waa lagula wadaagayaa. Waxaad kaloo ogaataa inaad leedahay Rabbi boqorrada kibra jebiya, nicmada ay haystaan ka qaada."

Markaasuu Qaysar warqadda Nabiga, Sallaa Allaahu Calyhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, qaatay oo uu labada indhood dhexdooda saaray iyo madaxiisa uuna dhunkaday, kaddibna uu yiri: "wa Allaahi kitaabna kama tegin oo waa wada akhriyay, caalinna

kama tegin oo waan wada waydiiyay, waxaan khayr ahaynna ma aanan arag. Marka ii kaadi si aan u fiiriyo Midkuu Al Masiixu u tukan jiray, oo waxaan kahanayaa inaan maanta kaa yeelo arrin oo aan markaas berrito arko mid isagaas ka fiican oo aan markaas kaan hor u yeelay ka noqdo oo ay taasu i dhibto ayanna waxba i tarin. Marka joog oo sug ilaa aan arrinkaan uga fiirsanayo."
Wax yar kaddibna waxaa soo gaartay oofsashada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.
Waa intaas warka Al Ssuhaylii
Waana intuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, Duullaanka Tabuuk ku jiray oo uu Tabuuk joogay, kaddibna uu Al Madiinah Al Munwwarah u gaddoomay.

Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam oo Dixyah u aargooyey: Duullaanka Zayd bin Xaarithah ee Juthaam

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rifaacah bin Zayd Al Juthaamii wuxuu tolkiis ula soo noqday qoraal uu soo siiyay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo uu islaamka ugu yeerayo. Markaasay ka yeeleen. Markuu in yarba tolkiis dhex jogay ayaa waxaa soo maray Dixyah bin Kahliifah Al Kalbiyyi oo kasoo noqday Qaysar, boqorka roomaanka, markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u diray, isagoo wata badeecado ganacsi oo uu leeyahay. Markaasuu markuu marayo waadi ka mid ah waadiyadooda oo la yiraahdo **Shanaar** (oo aagga Tabuuk ku yaalla) ayaa waxaa Dixyah bin Khaliifah weeraray Al Hunaydu bin Cuus iyo wiilkiisa Cuus bin Al Hunaydu, una dhashay Banii Al Ddulaycu oo ah jilib ka tirsan Juthaam. Markaasay ka qaateen dhammaan wuxuu watay. Markaasuu warku wuxuu gaaray rag u dhashay Al Daybu oo ah tolka Rifaacah bin Zayd oo hore u islaamay oo u yeeridda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yeelay. Markaasay waxay ku duuleen Al Hunaydu iyo wiilkiisa. Raggaas ku duulay waxaa ka mid ahaa oo Banii Al Ddubayb u dhashay Al Nnucmaanu bin Abii Jicaal. Markaasay la kulmeen oo la dagaallameen. Maalintaas waxaa abtirsaday Qurratu bin Ashqar Al Ddannawii, kana sii ah Al Ddulaaciyyu, wuxuuna yiri: "anigu waxaan ahay ina Lubnaa", wuxuun afallaar ku ganay Al Nnucmaanu bin Abii Jicaal oo uu ruugga uga dhejiyay, markuu ku dhejiyayna uu yiri: "qaado, oo anigu waxaan ahay ina Lubnaa." Wuxuuna lahaa hooyo la yiraahdo Lubnaa. Xassaan bin Mallah Al Ddabaybiyyi wuxuu safarkiisa la socday Dixyah bin Kahliifah markaas horteed, wuxuuna ka barty Faataxada (oo uu ibnu Hishaam yiri: "Qurratu bin Ashqara Al Ddafaarii iyo Xayyaan bin Milaah."). Markaasay waxay soo ceshadeen waxay Al Hunaydu iyo wiilkiisu siteen oo ay Dixyah u celiyeen. Markaasuu Dixyah Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid, khabarkana uu u sheegay, wuxuuna weydiistay inuu siiyo dhiigga Al Hunaydu iyo wiilkiisa. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u diray inu ku duulo Zayd bin Xaarithah. Taas ayayna ahayd sababta duullaanka Zayd ee qabiilka Juthaam. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku daray ciidan. Ghadhafaan, oo Juthaam ka tirsan, iyo Waa'il iyo kuwa ka tirsan Salamaan iyo Sacd bin Huthaym, markuu ula yimid Rifaacah bin Zayd qoraalka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, way soo keceen oo waxay degeen Al Xarrah, banka ciiddiisa iyo dhagaxdiisu madaw yihiin, sida ayagoo la gubay oo kale, **Xarratu Al Rrajlaa'a**, ayadoo uu Rifaacah bin Zayd uu markaas joogo Kuraaci Ribah, oo usan ka warhayn, ayna la jiraan dad u dhashay Banii Ddubayb, ayadoo inta kale ee reer Banii Al Ddubayb ku sugan yihiin waadii Madaan ee degmada Al Xarrah dhankeeda qorrax kasoo bax. Markaasuu ciidanka Zayd bin Xaarithah wuxuu yimid **Al Awlaaj**. Markaasuu Xarrada kasoo weeraray **Al Maaqis**. Markaasay gacanta ku dhigeen waxay

heleen oo dad iyo maal ah, waxayna dileen Al Hunaydu iyo wiilkiisa iyo laba nin oo Banii Al Ajna'fah (oo uu ibnu Hishaam yiri: "waa Banii Al Axnaf."). Waxay kaloo dileen laba nin ee Banii Al Khasiib u dhashay. Markaasay markay taas maqleen Banuu Ddubayb, ciidankuna uu markaas joogo **Fayfaa'a Madaan**, ayay rag ka mid ihi daabado soo fuuleen. Ragga soo fuulayna waxaa ka mid ahaa Xassaan bin Millah oo saaran faras uu leeyahay Suwayd bin Zayd oo la yiraahdo Shamir. Markaasay soo dhaqaaqeen oo markay ciidanka usoo dhowaadeen ayay Abuu Zayd iyo Xassaan ku yirahdeen Unayf bin Milaah: "naga har oo naga tag, oo carrabkaagaan ka baqaynnaaye." Markaasuu ka haray, oo labadooda oo aan weli ka fogaan ayuu faraskiisu labadiisa jeeni dhulka ku xaaraay. Markaasuu yiri: "anigu waxaan u danaynayaa labada nin, si ka badan sidaad adigu u danayneysid labada faras." Markaasu faraska sii daayey, oo uu labadooda ka daba yimid. Markaasay waxay ku yiraahdeen: "haddaad fashay waxaad fashay carrabkaaga naga cesho, oo maanta wax xun ha noo keenin." Markaasay waxay ku heshiiyeen inuusan hadlin axad aan Xassaan bin Milaah ahayn. Waxayna lahaayeen zamanka jaahiliyada baaq ay isku gartaan markuu midkood doonayo inuu seeftiisa wax ku dhufto, ahaana "buurii ama thuuri". Markaasay markay ciidanka Zayd u muqdeen ayay raggu usoo kala dheereeyeen. Markaasuu Xassaan wuxuu ku yiri: "annagu waxaan nahay rag muslimiin ah". Ninka ugu horreeyey oo soo gaarana wuxuu ahaa nin faras madow saaran. Markaasuu saddexdooda soo kexeeyey. Markaasu Unayf wuxuu yiri: "buurii". Markaasuu Xassaan wuxuu yiri: "aayar oo u kaadi." Markaasay markay Zayd bin Xaarithah u yimaadeen ayuu Xassaan wuxuu yiri: "annagu rag muslimiin ah ayaan nahay." Markaasuu Zayd wuxuu ku yiri: "Hadaba Faataxada akhriya." Markaasuu Xassaan akhriyay. Markaasuu Zayd bin Xarithah wuxuu yiri: "ciidanka u sheega inuu Ilaahay naga xaaraan timeeyey dhulka raggaani ay ka yimaadeen intaan ka ahayn inta khayaanada fashay."

Imaatinkooda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Qafaalka waxaa ku jirtay walaasha la dhalatay Xassaan bin Millah, ahna haweenta Abii Wabr bin Cadiyy bin Umayyah bin Al Ddubayb. Markaasuu Zayd wuxuu ku yiri: "qaado." Markaasay waxay ku dhegtay labada miskood. Markaasay haweenta la yiraahdo Ummu Al Fizr Al Ddulaciyyah waxay ku tiri: "ma waxaad qaadanaysa gabadhiinna, hooyooyinkiinna waad ka tegeysaan?" Markaasuu nin Banii Al Khasiib u dhashay wuxuu yiri: "waxay u dhalatay Banii Al Ddubayb, carrabyaalkooduna maalintoo idil waxbay sixrayaan." Markaasaa eraygaas sixir waxaa maqlay nin ciidanka ka mid ah oo uu Zayd bin Xaarithah u sheegay. Markaasuu Zayd amar ku baxshay oo Xassaan walaashiis gacneheeda miskihiisa laga fujiyay, oo dexday ku dhegganayd, uuna ku yiri: "la fariiso gabdhaha ilmo adeerradaa ah intuu Ilaahay xukunkiisa idinku xukumayo." Markaasay xagga Al Madiinah usoo gaddoomeen. Zaydna wuxuu ciidanka ka reebay inay waadigooda ka yimaadaan oo ay ku daadegaan, waxayna la hoydeen dadkooda. Waxayna ku cahseeyeen caano ay ka listeen geel uu leeyahay Suwayd bin Zayd. Markaasay markay caanohooda dhameen ayay waxay fardo u fuuleen oo u tageen Rifaacah bin Zayd. Raggaas Rifaacah bin Zayd habeenkaas aadayna waxaa ka mid ahaa Abuu Zayd bin Camr, iyo Abuu Shammaas bin Camr, iyo Suwayd bin Zayd iyo Bacjatu bin Zayd, iyo Barthac bin Zayd, iyo Thaclabah bin Zayd, iyo Mukharribah bin Cadiyy, iyo Unayf bin Millah iyo Xassaan bin Millah, oo ay markaas Rifaacah bin Zayd kusoo waabariisteen isagoo jooga **Karaaci Rabbah**, dhabarka Xarrada, ceel halkaas ku yaalla **Xarratu Laylaa**. Markaasuu Xassaan bin Millah wuxuu ku yiri: "halkaad iska fadhidaa oo aad arigaaga lisanaysaa ayadoo haweenka Juthaam-na ay qafaal yihiin, waxaana ku dagay qoraalkaad la timid." Markaasuu Rifaacah bin Zayd ratigiisa ha la ii keeno yiri oo uu kooraha saartay.

Markaasuu soo jarmaaday isagoo uu la socdo Umayyah bin Dafaarah, oo u dhashay Banii Al Khasiif, ayna Al Madiinah ku tageen saddex maalmood. Markaasay markay Al Madiinah galeen, ayna masjidka hor yimaadeen, ayuu nin dadka ka mid ihi fiiriyay, uuna ku yiri: "awrtiinna ha fariisinnina, oo haddaad fariisisaan addimmadaa laga goynayaa." Markaasay awrtooda oo taaagan kasoo degeen. Markay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Alaahu Calayhi Wasallam, usoo galeen oo uu arkay ayuu gacanta u haadiyay inay dadka soo dhaafaan oo u yimaadaan. Markaasuu markuu Rifaacah bin Zayd hadalakiisa bilaabay ayuu nin wuxuu yiri: "Rasuulka Ilahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kuwaasu waa rag saaxiriin ah", oo uu laba goor kusoo celceliyay. Markaasuu Rifaacah bin Zayd wuxuu yiri: "Allaaha u naxariisto qofka maanta si fiican noola dhaqma." Markaasuu Rifaacah bin Zayd wuxuu qoraalkiisa u dhiibay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ahna midkuu Sallaa Allaahu calayhi Wasallam u qoray, wuxuuna yiri: "adiga ma aha Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo waa tanaa qoraal waa hore la dhigay, dhowaanna la khayaanay." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"iqra'hu yaa ghulaamu, wa aclin"**, oo macnihiisu yahay: "akhri wiilow, korna u akhri si loo wada ogaado." Markaasuu marka qoraalkiisa la akhriyay ayuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam waxa dhacay ka wareystay, uuna u sheegay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"kayfa asnacu bi al qatlaa?"** oo macnihiisu yahay: "sidee baan ka yeelaa kuwa la dilay?", oo uu sidaas saddex goor yiri. Markaasuu Rifaacah wuxuu yiri: "adigaa Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u cilmi leh, oo annagu wax xalaal ah kaa xaaraantimeyn maynno, wax xaaraan ahna kuu xalaaleyn maynno." Markaasuu Abuu Zayd bin Camr wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, inta nool noo sii daa, inta la dilayna labadaydaan cagood hoostooday ku jiraan." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Sadaqa Abu Zayd. Arkab macahum yaa Caliyyu"**, oo macnihiisu yahay: "Abuu Zayd run ayuu sheegay ee Caliyo, Allaha raalli ka noqdee, fuuloo raac." Markaasuu Calii, Allaaha raalli ka noqdee, wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Zayd i siin mayo." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Fa khuth sayfii haathaa"**, oo macnihiisu yahay: "hadaba seefteydaan qaado", oo uu seeftiisa siiyay. Markaasuu hadana Calii wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rati aan fuulo ma lihi." Markaasay waxay ku qaadeen rati uu leeyahay Thaclabah bin Camr oo la yiraahdo Mikxaal. Markaasay soo bexeen, waxaana ka horyimid ergay uu soo diray Zayd bin Xaarithah oo saaran tulud ka mid ah geela Abii Wabr oo la yiraahdo Al Sh-shamir. Markaasay ka dejiyeen. Markaasuu ergaygu wuxuu yiri: "Waa maxay Caliyow?" Wuxuu yiri: "waa xoolohooda, wayna ogaadeen oo qaateen." Markaasay dhaqaaqeen oo ay ciidanka kula kulmeen **Fayfaa'a Al Faxlatayni**, oo ay waxay wateen ka qaateen, ilaa heer ay xattaa ka qaateen harag yar oo kooraha ay haweenku ku fariistaan hoostiisa la dhigo."

Qoraalka Toddobaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ee Kisraa boqorka Iiraan

Boqorka Roomaanka ee Justiiniyaanus

Konton iyo labo sano dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka hor markuu sanadka miilaadigu ahaa shan boqol toddoba iyo labaatan, waxaa Boqortooyada Roomaanka ee Bari, caasimaddeeduna ahayd Istanbuul ee dalka Turkiga, Boqor u noqday ninka la yiraahdo Justiiniyaanus. Boqorkaas haweentiisana waxaa la oran jiray Theodora, taasoo intayan Boqorad noqon jilaa ahaan jirtay oo riwaayadaha dhigi jirtay oo ka shaqayn jirtay, waxayna ahayd haweeney caqli suuban leh, geesiyadna ah. Sidaas ayay ninkeeda gargaar iyo cududba ugu ahaan jirtay, ilaa ay isagiiba ka itaal iyo awood badatayba. Boqorku wuxuu ahaa krishtaan aaminsan ilaahnimada Ciise, Calayhissalaamu, in kastoo uu basharnimadiisa iyo inuu dad yahay uu hadana aaminsanaa. Boqorku wuxuu damcay inuu diintiisaas u dhiso kaniisad wayn oo waarta oo ka sarreysa Haykalka Sulaymaan, Calayhissalaamu, oo Quddus ku yaalla. Markaasuu wuxuu dhisay kaniisadda la yiraahdo Ayaa Suufiyaa Kaniisadda Xikmada Muqaddaska ah, oo Istanbuul ku taalla, kaddibna Masjid laga dhigay. Dhismaha kaniisaddaas kaddib ayuu Boqorku wuxuu ogaaday inay haweentiisu caqiido middiisa Ciise ka duwan leedahay, ayna aaminsantahay inuu Ciise bashar ahaa oo uusan Ilaah ahayn, siday aaminsanaayeen dariiqada la oran jiray Nasdhuuriyiinta, oo isaga cadawgiisa ahaa. Wuxuu kaloo ogaaday inay haweentiisu caqiidadeedaas ay rumaynsantahay oo marka isaga caqiidadiisa loo fiiriyo gaalnimada ah, ay faafiso. Halkaas ayaa waxaa ka bilawday wada hadal dhex mara Boqorka iyo Boqoradda oo caqiidadooda ku saabsan, ayaduna ay isku dayeyso inay ku qanciso in hadduu caqiidadaas ku sii taagnaado ay Masar iyo Suuriya oo markaas Boqortooyadiisa ka tirsan ay ka go' doonaan, isaguna uu ka baqayo in hadduu caqiidadeeda ku raaco inay Dawladaha Galbeed ka caroonayaan oo ay u dhammeynayaan, oo ay xukunka kala wareegi doonaan. Sidaas ayuu wuxuu ku raadiyay si uu labadaas aragtiyood isku waafajiyo oo aragtida cusub ay uga soo baxdo oo sidaas ku dhalatah uuna ku xambaaro inay qaataan Dawladaha krishtaanka ah oo idil. Sidaas ayay isaga iyo haweentiisa Theodora waxay isku waafaqeen inay qof walba oo uu Paapaha Roma fadhiya ka mid yahay, ay waajib ku tahay inuu raaco caqiidada Boqorka oo oranaysa inuu Ciise, Calayhissalaamu, Ilaah ahaa. Sidaas ayuu Justiiniyaanus wuxuu ku bilaabay aragtida diktaatooriga ah oo keligiis tashiga ah oo ah inuu Boqorku diinta u madax yahay. Sidaas ayuu shirar ku qabtay, go'aannada uu doono ay kasoo baxaan, qofkii mucaarad ku noqdana, ayna madaxda kaniisaduhu ka mid yihiin, xabsiyada ayuu ku hubsadaa. Markaasaa waxaa Istanbuul (oo waagaas Qisdhandhiiniyyah la oran jiray, oo Boqorka Roomaanka ee Qhisdhandhiinus loogu magac daray) soo gaaray inuu Thuu Nuwaas, Boqorka Yaman, diinta yuhuuddana galay, Yuusuf-na uu la

baxay, uu dariiqa ka gooyey ganacsatadii roomaanka krishtaanka ah ahayd, ayagiina uu laayay, xoolohoodiina uu dhacay, isagoo sidaas ugu aar goynaya walaalihiisa yuhuudda ah oo Boqortooyada Roomaanka lagu cathaabo, ayagoo ay krishtaanku aaminsanyihiin inay yuhuuddu dishay Ciise, Calayhissalaamu, oo ay ayagu Ilaah ahaan u caabudaan. Boqorku arrinkaas ma uusan danayn, isagoo mashquul ku ahaa xarbiyo waawayn oo Boqortooyadiisa ku foorarey, sida la dagaallanka boqortooyada Furus ee Iiraan. Markaasuu Justiiniyaanus wuxuu ergooyin u kala diray boqorka xabashada oo krishtaan ahaa, magaciisuna Kaalib ahaa iyo hoggaamiyaha nasaarada Yaman degganayd, uuna uga codsanayo inay dagaal ku qaadaan Boqortooyada Iiraan, xiriirka ganacsi iyo dhaqaaalena ay u gooyaan, ayagoo ay saddexdoodu isku diin yihiin, oo ay sidaas waajib ku tahay inay u gurmadaan oo ay u hiilliyaan walaalohooda ay isku diinta yihiin oo Roomaanka ah. Gaar ahaan wuxuu ergayguu Justiiniyaanus Boqorka Ximyar ee Yaman uu Boqorka Yamaneed ka codsaday inuu ninka la yiraahdo Qays u magacaabo odayga hoggaamiyah qabiilka Macadd, uuna diyaariyo ciidan wayn oo ka kooban qabiillada Macadd iyo Ximyar, kuna duula Boqortooyada Iiraan.

Thuu Nawaas iyo Muslimiinta

Qays wuxuu ahaa nin geesi ah waxtarna ah, ayna dhaleen madaxda qabiilkiisu. Boqorka Ximyar wuxuu ergayga Boqorka Roomaanka ka ballan qaaday wax suuban inuu yeeli doono, ballankuu galayse ma uusan oofin. Boqorka Ximyar ee Thuu Nawaas wuxuu u arkay inay Boqortooyadiisa ay Dawlado iyo dad krishtaan ahi hareereeyeen, doonayaanna inay xukunka kala wareegaan, oo xagga Koofureedna waxaa ka xigah boqortooyada xabashada ee Al Najaashiyyi, caasimadeeduna Aksuum tahay, xagga Waqooyina waaba ayada uu Boqorka Roomaanku ka codsaday inuu Qays madax uga dhigo qabiilka wayn ee Macadd. Wadnaha Boqortooyadiisana, ee Gobolka Najraan, waaba ayaday ku sugan tahay xarun ka mid ah kuwa ugu xoog badan ee nasaarada. Markaasuu wuxuu is tusay in hadduu krishtaannimada dalkiisa ka tirtiro, uu ciidammada Boqorradaas krishtaanka ah ka ammaan helayo markay dhuullaankiisa usoo dhaqaaqaan, oo ay dalkiisa soo weeraraan. Markaasuu Thuu Nawaas wuxuu nasaarada muslimiinta ahaa ee gobolka Najraan ee dalkiisa degganayd, kuna taagnayd Diinta islaamka ee Nabi Ciise, Calayhissalaamu, usoo jeediyay inay Diintooda ka baxaan oo ay diintiisa yuhuudda soo galaan. Markaasey ka diideen. Markaasaa waxaa kacdoomay muslimiinta degganayd magaalada Thafaar (waa tha korka dhibic ku leh oo caynka ka horreysa), oo mar caasimadda Yaman ahaan jirtayba, oo axbaashta ahaa oo hub qaatay. Markaasuu Thuu Nawaas farriin u diray uu ku leeyahay: "Haddaad is dhiibtaan oo aad Thafaar gacanta ii soo gelisaan, wax dhibaato ah idiin geysan maynno, bal waxaan idinku celineynaa arliga al xabashah adinkoo nabad qabah." Markaasey hadalkiisaas rumaysteen, oo ay usoo bexeen, waxayna ahaayeen saddex boqol oo nin oo dagaalyahan ah. Markaasuu inta qabqabtay wuxuu u dhiibay yuhuudda oo wada dishay. Markaasey intay yuhuuddu Thafaar gashay ayay masjidyadooda gubtay oo ay dab qabadsiisay, ayada iyo intii dhexdeeda ku jirtayba. Markaas kaddib Thuu Nawaas wuxuu warqad u dhigay ninka la yiraahdo Al Xaarith oo madaxda degmada Najraan ka mid ahaa, uuna ku waydiisanayo inuu u yimaado isago wada inta raggooda hub qaadka ah. Al Xaarith wuxuu ahaa Nasaara. Markuu warqadda Boqorka Thuu Nawaas helay ayuu Al Xaarith raggiisa soo aruuriyay oo uu isku keenay, wuxuuna aaday Thafaar oo ahayd caasimadda Dawladda. Intuu halkaas u sii socday ayuu wuxuu maqlay siduu

Thuu Nawaas muslimiintaThafaar u khayaanay, markaasuu gaddoomay oo uu Najraan dib ugu laabtay, halkaasoo uu isku ilaaliyay, isaga iyo walaalihiisa msulimiinta ahba. Markaasuu Thuu Nawaas Najraan ku duulay, markuu tegeyna uu hareereeyey oo uu muddo dul fadhiyay, ilaa ay gacantiisa kasoo gashay. Markaasuu dadkii muslimiinta ahaa wuxuu usoo jeediyay inay Diintooda ka baxaan oo ay diinta yuhuudda galaan, ayaguna way ka diideen. Markaasuu dhufaysyo dhulka ka qoday oo uu jeexay, uuna qoryo ku guray, dabna uu ku shiday. Markaasuu muslimiinta wuxuu ka dhigay qaar uu seef ku laayo iyo wuxuu dabkaas ku dhex rido. Waxaa sidaas ku shahiiday Al Xaarith, oo noqday mid kaniisadaha looga heeso, loogana duceeyo. Waxaa la dilay in ka badan labaatan kun oo muslin oo dabka lagu riday.

Daws iyo Boqorka Roomaanka Justiiniyaanus

Waxaa dilkaas ka baxsaday ninka la yiraahdo Daws thaa Thaclabaan bin Xasaan bin Tubbaan Ascadu Abii Kariba, oo uu dhalay Boqorkii Yamaneed oo uu dilay walaalkiis Camr, kaddib markay reer Yamani sidaas kula talisay. Sababta ay reer Yamani Boqorkaas dilkiisa ugu talisay, oo ay walaalkiis kula taliyeenna inuu dilo waxay ahayd isago Xasaan ahaa Boqor xarbiyo badan oo dalal badan oo Carab iyo cajam ahba ku duulay. Markaasuu mar uu duullaan qaaday, markuu joogo arliga Ciraaq ayay ragga Yamaneed oo ciidankiisa ahaa isagii iyo dagaalkaba naceen, waxayna dooneen inay ehelkooda iyo dalkooda dib ugu noqdaan. Markaasey waxay la hadleen walaalkiis, oo isaguna ciidankiisa ka mid ahaa, waxayna ku yiraahdeen: "Walaalkaa Xasaan dil, annaguna Boqor ahaan ayaan kuu caleemo saareynnaa, dalkeennana dib noogu celi." Markaasuu ka yeelay.

Marka Xasaan, Boqorkaas la dilay wiilkiisii oo magaciisu ahaa Daws Thaa Thaclabaan, ayaa dilkaas Thuu Nawaas kasoo baxsaday, oo saxrada kusoo cararay, socdayna ilaa uu Istanbuul ka tago, taasoo caasimadda Boqortooyada Roomaanka ahayd. Markaasuu Boqorka Roomaanka oo krishtaanka ah u tegey, wuxuuna uga warramay wixii dhacay iyo wixii Nasaarada lagu falay, wuxuuna tusay Kitaab Injiil ah oo uu watay oo qaarkiis gubtay, wuxuuna waydiistay inuu Thuu Nawaas uga hiilliyo. Justiiniyaanus, Boqorka Roomaanku arrinkaas wuu ka fakaray, oo lama uusan laab kicin, wuxuuna is tusay inuusan khayr iyo dani ugu jirin u hiillinta Nasaarada Najraan, kuwaasoo aaminsanaa inuu Ciise, Calayhissalaamu, bashar ahaa iyo Nabi iyo Rasuul Ilaahay soo diray, caqiidadaasoo ka duwan middiisa uu isagu rumaysan yahay oo oraneysa inuu Ciise Ilaah ahaa. Wuxuu kaloo is tusay inay Najraani dalkiisa ka fogtahay: marka yaa og waxay Boqortooyada Iiraan suubin doonto hadduu ciidankiisa Najraan u diro oo uu xarbigaas dhex galo. Markaasuu wuxuu Daws ku yiri: "Beledkaagu waa ka fog yahay beledkeenna, gacanteenuna ma gaarto, oo ma awoodno inaan ciidankeenna ku qabanno, waxaanse warqad u dhigayaa boqorka xabashada oo isaguna diintaan ku taagan, beledkiisuna uu beledkiinna midkeenna uga dhawyahay. Marka isagaa ku taageeraya oo kuu hiillinaya oo kuu gargaaraya, kuna daafacaya, kii ku gardarreystana kaaga aar goynaya, adiga iyo dadka diintaada ku jirana ka xalaaleystay wuxuu ka xalaaleystay."

Markaasuu Justiiniyaanus wuxuu warqad u dhigay walaalkiisa xagga diinta Kaalib boqorka xabashada, uuna ugu sheegayo xaqqa uu ku leeyahay iyo waxa kasoo gaaray dadkay isku diinta yihiin, uuna ku amrayo inuu Daws u hiilliyo, ugana aar gooyo midka isaga iyo dadkay isku diinta yihiin kusoo xadgudbay. Warqaddiina wuxuu ugu dhiibay Daws laftiisa, kaasoo Istanbuul kasoo baxay, soona aaday Aksuum, caasimadda dawladda al xabashah. Waxaa ayaguna boqorkaas xabashada u yimid dad reer Najraan ah oo waydiistay inuu ku taageero la dagaallanka Thuu Nawaas. Markaasuu Al Najaashiyyu wuxuu raggaas ku yiri: "Anigu rag iyo ciidan dagaallama waan hayaa, mase hayo doonyo aan raggaas saaro (oo Badda Cas ka tillaabiya). Marka waxaan

warqad u dhigayaa Justiiniyaanus, oo aan waydiisanayaa inuu maraakiib ii soo diro." Markaasuu boqorka xabashadu wuxuu warqad u dhigay walaalkiis Justiiniyaanus, uuna ku waydiisanayo doonyo uu kula dagaallamo Yaman, uguna hiilliyo diinta Al Masiixu. Sidaas ayay labadaas Boqor ugu heshiiyeen la dagaallanka Yaman. Markay maraakiibtii soo gaareenna Al Najaashiyyu wuxuu saaray ciidan toddobaatan kun oo nin ka kooban, wuxuuna taliye uga dhigay ninka la yiraahdo Aryaadh, kaasoo uu amrkaan siiyay: "Haddaad ka adkaatid dalool raggooda dil (waa marka saddex meelood loo qaybiyo meel), dalool arligoodana kharaabi oo burburi, dalool haweenkooda iyo caruurtooda addoonnimo u qaado." Ciidankaas uu Aryaadh taliyaha u ahaa waxaa ka mid ahaa Abraha, oo isaguna qorshihiisa u gaarka ah watay. Ciidankii Badda Cas ayuu ka tillaabay, uuna xeebta Yaman ku degay. Thuu Nawaas markuu maqlay khabarkooda, ayuu odayadii qabaa'ilka Yamaneed u ciddiray inay ku soo biiraan oo ay dalkooda wadajir u daafacaan. Wayse ka diideen oo waxay yiraahdeen: "Qabiil walba dhulkiisa ha daafacdo." Sidaas ayay talada iyo cududda Yamani ku kala dhanbalantay, oo ay u kala firdheen. Kaddib waxaa iska horyimid ciidankii xabashada oo uu Aryaadh hoggaaminayo iyo ciidanka qabiilka Ximyar oo uu Thuu Nawaas hoggaaminayo. Ciidanka Ximyar waa laga adkaaday, goobtaas ayaana Thuu Nawaas isagoo dagaallamaya lagu dilay. Markaasaa nin la yiraahdo Calqamatu Thuu Jadan, oo Thuu Nawaas geeridiisa u booyaya wuxuu tiriyay gabay ay tixdaani ka mid tahay:

"Awa maa samicat bi qatli Ximyaru Yuusufan
Akala al thacaalibu laxmahu lam yuqbar."

Tixda macneheedu waxaa weeye:

"Ximyar miyeeyan maqlin dilka Yuusuf
Hilibkiisa dawacooyinka ayaa cunay, lamana duugin."

Soo ma aha geeri la mid ah tii lagu dilay Koofil (waa Richard Corfield, oo gaal ingiriis u dhashay oo madaxda ciidammada ingiriiska dalka Soomalida u fadhiday ka mid ahaa, madaxna u ahaa Rukuubleyda - Camel Corps- laguna dilay dagaalkii Ruuga - Dulmadoobe- oo Daraawiishta iyo Ingiriiska dhex maray sagaalka bisha Oktoobar ee kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo toban) askarigii ingiriiska ahaa oo uu Sayyid Maxammad Cabdille Xasan dilay, kaddibna uu yiri:

Koofil

"Adaa Koofilow jiitayaan, dunida joogayne
Adigaa jidkii lagugu wadi, jimic la'aaneede
Jahannama la geeyow haddaad, aakhiruu jahato

Nimankii jannow kacay war bay, jirin inshaalleye
Jameecooyinkii iyo haddaad , jowhartii aragto
Sida Eebahay kuu jirrabay, mari jawaabteeda

Daraawiish jikaar nagama deyn, tan iyo jeerkii dheh
Ingiriis jabyoo waxaa ku dhacay, jac iyo baaruud dheh
Waxay noo janjuunteenba waa, jibashadiinnii dheh

Jigta weerar bay goor barqaa, nagu jiteeyeen dheh
Anigana Jikrey ila heleen, shalay jihaadkii dheh
Jeeniga hortiisey rasaas, igaga joojeen dheh

Jiraayadey ila dhaceen, jilic afkoodii dheh
Siday kuugu jeexeen magliga, jararacdii sheegoo

Billaawuhu siduu kuu jarjaray, jiirarka u muuji

Nafjeclaysigii baan u iri, jaallow iga daa dheh
Jaljalleecadii baa wadnaha, jeeb ka soo ruqay dheh
Jeedaaladii baa indhuhu, kor u jillaadmeen dheh

Jimic kagama helin tuugmadaan, jiriyey ruuxii dheh
Markaan juuq iraahdaba afkey, iga jifeeyeen dheh
Dhaaxaan jalaacaye dheg baan , jalaq la ii siin dheh

Goortaan jarreerana gefoo, nolol ka jaanqaaday
Sida jananadii hore tashigu, igu jaguugnaa dheh
Taladii jinnigu ii hormaray, jaasadeed helay dheh

Jiidaha xanuunka leh markii, la igu jeeraarshay
Jibaadka iga soo baxay dadkii, jiifka qaban waa dheh
Markay rubaddu jaw tiri or bay, iga ag jiibsheen dheh

Jirkaygii bahal baa cunoo, jiitay hilibkii dheh
Jurmidiyo baruurtii dhrwaa, jugux ka siiyaa dheh
Jiljilladiyo seedaha tukay, igaga jaadeen dheh

Haddaan lays jikaareyn tolkey, laga jil roonaa dheh
Weligood waxaa lagu jaraa, jilibdhig duullaan dheh
Daraawiishi waa jibindhowga iyo, jowga soo bixi dheh.

Kaddib ayaa waxaa Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan soo gaartay inay koofil walaashiis weer madow xiratay, ingiriisna ay waydiisatay inuu siiyo ciidan ay Daraawiish kula dagaallanto oo ay walaalkeed u aargoyso. Markaasuu wuxuu Sayyidku tiriyay gabay magaciisu yahay Koofil walaashiis, wuxuuna ku yiri:

Koofil Walaashiis

Casayrow adaa muudayoo, meel xilluu kiciye
Adigaaa magaalooyinkii, mari ishaaleeye
Warka lagama maarmee haddii, madal laguu yeesho

Mid yar baan ku sii farahayaa minka ka higaadi
Inkastey majaha kaa xiraan, muuji hadalkeyga
Gabaygaa ha lagu maadsadee, uunka maqashiiya

Waa mahad Ilaahay haddii, Koofil mowd yahaye
Ingiriisba meeshii ka maray, maara waayuhuye
Maantana midkii soo baxaa, mowtigiis galay dheh

Midgaantii walaashiis ahayd, waa tan murugoone
Intay calal madow qaadatay, oohin miratаa dheh
Waa wax maanka laga dhoofiyee, ha iska mowleyso.

Aryaadh markuu Thuu Nawaas ka adkaaday, wuxuu meel mariyay amarkii Boqorkiisa, oo dalool raggii Yamanna wuu laayey, dalool arligaasna wuu burburiyay, dalool

haweenkii iyo caruurtiina wuxuu addoon ahaan ugu diray Al Najaashiyyi ee Boqorka arliga Xabashada, oo suuqa lagu kala gatay.
Markaasey Yamani maahmaah ka dhigatay wuxuu dhibaato Daws Thaa Thaclabaan usoo hoggaamiyay, oo xabashada ah, oo Yaman waxay ku fashay ku fashay. Maahmaahdaasna wa sidatan: **"Laa ka Dawsin wa laa ka aclaaqi raxlihi"**, oo ah "Maya oo ma dooneynno wuxuu Daws falay oo kale iyo wuxuu watay," oo amxaaraduu keenay ah. Gabayo badan oo dheerdheer ayay reer Yaman ka tiriyeen hoogga iyo ba'da ay amxaaradu dadkooda iyo dalkooda ku faleen, siday dalkii iyo daarihii u burburiyeen iyo waxay kuwa madow haweenkooda ku faleen. Gabayaagaas waxaa kuwa ugu af dheer ka mid ahaa Thuu Jadan Al Ximyariyyi. Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan kuwa amxaarada iyo gaalada Soomilida Muslinka ah ssoo gelisay, oo Soomaalida waxay ku faleen ku falay, wuxuu ka yiri waxaa ka mid ahaa, gabayga **Afbakayle** la yiraahdo. Abbakayle waa meel degmada Laas Caanood afartan Mayl dhinaca Galbeed ka xigta, waana goobtii ugu horreysey oo ay Darawiishta iyo Ingiriis dagaal hubaysan isaga hor yimaadeen saddexdii bisha Maajo ee kun iyo sagaal boqol iyo kow.

Xuseenow caqligu kaama baxo
(Afbakayle)

Xussenow caqligu kaama baxo, idam Ilaahaye
Ha laguu aqbalo duca san baan, kuu akhriyaaye
Ifkana waaya noo joog, nimaan aaminaad tahaye

Haddaad umaaddo waan kuu hubaa, ina uduu khayre
Asaxaabihii baad u tegi, udugga weynaaye
Irdihii jannada inaad ka geli, waa ogsoonahaye

Hawl kalana waa eray yaraan, kuu erganayaaye
Alla igama qaadow adaan, kala ilaaweynee
Eedaanka maqal waa Salaad, loo addimayaaye

Ilaahii abuurayba kuwii diiday, amarkiisa
Ambiyaalihii iyo kuwii, owliyada caayay
Asxaabtii dariiqada kuwii, awlaxa u qaaday

Ikhyaarkooda nimankii kufriga, ugu adeegaayey
Aan lagu igraahine kalgacal, ugu abraaraayey
Kuwii ubad nasaaraad noqdee, ferenji aaneystay

Nimankii Amxaara u kecee, Adarinuu guurey
Oo Aw Cabbaas diley, dadkaan eedi kala gaarin
Oo uunka kala fiijiyee, kala irdheysiiyey

Nimankii Amxaara u kecee, Adarinuu guurey
Oo Mililikh aabe u yehee, u arrin qaadaayo
Oo Xabashi eedi u noqdee, u ololaynaayey

Ingiriiska nimankii wadee, nagu aseebaayey
Afbakayle nimankii kufriga, uraya noo keenay
Ee Oodagooyoiyo na dhigay, aydii Daratoole

Nimankii ikhwaankii jaree, aabiga u laayey
Ragga ehelukhayrkaa warmaha, kala ajoon waayey
Oo umal daraadiis girliga, ugu afuufaayey

Idilkoodba nimankii dagaal, iigu imanaayey
Nimankaan inkaaree madfaca, ololi ii haystay
Ee ubaxcaddaydii hartiga, oofta kaga joojay

Nimankii iniinaha ka dhigay, Ilig wixii joogay
Ee Eeraago iyo Batalo, igu uquumeeyey
Ee omoska Beerdhiga tukaha, igu ormaysiiyay

Nimankii ayaantii Gumburo, oboda ii dhiibay
Ardaashii Jidbaale i heshee, igu unuun goysey
Nimankii uluuf iyo uluuf, igu agoomeeyey

Nimankii adduunkaygii dhacay, ariyo geeliiba
Anigoo islaamaba, ii arxami waayay
Nimankaan Ilaahow lahaa, eyda iga doono

Abaalkayga nimankii ba'shee, ii istixayn waayey
Ahabtiyo ergeyntii kuwii, lagala ayn waayey
Nimankii ijaabada ka tegey, aakhiru sabanka

Nimankii iblays nagu diree, naga ajoon waayay
Nimankii arlada Eebahay, naga ugaareeyey
Nimankii awaaraha buska leh, nagu eryoonaayay

Nimankii abaartii Caleed, Bari na aadsiiyey
Argalkiyo rasaastii kuwii, nagu igbaaraayey
Ee urugadaan qabiyo ciil, igu abaadsiiyey

Nimankii ilmada iga qubee, oohin iiga keenay
Nimankaan ku alaaladay markii, uunku wada jiifay
Nimankii ajuurada cunee, iibka ii bixiyay

Nimankii intaas nagu falaan, na asaraareynin
Waxba yey addoomada Ilaah, nooga aargudine
Waxba yaan aduun layga siin, ilintidaydiiye

Utuntayda waa heli haddaan, iilka lay dhigine
Araraha intaan marahayey, igu arkaayaane
Maruun baan sidii aar libaax, oodda soo jebinne.

Wuxuu kaloo gabayga **Dardaaran** la yiraahdo ku yiri, kaddib markii uu Ingiriis kun sagaal boqol sagaal iyo toban markii ugu horreysey taarikhda Afrika uu dayuurado dagaal kusoo kiciyay Xarunta Darwaawiishta ee Taleex tiillay oo uu duqeeyey, dhulkana kasoo weeraray, Sayyid Mammad Cabdille Xasanna uu Koofur u guuray, ayuu gabaygaan tiriyay, wuxuuna yiri:

Dardaaran

Min daroofle aqal daahya weyn, dadab la heedaamay
Dermo iyo firaash lagu gam'iyo, daalam iyo googgo'
Aniga oo waxaan doonayaba, derajaday haysta

Iyo duni wixii nagaga lumay, dararkii Ceeldheero
Dab wax gubi dayuurado kufrigu, nagu dul gawdiidshey
Dumbuq subuca degalkaan ka kacay, dahab wixii yiillay

Dhakhal jabay wixii daar burburay, ama bukaar duugmay
Didibtii bannaanayd wixii, dad iyo maal jiifay
Diric iyo waxay shiikh dileen, ama duq waayeela

Maxajabad daboollayd wixii, gaal u dhukhuulaayey
Dabatoobka Iidoor wuxuu, darayey caarkiisa

Lo' durdura wixii deebla geel, nala ka sii daayey
Dullihii shareerraa wixii, daal na caga gooyey
Dirrowgii qabsaday reerkayga, dalankicii gaaray

Dulkuneefle kaan soo ag maro, duullaan ka hor geyska
Dan la'aan waxay nagu faleen, darab nijaaseedku

Doonyaha shammalka ah haddii, dakhalka loo laalo
Maruun baa dabaylahaa sidaa, kor u dandaanshaane
Oo doofaarradii ku jiray, daraxu caynshaaye

Dabro cudura duumo iyo furuq, waxa dadkii xaaqqay
Annagu diidi maynoo mar baa, Daayin noo wacaye

Ninkiise tiisa loo deynayaa, haygu diirsado e
Kolna haddaan cid laga deynahayn, mowdka dabaqdiisa
Ninkii haatan nagu diganayow, dan iyo xeeshaa

Dangaraaradii nagu dhacdiyo, webi dabaashiisa
Inkastoo daleel nala dhigaan, docna nagu cayman
Duuflaalladii naga harow, dan iyo xeeshiinna

Doodna waxaan u leeyahay dadkeer, hadalka deyn waayey
Nimanyahow damiinnimada waa, lagu dulloobaaye
Dadku wuxuu jeclaystaa waxaan, duxi ka raacayne

Dagaalkii nasaarada anaa, daalib ku ahaayee
Dalka ma lihid anigaa ku iri, doora weynaha e
Daliilkii Rasuulkii anaa, doonayoo helaye

Anaa diiday maantuu lahaa, deeqan iga hooye
Diinkayga anigaan ku gadan, dabaqi naareede
Anaan labada daarood tan hore, derejo moodayne

Markay duushay gaaladu anaan, daabbaddu rarine
Goortay dareereen anaan, diiradduu qabane
Anigaan dariiqiyo waddada, dowga sii marine

Anaan doora weynow kufriga, daacadnuu geline
Ferenjiga dirayska leh anaan, diiradduu qabane
Sida doxorka Iidoora anaan, duudxammaal noqone

Doofaarka eyga ah anaan, daarihiis geline
Anigaan dillaalkiyo ardiga, duubiguu xirane
Anigaan dariiqada Alliyo, Diinta caasiyine

Daarood Ismaaciil ma oga, dowga loo qodiye
Waa wixii durbaan tumay markaan, dowga sii maraye
Waa wixii dayoy yiri intuu, soo dabbaaldegayee

Dadow maqal dabuubtaan ku iri, ama dan haw yeelan
Ama dhaha darooryiba jiryaye, doxorku yeelkiisa
Nin ragey dardaaran u tahaye, doqon ha moogaado

Daw lagama helo gaal haddaad, daawo dhigataane
Waa idin dagaayaa kufriga, aad u debcaysaane
Dirhankuu idiin qubahayaad, dib u go'aysaane

Marka hore dabkuu idinka dhigi, dumar sidiisiiye
Marka xigana daabaqadda yuu, idin dareensiine
Marka xiga dalkuu idinku oran, duunya dhaafsada e

Marka xiga dushuu idinka rari, sida dameeraaye
Mar haddaan dushii Adari iyo, Iimey dacal dhaafay
Maxaad igaga digataan berruu, siin la soo degiye.

Ingiriisku wuxuu dilay dalool shacbiga Soomaaliyeed

Qorallada ay reer galbeedku dhigeen waxay ku sheegeen inuu ingiriisku waagaas shacbiga soomaalida ka dilay dalool, oo ah marka saddex loo qaybiyay qayb.
Gabaygaan soo socdana, oo la yiraahdo Maqashiiya Uunka, wuxuu u dhiibay labada nin oo la kala oran jiray Cabdalla Shixiri iyo Xirsi Afdiir, oo aqoon dheer u lahaa afafka qalaad ee reer galbeedka, ummadaha shisheeyaha dhex markooda iyo Diinta Islaamkaba, wuxuuna yiri:

Maqashiiya uunka

Cabdalla maan qaboobiyo, Xirsi maakib laawow
Mid yar waxaad tiraahdaan, murtadiinta reer Hagar
Habaryoonis madasheeda, mariya weedha aan iri
Toljeclaha muraadkaygiyo, masaafadayda ula taga
Maqashiiya uunkaba, miyir inuu ku soo galo
Mid mid waxow tiraahdaan, nimanka mooradii furay
Mawaacidada Diinkii, ma wax leysku maagaa?!
Jahaadka moosinkii galay, ma wax laga maqnaadaa?!

Mushaarada beenihii, ma wax lagu mannaagaa?!
Loxodkii madoobaa, ma lays moogadeeyaa?!
Muufada cadaabeed, maw adkaysanaysaan?!
Gaal nin u midiidimay, maqaan naara inuu tegi
Kutubtaa u maragee, ma wax lagu murmaa baa?!
Mushrik inaad jeclaataan, amaad mudan ku sheegtaan
Haddaydnaan mujrim ahayn, masala maad u haysaan?!
Masala-gaabyadiinnaa, meel daran idiin dhigay
Muftiga waanadiisii, idinkaa ka maagtoo
Macbuudkii Rabbi ahaa, idinkaaba moogoo
Maxsharkiyo qiyaamaha, idinkaa munkirayoo
Muqfiradii Ilaahay, idinkaa ka maarmoo
Macaankii Firdowsana, idinkaa muraystoo
Muuminnimada laabtaa, idinkaa mantagayoo
Minadiinna gaalowday, idinkaa muquunshoo
Kufriga i mahoobbiyey, idinkow miciinoo
Makaankii shareecada, idinkaa matamiyoo
Muslinkiyo qusuusidda, idinkaa makalaayoo
Maalkii agoomeed, idinkaa malhabayoo
Masxafkiyo Quraankii, idinkaa maljadayoo
Waxse mowtigiin galay, ama meleg idiin yimi
Markaad Maxammadkiinnii, malcuun uri ka raacdeen!
Mariyoo macneeyaye, mid kaleeto wuxuu yahay
Waxaan maqallay ferenjigu, inuu miiri idin qoray!
Waxaan maqallay maalkii, inuu idinka meersaday!
Waxaan maqallay ooryaha, mid san inaad ka weydeen!
Waxaan maqallay madaxdiinna, in midiidin laga dhigay!
Aan miis yar mooyee, Maydho geel la siinayn!
Waxaan maqallay maahyahow, magaciin inuu ba'ay
Intaasoo masiibaa, waxa igala maad badan
Maska iyo abeesada, magta aad ka bixiseen!
Aanad midigta fidinayn, aar hadduu ku miciyayn!

Dadka maanta amxaaro la yiraahdo waa dad Carab reer Yaman ah, una dhashay qabiilka la yiraahdo Ximyar, taariikhda ay tirsatana waa taariikhda Ximyar, oo amxaaro waa Ximyar oo la is daba mariyay.

Yaman oo gumaysiga xabashada hoos gashay

Kaddib Aryaadh wuu socday isagoo magaalo kasta oo uu qabsado mid kale uga sii gudbaya, ilaa Yaman oo idil ay isaga u xasishay oo uu gacanta ku dhigay. Sidaas ayay Yamani waxay ku noqotay mustacmarad xabashiyeed. Markay sidaas sanooyin ahayd ayuu ninka la yiraahdo Abraha, oo ciidanka Aryaadh ka tirsanaa, wuxuu doonay inuu Boqornimada Aryaadh kala wareego. Markaasuu xukunka ku qabsaday. Markaasuu ciidankii xabashadu labo u kala jabay, oo uu jab Aryaadh la saftay, jabka kalena uu Abraha la saf noqday. Markaasaa waxaa lagama maarmaan noqotay inuu dagaal dhaco si loo kala baxo. Markaasuu Abraha inta ciidanka raacsanaa soo watay uu xagga Aryaadh soo aaday, oo ay labadii ciidan isu soo dhowaadeen. Markaasuu Abraha farriin u diray Aryaadh, uu ke leeyahay: "lagaa yeeli mayo inaad labo ciidan oo xabasho ah iska hor keentid oo ay markaas is baa'bi'iyaan, ee adigu ii soo bax, anna waan kuu soo baxayaaye, oo labadeenna midkii la dilo ciidankiisu midka adkaaday ha

raaco." Aryaadh, markuu farrintaas helay wuxuu u soo faray Abraha farriin uu ku leeyahay: "Gar ayaad soortay, ee soo bax." Markaasuu Abraha usoo baxay, wuxuuna ahaa nin gaaban oo hilib badan. Aryaadhna wuxuu ahaa nin wayn oo dheer oo qurxoon, gacantana wuxuu ku sitay waran markuu soo baxay. Abraha wuxuu dhabarka iska mariyay taag uu ku qarsoon yahay nin addoon ah oo uu isagu lahaa, lana oran jiray Catwadatu. Markaasey markay labadoodii isu soo dhowaadeen ayuu Aryaadh inta warankiisa kor u qaaday tuuray oo uu Abraha madaxa uga dhuftay, isagoo madaxa la doonayey. Warankiise wuxuu Abraha uga dhacay wajiga, isagoo jeexay sunnada indhaha iyo ishiisa iyo sanka iyo dhabanka iyo bashimahaba. Taas ayaana u sabab ah in Abraha loo bixiyay Al Ashramu, oo sharima waxaa weeye waa jeexay, waa dillaaciyay. Marka Abraha Al Ashramu waa Abraha dhaban ama canjeex. Markaasaa waxaa Aryaadh soo weeraray addoonkii Abraha ee ahaa Catwadatu, oo dhabarka Abraha uga yimid, oo dilay. Sidaas ayuu ciidankii Aryaadh wuxuu raacay oo uu u hoggaansamay Abraha, ciidankiisana ku darasamay. Markaasey xabashadii Yaman oo idil ay Abraha isugu timid, oo ay u wada hoggaansantay.

Boqornimada Abraha ee Yaman

Markuu warka ku saabsan wuxuu Abraha falay uu boqorka xabshada Al Najaashiyyi gaaray si xun ayuu u carooday, wuxuuna yiri: "Amiirkeygii aan magacaabay oo wakiilka iga ahaa ayuu dilay amarkeyga la'aantiis", wuxuuna ku dhaartay inuu dalkiisa cagta mariyo (waa Yaman) isagana uu guudka ka gooyo (oo dilo). Markuu khabarkaasu Abraha gaaray, ayuu madaxa iska xiiray, jiraabna uu ciidda Yaman ka buuxiyay, labadoodiina uu Al Najaashiyyi u diray, warqadna uu u raaciyay, uu ku leeyahay: "Boqorow, Aryaadh wuxuu ahaa addoonkaaga, aniguna waxaan ahay addoonkaaga, amarkaaga ayaanna isku khilaafnay, annagoo labadeennuba aan adiga daacad kuu nahay, anigaase amarka xabashada uga xoog badnaa, amarkaasna uga adkaa, ugana siyaaseysnaa oo uga maareyn fiicnaa. Madaxayga oo dhan ayaan xiiray markay dhaarta Boqorku isoo gaartay, waxaanna usoo diray jiraab ciidda Yamaneed ah, si uu labadiisa cagood hoostooda dhigo oo uu cagihiisa mariyo, oo uu sidaas dhaartiisii u meel mariyo." Markay timihii iyo ciiddii Al Najaashiyyi gaareen, raalli ayuu ku noqday, wuxuuna Abraha usoo diray dhambaal oranaya: "Hawshaada aad arliga Yaman ka haysid ku sugnow ilaa uu amarkeygu kaaga yimaado."

Sidaas ayuu Abraha wuxuu ku noqday Boqorka Yaman oo ayan cidna ku haysan.

Afka xabashada Abraha macnihiisu waxaa weeye "midka wajiga cad" Waxaa la yiri inay dadka xabashada la yiraahdo yihiin ubadka ninka la yiraahdo Xabashu bin Kuush bin Xaam bin Nuux, Calayhissalaamu. Waxaa kaloo la yiri waa ubadka ninka Carabta Yamaneed ah oo la yiraahdo Xabashu, uuna ku abtirsado qabiilka Yamaneed oo la yiraahdo Xabashah. Waxaa kaloo la yiri waxay walaalo yihiin oo ay wada dhasheen ninka la yiraahdo Barbar oo waa ubadka ku abtirsada ninkii magaciisu ahaa Jaaluut (oo uu Al Mascuudi yiri waa Jaaluut bin Baayuul bin Riyaal bin Xadhaan bin Faaris) oo u dhashay qabiilka Carbeed ee Al Camaaliqah, uuna dilay Nabi Daauud, Calayhissalaamu, siduu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, noogu sheegay Aayadda laba boqol kow iyo konton ee Suuratul Baqarah. Runtana Rabbi ayaa og.

Abraha markuu Yaman gacanta ku dhigay, oo ay u sugnaatay, ayuu wuxuu u yeeray Abuu Murrata Sayf bin Thii Yazin, oo odayga Yaman ahaa, wuxuuna ka qaatay haweentiisii magaceedu ahaa Rayxaanatu bintu Calqamah bin Maalik. Haweentaasi waxay Abuu Murrata u dhashay Macdii Karib bin Sayf bin Thii Yazin. Markuu haweentaas ninkeeda ka qaatay, ayuu Boqorad ka dhigay, uuna guursaday, waxayna u dhashay wiilkiisa Masruuq bin Abraha. Wiilkaas waxaa Masruuq u bixisay Carabta Yaman, uguna bixiyeen in hooyadiis laga xaday ninkeedii qabay, oo Masruuq

macneheedu waa "Midka la xaday". Wilkaas waxaa kaloo la oran jiray Thii Shanaatir, oo aabihiis ayaa wuxuu madax uga dhigay oo uu siiyay dhulka la yiraahdo Shanaatir. Al Shanaatiru afka Ximyar waxaa la yiraahdaa faraha gacanta oo middiina waa Shunturatu. Markay Yamani u xasishay, maalkiisuna uu batay, ayuu Abraha wuxuu ku noolaaday nolol boqornimo iyo hodannimo, wuxuuna dhistay qusuur waaweyn, kaniisadana wuxuu ka dhisay gobollada Ma'rib iyo Thafaar iyo Sanca iyo Najraan, halkaasoo uu diinta krishtaanka ka fidin jiray, Carabtana uu ugu yeeray inay Kaniisaddiisa Sanca usoo xajiyaan. Wiilkiisa kale oo magaciisu ahaa Aksuum, hooyadiisna ay xabashiyad ahayd, wuxuu u dhiibay talada gobolka Macaahir, markaasaa loo bixiyay Thii Macaahir. Sidaas ayuusan Abraha dhegna u raaricin jirin codsiga uga yimaada Boqorrada Roomaanka oo ahaa inuu Xijaaz ku duulo, isagoo ka baqanayey kulaylkeeda iyo saxradeeda iyo oomaneheeda, oo ma uusan doonayn inuu Boqortooyadiisa ku khamaaro, oo uu halkaas harraad ugu dhinto siduu Paulus Gallus ugu dhintay oo kale, kaasoo uu Boqorka Roomaanku u soo diray inuu dalalka Carabta usoo gacan geliyo. Abraha wuxuu doonay inuu qabiil walba oo carbeed goonidiisa u maamulo, oo uu ku dhaqo talada ah kala qaybi oo xukun. Markaasuu wuxuu nin Carab ah u magacaabay Xaakimka gobolka Tihaamata oo ka kooban qaar Yaman ka mid ah iyo Xijaaz, ayna ku yaalliin Makkata Al Mukarramati iyo Al Madiinata Al Munawwarati. Markuu u tegey ayay raggii gobolkaas degganaa dileen, ayadoo uusan hore ninna u talin. Wuxuu kaloo Abraha caleemo saaray ninka la yiraahdo Muxammad bin Khuzaacii, wuxuuna madax uga dhigay qabiilka wayn ee Mudar (waa daadka kor dhibicda ku leh), wuxuuna ku amray ninkaas inuu dadka ugu yeero inay kaniisaddiisa Sanca ku taalla usoo xajjiyaan, intay Makkah u xajjin lahaayeen. Ninkaasi markuu arliga Mudar tegey ayay waxay u direen nin Huthayl u dhashay oo fallaar ku dhejiyay oo dilay. Abraha arrinkaan aad ayuu uga carooday, wuxuuna arkay in inkastoo ay Carabi qabaa'il kala duwan yihiin, hadana waxa ka dhexeeya oo ay heshiis ku wada yihiin Kacbada Makkah ku taalla inay tahay. Markaasuu goostay inuu Gurigaas dumiyo, si ay Carabi u kala firdhato, oo uu sidaas ku wada xukumo. Markaasaa waxaa dhacay, hadana, arrinka ninka reer Banii Kinaanah u dhashay oo kaniisaddiisa musqul ahaan u isticmaalay. Markaasuu Abraha wuxuu gurmad weydiistay Al Najaashiyyi, si uu Makkah ugu duulo, kaasna uu ciidan iyo maroodiba u soo diray. Markaasuu Wuxuu Abraha isku diyaariyay weerar xoog leh oo ayan Carabi mid la mid ah hore u arag, si ay isku gaaraan gacnaha krishtaanka xabashada iyo Yaman ee Xijaaz Koofurta ka xigah, iyo krishtaanka Shaam oo ay reer Ghassaan Boqorrada u yihiin, iyo krishtaanka Boqorrada Roomaanka ee Caasimaddoodu Istanbuul tahay, oo Xijaaz Waqooyiga ka wada xigah. Qorshahana waxaa ka mid ahaa inay dadka Makkana, markay Kacbada dumiyaan, krishtaan ka dhigaan, Kacbadana ay Krishto suraan. Sidoo kale, waxaa qorshohooda ka mid ahaa in intaas kaddib ay Boqortooyada Iiraan oo dabka caabudi jirtay, ay labada dhinac ee Koofur iyo Galbeed isla mar kasoo weeraraan, si ay halkaasna Caasimaddooda Al Madaa'in krishto u suraan, dadkoodana ay krishtaan ka dhigaan, oo sidaas adduunkoo idil krishtaan ku noqdo, isla markaasna ay dhaqaalaha adduunka oo idil gacanta ku dhigaan iyo ganacsiga iyo waddooyinka ganacsiga loo maraba.

Abuu Murrata Sayf bin Thii Yazin iyo Kisraa Anuu Shirwaan

Markaasuu Abuu Murrata Sayf bin Thii Yazin wuxuu aaday oo uu u tegey Boqorka Iiraan, oo magaciisu ahaa Kisraa Anuu Shirwaan. Kisraa waa magac uu qaato Boqor kasta oo Iiraan, sida uu Boqor kasta oo Masartii hore Fircoon loo oran jiray, Boqor kasta ee arliga xabashada Al Najaashiyyi loo oran jiray, Boqor kasta oo Roomaankana Qaysar loo oran jiray, maantana nin walba oo dal madax u ah Madaxweyne loo

yiraahdo. Anuu Shirwaan macneheedu waxaa weeye Midka Boqortooyada cusbooneysiiyay, kaddib markay burburtay oo ay googo'day. Abuu Murrata markuu Kisraa u tegey wuxuu weydiistay taageero si uu xabshada dalkiisa uga saaro, Kisraana waa ka oggolaaday, ballankiisaas-se ma uusan oofin. Abuu Murrata halkaas ayuu ku sugnaa, isagoo dhawraya inuu Kisraa ballankiisa oofiyo, wuxuuna sugayay toddoba sano, isagoo weli sugaya ayuuna halkaas ku dhintay.

Sayf bin Thii Yazin iyo Qaysarka Roomaanka

Kaddib wiilkiisa Sayf bin Thii Yazin ayaa markuu gumeysiga Xabashada iyo dulligooda u adkeysan waayey, ayuu isaguna wuxuu aaday Qaysar Boqorka Roomaanka ee caasimaddiisu Istanbull ahayd, si uu taageero ku weydiisto, ayadoo ayanba qalbigiisa ku soo dhicin inuu Boqorkaasi krishtaan yahay, oo uu sidaas Abraha walaalkiis xagga diinta yahay, uuna la wado qorshaha ku duulidda Makkah Al Mukarramah iyo krishtaaneynta Carabta, si ay krishtaanka Koofureed iyo kuwa Waqooyi isu gaaraan oo uusan dhul diin kale ku taaganba uusan u dhexeyn. Boqorka Roomaanku markuu Sayf la hadlay oo uu taageero weydiistay, wuxuu ugu jawaabay inay Yamani arligiisa ka fogtahay, gobolkaasna uusan dan iyo xaajo ka lahayn. Sayf wuxuusanba ogayn inuu ahaa Boqorka Roomaanka midka soo abaabulayba duullaanka xabashada ee Yaman iyo ujeedadiisa fog oo aan soo sheegnay.

Sayf bin Thii Yazin iyo Al Nucmaanu bin Al Munthir

Sayf wuxuu Istanbuul kasoo laabtay isagoo fara maran. Kaddib wuxuu aaday Al Nucmaanu bin Al Munthir (waa thaal dhibic kor ku leh oo deelka ku xigah), Boqorka Carbeed ee Al Xiirah, oo hadda arliga Ciraaq ka mid ah, wuxuuna ugu tegey qasrigiisii la oran jiray Al Khawrnaqu. Al Nucmaan bin Al Munthir wuxuu gobolkaas wakiil uga ahaa Kisraa Boqorka Iiraan, oo ay boqortooyadiisa ka tirsanayd. Al Nucmaan waa eray macnihiisu yahay dhiig, oo wuxuu la mid yahay Al damu. Markaasuu dhibaatada ay xabashadu Yaman ku hayso uga eed sheegtay. Al Nucmaan wuxuu Sayf ku yiri: "Anigu sanadkiiba mar ayaan Kisraa wafdi ahaan ugu tagaa. Marka ila joog ilaa waqtigaas aan aadayo laga gaaro, markaasaan kuu geynayaa." Caasimadda Boqortooyada Iiraan waxay ahayd Al Madaa'in oo hadda Ciraaq ku taalla, Baghdaadna u jirta shan iyo labaatan Mayl, uuna furtay Amiirul Mu'miniin Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee, bisha Safar ee sanadka lix iyo tobnaad ee Hijrada. Ciidammada furtayna waxaa taliye u ahaa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, abtigiis Sacad bin Abii Waqqaas, Allaha raalli ka noqdee. Markay Al Madaa'in tageen, Al Nucmaanu bin Munthir wuxuu Sayf bin Thii Yazin u geeyey Kisraa Anuu Shirwaan bin Qubaath (waa thaalka dhibicda kor ku leh oo deelka ku xiga). Sayf waxaa laga soo geliyay albaab caam ah oo dadku ka soo wada galo , markaasuu wuxuu soo galay oo uu xagga Kisraa usoo socday isagoo madaxa foorarinaya. Markaasuu Kisraa wuxuu yiri: "Midkaan doqonka ahi albaabkaas fog ayuu iiga soo gelayaa, markaasuu madaxiisa foorarinaya". Warkaas markii Sayf loo sheegay ayuu wuxuu yiri: "Boqorow waxaan sidaas u yeelay ayadoo ay kurbada i haysa wax walboo kale ay ka wayntahay." Markaasuu Kisraa u oggolaaday Sayf bin Thii Yazin inuu hadlo, kaasoo yiri: "Boqorow, beledkeennii waxaa nooga adkaaday xabasho, waxaanna kuugu imid inaad ii hiillisid, kaddibna aad dalkeyga yeelatid (markaan xabashada ka saarno)". Kisraa wuxuu ogaa in Boqortooyada Roomaanka iyo midda xabashadu ay isaga daraadiis isku gaashaanbuursadeen, wuuna maqlay sida ciidankii maroodiga Makkah loogu jebiyay. Marka wuxuu doonayey inuu xooggiisa wada haysto,

wuxuuna Sayf ugu jawaabay: "Beledkaagu waa fogyahay, khayrkiisuna waa yaryahay, mana doonayo inaan ciidanka Iiraan arliga Carabta geeyo, oo xaajo kama lihi." Kaddib wuxuu Kisraa Sayf bin Thii Yazin siiyay toban kun oo Dirham iyo arratir qurxoon. Markuu intaas gacanta ku dhigay oo uu qasriga kasoo baxay, Sayf wuxuu lacagtii u firdhiyay oo uu siiyay dadkii qasriga agtiisa joogay. Khabarka waxaa uu sameeyey wuxuu gaaray Kisraa, kaasoo yiri: "Ninkaan waxbuu u dan leeyahay", wuuna u ciddiray, markuu u yimidna wuxuu ku yiri: "Maxaa kugu xambaaray inaad hadiyadduu Boqorku ku siiyay aad dadka u firdhisid?" Sayf wuxuu yiri: "Buuraha dalkeyga aan ka imid ma aha waxaan ahayn dahab iyo qalin", taasoo uu Kisraa hore ugu maqlay. Markaasuu Kisraa madaxda Dawladdiisa shiriyay, uuna ku yiri: "Muxuu amarka ninkaani idinla yahay, maxaadna wuxuu doonayo aad ka leedihiin?" Waxay yiraahdeen: "Boqorow, xabsiyadaada waxaa ku jira rag aad dil ku xukuntay. Marka, haddaad raggaas ninkaan ku dartid oo ay ciidan u noqdaan, hadday le'daan oo la dilana waa sidaad la dooneysey, hadday adkaadaanna waxaa kugu soo korortay Boqortooyo kale". Markaasuu Kisraa Anuu Shirwaan bin Qubaath wuxuu Sayf bin Thii yazin siiyay oo uu ku daray toddoba kun iyo shan boqol oo nin, siduu Ibnu Qutaybah yiri. Tirooyin kalena waa la sheegay.

Taajka Kisraa

Taajka Kisraa wuu ka culusaa inay qoortiisu qaaddo oo ay xajjiso, wuxuuna surnaa silsilad dahab ah oo carshigiisa korkiisa kasoo laadlaaday. Taajku wuxuu le'ekaa beegga la oran jiray Al Qanqalu, oo qaadey saddex iyo soddon Man, halkii man-na waa laba rodol, oo sidaasuu wuxuu ku ahaa beeg lix iyo lixdan rodol qaada. Taajku wuxuu ka samaysnaa dahab lagu dheehay yaaquut iyo luul iyo zabarjad iyo qalin, waxaana ku daboolnaa maro. Markuu Kisraa carshigiisa ku fariisto, ayaa marada laga qaadi jirey oo uu madaxiisa dhex gelin jiray. Marka marada laga faydo, qofkaan hore u arkin, wuu jilbo jabsan jiray oo sida awrta ayuu u arrunsan jiray (fariisan jiray) haybaddiisa daraadeed. Sidaas ayuuna Sayf bin Thii Yazin, markuu usoo galay, uu sida ratiga oo kale u jilbo jabsaday. Markay Al Madaa'in Muslimiintu furteen bisha Safar ee sanadka lix iyo tobnaad ee Hijrada, waxaa taajkaas loo keenay Amiiru Al Mu'miniina Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee, markii salab ahaan looga soo furtay Kisraa Yazdajird bin Shahriyaar, oo ka dhaxlay awoowihiis Anuu Shirwaan. Markaasuu Cumar wuxuu u yeeray Suraaqata bin Maalik Al Mudlijiyyi, Allaha raalli ka noqdee, wuxuuna gacnaha u suray dugaagadihii Kisraa, taajkiina madaxa ayuu u saaray, wuxuuna ku yiri: "Waxaad tiraahdaa: Al xamdu li Allaahi, Ilaaha Kisraa, Boqorka Boqorrada, taajkiisa madaxiisa kasoo siibay, saarayna madaxa nin Carab ah oo reer miyyi ah oo reer Banii Mudlij u dhashay, taasna lagu helay cizziga iyo xoogga Islaamka, oo aan tabarteenna lagu helin." Cumar wuxuu Suraaqah taajka iyo dugaagadaha gooni ugu siiyay, ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu Suraaqah ku yiri: **"Yaa Suraaqu kayfa bika ithaa** (waa thaalka dhibicda kor ku leh oo deelka ku xiga) **wudica** (waa daadka dhibic kor ku leh oo saadka ku xiga) **taaju Kisraa calaa ra'sika wa iswaaruhu fii yadayka",** ama sida uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiriba. Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Suraaqow bal ka warran marka taajka Kisraa madaxa laguu saaro, dugaagadihiisana labada gacnood laguu geliyo?!". Xadiithka waxaa kaloo wariyay Al Bayhaqii, kuna wariyay kitaabkiisa Dalaa'ilu Al Nubuwwah mujalladka saddexaad bogga boqol kow iyo soddon.

Boqorrada Iiraan iyo inayan haweeney dawlad muslim ah madaxweyne ama boqrad u noqon karin

Abarwayz kaddib wiilkiisa Saabuur bin Abarwayz ayaa qiyaas in laba bilood ku siman ee waqtigii Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Boqornimada hayey. Isaga dabadiisna waxaa Kisraa noqday walaalkiis Shiirawayh, oo Boqornimada qiyaas laba bilood hayey. Isaga dabadiisana waxaa Boqorad noqotay walaashood Buuraan. Markuu khabarka caleemo saarkeedu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gaaray ayuu wuxuu yiri: **"Laa yuflixo qawmun malakathum imra'atun",** siduu ugu wariyay Al Bukhaarii mujalladka lixaad bogga tobanaad. Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ma liibaanayo qawm ay haweeni Boqorad (Madaxweyne) u noqotay." Sharcigaas ayaa u diidaya inay haweeni ummad Islaam ah ay Boqorad ama Madaxweyne u noqoto. Buuraan waxay Boqorad ahayd lix bilood kaddibna way dhimatay. Markaasey talada Boqortooyada Iiraan kala daadatay. Markaasey waxay Boqor ka dhigeen Yazdajrid bin Shahriyaar, kaasoo uu Cumar bin Al Khadh-dhaab jebiyay, oo ay Iiraan Dawladda Islaamka ka mid noqotay. Kisraa Yazdajrid wuu cararay, waxaana laga helay isagoo ku dhuuntay tuulada la yiraahdo Marwa oo ku taalla dhul adag oo saxrada dhexdeeda ah ee arligaas Iiraan, bilawga Khilaafadii Amiiru Al Mu'miniin Thaa Al Nuurayn Cuthmaan bin Caffaan. Markaasaa la dilay, maydkiisana lagu dhex tuuray gacanka tuuladaas ku yiillay. Saabuur macneheedu waxaa weeye: Shaah oo afka Iiraan ah Boqor, iyo Buur oo ah wiilka, marka waa Shahbuur oo ah wiilka Boqorka. Markaasey Carabtu ha'dii ka reebeen oo ay Saabuur ka dhigeen. Waxaaba la yiri in magaalada la yiraahdo Niisaabuur, oo Saabuur asaasay oo uu dhisay, oo Nii macneheedu waa magaalo, Saabuurna waa isaga, oo marka waa magalada Saabuur. Boqorro badan oo Saabuur la yiraahdo ayaana dalkaas u taliyay. Runtana Rabbi ayaa og.

Al Iskandar iyo Daaraa

Qiyaas sideed boqol iyo todobaatan sano dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka hor ayuu Boqorka Dawladda Griiggu Al Iskandar bin Filips wuxuu ku soo duulay Boqortooyada Iiraan, oo uu markaas Boqor ka yahay Kisraa Daaraa bin Daaraa, uuna jebiyay oo ka adkaaday. Markii dagaalka la gelayey ayuu Al Iskandar wuxuu ciidankiisa amray inaan Daaraa la diline ee lasoo qabto oo isaga laftiisa loo keeno. Mase ayan noqonoo laba askari oo ka mid ahaa kuwii Daaraa ilaalinayey ayaa dhabarka ka wareemay oo dilay, ayagoo Al Iskandar abaalgud uga doonaya. Labadii nin waa lasoo qabtay, waxaana loo keenay Al Iskandar, kaasoo amray in madaxa laga gooyo kaddibna maydkooda la waro. Labadii nin waxay la yaabeen xukunkiisa, oo filan waa ku noqday, ayagoo abaalgudba sugayey. Markaasey waxay weydiiyeen sababta uu xukunka dilka iyo waridda ah ugu xukumay, ayagoo Boqorkii cadawgiisa ahaa dilay, wuxuuna ku yiri: "Taas weeye abaal marinta qofka dadka dalkiisa khayaana!" Sidii ayaana la yeelay, oo inta marka hore madaxa laga gooyey ayaa kaddibna maydkooda laba qori oo istillaaba lagu xiray oo la taagay, si loo arko oo loogu waano qaato. Daaraa oo wali nafi ku jirto ayaa waxaa dul yimid Al Iskandar, markaasuu intuu madaxiisa soo qaaday oo uu bawdadiisa saaray ayuu wuxuu ku yiri: "Dadka hoggaamiyohoodow, dilkaaga ma doonayn, raallina kama ihi, ee ma leedahay xaajo aan kuu oofiyo?" Wuxuu yiri: "Haa. Gabadhayda Rushnak guurso, kii i dilayna dil." Kaddibna wuu dhintay. Waxaa la yiri inay labadaas Boqor walaalo ahaayeen, ayna wada dhashay haweeney madow oo uu lahaa Daaraa aabihiis oo isagana Daaraa la oran jiray, oo ay markaas u dhashay Daaraa bin Daaraa. Kaddibna waxay Boqorka Griigga Filips u dhashay Al Iskandar. Runtana Rabbi ayaa og. Al Iskandar wuxuu qabsaday ilaa

dalka Masar, isagaana aasaasay magaalada Al Iskandariyyah la yiraahdo oo isaga loogu magac daray. Culummada qaarkood ayaa waxay yiraahdeen Al Iskandar waa Thuu Al Qarnayn, ninka uu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ku xusay Suuratul Kahf, inta badanse waxay yiraahdeen isaga ma aha, oo Thuu Al Qarnayn wuxuu ahaa Boqor Muslin ah, Al Iskandarna Islaannimo laguma sheegin. Runtana Rabbi ayaa og. Al Iskandar markuu Boqortooyada Iiraan jebiyay, si uu u wiiqo wuu kala qaybqaybiyay, oo intuu gobollo ka dhigay ayuu gobol walba nin madax uga dhigay, qabaa'il carbeedna intuu soo raray ayuu soo dhex dejiyay. Sidaas ayaa waxaa ku dhashay Boqorradii la oran jiray Muluuku Al Dhawaa'if, oo macneheedu yahay Boqoprrada Kooxaha ama Goobaha , looguna bixiyay ayadoo uu Boqor walba cad dhul ah xukumay. Sidaas ayayna ahaayeen ilaa ay Boqortooyada Iiraan ka gashay gacanta Boqorrada reer Banuu Saasaan bin Bihman, ahna Boqorrada Sassaaniyiinta. Al Iskandar wuxuu ku dhintay Baabil, ee arliga Ciraaq, isagoo saddex iyo soddon sano jira, magaaladaasoo uu caasimaddiisa ka dhigtay, taasoo bartamaha Boqortooyadiisa ku beegnayd.

Wahriz bin Isbihbith oo taliyaha ciidanka amxaarada jebiyay

Kisraa wuxuu ciidanka uu soo siiyay Sayf bin Thii Yazin madax uga soo dhigay nin la yiraahdo Wahriz bin Isbihbith (oo kala ah saadka shiinka ku xigah iyo thaalka dhibicda kor ku leh oo deelka ku xigah), oo kuwooda ugu da' wayn ka mid ahaa, raggaasna ugu laan dheereysnaa, kana dhashay reerka ugu gobsan. Waxaa ciidankaas lagu soo qaaday sideed markab, waxaana dekadda Cadan soo gaartay lix ka mid ah, ayadoo labadii kale ay dhexda kusoo kharaabeen. Markaasaa markay dekadda Cadan kasoo degeen ayuu Sayf Wahriz iyo raggiisa shirayay, wuxuuna ku yiri: "Lugteydu lugtaaday ku xiran tahay ilaa aan dhammaan wada dhimanno ama aan guuleysanno." Wahriz wuxuu ugu jawaabay oo uu ku yiri: "Xaqqa ayaad haleeshay". Boqorka Yaman, oo ahaa Masruuq bin Abraha, markuu helay warka ciidanka Sayf oo Cadan kasoo degay, wuu soo aaday isagoo ciidan xabasheed wata oo ka kooban boqol kun oo nin, ayna ku jiraan Ximyar iyo Kahlaan iyo qabaa'il kale oo Yaman deggan. Al Mascuudii wuxuu yiri: "Wahriz markuu dekedda (Yamaneed) Mathwab ay yimaadeen oo ay maraakiibtii ka degeen, ayuu wuxuu amray in maraakiibta la gubo, si uu raggu u ogaado inuu yahay dagaal ilaa dhimasho ah iyo inayan meel loo cararo jirin."

Dilidda Nuuzaad wiilka Wahriz

Markaasuu Wahriz wuxuu u diray ciidan uu wato wiil uu isagu dhalay oo magaciisu Nuuzaad bin Wahriz ahaa, si uu ula dagaallamo, xooggoodana uu u tijaabiyo. Dagaalkaas ayaa Wahriz wiilkiisa lagu dilay, taasoo aabihiis xanaaq usii kordhisay.

Wahriz oo Masruuq bin Abraha dilay amxaaradana jebiyay

Markay labadii ciidan iska horyimaadeen oo la is weeraray, ayuu Wahriz, oo inuu wiilkiisa u aargooyo doonaya, wuxuu yiri: "Boqorkooda i tusa", waxayna ku yiraahdeen: "Ma u jeeddaa nin maroodi saaran oo fadhiya oo taaj madaxiisaa saaranyahay, labada indhood dhexdoodana uu yaaquut guduudan ka saaranyahay?" Wuxuu yiri: "Haa". Waxay yiraahdeen: "Kaas ayaa Boqorkooda ah", wuxuuna yiri: "Daaya". Muddo dheer ayay joogeen, kaddibna wuxuu Wahriz yiri: "Muxuu hadda saaranyahay?" Waxay yiraahdeen: "Wuxuu ku wareegay oo uu saaran yahay faras." Wuxuu yiri: "Daaya". Markaasey hadana muddo dheer joogeen, ayadoo intaas dagaalku socdo, kaddibna wuxuu yiri: "Muxuu hadda saaran yahay?" Waxay yiraahdeen: "Wuxuu ku wareegay oo uu saaran yahay baqal." Wahriz wuxuu yiri:

"Waa dameerka gabadhiisa! oo isaguna wuu dulloobay, Boqortooyadiisana wuu dulleeyey. Hadda waan ganayaa, marka haddaad aragtaan inayan asxaabtiisu dhaqaaqayn, meeshiinna ku sugnaada ilaa aan idiinka idmo, maxaa yeelay ninka waan seegay. Haddadse aragtaan raggii oo dugaagad oo kale ku hareersamay oo kusii aruuraya, ninka waan la helay ee adinkuna weerara oo ku duula." Markaasuu qaansadiisa taagay, oo adayggeeda waxaa la yiri nin aan isaga ahayn ma taagi karin. Markaasaa labada indhood labadooda dhinac laba xijaab oo uu lahaa looga xiray kaddib markuu sidaas in la yeelo amray. Markaasuu ganay, wuxuuna ku dhuftay yaaquutka labada indhood dhexdooda saarnaa oo uu labo u kala jebiyay oo ay fallaarto maskaxda la gelisay, oo intay madaxiisa gashay ay tunkiisa ka baxday, baqashiina uu ka dhacay. Markaasey xabashadii kusoo aruureen oo ay kusoo hareersameen oo ay isgu yimaadeen, oo ay boqorkooda fardo saareen oo ku qaadeen, ayaguna ay jabeen oo dhabarka jediyeen. Markaasaa la laayey, ayaguna ay jiha walba u carareen. Masruuq inta madaxiisa la gooyay ayaa kor loo qaaday iyo madaxda madaxdii xabashada, waxaana goobtaas lagu dilay soddon kun oo xabasho ah.

Shuruudaha Kisraa uu Sayf bin Thii yazin la galay

Shuruudaha uu Kisraa Anuu Shirwaan Sayf bin Thii Yazin la galay waxaa ka mid ahaa inay ragga Iiraan u dhashay ay Yaman ka guursan karaan, Yamaniyiintuse ayan gabdhaha Iiraan guursan karin, iyo inuu sanad walba intaasoo maal ah (kharaaj) siiyo. Markii Masruuq la dilay, wuxuu Wahriz Sayf bin Thii Yazin u caleemo saaray Boqorka Yaman, wuxuuna madaxa u saaray Taaj u sitay iyo dirac qalin ka sameysan oo uu u labbisay. Wahriz wuxuu warqad u dhigay Kisraa uu ugu sheegayo inay guuleysteen. Markaasuu Wahrix usoo kacay innu Sanca galo. Markuu albaabka Sanca yimid, ayuu wuxuu yiri: "Calankeygu weligiis geli mayo isagoo foorara, ee albaabka dumiya." Markaasuu Sanca galay ayadoo uu calankiisu taagan yahay. Sidaas ayuu Wahriz Sanca ku galay, isaga iyo intii ka hartay ciidankii Iiraan. Ragga maalintaas Sanca galay oo Iiraaniyiinta ahaa ayaa dhalay dadka Iiraaniyiinta ah oo dalka Yaman deggan. Wahriz, intaas kaddib, Iiran ayuu ku noqday.

Xabashadu waxay Yaman gumaysaneysey labo iyo toddobaatan sano, oo ay afar Boqor oo ayaga ah xukunka kala dhaxleen, afartaasoo kala ah Aryaadh iyo Abraha iyo Yaksuum bin Abraha iyo Masruuq bin Abraha. Sanadkaas ay Yamani ka xorowday isticmaarka xabashada wuxuu ahaa sanadka shan boqol iyo shan iyo toddobaatanka miilaadiga ah, sanadkaasoo uu Wahriz Boqorka Sayf bin Thii Yazin caleeno saaray.

Sayf bin Thii Yazin waxaa dilay amxaar askarta ilaalisa ka mid ahaa

Afar sano kaddibna waa ayada Sayf la dilay, markaasoo ay bilaabatay inay Yaman xukumaan rag uu Kisraa soo magacaabo, oo ay sidaas Yamani mustacmarad Iiraan u noqotay. Waxay Yamani mustacmarad Iiraan ahayd sagaal iyo konton sano oo sanooyinka miilaadiga ah oo qorraxda lagu tirsado, ayadoo uu sanadkasi markuu ahaa lix boqol iyo sideed iyo soddon uu Xaakinkii Iiraaniga ahaa ee Yamani uu Islaamay, oo ay ay Yamani sidaas ugu darsantahay dawladda islaamka oo uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hoggaamiyaha u ahaa.

Gumaysiga Iiraan ee Yaman

Afar sano kaddib caleemo saarkiisa, waxaa Sayf bin Thii Yazin dilay askar amxaaro ah oo isaga ilaaladiisa ka mid ahaa, oo wareentay oo warammo gelisay. Markuu warkaasi Kisraa gaaray ayuu mar kale Wahriz soo diray, uuna soo siiyay ciidan barriga soo mara

oo afar kun oo nin ka kooban, uuna kusoo amray inuu dilo qof kasta oo madow oo amxaaro ah oo Yaman jooga iyo qof kasta oo timo adag oo amxaaro nasab la wadaaga, sida cunuggay haweeney Carab ahi nin amxaaro ah u dhashay, ha yaraado ama ha weynaadee. Kisraa Anuu Shirwaan wuxuu Wahriz u caleemo saaray Boqorka Yaman. Wahriz markuu Yaman yimid amarkii Kisraa ayuu fuliyay oo amxaaro iyo ciddii nasab la wadaagtaba wuu dilay.

Gumaysiga iiraan ee amxaarada

Kaddib ciidammada Iiraan intay Badda Cas ka tillaabeen ayayba waxay galeen arliga amxaarada oo ay burburiyeen, kaniisadohoodana gubeen oo ay dab qabadsiiyeen, oo sida kutubbada Siirada iyo taariikhdaba ku sugan, qalabka Kacbada ay Qurayshi ku dhisi doonto wuxuu saarnaa markab uu Boqorka Roomaanku u soo diray in kaniisadahaas dib loogu dhiso, intuusan arligaas gaarinbase ayuu markabkii wuxuu kusoo caariyay Jiddah agteeda, halkaasoo ay Qurayshi qalabkaas kasoo gadatay. Markaasna Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu jiraa shan iyo soddon sano. Runtana Rabbi ayaa og. Sidaas ayay amxaaradu waxay zaman ku ahayd mustacmarad iiraan oo ay gumaysigeeda ku hoos jirtay. Kaddibna iiraan way isaga baxaday.

Al Marzabaanu bin Wahrix oo Yaman boqor u noqday

Markuu Wahriz dhintay, Kisraa wuxuu Yaman madax uga dhigay wiilkiisa ahaa Al Marzubaanu bin Wahriz, isagu markuu dhintayna wiilkiisa Al Taynujaanu bin Al Marzubaani. Markuu Al Taynujaanu dhintay, wuxuu Kisraa Yaman madax uga dhigay Al Taynujaanu wiilkiisa. Kaddibna wuu cazilay, wuxuuna madax ka dhigay nin la yiraahdo Baathaan (waa thaalka dhibic kor ku leh oo deelka ku xiga), kaasoo xilkaas hayey ilaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga soo diray.

Amarka Kisraa in Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la dilo iyo islaamidda Baathaan, boqorka Yaman ugu horreeyey oo muslimka ah, iiraaniga ah ee Yaman

Kisraa Abarwayz bin Hurmuz bin Anuu Shirwaan wuxuu wakiilkiisa Yaman xukumay oo magaciisu Baathaan ahaa (waa thaalka dhibic kor ku leh oo deelka ku xigah) usoo dhigay warqad uu ke leeyahay: "Waxaa isoo gaartay inuu nin Quraysh u dhashay uu Makkah kasoo baxay, sheeganayana inuu Nabi yahay. Marka ciidan u kexeyso, markaad u tagtidna waxaad ku amartaa inuu warkaas ka tawbad keeno. Hadduu tawbad keeno iska daa, hadduu diidase madaxiisa soo goo oo ii soo dir." Markaasuu Baathaan warqaddii Kisraa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u diray. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu usoo dhigay warqaddaan: **"Inna Allaaha qad wacadanii an yuqtala Kisraa fii yawmi kithaa min shahri kithaa",** oo macneheedu yahay "Ilaahay wuxuu iga ballan qaaday in Kisraa la dili doono maalin hebla ee bisha hebla". Markii warqaddaas Baathaan loo keenay wuu akhristay, kaddibna wuxuu yiri: "Hadduu Nabi yahay siduu yiri ayay ahaaneysaa". Kisraa waxaa la dilay maalintuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, magacaabay, waxaana dilay wiilkiisa Shiirawayh, taasoo ahayd sanadka toddobaad ee Hijrada. Markuu khabarkaasi Baathaan soo gaaray, ayuu islaamay, uuna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ergo u diray u sheegta inay isaga iyo Iiraaniyiinta Yaman la joogtaba ay islaameen. Markay ergadaasi, oo rag Iiraaniyiin ah ka koobnayd, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimaadeen, ay

dhambaalkiina u gudbiyeen, ayay waxay ku yiraahdeen: "Rasuulka Ilaahayo, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, annagu yaan ka tirsannahay?", wuxuuna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku yiri: **"Antum minnaa wa ilaynaa Ahla Al Bayti",** oo macneheedu yahay "Adinkuna annagaad naga dhalateen, Eheelu Baytka ayaadna usoo noqotaan oo aad ka tirsan tihiin." Baathaan wuxuu islaamay sanadka tobanaad ee Hijrada. Isla sanadkaas ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, usoo ciddiray ubadka Iiraaniyiinta ah oo ay raggii Wahriz la socday oo Yaman degey, inay islaamaan, kuwaasoo sidaan usoo sheegnay yeelay oo islaamay. Dhashaas waxaa ka mid ahaa Wahbu bin Munabbih bin Sayj bin Thukbaar (waa tha dhibic kor ku leh oo deelka ku xiga) iyo Dhaawuus iyo Thawaawayh (oo ah thaalka dhibic kor ku leh oo deelka ku xiga) iyo Fayruuz.

Qoraalka Sideedaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Warqadda uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Kisraa u dhigay

Markay muslimiintu Al Madaa'in furteen, caasimadda Boqortooyada Iiraan, uuna furtay Amiiru Al Mu'miniin Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee, Boqorka laga furtayna, oo la yiraahdo Kisraa Yazdajrid, uu u cararay magaalada la yiraahdo Isdhakhra, wixii qasriga laga helayna oo ay muslimiintu ghaniimeysteen waxaa ka mid ahaa shan seefood oo ayaan ayagoo kale hore loo arag, oo kala ahaa: (Kow) Seefta Kisraa Abarwayza. (Laba) Seefta Kisraa Anuu Shirwaan. (Saddex)) Seefta Al Nucmaanu bin Al Munthir, Boqorka Carbeed ee Al Xiirah, oo uu Kisraa Anuu Shirwaan kala wareegay markuu dilay, kaddib markuu u carooday, oo uu markaas maroodi u tuuray, kaasoo ku tuntay oo dilay. Al Dhabarii wuxuu arrinkaas ka yiri: "Bal Al Nucmaanu wuxuu u dhintay daacuun dilay isagoo ku jira xabsiga Kisraa Anuu Shirwaan. (Afar) Seefta Boqorka Turkiga Khaaqaan (oo Khaaqaan waa Boqorka kasta oo Turkiga u taliya). (Shan) Seefta Boqorka Roomaanka ee magaciisu ahaa Hirqal, seeftaasoo Kisraa usoo wareegtay markuu ka adkaaday Boqorka Roomaanka, siduu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, noogu sheegay Aayadda labaad ee Suuratu Ruum, uuna ku yiri: **"Ghulibati Al Ruumu**(2)**."** oo macneheedu yahay "Waxaa lagaga adkaaday Ruumm(2)." Sidaas ayay ahayd siday seefta Al Nucmaanu bin Al Munthir ugu soo wareegtay Boqorka Kisraa Abarwayz bin Hurmuz bin Anuu Shirwaan. Kisraa Abarwayz wuxuu lahaa, sida la yiri, kun maroodi, konton kun oo faras, saddex jun oo haween ah, siduu Al Dhabarii ugu xusay Taariikhdiisa mujalladka koowaad bogga boqol saddex iyo lixdan, Al Mascuudina kitaabkiisa Muruuju Al Thahabi mujalladka koowaad bogga laba boqol sagaal iyo toddobaatan. Abarwayz macneheedu waxaa weeye "Midka libta hela oo adkaada". Boqorka Kisraa Abarwayz bin Hurmuz bin Anuu Shirwaan waa midkuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, warqadda u dhigay uu Islaamka ugu yeerayo, markuu warqaddaas helayna uu jeexjeexay. Al Dhabarii wuxuu wariyay naskii warqaddaas, wuxuuna yiri: "Waxyaalihii sanadka lixaad ee Hijrada dhacay waxaa ka mid ahaa inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Kisraa warqad u dhigay, uuna ugu dhiibay Cabdu Allaahi bin Xuthaafata Al Sahmiyyi, waxaana ku dhignayd:

"Bi Ismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuula Allaahi ilaa Kisraa Cathiimi Faaris. Salaamun calaa man ittabaca al hudaa, wa aamana bi Allaahi wa Rasuulihi, wa shahida an laa Ilaaha illaa Allaahu, wa annii Rasuulu

Allaahi, ilaa al naasi kaafatan, li yunthira man kaana xayyan, aslim taslam. Fa in abayta fa calayka ithmu al Majuusi."

Warqadda macneheedu waxaa weeye:

"Bismillaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Muxammad Rasuulka Ilaahay, waxayna u socotaa Kisraa Cathiimka Faaris (oo Iiraan ah), nabadgelyo ha ahaato korka ruuxii hanuunka raaca, rumayana Ilaahay iyo Rasuulkiisa, kana marag kaca inuusan Ilaah aan Ilaahay ahay jirin, aniguna aan Rasuulka Ilaahay ahay (oo yiraahda weeye Ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa anna Muxammadan Rasuulu Allaahi), oo dadkoo idil loo diray, si uu ugu digo kuwa nool. Islaan (oo waa Diinta Islaanka soo gal oo muslin noqo) waad nabad geleysaaye. Haddaad diidana waxaa korkaaga ah dambiga Majuusta (oo ah iiraaniyiinta uu Boqorka u yahay oo dabka caabuda)".

Markaasuu warqadda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam jeexjeexay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Muzziqa mulkuhu"** oo ah "Ha la jeexjeexo boqortooyadiisa." Wuxuu kaloo Al Dhabarii yiri: "Waxaa noo warramay Ibnu Xumayd, wuxuuna yiri: waxaa noo warramay Salamah oo ka wariyay Muxammad bin Isxaaq oo ka wariyay Yaziid bin Xabiib oo yiri: "Wuxuuna (Waa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa sanadkaas lixaade) u diray Cabdu Allaahi bin Xuthaafah bin Qays bin Cadiyyi bin Sacd bin Sahm Kisraa bin Hurmuz Boqorka Faaris, wuxuuna ugu dhibay warqaddaan:

"Bi Ismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuula Allaahi ilaa Kisraa Cathiimi Faaris. Salaamun calaa man ittabaca al hudaa, wa aamana bi Allaahi wa Rasuulihi, wa shahida an laa Ilaaha illaa Allaahu Waxdahu laa shariika lahu, wa anna Muxammadan cabduHu wa RasuuluHu, wa adcuuka bi ducaa'i Allaahi, fa innii anaa Rasuulu Allaahi ilaa al naasi kaafatan li unthira man kaana xayyan wa yuxiqqa al qawlu calaa al kaafiriina, fa aslim taslam, fa in abayta fa inna ithma al Majuusi calayka."

Warqadda macneheedu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Muxammad Rasuulka Ilaahay, waxayna u socotaa Kisraa Cathiimka Faaris. Nabadgelyo ayaa ah korka cidda hanuunka raacda, ee rumeeya Ilaahay iyo Rasuulkiisa, kana marag kaca inuusan jirin Ilaaha aan Ilaahay ahayn Keligiis shariikna uusan lahayn iyo inuu Muxammad yahay Addoonkiisa iyo Rasuulkiisa (oo yiraahda weeye: Laa ilaaha illaa Allaahu Waxdahu laa shariika lahu wa anna Muxammadn Cabduhu wa Rasuuluhu), waxaanna kuugu yeerayaa wuxuu Ilaahay kuugu yeeray, oo anigu waxaan ahay Rasuulka Ilaahay uu dadkoo idil usoo diray si aan inta nool ugu digo, cathaabtuna ay ku dhabowdo gaalada korkooda. Marka Islaan waad nabad geleysaaye. Haddaad diidana dambiga Majuusta ayaa adiga korkaaga ah." Markaasuu markuu Kisraa warqaddaas akhristay ayuu jeexjeexay, wuxuuna yiri: "Ma warqaddaanuu ii soo dhigayaa isagoo addoonkeyga ah?"

Labada warqadood iyo warka la xiriiraba waxaan kasoo guurinnay Taariikhu Al Dhabarii, Mujalladka labaad bogga boqol iyo laba iyo soddon.

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo boqorrada iiraan habaaray

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, marka loo sheegay inuu warqaddiisii jeexjeexay, ayuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u Alle Baryey inuu qoladaas Ilaahay jeexjeexo, Ilaahayna waa ka yeelay wuuna jeexjeexay, oo kala googooyey. Boqorkaas sidaas warqadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u jeexjeexay, Nabiguna uu u Alle Baryay, waxaa dilay wiilashiisa uu isagu dhalay, waxayna dileen habeen talaado ah ee tobanka Jamaadul Uulaa ee sanadka toddobaad ee Hijrada. Isla Boqorkaan Kisraa Abarwayz waa ninka Boqortooyada Roomaanka ka adkaaday, ayna Aayyadda labaad ee Suuratu Ruum noo sheegtay, waxaana awoowe u ah Kisraa Anuu Shirwaan. Wiilashiisu siday u dileen waxay ahayd sida soo socota. Wiilkiisa Farkhaan ayaa wuxuu ku riyooday isagoo carshiga aabihiis ku fariisto ku fadhiya. Markuu khabarka riyadaasi aabihiis gaaray ayuu wiilkiisa kale oo magaciisu Shahriyaar ahaa oo gobol xaakim uga ahaa, ayuu warqad u dhigay, uuna ku amrayo inuu walaalkiis Farkhaan dilo. Markaasuu Shahriyaar warqaddaas walaalkiis ka qariyay oo uusan waxa ku dhigan u sheegin, walaalkiisna uusan dilin. Markaasuu aabihiis warqad labaad usoo dhigay uu ku amrayo inuu walaalkiis Farkhaan dilo, Shahriyaar-na waa ka diiday. Markaasuu aabihiis Shahriyaar xilka ka qaaday oo uu cazilay, xilkiina uu ku wareejiyay walaalkiis Farkhaan, kaasoo uu amray inuu walaalkiis Shahriyaar dilo. Markaasuu Farkhaan u kacay inuu walaalkiis dilo. Markaasuu Shahriyaar wuxuu walaalkiis Farkhaan tusay warqadduu aabihiis isaga hore ugu soo dhigay inuu isaga laftiisa dilo. Markaasey labadii walaalaha ahaa isi soo raaceen inay aabohood dilaan, waxayna taageero weydiisteen Boqorka Roomaanka. Markaasey Iiraaniyiintu Kisraa Abarwayz sababo uu la yimid daraadeed u cazileen oo ay Boqornimada uga qaadeen, una xabbiseen, Boqornimana ay wiilkiisa kale ee Shiirawayh u caleemo saareen. Kaddibna waxay wiilkiisa ku yiraahdeen: "Boqortooyo kuu xasili mayso jeer aad aabahaa dishid". Markaasuu aabihiis cid disha u diray, oo sidaas lagu dilay. Aabihiisna wuxuu Shiirawayh ku oran jiray: "Midka cimriga gaabanow", wuxuuna aabihiis ka dambeeyey wax lix bilood ka yar. Runta Rabbi ayaa og.

Cabdu Allaahi bin Xuthaafah Al Qurashiyyi Al Ssahmiyyi ayaa warqadda u geeyey

Al Bukhaarii wuxuu kutubbada Al Cilmi iyo Al Jihaadi iyo Al Maghaazii iyo kuwa kaleba ku wariyay Xadiithka uu wariyay Al Zzuhriyyu kana wariyay Cabdu Allaahi bin Cutbah oo ka wariyay ibnu Cabbaas inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, uu warqadda Kisraa ugu dhiibay saxaabiga wayn oo jaliilka ah Cabdu Allaahi bin Xuthaafah Al Qurashiyyi Al Ssahmiyyi, oo kuwa horeba u islaamay ka mid ahaa, kana mid ahaa Muhaajiriinta koowaad, si uu ugu geeyo boqorka Al Baxrayn (oo ahayd mustacmarad boqortooyada Furus waa iiraane) oo magaciisu ahaa Al Munthir bin Saawaa Al Cabdii oo ahaa boqorka Faaris uga wakiilka ahaa . Markaasuu boqorka Al Baxrayn wuxuu warqadda gacanta ka saaray boqorka Faaris. Riwaayado kalena waxay wariyeen inuu Cabdu Allaahi bin Xuthaafah uu laftiisu u tegay oo uu boqorka Faaris warqadda gacanta ka saaray. Markaasuu boqorku markii warqadda loo akhriyay uu jeexjeexay.

Waxaa la yiri inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u doortay Cabdu Allaahi bin Xuthaafah Al Ssahmiyyi inuu warqadda ugu dhiib Kisraa isagoo dalkaas in badan tegi jiray.

Al Zarqaanii wuxuu yiri: “Kitaabka “Al Amwaal” ee Abuu Cubayd wuxuu wariyay Xadiith mursal ah ee Cumayr bin Isxaaq oo yiri: “Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu waraaqo u kala dhigay Kisraa iyo Qaysar. Markaasuu Kisraa markuu warqadda akhriyay jeexjeexay, Qaysarse markuu akhriyay ayuu duubay oo meel kore saaray. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu yiri: **“ammaa haa’ulaa’i fa yumazzaquuna, wa ammaa haa’ulaa’i fa sayakuunu lahum baqiyyatun.”** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: “kuwaasna waa la jeexjeexayaa, kawaas kalena waxbaa ka haraya.”

Xadiithka Abuu Hurayrah: ninka usha wata iyo Kisraa

Ibnu Sayyidi Al Nnaasi wuxuu kitaabkiisa Cuyuunu Al Athari boggiisa saddex boqol sideed iyo labaatan ee mujalladka labaad ku yiri: “Xadiithka Abuu Hurayrah iyo ghayrkiisba waxay xuseen inuu Kisraa isagoo ku dhex jira guri uu ku keliyeysan jiray uu u yimid nin gacanta ul ku sita uuna ku yiri: “Kisrow, Ilaahay wuxuu soo diray Rasuul, wuxuuna kusoo dejiyay Kitaab, marka islaam wad badbaadaysaaye, raacna oo markaasay boqortooyadaadu ku haraysaaye.” Kisraa wuxuu yiri: “dib iiga joogso arrinkaanna dib iiga dhig.” Markaasuu wuxuu u yeeray xaajibkiisa iyo ragga albaabbada u ilaaliya oo uu guulguulay kuna yiri: “muxuu yahay ninkaan guriga iigu soo galay?” Waxay yiraahdeen: “wa Allaahi inuusan axadna kuu soo gelin, annaguna albaabna ma cidlayn oo waa ilaalinaynna.” Sidaasuu ku joogay ilaa sanadka midkaas ku xiga la gaaro. Markaasuu ninkii hadana u yimid oo uu ku yiri wax la mid wuxuu sanadkii hore ku yiri oo kale. Wuxuu kaloo ku yiri: “haddaadan islaamin ushaan ayaan jebinayaa.” Wuxuu yiri: “ha yeelin, oo arrinkaan xoogaa dib iigu dhig.” Markaasuu wuxuu u yimid sanadka midkaas ku xigay uuna falay wuxuu hore u falay wax la mid ah, oo uu markaas usha ku dhuftay madaxa Kisraa oo uu usha jebiyay. Kaddibna guriguu uga soo baxay. Waxaana la yiraahdaa inuu isla habeenkaas wiilkiisu dilay, oo uu Ilaahay arrinkaas Rasuuklkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ogaysiiyay markuu dhacayba.

Hadiyada Kisraa ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Al Zarqaanii wuxuu bogga sagaal iyo tobnaad iyo bogga boqol iyo toddoba ee juzka shanaad ku wariyay inuu kaddib Kisraa warqadda Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, jeexjeexay isagoo ka baqay waxa ku dhigan, oo uu keligiis noqday oo ayan cidna la joogin uu cabsaday isagoo hubay Nabinnimadiisa. Markaasuu baqal u hadiyeeyey. Al Thacaalibii wuxuu tafsiirkiisa ku wariyay, Al Xaakimna kitaabkiisa Al Mustadriku inuu ibnu Cabbaas yiri: “Kisraa wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, usoo hadiyeeyey baqal, markaasuu fuulay isagoo ku hoggaaminaya xarig dhogor laga sameeyey, anigana gadaashiisa ayuu iga saaray oo i fariisiyay.” Waxaa kaloo la yiri midka baqasha usoo hadiyeeye Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam waa Kisraa Shiiraweyh oo ah wiilka uu dhalay midka warqadda jeexjeexay, ama ina adeerkiis Kisraa bin Qubaath, ama Ardashiir bin Shiiraweyh, ama Jarhaan, ayagoo intaasoo boqor ay boqorro noqdeen Abrawayz dabadiis. Ayaga dabadoodna waxaa boqorad noqotay Buuraan bintu Kisraa siduu ibnu Qutaybah u wariyay. Wa Allaahu aclamu.

Qoraalka Sagaalaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraximi

Warqadda Nabi Muxammad , Salla Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ee Al Najaashiyyu

Kitaabka Sharxu Al Callaamah Al Zarqaanii (waana Al Zarqaanii bin Cabdu Al Baaqii bin Yuusuf bin Axmad bin Calwaan al misrii al azharii, al maalikii, al imaamu, al muxaddith, al faqiih, al callaamah dhintayna kun iyo boqol iyo labo iyo labaatan Hijriga) calaa Al Mawaahibu Al Laduniyyah bi Al Minaxi Al Muxammadiyyah ee Al Qasdhalaanii (ahna al xaafith Shihaabu Al Ddiini Abuu Al Cabbaas Axmad bin Muxammad bin Abii Bakar bin Cabdu Al Malik bin Axmad bin Muxammad bi Xusayn bin Calii Al Qasdhalaanii Al Misrii Al Sh-shaaficii, al imaamu al callaamah, al xujjatu al rraaxilah, al faqiih, al muqri'u, al musnid, oo la oofsaday sanadka sagaal boqol iyo saddex iyo labaatanka Hijriga) wuxuu ku wariyay mujalladka shanaad bogga sideed iyo tobnaad warqadduu Nabi Muxamma, Salllaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u diray Al Najaashiyyu boqorka waagaas ee Al Xabashah, wuxuuna yiri warqaddu waxay ahayd sidatan:

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuula Allaahi ilaa Al Najaashiyyi maliki al xabashah, ammaa bacdu: fa innii axmadu ilayka Allaaha Allathii laa ilaaha illaa Huwa, Al Maliku Al Qudduusu Al Ssalaamu Al Mu'minu Al Muhayminu, wa ash-hadu anna Ciisaa ibnu Maryama Ruuxu Allaahi wa KalimatuHu alqaaha ilaa Maryama Al Batuula Al Dhayyibata Al Xasiinata, fa xamalat bi Ciisaa fa khalaqaHu min RuuxiHi, wa nafakhaHu kamaa khalaqa Aadam bi yadiHi, wa innii adcuuka ilaa Allaahi Waxdahu laa shariika Lahu, wa al muwaalaatu calaa dhaacatiHi, wa an tattabicanii wa tu'mina bi allathii jaa'anii, fa innii Rasuulu Allaahi, wa innii adcuuka wa junuudaka ilaa Allaahi Tacaalaa, wa qad ballaghtu wa nasaxtu fa aqbaluu nasiixatii, wa qad bacath-tu ilaykum ibnu cammii Jacfaran wa macahu nafarun mina al muslimiina, wa Al Ssalaamu calaa mani-ittabaca al hudaa."

Warqadda macneheedu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Muxammad Rasuulka Ilaahay –Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam-kuna socotaa Al Najaashiyyu boqorka al xabashah. Intaas ka bacdina: anigu waxaan kuu soo gudbinayaa xamdiga Ilaahay (ama Ilaahay ayaan jiritaankaaga uga xamdinayaa), Ilaaha uusan jirin ilaah kale oo xaq lagu caabudo oo aan Isaga ahayn, Al Maliku (Midka Boqorka runta ah), Al Qudduusu (Midka Daahirka ah), Al Ssalaamu (Midka nabad geliyaha ah), Al Mu'minu (Midka mu'miniinta cathaabtiisa ka nabad geliya), Al Muhayminu (Midka khaliqigiisa dusha ka ilaaliya oo acmaashooda iyo waxay falayaan u jeeda), waxaanna ka marag kacayaa inuu Ciise ina Maryama yahay Ruuxa Ilaahay (oo ah ruuxa qof walba la geliyo oo nafta geliya oo marka la siibo uu qofku dhimanayo) iyo Kalimadiisa oo ah eraygiisa uu yiri (oo ah "Kun" oo ah "ahow" oo Ciise sidaas ilmo galeenka hooyadiis dhexdiisa ku ahaaday aabe la'aan) uu ku riday Maryama Al Batuula (oo ah midda raggaba aan doonayn qalbigeedana kuba soo dhacayn, cibaadaysiga Rabbigeed u go'day adduunkaanna kaba go'day), Al Dhayyibata (oo ah midda fiican), Al Xasinata (waana saadka shiinka ku xiga oo ah midda dhwarsan oo ilaalsan oo aan xumaan ku kicin), markaasay uurka Ciise qaaday. Markaasuu Ilaahay

ka abuuray Ruuxiisa, kuna afuufay oo geliyay ruuxiisa (wuxuuna Tacaalaa u soo diray Malak Jibriil oo ku aduufay) (siduu Ilaahay noogu sheegay Aayadda kow iyo sagaashan ee Suuratu Al Anbiyaa'i: **"Fa nafakhnaa fiihaa min Ruuxinaa**(91)**"** oo macneheedu yahay: "Waxaanna-Maryama-ku afuufnay Ruuxeenna(91)") si la mid ah siduu Aadan gacantiisa ugu abuuray (oo ah sida Aadan dhoobo looga abuuray isagoo aan waxba ahayn ayaa Ciisana "kun" looga abuuray).

Aniguna waxaan kuugu yeerayaa inaad Ilaahay Keligiis caabudid Isagoo aan shariik lahayn (siday krishtaanku u yiraahdaan inay saddex ilaah jiraan), iyo inaad adeeciddiisa u hoggaansanaatid, iyo inaad anigana i raacdid oo aad waxaan la imid (oo ah Quraanka, Sunnada iyo Diintaba) aad rumaysid, maxaa yeelay anigu waxaan ahay Rasuulka Ilaahay –Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam-oo dadkoo idil loo soo diray. Aniguna waxaan adiga kuugu yeerayaa aan askartaadana ugu yeerayaa inaad Ilaahay caabudaaan oo aad adeecdaan.

Anigu Risaaladii waa idin soo gaarsiiyay, waanna idin waaniyay, marka waanadayda yeela (ayadayna ku sugan yihiin nolol fiican ee adduun iyo aakhiro oo janno la galo).

Waxaanna idiin soo diray ina adeerkay Jacfar (bin Abii Dhaalib bin Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim bin Cabdu Manaaf) (waana Hijrada labaad ee Al Xabshah kuna beegan sanadka lixaad ee Nabinnimada, Jacfarna halkaas ayuu joogay ilaa sanadka toddobaad ee Hijrada uuna Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ugu yimid Khaybar maalintuu furtay: haddaan xisaabno marka wuxuu arligaas joogay qiyaas afar iyo toban sano, runtana Rabbi ayaa og), waxaana la socda koox muslimiinta ka mid ah.

Nabad gelyana ha ahaato korka hanuunka raaca."

Camr bin Umayyah Al Damriyyu ayaa warqadda Al Najaashiyyu u geeyey

Waa intaas warqadda Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam, wuxuuna ugu dhiibay Camr bin Umayyah Al Damriyyi (waana daadka saadka ku xiga), saxaabiga caanka ah islaamayna markay gaaladu Uxud ka gaddoomeen Maalinta Duullaanka Uxud ee sanadka saddexaad ee Hijrada siday u wariyeen ibnu Sacad iyo ibnu Cabdu Al Baarru. Al Nawawii-na wuxuu wariyay inay islaannimadiisu qadiim horreysey ahayd, uuna Al Xabashah u haajiray, kaddibna Al Madiinah.

Warqaddaan iyo waraaqaha kale ee Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu boqorrada u dhigay sanadka lixaad ee Hijrada, kaddib heshiiska nabadeed ee Al Xudaybiyyah.

Wada hadalka Camr ee Al Najaashiyyu

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "markuu Camr bin Umayyah Al Damriyyu wuxuu Al Najaashiyyu ku yiri: "Yaa sxamah inna calayya al qawlu, wa calayka al istimaacu, innaka ka annaka fii al riqqati calaynaa minnaa, wa ka annaa fii al thiqqati bika minka, li annaa lam nathun bika khayran qadh-dhu illaa nalnaahu minka, wa lam nakhafka calaa shay'in qadh-dhu illaa amannaahu, wa qad akhathnaa al xujjata calayka min fiika Al Injiilu baynanaa wa baynaka shaahidun laa yuraddu wa qaadin (waa daadka saadka ku xiga) laa yajuuru, wa fii thaalika mawqicu al xazzi, wa isaabatu al mufassili, wa illaa anta fii haathaa Al Nnabiyyi Al Ummiyyi, ka al yahuudi fii Ciisaa ibni Maryama, wa qad farraqa Al Nabiyyu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, rusulaha ilaa al nnaasi, fa rajaaka limaa lam yarjihim lahu wa ammanaka calaa maa khaafahum calayhi, li khayri saalifin, wa ajrin yuntatharu."

Hadalkaas Camr macnihiisu waxaa weeye:

“Asxamow (oo Al Najaashiyyu magaciisu wuxuu ahaa Asmaxah bin Abjar, waxaa kaloo la yiri wuxuu ahaa Asxamah) Hadliddana anigaa la igu leeyahay, adigana inaad i dhegeysatid ayaa korkaaga ah. Adiguna waxaad noo naxariisataa, annaguna waan kugu kalsoonahay. Annaguna wax khayr ah kaama aanan filan ee waa kaan kaa helnay, waxna kaagama aanan biqin ee waa kaan ka ammaan helno. Xujjadana waxaan kaaga helnay waxaad adigu afkaaga ka tiri, oo Kitaabka Injiilka ayaa annaga iyo adiga noo dhexeeya, kaasoo ah marag aan la diidi karin iyo qaalli aan xad gudbayn, halkaasuuna go’aanku ku sugan yahay, ahna meesha cad oo lagu kala baxo. Haddayan sidaas ahaynna oo aad diidid adigu waxaad Nabigaan Ummiga ah, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ka taagan tahay meel la mid ah meeshay yuhuuddu ka istaageen Ciise ina Maryama (oo ay Nabinnimadiisa iyo Rasuulnimadiisaba diideen). Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aaalihi Wa Sallam, wuxuu ergooyinkiisa u kala diray boqorrada, adigana wuxuu kaa qabay rajo uusan kuwa kale ka qabin, wuxuu ayaga uga baqayna adiga nabad gelyo ayuu kaa siiyay sababtuna ay tahay khayr kuu hormaray iyo ajar la dhawrayo.”

Jawaabtuu Al Najaashiyyu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u diray

Markuu Camr intaas yiri ayuu Al Najaashiyyu wuxuu ku yiri kaddib markuu warqadda akhriyay: “waxaan Ilaahay hortiisa marag uga ahay inuu isagu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, yahay Nabiga Ummiga ah oo ay Ehelu Kitaabku dhawrayeen iyo inay bishaarada Muuse ee imaatinka Nabiga dameerrada fuula oo ahaa Nabi Ciise ay la mid tahay bishaaraduu Ciise ku bishaareeyey inuu imaan doono Nabi awrta fuula oo ah Axmad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo waxaan Nabigaan Ummiga ah u aqaannaa oo aan sifooyinkiisa iyo warkiisa u hayaa ilaa heer haddaan indhahayga ku arko ayan taasu yaqiin i kordhinayn. Laakiin taageerayaashayda xabashada dhexdeeda ah oo aniga i raacsan way yar yihiin, marka ii kaadi ilaa intay dadka i raacsani badanayaan quluubtuna ay xagga islaamka u jilcayaan oo u liicayaan.”

Ibnu Sacad wuxuu yiri: “markaasuu warqadda qaatay oo indhihiisa saaray oo ku dhejiyay, carshigiisana kasoo degay oo uu dhulka fariistay, kaddibna uu islaamay oo uu shahaadada xaqqa ah ku dhawaaaqay, wuxuuna yiri: “haddaan kari lahaa waan u tegi lahaa, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.”

Kaddib Al Najaashiyyu wuxuu dhigay jawaabta warqadda Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam: “Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi, isagoo ku bilaabaya siduu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, warqaddiisa ku bilaabay oo ku dayana, wuuna ka edeb yeeshay oo magaciisa kuma bilaabine balse wuxuu ka bilaabay magaca shariifka ah, wuxuuna yiri: “ilaa Muxammadin Rasuula Allaahi mina Al Najaashiyyi Asxamah salaamun calayka yaa Rasuula Allaahi wa raxmatu Allaahi wa barakaatu Allaahi Allathii laa ilaaha illaa Huwa Allathii hadaanii lil islaami, ammaa bacdu fa qad balaghanii kitaabuka yaa Rasuula Allaahi, fa maa thakarta min amri Ciisaa, fa wa Rabbi Al Ssamaa’i wa al ardi inna Ciisaa Calayhi Al Ssalaatu wa Al Ssalaamu laa yaziidu calaa maa thakarta thufruuqan, innahu kamaa thakarta, wa qad carafnaa maa bucith-ta bihi ilaynaa, fa ash-hadu annaka Rasuulu Allaahi Saadiqan Musaddiqan, wa qad baayactuka, wa baayactu ibna cammika wa aslamtu calaa yadayhi Lillaahi Rabbi Al Caalamiina. Wa qad bacath-tu ilayka ibnii, wa in sh’ita ataytuka bi nafsii facaltu, fa innii ash-hadu anna maa taquuluhu xaqqun, wa Al Ssalaamu Calayka wa raxmatu Allaahi wa barakaatuHu.”

Warqadda macneheedu waxaa weeye:

“Waxay u socotaa Muxammad Rasuulka Ilaahay –Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam- waxayna ka socotaa Al Najaashiyyu Asmaxah salaamun calayka yaa Rasuula Allaahi –Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam- wa raxmatu Allaahi wa barakaatuHu, Ilaaha uusan jirin Ilaah aan Isaga ahayn, Isagaana islaamka igu hanuuniyay, intaas bacdigeedna, way isoo gaartay warqaaddaadu Rasuulka Ilaahayow –Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam- intaad Ciise ka sheegtayna oo waxaan ku dhaartay Rabbiga iska leh Samaawaatka iyo arligaba Ciise Calayhi al ssalaatu wa al ssalaamu (sida kitaabkeenna ku dhigan) intaad sheegtay ma dheera wax le’eg waxa yar oo isku haya timirta lafteeda iyo afkeeda (oo ah waxaan waxba ahayn), isaguna waa sidaad adigu u sheegtay, annaguna waan ogsoonnahay waxa annaga naloogu kaa soo diray. Marka waxaan marag ka ahay inaad Rasuulka Ilaahay tahay, mid runlow ah lana rumaysto, waana ku baayacay, waxaan kaloo isagana baayacay ina adeerkaa hortiisa ayaanna ku islaamay, aanna u islaamay Ilaahay Caalamiinta Rabbigooda. Waxaanna kuu soo diray wiilkayga (oo Al Zarqaanii wariyay inuu magaciisu ahaa Arkhaa uuna kasoo guuriyay kitaabka Al Maghaazii ee uu leeyahay Al Taymiyyu), ama Ariikhaa siduu u wariyay Dalaa’ilu Al Nubawwah ee Al Bayhaqii uuna kasoo guuriyay ibnu Isxaaq siduu ugu wariyay Ibnu Xajar Al Isaabah). Haddaad dooneysidna oo aad sidaas amartidna aniga laftayda ayaa kuu imaanaya. Aniguna waxaan marag ka ahay in waxaad ku hadlaysid ay run yihiin. Wa al ssalaamu calayka wa raxmatu Allaahi wa barakaatuHu.”

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Alihi Wa Sallam, Al Najaashiyyu laba warqadood ayuu u diray

Ibnu Sacd wuxuu wariyay inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, laba warqadood u diray, labadana uu ugu dhiibay Camr bin Umayyah, uuna labada warqadood middood ugu yeerayo inuu islaamo, warqadda labaadna inuu u guuriyo Ummu Xabiibah iyo inuu usoo diro inta agtiisa ka joogta asxaabtiisa, uuna doon soo saaro. Markaasuu islaamay, uuna sameeyey waxa la amray. Markaasuu wuxuu labadaas warqadood ku dhex riday sanduuq fool maroodi laga sameeyey, wuxuuna yiri: “xabashadu waxay ku sugnaanaysa khayr intay labadaan warqadood dhexdooda ku sugan yihiin oo ay haystaan.” Markaasuu asxaabta Nabigana, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oon ah Jacfar iyo inta la socota wuxuu saaray doon, doon labaadna wuxuu saaray wiilkiisa oo lixdan nin wata kuna daba daray doontay saarnaayeen Jacfar bin Abii Dhaalib ina adeerka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calyhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo ka hor baxday.

Al Najaashiyyu wiilkiisa iyo lixdanka nin oo wafdigiisa ahi badda ku dhinteen

Markaasay kuwaan doontii la degtay badda dhexdeeda oo ay wada hafteen oo wada dhinteen wiilkiisa iyo lixdanka la socotayba siday u wariyeen Al Taymiyyu iyo Al Bayhaqii oo ka wariyay ibnu Isxaaq. Inta doonta kale saarnaana way badbaadeen. Markaasay Jacfar iyo inta la socotaba waxay gaareen oo u tageen Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, waxayna ahaayeen toddobaatan nin, oo dhar suuf ah xiran, ayna ka mif yihiin laba iyo lixdan nin oo al xabashah u dhashay iyo sideed nin oo dadka Shaam dega, oo Jacfar al xabashah la joogay. Sideedaas waxaa magacaabay Qataadah oo yiri waxay ahaayeen: (Kow) Abraha, (Laba) Idriis, (Saddex) Ashraf, (Afar) Ayman, (Shan) Baxiiraa oo aan ahayn midkuu Sallaa

Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam arliga Shaam ku arkay waase isku magac, (Lix) Tamaam, (Toddoba) Tamiim, (Sideed) Naafic.
Markay u yimaadeen ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, Quraan ku dul akhriyay Suuradda Yaasiin oo dhan ilaa dhammaadkeeda. Markaasay booyeen markay Quraanka maqleen oo ay aamineen, waxayna yiraahdeen: “u ekaansho badanaa wixii Ciise lagu soo dejin jiray Calyhissalaatu Wassalaamu.

Quraanka raggaas kasoo degay

Raggaas ayuu Ilaahay kasoo dejiyay, siduu u wariyay ibnu Abii Xaatim iyo ghayrkiisba, Aayadaha laba iyo saddex iyo sideetan ee Suuratu Al Maa’idah:
"Latajidanna ashadda al nnaasi cadaawatan lillathiina aamanuu al yahuuda wa allathiina ashrakuu wa la tajidanna aqrabahum mmawaddatan llillathiina aamanuu allathiina qaaluu innaa nasaaraa thaalika bi anna mminhum qissiisiina wa ruhbaanan wa annahum laa yastakbiruuna(82)**Wa ithaa samicuu maa unzila ilaa Al Rrasuuli taraa acyunahum tafiidu mina al ddamci mimmaa carafuu mina al xaqqi yaquuluuna aamannaa fa aktubnaa maca al sh-shaahidiina**(83)**."**
Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Waxaad heleysaa oo aad arkaysaa inay kuwa ugu colaadin iyo cadawnnimo badan mu'miniinta muslinka ah ay yihiin yuhuudda iyo gaalada Carabta ah. Waxaadna heleysaa oo aad arkaysaa inay kuwa jacaylkooda ugu dhow kuwa mu'miniinta ah, waa muslimiintee, ay yihiin kuwa yiri waxaan nahay krishtaan. Krishtaankaanna ma aha dhammaan krishtaanka oo idil, ayagoo colaadda iyo cadawnnimada ay muslimiinta u hayaan ay yuhuudda kala mid yihiin, siday muslimiinta u dilaan, ayna u qafaashaan, ay dalalkooda u burburiyaan, masaajidyadooda ay u dumiyaan, kutubbadooda Quraanka ahna ay u gubaan. Krishtaanku wax karaamo ah ma laha. Krishtaanka ay Aayaddaani ka hadleyso waa kuwa ayagaas ka midka ah oo islaamay, sida Al Najaashiyyu iyo asxaabtiisa, taasna waxaa ugu wacan inay ku jiraan culummo iyo kuwo cibaadada Ilaahay u go'ay, anna iimaanka iyo raacidda xaqqa iyo runta iskala waynayn(82)Markayna maqlaan waxaa Rasuulka Ilaahay Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, korkiisa lagu soo dejiyay, waxaad arkaysaa indhohooda oo ilmo ka dureereyso, sababtoona ah inay xaqqa iyo runta aqoodeen, oo ah Al Najaashiyyu iyo asxaabtiisa, waxayna leeyihiin: "Rabbigeenow, waan aaminnay ee waxaad naga mid dhigtaa kuwa Maalinta Qiyaame dadka ku marag furi doona oo ah ummadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam"(83)."
Aayadduna waxay kasoo degatay intooda islaamtay, kumana saabsana intooda krishtaannimada ku hartay, siday u caddeeyeen ibnu Al Zzubayru oo uu wariyay Al Nnasaa’ii iyo ibnu Cabbaas oo uu wariyay Al Dhabraanii, iyo Saciid bin Jubayr oo uu wariyay ibnu Abii Xaatim, oo dhammaantood wariyay inay Aayaduu kasoo degatay asxaabta Al Nnajaashiyyi.

Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo Al Najaashiyyu ku tukaday markuu dhintay

Warqaddaas koowaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu u dhigay Boqorka magaciisu ahaa Asmaha bin Abjar oo ah midka islaamay oo markuu dhintay bisha Rajab ee sanadka sagaalaad ee Hijrada uu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam ku tukaday isagoo Al Madiinah ku sugan. Wanna isla boqorka ay muslimiintu u haajireen bisha Rajab ee sanadka shanaad ee Nabinnimada, Hijrada koowaad, kaddibna ay ahayd Hijrada labaad muddo gaaban kaddib.

Al Bukhaarii wuxuu Jaabir ka wariyay in markuu Al Najaashiyyu dhintay uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, yiri: **"qad maata al yawma cabdun saalixun yuqaalu lahu Asxamah, fa quumuu fa salluu"** fa safnaa khalfahu." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "waxaa maanta dhintay addoon ilaahay oo suuban oo la yiraahdo Aasxamah marka istaaga oo tukada", markaasaan kacnay oo aan gadaashiisa ku safannay.
Ibnu Shaahiin iyo Al Daarqudhniyyu waxay ayaguna Anasa ka wariyeen inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, yiri: **"quumuu fa salluu calaa akhiikum al najashiyyi"**, oo macnihiisu yahay: "istaaga oo ku tukada walaalkiin al najaashiyyu." Markaasay ragga qaarkiis waxay yiraahdeen: wuxuu na amrayaa inaan ku tukanno gaal reer xabashah ah (oo al cilju waa gaalka cajamta aan carabta ahayn). Markaasuu Ilaahay wuxuu soo dejiyay Aayadaha boqol sagaal iyo sagaashan iyo laba boqol ee Suuratu Aali Cimraana: **"Wa inna min ahli al kitaabi laman yu'minu bi Allaahi wa maa unzila ilaykum wa maa unzila ilayhim khaashiciina Lillaahi laa yashtaruuna bi Aayaati Allaahi thamanan qaliilan uulaa'ika lahum ajruhum cinda Rabbihim inna Allaaha sariicu al xisaabi**(199)**Yaa ayyuhaa allathiina aamanu isbiruu wa saabiruu wa raabidhu wa ittaquu Allaaha lacallakum tufilixuuna**(200)**."** Labada Aayadood macnohoodu waxaa weeye: "ehelu kitaabkana waxaa ka mid ah kuwa rumeysan Ilaahay iyo waxa adinka la idiin soo dejiyey, oo Quraanka ah, iyo waxa ayaga loo soo dejiyay oo ah Tawraadda iyo Injiilka, Ilaahay ayayna u khushuucsan yihiin, Aayaadka Ilaahayna qiimo yar oo lacag ahna ku gadan mayaan ayagoo taxriif ku samaynaya, sifooyinka Nabigana, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, beddelaya oo qarinaya sii aan isaga loo raacin oo ayan dadka ayaga ka wareegin oo ay sidaas madaxtinnimadii iyo xoolihii ay ku qaadan jireenba ayan u waayin, gaar ahaanna waa yuhuudda. Kuwaasu waxay ajarkooda ku leeyahiin Rabbigood agtiisa , Ilaahayna xisaabidda wuu ku dheereeya(199)Kuwiinna rumeeyeyeow sabra diintiinna ku sabra oo dhib iyo dhibaato idinku timid ha uga leexinnina, kuna sabra la dagaallanka gaalada Ilaahayna ka dhawrsada markaasaad mudan tihiin inaad liibaantaane(200)."

Al Baghawii wuxuu tafsiirkiisa labadaan Aayadood ku yiri: "ibnu Cabbaas iyo Jaabir iyo Anas iyo Qataadah waxay yiraahdeen: "waxay kasoo degatay Al Najaashiyyu boqorka xabshada, magaciisuna yahay Asxamah oo af Carabi macnihiisu ku yahay Cadhiyyah oo ah siin ama hadiyad, sababtuna waxay ahayd in markuu dhintay uu Jibriil Calayhissalaamu usoo sheegay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, isla maalintu dhintay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam, wuxuu asxaabtiisa ku yiri: **"akhrujuu fa sallu caklaa akhin lakum maata bi ghayri ardikum, Al Najaashiyyu"** oo macnihiisu yahay: "soo baxa oo ku tukada nin walaalkiin ah oo ku dhintay arli aan kiina ahayn waana Al Najaashiyyu." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu tegay qubuuraha Al Baqiic, waxaana Ilaahay hor keenay oo uu arkay arliga xabashada markaasuu wuxuu arkay nacashkuu saarnaa Al Najaashiyyu, oo uu markaas ku tukaday oo afar takbiirood kula tykaday, dambi dhaafidna u waydiiyay. Markaasay munaafiqiintu waxay yiraahdeen: "fiiriya midkaan (waxayna ka wadaan Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam) oo wuxuu ku tukanaya gaal cajam ah oo xabashi ah oo krishtaan ah oo uusan weligiis arag, diintiisana aan ku taagnayn." Markaasuu Ilaahay Aayaddaan soo dejiyay.

Al Daaruqudhniyyu iyo ghayrkiisba waxay Abuu Hurayrah ka wariyeen inuu yiri: "markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, salaadda ku booday

annaguna aan kula boodnay ilaa uu ka yimaado musallaha oo uu istaagay annaguna aan gadaashiisa safannay, markaasuu afar takbiiraat takbiirsaday."
Ibnu Isxaaq wuxuu Caa'ishah ka wariyay inay tiri: "markuu Al Nanjaashiyyu dhintay waxaan isku sheegi jirnay inuu qabrigiisa korkiisa nuur ahaa" waxaana wariyay Abuu Daauud oo yiri: "waxaa korkiisa ahaa nuurka lagu arko qubuurta shuhadada."
Waxaana la sheegay inuu nuurkaas ka bixi jiray qabriga ninkaas suubani u yahay sababtay muslimiintu u tagaan qubuurta dadka suusuuban ayadoo uu nuurkaasu yahay raxmad Ilaahay qofka qabrigaas ku jira kusoo shubayo, oo markaas qofka qabrigaas taga uu doonayo inuu raxmadaas isaguna wax ka helo oo wax kasoo gaaraan. Wa Allaahu aclamu.

Qoraalka Tobanaad

Bismi Allaahi Ala Rraxmaani Al Rraxiimi

Warqadda Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee boqorka Al Najaashiyyu xukunka uga dambeeyey markuu dhintay

Al Bayhaqii wuxuu ibnu Isxaaq ka wariayay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, warqad labaad u dhigay boqorka al xabashah oo xukunka qabtay markuu Al Najaashiyyu Asmaxah dhintay, gaalna ahaa islaamka neceb, magaciisana aan la aqoon. Waa tanaa Warqaddu:
"Haathaa kitaabun mina Al Nnabiyyi Muxammadin Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam ilaa Al Najaashiyyi Al Asxam, cathiimi al xabashah, salaamun calaa mani iitabaca al hudaa, wa aamana bi Allaahi wa Rasuulihi, wa shahida an laa ilaaha illaa Allaahu Waxdahu laa shariika lahu, lam yattakhith saaxibatan, wa laa waladan, wa anna Muxammadan cabduHu wa Rasuuluhu, wa adcuuka bi dicaayati Allaahi, fa innii anaa RasuuluHu, fa aslim taslim, yaa ahla al kitaabi tacaalaw ilaa kalimatin sawaa'in baynanaa wa baynakum, an laa nacbuda illaa Allaaha, wa laa nushrika bihi shay'an, wa laa yattakhitha bacdunaa bacdan arbaaban min duuni Allaahi, fa in tawallaw, fa quuluu ash-haduu bi annaa muslimuuna, fa in abayta fa calyka ithmu al nnasaaraa min qawmika."

Warqadda macneheedu waxaa weeye: "Midkaanu waa qoraal ka socda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, una socda Al Najaashiyyu Asxam (oo uu ibnu Kathiir ninka Xadiithka wariyay ayaa ku daray siduu u gartay, maxaa yeelay magaciisa sidaan u aragnay lama yaqaanno) midka ugu wayn al xabshah, salaan iyo nabadgelyo waxay tahay korka midka raaca hanuunka, rumayana Ilaahay iyo Rasuulkiisa, kana marag kaca inuusan jirin ilaah aan Ilaahay ahayn Keligiis uusanna shariik lahayn, uusanna Ilaahay haweeney lahayn wiilna uusan lahayn, iyo inuu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, yahay addoonkiisa iyo Rasuulkiisa, waxaanna kuugu yeeray yeeridda Ilaahay uu islaamka kuugu yeerayo, oo anigu waxaan ahay Rasuulkiisa, marka islaam waad badbaadaysaaye. Kuwiinna kitaabka la siiyow , kaalaya aan ku heshiinnee kalimad aan u wada simannahay oo ah inaanan caabudin Ilaahay mooyee, iyo inaanan shayna shariik uga dhigin, iyo inayan qaarkeen qaarka kale raabiyo ka dhigan (oo waxna xalaal uga dhiga waxna xaaraan uga dhiga taasoo uu Ilaahay Tacaalaa leeyahay) Ilaahay sokadiis. Haddadse diidaan oo aad yeeriddaan ka jeesatan waxaa tiraahdaan: marag ka ahaada inaan annagu muslimiin nahay. Haddaad diiddo waxaa korkaaga ah dambiga krishtaanka qawmkaaga."

Imaatinka Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee wafdiga krishtaanka ah ee arliga xabashada

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Kaddib Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo Makkah ku sugan ayaa waxaa u yimid labaatan nin , ama tiro intaas u dhow, oo krishtaan ah, kaddib markuu arliga xabashada warkiisu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku gaaray. Markaasey waxay haleeleen isagoo Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam masjidka dhexdiisa ku jira. Markaasey la fariisteen oo ay la hadleen, ayna wareysteen. Intaasoo idilna rag Quraysh ahna oo gaalo ah waxay fadhiyaan naadiyadooda Kacbada hareereheeda ah. Markaasey markay kasoo jeesteen dhammaan waxay doonayeen inay weydiiyaan, ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ugu yeeray Ilaahay Cazza wa Jalla, wuxuuna dushooda ku akhriyay Quraan. Markaasey markay Quraanka maqleen ay ilmo indhohooda kasoo hoobatay, kaddibna Ilaahay ayay yeeleen, Nabigana, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, way aamineen, wuxuu la yimidna ay rumeeyeen, waxayna ka arkeen oo ay ka ogaadeen waxa amarkiisa ah oo kitaabkooda lagu tilmaamay. Markaasey markay agtiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka keceen, kaddib markay islaameen, ayaa waxaa ka horyimid Abuu Jahl bin Hishaam oo ay la socdaan koox rag Quraysheed, waxayna ku yiraahdeen: "Waxaad tihiin wafdi Ilaahay khasaariyey oo wuxuu doonayey aan helin. Waxaa idin soo dirsaday tolkiinna aad isku diinta tihiin inaad ninkaan warkiisa u geysaan oo aad ula noqotaan. Markaasaad markaad la fariisateenba oo aydnaan fadhigaba ku xasilin ayaad diintiinna ka baxdeen oo aad wuxuu leeyahay rumeyseen. Ma ogin wafdi idinka sawirsan oo idinka dabbaalsan." Sidaas ayay wafdigaas ku yiraahdeen, ama siday ku yiraahdeenba. Markaasey ragga wafdigu waxay ugu jawaabeen: "Nabadi korkiinna ha ahaato. Dood jaahilnimo annagu geli maynno, oo annaguna diinteenna ayaan leenahay, adinkuna tiinna. Annaguna nafteenna khayr iyo wax fiican ugama bakahiileynno oo kalama hakran." Waxaa kaloo la yiri inuu wafdigaasi ahaa wafdi krishtaan ah oo ka yimid Gobolka Najraan ee Yaman. Ilaahay ayaana u cilmi leh midkuu ahaa.

Quraanka wafdigaas kasoo degay

Waxaa la yiri, Ilaahay ayaana u cilmi leh, inay ayaga kasoo degteen Aayadaha labo iyo konton ilaa shan iyo konton ee Suuratu Al Qasasi." Aayadahaasi waxay leeyihiin: **"Allathiina aataynaahumu al kitaaba min qablihi hum bihi yu'minuuna**(52)**Wa ithaa tutlaa calayhim qaaluu aamannaa bihi innahu al xaqqu min Rabbinaa innaa kunnaa min qablihi muslimiina**(53)**Uulaa'ika yu'tawna ajrahum marratayni bimaa sabaruu wa yadra'uuna bi al xasanati al ssayyyi'ata wa mimmaa razaqnaahum yunfiquuna**(54)**Wa ithaa samicuu al llaghwa acraduu canhu wa qaaluu lanaa acmaalunaa wa lakum acmaalukum salaamun calaykum laa nabtaghii al jaahiliina**(55)**."** Aayadahaha macnohoodu waxaa weeye: "Kuwaan siinnay kitaabka isaga hortiis, waana Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ama Quraanka, way rumaysan yihiin isaga(52)Marka Quraankana korkooda lagu akhriyo waxay leeyihiin: "waan rumaynnay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo ku xusnaa kutubbadooda Tawradda iyo Injiilkaba, isaguna waa xaq run ah xagga Ilaahayna ka yimid oo laga soo diray. Annaguna ka hor Quraanka soo degiddisa ayaan muslimiin ahayn oo muwaxxidiin ah, rumeeyayna inuu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yahay Nabi run ah"(53)Kuwaas waxaa la siinaya ajarkooda laba goor, ayagoo marka horena kitaabkii hore rumeeyey, hadana kitaabka Quraanka ah ee dambeeyey, iyo siday ugu sabreen diintooda oo lagu dhibaateeyey. Kuwaasu waxay gaalnimada isaga daafacaan oo ay ku celiyaan shahaadada Laa ilaaha

illaa Allaahu, rizqiga aan siinnayna waxbay ka bixiyaan(54)Kuwaasu markay maqlaan hadal xunna oo ayaga lagu leeyahay, siday gaaladu yeeli jireen oo ay mu'miniinta ehelu kitaabka ah u caayi jireen, uma jawaabaan ee way ka jeestaan, waxayna ku yiraahdaan: "Annaguna waxaan leennahay Diinteenna adinkuna diintiinna, annaguna ma dooneynno diinta jaahiliinta, oo ah ma jeclin diintiinna gaalnimada ah oo aad ku taagan tihiin"(55)."

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Waxaan weydiiyay ibnu Shihaab Al Zuhriyyi cidday Aayaadkaasi kasoo degeen wuxuuna yiri: "Waxaan mar walba culummadeenna ka maqleynnay inay kasoo degatay Al Najaashiyyu iyo asxaabtiisa ayagaas iyo Aayadaha laba iyo sideetanaad iyo saddex iyo sideetanaad ee Suuratu Al Maa'idah." Aayadaha laba iyo sideetanaad iyo saddex iyo sideetanaad ee Suuratu Al Maa'idah waxay leeyihiin: **"Latajidanna ashadda al nnaasi cadaawatan lillathiina aamanuu al yahuuda wa allathiina ashrakuu wa la tajidanna aqrabahum mmawaddatan llillathiina aamanuu allathiina qaaluu innaa nasaaraa thaalika bi anna mminhum qissiisiina wa ruhbaanan wa annahum laa yastakbiruuna**(82)**Wa ithaa samicuu maa unzila ilaa Al Rrasuuli taraa acyunahum tafiidu mina al ddamci mimmaa carafuu mina al xaqqi yaquuluuna aamannaa fa aktubnaa maca al sh-shaahidiina**(83)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Waxaad heleysaa oo aad arkaysaa inay kuwa ugu colaadin iyo cadawnnimo badan mu'miniinta muslinka ah ay yihiin yuhuudda iyo gaalada Carabta ah. Waxaadna heleysaa oo aad arkaysaa inay kuwa jacaylkooda ugu dhow kuwa mu'miniinta ah, waa muslimiintee, ay yihiin kuwa yiri waxaan nahay krishtaan. Krishtaankaanna ma aha dhammaan krishtaanka oo idil, ayagoo colaadda iyo cadawnnimada ay muslimiinta u hayaan ay yuhuudda kala mid yihiin, siday muslimiinta u dilaan, ayna u qafaashaan, ay dalalkooda u burburiyaan, masaajidyadooda ay u dumiyaan, kutubbadooda Quraanka ahna ay u gubaan. Krishtaanku wax karaamo ah ma laha. Krishtaanka ay Aayaddaani ka hadleyso waa kuwa ayagaas ka midka ah oo islaamay, sida Al Najaashiyyu iyo asxaabtiisa, taasna waxaa ugu wacan inay ku jiraan culummo iyo kuwo cibaadada Ilaahay u go'ay, anna iimaanka iyo raacidda xaqqa iyo runta iskala waynayn(82)Markayna maqlaan waxaa Rasuulka Ilaahay Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, korkiisa lagu soo dejiyay, waxaad arkaysaa indhohooda oo ilmo ka dureereyso, sababtoona ah inay xaqqa iyo runta aqoodeen, oo ah Al Najaashiyyu iyo asxaabtiisa, waxayna leeyihiin: "Rabbigeenow, waan aaminnay ee waxaad naga mid dhigtaa kuwa Maalinta Qiyaame dadka ku marag furi doona oo ah ummadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam"(83)."

Amxaarada oo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku duushay

Dr. Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl wuxuu bogga laba iyo labaatanaad ee kitaabkiisa hoos ku xusan ku yiri: "Markuu Al Najaashiyyu kii muslinka ahaa dhintay, waxaa xukunka qabtay boqor kale oo aan dariiqii Asmaxah (kan dhintay oo muslinka ahaa) qaadin inta ku saabsan inuu ilaaliyo xiriirka siyaasadeed ee wanaagsan ee ayaga iyo muslimiinta ka dhexeeya. Waxaadna mooddaa inuu xukunkiisa u baqay hadduu qalbi jileec u muujiyo islaamka siduu boqorkii horreeyey yeelay oo kale. Markaasuu wuxuu goostay inuu diididdiisa diintaan islaamka uu diidan yahay ku muujiyo si wax ku ool ah oo loo jeedo ee colaadeed. Markaasuu wuxuu soo diray maraakiib kusoo duusha Jiddah. Markaasay dadka Al Shucaybiyah (oo ahayd dekadda Makkah ee Jiddah ka horreysey) iyo dadka Jiddaba waxay arkeen maraakiibta amxaarada. Markaasuu warku wuxuu gaaray Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo markaas uu soo diray Calqamah bin Mujazziz (Calqamah bin Mujazziz bin Al Acwar ibnu Jacdah bin Mucaath bin Ctwaarah bin Camr bin Mudlij Al Kinaanii) Al

Mudlijiyyi, oo wata ciidan ka kooban saddex boqol oo dagaal yahan, si uu uga hortago maraakiibtaas, kana hor istaago inay weeraraan dadka Jiddah deggan, ayna xeebta Al Xijaaz hadidaan. Markaasuu Calqamah xeebta yimid, uuna ciidankiisa badda la qaaday ilaa ay ka yimaadaan jaziirad badda ku taalla. Markaasay amxaaradu markay dareemeen imaatinka muslimiinta carareen oo ay dalkooda u noqdeen, ayadoo uusan dagaal dhex marin ayaga iyo ciidanka Calqamah. In kastoo uu duullaankaan xagga badda ah ee amxaardu uusan ku guulaysan wuxuu doonayay, waxay isla markaas muujisay colaadday amxaaradu u hayso islaanka iyo muslimiintaba. Muslimiinta horena way garteen colaaddaas, waxaana qanciyay waxa dhacay inuu arrinku yahay siday u garteen, waxay malaynayeenna uu dhacay. Zamanka Cumar bin Al Khadh-dhaabna, Allaha raalli ka noqdee, amxaaradu waxay kusoo duushay xeebta bari ee Badda Cas ee arliga muslimiinta. Markaasuu Cumar wuxuu usoo diray Calqamah bin Mujazziz Al Mudlijiyyi inuu ku duulo arliga amxaarada sanadka labaatanaad ee Hijriga. Markaasuu ciidankaas wada dhintay, oo badda galeen. Markaasuu Cumar wuxuu goostay inuusan ciidan dambe badda u dirin, oo ayan sidaas muslimiintu ku dhiman." Al Doktoorah Saamiyah waxay bogga saddex iyo soddonaad ku tiri: "Duullaankaasu wuxuu muujiyay ruuxa colaadeed oo ay amxaaradu uurkeeda ugu hayso islaamka iyo muslimiintaba. Waxaadna mooddaa inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isaguna sidaas oo kale u haystay. Taas ayaana u sabab ah inay axaadiith-tiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu muslimiinta uga digayo ay ka mid tahay: **"Utrukuu al xabashah maa tarakuukum"**, oo macnihiisu yahay: "iska daaya amxaarada intay ayaguna iska kiin daynayaan." Waxaa ayaduna dhacday duullaan colaadeed oo ay amxaaradu kusoo qaadeen beelaha islaamka ee Makkah, oofsashada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dabadeed iyo zamanka Khalifada Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee, ayadoo ay amxaaradu soo weerartay xeebta bari ee Badda Cas, oo uu markaas ibnu Al Khadh-dhaab u diray oo ku celiyay ciidan badda oo uu u diray arliga amxaarada sanadka labaatanaad ee Hijrada, una dhiganta sandka lix boqol iyo afartan, uuna taliye u yahay Calqamah Mujazziz Al Mudlijiyyi." Carabta Libiya oo ka mid ahaa askarta uu Mussooliiniga talyaaniga ahi ku qabsaday Addis Ababa iyo arliga amxaarada waxay reebeen war maahmaah noqday, oo markay xumaanta amxaarada iyo nacaybkeeda muslimiinta iyo dhaqan xumadooda arkeen waxay yiraahdeen: "amxaaro aragtayaa faranji (oo ah krishtaanka yurub) xaajji".

Amxaaro waa jilib qabiilka Carbeed ee Ximyar

Kitaabka la yiraahdo General History of Africa II, Ancient Civilizations of Africa, boogga saddex boqol iyo saddex iyo lixdan , ayna daabacday UNESCO International Scientific Committee for the Drafting of a General History of Africa ee Qarammada Midoobay wuxuu yiri: "Al Xabashah waxaa la oran jiray boqortooyo ku tiillay Waqooyi/Bariga Afrika oo dhulkeedu ahaa qiyaas saddex boqol oo kiiloomitir oo dhererka ah iyo boqol iyo lixdan ballaca ah. Qiyaas laba boqol oo sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa waxaa kula jabay xeebtaas Badda Cas markab uu wax ka saarnaa ninka Suuriya u dhashay oo magaciisu ahaa Frumentius, ahaana krishtaan. Frumentius, oo kaniisadda amxaarada laga yiraahdo Abba Selama ama Kessate Brhan, oo macneheedeu yahay aabaha nabadda, wuxuu noqday la taliyaha iyo khasnajiga boqorka dalkaas oo lagu wado inuu magaciisu ahaa Ella Amida, aabaha dhalay boqorka Ezana. Frumentius wuxuu kaloo macallin u noqday wiilka uu boqorku dhalay. Sidaas ayay diinta krishtaanku kusoo gashay gobolkaas." Kaddib waxaa gobolkaas daris la noqday boqortooyin toddoba ah oo muslinliini deggantahay, oo ay qaarkood boqorro u yihiin rag u dhashay reer Banii Haashim iyo reer Banii Makhzuum iyo kuwo kaleba. Dawladdaasi markay krishtaanka

noqotay waxay gaashaanbuur la noqotay dawladaha krishtaanka ah ee qaaradda yurub ku yaalla, ayada dawrkeeduna wuxuu noqday, ilaa maantana yahay, la dagaallanka Diinta Islaamka iyo Muslimiintaba, Kacbadana, siduu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay waxaa aakhiru zamanka dumin doona nin ayaga ka dhashay. Kaddibna boqortooyadaasi way fidday, oo ay boqortooyooyinkii kale iyo qawmiyadihii kale leqday. Markay Muhaajiriinta asxaabta Nabi Muxmnmad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arligaas imaanayaan, si ay rag muslimiin ah ee dalkaas u dhashay ii sheegeen, magaalo madaxda boqortooyadaasi uuna Al Najaashiyyu degganaa waxay ahayd magaalada la yiraahdo **Cadigrat**, oo ilaa dhawr kiiloomitir u jirta Aksuum, buuraha dushoodana ku taalla ee arliga Tigray. Dadka Muslimiinta ah ee dawladdaas degganaana waxaa la oran jiray Jabarti, sidaan annagu dadkaan muslinka ahayn gaalo u niraahno oo kale. Jabarti waxaa loogu bixiyay inay degi jireen magaalo arligaas ku taalla oo Jabarta (maantana la yiraahdo Harar) la oran jiray, kuna tiillay Bariga gobolka Shawa, siduu Mordechai Abir ugu wariyay Ethiopia and the Red Sea boogga kow iyo toban; J. Spencer Trimingham sidaas ayuu isaguna ku wariyay kitaabkiisa Islam in Ethiopia, oo lagu daabacay Frank Cass & CO. Ltd. Oxford University Press ee dalka Ingiriiska, kun sagaal boqol shan iyo lixdan. bogga boqol iyo konton, uuna ku yiri: " .. the Muslim historians spoke of the territory of Zaila as the land of Jabarta; then the term was extended to all the Muslim Kingdoms of Southern Ethiopia, and, finally to all Ethiopian Muslims. It must be clearly understood that in no sense is it the ethnic name of a people", oo macneheedu yahay: "Mu' arrikhiinta muslimiinta ahi waxay ku tilmaameen beledka Zaylac inuu yahay beledka, ama waddanka, Jabarta; Markaas kaddib ayaa eraygaas waxaa loogu yeeri jiray muslimiinta Boqortootyinka ku yiillay koofurta Ethiopia, kaddibna looguba yeeri jiray muslimiinta Ethiopia oo idil. Waa in si caddaan ah loo gartaa inuusan eraygaani sina u ahayn magaca qabiil.". Sidoo kale fiiri Enrico Cerulli "Gli Emiri di Harar dal secolo XVI alla conquista Egiziana (1875)", laguna daabacay Roma-La Libreria dello Stato-1942-XX, kuna dhigan afka Carabiga iyo talyaanigaba, kana koobanba kow ama dhawr iyo labaatan warqadood. Afka Dawladda Islaamka ah ee Hararna Guddoomiyaha Gobolka waxaa la oran jiray Garaad, kan Degmadana Malaaq.

Qoraalka Kow iyo Tobnaad

Bismi Allaahi Al Rarxmaani Al Rraxiimi

Warqadduu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u dhigay boqorka Masar

Masriyiintu Carab ma aha

Al Sayuudhii, waana saaxibu Tafsiiru Al Jalaalayni, wuxuu kitaabkiisa Rafcu Sha'ni Al Xubshaani, oo Jaamacadda Al Azhar ay daabacday, uuna hubiyey Dr. Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl oo macallin ka ah Jaamacadda Al Azhar ee Al Qaahirah, bogga kow iyo lixdanaad wuxuu Samurah bin Jundub ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Saam abuu Al Carabi wa Yaafith abuu Al Ruumi wa Xaam abuu Al Xabash."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Saam (waa ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay Carabta, Yaafith (ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay roomaanka, Xaamna (ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay xabshada (oo ah dadka madow oo dhan, ayagoo dhammantood isaga ku abtirsada).” Waxaa wariyay Al Tarmathii, yirina waa Xadiith Xasan Waxaa kaloo wariyay Ibnu Sacad, ibnu Kathiir oo Al Bidaayah iyo Nihaayah ku wariyay, iyo Imaam Axmad iyo Al Dhabarii iyo kuwo

kaleba. Al Sayuudhii wuxuu kaloo bogga afar iyo lixnadaad ee isla kitaabkiisaas Abuu Hurayrah uga wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Walada Nuuxun Saam wa Xaam wa Yaafith. Fa walada Saam Al Carab wa Faaris wa Al Ruum wa al khayru fiihim. Wa walada Yaafith Ya'juuj wa Ma'juuj wa al turka wa al Saqaalibata wa laa khayra fiihim. Wa walada li Xaamin Al Qibdhu wa al Barbaru wa Al Suudaanu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Nuux wuxuu dhalay Saam iyo Xaam iyo Yaafith. Markaasuu Saam wuxuu dhalay Carabta iyo Faaris (oo ah iiraaniyiinta) iyo Roomaanka, khayrkuna ayaguu ku jiraa. Yaafithna wuxuu dhalay Ya'juuj iyo Ma'juuj iyo Turkiga iyo Al Saqaalibah, khayrma ma laha, Xaamna waxaa loo dhalay Al Qibdhu (oo Masar degah) iyo Barbarta iyo dadka madow." Xadiithka waxaa kaloo uu Ibnu Xajar Al Casqalaanii ku wariyay Fatxu Al Baarii, kaddibna ku daray oo yiri: "silsiladdiisana taag darro ayaa ku sugan." Waxaa kaloo wariyay ibnu Kathiir (Al Bidaayah wa al Nihaayah).

Al Mascuudii wuxuu Muruuju Al Th-thahabi ku sheegay inayan dadka wax baara isku khilaafsanyan inuu Yaafith ina Nuux yahay kan ugu yar ee wiilasha Nuux, iyo inay dhashiisa ka mid yihiin Al Afranjah (oo ah dadka Yurub degah qaarkood) iyo al Saqaalibah iyo Al Nuukubard iyo Al Ashbaan iyo Ya'juuj iyo Ma'juuj iyo Turkiga iyo Al Khazar (oo ah dadka degah dhulka Bari iyo Waqooyi ka xigah dalka Turgiga oo buuraaleyda Al Qawqaaz kasii dambeeya iyo Badda Caspian, ayna magaalo madax u ahaan jirtay Itiil, lehna indhaha yar sida shiinaha, siduu Lisaanu Al Carab u yiri). Al Saqaalibah waa dhasha Maar bin Yaafith bin Nuux isagayna ka farcameen dhammaan jinsiga Saqaalibada, waxayna degaan Al Judaa ilaa ay kala xiriiraan Al Maghrib, waana jinsiyo kala duwan oo ay dagaallo dhex yaallaan, qaarkoodna ay Nasraaniyada ka diin yeeshaan, qaaraana ayan Kitaab lahayn." (Muruuju Al Thahab 2/32-34)

Ibnu Kathiir wuxuu Al Bidaayah wa Al Nihaayah (2/110) ku yiri: "Yaafith ayaa dhalay Turkiga. Ya'juuj iyo Ma'juuj waa qayb turkiga ka mid ah waana dadka la yiraahdo Maghuul (oo hadda la yiraahdo Mongol oo shiinaha la dariska ah, ama kaba tirsan). Turkigana waxaa magacoodaan ah turki loogu bixiyay ayadoo markuu Thuu Al Qarnayn biyo xireenka dhisay, uuna Ya'juuj iyo M'ajuuj uu gadaashiisa ku takooray waxaa ka hartay koox aan fasaadkooda oo kale gaarin, markaasay ka tageen, markaasaa turki lagu magacaabay, oo ah kuwa laga tegey."

Quudh bin Xaam wuxuu guursaday gabadha la yiraahdo Bukht uuna dhalay Bitaawiil, markaasey waxay u dhashay wiil uu u bixiyay Qibdh, oo ay Masaaridu ka farcamdeen. Wiilka kale ee Xaam, magaciisuna yahay Kancaan wuxuu guursaday Bukht ina Bitaawiil walaasheed magaceedu yahay Artiil, markaasey waxay u dhashay wiilasha ay dadka madow oo idil ku abtirsadaan, ayna ka mid yihiin Nuubah (oo ah aabaha dadka Suudaan degah oo Nuubiyiinta la yiraahdo) iyo Fazaan.

Dalka Masar markuu islaanku furtay waxaa ayaguna degay dad Carab ah oo u badnaa reer Yaman. Al Qaahirah waxaaba ku yaalla xabaalo u gaar ah oo la yiraahdo “xabaalaha Quraysh” oo Qurayshta halkaas deggan oo ku dhimata lagu duugi jiray. Al Imaamu Al Sh-shaafici, Allaha raalli ka noqdee, wuxuu isaguna ku duugan yahay Al Qaahirah.

Kitaabka Zawjaatu Al Anbiyaa'i

Doktoor Musdhafaa Muraad, oo xubin ka ah hay'adda waxbarashada ee jaamacadda Al Azhar ee Al Qaahira ee dalka Masar wuxuu kitaabkiisa Zawjaatu Al Anbiyaa'i, laguna daabacay Daaru Al Fajri lil turaathi ee Al qaahira sanadka kun afar boqol iyo kow iyo labaatan Hijriga una dhiganta laba kun iyo kow ee miilaadiga, wuxuu kutubbada hore ka wariyay oo uu bogga boqol iyo labaatan ku yiri: “Maariyah Al Qibdhiyyah, Allaha raalli ka noqdee, waxay ku dhalatay tuulo fac wayn oo ka tirsan koofurta Masar oo la

yiraahdo “Xafn” oo ka tirsan degmada Ansanaa oo ku taalla daanta bari ee wabiga Niil dhanka Al Ashmuuniin. Tuuladaasu hadda waa xarunta Dayru Mawaas ee gobolka Al Manyaa. Aabeheed wuxuu ahaa Qibdhi hooyadeedna krishtaan roomaan ah (katoolik). Inta hore ee nolosheeda waxay ku sugnayd tuuladeeda, kaddibna waxay u guurtay ayadoo ay la socoto walaasheed Siiriin qasriga Al Maqawqis Cathiimu Al Qibdhi ahna boqorka Al Iskandariyyah.

Markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, boqorka Masar u diray warqaddiisa uu ugu yeerayo Diinta islaamka, boqorku mana diidin mana oggolaan inuu islaamo, wuxuuna Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, usoo diray sanadka toddobaad ee Hijrada Maariyah iyo walaasheed Siiriin iyo kun mithqaal (wiqiyadood) oo dahab ah, iyo labaatan maro oo jilicsan, iyo baqashiisa Al Daluul (ama Duldul) iyo dameerkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, Cafiir, lana yiri waa Yacfuur. Waxaa hadiyadaha la socday oo kale nin dhufaanan oo la yiraahdo Ma’buur oo oday da’ wayn ah oo Maariyah walaalkeed ahaa. Intaasoo idil wuxuu ugu soo dhiibay Xaadhib bin Abii Baltacah. Markaasuu Xaadhib intay Al Madiinah Al Munawwarah usoo socdeen wuxuu Maariyah usoo jeediyay inay islaanto uuna ku boorriyay oo ku geesinnimo geliyay. Markaasay islaantay, ay walaasheedna islaantay. Dhufaankuse wuxuu ku taagnaa diintiisa ilaa uu ku islaamay Al Madiinah intuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi wa Sallam, joogay.

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuu u bogay oo way cajab gelisay Ibraahiim hoopyadiis Maariyah, waxayna ahayd gabar cad oo quruxoon. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu dejiyay xaafadda Al Caaliyah guri ku yaalla ceelka la yiraahdo maanta Mashrabatu Ummu Ibraahiim, halkaas ayuuna ugu imaan jiray, wuxuuna kusoo rogay xijaab, wuxuuna ugu tegi jiray ayadoo milkigiisa ku jirta. Markaasay markay uur yeelatay ayay isla gurigaas ku dhashay waxaana umuliso u ahayd Salmaa mawladda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Markaasaa waxaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u yimid Abuu Raafac ninkay u dhaxdo Salmaa oo ugu bishaareeyey inuu Ibraahiim u dhashay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u hibeeyhey addoon. Taasna waxay ahayd bisha Thuu Al Xijjah ee sanadka sideedaad.

Maariyah dhalidda ay wiilkeeda Ibraahiim dhashay, Calayhissalaamu, waxay sabab u noqotay xoraynteeda, siduu ibnu Cabbaas u yiri: “Markay Ibraahiim hooyadiis dhashay ayuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri: **“actaqahaa waladuhaa”,** oo macnihiisu yahay: “waxaa xoreeyey wiilkeeda.” Wuxuu kaloo Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri: **“ayyamaa aamatan waladat min sayyidihaa, fa innahaa xurratun ithaa maata illaa an yactiqahaa qabla mawtihi.”** Xadiithka oo uu wariyay Axmad (1/208) macnihiisu waxaa weeye: “addoonta ninka leh cunug u dhasha waa xor markuu ninku dhinto, inuu xoreeyo ibntuusan dhiman mooyee.”

Maariyah markay Ibraahiim dhashay qadarkeedu kor ayuu uga kacay haweenka kale ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ayadoo ayagana dhalmada laga reebay ayadana lagu rizqiyay. Markaasay haweenka kale ee Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ka masayreen mawqifkay agtiisa ku leedahay.

Intaasoo Al Sayyidah Maariyah, Allaha raalli ka noqdee, ay leedahay oo suubanaan ah iyo qurux iyo qadarkay ku leedahay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, agtiisa, kama ayan nabad gelin carrabbada beenaalayaasha, kuwaasuu carrabbadooda ku taagay oo ku tuhmay tuhun xun.

Anas, Allaha raalli ka noqdee, wuxuu yiri: “Ummu Ibraahiim waxay ahayd surriyadda Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ku sugan gurigeeda,

waxaana guriga u gali jiray nin qibdhi ah oo biyaha u keeni jiray iyo qoryaha cunnada lagu karsado. Markaasay dadku arrinkaas wax ka yiraahdeen. Markaasuu warkaasu wuxuu gaaray Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo uu markaas Calii bin Abii Dhaalib ninkaas u diray, Allaha raalli ka noqdee. Markaasuu wuxuu ka helay beer geed timireed. Markaasuu Calii seeftiisa lasoo baxay. Markuu taas arkay ayuu qibdhigu gartay waxay dhacay markaasuu maraduu xirnaa iska tuuray oo is qaawiyay, mase thakar ma laha (oo waa iskaba gooyay). Markaasuu Calii Allaha raalli ka noqdee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u noqday oo uu khabarka u sheegay, wuxuuna yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, bal ka warran haddad midkeen arrin amartid, uuna soo arko inuusan amarku sidaas ahayn, ma kugu soo noqonayaa si uu kuu waydiiyo inuu arrinkaas fuliyo?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri: **"Nacam"** oo ah: "haa." Markaasuu Calii wuxuu u sheegay wuxuu qibdhiga ka arkay, oo ah inuusan thakar lahayn." Anas wuxuu yiri: "Maariyah waxay dhashay Ibraahiim, markaasaa waxaa u yimid Jibriil Calayhissalaamu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuuna ku yiri: "Al Ssalaamu calaykum yaa Abaa Ibraahiima" oo macnihiisu yahay: "Al Ssalaamu calaykum Ibraahiim aabihiisow." Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, taas ku xasilay.

Riwaayad kalena waxay warisay sidatan: "Calii markuu soo aaday wuxuu ka helay tuulo madexeeda isago Maariyah biyo macaan uga soo dhaaminaya. Markaasuu Calii markuu arkay seeftiisu galka ka siibay oo uu xaggiisa soo aaday. Markaasuu qibdhigu markuu arkay ayuu sibraarka biyaha ah dhulka dhigay oo uu geed timireed tafay uuna is qaawiyay, Calina uu arkay inuusan thakar lahayn. Markaasuu Calii seeftiisa galeeyey uuna Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aailihi Wa Sallam, khabarka u sheegay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu yiri: **"asabta inna al sh-shaahida yaraa maa laa yaraa al ghaa'ibu."** Xadiithka macnhiisu waxaa weeye: "waad haleeshay oo asiibtay, ayadoo uu qofka goob joogga ahi oo u jeeda uu arko wuxuusan arkin midka goobtaas ka maqan."

Marka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, la oofsaday khulafadiisu way wanaajiyeen Al Sayyidah Maariyah, Allaha raalli ka noqdee, oo Abuu Bakr xooluu ku nafaqayn jiray ilaa isagana laga oofsaday. Waxaa uga dambeeyey Cumar, Allaha raali ka noqdee, oo nafaqayn jiray ilaa ayada laga oofsaday khilaafadiisa sanadka lix iyo tobnaad ee Hijrada, markaasaa la arkay Cumar bin Al Khadh-dhaab oo ragga soo uruurinaya si ay janaazadeeda uga qayb galaan, isagaana ku tukaday, qabrigeeduna wuxuu ku yaalla Al Baqiic.

Sidaasay Maariyah, Allaha raalli ka noqdee, waxay masriyiinta u ahayd karaamo, ayna nasabkooda kor u qaaday, oo waxay noqdeen caruurta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, iyo xididkiisa. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam masaarida wuu u dardaarmay wuxuuna yiri: **"innakum sa taftaxuuna Misra wa hiya ardun yusammaa fiihaa al qiiraadhu fa ithaa fataxtumuuhaa fa axsinuu ilaa ahlihaa, fa inna lahum thimmatan wa raximan,** aw qaala **thimmatan wa sihran…"** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "waxaad furan doontaan Masar oo ah arli laga isticmaalo lacagta la yiraahdo qiraadh (sidaan annagu shilin ugu isticmaalno oo kale). Hadaba markaad furataan dadkeeda u sama fala, maxaa yeelay waxay leeyihiin thiimmo oo ah ilaalin iyo rixim qaraabannimo" ama "ilaalin iyo xididnimo."

Riwaayad kale waxay warisay: **"innakum sa taxtaxuuna ardan yuthkaru fiihaa al qiiraadhu fa istawsuu bi ahlihaa khayran fa inna lahun thimmatan wa raxmatan."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "waxaad furan doontaan arli looga dhaqmo lacagta

la yiraahdo qiiraadh, marka dadkeeda u sama fala, maxaa yeelay waxay leeyihiin ilaalin iyo naxariis.”

Guurisgiisa Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, Maariyah wuxuu ku kasbay jeceylka dadka Masar dega iyo qibdhiyiintaba.”
Waa intaas warkaan kitaabkaan kasoo qaadannay, sheekha Allaha dambigayga iyo kiisaba dhaafee.

Al Xasan bin Calii oo Tuulada Maariyah jizyada ka daayay

Ummu Al Mu’miniina Maariyah waxay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u dhashay wiilkiisa Ibraahiim Calayhissalaamu. Ibraahiim waa abtiga Al Xasanu iyo Al Xusaynu bin Calii bin Abii Dhaalib oo waxaa dhashay walaashood Faadhimah gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.
Ibnu Maajah iyo Al Bayhaqii waxay ibnu Cabbaas ka wariyeen inuu yiri: "Markuu dhintay Ibraahiim, wiilka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu ku tukaday, wuxuuna yiri: **"Inna lahu murdican fii Al Jannati, wa law caasha la kaana Siddiqan Nabiyyan. Wa law caasha la actaqtu akhwaalahu mina al Qibdhi, wa maa istaraqqa Qibdhiyyun."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Wuxuu leeyahay murdicad Jannada dhexdeeda ku nuujineysa. Hadduu noolaan lahaana wuxuu ahaan lahaa Runlow Nabi ah. Haduu noolaan lahaana waxaan xorayn lahaa abtiyaalkiisa Qibdhiyyiinta ah, oo ah dadka Masar dega. Qof Qibdhi ahna lama addoonsadeen." Al Burhaanu wuxuu yiri: "Macneheedu waxaa weeye, hadduu noolaan lahaa, oo ay abtiyaalkiis arkaan way farxi lahaayeen, oo ay markaas islaami lahaayeen ku farxiddiisa iyo karaameyntiisa. Markaasaa jizyada laga ridi lahaa, ayadoo aan muslinka jizyo laga qaadin. Markaasey markay islaamaan ayagoo xor ah, lama addoonsanayo, ayadoo xorka muslinka ah aan la addoonsan karin."
Kitaabka fiqiga shaaficiga ee Mughnii Al Muxtaaj waxaa dhigay Al Shaykh Muxammad Al Shirbiinii Al Khadhiib oo ka mid ahaa kuwa waawayn ee culummada shaaficiyada ee qarniga tobnaad ee Hijrada, wuxuuna ku sharxayaa Kitaabka fiqiga ee Al Minhaaju oo uu allifay Al Imaamu Abii Zakariyyaa Yaxyaa Yaxyaa bin Sharaf Al Nawawii. Al Shirbiini wuxuu mujalladka afaraad, oo kitaabku waa afar mujallad oo waawayn, boggiisa laba boqol sagaal iyo konton markuu ka hadlayo jizyada krishtaanka iyo yuhuudda laga qaado wuxuu kaloo yiri: “waxaa la wariyay inuu Al Xasanu bin Calii uu kala hadlay Mucaawiyah, oo markaas boqorka dawladda islaamka ah, dadka deggan tuulada Ibraahiim hooyadiis, oo uu markaas jizyada ka saamaxay oo ka cafiyay, karaamayn uu ku karaameynayo sayyidkeenna Ibraahiim (ina Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam).” Kutubbo kalena way wariyeen qisadaan.

Kitaabka Al Zarqaanii

Sharxu Al Callaamah Al Zarqaanii (waana Al Zarqaanii bin Cabdu Al Baaqii bin Yuusuf bin Axmad bin Calwaan al misrii al azharii, al maalikii, al imaamu, al muxaddith, al faqiih, al callaamah dhintayna kun iyo boqol iyo labo iyo labaatan Hijriga) calaa Al Mawaahibu Al Laduniyyah bi Al Minaxi Al Muxammadiyyah ee Al Qasdhalaanii (ahna al xaafith Shihaabu Al Ddiini Abuu Al Cabbaas Axmad bin Muxammad bin Abii Bakar bin Cabdu Al Malik bin Axmad bin Muxammad bi Xusayn bin Calii Al Qasdhalaanii Al Misrii Al Sh-shaaficii, al imaamu al callaamah, al xujjatu al rraaxilah, al faqiih, al muqri'u, al musnid, oo la oofsaday sanadka sagaal boqol iyo

saddex iyo labaatanka Hijriga) wuxuu ka wariyay Siirada Ummu Al Mu'miniina Maariyah waxaa ka mid ah oo uu yiri: “ibnu Cabdu Al Xakam wuxuu wariyay inuu boqorka Masar markay gaartay warqadda Al Musdhafaa, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, uu yiri: “Annaga kitaabkeenna waxaa ku dhigan inay tilmaamihiisa ka mid yihiin inuusan laba gabdhood oo walaala ah isla mar guursan iyo inuu hadiyada aqbalo, sadaqadase uusan aqbalin, iyo inay dadka la fariista ay masaakiinta yihiin.” Markaasuusan ka helin Masar oo idil laba gabdhood oo ka fiican oo ka qurxoon Maariyah iyo walaasheed. Markaasuu u hadiyeeyey.”

Al Balaatharii wuxuu yiri: “Maariyah bintu Shmacuun Al Qibdhiyyah hooyadeed waa roomaan.” Ibnu Sacad wuxuu Caa’ishah ka wariyay inay tiri: “haweeney kale ugama masayrin sidaan Maariyah uga masayray oo kale, sababtuna inay timeheedu laablaabnaayeen ayna quruxsamayd. Markaasay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam cajab gelisay, wuxuuna soo dejiyay annaga agteenna, oo markaasuu habeenkoo idil iyo maalintoo idilba agteeda joogay, kaddibna wuxuu u raray xaafadda Al Caaliyah, halkaasuu uu in badan ugu tegi jiray, taasoo annaga nooga darnayd.”

Al Zarqaanii wuxuu kaloo yiri: “wuxuu boqorka Al Maqawqis, oo krishtaannimadiisa ku dhintay, kaloo usoo hadiyeeyey Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, Maariyah walaasheed Siiriin iyo nin dhufaan ah oo oday da’ wayn ah oo uu ibnu Sacad yiri waa Maariyah walaalkeed, ibnu Shaahiin iyo Al Bazzaar ay Caa’ishah ka wariyeen inuu Maariyah ina adeerkeed ahaa, Al Dhabraanina uu Anas ka wariyay inay qaraabo isku nasab ah ahaayeen, iyo kun mithqaal oo dahab ah iyo labaatan maro oo jilicsan oo kuwa Masar lagu sameeyo ah, iyo baqal midabkeedu boor yahay waana midda la yiraahdo Duldul, iyo dameer Cafiir la yiraahdo, lana yiri waa Yacfuur, iyo malab ka mid ah malabka tuulada la yiraahdo Binhaa, Banhaa-na waa la yiraahdaa. Markaasuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam malabka u bogay oo uu markaas malabka tuuladaas Binhaa barako ugu duceeyey, oo ilaa maantadaan ay tuuladaasu malab badan tahay.

Abii Al Qaasim bin Cabdu Al Xakam wuxuu wariyay inuu Al Maqwqis uu kaloo kusoo daray hadiyooyinkuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, usoo diray maal sadaqo ah, oo uu markaas u yeeray nin caqlilow ah wuxuuna ku amray inuu wafdigaas raaco oo uu fiiriyo kuway yihiin dadka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, la fariista oo majliskiisa yimaada, uuna fiiriyo dhabarkiisa inay ku taallo bar wayn oo timo ku yaalliin. Markaasuu sidaas yeelay. Markaasuu ninkaas caqliga leh oo uu boqorku soo ergooday Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aailihi Wa Sallam, hadiyooyinka boqorka u keenay, uuna u sheegay inuu maalkuna sadaqo yahay. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, hadiyadana aqbalay, sadaqadana diiday. Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, markuu Maariyah iyo walaasheed dhugtay wuu u bogay wuxuuna kahday inuu wada guursado, markaasuu wuxuu Siiriin u hibeeyey Xassaan bin Thaabit, waxayna u dhashay Cabdu Al Rraxmaan bin Xassaan.

Kutubbada Al Istiicaabu, Al Isaabah iyo ghayrkoodba waxay wariyeen inuu ergayguu Al Maqawqas Maariyah kusoo daray markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aailihi Wa Sallam, u soo diray magaciisu ahaa Jabar.

Warqadda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee Al Maqawqis

Heshiiska nabadeed ee Al Xudaybiyyah kaddib, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu waraaqo u kala diray boqorrada dalalka isagoo Diinta islaamka ugu yeeraya, boqorraduu u dhigayna waxaa ka mid ah Al Maqawqis boqorka Masar iyo Al Iskandariyyah oo magaciisuna yahay Jurayj ibnu

Maynaa bin Qarquub, oo Boqorka Rooma Masar wakiilka uga ahaa ayadoo ay Masar ahayd gobol ka mid ah boqortooyada Rooma, aanna ka madax bannaanayn, siday Shaam gobol u ahayd oo kale. Naska warqadduna waa kanaa:

“Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Cabdi Allaahi wa RasuuliHi, ilaa Al Maqawqisi Cathiimi Al Qibdhi, salaamun calaa mani ittabaca al hudaa, ammaa bacdu: fa inni adcuuka bi dicaayati al islaami, aslim taslam, yu’tika Allaahu ajraka marratayni, fa in tawallayta fa calayka ithmu Al Qibdhi, yaa ahla Al Kitaabi tacaalaw ilaa kalimatin sawaa’in baynanaa illaa nacbuda illaa Allaaha wa la nushrika bihi shay’an wa laa yattakhitha bacdunaa bacdan arbaaban min duuni Allaahi fa in tawallaw fa quuluu ash-haduu bi annaa muslimuuna.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Muxammad Addoonka Ilaahay iyo Rasuulkiisa, waxayna u socotaa Al Maqawqis Cathiimi Al Qibdhi (Qibdhi waxaa la yiraahdo krishtaanka Masar), oo ah Al Maqawqis madaxa qibdhiyiinta, waxaa badbaaday oo nabad galay qofka hanuunka raaca (waana Aayadda toddoba iyo afartanaad ee Suuratu Dhaahaa). Intaas dabadeedna: anigu waxaan kuugu yeerayaa inaad islaanto oo aad tawxiidka iyo midnimada Ilaahay qirato oo ah inaad tiraahdo ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa ash-hadu anna Muxammadan Rasuulu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Islaan waad badbaadeysaaye. Haddaad islaanto Ilaahay wuxuu ajarkaaga ku siinayaa laba goor oo wuu kuu labanlaabayaa (waana isagoo marka hore Rasuulkii isaga loo diray rumeeyey oo ahaa Ciise ina Maryama, kaddibna Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, rumeeyey isagoo aan cinaad iyo diidmo la imaan siday gaalada kale ula timid oo kale oo uu Ilaahay baadiyeey siduu ibnu Xajar u fasiray, waxayna waafaq santahay Aayadda afar iyo kontonaad ee Suuratu Al Qasas: **“Uulaa’ika yu’tawna ajraham marratayni**(54)**”**, oo macneheedu yahay: “kuwaas ajarkooda waxaa la siinayaa laba goor”, ayagoo Nabigii loo dirayna rumeeyey, kaddibna Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, rumeeyey). Haddaad diido inaad islaanto oo aad ka jeesatid yeeriddaan islaanka laguugu yeerayo waxaa korkaaga ah adiga dambigaaga iyo dambiga ummadda aad madaxda u tahay oo sidaas gaalnimadooda ku haraya. Ehelu kitaabkow aan isugu nimaadno oo wada ahaanno korka kalimad caadil ah (oo ah tawxiidka) oo ayan isku khilaafsanayn Quraanka iyo Tawraadda iyo Injiilkuba oo annaga iyo adinka dhexdeenna ah, ahna: inaanan caabudin Ilaahay mooye axad kale, Illaahnimadana aanan cidna la wadaajin oo shariik uga dhigin, yeeyan qaarkeen qaarka kale rabbiyo ka dhigan Ilaahay sokadiisa wuxuu Ilaahay xaaraantimeeyey u xalaaleeya wuxuu Ilaahay xalaaleeyeyna u xaaraantimeeya. Ilaahay wuxuu Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, markaas ku leeyahay, waana Aayadda afar iyo lixdan ee Suuratu Aali Cimraana: “Hadday markaad intaas ku tiraaahdidna diidaan oo jeestaanna waxaad adinku tiraahdaan: “markhaati ka ahaada inaan annagu muslimiin nahay.”

Al Zarqaanii wuxuu yiri: “markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, warqadda khaatimkiisa ku dhejiyay. Xikmada ku jirta dhigidda Aayaddaan waxay tahay inay qibdhiyiinta iyo ninka u madaxda ahba krishtaan yihiin, krishtaankuna wuxuu wada kulmiyay saddexda shay oo Aayadda ku xusan oo (Kow) waxay caabudeen Ilaahay ghayrkiis, waana kuwa haysta math-habka la yiraahdo Al Yacquubiyyah oo yiri: **“Inna Allaaha Huwa Al Masiixu ibnu**

Maryama(17)**”**, siday noo sheegtay Aayadda toddoba iyo tobnaad ee Suuratu Al Maa’idah oo macneheedu yahay: “Ilaahay waxaa ah Al Masiixu ibnu Maryama(17).” Tan labaadna Ilaahay ayay shariik u yeeleen oo waxay yiraahdeen: **“inna Allaaha thaalithu thalaathatin**(73)**”**, oo ah Aayadda saddex iyo toddobaatan ee Suuratu Al Maa’idah, oo macneheedu yahay: “Ilaahyadu waa saddex Ilaahayna waa saddexdaas ilaah midkood(73).” Tan saddexaadna waxay ka dhigteen culummadooda iyo wadadadooda rabbiyo Ilaahay sokadiisa oo ay markaas ku raaceen markay u xalaaleeyeen wuxuu Ilaahay xaaraantimeeyey iyo xaaraantimaynta wuxuu Ilaahay xalaal uga dhigay, sida ku xusan Aayadda kow iyo soddon ee Suuratu Tawbah: **“ittakhathuu axbaarahum wa ruhbaanahum arbaaban min duuni Allaahi**(31)**”**, oo macneheedu yahay: “waxay ka yeesheen culummadooda iyo suufiyadooda rabbiyo Ilaahay sokadiisa(31).”

Waa intaas naska warqaddu. Warqadda waxaa la diray sanadka toddobaad ee Hihrada una dhiganta sanadka lix boqol sideed iyo labaatan Miilaadiga.

Ergayga Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Xaadhib bin Abii Baltacah

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu warqadda ugu dhiibay saxaabiga Badar ka qayb galay oo magaciisu yahay Xaadhib bin Abii Baltacah oo heshiis uu la galay Quraysh ku abtirsada use dhashay qabiilka la yiraahdo Lakhm. Markaasuu keligiis dhaqaaqay oo uu Masar aaday.

Xaadhib markuu Masar yimid waxaa loo sheegay inuu Al Maqawqas ku sugan yahay Al Iskandariyyah. Markaasuu halkaas aaday, markuu tegeyna wuxuu arkay inuu ku sugan yahay oo majliskiisu yahay guri meel kore ah oo badda dhexdeeda ku yaalla. Markaasuu doon soo raacay oo uu xaggiisa soo aaday, markuu yimidna intuu fadhigiisa hor maray ayuu wuxuu warqadda ku qabtay labadiisa farood dhexdooda oo uu u taagay oo tusay warqadduu u sido. Markaasuu markuu arkay ayuu amar ka bixiyay in Xaadhib loo keeno. Riwaayad kalena waxay sheegtay inuu Xaadhib la hadlay ninka xaajibka Al Maqawqis u ah oo dadka u geliya, kanoo isla markiiba u geliyay. Markaasaa Xaadhib hortiisa la geeyey oo uu warqadda u dhiibay. Markaasuu Al Maqawqis warqadda khaatimka ku xirnaa furay, warqaddana uu akhristay. Markaasuu wuxuu Xaadhib ku yiri: “maxaa ka reebay hadduu Nabi yahay inuu i habaaro oo ay dhibaato igu dhacdo?” Markaasuu Xaadhib wuxuu ku yiri: “oo maxaa Ciise ka reebay inuu habaaro inta khilaaftay in cathaab lagu soo rogo?” Markaasuu Al Maqawqis aamusay. Markaasuu laba goor oo kale is su’aashii weydiiyay, Xaadhibna uu isla sidii ugu jawaabay, si uu ku hubsado inay jawaabtiisa hore ahayd mid uu iska waafaqaye oo uu hadana ka leexan doono. Markaasuu markuu saddexda goorba ugu jawaabay waxaan ka hadal lahayn oo uu xujjada ku oogay, ayuu aamusay.

Al Bayhaqii wuxuu wariyay inuu Xaadhib yiri: “Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ayaa wuxuu warqad iigu dhiibay Al Maqawqis, markaasaan u imid. Markaasuu guri i dejiyay, aanna agtiisa joogay. Kaddibna wuu ii soo ciddiray, waxaanna u imid isagoo isu keenay oo ay la joogaan wadaadada diintiisa krishtaanka ah, wuxuuna yiri: “anigu hadal ayaan ku leeyahay, waxaanna jeclahay inaad hadalkayga kasto.” Waxaan iri: “soo daa.” Wuxuu yiri: “Saaxiibkaa iiga warran, soo Nabi ma aha?” Waxaan iri: “haa oo isagu waa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.” Wuxuu yiri: “hadaba maxay tahay sababtuu u habaari waayay tolkiis markay beledkiisa ka saareen?” Markaasaan waxaan ku iri: “markhaati ma ka tahay adigu oo ma qiraysa inuu Ciise ibnu Maryama Rasuulka Ilaahay yahay? Muxuu hadaba markay tolkiis qabteen oo ay damceen inay dilaan oo sulbiyaan oo waraan u habaari waayey inuu Ilaahay halligo ilaa uu Ilaahay isaga laftiisa

samada kor ugu qaaday?" Markaasuu wuxuu yiri: "waad suubisay oo adigu waxaad tahay nin xikmo miiran ah, waxaadna ka timid nin xikmo miiran ah oo kusoo diray."
Markaas kaddib ayuu Xaadhib wuxuu Al Maqawqis ku yiri: "adiga hortaa waxaa Masar joogay nin ku andacooday inuu isagu yahay "Rabbiga Korreeya", (waana Fircoon siday noo sheegtay Aayadda afar iyo labaatan ee Suuratu Al Nnaazicaati: **"Fa qaala anaa rabbukumu al aclaa**(24)**".)** Markaasuu Ilaahay ku qaaday ciqaab adduun oo ah in badda lagu hafajiyay oo sidaas lagu dilay iyo ciqaab aakhiro oo naar lagu ridayo oo lagu gubayo, siduu Ilaahay ugu yiri Aayadda taas kore ku xigta oo ah shan iyo labaatan ee Suuratu Al Nnazicaati: **"Fa akhathahu Allaahu nakaala al aakhirati wa al uulaa**(25)**"** oo macneheedu yahay: "markaasuu Ilaahay ku qaaday oo ku cathaabay aakhiro iyo adduunba(25)."
Xaadhib wuxuu Al Maqawqis kusii yiri: "markaasuu Ilaahay aargoostay isagana ka aargoostay. Marka waxaan kugula talinayaa waxa ghayrkaa ku dhaca ku waano iyo cibro qaado oo haddaad waxay faleen adiguna aad fashid, adigana waxaa lagugu falayaa wax la mid ah waxay ayaga lagu falay, oo yeeyanna ghayrkaa adiga waxa kugu dhaca ku waano qaadannin iyo cibro oo markaad gaalnimadaada ku taagnaatid waa lagu ciqaabayaa markaasaad waxaad noqoneysaa wax lagu waano qaato oo waxa kugu dhacay daraadood gaalnimada looga waantoobaa weeye."
Al Maqawqis wuxuu yiri: "annagu waxaan leenahay diin aan ku taagannahay, ugamana tegeynno waxaan ahayn diin teenna ka fiican inaan galno mooyee." Markaasuu Xaadhib wuxuu yiri: "waxaan kuugu yeereynnaa Diinta Ilaahay oo ah islaanka Rususha horreysey oo idil lala soo diray oo Ilaahay agtiisa kaafi uga ah inta kasoo harta oo laga diin yeesho (siduu Ilaahay ugu sheegay Aayadda sagaal iyo tobnaad ee Suuratu Aali Cimraana: "**Inna Al Ddinna cinda Allaahi al islaamu**(19)**"** oo macneheedu yahay: "Ilaahay agtiisa diintu waa islaamka oo diin kale aqbali mayo (19)"). Nabigaan dadkuu islaanka ugu yeeray, waxaana ugu adkaa oo ugu diidmo badnaa tokliis Quraysh oo xasday una quuri waayay, waxaana ugu cadawtinnimo badan yuhuudda (sida ku xusan Aayadda laba iyo sideetan ee Suuratu Al Maa'idah: **"La tajidanna ashadda al nnaasi cadaawatan lillathiina aamanu al yahuuda**(82)**"** oo macneheedu yahay: "waxaad heleysaa inay yihiin kuwa mu'miniinta ugu colaadin iyo nacayb badan yihiin yuhuudda(82)", in kastoo ay ogyihiin inuu yahay Nabiga kitaabkooda ku dhigan oo loogu bishaareeyey.), waxaana ugu dhow krishtaanka isaga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aailihi Wa Sallam rumeeyey, siday noo sheegtay qaybta dambe ee isla Aayaddaan laba iyo sideetan ee Suuratu Al Maa'idah: **"Wa la tajidanna aqrabahum mawaddatan lillathiina aamanu allathiina qaaluu innaa nasaaraa**(82)**",** oo macneheedu yahay: "waxaadna heleysaa inay kuwa jacaylka mu'miniinta ugu dhow yihiin kuwa yiraahda: "annagu waxaan nahay nasaaraa" oo islaamay(82)".), wa la camrii, oo ah waxaan ku dhaartay inayan bishaarayntuu Muuse ku bishaareeyey imaatinka Ciise, oo aad adigu hubsatay, ahayn wax la mid ah mooyee bishaaraduu Ciise ku bishaareeyey imaatinka Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam (sida ku xusan Aayadda lixaad ee Suuratu Al Saffi: **"Wa ith qaala Ciisaa ibnu Maryama yaa Banii Israa'iila innii Rasuulu Allaahi ilaykum musaddiqan limaa bayna yadayya mina Al Ttawraati wa mubash-shiran bi Rasuulin ya'tii min bacdii ismuhu Axmadu(6)"**, oo macneheedu yahay: "Xus markuu Ciise ina Maryama yiri: "ilmaha Israa'iilow anigu waxaan ahay Rasuulka Ilaahay oo adinka la ii soo diray, waxaanna rumaynayaa Kitaabka Tawraadda oo aniga iga horreeyey, waxaanna idiinku bishaareynaa Rasuul aniga dabaday imaanaya magaciisuna yahay Axmad(6)." Marka waxaa korkaaga ah inaad Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, raacdid.), yeeriddeenna aan Quraanka idiinku yeereynana ma aha waxaan ahayn wax la mdi ah yeeriddiinna adinku aad dadka Tawraadda la siiyay oo Banii Israa'iil ah aad ugu yeereysaan kitaabkiinna Injiilka. Adiguna waad ogtahay inay

waajib kugu tahay inaad tawxiidka qaadatid, adigoo ogsoon inay Risaalada Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, mid sugan tahay oo ay tahay in la raaco. Nabi kasta oo soo gaara ummaad hortiis Nabi kale loo soo diray oo uu kaasu dhintay waxay ka mid tahay ummadda Nabigaan, waxaana waajib ku ah inay raacaan oo ay adeecaan. Adiguna waxaad ka mid tahay kuwa soo gaaray Nabigaan, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aaalihi Wa Sallam, marka waxaa lagu leeyahay inaad raacdaa. Annaguna kaa reebi maynno diinta Al Masiixu Ciisaa, balse waaba kugu amraynnaa, ayadoo ay diintiisa ka mid tahay amarka inaad Al Musdhafaa raacdid."
Markaasuu Al Maqawqis wuxuu yiri: "anigu waxaan u fiirsaday amarka Nabigaan, waxaanna helay inuusan amrayn wax la kahdo uuse amrayo waxay quluubtu ku faraxdo iyo caqliga fiyowba, waxaana diida kuwa isla wayn oo kibirka badan, dadkana ka uu reebi mayo waxay inta caqliga lehi doonayso. Waxaanna arkay inuusan ahayn saaxir dadka baadiyeeya, isaguna baadiyeysan, iyo inuusan ahayn kaahin faaliye beenlow ah. Waxaanna arkay inuu leeyahay calaamadaha Nabinnimada, isagoo waxa ghaybka ah oo indhaha dadka ka maqan ka hadlay, ogsoonna waxay dadku ku faqayaan. Amarkaanna waan ka fiirsanayaa oo ka tashanayaa."

Kulanka hore ee Al Maqawqis iyo Al Mughiirah bin Shucbah

Taasu waxaa weeye inuu Al Maqawqis cilmi u lahaa oo ogaa warka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ka horba intayan warqaddiisu u imaan, oo Al Waaqidii wuxuu Al Mughiirah bin Shucbah ka wariyay warka markay Al Dh-dhaa'if ka bexeen oo ay Al Maqawqas Masar ugu tageen. Al Mughiirah bin Shucbah wuxuu yiri: "markaan usoo galnay ayuu wuxuu yiri: "maxaad ka yeesheen wuxuu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, idiinku yeeray?" Waxay yiraahdeen: "nagama raacin waxaan nin keli ah ahayn." Wuxuu yiri: "tolkiis muxuu falay?" Waxay yiraahdeen: "waxaa raacay intooda da'da yar, meelo badanna waa lagu khilaafay." Wuxuu yiri: "waa maxay wuxuu dadka ugu yeerayo?" Waxay yiraahdeen: "wuxuu noogu yeerayaa inaan Ilaahay keligiis caabudno, aanna ka fuqno oo ka tagno waxay aabayaalkeen caabudi jireen. Wuxuuna dadka ugu yeerayaa Salaadda oo la tukado, zakada oo la bixiyo, riximka oo la xiriiriyo, ballanka oo la oofiyo, iyo xaaraantinnimada zinada iyo ribada iyo khamrada." Markaasuu Al Maqawqis wuxuu yiri: "kanu waa Nabi dadkoo idil loo soo diray, hadduu roomaanka iyo masaarida gacanta ku dhigana way raacayaan ayadoo uu Ciise hore u amray inay raacaan. Tilmaamahaan aad ka bixinaysaanna wuxuu dadka ugu yeerayo waa tilmaamaha waxay Anbiyada isaga ka horreysey dadka ugu yeeri jireen. Ciribtuna isagay u sugnaanaysaa ayadoo uusan axadna ku haysan, diintiisuna way kor ahaanaysa oo gaaraysa arligoo idil." Markaasay waxay yiraahdeen: "dadkoo idil hadduu diintiisa galo annagu la geli maynno." Markaasuu Al Maqawqis madixiisa ruxay, uuna yiri: "adinku cayaar ayaad ku dhex jirtaan." Kaddibna wuxuu ka waraystay qisada ku saabsan boqorka Rooma ee Hiraql iyo su'aaluhuu Abuu Sufyaan waydiiyay. Ugu dambaystiina wuxuu weydiiyay waxay samaysay yuhuudda Yathrib deggan (Al Madiinah Al Munawwarah), waxaanna u sheegnay inay khilaafeen. Markaasuu yuhuudda wax xun ka sheegay oo duray, wuxuuna yiri: "waa dad xaasidiin ah, ayaguna amarkiisa waxay u ogyihiin sidaan annaguba u ognahay si la mid ah." Markaasuu warqadda Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, qaatay oo uu laabtiisa ku dhejiyay, wuxuuna yiri: "midkaan aan ku jirno waa zamanka uu soo baxayo Nabiga aan ka helnay Kitaabka Ilaahay." Waxaa wariyay ibnu Cabdu Al Xakam. Markaasuu warqadda Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu ku dhex riday sanduuq fool maroodi laga sameeyey oo uu khaatim ku dhejiyay oo xiray, kaddibna wuxuu u dhiibay haweeney u adeegta si ay meel u dhigto

oo ku kaydiso. Kaddibna wuxuu u yeeray nin wax u dhiga oo farta Carabiga dhiga, markaasuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, warqad usoo dhigay.

Warqadduu Al Maqawqis Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaaa Aalihi Wa Sallam, usoo dhigay

Warqadda naskeedu wuxuu ahaa sidatan:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Li Muxammadin bin Cabdu Allaahi mina Al Maqawqisi Cathiimi Al Qibdhi. Salaamun calayka, ammaa bacdu: fa qad qara'tu kitaabaka wa fahamtu maa thakarta fiihi wa maa tadcuu ilayhi, wa calimtu anna Nabiyyan qad baqaa, wa kuntu athunnu an yakhruja bi Al Sh-shaami, wa qad akramtu rasuulaka wa bacath-tuhu ilayka bi jaariyatayni lahumaa makaanun mina al qibdhi cathiimin, wa kiswatan wa ahdaytu ilayka baghlatan li tarkabahaa. Wa Al Ssalaamu."

Warqadda macneheedu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay u socotaa Muxammad bin Cabdu Allaahi, oo Nabiguu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ka bilaabay isaguna is daba mariyay, naftiisana boqornimo kuma tilmaamin edeb uu ka edebsanayo. Waxay ka socotaa Al Maqawqis madaxa Al Qibdhi. Salaani korkaaga ha ahaato iyo nabad gelyo. Intaas dabadeedna: waan akhriyay warqaddaada waanna kasay waxaad kusoo dhigtay iyo waxaad dadka ugu yeereysid. Aniguna waxaan ogaa inuu Nabi haray, ahna midka Nabiyada lagu gunaanadayo, waxaanna u malaynayay inuu kasoo bixi doono Shaam, halkaasoo hore Anbiyada looga soo saari jiray. Ergaygaaga waan karaameeyey oo si fiican ayaan u marti sooray. Waxaanna kuu soo diray hadiyad ahaan laba gabdhood oo qibdhiga dhexdiisa makaan wayn ku leh, iyo dhar waxaan kaloo kuu soo hadiyeeyey baqal inaad u fuushid. Wa Al Ssalaamu."

Siduu Al Maqawqas Xaadhib u karaameeyey

Xaadhib wuxuu yiri: "martigelinta wuu igu karaameeyey, aniguna albaabkiisa in yar ayaan ku sugnaaday oo agtiisa ma joogin waxaan shan maalmood ahayn, ayadoo ay wufuudda cajamtu laba bilood iyo ka badanba joogeen. Wuxuuna amray oo la isiiyay boqol diinaar iyo shan maro, (siduu Al Waaqidii iyo ghayrkiisba u xuseen). Waxaanna kuugu soo dhiibay laba gabdhood (oo ah Maariyah iyo walaasheed Siiriin, mana uusan xusin gabadha saddexaad oo magaceedu yahay Faysiir-ama Qaysiir (oo saad ah siduu Mughlaadhaay u yiri, Al Macmarii wuxuu isaguna yiri waa siin) , oo labadooda la dhalatay oo walaashood ah, labadooda keli ah ayuuna warqadda ku sheegay quruxdooda iyo fiicnaantooda daraadeed) oo dadka Masar agtooda makaan weyn ku leh. Waxaan kaloo kuu soo dhiibay dhar, oo ah labaatan maro oo jilicsan oo Masar lagu sameeyey. Waxaan kaloo kuu soo hadiyeeyey baqal, (waana midda Duldul la yiraahdo), si aad u fuushid (dameerkana ma sheegin, ahna midka Yacfuur la yiraahdo, siduusan u sheegin kunka wiqiyadood oo dahabka ah iyo malabka laga keenay tuulada Binhaa, ayagoo kuwaano boqorrada agtooda ayan qiimo ka lahayn oo ayan mudnayn in warqad lagu dhigo. (Al Dhabraanii wuxuu Caa'ishah ka wariyay inuu kaloo usoo hadiyeeyey quraaradda indha kuusha lagu shubto oo Shaam lagu sameeyey iyo muraayad iyo shanlo). Wa Al Ssalaamu." Waa intaas naska warqadda.

Saddexda su'aalood ee Al Maqawqas ee Xaadhib

Al Waaqidii iyo ibnu Cabdu Al Xakam waxay Abaan bin Saalix ka wariyeen inuu Al Maqawqis u ciddiray Xaadhib oo uu ku yiri: "saddex ayaan ku waydiinayaa." Xaadhib wuxuu yiri: "wax kastoo aad i weydiisid runta ayaan kaaga sheegayaa." Wuxuu yiri: "waa maxay wuxuu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dadka ugu yeerayo?" Wuxuu yiri: "in Ilaahay keligiis la caabudo, wuxuuna amrayaa in shan salaadood habeenka iyo maalinta la tukado, in bisha ramadaan la soomo, Kacbadana loo xajjiyo, in ballanka la oofiyo, wuxuuna ka reebayaa in xoolaha bakhtiya la cuno iyo dhiiggaba." Sidaasuu u waraysanayay ilaa markii dambe uu ka yiraahdo: "ii sifee." Markaasaan u sifeeyey oo aan soo koobay. Markaasuu wuxuu yiri: "waxaa haray oo aadan sheegin waxyaalo kale sida inuu indhihiisu guduud ku jiro." Waxaan iri: "guduudku ishiisa kama tago." Wuxuu yiri: "Labadiisa garabna dhexdooda waxaa ku yaalla khaatimka Nabinnimada, dameerka ayuuna fuula (islama wayna), wuxuuna labbistaa go' uu isku duubo, wuxuuna isku fillaysiiya cunno ahaan dhowr xabbo oo timir ah iyo wax yar, danna kama galo cidduu la kulmayo oo adeer ama ina adeer ah." Waxaan iri: "taas weeye sifadiisu." Wuxuu yiri: "waan ogaa oo cilmi ayaan u lahaa inuu haray hal Nabi, waxaanna u malaynayay inuu kasoo bixi doono Shaam, ayadoo halkaas Anbiyada isaga hortiis laga soo saari jiray. Markaasaan waxaan arkay in laga soo saaray arliga Carabta oo ah arli adayg badan iyo dhibaato iyo saboolnimo. Masaariduna iga yeeli mayaan inaan raacno. Aniguna waxaan rabaa inaan boqortooyadayda haysto oo ku dhegganaado oo waan ka bakhaylayaa inaan ka tago. Isaguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuu ka adkaan doonaa dalalka oo idil, isaga dabadiisna asxaabtiisa ayaa daydkeenna soo degi doona kana adkaan doona dadka halkaan deggan. Aniguna arrinkaan masriyiinta hal xarafna uga sheegi mayo, mana jecli inuu axadna ka war helo wada hadalkaan na dhex maray."

Xaadhib wuxuu yiri: "Markaasaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u sheegay hadalkiisaas, oo uu markaas yiri: "**danna** (waa daad dhibic kor ku leh) **al khabiithu bi mulkihi, wa la biqaa'a li mulkihi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "midka xun oo khabiithka ahi wuxuu ku bakhaylay boqortooyadiisa. Boqortooyadiisuna hari mayso oo waa dhammanaysaa." Waxayna noqotay siduu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u yiri (oo Cumar ayaa furtay).

Xaadhib wuxuu yiri: "Al Maqawqis intaas wax kale oo hadal ah kuma darin." Mana uusan islaamin ee wuxuu ku taagnaa krishtaannimadiisa ilaa ay muslimiintu Masar furteen khilaafada Cumar bin Al Khadh-dhaab.

Ibnu Al Athiir, ibnu Mundah iyo Abaa Nucaym iyo ibnu Qaanic waxay ka wariyeen ibnu Isxaaq inuu wariyay inuu Al Zuhriyyu ka wariyay Cubaydu Allaahi inuu yiri: "waxaa ii warramay Al Maqawqis oo yiri: "waxaan Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u hadiyeeyey qadax (oo ah koob wayn) oo quraarad ka samaysan, markaasuu ka cabi jiray."

Maariyah walaasheed Siiriin

Markay dhacday dhacdada ifkiga beenta wayn ah ee hooyadeen Caa'ishah ku saabsan ayuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu Maariyah walaasheed Siiriin u hibeeyey saaxiibkiisa Ansaarta ka mid ah ee Xassaan bin Thaabit, ahaana gabayaagiisa, kana mid ahaa dadka beenta ku hadlay, kaddibna xadka lagu oofiyay. Caa'ishah, Sallaa Allaahu Calayhaa Wasallam, ninka beenta looga sheegay wuxuu ahaa magaciisu Safwaan bin Al Mucadh-dhal, ahaana nin aan haweenkaba u tegin sidiisaba. Markaasuu ka xumaaday wuxuu Xassaan ku hadlay oo ka carooday.

Markaasaa Ilaahay Tacaalaa toddobada Samo korkooda wuxuu Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wasallam, uga soo dejiyay Quraan caddaynaya inay Caa'isha dambi laawe tahay ayna tahay dhayyibad fiican, kuwa ayada ka hadlayna ay beenaalayaal yihiin. Markaasaa inta beenta ku hadashay oo uu Xassaan bin Thaabit ka mid yahay xadka laga oofiyay oo la uleeyey. Markaasuu Safwaan bin Al Mucadh-dhal seef u qaatay Xassaan bin Thaabit.

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Kaddib Safwaan bin Al Mucadh-dhal ayaa seef la aaday Xassaan bin Thaabit markuu soo gaaray wuxuu isaga ka sheegay oo ifkiga ka mid ahayd, oo Xassaan wuxuu ahaa gabayaa, wuxuuna tiriyay gabay uu ku jaa'ifaynayo ibnu Mucadh-dhal iyo Carabta Mudar ku abtirsata oo islaamtay (Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, awoowihiisa toddoba iyo tobnaad waa Mudar -waa daad dhibic kor ku leh oo saad ku xigah) bin Nizaar-), gaar ahaan Quraysh. Markaasuu Safwaan u yimid oo uu seef ku dhuftay. Markaasaa waxaa Safwaan bin Al Mucadh-dhal kusoo booday Thaabit bin Qays bin Al Sh-shammaas markuu Xassaan seefta ku dhuftay oo uu labadiisa gacnood xarig luquntiisa kula xiray, kaddibna uu u watay oo la aaday xaafadda Banii Al Xaarith bin Al Khazraj. Markaasaa waxaa dariiqa kula kulmay Cabdu Allaahi bin Rawaaxah oo yiri: "Waana maxay tanu?" Wuxuu yiri: "Wuxuu seef ku dhuftay Xassaan oo waxaan wa Allaahi u malaynayaa inuu dilay." Markaasuu Cabdu Allaahi bin Rawaaxah wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wax ma ka ogyahay waxaan aad samaysay?" Wuxuu yiri: "Wa Allaahi maya." Wuxuu yiri: "Waad dhiirranaatay ee ninka sii daa." Markaasuu sii daayay. Markaasay waxay u yimaadeen Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, o ay waxa dhacay u sheegeen. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu u yeeray Xassaan bin Thaabit iyo Safwaan bin Al Mucadh-dhal. Markaasuu ibnu Al Mcadh-dhal wuxuu yiri: "Wuu i dhibay oo i caayay, markaasay caro i qaaday oo aan ku dhuftay." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, wuxuu Xassaan ku yiri: **"Axsin yaa Xassaanu. Atashawwahta calaa qawmii an hadaahumu Allaahu lil islaami!"**, kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri**: "Axsin yaa Xassaanu fii allathii asaabaka."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Xassaanow samafal! Ma waxaad ka dhigtay wax foolxun ficilka tolkay markaad ku magacawday "Al jalaabiibi" oo ah kuwa khamiisyada qallafsan oo khashinka ah xiran, oo usoo hijrooday Ilaahay iyo Rasuulkiisa daraadood iyo inuu Ilaahay islaamka kusoo hanuuniyay?" Kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: "Xassaanow ka sama fal waxa kugu dhacay!" Xassaan wuxuu yiri: "Dhiiggaygaba adigaan ku siiyay oo leh Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam," (oo uu ibnu Hishaam yiri: "waxaaba la yiri inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"A bacda an hadaakumu Allahu lil islaami?"** oo macnihiisu yahay: "Ma waxaad sidaas leedahay kaddib markuu Ilaahay islaamka idinku hanuuniyay?").

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Xassaan u siiyay cawil celin ahaan Biira Xaa oo ah qasriga Banii Xudaylah oo maanta Al Madiinah ku yaalla, ahaana maal uu leeyahay Abii Dhalxah bin Sahl oo uu siiyey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Xassaan u siiyay seefta lagu dhuftay, wuxuuna kaloo siiyay Siiriin, addoon masriyad ah oo u dhashay wiilkiisa Cabdu Al Rraxmaanu bin Xassaan." Caa'ishah waxay tiri: "Waxaa la weydiiyay ibnu Al Mucadh-dhal, waxaana la arkay inuuba yahay xasuur, oo ah ninka aan haweenkaba u tegin. Kaddibna shahiidnimaa lagu dilay."

Al Suhaylii wuxuu yiri: "Addoontaan Xassaan uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, siiyay magaceedu waa Siiriin bintu Shamcuun, waana walaasha la dhalatay Maariyah, surriyada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waana hooyada u dhashay Cabdu Al Rraxmaanu bin Xassaan bin Thaabit. Cabdu Al Rraxmaan wuu ku

faani jiray inay dhashay habaryarta Ibraahiim wiilka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Siiriintaanu waxay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka warisay hal Xadiith oo ah inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku arkay dildillaac qabriga wiilkiisa Ibraahiim oo uu markaas hagaajiyay, uuna yiri: **"Inna Allaaha yuxibbu mina al cabdi ithaa camila camalan an yuslixahu"**, oo macnihiisu yahay: "Ilaahay wuxuu jecel yahay in markuu addoonku hawl qabto inuu hagaajiyo."

Kitaabka Muxammad Ridaa

Muxammad Ridaa wuxuu ahaa Xoghayaha Maktabada Jaamacada Al Qaahira ee dalka Masar, wuxuuna leeyahay kutubbo ay ka mid yihiin Muxammadun Rasuulu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, oo lagu daabacay Daaru Al Kutubi Al Cilmiyyah ee Bauruut ee arliga Lubnaan sanadka 1395 Hijriga, una dhiganta 1975 Miilaadiga. Sheeku wuxuu kitaabkiisaan, oo marka ugu horraysay la daabacay bisha Maajo ee sanadka 1934, ku dhigay waxaa ka mid ah inuu yiri:
“Warqaddaan uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Maqawqis u dhigay waxay taalla oo lagu hayaa Daaru Al Aathaari fii Al Istaanah, waxaana la yiri inuu warqaddaas helay nin caalin oo fransiis ah, uuna ka helay Dayr (dayr waxaa afka ingiriiska lagu yiraahdaa monastry, ahna guryaha waawayn oo ay wadaadada krishtaanku ka dhistaan buuraha dushooda iyo meela ka fog degmooyinka dadku dego, ayna halkaas diintooda ku bartaan, waana kuwa aan guursan oo keligood noolayaasha ah) Masar ku yaalla meel u dhow Akhmiim zamanka Saciid Paashaa.” Wuxuu kaloo yiri: “Al Maqawqis afka qibdhiga waxaa lagu yiraahdaa Pka chios, macnihiisuna waa “midka guryaha dheer”, waana laqab la siiyo nin kasta oo Masar boqor u noqda. Midkaan magaciisuna waxaa weeye Jurayj bin Maynaa’u.”
Wuxuu kaloo yiri: “marxuumka Xafnaa Naasif wuxuu xusay anwaacda hadiyadaha uu Al Maqawqis usoo diray Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxayna kala yihiin:
(Kow) Maariyah bintu Shmacuun, oo hooyadeedna waxay ahayd roomaan.
(Laba) Gabar kale oo la yiraahdo Siiriin, kase qurux yar Maariyah.
(Saddex) Gabar saddexaad (oo ayaduna walaashood ah) oo la yiraahdo **Qaysar**.
(Afar) Gabar madow oo la yiraahdo Bariirah.
(Shan) Addoon madow oo la yiraahdo Haabuu.
(Lix) Baqal midabkeedu boor yahay, waana midda la yiraahdo Duldul.
(Toddoba) Faras kooreysan, ahna midka la yiraahdo Maymuun.
(Sideed) Dameer midabkiisu boor yahay, loona bixiyay Yacfuur.
(Sagaal) Sanduuq yar oo afar gees ah ayna ku jiraan quraaradda lagu shubto indha kuusha iyo muraayad iyo shanlo iyo quraarad saliid ah iyo manqas iyo caday.
(Toban) Xoogaa malab laga keenay tuulada Binhaa.
(Kow iyo toban) Wiqiyado dahab ah.
(Laba iyo toban) Labaatan maro oo ah kuwa Masar lagu sameeyo.
(Saddex iyo labaatan) Xoogaa cuud ah iyo cadar iyo miski.
(Afar iyo toban) Koob weyn oo quraarad ah.

Halisnimada cunno badan oo la cuno

Muxammad Ridaa wuxuu kaloo kitaabkiisa ku yiri: “waxaa kaloo la yiri inuu hadiyadaha ka mid ahaa nin takhtar ah, oo uu markaas markuu u sheegay inuu takhtar yahay uu Nabigu, Sallaa Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ku yiri: **“arjic ilaa ahlika, naxnu qawmun laa na’kulu xattaa najuuca, wa ithaa akkalnaa laa nashbacu.”** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ehelkaaga ku noqo. Annagu waxaan

nahay qawm aan wax cunin jeer ay gaajoodaan, hadday wax cunaanna aan dhergin", oo sidaas ayaanan takhtar ugu baahneyn. Waxaa Xadiithkaas ku cad in cudurrada ugu badanba laga qaado cunnada badan oo la cuno.

Intaasaan uga baxaynaa warkaan kasoo qaadannay Muxammad Ridaa Allaha dambigiisa dhaafee oo ku dhintay Al Qaahirah sanadka 1369 H/1950 Miilaadiga. Sheekhaan wuxuu kaloo leeyahay kutubbada kaloo kala ah "Abuu Bakr Al Ssiddiiqu", "Al Faaruuqu Cumar bin Al Khadh-dhaab", Cuthmaan bin Caffaan Thuu Al Nnurayni", "Al Imaamu Calii bin Abii Dhaalib", "Al Xasan wa Al Xusayn" iyo kuwo kaleba.

Qoraalka Laba iyo Tobnaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Warqadda Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee Al Munthiru bin Saawaa boqorka Al Baxrayn

Al Zarqaanii wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu warqad u dhigay Al Munthiru bin Saawaa bin Al Akhnas bin Bayaan bin Camr bin Cabdu Allaahi bin Zayd bin Cabdu Allaahi bin Daarim, una dhashay qabiilka Banuu Tamiim, Al Daarimii Al Cabdii, isagoo ka mid dhasha Cabdu Allaahi bin Daarim.
Al Dhabraanii wuxuu ka wariyay Isxaaq bin Raahaweyh iyo ibnu Qaanic min Sulaymaan bin Naafic Al Cabdii oo ka wariyay aabihiis oo yiri: "waxaa Baxrayn wafdi ahaan uga yimid Al Munthiru bin Saawaa isagoo ay la socdaan dad kale, aniguna aan markaas ahay kuray hayana awrtooda. Markaasay hubkooda qaateen oo intay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa CalaaAalihi Wa Sallam, u yimaadeen ay salameen. Kaddib waxay tageen meeshay ku degeen oo uu markaas Al Munthir hubkiisa dhigay, uuna labistay dhar uu sitay, garkiisana uu dufan mariyay, kaddibna uu Nabiga Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u yimid, aniguna aan awrta la joogo aanna Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, fiirinayo.

Al Waaqidii wuxuu Cikrimah ka wariyay inuu yiri: "qoraalkaan waxaan ka dhex helay kutubta ibnu Cabbaas geeridiisa dabadeed, markaasaan nuskho ka samaystay oo aan kasoo guuriyay, wuxuuna ahaa sidatan:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam, wuxuu Al Calaa'u Al Xadramii u diray Al Munthiru bin Saawaa wuxuuna u dhigay warqad uu islaamka ugu yeerayo. Markaasuu islaamay oo aaminay. Markaasuu Al Munthiru Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, warqad usoo diray uu ku leeyahay: "ammaa bacdu: yaa Rasuula Allaahi fa innii qad qara'tu kitaabaka calaa ahli Al Baxrayni , fa minhum man axabba al islaama wa acjabahu wa dakhala fiihi, wa minhum man karihahu, wa bi ardii yahuudun wa majuusun, fa axdith ilaayya fii thaalika amraka."
Warqadda macneheedu waxaa weeye: " intaas dabadeedna: Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam,, anigu waan u akhriyay warqaddaada dadka Al Baxrayn deggan. Dadka waxaa ka mid ah kuwo islaamka jeclaaday una bogay oo islaamay, waxaana ka mid kuwo kahday, oo aan islaamin. Arligaygana waxaa nala deggan yuhuud iyo majuus dabka caabuda oo gaalnimadooda ku haray, marka iisoo sheeg waxaad amraysid inaan ka yeelo."

Warqadduu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u dirayna ma aanan arag axad noo sheegay oo wariyay waxa ku dhignaa.

Warqadda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam, amarkiisa warqad ugu dhigay oo uu u diray, wuxuuna yir:
"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuula Allaahi ilaa Al Munthiru bin Saawaa, salaamun calayka fa inni axmadu ilayka Allaaha Allathii laa ilaaha illaa Huwa, wa ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa anna Muxammadan Rasuulu Allaahi, ammaa bacdu: fa innii uthkiruka Allaaha Cazza wa Jalla, fa innahu man yansaxu fa innamaa yansaxu li nafsihi, wa annahu man yudhic rusulii wa yattabic amrahum fa qad adhaacanii, wa man nasaxa lahum fa qad nasaxa lii, wa inna rusulii qad athnuu calayka khayran wa inni qad shfactuka fii qawmika, fa atruk lil muslimiina maa aslamuu calayhi, wa cafawtu can ahli al th-thunuubi fa aqbal minhum, wa innaka mahmaa tuslixu falan naczilaka can camalika, wa man aqaama calaa yahuudiyatihi aw majuusiyatihi fa calyhi al jizyatu."

Warqadda macneheedu waxaa weeye:

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sllaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, una socotaa Al Munthiru bin Saawaa, nabadgelyo korkaaga ha ahaato, aniguna waxaan daraadaa ugu xamdiyayaa Ilaahay, Midka uusan jirin ilaah aan Isaga ahayn, wa ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa anna Muxammadan Rasuulu Allaahi. Intaas ka bacdina: anigu waxaan ku xusuusinayaa Ilaahay Cazza wa Jalla iyoo wuxuu ku faray iyo wuxuu kaa reebay iyo inaadan ilaah kale caabudin, oo qofka wax waaniya wuxuu waaninayaa naftiisa oo isagaa ajarka waanadaas helaya, qofkana ergaydayda adeeca amarkoodana raaca qofkaasu anigu i adeecay oo markaas Ilaahay ayuu adeecay. Qofka ayaga la taliya anigu ila taliyay oo diintu waa naseexo, ergadayduna waxay kugu ammaaneen khayr oo ah inaad islaamtay, aniguna waxaan kaaga shafeecayaa qawmkaaga oo muslimiintana u daa siday u islaameen xoolohooda iyo haweenkooda oo dambiyaday hore u gaaleenoo oo ay ka mid yihiin gaalnimada, zinada, cabidda khamrada waan u shafeeco qaaday oo islaamku wuxuu burburiyaa wixii dambi ka horreeyey, marka islaannimadooda ka aqbal waxay hore u galeen oo dambi ahna ha u qabsan. Adiguna intaad suuban tahay xilkaaga kaa qaadi maynno oo ku cazili maynno, oo annagaad wakiil nagaba tahay. Qofka yuhuudnimadiisa ku harana ama majuusnimadiisa waxaa korkiisa ah inuu jizyo bixiyo."

Ibnu Mundah wuxuu Zayd bin Aslam ka wariyay oo ka wariyay Al Munthir bin Saawaa inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, usoo dhigay: **"an afrid calaa kulli rajulin laysa lahu ardun arbacata daraahima wa cabaa'atan"**, oo macneheedu yahay: "waxaad nin kasta oo aan dhul lahayn korkiisa fardi ka dhigtaa inuu bixiyo afar dirham iyo cabaayad (oo ah marada qamiiska laga kor huwado)."
Wuxuu kaloo wariyay inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallamu qoraal u diray majuusta degta Hajar oo uu ugu yeerayo inay islaamaan, oo hadday diidaanna in laga qaadaya jizyo iyo inaan haweenkooda muslimiintu guursan, xoolaha ay gawracaanna ayan muslimiintu cunin.

Al Dhabraanii wuxuu ibnu Mascuud ka wariyay inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa alihi Wa Sallam u qoray Al Munthiru bin Saawaa: **"man sallaa salaatanaa wa istaqbala qiblatanaa, wa akala thabiixatanaa, fa thaalikumu al muslimu lahu thimmatu Allaahi wa Rasuulihi"**, oo macnihiisu yahay: "qofka u tukada sidaan annagu salaaddeenna u tukanno oo kale, markuu tukanayana xagga qibladeenna u jeesta, hilbaha xoolaha aan gawracnana cuna, kaasu waa muslim waxaana u sugnaatay ilaalinta Ilaahay iyo ilaalinta Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi a Sallam."

Abuu Jacfar Al Dhabarii wuxuu wariyay inuu Al Munthiru midkaanu dhintay mar u dhow oofsashada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo uu intuusan dhiman u yimid Camr bin Al Caasii oo uu Al Munthiru ku yiri: "intee buu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u oggolaaday inuu qofka dhimanaya maalkiisa ka dardaarmo?" Wuxuu yiri: "dalool." Wuxuu yiri: "maxay hadaba kula tahay inaan labada dalool ii soo hartay ka yeelo?"haddaad doontid waxaad u qaybisaa dariiqyada khayrka, haddaad doontidna waxaad ka dhigtaa sadaqo joogto ah oo adiga dabadaa la siiyo ciddaad doontid." Wuxuu yiri: "ma jecli inaan wax maalkayga ka mid ah ka dhigo sadaqo joogto ah, waanse qaybinayaa."

Al Calaa'u bin Al Xadramii iyo Al Munthiru bin Saawaa

Al Suhaylii wuxuu Al Rrawdah ku yiri: "Al Calaa'u bin Al Xadramii ergayga Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, markuu Al Munthiru bin Saawaa u yimid wuxuu ku yiri: "Munthirow! Arrimaha adduunkaan waxaad u leedahay caqli cathiim ah oo wayn, marka caqligaagu yuusan ku yaraannin arrimaha aakhiro. Diintaad majuusiyada ah waa diinta diimaha ugu xun, Carabtana karaamo uguma sugna, mana laha cilmiga ehelu kitaabka. Waxay guursadaan wax laga xishoodo guursigiisa, waxayna cunaan wax la iskala waynaado cuniddooda. Adduunkaanna waxay ku caabudaan dab dabkaasoo maalinta qiyaame cunaya. Adiguna caqli laawe ma tihid iyo nin aan fiiro lahayn, ee hadaba fiiri: miyay habboon tahay inaadan rumayn mid aan been sheegin? Aadanna aaminin mid aan wax khayaanin? Iyo inaad ku kalsoonaatid mid aan la khilaafin? Hadduu arrinku sidaas yahay, hadaba Nabigaan Ummiga ah oo uusan wa Allaahi mid kasta oo caqli leh uusan karin inuu yiraahdo: "muxuu wuxuu na faray nooga reebi waayay, ama muxuu wuxuu naga reebay noo fari waayay, ama maxay naxariistiisu intay tahay uga badnaan wayday, ama maxay ciqaabtiisu intaas uga yaraan wayday? Dadka caqliga iyo fiiradaba leh sidaas u arkeen inuu yahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam!"
Markaasuu Al Munthiru wuxuu yiri: "amarkaan aan hadda ku taaganahay waan u fiirsaday waxaanna arkay inuu adduunkaan ku saabsan yahay aakhirana uusan wax tarayn. Waxaanna fiiriyay diintiinna waxaanna arkay inuu waxtar u leeyahay aakhiro iyo adduunba. Habada maxaa iga hortaagan inaan galo diin lagu heelayo wixii adduun laga rabay ayna ku sugan tahay raaxada aakhiro? Shalay waxaan la yaabanaa kuwa diintaan galayay, maantana waxaan la yaabanahay kuwa diidaya, oo wuxuu aqooday oo oggolaaday inuu islaamku diin run yahay. Waynaynta ninka diintaan keenayna waxaa ka mid ah in la wayneeyo ergadiisa. Waxaanna ka fiirsanayaa inaad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam ama aan u tago ama aan warqad u dhigo"


Furaha Jannada

Al Suhaylii wuxuu Al Rawdu ku yiri: "Wuxuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, Al Calaa'u Al Xadramii ku yiri waxaa ka mid ahaa**: "ithaa**

su’ilta can miftaaxi al jannati fa qul: “miftaaxuhaa laa ilaaha illaa Allaahu”” oo macnihiisu yahay: haddii lagu weydiiyo furaha jannada waxaad tiraahdaa: “fureheedu waa laa ilaaha illaa Allaahu.”
Al Bukhaarii-na wuxuu wariyay in Wahab lagu yiri: “soo furaha jannadu laa ilaaha illaa Allaahu ma aha?” Wuxuu yiri: “haa, laakiin ma jiro fure aan ilko lahayn, oo haddaad la timaadid fure ilko leh albaabka waa lagaa furayaa, haddii kalena lagaa furi mayo.” Riwaayad kalena waxay warisay in ibnu Cabbaas loo sheegay wuxuu Wahab yiri markaasuu yiri: “Wahab run ayuu sheegay! Aniguna waxaan idiin sheegayaa ilkaha furahu waxay yihiin, markaasuu wuxuu xusay salaadda iyo zakada iyo shareecada islaamka.”

Islaamidda ibnu Saawaa

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu furashada Makkah horteed Al Cala'u bin Al Xadramii u diray Saawaa Al Cabdii, oo islaamay, oo ay islaamiddiisuna suubanaatay. Wuxuuna dhintay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dabadiis, iyo ka hor intayan reer Baxrayn islaamka ka noqon, ayadoo uu Al Calaa'u agtiisa joogo isagoo ah amiirka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ee Baxrayn."



Masawirka warqaddaan uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u dhigay Al Munthiru bin Saawaa waxaan kasoo qaadannay Websitka internetka cinwaankiisu yahay: islamicsupremecouncil.com/tabarruk/tabarrukat.htm.

Qoraalka Saddex iyo Tobanaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Warqadduu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u diray labada boqor ee Cummaan

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu warqad u diray labada boqor ee Cumaan. Al Rashaadhii wuxuu yiri: waxaa Cumaan loogu magacaabay ayadoo loogu magac daray oo lagu sammiyay ninka la yiraahdo Cumaan bin Saba', uuna ku nasab sheegto Al Julandii boqorka Cumaan.
Muslim wuxuu ka wariyay Abii Burzah inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam nin ergo ahaan qabiil ugu diray, markaasay caayeen oo ay garaaceen. Markaasuu ninkaasu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, usoo noqday oo uu u sheegay, Nabiguna uu markaas yiri: **"law ahla Cumaana atayta maa sabbuuka wa la darabuuka"** oo macnihiisu yahay: "haddaad u tegi lahayd dadka Cumaan dega kuma ayan caayeen kumana garaaceen.",
Imaam Axmad wuxuu wariyay inuu Cumar yiri: "waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo oranaya**: "innii la aclamu ardan yuqaalu lahaa Cumaan yandaxu bi naaxiyatihaa al baxru, law ataahum rusuulii maa ramuuhu bi sahmin, wa la xajarin"**, oo macnihiisu yahay: "anigu waxaan aqaanna arli la yiraahdo Cummaan oo ay badi qoyso oo badi ku taallo, oo hadduu rasuulkaygu u yimaado (wa ergaygiisa ama danjirihiisa ama safiirkiisa) ayan fallaarna ku tuurin lahayn dhagaxna ayan ku tuuri lahayn."
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam warqaddaas u diray bisha Thuu Al Qacdah ee sanadka sideedaad. Ibnu Cabdu Al Baarru wuxuu isaguna wariyay inay ahayd Duullaanka Khaybar dabadiis. Fatxu Al Baarii wuxuu isaguna yiri: "waxaa dhici karta inay ahayd ahayd Duullaanka Xunayn dabadiis."
Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu warqadda ugu dhiibay Camr bin Al Caasii. Warqadda waxa ku dhignaana iyo qisadaba siduu u wariyay ibnu Sacad uuna ka wariyay Camr bin Shucayb oo ka wariyay mawle uu lahaa Camr bin Al Caasii, Allaha raalli ka noqdee waa sidatan soo socota.

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin bin Cabdi Allaahi wa Rasuulihi ilaa Jayfar wa Cabdi ibnay Al Julandii: salaamun calaa manittabaca al hudaa, ammaa bacdu: fa innii adcuukumaa bi dicaayati al islaami, aslimaa taslamaa, fa innii Rasuulu Allaahi ilaa al nnaasi kaafatan, li unthira man kaana xayyan wa yaxiqqa al qawlu calaa al kaafiriina, wa innakumaa in aqrartumaa al islaama wallaytukumaa, wa in abaytumaa an tuqirraa bi al islaami fa inna mulkukumaa zaala cankumaa, wa khaylii taxillu bi saaxatikumaa, wa tath-haru nubuwwatii calaa mulkikumaa."

Warqadda macneheedu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Muxammad bin Cabdi Allaahi iyo Rasuullkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, waxayna u socotaa Jayfar iyo Cabdi labada wiil ee uu dhalay Al Julandii: waxaa nabad gelyo korkiisa tahay qofka hanuunka raaca, intaas kaddibna: anigu waxaan idiinku yeerayaa inaad islaamtaan oo islaama waad badbaadaysaane, oo anigu waxaan ahay Rasuulka Ilaahay oo dadkoo idil loo soo diray, si aan midka nool uga digo cadaabta Ilaahay, kuwa gaaloobana inuu ku dhaboobo warkuu Ilaahay hore u sheegay oo ah inay naarta gelayaan. Labadiinuna haddaad islaamtaan waxaan idiin dhiibayaa xilka dalkiinna oo aad boqorro ka ahaaneysaan. Haddadse diidaan inaad islaamtaan boqornimadiinnu way idinka guuraysaa, fardooleydeyduna waxay cagta marinayaan oo la wareegayaan

dalkiinna iyo daydka guryihiinnaba Nabinnimadayduna way ka adkaanaysaa labadiinna boqortooyaba."
Waxaa warqadda dhigay Ubayya bin Kacb. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, shabbadiisa ku dhuftay.

Camr bin Al Caasii iyo Cabdi boqorka Cumaan

Camr wuxuu yiri: "marka warqadda la ii dhiibay waan soo baxay ilaa aan ka imaado Cumaan. Markaasaan markaan Cumaan imid waxaan aaday boqorka Cabdi, isagaana labada nin oo boqorrada ah ugu naxariis iyo turid badnaa uguna dabeecad sahlanaa. Markaasaan waxaan ku iri: "anigu waxaan ahay rasuulka uu adiga iyo walaalkaa usoo diray Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam." Markaasuu wuxu yiri: "walaalkay (Jayfar) ayaa aniga iiga xaq leh oo da' ahaan waa iga wayn yahay boqornimadana waa iiga wayn yahay. Marka anigu isagaan kula xiriirinayaa si aad warqadda aad sidid isaga ugu akhrisid." Intaas kaddibna wuxuu yiri: "maxaadna noogu yeereysaa?" Waxaan iri: "waxaan kuugu yeerayaa inaad Ilaahay keli ah caabudid oo aadan shariik u yeelin, oo aadan Ilaahnimada cid kale la wadaajin, aadna ka fuqdid oo aad ka hartid waxaa Isaga sokadiisa la caabudo iyo inaad ka marag kacdid inuu Muxammad yahay addoonkiisa iyo Rasuulkiisa."
Wuxuu yiri: "Camrow adigu waxaad ahayd wiilka madaxa tolkaa, marka muxuu aabahaa falay? Annagana aabahaa wuxuu noo yahay qudwah oo ah wax lagu daydo."
Waxaan iri: "wuu dhintay, Muxammadna, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ma uusan rumayn, anigu waxaan jeclaa inuu islaamo oo uu rumeeyo. Aniguna waxaan ahaa sidiisoo kale ilaa uu Ilaahay islaamka igu hanuuniyay." Wuxuu yiri: "goormaadna raacday?" Waxaan iri: "mar dhow." Wuxuu i weydiiyay: "xaggee baad ku islaantay?" Waxaan iri: "An Najaashiyyu agtiisa." Waxaanna u sheegay inuu Al Najaashiyyu islaamay. Wuxuu yiri: "muxuu tolkaa ka yeelay boqortooyadiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam?" Waxaan iri: "way oggolaadeen oo ay raaceen." Wuxuu yiri: "madaxda wadaadada krishtaanka iyo wadaadadoobuba ma raaceen?" Waxaan iri: "haa." Wuxuu yiri: "Camrow ka fiirso waxaad leedahay! Oo ma jiro wax nin lagu ceebeeyo oo lagu fadeexeeyo oo inuu been sheegay ka wayne!" Waxaan iri: "been ma sheegin, diinteenana xalaal nooma aha inaan been sheegno, bal ceebba iska daaye!" Ibnu Sacad wuxuu wariyay in markaas yiri: "u malayn mayo inuu Hiraqal ogyahay inuu Al Najaashiyyu islaamay!? Waxaan iri: "bal waa ogaaday." Wuxuu yiri: "inuu islaamay ma waxaad adigu ogtahayba?" Waxaan iri: "Al Najaashiyyu sanad walba wuxuu Hiraqal u diri jiray kharaaj –oo ah canshuur oo kale- Markaasuu markuu islaamay uuna Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aaalihi Wa Sallam, rumeeyey wuxuu yiri: "wa Allaahi inaan lacag dambe siinayn, oo hadduu hal dirham i weydiisto ma siinayo." Markaasuu hadalkiisaasu wuxuu gaaray Hiraqal. Markaasuu Hiraqal walaalkiis oo magaciisu ahaaYannaaq wuxuu Hiraqal ku yiri: "ma waxaad oggolaanaysaa inuu addoonkaagu (waana Al Najaashiyyu) uusan canshuurtii bixin uuna diinta Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam, galay?" Hiraqal wuxuu yiri: "Al Najaashiyyu waa nin diin jeclaaday kaddibna naftiisa diintaas u dooray oo galay: maxaad doonaysaa inaan taas ka yeelo? Oo Wa Allaahi haddaanan boqornimadayda aad u jaclayn oo aanan bakhayl ku ahayn oo aanan donayn inay iga suusho waxaan yeeli lahaa siduu isagu yeelay, oo waan islaami lahaa."
Markaasuu Cabdi wuxuu Camr ku yiri: "war maxaad leedahay? Ka fiirso waxaad leedahay!" Waxaan iri: "wa Allaahi runta ayaan kuu sheegay." Cabdi wuxuu yiri: "hadaba ii sheeg wuxuu (Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam) dadka faro inay yeelaan iyo wuxuu ka reebayo." Waxaan iri: "wuxuu amrayaa in Ilaahay la adeeco Cazza wa Jalla, wuxuuna ka reebayaa in amarka Ilaahay la diido,

wuxuuna amraya baarrinnimada iyo in riximka la xiriiriyo, wuxuuna reebaya dulmiga iyo colaadda iyo zinada iyo cabidda khamrada iyo dhagaxda la caabudo iyo asnaamta iyo in krishtada la caabudo." Wuxuu yiri: "waxaan uu dadka ugu yeerayo wax ka fiican ma jiraan, hadduu walaalkay i raaci lahaana gaadiid ayaan inta u fuulno Muxammad u tegi lahayn oo aan rumayn lahayn. Laakiin walaalkay Jayfar boqornimadiisu bakhayl ku yahay oo ku dheggan yahay oo ka tegi mayo oo uu isagu markaas nin kale uu madax u noqdo oo uu sida sayn raacsan noqdo." Waxaan iri: "hadduu islaamo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu boqor uga dhigaya tolkiisa oo wuxuu kasoo uruurinaya zakada xoolaha kuwooda hodanka ah, kaddibna uu siinayaa kuwooda saboolka ah." Wuxuu yiri: "kano waa dhaqan wanaagsan, waana sida dadka saboolka ah loo kabayo. Waxaanse ku waydiiyay maxay zakadu tahay?" Markaasaan u sheegay wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, zakaduu fardi uga yeelay xoolaha ilaa aan ka imaado zakada geela. Markaasuu wuxuu yiri: "Camrow ma zakaa laga qaadayaa xooleheenna iskood u daaqa oo daaqda geedaha ceelashana ka waraabta?" Waxaan iri: "haa". Wuxuu yiri: "wa Allaahi inaanan u malaynayn inuu tolkay iyo fogaanta uu arligiisu ka fog yahay Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, iyo badnida tiradooda oo ayan imaatinka fardooleydiisa ka baqayn, inay taas oggolaanayaan oo ku adeecayaan.

Camr bin Caas, Cabdi iyo Jayfar

Camr wuxuu yiri: "markaasaan ayaamo albaabkiisa joogay isagoo intaasna walaalkiis la xiriiraya oo warkoo idil u sheegaya. Markaasuu maalin ii yeeray si aan walaalkiis iskula tagno. Markaasaan usoo galay. Markaasay kaaliyayaalkiisu labada cududood i qabteen, markaasuu yiri: "daaya." Markaasaa la isii daayay. Markaasaan dhaqaaqay si aan u fariisto. Markaasay ii diideen inaan fariisto, sida ay tahay caadada cajamtu oo uusan boqorka la fariisan karin ergay lasoo dirsaday haba ahaado boqor kale kan soo dirsadaye. Markaasaan isaga dhugtay, wuxuuna i yiri: "xaajadaad u timid sheego." Markaasaan waxaan u dhiibay warqaddaan siday oo xiran. Markaasuu warqadda furay oo uu akhriyay ilaa uu ka dhammeeyo. Kaddibna wuxuu u dhiibay walaalkiis Cabdi, oo uu isaguna u akhriyay sidiisii oo kale oo uu wada akhriyay.

Aniguna waxaan arkay inuu walaalkiis Cabdi ka beer jilicsan yihiin. Markaasuu Jayfar wuxuu yiri: "ii sheeg waxay Qurayshi fashay?" Markaasaan waxaan iri: "qaarkoodna way raaceen ayagoo diinta jeclaystay qaar kalena waxay islaameen ayagoo seef lagu qahray oo waxay galeen ayagoo kahanaya ilaa uu Ilaahay Diintaan islaamka uga hanuuniyay oo ay muslimiin fiican noqdeen (sida al mu'allafati quluubihim , kuwa quluubtooda la dumay oo islaamay marka Makkah la furtay). Wuxuu yiri: "yaa raacay?" waxaan iri: "dadkaa raacay oo islaamka jeclaaday oo diimaha kaloo kale oo idil ka doortay, waxayna caqliyadooda ku ogaadeen ayadoo uu Ilaahayna hanuuniyay inay ahaayeen kuwa ku sugan baadi. Mana ogi axad ku haray waxaad ku dul taagan tahay oo aan adiga ahayn. Haddaadan maanta islaaminna oo aadan raacin fardooleyda ayaa cagta ku marinaysa. Marka islaam waad badbaadeysaaye, wuxuuna madax kaaga dhigayaa tolkaaye, oo sidaasaad adigoo muslim ah aad boqorktooyadaada ku haysanaysaaye, oo ayan markaas fardooley idiin soo geleyn iyo ciidan toona.

Islaamidda boqorrada Cumaan

Kaddibna wuxuu yiri: "maanta i daa oo iga tag waxaadna ii soo noqotaa berrito."

Markaasaan waxaan u tegey walaalkiis , oo markaan u warramay yiri: "Camrow anigu waxaan rajaynayaa inuu islaamo, hadduusan boqortooyadiisa ku bakhiilin." Subixii dambe ayaan u imid markaasuu diiday inaan u galo. Markaasaan walaalkiis u tegey

aanna u sheegay inaan walalkiis u tegi waayay. Markaasuu isagu ii geeyey. Markaan u tegey Jayfar ayuu wuxuu yiri: “waan ka fakaray waxaad iigu yeertay oo haddaan boqortooyadayda iyo waxa gacantayda ku jiraba siiyo nin kale hadaba anigaa Carabta ugu taag daran. Isaga fardooleydiisuna halkaan sooma gaaraan, hadday soo gaaraanna waxaan uga hortegayaa dagaal aan la mid ahayn intuu tan iyo hadda galay oo kale.” Waxaan iri: “anigu berri ayaan tegayaa.” Markuu hubsaday inaan berri tegayo, ayuu walaalkiis gooni ula faqay uuna ku yiri: “waxa uu sheegay oo diintaanu naga reebeysana annagu kumaba taagnin, kulli boqorraduu u diray oo uu islaamkaan ugu yeerayna way yeeleen .” Markuu waabariistray ayuu ii soo ciddiray oo uu markaas islaamka oggolaaday isaga iyo walaalkiis oo dhan, oo ay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, rumeeyeen, waxayna oggolaadeen inaan zakada maalka uruuriyo iyo inaan wixii khilaaf ah oo dhex gala kala xukumo. Labadoodaas waxay iga taagereen inta i khilaaftay oo idil.”

Camr bin Al Caasii agtooduu joogay ilaa uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ka dhinto, siduu ibnu Sacad u wariyay. Waxaana dhici karta inuu kusii joogay Cumaan ayadoo uu Al Musdhafaa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam sidaas ku amray markuu diray, ama uu isaguba sidaas ka fahmay.

Intaan islaamin wuxuu kusoo rogay inay jizyo bixiyaan

Cabdaan wuxuu isnaad saxiix ah uga wariyay Cabdu Al Rraxmaan bin Cabdu Al Qaarii inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Claa Aalihi Wa Sallam Camr bin Al Caasii u diray Jayfar iyo Cabaad ilmo Al Julandii labada amiir ee Cumaan, labadaasoo islaamay uuna la islaamay dad badan. Intaan islaaminna Camr wuxuu kusoo rogay inay jizyo bixiyaan.

Riwaayada Al Ssuhaylii ee Camr iyo Al Julandii Boqorka Cumaan

Al Suhaylii wuxuu Al Rawdu ku yiri: “Markuu Camr bin Caasii u yimid Al Julandii wuxuu ku yiri: “Julandiyyow, in kastoo aad adigu dhul ahaan annaga naga fog tahay, hadana Ilaahay kama aad fogid, oo Ilaahay keligiis ku abuuray wuxuu mudan yahay inaad cibaadada keligiis ku koobtid, oo aadan sharrik u yeelin Midkaan abuuristaada cidna shariik kula ahayn. Waxaadna ogaataa inuu Midka nafta kaa qaadaya oo ku dilaya uu yahay isla Midka kusoo nooleynaya. Waxaana kusoo celinaya Midka marka horeba ku abuuray oo ku bilaabay. Hadaba waxaad fiirisaa Nabigaan Ummiga ah oo adduun iyo aakhiraba waxa lagu liibaano keenay. Hadduu waxaan uu keenay ajar ku doonayo ha siin, hadduu yahay mid hawadiisa raacsan iska daa. Kadibna waxaa fiirisaa wuxuu la yimid: ma u egayahay oo ma la midbaa wuxuu dadku keeno? Hadduu u egyahay waxaad weydiisaa caddayn intaad doontana ka qaado. Hadduusanse u ekeyn ka yeel wuxuu yiri, kana baq gulguulkiisa iyo waciidkiisa.”

Al Julandiyyu wuxuu yiri: “wa Allaahi waxaa Nabigaan Ummiga ah la iiga sheegay inuusan wax fiican farin oo isagaaba ahaada kan ugu horreeya oo fala, wax xunna ka reebin dadka oo isagaaba ahaada kan ugu horreeya oo ka fogaada. Markuu adkaadana ma xad gudbo, marka isaga laga adkaadana ma calaacalo. Isagu cahdiga iyo ballanka wuu oofiyaa, wuxuu ballan qaadana waa bixiyaa. Isaguna waa sir daboolka laga qaaday oo ay ehelkiisu u wada siman yihiin. Aniguna waxaan marag ka ahay inuu Nabi yahay.”

Qoraalka Afar iyo Tobnaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Warqadduu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u dhigay boqorka Al Yamaamah

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu warqad u dhigay boqorka Al Yamaamah Huuthah bin Calii Al Xanafii, wuxuuna ugu dhiibay Saliidh bin Camr Al Caamirii, Al Caamirii Al Qurayshii midkaanoo islaamka bilowgiisaba islaamay una haajiray al xabashah siduu ibu Isxaaq u wariyay, kana qayb galay Badar siduu Al Waaqidii iyo abii Macshar-ba, kuna shahiiday Al Yamaamah. Saliidh wuxuu ganacsi in badan u tegi jiray Al Yamaamah oo wuu yiqiinnay.
Warqadduna waa tanaa.

“Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuula Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ilaa Huuthah bin Calii, salaamun calaa manittabaca al hudaa, wa aclam anna diinii sa yuth-haru ilaa muntahaa al khuffi wa al xaafiri, aslim taslim, wa ajcalu laka maa taxta yadayka.”

Warqadda macneheedu waxaa weeye: “Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, una socotaa Huuthah bin Calii Al Xanafii, oo u dhashay qabiilka Banii Xaniifah weeyey ahna qabiilka Musaylimah al kath-thaab. Nabadgelyo korkiisa ha ahaato midka hanuunka raaca. Ogowna, inay Diintaydu gaarayso oo ka adkaanayso intay cagaha awrta iyo qoobabka farduhu gaaraan. Islaam waad badbaadaysaaye, markaasaan waxaan boqor kaaga dhigayaa inta hadda gacantaada ku jirta.”
Markaasuu markuu Saliidh u yimid oo uu warqadda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u keenay oo khitaaman, ayuu dejiyay uuna hadiyado siiyay. Kaddibna wuxuu akhriyay warqadda .

Hadalka Saliidh bin Camr

Al Suhaylii wuxuu yiri: “Saliidh wuxuu yiri: “Huuthow i maqal: waxaad boqor u tahay wax dhammaanaya oo ah adduunkaan iyo arwaax naarta ku jira, waxaase sayyid iyo madax ah qofka iimaanka ku raaxaysta, taqwadana kaddib saad ka dhigta markaad inta islaamtid uu tolkaa ahlu janno noqdo, marka hada intaad islaamka diidid naarta ha u horseedin. Aniguna waxaan ku farayaa waxa ugu khayr badan oo la is faro, waxaanna kaa reebayaa waxa ugu xun oo la iska reebo. Waxaan ku farayaa inaad Ilaahay keligiis caabudid, waxaanna kaa reebayaa inaad shaydaan caabudid, oo caabudidda Ilaahay jannada ayuu lagu helaa, shaydaan caabudiddiisana naarta. Haddaad oggolaatid waxaad heleysaa waxaa rajayneysey, waxaadna ka nabadgekeysaa waxaad ka baqaysay. Haddaad diidana annaga iyo adinka waxaa naga dhexeeya daboolka oo la iska faydo.”

Hadalka Huuthah

Markaasuu Huuthah wuxuu yiri: “Saliidhow, waxaa boqor iga dhigay mid hadduu adigana boqor kaa dhigi lahaa aad sharaf ku heli lahayd. Waxaanna lahaan jiray aragti aan umuurta ku tijaabiyo waana iga lumiyay, oo meeshuu qalbigayga uga jiray waxaa hadda ku jira hawo oo ah dabayl oo waa maran yahay. Marka waqti i sii aan arrinkaan uga soo tashado oo aan markaas jawaab ku siiyo inshaa’a Allaahu.” Sidaasuu wuxuu siiyay jawaab aan xumayn

Jawaabtuu Huuthah u dhigay Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Markaasuu wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u dhigay warqaddaan:

"Ma jiro wax ka fiican oo ka qurxoon waxaad dadka ugu yeereysid! Carabtuna way i weyneysaa oo iga baqdaa cududdayda dagaal daraadeed. Marka amarka Nabinnimadaada wax iiga yeel adiga dabadaa (oo waa aniga Nabinnimada i wadaaji ama khaliifo ahaan ii magacaw)."

Kaddibna Saliidh wuu marti sooray oo uu hadiyooyin siiyay, wuxuuna siiyay dharka lagu sameeyey Hajar (oo ah dhulka maanta Baxrayn la yiraahdo oo idil).
Markaasuu isagoo hadiyooyinkaas wada wata ayuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, usoo noqday, uuna warkii u sheegay. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam, warqaddiisa akhriyay (waa loo akhriyay) kaddibna uu yiri: **"law sa'alanii sabaabatan mina al ardi maa facaltu. Baada wa baada maa fii yadayhi"** oo macnihiisu yahay: "hadduu i waydiisan lahaa cad dhul ah –ama xabbad timir ah ma siiyeen. Wuu halaagmay, boqortooyadiisuna gacantiisa way ka baxday oo way zuushay."
Markuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ka gaddoomay furashada Makkah ayaa waxaa u yimid Jibriil Calyhissalaamu wuxuuna u sheegay inuu Huuthah dhintay isagoo gaal ah. Markaasuu Sallaa Allaahu Calyhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri: **"amaa anna Al Yamaamata sa yath-haru bihaa kath-thaabun yatanabba'u yuqtalu bacdii"** oo macnihiisu yahay: "Al Yamaamah waxaa kasoo bixi doona mid beenlow ah oo nabinnimo sheegan doona, dabaday ayaana la dili doonaa."
Sidaas ayayna noqotay oo waxaa kasoo baxay Musaylimah al kath-thaab lacanahu Allaahu waana la dilay.
Markaasuu nin wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, yaana dili doona?" Markaasuu yiri: **"anta wa asxaabuka"**, oo ah: "adiga iyo asxaabtaada."

Huuthah iyo Arakuun

Al Waaqidii wuxuu yiri: "ninka la yiraahdo Arakuun Dimishiq oo ka mid ah kuwa waawayn ee wadaadada waawayn ee krishtaanka ayaa wuxuu la joogay Huuthah, markaasuu xagga Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam, ka waraystay. Markaasuu wuxuu yiri: "waxaa ii timid warqaddiisa uu iigu yeerayo inaan islaamo, kamana yeelin." Markaasuu Arakuun wuxuu yiri: "maxaadna u yeeli wayday?" Wuxuu yiri: "waxaan ku bakhiilay oo ku dhegganahay diinteyda, aniguna waxaan ahay boqorka tolkay. Marka haddan raaco boqor ma ahaanayo." Arakuun wuxuu yiri: "bal wa Allaahi haddaad raacdid boqor ayuu tolkaa kaaga dhigayaa, adigana waxaa kuu khayr badan inaad raacdid, isaguna waa Nabiga Carabiga ah oo uu Ciise ibnu Maryama ku bishaareeyey, kitaabkeenna Injiilka ah waxaa ku dhigan "Muxammadun Rasuulu Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam."
Kitaabka Al Isaabah wuxuu yiri: "Arakuun wuxuu soo gaaray jaahiliyada wuxuuna ku islaamay Khaalid bin Al Waliid hortiisa zamanka Abuu Bakr Al Ssiddiiqu, siduu ibnu Casaakir u wariyay oo waxaa tarjamadiisa dhigay wiilkuu awoowaha u ahaa Ibraahiim bin Muxammad bin Saalix bin Sinaan bin Yaxyaa bin Arkuun."

Qoraalka Shan iyo tobnaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ee Al Xaarithu bin Abii Shimr Al Ghassaanii

Al Zarqaani wuxuu mujalladka shanaad bogga lix iyo afartan ku wariyay qoraalkuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam u dhigay Al Xaarithu bin Abii Shimr Al Ghassaanii, oo amiir ka ahaa Dimishiq caasimadda Suuriya, wakiilna uga ahaa boqorka Roma ee Hiraqal, ayadoo ay Shaam iyo Masarba boqortooyada Roma ka tirsanaayeen. Warqadda waxaa ku qornaa intaan:

“Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuula Allaahi ilaa Al Xaarith bin Abii Shimr, salaamun calaa manittabaca al hudaa, wa aamana bi Allahi wa sadaqa, fa innii adcuuka ilaa an tu’mina bi Allaahi Waxdahu laa shariika laHu, yabqii laka mulkuka.”

Warqaddaas macneheedu waxaa weeye:

“Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, waxayna ku sotaa Al Xaarithu bin Abii Shimr. Nabadgelyo waxay korkiisa tahay midka hanuunka raaca, Ilaahayna aamina oo rumeeya, aniguna waxaan kuugu yerayaa inaad aamintid Ilaahay Keligiis Isagoo aan shariik lahayn. Haddaad sidaas yeeshana boqortooyadaadu way ku sugnaanaysa oo kuu haraysaa.”

Al Qasdhalaani wuxuu yiri: wuxuuna Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam qoraalka ugu dhiibay Shujaac bin Wahb (oo uu Al Zarqaanii isla boggaas ku yiri: “waa Shujaac bin Wahb bin Rabiicah bin Asad bin Suhayb bin Maalik bin Kathiir bin Duudaan bin Asad bin Khuzaymah Al Asadii oo ka mid ah kuwa horeba u islaamay, unaa haajiray al xabashah hijrada labaad, kana qayb galay Badar, iyo duullannada oo idil, kuna shahiiday Al Yamaamah. In isagu warqadda Al Xaarithu loogu dhiiabayna waxaa wariyay Al Waaqidii iyo ibnu Kisxaaq iyo ibnu Xazam.”)
Al Zarqaanii wuxuu kaloo yiri: “ibnu Hishaam wuxuu yiri: “wuxuu u diray Jabalah bin Al Ayham. Abuu Cumarna wuxuu yiri: labadooduba wuu u wada diray. Waxaa kaloo la yiri wuxuu u diray Hiraqal oo wuxuu la socday Dixyah.
Al waaqidii wuxuu kaloo yiri iyo Caa’idba: Shujaac wuxuu yiri: “markaasaan u tegay waxaanna u tegey isagoo mashquul ku ah diyaarinta martigelinta Al Qaysar (waana boqorka Roma Hiraqal), kanoo ka yimid Xims yimidna Qudus, markuu Ilaahay ka duway ciidanka Faaris (oo uu ka adkaaday sida ku xusan Suuratu Al Rruumi), uuna u yimid isagoo Ilaahay Tacaalaa ku shukrinaya. Markaasaan waxaan albaabkiisa taagnaa laba ama saddex maalmood. Markaasaan waxaan xaajibkiisa (ahna ninka dadka raba u geliyaa oo albaabkiisa fura), ahaana nin roomaan ah magaciisuna ahaa Miraa –sida Al Isaabah ku dhigan-. Markaasuu wuxuu iga waraystaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, iyo wuxuu dadka ugu yeerayo. Markaasaan arrimahaas uga warramay. Markaasuu isaguna warkaas aan u sheegayo u beero jilcaa ilaa heer uu ka booyo uuna yiraahdo: “anigu waxaan akhriyay kitaabka Injiilka, waxaanna ku arkay sifooyinkaasaas aad sheegtay laftooda inuu isaga yahay, waxanna u malaynayay inuu kasoo bixi doono Shaam wuxuuse kasoo baxay arliga la ammaanay. Marka anigu waan aaminay waana rumeeyey. Aniguna waxaan ka baqayaa Al Xaarithu bin Abii Shimr

inuu i dilo.” Shujaac wuxuu yiri: “wuuna i karaamayn jiray, si fiicanna ii marti gelin jiray, iina sheegi jiray siduu Al Xaarithu uga quustay, wuxuuna oran jiray inuu Al Xaarithu uu Qaysar ka baqo.”
Wuxuu yiri: “markaasuu Al Xaarithu maalin soo baxay oo uu taajka madaxa saartay markaasuu ii oggolaaday inaan u galo. Markaasaan warqadda u dhiibay. Markaasuu akhriyay oo markuu dhammeeyey tuuray unna yiri: “yaa aniga boqortooyadayda iga qaadi kara? Haddaan weerar ku qaadayaa, oo walow uu Yaman joogana ciidan ayaan dul geynayaa.” Halkaas ayuu fadhiyay ilaa habeenkii, wuxuuna amar ku bashay in fardaha kabaha biraha ah qoobabka loogu xiro, kaddibna wuxuu yiri: “u sheeg saaxiibkaa waxaad u jeedid.” Kaddibna wuxuu warqad u dhigay Qaysar isagoo u sheegaya aniga khabarkayga. Markaasuu qoraalku wuxuu Qaysar ugu tegey Quddus isagoo uu Qaysar la joogo Dixyah oo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, warqad ugu dhiibay. Markaasuu Qaysar markuu warqadda Al Xaarithu akhriyay “wuxuu usoo diray warqad uu ku amrayo inuusan ku duulin Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, “kana har, Quddusna iigu imow.” Markaasay warqadda Qaysar u timid anigoo wali jooga. Markaasuu ii yeeray wuxuuna yiri: “goormaad doonaysaa inaad saaxiibkaa ku noqotid?” Waxaan iri: “berrito.” Markaasuu wuxuu amaray oo la i siiyay boqol. Miraa wuxuu isaguna i siiyay xoolo iyo dhar wuxuuna yiri: “Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, salaan iga gaarsii, waxaadna u sheegtaa inaan anigu diintiisa raacsanahay.” Markaan imid ayaan u sheegay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, markaasuu yiri: **“baada mulkuhu”** oo ah: “boqortooyadiisu way burburtay oo dhammaatay (waana Al Xaarith).” Markaasaan gaarsiiyay salaantuu u soo diray Miraa, waxaanna u sheegay hadalkuu yiri, markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu yiri: **“Sadaqa”**, oo ah: “run ayuu sheegay.”

Qoraalka Lix iyo tobnaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalkuu Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u dhigay Al Ddariyyiina sanadka sagaalaad ee Hijrada

Al Zarqaanii wuxuu yiri: “Shaykhu al islaami Burhaanu Al Ddiini Ibraahiim Al Fazaarii wuxuu kitaabkiisa “Baacithu Al Nnufuusi ilaa ziyaarati Al Qudusi Al Maxruusi” ka wariyay Abuu Hind Al Ddaarii una dhashay Banii Al Ddaar bin Haan’i bin Xabiib, oo yiri: “waxaan u nimid Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, waana sanadka sagaalaad ee Hijrada kaddib markuu Duullaanka Tabuuk ka laabtay, annagoo lix nin ah oo kala ah (kow) Tamiimu Al Ddaarii, oo hore krishtaan u ahaan jiray kaddibna inta Al Madiinah yimid islaamay, Nabigana, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ugu warramay khabarka Al Jassaasah iyo Al Ddijjaal, oo uu markaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, isagoo minbarka saaran warkaas ka wariyay, taasoo manaaqibtiisa ka mid ah, isagaana ugu horreeyey qof masjidka Al Madiinah faynuus u shida siduu Al Dhabraanii u wariyay, waana kan ugu horreeyey oo qisooyin sheega waana zamanka Cumar siduu u wariyay ibnu Raahawayh, wuxuuna ahaa nin tahajudka habeenka badan. (laba) iyo walaalkiis Nucaym bin Aws. (Saddex) Yaziid bin Qays bin Khaarijah Al Ddaarii, oo uu ibnu Isxaaq wariyay inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam uga dardaarmay in la siiyo boqol awsaq oo timirta Khaybar ka mid ah. (Afar) Abuu Cabdu Allaahi bin Cabdu Allaahi, ahna ninka Xadiithkaan wariyay iyo isaga walaalkiis (Shan) Al Dhayyibu bin Cabdu Allaahi Al

Ddaarii, oo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u bixiyay Cabdu Al Rraxmaanu. (Lix) Faakih bin Al Nucmaanu bin Jabalah Al Ddarii, oo isagana Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam ka dardaarmay."
Al Waaqidii wuxuu Xadiith mursal ah ka wariyay Cubaydu Allaahi bin Cabdu Allaahi bin Cutbah oo yiri: "wafdiga Al Ddaariyyiina ayaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u yimid markuu kasoo laabtay Tabuuk ayagoo toban nin ah: (kow) Haan'i bin Xabiib iyo (Laba) Curwah bin Maalik bin Shaddaad, iyo (Saddex) Qays bin Maalik iyo (Afar) walaalkiis Murrah, kaddibna wuxuu ku daray lixda kale. Wuxu yiri: "markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu Al Dhayyibu u bixiyay Cabdu Allaahi, Curwah-na wuxu u bixiyay Cabdu Al Rraxmaan.' Al Rashaadhii wuxuu isaguna wariyay inuu Haan'i Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, hadiyo ugu keenay maro dhahab lagu dheehay, markaasuu Al Cabbaasu siiyay oo ka gaday nin yuhuudi ah uuna ka siiyay sideed kun."
Cabdu Allaahi wuxuu yiri: "markaasaan islaannay, waxaanna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, waydiisannay inuu dhul noo gooyo oo ka mid ah arliga Al Shaam, markaasuu wuxuu yir**: "saluu xaythu sh'itum"** oo macnihiisu yahay: "sheegta meeshaan doonaysaan inaan dhulka idiinka gooyo."
Abuu Hind wuxuu yiri: "markaasaan agtiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ka kacnay oo aan tagnay meel aan uga shawrno dhulkaan waydiisan lahayn. Markaasuu Tamiim wuxuu yiri: "waxay ila tahay inaan waydiisanno Baytu Al Maqdis iyo degmadeeda hareereheeda ah." Markaasuu Abuu Hind wuxu yiri: "soo Baytu Al Maqdis maanta boqortooyada cajamta ma ah?." Tamiim wuxuu yiri: "haa." Markaasuu Abuu Hind wuxuu yiri: "sidaasuu wuxuu u noqon doonaa boqortooyada Carabta, waxaanna ka baqayaa inaanan hanan karin (oo hadduu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, maanta noo gooyo oo ay markaas Carabtu qabsato dhulkii nala siiyay waa naga wareegayaa oo markaas dhul la'aan ayaan kusoo dhacaynnaa)." Tamiim wuxuu yiri: "hadaba aan weydiisanno Baytu Jayruun (oo ah meel Dimishiq ka mid ah oo ay ku oolli jirtay qalcad uu lahaan jiray boqorka Jayruun)." Markaasuu Abuu Hind wuxuu yiri: "akbaru, akbaru (oo ah Baytu Al Maqdis dhukaanaaba ka wayn oo wuxuu ku yaalla caasimadda Dimishiq oo ah fadhiga boqortooyada)." Markaasuu Tamiim wuxuu yiri: "hadaba xaggee bey kula tahay inaan waydiisanno?" Wuxuu yiri: "aan waydiisanno tuulooyinka ay qalcaduhu ku yaallaan iyo dhulka dhexdooda ku yaalla oo uu ka tegey Ibraahiim Calayhissalaamu." Markaasuu Tamiim yiri: "waad haleeshay oo lagu waafajiyay."
Wuxuu yiri: "markaasaan kacnay oo aan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u tagnay markaasuu wuxuu yiri**: "yaa Tamiimu a tuxibbu an tukhbiranii bimaa kuntum fiihi aw ukhbirukum?"** oo macnihiisu yahay: "Tamiimow ma waxaad jeceshay inaad ii sheegtid waxaad ku shawrteen mase inaan anigu idiin sheego?" Markaasuu yiri: "Rasuulka Ilaahyow bal adigu noo sheeg oo aan sidaas iimaan ku kororsanno." Markaasuu Calayhissalaatu Wassalaamu wuxuu yiri: **"aradta yaa Tamiimu amran, wa araada Abuu Hind ghayrahu, wa nicma al rra'yu ra'yo Abuu Hind"**, oo macnihiisu yahay: "adiguu Tamiimow arrin ayaad doontay Abuu Hindana amarkaas ghayrkiis ayuu doonay, talada Abuu Hindana waxay ahayd talo fiican."
Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu yiri ha lii keeno cad harag ah oo uu markaas u dhigay qoraal nuskhadiisu sidaan tahay:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi, haathaa kitaabun thukira fiihi maa wahaba Muxammadun Rasuula Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa alaa Aalihi

Wa Sallam lilDaariyyyiina ithaa acdhaahu Allaahu al arda, wahaba lahum Bayta Caynuun wa Xabruun wa Al Mardhuum wa Bayta Ibraahiima wa man fiihim ilaa abadi al abadi. Shahida Cabbaas bin Cabdu Al Mudh-dhalib wa Khuzaymah bin Qays wa Shuraxbiil wa kataba."

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Kanu waa qoraal uu ku dhigan yahay wuxuu Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u hibeeyey ragga ka dhashay qabiilka Daariyyiinta markuu Ilaahay dhulkaas siiyo siduu Ilaahay uga ballaan qaaday (oo markaas dhulkaasu wuxuu ka tirsan yahay boqortooyada Roomaanka oo islaamkuba ma gaarin), wuxuuna u hibeeyey Bayta Caynuun (kuna taalla Shaam waana dhulka keli ee Shaam ku yaalla oo uu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dad u gooyay) wa Xabruuna (waana tuulada la yiraahdo Al Khaliil oo ah tuulada Nabi Ibraahiim una dhow Baytu Al Maqdis) wa Al Mardhuuma, iyo Bayta Ibraahiima iyo waxa dhexdoodaba ku sugan ilaa abadka abad (ayadoo uu Ilaahay uu arliga oo idil boqor uga dhigay oo cidduu doono meeshuu doono uga goynayo dhul. Al Ghazaalii wuxuu yiri: "Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu dadka dhul uga goyn jiray jannada, marka arligaan maxaad mooddaa!".
Waxaa ka marag ah Cabbaas bin Cabdu Al Mudh-dhalib iyo Khuzaymah bin Qays iyo Shuraxbiil bin Xasanah oo qoraalkaan dhigay."
Wuxuu yiri: "markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, isagoo qoraalka wata gurigiisa la galay oo gees ka mid ah qoraalka waxaan la aqoon ku sameeyey, uuna qoraalka inta duubay korkiisa laba guntiimo ku sameeyey, oo uu markaas noo soo baxay isagoo leh: **"inna awlaa al nnaasi bi ibraahiima lallathiina ittabacuuhu wa haathaa Al Nabiyyu wa allathiina aamanu wa Allaahu waliyyu al mu'miniina"** oo ah Aayadda sideed iyo lixdanaad ee Suuratu Aali Cimraana oo macneheedu yahay: "Waxaa dadka Ibraahiim ugu xaq badan kuwa waagiisii raacay iyo inta dabadiis diintiisa ku taagnayd iyo Nabigaan, Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, iyo inta ummaddaan ka rumeysay oo muslimiinta ah, Ilaahay ayaana ah Waliga waa gargaarehee mu'miniinta."
Kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri**: "insarafuu xattaa tasmacuu annii haajartu"** oo macnihiisu yahay: "dalkiina ku laabta oo markaad maqashaan inaan Makkah ka haajiray ii imaada."
Abuu Hind wuxuu yiri: "markaasaan dalkeenna u gaddoonnay oo uu markuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Al Madiinah usoo haajiray ayaan u nimid waxaanna weydiisannay inuu qoraalkii hore mid cusub noogu cusbooneysiiyo. Markaasuu wuxuu noo dhigay qoraal nuskhadiisu tahay sidatan:

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathaa maa andhaa Muxammadun Rasuula Allaahi li Tamiimi Al Daarii wa asxaabihi, innii andhaytukum Bayta Cayn wa Xabruun wa Al Mardhuum wa Bayta Ibraahiim bi rummatihim wa jamiica maa fiihim nadhyata battin wa nufithat wa sallamtu thaalika lahum wa li acqaabihim min bacdihim abada al abadi, fa man aathaahum aathaahu Allaahu. Shahida Abuu Bakr bin Abii Quxaafah wa Cumar bin Al Khadh-dhaaba wa Cuthmaan bin Caffaan wa Calii bin Abii Dhaalib wa Mucaawiyah bin Abii Sufyaan, wa kataba Caliyyu."

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

“Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Kanu waa wuxuu Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, siiyay Tamiimu Al Daarii iyo asxaabtiisa. Anigu waxaan idin siiyay Bayta Cayn (oo isla Baytu Caynuun ah) iyo Xabruun iyo Al Mardhuum iyo Bayta Ibraahiima dhammaantood iyo dhaammaan waxa dhexdooda ku sugan oo si kama dambays ah ayaan u siiyay waana la fuliyay gacanta ayaanna ka saaray oo ayagaa iska leh iyo curibtooda ayaga ka dambeysa, waana ubadkooda, ebed ebedkeed. Qofka waxaas aan siiyay ku dhiba Ilaahay isagana ha dhibo. Waxaa ka marag ah Abuu Bakr ibnu Abii Quxaafah iyo Cumar bin Al Khadh-dhaab iyo Cuthmaan bin Caffaan iyo Calii bin Abii Dhaalibiyo Mucaawiyah bin Abii Sufyaan. Qoraalkaanna waxaa dhigay Calii.”

Warqadda Abuu Bakr Al Ssiddique ee Daariyyiinta

Al Zarqaanii wuxuu yiri: “kitaabka “Iscaafi Al Akhsaa (waa saad) bi tafdiili Al Masjidi Al Aqsaa” wuxuu wariyay tillabaduu Abuu Bakr Al Ssiddiiqu dhulka Daariyyiinta ka qaaday markuu Khaliifah noqday oo uu ciidan u diray Shaam, wuxuuna yiri:
“Markaasaa marka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, la oofsaday oo Abuu Bakr khaliifah noqday uuna ciidan u diyaariyay inuu u diro Shaam wuxuu dhigay qoraal nuskhadiisu sidaan tahay:

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Abii Bakr Al Siddiiqi ilaa Abii Cubaydah bin Al Jarraax, salaamun calayka, fa inni axmadu Allaaha ilayka Allathii laa Ilaaha illaa Huwa. Ammaa bacdu: fa amnac man kaana yu’minu bi Allaahi wa al yawmi al aakhiri mina al fasaadi fii quraa Al Daariyyiina, wa in kaana ahluhaa qad jacaluu canhaa wa araada Al Daariyuuna yazracuunahaa fal yazracuuhaa bilaa kharaajin wa ithaa rajaca ilayhaa ahluhaa fahum lahum wa axaqqu bihim wassalaamu calayka.”

Qoraalka Abuu Bakr macnihiisu waxaa weeye:

“Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Abuu Bakr Al Ssiddiiqu waxayna ku socotaa Abuu Cubaydah bin Al Jarraax (oon ciidammadaas uu Abuu Bakr Al Ssiddiiqu Shaam u diray madax u ahaa). Salaani korkaaga ha ahaato. Aniguna Ilaahay ayaan daraadaa ugu mahdinayaa, Ilaaha uusan jirin Ilaah aan Isaga ahayn. Intaas dabadeedna: ka celi qof kasta oo rumaysan Ilaahay iyo maalinta aakhiro inuu fasaadiyo tuulooyinka Daariyiinta. Haduu dadkii degganaana ka baxay, Daariyiintuna ay doonayaan inay beertaan ha beertaan ayagoo aan kharaaj (waa canshuur) laga qaadayn. Haduu dadkeedu usoo noqdana ayagaa iska leh kuna xaq badan. Wassalaamu calayka.”

Dardaaranka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, marka la oofsanayay

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, marka la oofsanayay kama uusan dardaarmin waxaan saddex ahayn, oo kala ah (Kow) Wuxuu Al Rahaawiyyiina u dardaarmay dhul ay ka baxaan boqol wasaq oo Khaybar ku yaalla. (Laba) Al Ddaariyyiina wuxuu u dardaarmay dhul ay ka baxaan boqol wasaq ee arliga Khaybar. (Saddex) Al Sabaa'iyiina wuxuu u dardaarmay dhul ay ka baxaan boqol wasaq ee arliga Khaybar. Al Ashcariyyiina ayagana sidoo kale. (Afar) Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ka dardaarmay in la fuliyo duullaanka Usaamah bin Zayd bin Xaarithah. (Shan) Inaan Jaziiradda Carabta loo oggolaan laba diinood."

Amarka Fadak

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kasoo jeestay Khaybar ayuu Ilaahay wuxuu argagax ku riday quluubta yuhuudda reer Fadak, markuu soo gaaray wuxuu Ilaahay Tacaalaa reer Khaybar ku dhigay. Markaasay ergay u direen Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayna kula heshiiyeen nuska waxa Fadak ka baxa. Markaasay ergadoodu ugu timid Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Khaybar, ama Al Dhaa'if, ama kaddib markuu Al Madiinah ku noqday. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam taas ka yeelay. Sidasay Fadak waxay khaas iyo gooni ugu ahayd Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayadoo ayan muslimiintu furashadeeda fardo iyo awr midna u fuulin oo ayan dagaal u gelin."

Magacda Daariyiinta uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u dardaarmay

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: “Daariyiintu waa Banuu Al Ddaar bin Haani' bin Xabiib bin Numaarah bin Lakhm, oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Shaam uga yimid. Raggaasna waa Tamiimu bin Aws iyo Nucaym bin Aws oo walaalkiis ah iyo Yaziid bin Qays iyo Curfah bin Maalik oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Cabdu Al Rraxmanu u bixiyay (oo uu ibnu Hishaam yiri: "Waxaa la yiraahdaa Cazzah bin Maalik, walaalkiisna waa Marwaan ama Murraan bin Maalik."), iyo Faakihah bin Nucmaanu, iyo Jabalah bin Maalik, iyo Abuu Hind bin Barr iyo walaalkiis Al Dhayyibu bin Barr oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Cabdu Allaahi u bixiyay."

Qoraalka Toddoba iyo Tobnaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalka Heshiiska Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam iyo Yuxannatu bin Ru'bata, boqorka Aylah/sanadka sagaalaad ee Hijrada

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Tabuuk tegay, waana sanadka sagaalaad ee Hijrada, waxaa u yimid Yuxannatu bin Ru'bata, boqorka **Aylah** (ahna magaalada maanta la yiraahdo **Al Caqabah**, ahna dekadda Boqortooyada Haashimiga ah ee Urdun oo ku taalla Gacanka Al Caqabah oo ka baxa Badda Cas) oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam la heshiiyay, jizyana siiyay. Waxaa kaloo isaguna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid dadka **Jarbaa'** iyo **Athrux** (oo maanta ah laba magaalo oo ka tirsan dawladda Urdun, oo magaalada Urdun ee Macaan u jira laba iyo labaatan kiiloomitir). Markaasay jizyo bixiyeen oo siiyeen. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u dhigay qoraallo oo uu siiyay, ayna haystaan.

Qoraalka heshiiska boqorka Aylah/Al Caqabah

Qoraalkuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u dhigay boqorka Aylah waa kanaa:

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathihi amaanatun mina Allaahi wa Muxammadin Al Nnabiyyi Rasuula Allaahi li Yuxannata bin Ru'bata wa ahla Aylah, sufunahum wa sayyaaratihim fii al barri wa al baxri: lahum thimmata Allaahi wa thimmata Muxammadin Al Nnabiyyi wa man kaana macahum min ahli Al Sh-shaami wa ahli Al Yamani, wa ahla al baxri. Faman axdatha minhum xadathan, fa innahu laa yaxuulu maaluhu duuna nafsihi, wa innahu dhayyibun li man akhathahu mina al nnaasi. Laa yuxiilu an yumnacuu maa'an yariduunahu, wa laa dhariiqan yuriiduunahu, min barrin aw baxrin."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi**.** Middaani waa amni uu siiyay Ilaahay iyo Nabi Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Yuxannaa bin Ru'bah iyo dadka Aylah, iyo doonyohooda iyo safarkoodaba badda iyo barrigaba ku socda. Waxayna leeyihiin ilaalinta Ilaahay iyo ilaalinta Nabiga, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, isaga iyo inta la jirta ee kala soo degtay dadka reer Shaam iyo dadka reer Yaman iyo dadka baddaba. Marka, qof ayaga ka mid ah oo la yimaada o suubiya wax shareecadenna aan ka mid ahayn, markaas wuxuu jebiyay heshiiskii, oo markaas naftiisa iyo maalkiisuba waa xalaal, waana u xalaal qofka qaata oo dadka ka midka ah. Xalaal ma aha in laga reebo badda ay doonayaan ama dariiqa ay rabaan inay maraan, barriga iyo baddaba. Waxaana qoraalka dhigay Juhaym bin Al Ssalt iyo Shuraxbiil ibnu Xasanah, ithanka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam."

Aylah

Aylah waxaa degganaa markaas saddex boqol oo nin, ninkiina wuxuu sanad walba bixinayaa hal Diinaar, iskuna ah saddex bqool oo Diinaar sanad walba. Markaan kun sagaal boqol afar iyo sagaashan miilaadiga ah tegey Al Caqabah, waa magaalo caadi ah oo weyn oo aan Hargaysa ka yarayn. Aylah waxaa lagu sammiyay Aylah bintu Madyan bin Ibraahiim, Calayhissalaamu, waxaana la yiri inay ayada tahay qaryada, waa tuuladee, kuwa xeebta badda deggan oo ay nooga hadleyso Aayadda boqol saddex iyo lixdanaad ee Suuratu Al Acraafi oo maalinta sabtida kalluumaystay ayadoo ay xaaraan ka tahay, kaddibna doofaarro iyo daanyeerro loo masakhay oo laga dhigay. Boqorka Aylah wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hadiyo ahaan u siiyay baqal cad. Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu isaga siiyay go'.
Al Zarqaanii wuxuu wariyay inuu Abaa Al Cabbaas Cabdu Allaahi bin Muxammad Al Ssafaax go'aas mar dambe ku gatay saddex boqol oo Diinaar (Khulafada Cabbaasiyiintana waxaa ugu horreeyey Abuu Al Cabbaas Al Saffaax Cabdu Allaahi bin Muxammad bin Calii bin **Cabdu Allaahu bin Al Cabbaas** bin Cabdu Al Mudha-dhalib bin Haashim oo khaliif ahaa inta u dhexeysey boqol iyo labo iyo soddon ila boqol iyo lix iyo soddon Hijriga una dhigantah toddoba boqol iyo konton ilaa toddoba boqol iyo afar iyo konton Miilaadiga.. Caasimadiisuna waxay ahayd magaalo uu isaga laftiisu dhisay uuna u bixiyey **Al Haashimiyyah**, una dhoweyd gobolka Al Anbaar ee arliga Ciraaq. Walaalkiisa khaliifnimada isaga ku xigay oo ahaa Abuu Jacfar Al Mansuur ayaa magaalada Baghdaad dhisay, una bixiyey **Madiinatu Al Ssalaamu**, oo loogu bixiyey inay u dhawdahay wabiga Dijlah oo la oran jiray Qasru Al Ssalaamu, caasimadna ka dhigtay).
Al Zarqaanii wuxuu kaloo Al Waaqidii ka wariyay inuu yiri: "Sababta uu boqorka Aylah Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu yimid oo uu jizyo inuu bixiyo u oggolaaday waxay tahay inuu markaas horteed Khaalid bin Al Waliidu u diray boqorka Duumatu Al Jandal (oo uu jebiyay, isagoo xargo ku xirxiranna uu Nabiga, Sallaa

Allaahu Calayhi Wasallam, Tabuuk ugu keenay). Markaasuu ka baqay in isagana loo soo diro oo uu taasoo kale ku dhigo." Al Zarqaanii wuxuu Al Waaqidii ka wariyay inuu Jaabir yiri: "Waxaan arkay Yuxannah bin Ru'bah maaalintuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid isagoo krishto dahab ah xiran. Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arkay ayuu joogsaday oo uu madaxa sujuud u foorariyay, weyneyn iyo salaamid. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gacantiisa ugu tilmaamay inuu madixiisa kor usoo qaado, oo uu heshiis la galay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu siiyay go' yamani ah, wuxuuna la dejiyay Bilaal."

Qoraalka Sideed iyo Tobnaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee dadka Jarbaa' iyo Athruux/sanadka sagaalaad ee Hijrada

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Tabuuk tegay waxaa u yimid Yuxannatu bin Ru'bata, boqorka **Aylah** (oo maanta la yiraahdo **Al Caqabah**, ahna dekadda Boqortooyada Haashimiga ah ee Urdun oo ku taalla Gacanka Al Caqabah oo ka baxa Badda Cas) oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam la heshiiyay, jizyana siiyay. Waxaa kaloo isaguna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid dadka **Jarbaa'** iyo **Athrux** (oo maanta ah laba magaalo oo ka tirsan dawladda Urdun, oo magaalada Urdun ee Macaan u jira laba iyo labaatan kiiloomitir). Markaasay jizyo bixiyeen oo siiyeen. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u dhigay qoraal oo uu siiyay, ayna haystaan.

Qoraalka Jarbaa' iyo Athrux

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu dadka Jarbaa' iyo Athrux u dhigay qoraalkaan:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathaa kitaabun min Muxammadin Al Nnabiyyi Rasuula Allaahi li ahli Athrux wa Jarbaa', annahum aaminuuna bi amaani Allaahi wa amaana Muxammadin. Wa inna calayhim mi'atu Diinaarin fii kulli Rajab waafiyatan dhayyibatan, wa Allaahu kafiilun calayhim bi al nnusxi wa al ixsaani ilaa al muslimiina wa man laja'a ilayhim mina al muslimiina fii al makhaafati wa al tacziizi."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Kani waa qoraal uu Nabi Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u dhigay dadka Athrux iyo Jarbaa', inay leeyihiin nabad gelyada Ilaahay iyo nabad gelyada Muxammad, Saalla Allaahu Calayhi Wasallam. Waxaana korkooda ah oo ay bixinayaan boqol Diinaar bil walba oo Rajab ah -oo ragga labada degmo deggan waxay isku ahaayeen boqol nin qiyaas, oo jizyada heshiis la isla galay lagu bixiyo waa waxa lagu heshiiyo, midda xoogga lagu bixinayana waa afar Diinaar ninkiiba sanadkiiba-. Ilaahay ayaana kafiil ka ah oo heshiiska la galay, amrayana inay waaniyaan, una sama falaan muslimiinta iyo inta

muslimiinta ah oo ayaga usoo carara marka la cabsado iyo marka xoog la leeyahayba, hadday muslimiintu u baqaan, ayaguna waa aamin."

Qoraalka Sagaal iyo tobnaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam heshiiskaas kaddib isagoo wali Tabuuk jooga ayuu wuxuu Khaalid bin Al Waliidu u diray boqortooyada Duumatu Al Jandal

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, u u yeeray Khaalid bin Al Waliid, uuna u diray inuu ku duulo boqorka Duumatu Al Jandal, magaciisuna yahay Ukaydir bin Cabdu Al Malik, una dhashay qabiilka Carbeed ee Kindah, krishtaanna ahaa. Markaassuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, wuxuu Khaalid ku yiri: **"innaka sa tajiduhu yasiidu al baqara"**, oo macnihiisu yahay: "Waxaad heleysaa oo u tegeysaa isagoo lo' duur ugaarsanaya." Markaasuu Khaalid soo baxay oo uu qalcaddiisa indhihiisa ku arkay. Waxayna ahayd habeen dayaxu iftiimayo oo cad yahay, boqorkuna uu joogo oo saaran yahay dusha qasrigiisa, haweentiisuna ay la joogto. Markaasay lo' duureedku ku xoqatay albaabka qasriga. Markaasay haweentiisa waxay ku tiri: "Waxaanoo kale hore ma u aragtay?" ayna ka waddo quruxda iyo nicmada ay haystaan ayna u jeedaan. Wuxuu yiri: "Wa Allaahi maya." Waxay tiri: "Yaa tan ka tegi kara?" Wuxuu yiri: "Axadna." Markaasuu soo degay oo uu amar ku baxshay oo faraskiisa loo kooreeyey, oo rag qoyskiisa ahna ay ayaguna fardohooda fuuleen oo raaceen, uuna ka mid yahay nin walaalkiis ah oo la yiraahdo Xassaan. Markaasay soo wada bexeen. Markay soo bexeen ayaa waxaa ka hor yimid fardooleyda Khaalid bin Al Waliidu oo qabatay, walaalkiisna dilay. Boqorkuna wuxuu labbisnaa khamiis xariir ah oo lagu naqshay dahab. Markaasuu Khaalid ka furtay, uuna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u diray, ka horba intuusan isaga laftiisu u imaan, oo uusan Ukaydir u keenin.

Anas bin Maalik wuxuu yiri: "Waxaan arkay khamiiska Ukaydir marka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, loo keenay. Markaasay muslimiintu gacnohooda mariyaan oo taabtaan, ayna la yaabeen. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri**: "A tacjabuuna min haathaa ? Fa wa Allathii nafsii bi yadiHi la manaadiilu Sacdu bin Mucaathin fii al jannati axsanu min haathaa"**, oo macnihiisu yahay: "Ma kanaad la yaaban tihiin? Waxaan ku dhaartay Midkay naftaydu Gacantiisa ku jirto, manaadiisha -oo ah marada yar oo wajiga dhididka looga tiro ama lagu duufsado, uu Sacd bin Mucaath jannada dhexdeeda ku leeyahay ayaa kan ka fiican." Markaasuu Khaalid Ukaydir u keenay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uuna dhiiggiisa dhawray, o uusan dilin, jizyana kula heshiiyay, kaddibna uu sii daayay, oo uu magaaladiisa ku noqday."

Qoraalkuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ukaydir siiyay

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ukaydir heshiis qoraal ah siiyay, waana kanaa siduu Al Suhaylii u wariyay:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuuli Allaahi li Ukaydir xiina ajaaba ilaa al islaami, wa khalaca al andaada wa al asnaama maca Khaalid bin Al Waliidu Sayfu Allaahi fii Duumata Al Jandali wa aknaafihaa. Inna lanaa al ddaaxiyata mina al ddaxli wa al bawra wa al macaawiya, wa

aghfaala al ardi wa al xalaqata wa al ssilaaxa wa al xaafira wa al xisna wa lakum al ddaaminata mina al nnakhli wa al maciina mina al cumuuri laa tucdalu saarixatukum wa laa tucaddu faaridatakum, wa laa yuxtharu calaykum al nabaatu. Tuqiimuuna al ssalataa li waqtihaa, wa tu'tuuna al zzakaata bi xaqqihaa. Calaykum bi cahdi Allaahi wa al miithaaqu, wa lakum bi thaalika al sidqu wa al wafaa'u. Shahida Allaahu, wa man xadara mina al muslimiina."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Qoraalkaan waxaa dhigay Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna una dhigay Ukaydir, markuu islaamka yeelay, uuna ka fuqay caabudidda waxay Ilaahay kala mid dhigeen, oo ah al andaadu, iyo asnaamta, isagoo la jira Khaalid bin Al Waliidu Seefta Ilaahay, kuna saabsan Duumatu Al Jandal dhexdeeda iyo hareereheedaba. Annagu, waana Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo muslimiintee, waxaan leenahay arliga intiisa muuqata oo biyaha yar iyo dhulka beeraha iyo miyiga iyo intaan la aqoonba, iyo intaan la degganaynba, iyo diracyada gaashaanka ah iyo hubka iyo fardaha iyo baqlaha iyo Duumatu Al Jandal. Adinkuna waxaad leedihiin geedaha timirta oo magaaladiinna ku dhex yaalla iyo biyaha joogtada ah oo loo jeedo. Xoolihiinna daaqana daaqsiinta laga duwi mayo, daaqsiintana la idiin diidi mayo. Intayan zakadu ku waajibinna la idiin tirin mayo, oo laga qaadi mayo. Meshaad doontaanna xoolihiina daaqasada. Salaadda waqtigeeda ooga, maalkana zakada lagu leeyahay ka bixiya. Waxaad sidaas ku leedihiin adinkana korkiinna ah cahdiga Ilaahay iyo xariggiisa. Adinkuna waxaad leedihiin in runta la idinkula dhaqmo oo heshiiskaanna la idiin oofiyo. Ilaahay ayaa marag ka ah heshiiskaan iyo inta muslimiinta goob joogga ka ah."
Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Tabuuk jogay toban habeen, kaddibna wuxuu usoo gaddoomay Al Madiinah.

Sababta duullaanka Tabuuk

Al Qasdhalaanii wuxuu yiri: "Sababta duullaanka Tabuuk keentay waxay ahayd inay ragga u dhashay Al Anbaadha keena saliidda cunnada lagu darsado Al Madiinah, kana keena Shaam, ay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo gaarsiiyeen inuu boqorka roomaanka Hiraqal u uruursaday ciidan inuu kusoo duulo. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, muslimiinta ugu yeeray inay jihaadkiisa usoo baxaan. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Tabuuk yimid wuxuu helay warka inuu boqorkaasu Xims ku sugan yahay oo caasimad u ahayd, uusanna dagaal usoo bixin, oo warka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lo sheegay inuu boqorkaasuu duullaan diyaariyay, uuna Shaam kusoo dhowaaday, uusan run ahayn, oo uu san taas doonayn."

Qoraalka Labaatanaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Wafdiga Thaqiif iyo islaamiddooda Ramadaan sanadka sagaalaad ee Hijrada

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Al Madiinah uga soo noqday Tabuuk bisha Ramadaan, isla bishaas ayaana waxaa u yimid wafdiga Thaqiif. Xadiithka Thaqiifna waxaa ka mid ah inuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kasoo gaddoomay Al Dhaa'if uu Curwah

bin Mascuud Al Thaqafii uu raadkiisa soo raacay, uuna ka daba yimid ka hor intuusan Al Madiinah gaarin. Markaasuu islaamay, uuna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, weydiistay inuu tolkiis dib ugu noqdo oo uu islaamka ugu yero. Markaasuu Rasuulka Ilaahay , Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"innahum qaatiluuka"**, oo macnihiisu yahay: "Way ku dilayaan." Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ogaa diidmada xoogga leh ee islaamka oo Thaqiif ku jirta, uuna ka arkay, markuu Al Dhaa'if hareereeyey. Markaasuu Curwah wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aniga way iga jecel yihiin curadyadooda (oo uu ibnu Hishaam yiri: "wuxuu yiri: "Anigay araggooday iga jecel yihiin."). Sidaas ayayna ahaydoo, wey jeclaayeen, ayna adeeci jireen. Markaasuu tolkiis islaamka ugu yeeray, isagoo rajo ka qaba inayan khilaafin oo diidin makaankuu ku leeyahay dhexdooda daraadiis. Markaasuu wuxuu kala soo hadlay daaqad albaab laga soo baxa leh oo dabaqa kore ee gurigiisa ku taalla oo uu islaamka ugu yeeray, una sheegay inuu isaga laftiisu islaamay. Markaasay dhan walba fallaaro uga soo tuureen,oo ay fallaari inta ku dhegtay dishay. Markaasay Banii Maalik waxay sheegteen inuu nin ayaga ahi dilay, lana yiraahdo Aws bin Cawf, una dhashay Banii Saalim bin Maalik. Sidoo kale ayay Al Axlaafu waxay yiraahdeen inuu dilay nin ayaga ah ee reer Banii Cattaab bin Maalik oo la yirahdo Wahb bin Jaabir. Markaasaa waxaa Curwah, waa intuusan dhimane, lagu yiri: "Maxaad dhiiggaaga ka leedahay?" Wuxuu yiri: "Waa karaamo uu Ilaahay igu karaameeyey iyo shahiidnimo uu ii soo hoggaamiyay. Marka waxaan la mid ahay shuhadada la dilay ayagoo la socday Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, intuusan adinka idinka gaddoomin ka hor. Marka ayagaas ila duuga." Markaasay la duugeen. Waxayna yiraahdeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Curwah bin Mascuud ka yiri**: "inna mathlahu fii qawmihi ka mathali saaxiba Yaasiina fii qawmihi"**, oo macnihiisu yahay: "Xaaladdiisu waxay tolkiis dhexdiisa la mid tahay tusaalaha ninka ku jira Suuratu Yasiin uu tolkiis dhexdiisa ku yahay oo kale (qisadiisuna waxay ku jirtaa Aayadaha labaatan ilaa sagaal iyo labaatan ee Suuratu Yaasiin, oo uu tolkiis isagana dilay)." Markaasay Thaqiif dilidda Curwah dabadeed bilo joogtay, kaddibna ay tashadeen, ayna u arkeen inayan iska celin karin xarbiga Carabta hareereheeda deggan oo idil oo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wada baayacay oo islaamay. Camr bin Umayyah, oo u dhashay Banii Cilaaj, xiriirka wuu ka goostay iyo hadalkaba Cabdu Yaa Layl, oo xumaan ayaa dhex tiillay. Camr bin Umayyah wuxuu ka mid ahaa ragga Carabta ugu caqli badan. Markaasuu soo kacay oo uu Cabdi Yaa layl u yimid, oo uu daartiisa ugu soo galay, kaddibna uu u faray: "Camr bin Umayyah wuxuu ku leeyahay ii soo bax." Markaasuu Cabdi Yaa Layl wuxuu ergayga ku yiri: "War hoy maxaad ledahay! Ma Camr ayaa aniga ii kaa soo diray?" Wuxuu yrii: "Haa, uu waaba kanaa isagoo daartaada dhexdeeda taagan." Wuxuu yiri: "Kanu waa waxaanan weligay malaynayn inay ahaan karto, oo Camr naftiisa intaas wuu uga ilaalin badnaa." Markaasuu usoo baxay, markuu arkayna uu usoo dhowaaday. Markaasuu Camr wuxuu ku yiri: "Waxaa nagu soo degay amar aan looga kala maqnaan karin, oo arrinka ninkaanu wuxuu ahaa waxaad aragtay. Caraboo idil way islaamtay, adinkuna la xarbintooda awood uma lihidin iyo xoog toona. Marka ka tashada." Markaasay Thaqiif tashatay, ayna isku yiraahdeen: "soo uma jeedaan inayan xoolihii nabad gelyo haysan, midkiinna uusan bixi karin isagoo aan qoorta laga goyn?" Markaasay tashadeen, ayna go'aansadeen inay Rasuulak Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, nin u diraan, siday Curwah u direen oo kale. Markaasuu ninkaasu diiday , uuna ka baqay in markuu soo nqodo ay ku falaan waxay Curwah ku sameeyeen oo kale. Markaasuu yiri: "Yeeli mayo inaad rag kale igu dartaan mooyee." Markaasay goosteen inay ku daraan laba nin oo kale, oo u ninna Al Axlaafu u dhashay iyo saddex Banii Maalik u dhashay oo ay sidaas lix nn ku noqdaan. Markaasay Cabdi Yaa Layl waxay ku dareen Al Xakamu bin Camr bin Wahb bin

Mucattib iyo Shuraxbiil bin Ghaylaan bin Salimah Abii Al Caas bin Bishr bin Cabdu Duhman oo u dhashay Banii Yasaar, iyo Al Aws bin Cawf oo u dhashay Banii Saalim bin Cawf, iyo Numayr bin Kharashah bin Rabiicah oo u dhashay Banii Al Xaarith. Markaasuu Cabdi Yaalayl raggaas soo waday isagoo odagooda iyo amiirkooda ah, ayagana uma soo wadan waxaan ahayn cabsi uu ka qabo wax la mid ah waxa lagu sameeyey Curwah bin Mascuud, si uu nin walba oo wafdiga ka mid ahi ku beegmo tolkiis oo uu ka celiyo. Markaasay markay Al Madiinah usoo dhowaadeen oo ay Qanaat degeen ayay waxay halkaas ka heleen Al Mughiirah bin Shucbah oo meertadiisa ku ilaalinaya geela Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo daajintiisa waxay asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u geli jiren meerto iyo kaltan. Markaasuu markuu arkay ayuu geela kasoo tegey oo uu xoog usoo orday si uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, imaatinkooda ugu bishaareeyo ay u yimaadeen. Markaasuu intuusan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u gelin ayuu wuxuu la kulmay Abuu Bakr Al Siddiiqu oo uu markaas warka wafdiga Thaqiif u sheegay, ayagoo bayco iyo inay islaamaan doonaya, iyo inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, shruudo u yeelo, uuna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam qoraal u dhigo ku saabsan tolkooda iyo beledkooda iyo xoolohoodaba. Markaasuu Abuu Bakr wuxuu Al Mughiirah bin Shucbah ku yiri: "Ilaahay ayaan kugu dhaariyaye Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ha iiga hormarin oo aan anigu warka u sheego." Markaasuu Al Mughiirah ka yeelay. Markaasuu Abuu Bakr Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u galay una sheegay inay Thqiif u yimaadeen. Kaddibna Al Mughiirah wuxuu soo aaday asxaabtiisa Thaqiif, uuna awrta lasoo celiyay, ayagana uu baray siday u salaamayaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ayan ku dhqmin salaanta jaahiliyada. Markay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimaadeen, wuxuu uga dhisay khaymad masjidkiisa agtiisa. Markaasuu wuxuu ahaa Khaalid bin Saciid bin Al Caas kan ayaga iyo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u kala socday ilaa ay qoraalka ay doonayaan looga dhigo. Qoraalkana waxaa gacantiisa ku dhigay Khaalid. Mana ayan cuni jirin cunno uga timaadda xagga Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, jeer uu marka hore Khaalid wax ka cuno. Markaasay islaameen oo qoraalkoodana kasoo jeesteen. Waxyaalahay weydiisteen Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa ka mid ahaa inuu u daayo sanamka allaata, oo uusan saddex sano dumin. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, taas ka diiday. Markaasay markiiba in sanad sanad uu u daayo weydiisanayeen, isaguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka diidayey, ilaa ay marka dambe ka weydiisteen inuu bil keli ah u daayo kaddib markay Al Dhaa'if ku noqdaan. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ka diiday tiro la sheegayba. Ayaguna waxay u weydiisanayeen inay sidaas uga nabad galaan maan gaabtooda iyo haweenkoodaba iyo caruurtoodaba marka loo sheego in sanamkaas cibaadadiisa laga tegayo, isla markaasna kahanaya inay tolkood duminteeda cabsi ka gasho, ka hor intuusan islaamku quluubtooda gelin. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka diiday waxaan ahayn inuu diro Abuu Sufyaan bin Xarb iyo Al Mughiirah bin Shucbah oo ay dumiyaan mooyee. Waxay kaloo weydiisteen inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam tukashada salaadda ka cafiyo iyo inayan ayagu asnaamtooda gacnoohooda ku jejebin. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa allahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Ammaa kasrukum awthaanakum bi aydiikum fa sanacfiikum minhu. Wa amma al ssalaatu, fa innahu laa khayra fii Diinin la salaata fiihi."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Tan ku saabsan inaad asnaamtiinna gacnihiinna ku jejebisaan, waan idinka dhaafaynnaa. Salaaddase, khayr ma laha Diin ayan salaadi ku jirin." Markaasay waxay yirahdeen: "Muxammadow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waan kuu yeeleynnaa in kastoo ay salaaduu tahay

wax hoos la isugu dhigayo." Markaasay markay islaameen oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qoraalkaas siiyay ayuu wuxuu amiir uga dhigay Cuthmaan bin Abii Al Caas, kana mid ahaa kuwooda ugu da' yar, sababtuna ay tahay inuu ugu dadaal badnaa barashada islaamka iyo Quraanka. Markaasuu Abuu Bakr Al Siddiiqu wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan arkay inuu wiilkaan ka mid ahi yahay kooda ugu dadaal badan barashada Diinta iyo Quraanka." Nin wafdiga ka mid ahi wuxuu yiri: "Markaan islaannay oo aan la soonnay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, inta Rmadaan ka hartay, ayuu Bilaal wuxuu nooga keeni jiray afurkeenna iyo suxuurteenna xagga Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markuu suxuurta noo keeno ayaan waxaan niraahnaa: "Waxay nala tahay inuu waago dillaacay." Markaasuu wuxuu yiraahdaa: "Waxaan ka imid Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo suxuuranaya", oo ay tahay in suxuurta dib loo dhigo. Markuu afurka noo keenana waxaan niraahnaa: "Qorraxdu ma dhicin." Markaasuu wuxuu yiraahdaa: "Idiinmaba imaan jeer uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, cunayba." Markaasuu xeerada inta gacanta geliyo kasoo qaataa luqmad oo uu afka gashadaa." Cuthmaan bin Abii Al Caas wuxuu yiri: "Waxa ugu dambeeyey oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, igu yiri waxay ahayd: **"Yaa Cuthmaanu tajawaz fii al ssalaati, wa aqduri al nnaasa bi adcaafihim, fa inna fiihim al kabiira wa al ssaghiira, wa al ddacifa, wa thaa xaajati"**, oo macnihiisu waxaa weeye: "Cuthmaanow, salaadda markaad dadka tujinaysid ha dheereyn ee soo koob, waxaadna tujisaa inta kooda ugu taag darani uu qaadi karo oo taagnaan karo. Xusuusana inuu dadkaad tujinaysid ku jiraan mid da' wayn, iyo cunug yar, iyo mid itaal yar oo daciif ah, iyo mid xaajo leh oo degdegsan." Markaasay markay amarkooda kasoo jeesteen, xagga dalkooda u gaddoomeen. Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku daray Abaa Sufyaan bin Xarb iyo Al Mughiirah bin Shucbah inay dumiyaan sanamka al laata. Markaasay soo raaceen. Markaasay markay Al Dhaa'if yimaadeen uu Al Mughiirah bin Shucbah wuxuu damcay inuu Abuu Sufyaan hor mariyo. Markaasuu Abuu Sufyaan ka diiday oo u ku yiri: "Adigu tolkaa u hor gal", wuxuuna ku sugay bertiisa ku taalla Thuu Al Hadm. Markaasuu Al Mughiirah bin Shucbah markuu Al Dhaa'if galay ayuu isagoo faas wata sanamka dhaladiisa fuulay oo uu la dhacay, waxaana ilaalinayay oo daafciisa u taagnaa tolkiis Banuu Mucattib, cabsi ay ka qabaan in fallaar lagu soo tuuro oo loo dilo sida Curwah bin Mascuud loo dilay oo kale. Markaasay haween Thaqiif ah soo bexeen ayagoo sanamka la duminayo u booyaya. Intuu Al Mughiirah faaska la dhacayana Abuu Sufyaan wuxuu leeyahay: "Jab!Jab!" Markaasuu Al Mughiirah markuu dumiyay ayuu wuxuu qaatay maalkeeda iyo dahabkeeda, uuna Abuu Sufyaan u dhiibay. Maalkeeduna wuxuu ka koobnaa dahab iyo luul.

Wafdiga hortiis waxaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid Abuu Mulayx bin Curwah iyo Qaaribu bin Al Aswadu, kaddib marka Curwah bin Mascuud la dilay, ayagoo doonaya inay Thaqiif ka tagaan, ayanna weligood dambe meel ugu imaan. Markaasay islaameen. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Tawallayaa man sh'itumaa"**, oo macnihiisu yahay: "Wali ka dhigta, waana gargaare oo kan dhaxalka qofka leh, ciddaad doontaan." Markaasay waxay yiraahdeen: "Waxaan wali ka dhigannay Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Caayhi Wasallam, wuxuu ku yiri**: "Wa khaalakumaa Abaa Sufyana bin Xarb"**, oo macnihiisu yahay: "Iyo abtigiin Abaa Sufyaan bin Xarb." Waxay yiraahdeen: "iyo abtigeen Abaa Sufyaan bin Xarb." Markaasay markay reer Al Dhaa'if islaameen oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u diray Abaa Sufyaan bin Xarb iyo Al Mughiirah bin Shucbah inay al laata dumiyaan, ayuu Abuu Mulayx bin Curwah

wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,, weydiistay inuu maalka sanamka uga gudo dayn aabihiis Curwah lagu lahaa. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Nacam"**, oo ah: "Waa yahay." Markaasuu Al Qaaribu bin Al Aswadu wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: "Al Aswadna ka bixi Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Curwah iyo Al Aswadu waxay ahaayeen walaalo isku hooyo iyo isku aabe ah. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"inna Al Asawda maata mushrikan"**, oo macnihiisu yahay: "Al Aswadu wuxuu dhintay isagoo gaal ah." Markaasuu Al Qaaribu wuxuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, ku yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaadse xiriirineysaa muslin qaraabo ah", uuna isaga laftiisa iska wado, "oo daynta anigaa la igu leeyahay oo la iga doonayaa. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Abuu Sufyaan amar ku siiyay inuu ka gudo daynta Curwah bin Mascuud iyo Al Aswadu bin Mascuud maalka sanamka. Markaasuu markuu Al Mughiirah u kenay Abuu Sufyaan maalka sanamka wuxuu ku yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu kusoo amray inaad Curwah iyo Al Aswadu daynta lagu leeyahay ka gudid." Markaasuu ka guday.

Qoraalka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee qabiilka Thaqiif ee Al Dh-dhaa'if dega

Qoraalkuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Thaqiif u dhigay wuxuu ahaa sidatan:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Al Nabiyyi Rasuula Allaahi ilaa al mu'miniina: inna cidaaha Wajjin wa saydahu laa yucdadu. Man wujida yafcalu shay'an min thaalika, fa innahu yujladu wa tunzacu thiyaabuhu. Fa in tacaddaa thaalika fa innahu yu'khathu fa yublaghu bihi ilaa Al Nabiyyi Muxammadin. Wa inna haathaa amru Al Nabiyyi Muxammadin Rasuula Allaahi. Wa kataba Khaalid bin Saciid bin amri Al Rrasuuli Muxaamad bin Cabdu Allaahi. Falaa yatacaddahu axadun, fa yathlima nafasahu fiimaa amara bihi Muxammadun Rasuula Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam"

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Nabi Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, una socotaa mu'miniinta. Geedaha Waadiga Wajj iyo ugaartiisaba lama goyn karo. Qofka la helo isagoo intaas wax ka yeelayana waa la uleynayaa, dharkiisana laga siibanayaa oo laga qaadanayaa. Haddu mar kale u noqdana inta lasoo qabto ayaa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, loo keenayaa. Kanna waa amarka Nabi Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Waxaamna qoraalkaan ku dhigay amarka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Muxammad bin Cabdu Allaahi, Khaalid bin Saciid. Yuusan axadna ku xadgudbin oo uusan sidaas naftiisa ku dulmin wuxuu amray Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu calayhi Wasallam."

Qoraalka Kow iyo Labaatanaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Wafdiga Banii Xaniifah iyo Musaylimah al kath-thaab/sanadka sagaalaad ee Hijrada

Sanadka sagaalaad ee Hijrada, ahna sanadka la yiraahdo ‘Caamu Al Wufuudi” waxaa ayaguna Rasuulka Ilahaay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid wafdiga Banii Xaniifah, uuna ka mid yahay Musaylimah bin Xabiib Al Xanafiyyi al kath-thaab beenlowga (oo u ibnu Hishaam yiri: "Magaciisu waa Musaylimah bin Thumamah, koofaartiisuna waa Abaa Thumaamah."), waxayna degeen daarta haweenta la yiraahdo bintu Al Xaarith, haweeney Ansaarta ka mid ah (oo uu Al Suhaylii yiri: "magaceedu waa Kayyisatu bintu Al Xaarith bin Kurayz bin Xabiib bin Cabdu Shams, waxayna u dhixi jirtay Musaylimah al kath-thaab, waxaana uga dambeeyey Cabdu Allaahi bin Caamir bin Kurayz. Ibnu Isxaaqna wuxuu yiri: "magaceedu waa Zaynab, taas ayaana sawaabta ah."), kana sii ah Banii Al Nnajjaar. Banii Xaniifah waxay Rasuulka Ilaahay,, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimaadeen ayagoo Musaylimah maryo ku daboolay oo huwiyay, isagoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, asxaabtiisa la fadhiyo, gacantana u kuhaysto laan geed timireed oo darafteeda hore ay xoogaa caleemo ah ku yaallaan. Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid ayagoo isaga maro huwiyay, ayuu la hadlay oo uu waxna weydiistay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Law sa'altanii haathaa al casiiba maa acdhaytakahu"**, oo macnihiisu yahay: "Haddaad laantaan i weydiisato kuma siin lahayn."
Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Wafdiga Banii Xaniifah waxay yiraahdeen inay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimaadeen ayagoo Musaylimah meeshay degeen uga yimid. Markaasay markay islaameen xuseen meeshuu joogo, oo ay yiraahdeen: "Rasuulka Ilaahayow, Saallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan degmadeenna iyo gaadiidkeenna uga soo tagnay nin nala socday oo noo ilaaliya." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, amar ku baxshay in isaga la siiyo waxa ayaga la siiyay oo kale, wuxuuna yiri: **"amaa innahu laysa bi sharrikum makaanan"**, oo macnihiisu yahay: "meeshuu joogo tiinna kama xuma, oo wuxuu ilaalinayaa alaabta asxaabtiisa."

Musaylimah oo Nabinnimo sheegtay

Markaasay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kasoo gaddoomeen, ayna Musaylimah u keeneen hadiyaduu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, siiyay. Markaasa markay arligooda Al Yamaamah tageen ayuu cadawga Ilaahay Musaylimah Diinta ka baxay oo uu nabinnimo sheegtay, ayagan uu been u sheegtay, uuna yiri: "Nabinnimada ayaa isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la ila wadaajiyay", wuxuuna ragga wafdiga la ahaa ku yiri: "Soo markaad aniga xaalkayga u sheegteen ma uusan oran: **"amaa innahu laysa bi sharrikum makaanan"**, oo macnihiisu yahay: "meeshuu joogo tiinna kama xuma, oo wuxuu ilaalinayaa alaabta asxaabtiisa."? Taas uma uusan oran waxaan ahayn inuu ogyahay in nabinnimada isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la ila wadajiyay!" Markaasuu gabayo tiriyaa uuna la mid dhigayo Quraanka, uuna yiri: "Qad ancama Allaahu calaa al xublaa, akhraja minhaa nasmatan tascaa min bayni sifaaqin wa xashaa", oo macneheedu yahay: "Ilaahay wuu u nicmeeyey haweenka uurka leh,oo wuxuu kasoo bixiyay qof nool oo soconaya haraggooda iyo calooshood dhexdooda." Markaasuu khamrada u xalaaleeyey

iyo zinadaba, salaadana ka daayey. Isagoo intaas sameeyey ayuu hadana leeyahay inuu Rasuul Ilaahay iyo Nabi yahay. Markaasay Banii Xaniifah amarkaas ku raaceen. Labadaas midday ahaydna Ilaahay ayaa og."

Qoraalka Laba iyo Labaatanaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Warqadduu Musaylimah Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam usoo diray

Musaylimah bin Xabiib wuxuu warqad usoo dhiibay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu ku yiri: "Waxay ka socotaa Musaylimah Rasuulka Ilaahay, una socotaa Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Salaami korkaaga ha ahaato. Intaas dabadeedna. Aniga waxaa la ila kaa wadaajiyay Rasuulnimada, oo annagu waxaan leenahay arliga nuskiis, Qurayshna arliga nuskiis. Laakiin Quraysh way xad gudbayaan."
Markaasaa waxaa warqaddaas Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u keenay laba nin oo ergo ah. Markaasuu marka warqadda loo akhriyay ayuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu labadoodaas ku yiri**: "Fa maa taquulaani antumaa?"** oo macnihiisu yahay: "Labadiinuna maxaad leedihiin?" Waxay yiraahdeen: "Waxaan leenahay waxa la mid ah siduu isagu yiri." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Amaa wa Allaahi law laa anna Al Rrusula laa tuqtalu la darabtu acnaaqakumaa"**, oo macnihiisu yahay: "Wa Allaahi haddayan ahaan lahayn inaan Danjirayaalka la dilin, qoortaan idinka goyn lahaa."

Warqadda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee Musaylimah al kath-thaab

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Musaylimah u diray warqaddaan: **"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuuli Allaahi ilaa Musaylimah al kath-thaab. Al Ssalaamu calaa mani ittabaca al hudaa. Ammaa bacdu. Al Ardu li Allaahi yuurithuhaa man yashaa'u min cibaadiHi wa al caaqibatu lil muttaqiina."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: " Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxayna u socotaa Musaylimah kan beenloga ah. Nabadi waxay korkiisa tahay kan hanuunka raaca. Intaas dabadeedna. Arliga waxaa iska wada leh Ilaahay, wuxuuna dhaxalsiiyaa kuwuu doono oo addoommadiisa ka midka ah. Ciribsamidana waxaa iska leh kuwa muttaqiinta ah, oo Ilaahy ka dhawrsada."



Kani waa masawir warqadduu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u dhigay Musaylimah Al Khath-thaab oo lagu hayo matxafka "Topkapai" eek u yaalla magaalada Istanbul oo arliga Turkiga.
waxaan kasoo qaadannay Websitka internetka cinwaankiisu yahay: islamicsupremecouncil.com/tabarruk/tabarrukat.htm.

Qoraalka Saddex iyo Labaatanaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam, ee gadiidda addoonka

Al Zarqaanii wuxuu yiri: "Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu nin addoon ah oo uu lahaa ka iibiyay Al Cadaa'u ibnu Khaalid bin Hawthah bin Khaalid bin Camr bin Caamir bin Sacsacah Al Caamirii, oo islaamay duullaanka Xunayn dabadiis isaga iyo aabihiis iyo walaalkiisba Xarmalah, wuxuuna qoray qoraalkaan:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathaa maa ishtaraa Al Cadaa'u bin Khaalid bin Hawthah min Muxammadin Rasuula Allaahi, ishtaraa cabdan -aw amatan-shakka al rraawii-**laa daa'a wa laa ghaa'ilah wa laa khibthah, baycu al muslimi lilmuslimi."**

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

“Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Kanu waa wuxuu ka gatay Al Cadaa’u bin Khaalid bin Hawthah Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Wuxuu gatay addoon –ama addoomad oo waxaa shakiyay ninka Xadiithka wariyay-aan cudur qabin, aanna lasoo xadin, aan ahayn addoon soo cararay aanna zinaysan, aanna ahayn kala gadasho aan ahayn kala gadasho dad aan muslim ahayn. Waana muslim wax ka gaday muslim.” Waxaana wariyay Abuu Daauud.

Arrinkaanu wuxuu marag ka yahay oo tilmaamayaa inay shareecada ka mid tahay in marka wax la kala gato marag la samaysto, ayanse waajib ahayn sida ku xusan Aayadda laba boqol lab iyo sideetan ee Suuratu Al Baqarah: **“Wa ash-hiduu ithaa tabaayactum”**, oo macneheedu yahay: “maragna samaysta markaad wax kala gadataan.”

Qoraalka Afar iyo Labaatan

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalka Zakada maalka muslimiinta ku waajibka ah oo uu Abuu Bakr Al Ssiddiiqu hayay

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu qoraal u dhigay muslimiinta oo idil, wuxuuna ugu dhigay shareecada iyo axkaamta. Waxaana ka mid ahaa qoraalka zakada maalka ku saabsan oo kaddibna uu Abuu Bakar Al Siddiqu Allaha raalli ka noqdee hayay. Qoraalkana waxaa gacantiisa barakaysan ku dhigay Abuu Bakar Al Ssiddiiqu wuxuuna gacanta ka saaray Anas ibnu Maalik markuu Abuu Bakar laftiisu gobolka Baxrayn u diray, uuna saaran yahay khaatimka ama shabbadda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi.
Waxay Al Bukhaarii, Abuu Daauud iyo Al Nasaa’ii qoraalkaan u wariyeen inuu ahaa sidatan:

“Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi.Haathihi fariidatu al ssadaqati allatii faradahaa Rausuulu Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam calaa al muslimiina, wa allatii amara Allaahu bihaa wa RasuuluHu, fa man su’ilahaa mina al muslimiina calaa wajhihaa falyucdhihaa, wa man su’ila fawqahaa falaa yacdhi:
fii arbacati wa cishriina mina al ibili famaa duunahaa, mina al ghanami fi kulli khamsin shaatun. Fa ithaa balaghat khamsan wa cishriina ilaa khamsi wa thalaathiina, fa fiihaa bintu makhaadhin unthaa, fa in lam takun ibnatu makhaadin fa ibnu labuunin thakaran.
Fa ithaa balaghat sittan wa thalaathiina ilaa khamsin wa arbaciina, fa fiihaa bintu labuunin unthaa.
Fa ithaa balaghat sittan wa arbaciina ilaa sittiina, fa fiihaa xiqqatun dharuuqata al jamali.
Fa ithaa balaghat ixdaa wa sittiina ilaa khamsi wa sabciina, fa fiihaa jathcatun.
Fa ithaa balaghat ixdaa wa tisciina ilaa cishriina wa mi’atan, fa fiihaa xiqqataani dharuuqataa al jamala.
Fa ithaa zaadat can cishriina wa mi’atan, fa fii kulli arbaciina bintu labuunin wa fii kulli khamsiina xiqqatun.

Wa man lam yakun illaa arbacin mina al ibili, fa laysa fiihaa sadaqatun, illaa an yashaa'a rabbuhaa, fa ithaa balaghat khamsan mina al ibili fa fiihaa shaatun.
Ma man balaghat cindahu mina al ibili sadaqatu al jathcati, wa laysat cindahu jathcatun, wa cindahu xiqqatun fa innahaa tuqbalu minhu al xiqqattu, wa yajcalu macahaa shaatayni in istaysarataa lahu, aw cishriina dirhaman.
Ma man balaghat cindahu sadaqatu al xiqqati, wa laysat cindahu al xiqqatu, wa cindahu al jathcatu fa innahaa tuqabalu minhu al jathcatu wa yucdhiihi al musaddiqu cishriina dirhaman aw shaatayni.
Wa man balaghat cindahu sadaqatu al xiqqati, wa laysat cindahu illaa ibnata labuunin, fa innahaa tuqbalo minhu bintu labuunin, wa yucdhii al musaddiqu shaatayni aw cishriina dirhaman.
Wa man balaghat sadaqatuhu binta labuunin, wa cindahu al xiqqatu, fa innahaa tuqbalu minhu al xiqqatu wa yucdhiihi al musaddiqu cishriina dirhaman aw shaatayni.
Wa man balaghat cindahu sadaqatu bintu labuunin, wa laysat cindahu wa cindahu bintu makhaadin, fa innahaa tuqbalu minhu bintu al makhaadi, wa yacdhii macahaa cishriina dirhaman aw shaatayni.
Wa man balaghat sadaqatuhu binta makhaadin, wa laysat cindahu, wa cindahu bintu labuunin, fa innahaa tuqbalu minhu bintu labuunin, wa yucdhiihi al musaddiqu cishriina dhirhaman aw shaatayni, fa in lam yakun cindahu bintu makhaadin calaa wajhihaa wa cindahu ibnu labuunin fa innahu yuqbalu minhu wa laysa macahu shay'un.
Wa fii sadaqati al ghanami fii saa'imatihaa ithaa balaghat arbaciina ilaa cishriina wa mi'ata shaatin shaatun.
Fa ithaa zaadat calaa cishriina wa mi'atan ilaa mi'atayni fa fiihaa shaataani.
Fa ithaa zaadat calaa mi'atayni ilaa thalaatha mi'atin fa fiihaa thalaatha shiyaahin.
Fa ithaa zaadat calaa thalaatha mi'atin fa fii kulli mi'atin shaatun.
Fa in kaanat saa'imatu al rrajuli naaqisatan can arbaciina shaatin shaatun waaxidatun, fa laysa fiihaa sadaqatun illaa an yashaa'a rabbuhaa.
Wa laa yujmacu bayna mutafarriqin, wa laa yufraqu bayna mujtamicin khashyata al ssadaqata, wa maa kaana min khaliidhayni fa innahumaa yataraajacaanii baynahumaa bi al ssawiyati, wa laa yu'khathu fii al ssadaqati harimatun wa laa thaati cawaarin wa laa taysun illaa an yashaa'a al musaddaqu.
Wa fii al riqati rubucu al cushri, fa in lam takun illaa tisciina wa mi'atan fa laysa fiihaa sadaqatun illaa an yashaa'a rabbuhu.
Wa fii sadaqati al ghanami fii saa'imatihaa ithaa balaghat arbaciina ilaa cishriina wa mi'ata shaatin:shaatun.
Fa ithaa zaadat calaa cishriina wa mi'atan ilaa mi'atayni fa fiihaa shaataani.
Fa ithaa zaadat calaa mi'atayni ilaa thalaatha mi'atin fafiihaa thalaatha shiyaahin.
Fa ithaa zaadat calaa thalaathami'atin fafii kulli mi'atin shaatun.
Fa in kaanat saa'imatu al rrajuli naaqisatan can arbaciina shaatin shaatun waaxidatun fa laysa fiihaa sadaqatun illaa an yashaa'a rabbuhaa.
Wa laa yujmacu bayna mutafarriqin, wa laa yufarraqu bayna mujtamicin khashyata al ssadaqati, wa maa kaana min khaliidhayni fa innahumaa yataraajacaani baynahumaa bi al ssawiyyati, wa laa yu'khathu fii al ssadaqati harimatun wa laa thaata cawaarin wa laa taysin illaa an yashaa'a al musaddaqu.
Wa fii al riqati rubucu al cushri, fa in lam takun illaa tisciina wa mi'atan fa laysa fiihaa sadaqatun illaa an yashaa'a rabbuhaa."

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Middaanu waa fardiga zakada maalka oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ku fardi yeelay muslimiinta korkooda, waana zakada uu amray Ilaahay in la bixiyo iyo Rasuulkiisaba. Qofka muslimiinta ka midka ah oo zakadaas laga waraysto ha u bixiyo sidaan ay tahay. Intaas ka badan qofka la waydiiyana yuusan waxba ka bixin.
Afar iyo labaatan halaad oo geel ah iyo inta ka yarba waxaa waajib ku ah oo laga bixinayaa shantii halaadba neef ari ah. Shan iyo labaatan ilaa shan iyo soddon halaad oo geel ah waxaa waajib ku ah oo laga bixinayaa bintu makhaad oo ah hal neef oo geel ah oo dheddig ah oo hal sano u buuxsantay, gashayna sanadkii labaad ee cumrigeeda. Haddayan geeliisa ku jirin bintu makhaad wuxuu bixinayaa hal geel ah oo ah ibnu labuun oo labood ah.
Hadduu geelu gaaro lix iyo soddon ilaa shan iyo afartan halaad oo geel ah waxaa waajib ku ah oo laga bixinayaa hal neef oo geel ah oo dheddig ah ahna bintu labuunin unthaa oo ah hal geela oo dheddig ah oo laba sano u buuxsantay, gudana gashay sandkii saddexaad oo cumrigeeda.
Lix iyo Afartan ilaa lixdan halaad oo geel ah waxaa waajib ku ah oo laga binayaa hal neef oo geel ah oo ah xiqqatun dharuuqatun oo ah hal dheddig ah oo saddex sano u buuxsantay, gudana gashay sanadkii afaraad ee cumrigeeda oo la booday.
Kow iyo lixdan ilaa shan iyo toddobaatan halaad oo geel ah waxaa waajib ku ah oo laga bixinayaa hal neef oo geel ah oo dheddig ah oo ah jithcah oo afar sano u buuxsantay, gudana gashay sandkii shanaad ee cumrigeeda.
Lix iyo toddobaatan ilaa sagaashan halaad oo geel ah waxaa waajib ku ah oo laga bixinayaa laba neef oo geel ah oo dheddig ah oo middiiba laba sano u buuxsantay, gudana gashay sanadkii saddexaad ee cumrigeeda, waana bintaa labuunin.
Kow iyo sagaashan ilaa boqol iyo labaatan halaad oo geel ah waxaa waajib ku ah oo laga bixinayaa laba neef oo geel ah oo dheddig ah, oo middiiba ay saddex sano u buuxsantay, gudana gashay sanadkii afaraad ee cumrigeeda lana booday, waana xiqqataani dharuqataa al jamali.
Qofkaan lahayn afar halaad oo geel ah waxaan ahayn afartaas zako waajib kuma aha inuu qofka lehi rabo inuu bixiyo mooyee.
Hadduu geelo shan halad gaaro waxaa zako looga bixinayaa neef ari ah.
Qofka leh geel tiradiisu ay gaartay inay waajib ku noqoto inuu jathcah zako ahaan u bixiyo aanse jathcah haysan haystase xiqqah waxaa laga oggolaanayaa xiqqada wuxuuse ku darayaa laba neef oo ari ah hadday xoolihiisa ku jirto ama wuxuu ku darayaa labaatan dirham oo qalin ah.
Qofka leh geel tiradiisu gaartay inay waajib ku noqotay inuu ka bixiyo xiqqah, aanse xiqqah haysan haystase jathcah waxaa laga oggolaanayaa inuu bixiyo jathcah midka zakada ka qaadayana wuxuu isagaas siinayaa labaatan dirham oo qalin ah.
Qofkay xoolihiisu gaareen tirade ay xiqqah waajib ku noqonayso aanse haysan waxaan ibnatu labuun ahayn, waxaa laga oggolaanayaa oo laga qaadayaa ibnatu labuun wuxuuna ku darayaa laba neef oo ari ah ama labaatan dirham oo qalin ah.
Qofkay xoolihiisu, waa geeliisee, gaareen inuu zako ahaan uga bixiyo bintu labuun, haystase xiqqah, waxaa zako ahaan laga oggolaanayaa oo laga qaadayaa xiqqada kan zakada ka qaadayana wuxuu u celinayaa oo siinayaa labaatan dirham oo qalin ah ama laba neef oo ari ah.
Qofka haysta geel tiradiisu gaartay inay waajib ku noqotay zako ah bintu labuun aanse haysan, geeliisana ay ku jirto bintu makhaad, waxaa zako ahaan laga oggolaanayaa inuu bixiyo bintu makhaad wuxuuna ku darayaa labaatan dirham oo qalin ah ama laba neef oo ari ah.

Qofkay geeliisu gaaray tirada ay waajib ku noqotay bintu makhaad aanse haysan, haystase bintu labuun waxaa zako ahaan looga oggolaanayaa bintu labuun, qofka zakada ka qaadayana wuxuu isagaas usoo celinayaa labaatan dirham oo qalin ah ama laba neef oo ari ah. Haddayanse geeliisa ku jirin bintu makhaad uuse leeyahay ibnu labuun, ibnu labuun ayaa zako ahaan looga oggolaanayaa oo laga qaadayaa waxna lagu dari mayo.

Zakada ariguna waa sidatan: ariga daaqa markay tiradiisu gaarto afartan ilaa boqol iyo labaatan neef waxaa zako ahaan looga bixinayaa oo ku waajibtay neef ari ah.
Hadday tirada arigu boqol iyo labaatan ka badato uuna gaaro laba boqol oo neef waxaa ku waajibtay laba neef oo ari ah.
Hadday tirada arigu laba bolqol oo neef ka badato oo ay saddex boqol gaarto waxaa ku waajibtay oo laga bixinayaa saddex neef oo ari ah.
Hadday tiradiisu saddex boqol ka badato boqolkiiba waxaa ku waajib ah oo laga bixinayaa neef ari ah.
Hadduu tirada ariga qofka u daaqaya afartankii neef mid keli ah ka dhimman yahay arigaas zako laguma laha inuu qofka iska lehi inuu ka bixiyo doonayo mooyee.
Xoolo kala joogayna la isugu keeni mayo cabsi zakada laga qabo, kuwa wada joogayna la kala gayn mayo cabsi bixinta zakada laga qabo. Xoolihii isku jirayna oo shirko lagu yahay si siman ayaa looga qaadayaa. Xoolaha zakada loo bixinayaa waa inuusan ahayn mid da' wayn oo gaboobay, ama mid ceebo leh, orgiyadana laga qaadi mayo inuu ninka xoolaha lehi sidaas doonayo mooyee.

Labada boqol oo dirham oo qalinka khaaliska ah, ha la tumo ama yaan la tumine, zakada lagu leeyahay waa rubuca hal cushur (oo ah inta toban meelood loo qaybiyo ayaa meel rubuceed laga qaadayaa).
Hadduu qalinku yahay waxaan ahayn boqol iyo sagaashan dirham zako waajib kuma aha inuu qofka leh inuu ka bixiyo doonayo mooyee.”

Qoraalka Shan iyo Labaatanaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalka Nisaabyada zakada iyo ghayrkoodba oo ee hayay Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee

Qoraalkaan waxaa wariyay Abuu Daauud iyo Al Tirmithii waxayna ka wariyeen Saalim oo ka wariyay aabihiis Cabdu Allaahi bin Cumar, labadoodaba Allaha raalli ka noqdee, oo yiri: “Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu dhigay qoraal zakada ku saabsan, ragguu xilalka gobollada u dhiibayna uma uusan dirin qoraalkaan, marka uu hayay xanuunka loo oofsadayna wuxuu dhinac dhigay seeftiisa. Qoraalkaas ayuu Abuu Bakar ku dhaqmayay ilaa isagana laga oofsaday, dabadiisna Cumar ayaa ku dhaqmay ilaa isagana laga oofsaday. Qoraalkaas waxaa ku dhignaa:

“Fii khamsin mina al ibili shaatun, wa fii cashara shaataani wa fii khamsa cashara thalaathu shiyaahin, wa fii cishriina arbacu shiyaahin, wa fii khamsa wa cishriina bintu makhaadin, ilaa khamsa wa thalaathiina, fa in zaadat waaxidatan fa fiihaa bintu labuunin, ilaa khamsa wa arbaciina, fa in zaadat waaxidatan fa fiihaa xiqqatun ilaa sittiina, fa in zaadat waaxidatan fa fiihaa jathcatun, ilaa khamsa wa sabciina fa in zaadat waaxidatan fa fiihaa ibnataa labuunin ilaa tisciina, fa in zaadat waaxidatan fa fiihaa xiqqataani ilaa cishriina wa mi’atan, fa in kaanati al

ibilu akthara min thaalika fa fii kulli khamsiina xiqqatun, wa fii kulli arbaciina ibnatu labuunin.
Wa fii al ghanami fii kulli arbaciina shaatin shaatun ilaa cishriina wa mi'atan, fa in zaadat waaxidatan fa shaataani, ilaa mi'atayni fa ithaa zaadat calaa al mi'tayni fa fiihaa thalaathu shiyaahin ilaa thalaathu mi'atin, fa in kaanati al ghanamu akthara min thaalika fa fiihaa kullu mi'ati shaatin shaatun, thumma laysa fiihaa shay'un xattaa tablugha al mi'ata.
Wa laa yufarraqu bayna mujtamicin, wa laa yujmacu bayna mutafarriqin makhaafata al ssadaqati, wa maa kaana min khaliidhayni fa innahumaa yataraajacaani baynahumaa bi al ssawiyati, wa laa yu'khathu fii al ssadaqati harimatun wa laa thaata caybin."

Qoraalka macn ihiisu waxaa weeye:

"shantii halaad oo geel ahba waxaa ku waajibtay neef ari ah in laga bixiyo. Tobanka geela ahna laba neef oo ari ah. Shan iyo tobanka geela ahna saddex neef oo ari ah. Labaatanka halaad oo geela ahna afar neef oo ari ah. Shan iyo labaatanka neef oo geela ahna ilaa shan iyo soddonka waxaa ku waajib ah neeg geel ah oo ah bintu makhaad. Hadday hal geel ah ku darsantana ilaa ay ka gaaraan shan iyo afartan waxaa ku waajib ah neef geel ah oo ah bintu labuun. Hadday geela ku darsantana ilaa ay ka gaaraan lixdan halaad waxaa ku waajib ah neef geel ah oo xiqqah. Hadday hal geela ku darsanto ilaa ay ka gaaraan shan iyo toddobaatan waxaa ku waajibaysa hal geel ah oo ah jathcah. Hadday hal geela ku darsanto ilaa ay ka gaaraan sagaashan halaad waxaa ku waajibaysa laba neef oo geel ah oo ah ibnataa labuunin. Hadday hal geela ku darsanto ilaa ay ka gaaraan boqol iyo labaatan halaad waxaa ku waajibaysa laba neef oo geela oo ah xiqqataani.
Hadduu geelu intaas ka badan yahayna kontonkii halaadba waxaa ku waajibaysaa oo laga bixinayaa neef geel ah oo ah xiqqah, afartankii kalaadna neef geela oo ah ibnatu labuunin.
Arigana afartankii neefba ilaa boqol iyo labaatan waxaa ku waajib ah oo laga bixinayaa neef ari ah. Hadduu neef ku darsamana ilaa ay tiradoodu ka gaarto laba boqol oo neef waxaa ku waajib ah laba neef oo ari ah. Hadduu arigu laba boqol ka batana ilaa uu ka gaaro saddex boqol waxaa ku waajib ah saddex neef oo ari ah. Hadduu arigu intaas ka badan yahayna boqolkii neefba waxaa ku waajib ah neef ari ah. Intaas kaddib wax kale laga bixin mayo ilaa ay boqol ka gaaraan.
Ari isku jirayna la kala saari mayo, mid kala baxsanaana la isku keeni mayo cabsi zakada laga qabo. Ariga shirko lagu yahayna waxaa looga bixinaya si siman. Zakadana loo qaadi mayo neef gaboobay iyo mid ceeb leh toona."

Qoraalka Lix iyo Labaatanaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoralka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Claa Aalihi Wa Sallam ee Banii Nahd bin Zayd

Al Qasdhalaani iyo Al Zarqaanii waxay yiraheen: "aftahammadiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam waxaa ka mid ah inuu qolo walba oo Carab ah kula hadli jiray afkooda iyo lahjadooda si faseex ah iyo si uu qalbigooda kusoo jiito, oo dadka magaalada degana wuxuu kula hadli jiray afka magaalada oo jilicsan, reer miyigana wuxuu kula hadli jiray afka reer miyiga.

Banii Nahd waa qabiil Carbeed oo Yaman dega oo reer miyi ah, waxaana Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam sanadka wufuudda, waana sanadka sagaalaad ee Hijrada, u yimid wafdi ayaga ka socda uuna af hayeen u ahaa ninka la yiraahdo Dhihdah ibnu Ruhm oo la sheegay inuu magaciisu ahaa Yaciish ama Qays, Calii ibnu Abii Dhaalibna uu yiri magaciisu wuxuu ahaa Dhafkhah bin Abii Zuhayr. Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam markuu u duceeyey kaddib wuxuu u qoray qoraalkaan soo socda:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasauuli Allaahi ilaa Banii Nahd bin Zayd, al ssalaamu calaa man aamana bi Allaahi Cazza wa Jalla wa RasuuliHi, lakum yaa Banii Nahdi fii al wathiifati al fariidata, wa lakum al faaridu wa al fariishu, wa thuu al cinaani al rakuubu, wa al falwu al dabiisu, laa yamnacu sarxukum, wa laa yacdudu dhalxukum, wa laa yaxbisu darrukum maa lam tadmiruu al imaaqa, wa ta'kuluu al ribaaqa, man aqarra bimaa fii haathaa al kitaabi fa lahu min Rasuuli Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam al wafaa'a bi al cahdi wa al thimmata, wa man abaa fa calayhi al ribwatu."

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Muxammad Rasauulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, waxayna u socotaa Banii Nahd bin Zayd. Nabadgelyo korkiisa ha ahaato qofka aamina oo rumeeya Ilaahay Cazza wa Jalla iyo Rasuulkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Reer Banii Nahdow adinku waxaad leedihiin marka zakada xaqqa ah xoolihiina laga qaadayo neefka da'da ah oo gaboobay zaka ahaan la idiinka qaadi mayo, sidaan kuwaa xoolihiinna ugu fiicanna la idiinka qaadayn zako ahaan. Sidoo kale adinkaa leh oo zaka ahaan loo qaadi mayo neefka buka iyo neefka ugubka ahba oo yar oo aan wali dhalin, oo waxaa weeyey zaka ahaan la idiinka qaadi mayo xoolihiinna kuwa ugu fiican iyo kuwo ugu xun toona ee waxaa la idinka qaadayaa kuwa dhexdhexaadka ah. Gadiidka la fuulana fardaha rabbaysan oo sahlan adinkaa leh iyo kooda yar adag oo dhibka badanba. Daaqsiintiinnana cidna idiinku soo geli mayso oo idiinku imaanmayso, geedihiinnana la goyn mayo, xoolihiinna caanoolayda ahna looma keenayo midka zakada qaadaya, inta hawshaas lagu dhex jirana oo xoolaha la tirinayo ayagaas daaqsiinta laga reebi mayo ilaa tirada la dhammeeyo oo ay xooluhu mar daaqsiinta wada aadaan oo ayagaas hore ayaa laga geynayaa zaka ahaan loo qaadi mayo ayadoo uu ninka xoolaha iska leh dhibi ku dhacayo. Intaas waxaad leedihiinn intaydnaan qalbiga ku qarsan caro iyo boohin aad ka caraysan tihiin oo la booyeysaan bixinta zakada iyo intaydnaan cahdigaan jebin oo aad dhowreysaan. Qofka oggolaada oo meel mariya waxa qoraalkaan ku dhigan wuxuu leeyahay oo u sugnaaday oofinta cahdigaan iyo ilaalinta Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Qofka diidana waxaa laga qadayaa zakadii iyo xoolo dheeri ahba oo ciqaab iyo ganaax looga dhigayo."

Qoraalka Toddoba iyo Labaatanaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalka Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee Qadhan ibnu Xaarithah Al Culaymii oo ka tirsan qabiilka Kalb

Al Qasdhalaani iyo Zarqaanii waxay wariyeen qoraalkuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u dhigay Qadhan ibnu Xaarithah Al Culaymii oo ka tirsan qabiilka Kalb markuu Nabiga, Sallaa Allaabhu Calayhi Wa Calaa Aaalihi Wa Sallam, u yimid isagoo la socda wafdiga tolkiisa sanadka wufuudda, oo ah sanadka sagaalaad ee Hijrda, uuna gabay ammaan ah u tiriyay.

Qoraalkaasuu wuxuu ahaa sidatan:

“Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathaa kitaabun min Muxammadin li camaa’iri Kalbi wa axlaafihaa, wa man tha’rahu al islaamu min ghayrihim min Qadhan bin Xaarithah Al Culaymii, bi iqaami al ssalaati li waqtihaa, wa iitaa’i al zzakaati bi xaqqihaa fii shiddati caqdihaa wa wafaa’i cahdihaa, bi maxdari min shuhuudi al muslimiina, wa sammaa jamaacatan minhum Dixyah bin Khaliifah Al Kalbiyyi, calayhim mina al hamuulati al rraciyati al bisaadhi al th-thi’aari fii kulli khamsiina naaqatan ghayra thaati cawaarin, wa al xamuulatu al maa’iratu lahum laaghiyatun, wa fii al sh-shawiyyi al waraa musinnatun xaamilun aw xaa’ilun, wa fiimaa saqaa al jaduulu mina al cayni al muciinu al cushru, wa fii al cathraa shadhruhu bi qiimati al amiini laa yuzaadu calayhim wathiifatan wa laa yufraqu. Cahada lii thaalika Allaahu wa RasuuluHu, wa kataba Thaabit bin Qays bin Shammaas.”

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

“Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Kani waa qoraal ka socda Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam una socda jilbaha qabiilka Kalb iyo xulafadoodaba iyo qabaa’ilka kale oo uu islaamku kulmiyay oo isku keenay. Qoraalkaanna waxaa sida Qadhan ibnu Xaarithah Al Culaymii (oo wuxuu u dhashay qabiilka Banii Culaym) wuxuuna amrayaa inay salaadda waqtigeeda ku tukadaan oo ku oogaan, zakada maalkana ay inta lagu leeyahay oo xaqqeeda ah ka bixiyaan siduu iyo intuu Ilaahay ku waajibiyay inay bixiyaan oo ay sidaas u oofiyaan. Waxaana goob joog ka ah marag muslimiinta ka mid ah oo uu koox ka magacaabay uu ka mid yahay Dixyah bin Khaliifah Al Kalbiyyi. Jilbahaas waxaa waajib ku ah inay zakada soo socota bixiyaan: xoolaha iskood u daaqa daaqsiin u xalaal ah ubadkooduna uu la socdo iyo neefka dheddigga ah oo ubad uusan dhalin ku jilan yahayba oo macnaha guud uu yahay neef irmaan oo idil, kontonkii halaadba waxaa waajib ku ah oo laga bixinayaa tulud geela oo aan ceeb lahayn oo ah midda xiqqah la yiraahdo.
Geela badeecadaha lagu qaado oo suuqa lagu geeyo ama cunnada lagu soo qaato ama lagu dhaansado oo shaqeeya zako laguma laha. Ariga buurbuuranna waxaa laga bixinayaa musinnatun rimman ama irmaan.
Beerta wabiga ka waraabtana ama il dhulka korkiisa dureerta waxaa lagu leeyahay oo zako ahaan laga bixinayaa cushur oo ah toban meelood meel. Beeraha roobka ka waraabana waxaa zako ahaan looga bixinayaa nuskiisa (oo uu Al Zarqaani yiri noocaan waa kuwo aan waagaas jirin sida beerta rushaynta lagu waraabiyo oo kale) qiimaha dhexdexaadka ah. Zakadana waajib kale lagu kordhin mayo inta waajibka ahna laga yarayn mayo. Waxaana sidaas xukumay Ilaahay iyo Rasuulkiina Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Waxaana dhigay qoraalkaan Thabit bin Qays bin Al Shmaas.

Qoraalka Sideed iyo Labaatanaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rarxiimi

Qoraalka Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee Waa'il bin Xujr

Al Qasdhalaani iyo Al Zarqaanii waxay wariyeen qoralkuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u dhigay saxaabiga Waa'il bin Xujr, una dhashay qabiilka yamaneed ee Ximyar uuna boqorradooda ka mid ahaa, degina jiray Xadramuut ee dalka Yaman. Wafdi ahaan ayuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ugu yimid wuxuuna waydiistay inuu dhul u gooyo, wuuna u gooyay, markaasuu wuxuu ku daray Mucaawiyah Abii Sufyaan si uu dhulkaas gacanta ugu geliyo. Markay is raaceen ayuu Mucaawiyah wuxuu Waa'il bin Xujr ku yiri: "ratigaad saaran tahay xagga dambe iga fariisi." Markaasuu wuxuu ugu jawaabay isagoo ku yiri: "kama mid tihid kuwa boqorrada dhabarkooda la fariisiyo."
Markaasuu markuu Mucaawiyah noqday khaliifka iyo boqorka dawladda islaamka ayaa waxaa usoo wafdiyay oo u yimid Waa'il bin Xujr. Markaasuu Mucaawiyah qaabilay oo karaameeyey. Markaasuu Waa'il wuxuu oran jiray: "waxaan jeclaan lahaa inaan maalintuu i waydiistay inaan dhabarkayga fariisiyo aan hortayda fariisiyo."
Abuu Nucaym wuxuu wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, uu minbarkiisa isagoo saaran oo Waa'ilna soo saaray, uuna dhul u gooyay, qoraalna uu u dhigay, uuna yiri: **"haathaa Waa'il sayyidu al aqyaali"** oo macnihiisu yahay: "kanu waa Waa'il oo ah madaxa boqorrada."
Waa'il kaddibna wuxuu degay Al Kuufah ee arliga Ciraaq.
Ibnu Thafar wuxuu yiri: "Waa'il bin Xujr wuxuu lahaan jiray sanam dhagax qiimo badan ka samysan oo uu caabudi jiray una sujuudi jiray. Markaasuu maalin duhurkii agtiisa seexday markaasuu wuxuu maqlay cod laga baqo oo hurdadii kasoo kiciyay. Markaasuu soo kacay oo uu u yimid, una sujuuday. Markaasuu wuxuu maqlay haatif oranaya:
1. Waa cajaban li Waa'il bin Xujr/yukhaalu yadrii wa huwa laysa yadrii
2. Maa thaa tarjaa min naxiiti sakhrin/laysa bi thii curfin wa laa thii nukrin
3. Wa laa bi thii nafcin wa laa thii darrin/law kaana thaa xijrin adhaaca amrii.

Saddexda tixood macnohoodu waxaa weeye:

1. Waxaa la yaab leh xaaladda Waa'il bin Xujr/wuxuu moodayaa inuu wax ogyahay waxna ma oga.
2. Maxaad ka rajaynaysaa dhagax la qoray/aan waxna yeelin waxna diidin.
3. Wax nafci ahna aan lahayn waxna aan dhibi karin/hadduu caqlilow ahaan lahaa amarkayguu yeeli lahaa Waa'il.

Markaasuu Waa'il madixiisa kor u qaaday oo uu yiri: "maxaad i amraysaa inaan falo?" Markaasuu wuxuu yiri:
1. Irxal ilaa Yathrib thaata al nakhli/wa sir ilayhaa sayra mustaqillin
2. Fa dan bi diini Al Ssaa'imi al musalli/Muxammadan Al Rrasuuli khayra Al Rrusuli.

Labadaas tixood macnohoodu waxaa weeye:

1. Waxaad aadda Yathrib midda geedaha timirta badan/waxaadna u safartaa safar aad u madax bannaan tahay.
2. Waxaadna ka diin yeelataa oo aad gashaa diinta midka soonka badan oo salaadda badan/Muxammad midka Rasuulka ah oo Rusushoo idilna ugu khayr badan.

Markuu intaas yiri ayuu sanamku xagga wajigiisa dhulka ugu soo dhacay. Markaasuu Waa'il intuu u tegay uu budo ka dhigay oo burburiyay, kaddibna uu dhaqaaqay ilaa uu Al Madiinah ka yimid, uuna masjidka soo galay. Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u yeeray oo uu go'iisa dhulka ugu fidiyay uuna kula dul fariistay. Kaddibna Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuuna yiri: **"ayyuhaa al nnasu haathaa Waa'ilu bin Xujri, ataakum min ardin baciidatin, raaghiban fii al islaami"** oo macnihiisu yahay: "dadow kanu waa Waa'il bin Xujr oo idiinka yimid arli fog isagoo diinta islaamka doonaya."
Markaasuu wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahayow soo bixintaada ayaa isoo gaartay anigoo boqortooyo wayn leh, markaasaan kasoo tegay, waxaanna ka doortay diinta Ilaahay."
Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri: **"sadaqta, Allaahumma baarik fii Waa'ilin wa waladihi wa walada waladihi"** oo macnihiisu yahay: "Ilaahayow Waa'il iyo caruurtiisa barakee iyo caruurta caruurtiisaba."
Qoraalkaas uu Waa'il bin Xujr u dhigay wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Caala Aalihi Wa Sallam ku xusay zakada laga doonayo oo qaarkeed sidaan yahay:

"fii al tabicati shaatun laa muqawwarata al alyaadhi wa laa dinaaka, wa andhuu al thabajata wa fii al suyuubi al khumusu, wa man zanaa mima bikri fa asqacuuhu mi'atan wa istawfiduuhu caaman, wa man zanaa mima thayyibin fa darrijuuhu bi al adaamiimi, wa laa tuusiim fi al ddiini, wa laa ghummata fii faraa'idi Allaahi Tacaalaa, wa kullu muskarin xaraamun wa Waa'ilu bin Xujri yataraffalu calaa aqyaali."

Qoraalka oo ku dhigan af Carabiga reer Yaman oo ka duwan midka Quraysh macnihiisu waxaa weeyey:

"afartankii neef oo ari ahba waxaa zako ahaan waajib ku ah in laga bixiyo neef ari ah oo aan caato badan ahayn, aadna aan u buurnayn, waxaadse zako ahaan u bixisaan xoolaha meel dhexaadka ah aan ahayn kuwa xoolaha ugu fiican iyo kuwa ugu liita toona. Dahabka iyo kanziga isagoo dhulka ku duugan aad heshaanna, oo ay quruun hore oo islaamka ka horreeyey ku duugeen, zako ahaan waxaad u bixisaan khumus oo ah inta shan meelood loo qaybiyo ayaa meel la bixinayaa (waana boqolkiiba labaatan).
Qofka zinaysta oo aan wali guur sad ku qaadan garaaca oo waxaad ku dhufataan boqol ulood ama karbaash oo jirkiisa iyo haraggiisa lagu dhufanayo hal sanana dalkiisa ka musaafiriya. Qofka guur hore sad ugu qaatay oo zinaystana dhagax la dhaca ilaa uu ka dhinto hana ka gaabina meel marinta diinta iyo xuduudda Ilaahay. Wuxuu Ilaahay Tacaalaa idinku waajibiyayna way cad yihiin ee si caddaan ah u meel mariya, sida bixinta zakada oo kale iyo meel marinta xuduuddaba. Waa'il bin Xujr waa madaxiinna wayn iyo odaygiinna, zakadiinnana isaga u dhiiba."

Qoraalka Sagaal iyo Labaatanaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Asalka DiintaCiise ee Najraan uuna keenay Faymiyuun iyo Asxaabu al Ukhduudi

Reer Yaman waxay ahaan jireen gaalo asnaam iyo dabka caabudda. Markaasaa waxaa Gobolka Najraan la yiraahdo ee Dalka Yaman Diinta Nabi Ciise, Calayissalaamu, oo ah Diinta Islaamka, keenay nin la yiraahdo Faymiyuun. Al Dhabarii wuxuu ninkaas ku magacaabay Qaymi'uun. Al Qutaybiyyu wuxuu yiri: "Waa nin aali Jafnata ah ee reer

Ghassaan (Boqorrada Shaam) oo Shaam ka yimid, markaasuu (reer Yaman) Diinta Ciise ku xambaaray." Al Naqaash wuxuu yiri: "Magaciisu waa Yaxyaa, aabihiisna Boqor ayuu ahaan jiray, markaasuu dhintay. Markaasey dadkiisu dooneen inay isaga Boqornimo u caleemo saaraan aabihiis kaddib. Markaasuu diiday oo boqornimadaas kasoo cararay, oo uu dalba dal kale uga gudbi jiray, isagoo aan arlina ku nagaadin (meeshuu tagana Diinta Islaamka geynaya). Markaasuu kaddib Yaman yimid, dadkiina ay karaamooyin badan ka arkeen, sida bogsiinta bukaanka oo uu u Alle baryi jiray. Markaasey reer Najraan Diinta Islaamka galeen, waxaana Muslimiintaas Imaam iyo Madax u noqday nin la yiraahdo Cabdu Allaahi bin Al Thaamir (waa tha saddex dhibcood kor ku leh). Gobolka Najraan waxay magaceeda ka qaadatay ninka la yiraahdo Najraan bin Zayd bin Yashjub bin Yacrub bin Qaxdhaan, oo ahaa qofka ugu horeeyey oo halkaas degah.

Asalka diinta yuhuudda ee Yaman

Markaasaa waxaa Yaman Boqor u noqday ninka la yiraahdo Zurcata bin Tubbaan Ascad Abii Karib ibnu Kulkii (oo Karib afka Ximyar waa beeraaley) Karib bin Zayd, koofaartiisuna tahay Thuu Nawaas (waa thaal kor dhibic ku leh oo deelka ku xigah). Ninkaas waxaa Thuu Nawaas loogu bixiyay isagoo lahaa laba saymood ama raamood oo ah timaha madixiisa oo intuu isku tidcay, hadana uu laba qaybood u qaybiyay oo ay madixiisa kasoo laadlaadaan, ayna garbihiisa taabanayaan oo markuu isagu dhaqaaqo ay ayaguna dhaqaaqayaan, oo al nawsu waa dhaqdhaqaaqa ay ruxdaan wax soo laadlaada. Markaasuu Boqorkaasu Diinta Yuhuudda galay, uuna Yuusuf la baxay. Markaasuu Muslimiintii Najraan degganayd kusoo duulay, ayagoo ayan yuhuuddu Nabinnimada Nabi Ciise, Calayhissalaamu, aqoonsanayn, wuxuuna usoo jeediyay inay Diintooda ka baxaan, ayna Diintiisa yuhuudiyadda ah soo galaan. Markaasey ka diideen. Markaasuu la dagaallamay, kana dhigay in uu seef ku dilo iyo inuu dab ku gubo. Wuxuu qoday godad sida dhufaysyada u dheer, una fidsan, markaasuu qoryo inta ka buuxiyay uu dab ku shiday, oo intuu Muslimiintii halkaas isugu keenay wuxuu ku yiri: "Qofkii dambigiisa kasoo noqdah waan iska daynayaa, qofkaan kasoo noqonna dabkaan ayaan ku tuuraynnaa." Markaasey ayaguna diideen inay Diintooda Islaamka ka baxaan, isaguna u dabkaas ku dhex daadiyay, oo ay sidaas Diintooda ugu dhinteen. Waxaa Muslimiintaas ka mid ahayd haweeney wiil ay dhashay oo toddoba bilood jir ah siduu Saxiix Muslim u wariyay, nuujineysa. Markaasey markay godkii iyo dabkii aragtay, ayay walwashay oo ay cunuggeeda u kurbootay. Markaasuu wiilkeedaasi wuxuu ku yiri: "Hooyoy ha walwalin, maxaa yeelay adigu xaqqa ayaad ku taagan tahay." Markaasey dabkii ku booday, Ilaahayna, Midka Naxariista Badani, intayan dabkaba gaarin oo ay hawada kusii jireen, waa Muslimiintoo idile, ayuu naftaba ka qabtay, oo uusan dabkuba gubin. Allow u naxariiso Asxaabu al Ukhduudi iyo Muslimiinta oo idilba. Khabarkoodaasna waxaa nooga warrantay Suuratu Al Buruuji, uuna Ilaahay, Cazza wa Jalla, ku yiri: **"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Wa al Ssamaa'i thaati al buruuji**(1)**Wa al yawmi al mawcuudi**(2)**Wa shaahidin wa mash-huudin**(3)**Qutila asxaabu al ukhduudi**(4)**Al Nnaari thaati al waquudi**(5)**Ith hum calayhaa qucuudun**(6) **Wa hum calaa maa yafcaluuna bi al mu'miniina shuhuudun**(7)**Wa maa naqamuu minhum illaa an yu'minuu bi Allaahi Al Caziizi Al Xamiidi**(8)**Al Lathii lahu mulku al Ssamaawaati wa al ardi wa Allaahu calaa kulli sha'in Shahiidun**(9)**Inna al lathiina fatanuu al mu'miniina wa al mu'minaati thumma lam yatuubuu fa lahum cathaabu jahannama wa lahum cathaabu al xariiqi**(10)**Inna al lathiina aamanuu wa camiluu al ssaalixaati lahum jannaatun tajrii min taxtihaa al anhaaru thaalika al fawzu al kabiiru**(11)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Ilaahay wuxuu

ku dhartay Samada xiddigaha leh(1)Iyo maalinta la isu yaboohay (oo ah maalinta qiyaamaha)(2)Iyo dadka Maalintaas halkaas soo istaagaya iyo waxyaalaha maalintaas la arki doono(3)Ee lacnadi ku dhacdo kuwii godka lahaa (mu'miniinta lagu cathaabayay)(4)Ee ahaa naar waa dabee olol leh (iyo shidaal)(5)Gaaladiina ay kor fadhiyeen godka(6)Aayagoo daawanaya waxa lagu falayo mu'miniinta (oo imtixaan ah)(7)Waxay ku neceen dadkaasna ma jiro oo aan ahayn inay rumeeyeen Ilaaha Adkaadah ee la mahdiyo(8)Oo leh Samada iyo Dhulka xukunkooda. Ilaahayna wax walba wuu u jeedaa oo arkaa(9)Kuwa mu'miniinta rag iyo haweenba jirraba (oo Diintooda ku imtixaana) hadana aan tawbad keenin, waxay mudan in lagu cathaabo jahannamo iyo cathaabid gubtah(10)Kuwa xaqqa rumeeyey, camal suubanna falay, waxay mudan jannooyin ay dureeri dhexdeeda wabiyaal, taasina waa liibaan wayn(11)." Waxaa muslimiinta sidaas looga dilay labaatan kun oo qof.

Warqadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee krishtaanka Najraan ee dalka Yaman

Riwaayada Al Bayhaqii

Al Bayhaqii waa al imaamu al xaafithu al callaamah, shiikhu Khurasaan, al faqiihu al jaliilu, wa al usuulii al nnixriiru al zzahidu, al qaanitu al waracu, saaxibu al tasaaniifi al qaa'imu bi nusrati al math-habi usuulan wa furuucan, waana Abuu Bakr Axmad bin Al Xusayn Al Bayhaqii Al Niisaabuurii, wuxuuna dhashay sanadka saddex boqol afar iyo sideetan. Wuxuuna ku dhashay Khasruu Jarad, oo ka mid ah tuulooyinka Bayhaq oo ka tirsan magaalada Niisaabuur, wuxuuna ku koray waxna ku bartay Bayhaq iyo dalal kaloo badan. Wuxuuna allifay kutubbo fara badan oo ay ka mid yihiin Dalaa'ilu Al Nubuwwati, oo toddoba mujallad ah iyo Axkaamu Al Quraani oo uu kusoo aruuriyay wuxuu imaam Al Shaaficii axkaamta Quraanka ka yiri, Manaaqibu Al Shaaficii, Al Sunanu Al Kubraa iyo dhwr iyo labaatan kutub oo kale oo la wada daabacay.
Al Bayhaqii wuxuu kitaabkiisa Dalaa'ilu Al Nubuwwah mujalladka shanaad bogga saddex boqol iyo sideetan uga wariyey Yuunus bin Bukayr oo ka wariyay Salamah bin Cabdi Yashuuc oo ka wariyay aabihiis oo ka wariyay awoowihiis oo krishtaan ahaan jiray kaddibna islaamay inuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu warqad u dhigay dadka dega gobolka Najraan ka hor intayan ku soo degan "Dhaasiin Sulaymaan" (oo ah Aayadda koowaad ee Suuratu Al Namli), nsukhadda qoraalkaasuna waa sidatan:

Bismi Ilaahi Ibraahiima wa Isxaaqa wa Yacquuba min Muxammadin Al Nnabiyyi Rasuula Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ilaa Usquf Najraan, wa ahla Najraan: in aslamtum fa inni axmadu ilaykumu Allaaha Ilaaha Ibraahiima wa Isxaaqa wa Yacquuba, ammaa bacdu: fa innii adcuukum ilaa cibaadati Allaahi min cibaadati al cibaadi wa adcuukum ilaa walaayati Allaahi min walaayati al cibaadi, fa in abaytum fa al jizyatu, fa in abaytum fa qad aathantukum bi xarbi al islaami."

Warqadda macneheedu waxaa weeye:

"Waxaan ku bilaabayaa Magaca Ilaaha Ibraahiim iyo Isxaaq iyo Yacquub. Waxay ka socotaa Nabi Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam,, una socotaa usqufka (waana ninka u sarreeya wadaadada diinta krishtaanka ee dalkaas, ama dal kasta oo krishtaan ah, waana waxa afka ingiriiska lagu yiraahdo Bishop) Najraan: haddaad islaantaan anigu Ilaahay ayaan daraadiin ugu

xamdiyayaa, Ilaaha Ibraahiim iyo Isxaaq iyo Yacquub. Intaas dabadeedna: anigu waxaan idiinku yeerayaa inaad Ilaahay caabuddaan oo aad caabudidda addoommadiisa ka hartaan, waxaanna idiinku yeerayaa inaad Ilaahay Wali ka dhigataan iyo gargaare intaad wali iyo gargaare ka dhigan lahaydeen addoommadiisa. Haddaad diiddaanna waxaad bixinaysaan jizyo. Haddaad diidaanna waxaan idiin caddeynayaa inuu islaamku idinla dagaallami doono."

Aftida Al Usqufu

Markii Al Asqufu warqadda loo keenay oo uu akhristay wuu ka naxay oo ay la waynaatay, kana cabsaday cabsi xoog badan. Markaasuu wuxuu u ciddiray nin ragga Najraan ka mid ah oo la yiraahdo Shuraxbiil bin Wadaacah, una dhashay qabiilka Hamdaan, kaasoo markay wax wayni dhacaan aan hortiis nin kale loo yeeri jirin., oo Al Ayhamu ama Al Ssayyidu ama Al Caaqibu looma yeeri jirin. Markuu u yimid ayuu Al Asqafu warqadda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u dhiibay Shuraxbiil. Markaasuu isaguna warqadda akhriyay oo kaddibna oo Al Asqafu ku yiri: "Maryama aabeheedow! Maxay kula tahay?" Markaasuu Shuraxbiil wuxuu ku yiri: "waxaan ogahay wuxuu Ilaahay Ibraahiim ka ballan qaaday inuu ubadka Ismaaciil nabi kasoo saaro, waxaana dhici karta inuu ninkaanu isagii yahay. Aniguna arrinka nabinnimada ra'yi kama lihi. Hadduu arrinkaanu arrin ka mid ah arrimaha adduunka talo ayaan kaa siin lahaa, waanna kuu dadaali lahaa."
Markaasuu wadaadku wuxuu ku yiri: "dhinac u fariiso". Markaasuu Shuraxbiil meeshaas ka durkay oo uu dhinac fariistay.
Markaasuu Al Asqafu wuxuu u ciddiray nin reer Najraan ka mid ah oo la yiraahdo Cabdu Allaahi bin Shuraxbiil, una dhashay qabiilka Asbax oo Ximyar ka tirsan, markaasuu warqadda u dhiibay oo uu kanna akhriyay. Markaasu aragtidiisa waydiiyay iyo wuxuu warqaddaas ka qabo. Markaasuu wuxuu ugu jawaabay wax la mid ah wuxuu Shuraxbiil ku yiri oo kale.
Markaasuu wadaadku wuxuu isagana ku yiri: ""dhinac u fariiso". Markaasuu Shuraxbiil meeshaas ka durkay oo uu dhinac fariistay.
Markaasuu Al Asqafu wuxuu u ciddiray nin reer Najraan ah oo la yiraahdo Jabbaaru bin Fayd una dhashay qabiilka Banii Al Xaarith bin Kacb kana sii ah Banii Al Xamaasi. Markaasuu warqadda u dhiibay oo uu kanina akhriyay.
Markaasu aragtidiisa waydiiyay iyo wuxuu warqaddaas ka qabo. Markaasuu wuxuu ugu jawaabay wax la mid ah wuxuu Shuraxbiil ku yiri oo kale.
Markaasuu wadaadku wuxuu ku yiri: ""dhinac u fariiso". Markaasuu Shuraxbiil meeshaas ka durkay oo uu dhinac fariistay.
Markaasu aragtidiisa waydiiyay iyo wuxuu warqaddaas ka qabo. Markaasuu wuxuu ugu jawaabay wax la mid ah waxay Shuraxbiil iyo Cabdu Allaahi ku yiraahdeen oo kale.
Markaasuu wadaadku wuxuu ku yiri: ""dhinac u fariiso". Markaasuu Shuraxbiil meeshaas ka durkay oo uu dhinac fariistay.

Al Usqufu oo dadkiisa la tashaday

Markay jawaabta saddexdooda sidaas wada noqotay oo ay isku raaceen ayuu al asqufu wuxuu amar ku baxshay in jaraska kaniisadda la garaaco iyo in maryo khashin ah oo adag (waana waxa la yiraahdo al musuuxu, ahna dharka adadag oo ay wadaadada krishtaanku xirtaan) oo sidaasay yeeli jireen markay maalinnimada cabsadaan. Hadday habeennimada cabsadaanna jaraskana way garaaci jireen dabna waxay ka shidi jireen sawaamicadooda oo ah gurigay deggan yihiin.

Markaasay markii jaraskana la garaacay musuuxnada kaniisadda la suray (sida calammada oo kale) ayay dadka waadiga deggani, dhankiisa kore iyo dhankiisa hooseba wada yimaadeen. Waadiga dhererkiisuna waa intuu nin daabad dheereysa saarani maalin ku gooyo, waxaana ku dhex yaalla saddex iyo toddobaatan tuulo, iyo boqol iyo labaatan kun oo dagaal yahan. Markay isku yimaadeen ayuu al asqufu wuxuu ku dul akhriyay warqadda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, kaddibna uu taladooda waydiiyay. Markaasay talada dadka waadiyada deggani waxay ku go'day in Shuraxbiil bin Wadaacah Al Hamdaanii iyo Cabdu Allaahi bin Shuraxbiil Al Asbaxii iyo Jabbaar bin Fayd Al Xaarithii la diro oo intay u tagaan Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ay kaddibna ay warkiisa ayaga u keenaan.

Wafdiga Najraan ee Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Markaasuu wafdigaasu dhaqaaqay oo ay markay Al Madiinah yimaadeen ay dharkay kusoo safreen iska dhigeen, ayna xirteen ninkiiba laba go' oo isku eg (oo la yiraahdo afka Carabiga xullah) oo laga sameeyey dharka xabarah oo ay dhulka ku jiidayaan dhererkooda, waxayna labbisteen fara gashiyo dahab ah, kaddibna ay soo bexeen oo ay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u yimaadeen, oo ay salaameen, isaguna Calayhissalaamu uusan u jawaabin oo uusan isaguna salaamin. Markaasay maalin dhan oo dheer sugayeen inuu la hadlo ayagoo weli dharkaas iyo fara gashiyadaas dahabka ah xiran. Kaddib waxay u tageen Cuthmaan bin Caffaan iyo Cabdu Al Rraxmaan bin Cawf, oo ay hore u yiqiinneen kuwaanoo zamanka jaahiliyada ganacsi u tegi jiray gobolka Najraan oo kasoo gadan jiray dhar iyo miro iyo badarba. Markaasay waxay la kulmeen ayagoo la jooga rag Muhaajiriinta iyo Ansaarta ka mid ah oo meel wada fadhiya. Markaasay waxay yiraahdeen: "Cuthmaan iyo Cabdu Al Rraxmaanow! Nabigiinu annaga warqad ayuu noo soo dhigay, markaasaan aqbalnay oo aan u nimid, markaasaan u nimid oo aan salaannay isaguna uu salaanta noo soo celin waayay, waxaanna sugaynnay inuu nala hadlo maalin dheer wuuna nala hadli waayey, ee maxaad nagula talinaysaan? Ma ku laabannaa mase waa ka tagnaa oo dalkeennaan ku noqonnaa?" Markaasay labadoodaasi waxay Calii bin Abii Dhaalib oo ragga majliska ka mid ahaa ku yiraahdeen: "Al Xasan aabihisow maxaad raggaan arrinkooda ka leedahay?" Markaasuu Caliyyu wuxuu Cuthmaan iyo Cabdu Al Rraxmaan, Allaha raalli ka wada noqdee, ku yiri: "waxay ila tahay inay dharkaan ay hadda labbisan yihiin iska dhigaan iyo fara gashiyada ugu jiriba, ayna labbistaan dharkay safarka xirnaayeen, kaddibna ay ku noqdaan." Markaasuu wafdiga Najraan sidaas yeelay, oo ay dharkii iska dhigeen iyo fara gashiyadaba, kaddibna ay ku noqdeen Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam, oo ay salaameen, isaguna uu salaamay oo salaantooda usoo celiyay, kaddibna uu yiri: **"wa Allathii bacathanii bi Al Xaqqi la qad atawnii al marrata al uulaa wa inna Ibliisa la macahum."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "waxaan ku dhaartay Midka Xaqqa igu soo diray markii hore waxay ii yimaadeen ayagoo uu Ibliis la socdo."

Markaas kaddib ayuu isaguna Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ayaga waraystay ayaguna ay isaga waraysteen, ugu dambaystii waxay ku yiraahdeen: "maxaad Ciise inay Maryama ka leedahay? Annaguna waxaan dadkeenna dib ugu noqonaynnaa annago krishtaan ah, waana ku farxaynnaa in haddaad Nabi tahay aan ogaanno waxaad isaga ka leedahay." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu yiri: **"maa cindii fiihi shay'un yawmii haathaa, fa aqiimuu xattaa akhbarakumaa bimaa yuqaalu fii Ciisaa"** oo

macnihiisu yahay: “wax isaga ku saabsan maantadaan aan joogo ma hayo, marka jooga ilaa aan idiinka sheego waxa Ciise laga yiraahdo.”

Soo degidda Suuratu Aali Cimraana

Markaasuu wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam waabariistay isagoo ay kusoo degatay Aayadaha sagaal iyo konton ilaa kow iyo lixdan ee Suuratu Al Aali Cimraana.
Markaasuu subixii dambe waabariistay ayadoo uu Ilaahay Cazza wa Jalla kusoo dejiyay Aayadaha sagaal iyo konton ilaa kow iyo lixdan ee uuratu Aali Cimraana:

"Inna mathala Ciisaa cinda Allaahi kamathali Aadama khalaqahu min turaabin thumma qaala lahu kun fa yakuunu(59)**Al Xaqqu min Rabbika falaa takun mmina al mumtariina**(60)**Faman jaa'aka fiihi min bacdi maa jaa'aka mina al cilmi faqul tacaalaw nadcu abnaa'anaa wa abnaa'akum wa nisaa'anaa wa nisaa'akum wa anfusanaa wa anfusakum thumma nabtahil fa najcal llacnata Allaahi calaa al kaathibiina**(61)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Gaalada reer Banii Israa'iil waxay qorsheysteen dhagar iyo makri falid ah inay Nabi Ciise dilaan, Ilaahayna wuxuu xukumay abaal marintooda, oo ninkii doonayay inuu Ciise dilo ayuu Ciise muqqalkiisa siiyey oo u ekeysiiyey oo isagaasaa markaas la dilay meeshay Ciise rabeen inay ka dilaan. Ilaahay ayaana ah Midka ugu wanaagsan oo wax abaal mariya. Sidaaseyan waxba ugu jirin caqiidada krishtaanka oo oranaysa in Ciise la dilay oo krishto lagu waray oo uu dunuubtooda ayaga u dhintay oo uu uga dhaqay dhimashadiisaas. Been badanaa!(54)Xus markuu Ilaahay yiri: "Ciisow, waan ku qabanayaa oo aan xaggayga kor kuugu soo qaadayaa, waxaanna ka daahirinayaa kuwa gaaloobay. Kuwa ku raacayna waxaan ka dhigayaa kuwa ka korreeya kuwa gaaloobay tan iyo maalinta qiyaame: Al Baghawii wuxuu yiri: "Waa krishtaanka reer Ruum oo ah kuwaan maanta reer yurub niraahno ha degganaadaan qaaradday doonaane yurub ama ameerika ama australiya. Waxaana la yiri waa krishtaanka, kuwaanoo ka korreeya yuhuudda ilaa maalinta qiyaame, ayadoo ay yuhuuddu boqortooyadoodu tagtay, boqortooyada krishtaankuna ay jireyso ilaa maalinta qiyaame. Marka kuwa Ciise raacsan waxaa laga wadaa kuwa sheeganaya inay Ciise raacsan yihiin oo jecel yihiin, mana aha inay Diintiisa islaamka ah ku raac san yihiin." Waa intaas warka Al Baghawii. Markaas kaddibna noqodkiinnu waa Aniga xaggayga, markaasaan idinku kala xukumayaa waxaad ahaydeen kuwa isku khilaafay."(55).."Tusaalaha Ciise Ilaahay agtiisa waxaa weeye mid la mid ah tusaalaha Aadan oo uu ka abuuray dhoobo kaddibna uu ku yiri: "Ahow!" markaasuu ahaaday(59)Runtu waxay ka timid xagga Rabbigaa, marka ha ka mid noqon kuwa shakiya(60)"Qofkii kugula murma amarka Ciise iyo runta, kaddib markuu kuu yimid cilmiga ah inuu Ciise yahay addoonka Ilaahay iyo Rasuulkiisa, waxaad ku tiraahdaa: "Kaalaya aan u yeerno caruurteenna iyo adinka caruurtiinaba, iyo haweenkeenna iyo adinka haweenkiinnaba, iyo nafafkeenna iyo nafafkiinna. Markaas aan ducada ku fogaanno oo aan Ilaahay isku jejebinno oo aan habaartanno oo aan lacnadda Ilaahay yeelno dusha kuweenna beenlowyaalka ah."(61)."

Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam markuu subaxa dambe waabariistay Aayadahaas ku dul akhriyay, wayse diideen inay sidaas qiraan.

Wafdiga Najraan oo habaartanka diiday

Markuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam subaxa dambe waabariistay kaddib markuu ogaysiiyay ayuu u yeeray inay lacnatamaan oo

habaartamaan wuxuuna yimid isagoo ay la socdaan uuna go' wada huwiyay Al Xasanu iyo Al Xusaynu Faadhimahna ay gadashiisa socoto, isagoo markaasna ay tiro haween ah u dhaxaan. Markaasuu Shuraxbiil wuxuu labadiisa saaxiib kju yiri: "Cabdu Al Rraxmaan bin Shuraxbiilow iyo Jabbaar bin Faydow, waxaad ogsoontihiin inay dadka waadiga deggan dhankiisa kore iyo dhankiisa hooseba ayan qaadan kuna dhaqmin talo aan tayda ahayn, aniguna waxaan u jeeda Wa Allaahi amar soo socda oo hadduu ninkaanu boqor yahay la soo diray aanna diidno waxaan noqonaynnaa kuwa ugu horreeya oo Carabta ka mid ah oo ishiisa muda oo amarkiisana diida, markaasuusa xumaantuu laabta noogu qaado gashana laabta tolkiisa ayan tegeyn jeer ay dhibaato wayn noo geystaan, annagaana Carabta ugu taag daran. Haduuse ninkaanu Nabi Mursal ah yahay oo aan markaas la lacnatanno annaga noogama hari doono arliga wajigiisa tin iyo ciddi toona ee waa nala wada halaagayaa." Markaasay labadiisa saaxiib waxay ku yiraahdeen: "Maryama aabeheedow, hadaba maxay taladu tahay adigo arrinkiiba soo gaabiyay? Taladaada sheeg!" Wuxuu yiri: "taladaydu waxaa weeye inaan ninkaan xukunkiisa yeelno oo isagu ma aha nin been wax ku xukuma weligiis, annaguna aan diinteenna haysanno." Waxay yiraahdeen: "adigay ku jirtaa."
Markaasuu Shuraxbiil u yimid Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, uuna ku yiri: "anigu waxaan is tusay talo ka khayr badan inaan kula lacnatanno." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri: **"wa maa huwa?"** oo ah: "waana maxay?" Wuxuu yiri: "waa inaan annaguna diinteenna haysanno xukunkaagana aan oggolaanno iyo waxaad nagu xukuntid." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu yiri: **"lacalla waraa'aka axadun yutharribu calayka"** oo macnihiisu yahay: "ama waxaa kaa dambeeyaa oo tolkaa ku jiraa axad go'aankaan aad gaartay diidaya oo kugu eedeynaya?"Markaasuu Shuraxbiil wuxuu yiri: "ma jirto oo labadayda saaxiib waydii." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam weydiiyay ayna labadooduba ku yiraahdeen: "dadka waadiga deggani kuma dhaqmaan oo ma qaataan talo aan tan Shuraxbiil ahayn." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu yiri: **"kaafirun** aw **qaala jaaxidun muwaffaqun"** oo macnihiisu yahay: "waa gaal la waafaqay."

Xukunka Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee reer Najraan

Markaasuu Rasuulka Ilaahay mar kale usoo noqday inuu la lacnatamo ayna ka diideen, oo ay subixii kaas ku xigay u yimaadeen markaasuu waqaddaan u dhigay:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathaa maa kataba Muxammadun Al Nnabiyyu Rasuula Allaahi li Najraana ith kaana calayhimu xukmuhu fii kulli thamaratin wa kulli safraa'a wa baydaa'a wa sawdaa'a wa raqiiqin, wa afdala calayhim, wa turika thaalika kulluhu calaa alfayy xullatin min xulali al awaaqii fii kulli Rajaba alfu xullatin, wa fii kulli Safarin alfu xullatin, wa maca kulli xullatin awqiyatun mina al fiddati famaa zaadat calaa al kharaaji aw naqasat cani al awaaqii fa bi al xisaabi, wa maa qadaw min duruucin aw khaylin aw rikaabin aw curuudin ukhitha minhum bi al xisaabi, wa calaa Najraana mu'natu rusulii wa matcatihim ma bayna cishriina yawman fa duunahu, wa laa tuxbasu rusulii fawqa shahrin, wa calayhim caariyyatu thalaathiina dircan wa thalaathiina farasan wa thalaathiina baciiran ithaa kaana kaydun wa macarratun, wa maa halaka mimmaa acaaruu rusulii min duruucin aw khaylin aw rikaabin fa huwa damaanun calaa rusulii xattaa yu'adduuhu ilayhim, wa li Najraana wa xaashiyatihaa jiwaaru Allaahi wa thimmatu Muxammadin Al Nnabiyyi calaa

anfusihim wa millatihim wa ardiihim wa amwaalihim wa ghaa'ibihim wa shaahidihim wa cashiiratihim wa bayacihim wa an laa yughayyiruu mimmaa kaanu calayhi wa laa yughayyiru xaqqan min xuquuqihim wa laa millatihim, wa laa yughayyaruu asqufun can asqufufatihi wa laa raahibun can ruhbaaniyatihi, wa laa waaqihan min waqiihaahu, wa kullamaa taxta aydiihim min qaliilin aw kathiirin, wa laysa calayhim daniyyatu wa laa dama jaahiliyatin wa la yuxsharuuna wa la yucsharuuna wa laa yadha'u arduhum jayshun, wa man sa'ala fiihim xaqqan fa baynahumu al nnasfu ghayra thaalimiina wa laa mathluumiina bi Najraana, wa man akala riban min thii qabalin fa thimmatii minhu barii'atun, wa laa yu'khathu minhum rajulun bi thulmi aakhara, wa calaa maa fii haathihi al saxiifati jawaaru Allaahi wa thimmatu Muxammadin Rasuula Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, abadan xattaa ya'tiya Allaahu bi amrihi, maa nasaxuu wa aslaxuu fiimaa calayhim ghayra muthqiliina bi thulmin. Shahida Abuu Sufyaan bin Xarbin, wa Ghaylaanu bin Camr, wa Maalik bin Cawf min Banii Nasr, wa Al Aqracu bin Xaabis Al Xanthaliyyu wa Al Mughiirah wa kataba."

Xadiithkaan, waa warqaddaane, macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Midkaanu waa qoraalkuu u dhigay Nabi Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, dadka Najraan dega, ayadoo uu xukunkiisu korkooda yahay: miro kasta iyo mid hurdi ah (dahabka) iyo mid cad (qalinka) iyo mid madowba (dadka) iyo addoommadaba, wuuna u roonaaday, oo intaasoo idil waa loo daayay waxaana lagu xukumay inay bixiyaan laba kun oo xullo (waa laba go' oo isku eg oo midna la guntadu midna la garba saarto: waa go' iyo gunto waxay soomaalidu tiraahdo) oo ka mid ah dharka la yiraahdo al awaaqii. Bil kastoo Rajab ah waxay bixinayaa kun xullo, bil kastoo Safar ahna waxay bixinayaan kun xullo. Xullo kastana waxaa la socda oo lagu soo darayaa wiqiyado qalin ah. Waxa kharaajka (oo kharaaj waxaa la yiraahdaa wuxuu dalkaas xukunkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam soo hoos galay sanad walba dawladda islaamka siinayo, oo markaan ah labadaas kun oo xullyo iyo inta la socotaba oo lagu waajibiyay inay bixiyaan) zaa'id ka noqda ama ka naaqusa waa lagu xisaabtamayaa. Waxa kharaajkaas ka mid ah oo ay ku bixiyaan gaashaammo iyo cambuurro bireed ama fardo ama awr ama badeecad waxaa looga qaadanayaa ayadoo lagu xisaabtamo. Reer Najraan waxaa korkooda ah inay bixiyaan waxa ku baxa rusushayda, ahna ragguu ayagaas u diray lana yiraahdo oo kale ergo, iyo dejintooda iyo cunnadooda in la mid ah labaatan maalmood ama ka yarba. Rusushaydana lama hayn karo ayagoo hawshay u yimaadeen dhawraya in bil ka badan. Reer Najraan waxaa kaloo korkooda ah inay caariyeeyaan (waana inay u amaahiyaan inay ku dhaqmaan kaddibna u celiyaan taasoo caariya la yiraahdo, soomaalida qaarkeedna ayba tabalcaaro u taqaanno) soddon cambuur bireed ama gaashaan iyo soddon faras iyo soddon rati hadduu dagaal ama dareen yimaado. Waxa ka baaba'a waxa rusushayda la caariyeeyey oo ka mid ah cambuurro bireedka ama gaashaammada ama fardaha ama rakuubka awrta waxaa dammaano qaadaya rusushayda ayagaana lagu leeyahay ilaa ay ka gudaan oo ay gacanta ka saaraan. Najraan iyo intay wadato oo la jirtaba waxay leeyihiin ilaalinta Ilaahay iyo ilaalinta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, xagga naftooda iyo diintooda iyo arligooda iyo xoolohooda iyo kuwooda maqan iyo kuwooda jooga iyo cashiiradooda iyo kaniisadohooda. Ayagana waxay kaloo leeyihiin inaan la beddelin waxay dusheeda ahaayeen, aanna la beddelin xaq ka mid ayaga xuquuqdooda aanna la beddelin diintooda, iyo inaaan asquf asquf (waa wadaadadoodee) laga beddelin meeshuu hawshaas ka hayay iyo dadkuu wadaadka u ahaa, aanna la beddelin oo laga celin raahib (waana kuwa aan guursan oo

yiraahda waxaan u go'nay cibaadada Ilaahay, kuna xusan Aayadda toddoba iyo labaatanaad ee Suuratu Al Xadiidi) ruhbaaniyadiisa, iyo inaan loo diidin midka dhaxalka xukunka leh xaqqiisa inuu xukunka dhaxlo. Waxayna ilaalinataas u leeyihiin waxay leeyihiin oo idil ha yaraadaan ama ha bataane. Korkoodana ma ah oo laguma laha loona sheegan mayo wax yar ha ahaado ama dhiig ahaaday zamanka jaahiliyada, dalkoodana laga musaafirin mayo (oo al xashru waa musaafirinta dalka la iska musaafiriyo), canshuurna laga qaadi mayo oo lagu soo rogi mayo, arligoodana ciidan ku duuli mayo. Qofka ayaga xaq ku sheegta labadooda si cadaalad ku fadhida ayaa loogu kala gar sooraya dhulka Najraan. Qofka ribo hore u jirtay cuna ilaalintayda waa ka barii oo iguma laha. Ninna loo qaban mayo dulmi uu nin kale falay.

Inta qoraalkaan ku qoran waxay leedahay ilaalinta Ilaahay Cazza wa Jalla iyo ilaalinta Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo abad ah ilaa uu amarka Ilaahay ka yimaado intay naseexeynayaan ayna waxa lagu leeyahay suubinayaan ayagoo aan dulmi lagu culaysiin."

Waxaa ka marag ah Abuu Sufyaan bin Xarbin iyo Ghaylaan bin Camr iyo Maalik bin Cawf oo u dhashay Banii Nasr iyo Al Aqracu bin Xaabis Al Xanthaliyyu iyo Al Mughiirah (bin Shucbah) oo qoraalkaan dhigay.

Gaddoonka wafdiga Najraan

Wafdigu marka qoraalka loo qoray ay gacanta loo geliyay waxay u gaddoomeen xagga Najraan. Markaasaa waxaa meel habeen socod u jirta Najraan uga horyimid al asqufu iyo madaxdii dadka Najraan. Wadaadkana waxaa la socday nin ay xagga hooyada ka walaalo yihiin ina adeerkiisna ah (dumaal ayuu ku dhashay weeye) xagga nasabka lana yiraahdo Bishru bin Mucaawiyah, kuniyadiisuna ay tahay Abuu Calqamah. Markaasuu wafdigu wuxuu qoraalka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u dhiibay wadadka. Markaasuu intuu akhrinayay Abuu Calqamahna uu la socdo ayna wada socdaan ayay hasha Bishr la turaanturrootay. Markaasuu habaaray, isagoo aan magacaabin Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Markaasuu wadadku wuxuu ku yiri: "waxaad habaartay Nabi Mursal ah." Markaasuu Bishr, markuu afka walaalkiisa wadaadka ah ka ogaaday inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, Nabi Mursal ah yahay, wuxuu yiri: "iska daa oo wa Allaahi inaanan xarig ka furayn jeer aan u tago (waana Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam). Markaasuu wajiga hashiisa xagga Al Madiinah u jeediyay. Markaasaa waxaa ka daba tegay wadaadka oo ku yiri: "hadalkayga garo oo waxaan sidaas u iri inay Carabtu warkaas iga gaarsiiyaan (waana Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam) anigoo ka baqaya inay Carabtu u arkaan inaan xaqqiisa qaadannay ama aan u gargaarkiisa doonaynno, ama aan ninkaan u dullownay oo uu na qahray noogana adkaaday wuxuusan Carabta inteeda kale uga adkaan, annagaana dad ahaan ugu cizzi iyo xoog badan uguna midaysan." Markaasuu Bishr wuxuu ku yiri: "maya oo wa Allaahi inaan aqbalayn wax madaxaaga kasoo baxay ebedkey." Markaasuu ratigiisa ushiisa ku dhuftay oo uu xagga Al Madiinah aaday. Markaasuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u yimid oo uu islaamay, kaddibna Abuu Calqamah shahiidnimo loo dilay.

Markaasuu wafdigu Najraan soo galay markaasuu wuxzuu u yimid raahibka Layth bin Abii Shimrin Al Zzabaydiyya isagoo sawmacaddiisa oo buur dusheeda ku taalla ku jira wuxuuna ku yiri: "gobolka Tihaamah (oy Makkah Al Mukarramah iyo Al Mudiinah Al Munawwarah iyo Yamanba ku wada yaallaan) ayaa waxaa laga soo saaray Nabi, wuxuuna qoraal usoo dhigay al asqufu, markaasay talada dadka waadiga deggani waxay ku go'day in loo diro Shuraxbiil bin Wadaacah iyo Cabdu Allaahi bin

Shuraxbiil iyo Jabbaar bin Fayd oo ay markaas khabarkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u keenaan (waxay wafdigaan dambena la kulmeen waxaan ku sheegaynnaa riwaayadda ibnu Isxaaq oo hoos ku dhigan inshaa'a Allaahu).
Intaasaan uga baxaynnaa intaan kasoo qaadannay Al Bayhaqii Allaha u naxariistee.

Is lacnidda iyo waxa ka dhasha

Al Zarqaanii wuxuu mujalladka shanaad bogga boqol kow iyo sagaashan ku yiri:
"ibnu Sacad wuxuu wariyay inay Al Ssayyidu iyo Al Caaqibu, kaddib markay dalkooda Najraan ku noqdeen, ay durbadiiba Al Madiinah usoo laabteen, ayna labadooduba islaameen, siduu isaguna Fatxu Al Baarii u wariyay iyo Al Isaabah-ba. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu dejiyay daarta Abuu Ayyuub Al Ansaarii.
Taas weeyana sharciga ka yaalla in lala lacnadtamo qofka xaqqa waa runtee diida oo khilaafa kaddib markay xujjada lagu soo oogo oo uu baadilnimada kusii adkaysto (ficilkaasoo la yiraahdo "Al mubaahalah"). Sidaas ayaana ka sugnaatay oo ay yeeleen culummo ka mid ah kuwii hore iyo kuwa dambeba. Fatxu Al Baarii wuxuu intaas ku daray oo yiri: "ibnu Cabbaas ayaa sidaas yeelay, kaddibna Al Awzaacii.
Waxaana la jirrabay oo la arkay in qofka sidaas u lacnatama isagoo baadil ku taagan, inuusan hal sano noolaanayn oo uu gudeheeda ku dhimanayo laga bilaabo maalintuu isla lacnidda u istaagay.
Al Xaafith ibnu Xajar wuxuu kaloo yiri: "aniga laftayda taasu igu dhacday iyo nin daafacayay kuwa mulxidiinta ka mid ah. Markaasuusan maalintaas kaddib uusan noolaan waxaan laba bilood ahayn."
Waa intaas intaan kazoo qaadannay Al Qasdhalaanii iyo Al Zarqaanii.

Riwaayada ibnu Isxaaq

Wafdiga krishtaanka Najraan

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa u yimid wafdiga krishtaanka gobolka Najraan dega, oo ka kooban lixdan nin oo daabdo saaran. Lixdankaas waxaa ka mid ahaa afar iyo toban nin oo madaxdooda ka mid ah. Afar iyo tobankaasna waxaa ka mid ah saddex amarkooda agaasima, oo kala ah: (Kow) Al Caaqibu oo ah amiirkooda taladooda haya iyo la taliyohooda guud, ayanna go'aan ku gaarin waxaan taladiisa ahayn. Al Caaqibu magaciisuna waa Cabdu Al Masiixu. (Labo) Al Sayyidu oo maareeyohooda ah, una xil saaran gaadiidka iyo danaha guud. Al Sayyidu magaciisuna waa Al Ayhamu. (Al Bayhaqii wuxuu mujalladka shanaad bogga saddex boqol saddex iyo sideeta ku inuu ahaa "wa Al Ssayyidu Thumaaluhum" oo Dr. Cabdu Al Mucdhii Qalcajii oo kitaabka xajiiyay faallana ku daray yiri: "thumaalu al qawmi huwa asluhum allathii yarjicuuna ilayhi wa yaquumu bi umuurihim wa shu'uunihim" oo macnihiisu yahay: "thumaalka tolku waa asalkooda ay u noqdaan una quma umuurtooda iyo danohooda). (Saddex) Abuu Xaarithah bin Calqamah, oo u dhashay qabiilka Banuu Bakr bin Waa'il, ahna wadaadkooda iyo caalinkooda iyo imaamkooda maamula dugsiyadooda.

Makaanka Abuu Xaarithah ee boqoorada Roomaanka

Abuu Xaarithah wuxuu dhexdooda ku lahaa madaxtinnimo, wuxuuna bartay kutubbadooda, waa krishtaankee, ilaa heer uu diintooda aqoon fiican uga yeesho. Markaasey boqorrada roomaanka oo krishtaanka ahi sharfeen oo ay madax ka dhigeen,

ayna maal iyo dad u adeegaba siiyeen. Waxayna u dhiseen kaniisado, ayna u badiyeen karaamaynta ay u fidiyeen, una deeqtoonaadeen, markay ogaadeen cilmigiisa iyo siduu diintooda ugu dadaalayo.

Sababta islaamidda Kurz bin Calqamah

Markay raggaasu kasoo bexeen dalkooda Najraan si ay ula kulmaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayuu Abuu Xaarithah ku fariistay baqashiisa isagoo xagga Al Madiinah usoo socda. Dhiniciisana waxaa jooga markaas walaalkiis la yiraahdo Kuuz bin Calqamah (oo uu ibnu Hishaam yiri waa Kurz). .Markaasey baqasha Abuu Xaarithah turaanturrootay. Markaasuu Kuuz wuxuu yiri: "Hebel ha kufo" oo wuu lacnaday, uuna ka wado Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu Abuu Xaarithah wuxuu ku yiri: "Isaga ma ahee bal adigu kuf!" Markaasuu Kuuz wuxuu yiri: "Maxaana jira walaalow?" Wuxuu yiri: "Waxaa jira inuu isagu waAllaahi yahay Rasuulkaan sugaynnay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Markaasuu Kuuz wuxuu yiri: "Haddaad taas ogtahay maxaa kuu diiday inaad rumaysid oo raacdid?" Wuxuu yiri: "Waxaa iga hortaagan waxay roomaanku noo galeen, oo waxay naga dhigeen madax oo na sharfeen, maalna ay na siiyeen. Aayaguna si xoog leh ayay isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uga soo horjeedaan. Markaas haaddaan anigu isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, raaco way nagala noqonayaan waxaan aad u jeeddo oo idil." Markaasuu walaalkiis Kuuz bin Calqamah warkaas walaalkiis u sheegay qalbigiisa ku weeleeyey ilaa uu ka islaamay markaas dabadeed. Isaagana Xadiithkaan wariyay, sida isoo gaartay."

Boqorrada Najraan iyo islaamidda wiilka midkood

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Waxaa isoo gaartay inay boqorrada Najraan kutubbo ay haysteen ay iska dhaxli jireen. Markaasuu markuu nin madaxdooda ahiba dhinto oo ay madaxtinnimadu nin kale u wareegto ayuu wuxuu kutubbadaas ku dhuftaa oo ku xiraa khaatim ku dheeri ah khaatimmadii isaga hortiis ku yiillay oo aan la jebin. Markaasey markay ahayd ninka boqorka noqday zamanka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayuu isagoo lugaynaya turaanturrooday. Markaasaa wiilkiisu wuxuu yiri: "Hebel ha kufo!", uuna ka wado Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu aabihiis wuxuu ku yiri: "Sidaas ha oran, maxaa yeelay isagu waa Nabi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, magaciisuna kutubbada ayuu ku dhigan yahay." Markaasuu markuu dhintay ayuusan wiilkiisu lahayn dan kalee ee aan ahayn inuu kutubbada akhriyo, markaasuu wuxuu jebiyay khaatimmada kutubbada ku xirnaa. Markaasuu wuxuu kutubbda ka helay arrinka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu islaamay, islaannimadiisuna ay fiicnaatay, uuna Xajka soo gutay.

Krishtaanka oo qorrax kasoo bax u tukaday

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Markay krishtaanka Najraan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah ugu yimaadeen, waxay ugu soo galeen masjidkiisa kaddib markuu tukaday oo kasoo jeestay salaadda casar, ayagoo labbisan dharka qurqurxoon ee reer Yaman iyo khamiisyo iyo jookhyo, lehna xarragada reer Banuu Al Xaarithah bin Kacb. Qaar ka mid ah asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calyhi Wasallam, oo arkay maalintaas waxay yiraahdeen: "Wafdi la mid ah ma aanan arag." Markaasaa waxaa soo galay waqtiga salaaddooda. Markaasey keceeen oo Masjidka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, salaaddooda u istaageen oo ay tukadeen. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaau Calayhi Wasallam, wuxuu

asxaabtiisa ku yiri**: "Dacuuhum"**, oo macneheedu yahay: "Daaya." Markaase xagga qorrax kasoo bax u tukadeen."

Magacda wafdiga Najraan iyo caqiidadooda iyo siday Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ula murmeen

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Magacda afar iyo toban nin oo u talisa waxaa weeye: (Kow) Al Caaqibu, magaciisuna yahay Cabdu Al Masiixu. (Labo) Al Sayyidu, magaciisuna yahay Al Ayhamu. (Saddex) Abuu Xaarithah bin Calqamah oo u dhashay Banuu Bakr bin Waa'il. (Afar) Aws. (Shan) Al Xaarithu. (Lix) Zayd. (Toddoba) Qays. (Sideed) Yaziid. (Sagaal) Nubayh. (Toban) Khuwaylid. (Kow iyo toban) Camr. (Labo iyo toban) Khaalid. (Saddex iyo toban) Cabdu Allaahi. (Afar iyo toban) Yuxannas. Afar ito tobankaas nini waxay madax u ahaayeen wafdi lixdan nin ka kooban. Raggaas waxaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kala hadlay saddex nin oo kala ah: (Kow) Abuu Xaarithah bin Calqamah, (Labo) Al Caaqibu Cabdu Al Masiixu, iyo (Saddex) Al Ayhamu, Al Sayyidu. Saddexdaas caqiidadoodu waxay ahayd krishtaanka Al Maalikiyyah oo ah tan boqorka Rooma. Isla markaasna waxay isku khilaafsan yihiin qodobbo diinta ka mid ah, oo qaar waxay yiraahdeen Ciise waa Ilaahay. Qaarna waxay yiraahdeen Ciise waa wiilka Ilaahay. Qaar saddexaadna waxay yiraahdeen Ciise waa mid saddex ilaah ka mid ah. Sidaas ayayna krishtaanku yiraahdaan oo diintooda ah. Hadalkooda ah "Ciise waa Ilaahay" waxay xujjo uga dhiganayaan "inuu maydka soo nooleeyey, bukaankana uu bogsiiyey, ghaybka maqanna uu ka warramay, uuna dhoobo shimbir ka sameeyey oo uu markaas intuu afuufay ay shimbir duuleysa noqoneyso." Intaasoo idilna waxay ku ahaadeen amarka Ilaahay Tabaaraka wa Tacaalaa oo Aayadda kow iyo labaatanaad ee Suuratu Maryama ku yiri: **"Wa li najcalahu Aayatan lilnnaasi"** oo maneheedu yahay: "Iyo inaad dadka aayad uga dhigno." Hadalkooda ahna (Ciise waa wiilka Ilaahay" waxay xujjo uga dhiganayaan ayagoo oranaya inuusan aabe la yaqaanno lahayn, isagoo markuu dhashayna hadlay, taasoo uusan jirin qof banii Aadan ah oo isaga hortiis yeelay. Hadalkoodana ah "Ciise waa mid saddex ilaah ka mid ah", waxay xujjo uga dhiganayaan inuu Ilaahay yiri: "Waan sameynnay", "Waan amarnay", "Waan abuurnay", "Waan xukunnay". Markaasey waxay yiraahdeen: "Hadduu Ilaahay Mid keli ah ahaan lahaa ma uusan yiraahdeen waxaan ahayn: "Waa sameeyey", "Waan xukumay", "Waan amray", "Waan abuuray". Laakiin waa isaga Ilaahay ah iyo Ciise ina Maryama. Hdalkoodaasna waxaa kasoo degay Quraan.

Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam iyo wafdiga krishtaanka ah ee Najraan

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markay labadooda caalin la hadleen ayuu wuxuu labadooda ku yiri: **"Aslamaa!"** oo macnihiisu yahay: "Labadiinnu islaama!" Waxay labadoodu yiraahdeen: "Hore ayaan u islaannay." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Innakumaa lam tuslimaa. Fa aslimuu."** Oo macnihiisu yahay: "Labadiinnu ma aydnaan islaamine, islaama!" Waxay yiraahdeen: "Bal haa oo adiga hortaa ayaan islaannay." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Kath-thabtumaa! Yamnaccakumaa mina al islaami ducaa'ukumaa liAllaahi waladan, wa cibaadatukumaa al saliiba, wa aklukumaa al khinziira."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Labadiinnuba been ayaad sheegteen. Waxaana islaamka idinka hortaagan inaad Ilaahay wiil u nisbeyseen, iyo inaad krishtada caabuddaan iyo inaad doofaarka cuntaan." Waxay yiraahdeen: "Hadaba Muxammadow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ciise aabihiis waa kee?" Markaasey

dhammaan Ciise kala murmeen, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aamusay oo uusan u jawaabin."
Al Baghawii wuxuu wariyay: "Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri: **"Alastum taclamuuna annahu laa yakuunu waladun illaa wa huwa yashbahu abaahu?"** oo macnihiisu yahay: "Soo ma ogidin inuusan jirini wiilu ee waa kan illaa aabihiis u eg?" Waxay yiraahdeen: "Haa." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Alastum taclamuuna anna Rabbanaa Xayyuun laa yamuutu wa anna Ciisaa ya'tii calayhi al fanaa'u?"** oo macnihiisu yahay: "Soo ma ogodin inuu Rabbigeen nool yahay uusanna weligiis dhimanayn iyo inuu Ciise dhiman doono?" Waxay yiraahdeen: "Haa". Wuxuu Sallaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Alastum taclamuuna anna Rabbanaa Qayyimun calaa kulli shay'in yaxfathahu wa yarzuqahu?"** oo macnihiisy yahay: "Miyeednaan ogayn inuu Rabbigeen u taagan yahay oo u qumo wax walba, uuna dhawro uuna rizqi siiyo?" Waxay yiraahdeen: "Haa." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Fahal yamliku Ciisaa min thaalika shay'an?"** oo macnihiisu yahay: "Ciise intaas wax ma ka leeyahay oo ka karaa?" Waxay yiraahdeen: "Maya." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Alastum taclamuuna anna Allaaha la yakhfaa calayhi shay'un fii al ardi wa laa fii Al Samaa'i?"** oo macnihiisu yahay: "Soo ma ogidin inayan jirin wax Ilaahay ka qarsoon oo arliga dhexdiisa ku jira iyo waxaa Samaawaadka dhexdooda ku jiraba?" Waxay yiraahdeen: "Haa." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Fa hal yaclamu Ciisaa min thaalika illaa maa calima?"** oo macnihiisu yahay: "Ciise wax waxaas ka mid ah ma ogyahay oo aan ahayn wuxuu ogyahay?" Waxay yiraahdeen: "Maya." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Fa inna Rabbanaa sawwara Ciisaa fii al rraximi kayfa shaa'a, wa Rabbunaa la ya'kulu wa laa yashrabu!"** oo macnihiisu yahay: "Miyeydnaan ogayn inuu Rabbigeen Ciise ugu masiwwiray, waa ku abuuraye, ilmo galeenka hooyadiis siduu doonay, iyo Rabbigeen inuusan cunno cunin, sharaabna uusan cabin?" Waxay yiraahdeen: "Haa." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Alastum taclamuuna anna Ciisaa xamalathu ummuhu kamaa taxmilu al mar'atu, thumma wadacthu kamaa tadacu al mar'atu waladahaa, thumma ghuthiya kamaa yughthaa al sabiyyu, thumma kaana yadhcimu wa yashrabu wa yaxdithu?"** oo macnihiisu yahay: "Soo ma ogidin inay Ciise hooyadiis siday haweenku uurka ugu qaadaan oo kale, una dhashay siday haweentu cunuggeeda u dhasho oo kale, iyo in cunno loo siiyey sida sida wiilasha yaryar cunnada loo siiyo oo kale, kaddibna uu cunno cunay, waxna cabbay, uuna musqusha galay? (oo uu xaar iyo kaadi dhigay)?" Waxay yiraahdeen: "Haa." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Fa kayfa yakuunu haathaa kamaa zacamtun?"** oo macnihiisu yahay: "Hadaba sideebay ku ahaan kartaa sidaad adinku leedihiin?" Markaasey aamuseen oo ayan u jawaabin Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Markaasuu Ilaahay Tacaalaa kasoo dejiyay ilaa dhawr iyo sideetanka Aayadood ee Suuratu Aali Cimraana ugu horreeysa.
Markay Aayaadkaan soo degeen ayuu Rasulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu raggaas u yeeray oo uu dushooda ku akhriyay. Kaddibna markay krishtaanku diideen, ayuu Ilaahay Tacaalaa wuxuu Rasuulkiisa amray inuu wafdigaas la habaartamo, wuxuuna Aayadda kow iyo lixdanaad ee Suuratu Aali Cimraana ku yiri: **"Faman xaajjaka fiihi min bacdi maa jaa'aka mina al cilmi faqul tacaalaw nadcu abnaa'anaa wa abnaa'akum wa nisaa'anaa wa nisaa'akum wa anfusanaa wa anfusakum thumma nabtahil fanajcal llacnata Allaahi calaa al kaathibiina.(61)"**
Aayadda macneheedu waxaa weeye: "Qofkii kugula murma amarka Ciise iyo runta, kaddib markuu kuu yimid cilmiga ah inuu Ciise yahay addoonka Ilaahay iyo Rasuulkiisa, waxaad ku tiraahdaa: "Kaalaya aan u yeerno caruurteenna iyo adinka caruurtiinaba, iyo haweenkeenna iyo adinka haweenkiinnaba, iyo nafafkeenna iyo nafafkiinna. Markaas aan ducada ku fogaanno oo aan Ilaahay isku jejebinno oo aan

habaartanno oo aan lacnadda Ilaahay yeelno dusha kuweenna beenlowyaalka ah." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu soo watay Al Xasan iyo Al Xusayn iyo hooyadood gabadhiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Faadumo iyo Calii, oo Carabtu waxay ina adeerka ku magacawdaa "Naftayda", oo ilmo adeerradiisa ayaa daafaca oo cadawga ka celiya oo naftiisa ilaaliya." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku yiri inay ku habaartamaan inuu Ilaahay lacnado labadooda kii been sheegaya, uuna Aayadda dushooda ku akhriyay.

Krishtaanka oo la habaartanka Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ka cabsaday

Markaasey krishtaanku la habaartanka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam ka cabsadeen, ayna ku yiraahdeen: "Abaa Al Qaasimow, waan so tashaneynnaa, kaddibna aan go'aankeenna kuula imaaneynnaa." Markaasey ka tageen Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayna Al Caaqibu la tashadeen, kaasoo la taliyohooda koowaad ahaa, ayna taladiisa weydiiyeen waxay la habaartankaas ka yeeli lahaayeen. Al Caaqibu wuxuu ku yiri: "Krishtaanow, adinku si fiican ayaad u ogtihiin inuu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Nabi iyo Rasuulka Ilahay yahay, wuxuuna idiin keenay caddayn kama dambays ah ee ku saabsan ninkaan aad caabuddaan ee ah Ciise ina Maryama. Waxaadna ogaataan inuusan jirin dad Nabi la habaartamay ee waa illaa kuwa odayadooduna ay dhintaan, caruurtooduna ayan korin oo ay la'daan. Haddaad la habaartantaanna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xididdadaa la idiin siibayaa. Marka, haddaad ku adkeysataan inaad diintiinna ku taagnaataan oo aad Ciise caabuddaan hadaba ninkaan, Sallaa Allaau Calayhi Wasallam, isaga taga oo dalkiinna ku laabta." Markaasey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimaadeen una sheegeen inay go'aansadeen inayan la habaartamin, ayna isaga tagaan isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam iyo Diintiisa, ayna guryohooda dib ugu laabtaan.

Krishtaanka oo oggolaaday inay jizyo bixiyaan

Waxayna oggolaaadeen inay jizyo bixiyaan. Waxayna jeclaan lahaayeen, ayay yiraahdeen, inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku daro nin uu aaminsan yahay oo ayaga dhexdooda ku kala xukuma umuuraha maaliyadda oo ay isku khilaafaan.

Cumar iyo Amiinu Haathi Al Ummati Abuu Cubaydah Caamir bin Al Jarraax Al Fihriyyi

Muxammad bin Jacfar wuxuu yiri: "Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"i'ituunii al cashiyyata abcath macakum al qawiyya al amiina"**, oo macnihiisu yahay: "Galabta ii imaada waxaan idinku darayaa nin karti leh oo aamin ah." Cumar bin Al Khadh-dhaab, Allaha raalli ka noqdee, wuxuu yiri: "Waligay ma doonin xil la ii dhiibo oo aan kaas ka jeclahay, waxaanna rajaynayey in la ii dhiibo (si uu uga helo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, inuu yahay nin karti leh oo aamin ah). Markaasaan salaadda duhur tegey waqtigoo kulul, oo markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kasoo jeestay ayuu wuxuu fiiriyey xagga midigtiisa iyo xagga bidixdiisa. Markaasaan aniguna ku istaagay dhererkeyga oo idil si uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ii arko. Nabiguse, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, indhihiisuu ku raadiyay ilaa uu ka arko Abuu Cubaydah bin Al Jarraax oo uu u yeeray, kuna yiri: **"Ukhruj macahum. Fa aqdi baynahum bi al xaqqi fiimaa ikhtalafuu fiihi"**, oo macnihiisu yahay: "Raac oo si caddaaladi ku

dheehan tahayna u kala xukun waxay isku khilaafaan." Cumar wuxuu yiri: "Abuu Cubaydah ayaa raacay oo sidaas kartidii iyo aaminnimadiiba la tegey."

Quraanka kasoo degay wafdiga Najraan

Ilaahay Tacaalaa wuxuu hadalkooda iyo siduu dhammaantiis amarkoodu isku khilaafay kasoo dejiyay inta hore ee Suuratu Aali Cimraana ilaa dhawr iyo sideetan Aayadood, wuxuuna Jalla wa Cazza yiri: **"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Aliflaammiim**(1)**Allaahu laa ilaaha illaa Huwa Al Xayyu Al Qayyuumu**(2)**Nazzala calayka Al Kitaaba bi al xaqqi musaddiqan llimaa bayna yadayhi wa anzala Al Ttawraata wa Al Injiila**(3)**Min qablu hudan llilnnaasi wa anzala Al Furqaana inna allathiina kafaruu bi Aayaati Allaahi lahum cathaabun shadiidun wa Allaahu Caziizun Thuu intiqaamin**(4)**Inna Allaaha laa yakhfaa calayhi shay'un fii al ardi wa laa fii Al Ssamaa'i**(5)**Huwa Allathii yusawwirukum fii al arxaami kayfa yashaa'u laa ilaaha illaa Huwa Al Caziizu Al Xakiimu**(6)**Huwa Allathii anzala calayka Al Kitaaba minhu Aayaatun Mmuxkamaatun hunna ummu Al Kitaabi wa ukharu mutashaabihaatun fa ammaa allathiina fii quluubihim zayghun fa yattabicuuna maa tashaabaha minhu ibtighaa'a al fitnati wa ibtighaa'a ta'wiilihi wa maa yaclamu ta'wiilahu illaa Allaahu wa al rraasikhuuna fii al cilmi yaquuluuna aamannaa bihi kullun mmin cindi Rabbinaa wa maa yath-thakkaru illaa uuluu al albaabi**(7)**Rabbanaa laa tuzigh quluubanaa bacda ith hadaytanaa wa hab lanaa min lladunka raxmatan Innaka Anta Al Wahaabu**(8)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Aliflaammiim(1)Allaahu, mana jiro ilaah aan Isaga ahayn. Waana Midka nool oo khalqiga maamula, oo waa tilmaan uu leeyahay(2)Adiga korkaaguu kusoo dejiyay Kitaabka Quraanka ah si run ah, Quraankoo rumaynaya kutubbadii isaga ka horreeyey, oo sidoodii oo kale xambaarsan tawxiidka iyo warka Nabinnimada iyo akhbaar iyo shareeco. Isagaana soo dejiyay Tawraadda iyo Injiilkaba(3)Hore ayuuna labadoodaas usoo dejiyay. Tawraadda iyo Injiilka iyo Furqaankana, oo ah Quraanka, waxay dadka u yihiin hanuun ay ku hanuunaan. Wuxuuna soo dejiyay Al Furqaanu, oo ah kan runta iyo beenta baadhilka ah kala saara, ahna Quraanka. Kuwa Aayaadka Ilaahay ku gaaloobayna waxaa u sugnaaday cathaab xoog leh. Ilaahayna waa Caziiz lagama adkaade ah, aargoosina u saaxiib ah(4)Ilaahay kama qarsoona shay'na ku sugan arliga dhexdiisa iyo Samada dhexdeedaba(5)Ilaahay waa Midka idinku abuura ilmo galeenka dhexdeediisa siduu doono. Ma jiro ilaaha aan Isaga ahayn, waana Caziiz Xikmo miiran ah(6)Ilaahay waa Midka adiga korkaaga ku soo dejiyay Kitaabka. Kitaabkana waxaa ka mid ah Aayado ujeedadoodu cadcadyihiin oo tifaftiran yihiin, oo ayan bannaanayn inuu dadku siday doonaan u qaataan, maadaama ayan fasiraad u baahnayn. Aaayaadkas sidaas u cadcadi waa asalka Kitaabka, ayna ka mid yihiin xalaasha iyo xaaraanta, Aayaadka kuwo kale nasakhay, xuduudda iyo faraa'idka iyo kuwa lagu dhaqmo, kuwa la rumeeyo oo lagu camal falo. Waxaa kaloo Kitaabka ka mid ah Aayado isu egeg, oo uusan macnohoodu caddayn, sida Aayadaha la nasakhay, kuwa horreeyey iyo kuwa dambeeyey, tilmaamihiisa, qaybihiisa, kuwa la rumeeyo aanse lagu camal falin. Sidaas ayaa ibnu Cabbaas laga wariyay. Markaasey kuwa quluubtooda ay shaki iyo runta ka iilashadeeda, waa ka leexadkeedee, ku jirto waxay raacayaan kuwa isu egeg oo Kitaabka ka midka ah. Caa'ishah waxay tiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa Aayaddaan akhriyay **Huwa Allathii anzala calayka Al Kitaaba minhu Aayaatun Mmuxkamaatun hunna ummu Al Kitaabi wa ukharu mutashaabihaatun fa ammaa allathiina fii quluubihim zayghun fa yattabicuuna maa tashaabaha minhu ibtighaa'a al fitnati wa ibtighaa'a ta'wiilihi wa maa yaclamu ta'wiilahu illaa Allaahu wa al rraasikhuuna fii al cilmi yaquuluuna**

aamannaa bihi kullun mmin cindi Rabbinaa wa maa yath-thakkaru illaa uuluu al albaabi(7), markaasuu wuxuu yiri: **"Fa ithaa ra'ayta allathiina yattabicuuna maa tashaabaha minhu fa uulaa'ika allathiina sammaa Allaahu fa axtharuuhum."** Xadithka macnihiisu waxaa weeye: "Marka, markaad aragto kuwa kitaabka ka raacaya Aayaadka isu egeg, ogow kuwaasu waa kuwuu Ilaahay magacaabay, ee ka digtoonaada oo iska jira." Kuwaasu waxay Aayaadka isu egeg u raacayaan doonid ay fitno, oo ah gaalnimo ay doonayaan daraadeed, iyo doonid ay doonayaan inay Aayadahaas fasiraan oo cilmigoda ogaadaan. Tafsiirka Aayadahaan isu egegna ma uusa oga Ilaahay mooye. Waxaa kaloo og kuwa cilmiga qoto dheer u leh, oo waxaa ibnu Cabbaas laga wariyay inuu yiri: "Anigu waxaan ka mid ahay kuwa cilmiga raasikhiinta ku ah oo sida qotada dheer u yaqaanna." Culummada badankooduna waxay yiraahdeen, ayuu Al Baghawii yiri, wawgu wa waw xiriirin oo macnuhu waxaa weeye: "Tafsirka Aayadahaasna ma oga axad aan Ilaahay ahayn, kuwa cilmiga raasikhiinta ku ahna waxay yiraadaan: "Waan aaminnay, kulligoodna waxay ka yimaadeen xagga Rabbigeen", oo sidaasaa laga wariyay Ubayya bin Kacb iyo Caa'ishah iyo Curwah ibnu Al Zubayr, iyo ibnu Cabbaas iyo Al Xasan iyo Taabiciinta intooda badan. Kumana waano qaato Quraanka inta caqliga leh mooyee(7)Kuwaas cilmiga raasikhiinta ku ahi waxay yiraahdaan: "Rabbigeenow, quluubteenna ha ka leexin runta iyo hanuunka, sidaad uga iishay kuwa uu quluubtooda iilasho ku jirto iyo shaki, kaddib markaad na hanuunisay oo Diintaada na waafajisay iyo rumaynta Aayaadka cadcad iyo kuwa isu egegba. Xaggaagana naga sii hibo ahaan raxmad, waa naxariise, oo ah inaad iimaanka iyo hanuunka nagu sugtid, oo Adigaa ah Midka wax hibeeyee." Al Baghawii wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Maa min qalbin illaa wa huwa bayna asbacayni min asaabici Al Rraxmaani. Ithaa shaa'a an yaziighahu azaaghahu, wa in shaa'a an yuqiimahu aqaamahu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ma uu jiro qalbi ee waa illaa kan ku dhex jira laba farood oo faraha Al Rraxmaanu ka mid ah. Markaasuu hadduu doono inuu leexiyo ayuu leexiyaa, hadduu doonana inuu toosiyo wuu toosiyaa." Wuxuu kaloo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasalam, yiri**: "Allaahumma yaa muqalliba al quluubi thabbit quluubanaa calaa Diinika."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahayow, Midka quluubta gadgaddiyow, quluubteenna Diintaada korkeeda ku sug."(8)."

Ilaah kale ma jiro aan Ilaahay ahayn

Kaddibna Ilaahay Tacaalaa wuxuu Aayadaha sideed iyo toban ilaa labaatan ee Suuratu Aali Cimrana ku yiri: **"Shahida Allaahu annahu laa ilaaha illaa Huwa wa al malaa'ikatu wa uuluu al cilmi qaa'iman bi al qisdhi laa ilaaha illaa Huwa Al Caziizu Al Xakiimu(18)Inna Al Ddiina cinda Allaahi al islaamu wa maa ikhtalafa allathiina uutuu Al Kitaaba illaa min bacdi maa jaa'ahum al cilmu baghyaa baynahum wa man yakfur bi Aayaati Allaahi fa inna Allaaha sariicu al xisaabi(19)Fa in xaajjuuka faqul aslamtu wajhiya Lillaahi wa mani ittabacani wa qul llillathiina uutuu Al Kitaaba wa al ummiyyiina a'aslamtum fa in aslamuu fa qadi ihtadaw wa in tawallaw fa innamaa calayka al balaaghu wa Allaahu Basiirun bi al cibaadi(20)."** Aayadda macneheedu waaxaa weeye: "Ilaahay wuxuu marag ka yahay inuusan jirin ilaah aan Isaga ahayn." Al Baghawii wuxuu yiri: "Aayaddaani waxay kusoo degatay Wafdiga Najraan. Al Kalbiyyu wuxuu yiri: "Laba xabar oo culummada Shaam ka mid ah ayaa Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid. Markaasay markay Al Madiinah arkeen ayuu wuxuu midkood saaxiibkiis ku yiri: "Magaaladaani waxay u egtahay oo ay leedahay sifooyinka magaalada uu kasoo bixi doono Nabiga aakhiru zamanka." Markaasey markay Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, usoo galeen ayay sifooyinkiisa ay haysteen ku aqoodeen. Markaase waxay

ku yiraahdeen: "Adigu ma Muxammad ayaad tahay?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Nacam"** oo ah "Haa." Waxay hadana labadoodu ku yiraahdeen: "Adigu Axmadna ma tahay?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Anaa Muxammad wa Axmad"**, oo macnihiisu yahay: "Anigu waxaana ahay Muxammad iyo Axmad." Waxay ku yiraahdeen: "Annagu waxbaan ku weydiineynnaa, oo haddaad no sheegtid waan ku aaminaynnaa kuna rumayneynnaa." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Nacam"** oo ah "Haa." Markaasey waxay yiraahdeen: "Hadaba noo sheeg maragga ugu weyn oo Kitaabka Ilaahay Cazza wa Jalla ku jira." Markaasuu Ilaahay Cazza wa Jalla Aayddaan soo dejiyay. Aayadda macneheeduna waa sidatan: "Ilaahay wuu caddeeyey, oo markhaati kaco waa caddayn wax la caddeeyo, inuusan jirin ilaah aan Isaga ahayn. Malaa'igtuna sidaas ayay marag ka yihiin oo ay qirayaan. Kuwa cilmiga u saaxiibka ahna, oo ah Anbiyada, waxay ayaguna qirayaan inuusan jirin ilaah aan Ilaahay ahayn. Ilaahay wuxuu u taagan yahay maamulidda khalqigiisa. Ma jiro ilaah aan Isaga ahayn, waana Al Caziizu Al Xakiimu"(18)."

Ilaahay agtiisa Diinta runta ahi waa islaamka

Ilaahay wuxuu Aayadda sagaal iyo tobnaad ee Suuratu Aali cimraana ku yiri: **"Inna Al Ddiina cinda Allaahi al islaamu wa maa ikhtalafa allathiina uutuu Al Kitaaba illaa min bacdi maa jaa'ahum al cilmu baghyaa baynahum wa man yakfur bi Aayaati Allaahi fa inna Allaaha sariicu al xisaabi(19)**
Diinta uu Ilaahay raalliga ka yahay oo saxda ah Ilaahay agtiisa waa Diinta Islaamka. Taas ayuu Ilaahay marag ka yahay. Al Baghawii wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Yujaa'u bi saaxibihaa yawma al qiyaamati fa yaquulu Allaahu: "Inna li cabdii haathaa cindii cahdan wa anaa axaqqu man waffaa bi al cahdi, adkhiluu cabdii Al jannata."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Qofka yiri oo rumaysan laa ilaaha illaa Allaahu ayaa maalinta qiyaame la keenayaa, markaasu Ilaahay wuxuu lwwyahay: "Addoonkeygu wuxuu agteyda ku leeyahay heshiis, Anigaana axad walba uga xaq badan inuu heshiiskiisa oofiyo. Addoonkeyga jannada geliya." Iskumana ayan khilaafin Nabinnimada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kuwa Kitaaba la siiyey kaddib markay kutubtooda ugu yimaadeen sifooyinkiisa mooyee. Waxayna sidaas u yeeleen doonid ay doonayaa inay boqorro noqdaan iyo madaxweynayaal. Qofkana ku gaalooba Aayaadka Ilaahay, ha ogaado inay Ilaahay xisaabtiisu, waa ciqaabtiise, ay degdeg badan tahay(19)Marka hadday kugula murmaan Diinta Muxammadow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaad tiraahdaa: "Waxaan isku dhiibay Ilaahay keligiis xagga qalbigayga iyo carrabkayga iyo jirkaygaba, oo wajigu waa xubinta qofka ugu karaamo badan oo cidduu isku dhiibo ayuu jirkoo idil isku dhiibay. Qofka i raacana wuxuu u islaamay sidaan anigu u islaamay oo kale. Kuwa kitaabka la siiyeyna waxaad ku tiraahdaa iyo Carabtaba: "Ma islaamteen oo aad is dhiibteen? Islaama!" Markaas hadday islaamaan way hanuuneen. Haddayse jeestaan adiga xilkaagu waa gaarsiinta Risaalada, oo korkaaga ma aha inay hanuunaan. Ilaahayna wuu u jeedaa addoommadiisa, kuwa rumeeyey iyo kuwaan rumayn. Al Baghawii wuxuu wariyay: "Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ehelu kitaabka Aayaddaan ku dul akhriyay. Markaasey waxay yiraahdeen: "Waan islaannay." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yuhuudda ku yiri: **"A tash-haduuna anna Cuzayran cabduhu wa Rasuuluhu?"** oo macnihiisu yahay: "Marag ma ka tihiin inuu Cuzayr addoonkiisa iyo Rasuulkiisa yahay?" Markaasey waxay yiraahdeen: "Ilaahay ayaan ka magan galnay inuu Cuzayr Calayhissalaamu addoon yahay." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu krishtaanka ku yiri: **"A tash-haduuna anna Ciisaa kalimatu Allaahi wa cabduhu wa Rasuuluhu?"** oo macnihiisu yahay: "Marag ma ka tihiin inuu

Ciise yahay kalimada Ilaahay iyo addoonkiisa iyo Rasuulkiisa?" Markaasey waxay yiraahdeen: "Ilaahay ayaan ka magan galnay inuu Ciise addoon yahay."(20)."

Quraanka kasoo degay waxay yuhuudda iyo krishtaanku hindiseen

Markaasuu Ilaahay labada qolo ee ehelu kitaabka ahba isku daray, uuna xusay waxay faleen oo dambi ah ayna hindiseen yuhuudda iyo krishtaanku, wuxuuna Aayadaha kow iyo labaatan ilaa lix iyo labaatan ee Suuratu Aali Cimraana ku yiri: **"Inna allathiina yakfuruuna bi Aayaati Allaahi wa yaqtuluuna Al Nnabiyyiina bi ghayri xaqqin wa yaqtuluuna allathiina ya'muruuna bi al qasdhi mina al nnaasi fa bash-shirhum bi cathaabin aliimin**(21)**Uulaa'ika allathiina xabidhat acmaaluhum fii al ddunyaa wa al aakhirati wa maa lahum mmin nnaasiriina**(22)**Alam tara ilaa allathiina uutuu nasiiban mina Al Kitaabi yudcawna ilaa Kitaabi Allaahi li yaxkuma baynahum thumma yatawallaa fariiqun minhum wa hum mucriduuna**(23)**Thaalika bi annahum qaaluu lan tamassanaa al nnaaru illaa ayyaaman macduudaatin wa gharrahum fii diinihim mmaa kaanuu yaftaruuna**(24)**Fa kayfa ithaa jamacnaahum li yawmin llaa rayba fiihi wa wuffiyat kullu nafsin mmaa kasabat wa hum laa yuthlamuuna**(25)**Quli Allaahumma Maalika Al Mulki tu'tii al mulka man tashaa'u wa tanzicu al mulka mimman tashaa'u wa tucizzu man tashaa'u wa tuthillu man tashaa'u bi yadika al khayru Innaka calaa kulli shay'in qadirun**(26)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Kuwa ku gaaloobay Aayaatka Ilaahay, oo Quraanka ah, Anbiyadana xaq darro ku dilaya siday yuhuuddu Anbiyada badan u dileen (Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalla, uu yiri: **"Yaa Abaa Cubaydah qatalat Banuu Israa'iila thalaathatan wa arbaciina Nabiyyan fii awwali al nnahaari fii saacatin waaxidatin, fa qaama mi'atun wa ithnaa cashara rajulan min cubbaadi Banii Israa'iila fa amaruu man qataluuhum bi al macruufi wa nahuuhum cani al munkari, fa qataluuhum jamiican fii aakhiri al nnahaari fii thaalika al yawmi"** oo macnihiisu yahay: "Abaa Cubaydow, Banuu Israa'iil waxay dishay saddex iyo afartan Nabi maalinta gelinkeeda hore ayna ku dishay hal saac dhexdeeda. Markaasaa waxaa kacay ragga suusuuban oo cibaadada ku dheer ee reer Banii Israa'iil markaasey kuwa dilay wax san fareen xumaantana ka reebeen. Markaasey dhammantood dileen maalinta gelinkeeda dambe ee isla maalintaas") , dilayana kuwa caddaaladda faraya oo dadka ka mid ah siday yuhuuddu fashay, kuwaas waxaad ugu bishaareysaa cathaab xanuun badan(21)Kuwaasu waa kuwa uu camalkoodu buray oo burburay oo aan ajar laga siineyn, adduun iyo aakhiraba. Mana ayan laha cid u gargaari karta(22)Bal arag kuwa Kitaabka nasib laga siiyey, oo ah yuhuudda, oo loogu yeerayo Kitaabka Ilaahay in dhexdooda lagu xukumo oo ay qayb ka mid ahi markaas kaddib ka jeesanayso ayagoo diidan(23)Waxayna sidaas u yeelayaan ayagoo yiri: "Naartu na taaban mayso intaan ahayn ayyaamu la tiriyey" waxaana diintooda ka dagay beentay abuuranayeen, ayagoo damcay waxaan waxba ka ahaaneyn(24)Hadaba sideebuu xaalkoodu ahaanayaa ama maxay sameynayaan maalin aan imaatinkeeda shaki ku jirin, oo ah Maalinta Qiyaame, oo markaas naf walba la siiyo abaalka waxay adduunkaan ku kasbatay oo khayr ama shar ah, ayagoo aan la dulminayn oo aan xasanaadkoodana wax laga naaqusayn, dambiyadoodana aan wax loogu darayn(25)Waxaad tiraahdaa: "Ilaahayow Adigaa leh oo hantay addoommada iyo waxay leeyihiinba, waxaadna Nabinnimada siisaa ciddaad doontid, oo ah Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, mulkigana waxaad ka siibtaa ciddaad doontid, sida looga siibay Abuu Jahl iyo gaaladii Quraysheed madaxdooda, waxaadna Cizzi siisaa ciddaad doontid, waxaadna dulleysa ciddaad doontid. Khayr oo dhanna wuxuu ku jiraa gacantaada, iyo sharba, Adiguna wax walba waad kartaa(26)."

Quranka kasoo degay inay mu'miniintu kuwaas ka digtoonaadaan

Kaddibna Ilaahay wuxuu wuxuu wacdiyay oo uu digtoonaada yiri mu'miniinta, wuxuuna Aayadaha kow iyo soddon iyo laba iyo soddon ee Suuratu Aali Cimraana ku yiri: **"Qul in kuntum tuxibbuuna Allaaha fa ittabicuunii yuxbibkumu Allaahu wa yaghfir lakum thunuubakum wa Allaahu Ghafuurun Raxiimun**(31)**Qul adhiicuu Allaaha wa Al Rrasuula fa in tawallaw fa inna Allaaha la yuxibbu al kaafiriina**(32)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Waxaad tiraahdaa: "Haddaad tihiin kuwo Ilaahay jecel aniga i raaca, markaasuu Ilaahay adinkana idin jeclaanayaaye, dambiyadiinnana dhaafayaaye. Ilaahayna waa Ghafuurun oo dambi dhaaf miiran ah, Raxiimun oo naxariis miiran ah(31)Waxaad tiraahdaa Ilaahay adeeca iyo Rasuulka, hadday jeestaanna oo diidaan Ilaahay ma jecla gaalada(32)."

Quraanka kasoo degay abuurista Ciise

Markaasuu Ilaahay wuxuu u sheegay amarka Ciise, Calayhissalaamu, iyo siduu ku bilawday wuxuu Ilaahay la doonay, wuxuuna Aayadaha saddex iyo soddon ilaa toddoba iyo soddon ee Aali Cimraana ku yiri: **"Inna Allaaha isdhafaa Aadama wa Nuuxan wa Aala Ibraahiima wa Aala Cimraana calaa al caalamiina**(33)**Thurriyyata bacduhaa min bacdin wa Allaahu samiicun caliimun**(34)**Ith qaalat imra'atu Cimraana Rabbi innii nathartu laka maa fii badhnii muxarraran fataqabbal minnii Innaka Anta Al Ssamicu Al Caliimu**(35)**Falammaa wadacathaa qaalat Rabbi inni wadactuhaa unthaa wa Allaahu aclamu bimaa wadacat wa laysa al th-thakaru ka al unthaa wa innii sammaytuhaa Maryama wa innii uciithuhaa Bika wa thurriyyatahaa mina al sh-shaydhaani al rrajiimi**(36)**Fataqabbalahaa Rabbuhaa biqabuulin xasanin wa anbatahaa nabaatan xasanan wa kaffalahaa Zakariyyaa kullamaa dakhala calayhaa Zakariyyaa al mixraaba wajada cindahaa rizqan qaala yaa Maryamu annaa laki haathaa qaalat huwa min cindi Allaahi inna Allaaha yarzuqu man yashaa'u bighayri xisaabin**(37)**."** Aayadaha macnohoodu waxaa weeye: "Ilaahay wuxuu ka doortay Aadan, Nuux, ehelka Ibraahiim iyo ehelka Cimraan caalamiinta(33)Waana farac qaarkood qaar ka yimid, Ilaahayna waa Midka wax walba maqla, wax walbana ogsoon(34)Xusuuso markay tiri haweeneydii Cimraan: "Rabbiyow, waxaan kuu nadray waxa uurkeyga ku jira inuu xor u ahaado (cibaadadaada) ee iga aqbal, Adiga unbaa wax walba maqla oo wax walbana oge(35)Markaase markay gabar dhashay ayay waxay tiri: "Rabbiyow, waxaan dhalay dheddig", Rabbina waa waa ogyahay waxay dhashay, labna la mid aha dhaddig, "waxaanna u bixiyey Maryama, waxaanna kaa magan geliyay ayada iyo fareceedaba shaydaanka la dhagaxyeeyey oo la fogeeyey(36)Wuxuuna ka aqbalay Rabbigeed aqbal fiican, wuxuuna koriyay korin fiican. Waxaana kafaalo qaaday Zakariyyaa, oo mar kastoo uu ugu galana qolkay deggan tahay oo masjidka dhexdiisa ku yaalla, wuxuu ka helaa oo uu ku arkaa agteeda rizqi, waa cunnee. Markaasuu wuxuu ku yiraahdaa: "Xaggee buu rizqigaani kaaga yimid Maryamoy?" Waxay tiri: "Wuxuu ka yimid Ilaahay agtiisa, Ilaahayna wuu u arzuqaa cidduu doono xisaab la'aan(37)."

Qoraalka Soddonaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam, ee Abuu Dumayrah

Al Zarqaanii wuxuu yiri: "Al Bukhaarii wuxuu kitaabkiisa taariikhda ku wariyay, siday u wariyeen Al Xasan bin Abii Sufyaan iyo ibnu Mundah kana wada wariyeen ibnu Abii Thu'ayb oo ka wariyay Xusayn bin Cabdu Allaahi bin Dumayrah (waa daadka ku xiga saadka) oo ka wariyay aabihiis oo ka wariyay awoowihiis Al Dumayrii Allaythii inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calyhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam soo ag maray Ummu Dumayrah, ahaydna saxaabiyad kuna xusan Al Isaabah kuna wariyay kuniyadeeda oo magaceedu ma uusan xusin, oo booyeysa, markaasuu yiri: **"ajaa'icatun anti am caariyatun anti?"** oo macnihiisu yahay: "miyaad gaajoon tahay oo aan markaas cunno ku siiyay mase waad qaawan tahay oo aan kuu arrotiraa?" Markaasay waxay tiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wiilkayga ayaa la iga qaatay oo nala kala geeyey (oo waxay ka mid ahaayeen qabiil Carbeed oo lasoo qafaalay markaasaa ayaduna waxay gashay sahamka nin wiilkeeduna oo cunug yar ahaa sahamka nin kale siduu ibnu Mundah qisadooda u wariyay oo waxay ka mid ahaayeen dad Carab oo uu Ilaahay Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam, fay ahaan ugu soo wareejiyay dagaal la'aan)." Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri: **"laa yufarriqu bayna al waalidati wa waladihaa"** oo macnihiisu yahay: "yaan la kala gayn hooyo iyo cunuggeeda." Kaddibna wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa aalihi Wa Sallam, u ciddiray ninka haystay Dumayrah markaasuu cunugga ka gatay oo uu tulud geel ah uga gatay kaddibna uu hooyadiis siiyay."
Ibnu Abii Thu'ayb wuxuu yiri (waana Muxammad bin Cabdu Al Rraxmaanu bin Al Mughiirah Al Qurashiyyi Al Caamirii, midka lagu kalsoon yahay al faqiih al xaafith axadu al aclaami oo Xadiithkaan wariyay): markaasuu Xusayn wuxuu ii dhiibay oo aan akhriyay qoraal uu haystay oo ay ku tiillay:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathaa kitaabun min Muxammadin Rasuula Allaahi li Abii Dumayrah wa ahla baytihi anna Rasuula Allaahi actaqahum, wa annahum ahla baytin mina Al Carabi, in axabbuu aqaamuu cinda Rasuuli Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, wa in axabbuu rajacuu ilaa qawmihim falaa yucradu lahum illaa bi xaqqin, wa man laqiihin mina al muslimiina, falyastawsi bihim khayran. Wa kataba Ubayya bin Kacb."

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Kanu waa qoraal uu u dhigay Muxammad Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, Abii Dumayrah (Al Ximyarii waana saxaabi, lana sheegay inuu ahaa addoon uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, lahaa oo uu xoreeyey, uuna Muscab sheegay inuu daar ku lahaa Al Caqiiq) iyo qoyskiisa inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, xoreeyey, ayaguna ay yihiin qoys ka mid Carabta. Hadday doonaan waxay degganaanayaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, agtiisa, hadday doonaanna waxay u noqonayaan arliga tolkooda, yaanna xaqdarro lagala hortegin. Qofka muslimiinta ka mid ah oo la kulmana ha u samafalo. Waxaana qoraalkaan dhigay Ubayya bin kacb."

Ibnu Sacad iyo Al Balaatharii waxay ayaguna wariyeen: “Xusayn bin Cabdu Allaahi bin Dumayrah ayaa wuxuu wafdi ahaan ugu yimid khaliifka Al Mahdii wuxuuna u keenay qoraalkaan. Markaasuu Al Mahdii wuxuu qoraalkaan saaray labadiisa indhood, wuxuuna siiyay saddex boqol oo Diinaar. Mar kalena isagoo ay la socdaan qawmkiisu oo safar ku jira, qoraalkaanna wata ayaa waxaa weeraray tuugo oo ka qaatay waxay wateen oo idil. Markaasay waxay soo saareen oo ay tuugada tuseen qoraalka oo ay u akhriyeen. Markaasay waxay ka qaateen oo idil usoo celiyeen, wax dhibaata ahna uma ayan geesan.”

Qoraalka Kow iyo Soddonaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa allam ee Wafdiga Hamdaan/sanadka sagaalaad ee Hijrada

Ibnu Hishaam wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa u yimid wafdiga Hamdaan, uuna ka mid yahay Maalik bin Namadh iyo Abuu Thawr oo ah Thuu Al Mishcaar, iyo Maalik bin Ayfac, iyo Dimaamu bin Maalik Al Ssalamaanii, iyo Camiiratu bin Maalik Al Khaarifiyyi. Markaasay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la kulmeen markuu Tabuuk kasoo noqday, ayagoo labbisan dharka xubaraatka ah ee Yaman lagu sameeyo iyo cimaamadahooda Cadan lagu sameeyey oo saaran awrta Al Mahriyyah iyo Al Arxabiyyah oo ay kooro qori ah u saaran yihiin, ayadoo ay Maalik bin Namadh iyo nin kale gabyayaan oo isu jiibinaayaan, ayna qabiilkooda faaninayaan. Markaasaa waxaa kacay Maalik bin Al Namadh oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hortiisa istaagay yirina: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, akhyaarta Hamdaan, kuwooda degan iyo kuwooda reer guuraa ahba ayaa kuu yimid, ayagoo saaran awr fiican oo dheereysa iskulana xiriirsa xarigga islaamka. Ilaahayna ka leexin mayo cabsi ay ka qabaan mid wax eedeeya eediisa, kana yimid degmooyinka **Khaarif** iyo **Yaam** iyo **Shaakir** ragga awrta iyo fardahaba, waxayna yeeleen u yeeridda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxayna ka tageen ilaahyada asnaamta ah iyo dhagaxda wax loogu bireeyaba. Cahdigooda iyo heshiiskooda islaamiddana ma jabayo oo burayo intay buurta **Laclac** meesheeda ku taallo, iyo intuu biciidka yari buurta **Sullac** ku kor ordayo." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qoraalkaan soo socda u dhigay:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathaa kitaabun min Rasuuli Allaahi Muxammadin li mikhlaafi khaarifin wa ahla janbi al hadbi wa xiqaafu al rramli, maca wafdihaa Thii Al Mishcaari Maalik bin Namadh wa man aslama min qawmihi, calaa anna lahum firaacahaa wa wihaadhahaa, maa aqaamuu al ssalaata wa atawu al zzakaata, ya'kuluuna cilaafahaa wa yarcawna caafiyahaa. Lahum bi thaalika cahdu Allaahi wa thimmata Rasuulihi. Wa shahidahum Al Muhaajiruuna wa Al Ansaara."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Kanu waa qoraal uu dhigay Rasuulka Ilaahay Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, una dhigay degmada Khaarif iyo dadka dhulkooda korreeya deggan iyo buuraha ciidda ah iyo ergaygooda Thii Al

Micshaar Maalik bin Namadh iyo inta tolkiisa ah oo muslimiinta ah. Ayagaa iska leh arliga korreeya iyo kan hooseeyaba intay salaadda oogayaan, zakadana bixinayaan, waxayna leeyihiin oo cunayaan daqeeda iyo cawskeedaba. Waxayna sidaas ku leeyihiin ballan iyo cahdiga Ilaahay iyo ilaalinta Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam. Waxaana ka marag ah oo goob joog ah Muhaajiriinta iyo Ansaartaba."

Qoraalka Laba iyo Soddonaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraiimi

Warqadduu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yuhuudda Khaybar u diray/sanadka koowaad ee Hijrada

Ibnu Isxaaq wuxuu wariyay inuu ibnu Cabbaas yiri: "Rasuula Ilahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, warqad ayuu u dhigay yuhuudda degmada Khaybar degta. Warqadduna waxay ahayd sidatan:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuuli Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, saaxibi Muusaa wa akhiihi, wa al musaddiqu limaa jaa'a bihi Muusaa: alaa inna Allaaha qad qaala lakum yaa macshara ahli Al Tawraati, wa innakum latajiduuna thaalika fii kitaabikum: "Muxammadun Rasuulu Allaahi wa allathiina macahu ashiddaa'u calaa al kuffaari ruxamaa'u baynahum taraahum rukkacan sujjadan yabtaghuuna fadlan mmina Allaahi wa ridwaanan siimaahum fii wujuuhihim mmin athari al ssujuudi thaalika mathaluhum fii Al Ttawraati wa mathaluhum fii Al Injiili kazarcin akhraja shadh'ahu fa aazarahu fa istaghlatha fa istawaa calaa suuqihi yucjibu al zzurraaca liyaghiitha bihimu al kuffaara wacada Allaahu allathiina aamanuu wa camiluu al ssalixaat minhum mmaghfiratan wa ajran cathiima(29)**." Wa inni unshidukum biAlaahi, wa unshidukum biMaa anzala calaykum, wa unshidukum bi Allathii adhcama man kaana qablakum min asbaadhikum al manna wa al ssalwaa, wa unshidukum bi Allathii aybisa al baxra li aabaa'ikum xattaa anjaahum min Fircawna wa camalihi, illa akhbartumuunii: hal tajiduuna fiimaa anzala Allaahu calaykum an tu'minuu biMuxammadin? Fa in kuntum laa tajiduuna thaalika fii Kitaabikum falaa kurha calaykum. "Qad tabayyana al rrushdu mina al ghayyi". Fa adcuukum ilaa Allaahi wa ilaa Nabiyyihi."**

Warqadda macneheedu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi.Warqaddaani waxay ka socotaa Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, saaxiibka iyo walaalka Muuse, rumaynayana wuxuu Muuse la yimid. Ragga Tawradda la siiyow! Waxaa hubaal ah inuu Ilaahay idinku yiri, aadna warkaas ka heleysaan Kitaabkiinna (Waana Aayadda sagaal iyo labaatanaad ee Suuratu Al Fatxi oo macneheedu yahay): "Muxammad waa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam. Kuwa la jirana oo mu'miniinta ahi way ku adag yihiin gaalada, sida libaaxa oo kale oo ugaartuu qabsanayo inuu cuno aan naxariis iyo beer jilayc u lahayn, waana kuwo isku naxariista dhexdooda oo is jecel, sida uu cunuggu aabihiis ku yahay oo kale. Waxaadna arkaysaa ayagoo rukuucsan oo sujuudsan, siday salaadoodu u badan tahay ayanna uga tegeyn. Waxayna doonayaan deeqda Ilaahay, oo ah inuu Jannada geliyo iyo raallinnimadiisa uu ayaga raalli ka yahay. Calaamodohoodu waxay ka muuqataa wajiyadooda, ahna caddaan iyo nuur wajiyadooda ka kaahaya maalinta qiyaame oo lagu garano inay adduunkaan ku sujuudi

jireen, iyo dhaqankooda wanaaggiisa iyo siday u jajaban yihiin una khushuucsan yihiin, kuwaanoo ay ka heleen oo ah raadka sujuudday Ilaahay u sujuudayeen." Taas weeye sifadooda ku dhignayd Tawraadda. Sifadooda ku dhigan Injiilkana waa sidatan: "Waa beer marka la abuuray uu abuurku dilaacayoo uu dhalay, markaasuu xoogeystey, markaasuu weynaaday oo ay abuuristo u dhammaystirantay, oo uu markaas dhudhunkiisa ku istaagay. Markaasuu beeraaleyda beertay cajab gelisay oo uu u bogay. Ujeedada iyo xilka beertaasna waa inay caro geliso gaalada: oo gaalku markuu muslinka arko wuu xanaaqayaa, markaasuu dab ku shidmayaa oo uu uurka ka gubanayaa, taasoo ah cathaab adduunkaan lagu cathaabayo, oo sidaasuu muslinku wuxuu ku yahay hub uu Ilaahay ku cathaabo gaalada, oo qof careysan oo cathaaban farxad iyo nolol macaan toona ma laha. Ilaahay wuxuu muslimiinta u badiyay una xoojiyay inay caro u noqdaan gaalada, siduu Al Baghawii wariyay, markuu Aayaddaan fasirayo. Wuxuu kaloo wariyay inuu Anas bin Maalik yiri: "Qofka waabariista isagoo uu qalbigiisa ku jiro xanaaq ay u qabaan asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa haleeshay Aayaddaan." Ilaahayna wuxuu u yaboohay kuwa ka midka ah abuurkaas dhashay oo beertaas kasoo baxay beerid kaddib, ahna kuwa Diinta islaamka gelaya ilaa maalinta qiyaame, dambi dhaafid iyo ajar wayn oo Jannada ah(29)." Markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu warqaddaas ku sii yiri: "Aniguna waxaan idinku dhaarinayaa Ilaahay, waxaanna idinku dhaarinayaa waxa korkiinna lagu soo dejiyay, ahna Tawraadda, waxaanna idinku dhaarinayaa Midka cunno ahaan u siiyey kuwa qabaa'ilkiina ah ee idinka horreeyey al manna iyo al ssalwaa, waxaanna idinku dhaarinayaa Midka badda yaabis uga dhigay aabayaalkiin oo sidaas uga badbaaday Fircoon iyo camalkiisa, inad ii sheegtaan: Ma ka heleysaan oo ma ku jirtaa wuxuu Ilaahay korkiinna kusoo dejiyay, ahna Tawraadda, inaad Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, rumaysaan? Haddaydnaan sidaas ka heleynin Kitaabkiinna dhexdiisa, hadaba korkiinna la idinku khasbi mayo: **"Qad tabayyana al rrushdu mina al ghayyi"** (ahna Aayadda laba boqol iyo lix iyo konton ee Al Baqarah oo macneheedu yahay "Hanuunku, oo ah iimaanka, waa ka caddaaday baadinnimada, oo ah gaalnimada). Aniguna waxaan idiinku yeerayaa Ilaahay iyo Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam."
Waa intaas warqaddu.

Qoraalka Saddex iyo Soddonaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Islaamidda Banii Al Xaarith

Ibnu Isxaaq wuxuu yir: "Kaddib Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu diray Khaalid bin Al Waliidu bisha Rabiicu Al Aakhir ama Jamaadu Al Uulaa ee sanadka tobnaad, una diray Banii Al Xaarith bin Kacb ee Najraan dega, wuxuuna ku amray inuu islaamka ugu yeero saddex maalmood ka hor intuusan la dagaallamin, oo hadday ka yeelaan uu isaguna ka yeelo. Haddayan yeelinna uu la dagaallamo. Markaasuu Khaalid soo baxay oo uu u yimid. Markaasuu fardooley dhan walba u diray ayaga islaamka ugu yeereysa oo leh: "Dadow, islaama waad nabad geleysaane." Markaasu dadku islaamay, ayna soo galeen sida loogu yeeray. Markaasuu Khaalid dhexdooda ku sugnaaday isagoo islaamka baraya iyo Kitaabka Ilaahay iyo Sunnada Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sidaasoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam kusoo amray inuu yeelo hadday islaamaan oo ayan dagallamin. Kaddibna Khaalid bin Waliidu wuxuu warqad usoo dhigay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uuna ku yiri: "Bismi Allaahi Al Rraxmaani

Al Rraxiimi. Ku socota Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kana timid Khaalid bin Al Waliidu. Al Ssalaamu calayka yaa Rasuula Allaahi wa raxmatuHu wa barakaatuHu. Ilaahay ayaan adiga daraadaa ugu mahdinayaa, Ilaaha uusan jirin ilaah aana Isaga ahayn. Intaas dabadeedna, Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Ilaahay korkaaga ha ku salliyee, adigu waxaad ii dirtay Banii Al Xaarith bin Kacb, waxaadna i amartay in markaan u imaado aanan saddex maalmood la dagaallamin, aanna islaamka ugu yeero, oo markaas hadday islaamaan aan dhex joogo, aanna ka aqbalo, aanna baro cilmiga islaamka iyo Kitaabka Ilaahay iyo Sunnada Nabigiis, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Hadday islaami waayaan aan la dagaallamo. Marka, waan u imid oo aan saddex maalmood islaamka ugu yeerayay, siduu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isoo amray, fardooley ayaanna u diray, kuna iri: "Banii Al Xaarithow islaama waad nabad geleysaane." Markaasay islaameen, mana ayan dagaallamin. Aniguna hada ayagaan la joogaa, anigoo ku amryaya wuxuu Ilaahay ku amray, kana reebaya wuxu Ilaahay ka reebay, cilmiga iyo islaamkana baraya, iyo Sunnada Nabigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Sidaas ayaanna ahaanayaa ilaa uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iiga soo dhigo. Wa Al Ssalaamu calayka Rasuulka Ilaahayow wa raxmatu Allaahi wa barakaatuHu."

Warqadda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Khaalid

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Khaalid bin Al Waliidu warqaddaan usoo dhigay:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Al Nnabiyyi Rasuula Allaahi ilaa Khaalid bin Al Waliid. Salaamun calayka. Fa inni axmadu Allaaha ilayka, Allaaha Allathii laa ilaaha illaa Huwa. Ammaa bacdu, fa inna kitaabaka jaa'anii maca rasuulika tukhbiru anna Banii Al Xaarith bin Kacb qas aslamuu qabla an tuqaatilahum, wa ajaabuu ilaa maa dacawtahum ilayhi mina al islaami, wa shahiduu an laa ilaaha illaa Allaahu wa anna Muxamman Cabdu Allaahi wa RasuulaHu, wa an qad hadaahumu Allaahu bi hudaahu. Fa bash-shirhum wa anthirhum, wa aqbil walyqbil macaka wafduhum. Wa Al Ssalaamu calayka wa raxmatu Allaahi wa barakaatuHu."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Ka socota Nabi Muxammad, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kuna socota Khaalid bin Al Waliidu. Salaamun calayka. Aniguna Ilaahay ayaan daraadaa ku xamdinayaa, Ilaaha uusa jirin ilaah aan Isaga ahayn. Intaas dabadeed. Qaraalkaagu wuu isoo gaaray iyo ergaygaad ii soo dirtayba, aadna ku sheegeysid inay Banii Al Xaaritha bin Kacb islaameen ka hor intaadaan la dagaallamin, ayna kaa yeeleen waxaad ugu yeertay oo islaamka ah, ayna ka marag kaceen inuusan jirin Ilaahay aan Ilaahay ahayn iyo inuu Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, addoonka Ilaahay iyo Rasuulkiisaba yahay, iyo inuu Ilaahay hanuunkiisa ku hanuuniyay. Marka, u bishaaree, una dig. Adiguna soo noqo, hana kusoo raaco wafdigoodu. Wa Al Ssalaamu calayka wa raxmatu Allaahi wa barakaatuHu."

Imaatinka Khaalid iyo wafdigooda

Markaasuu Khaalid soo noqday, waxaana la yimid wafdiga Banii Al Xaarith bin Kacb, uuna ka mid yahay Qays bin Al Xusayn Thii Al Ghussah iyo Yaziid bin Cabdu Al Madaan, iyo Yaziid bin Al Muxajjal, iyo Cabdu Allaahi bin Qurad Al Ziyaadii, iyo Shaddaad bin Cabdu Allaahi Al Qanaanii, iyo Camr bin Cabdu Allaahi Al Dabaabii.

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo wafdiga Banii Al Xaarith

Markay yimaadeen oo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arkay wuxuu yiri: **"Man haa'uulaa'i al qawmi allathiina ka'annahum rijaalu al hindi?"** oo macnihiisu yahay: "Waa kuwee raggaas aad moodid inay yihiin ragga hindiga?" Waxaa la yiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kuwaasu waa ragga Banii Al Xaarith bin Kacb." Markaasay markay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo dul istaageen, ayay salaameen ayna yiraahdeen: "Waxaan marag ka nahay inaad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, tahay, iyo inuusan jirin ilaah aan Ilaahay ahayn." Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Wa anaa ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa annii Rasuulu Allaahi"**, oo macnihiisu yahay: "Aniguna waxaana maraga k ahay inuusan jirin ilaah aan ilaahay ahayn iyo inaan anigu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ahay." Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"antum allathiina itha zujiruu istaqdamuu?"** oo macnihiisu yahay: "Ma adinkaa kuwa marka la riixo hore usoo socda?" Markaasay aamuseen oo axad ka mid ahi uusan u jawaabin. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar labaad is hadalkaas ku celiyay. Markaasuusan axadna u jawaabin. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar saddexaad ku celiyay. Markaasuusan axadna u jawaabin. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar afaraad ku celiyay. Markaasuu Yaziid bin Cabdu Al Madaan wuxuu yiri: "Haa, Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo annagu waxaan nahay kuwa marka dib loo riixo, hore usoo socda." Sidaasuuna afar goor yiri. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Law anna Khaalidan lam yaktub ilayya annakum aslamtum wa lam tuqaatiluu la alqaytu ru'uusakum taxta aqdaamikum"**, oo macnihiisu yahay: "Hadduusan Khaalid ii soo dhigi lahayn inaad islaanteen, madaxdiinnaan goyn lahaa oo aan cagihiinna hoostooda ku tuuri lahaa." Markaasuu Yaziid bin Al Madaan wuxuu yiri: "Wa Allaahi inaanan kugu mahdin adiga, Khaalidna aanan ku mahdin." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Fa man xamidtum?"** oo macnihiisu yahay: "Yaadna ku mahdiseen?" Waxay yiraahdeen: "waxaan ku mahdinnay Ilaahay Cazza wa Jalla, Isagaana ah Midka adiga nagu kaa hanuuniyay Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: "**Sadaqtum"**, oo ah: "Run ayaad sheegteen." Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri: **"Bimaa kuntum taghlibuuna man qaatalakum fii al jaahiliyati?"** oo macnihiisu yahay: "maxaad uga adkaan jirteen kuw aidinla dagaallama zamanka jaahiliyada?" Waxay yiraahdeen: "Kuwa nala dagaallama waxaan uga adkaan jirnay Rasuulka Ilaahayow, annagoo midaysan oo aan kala dhanbalmin, axadna aan dulmi ku bilaabin." Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"Sadaqtum"**, oo ah: "run ayaad sheegteen." Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Banii Al Xaarith bin Kacb amiir uga dhigay oo uu xilkooda u dhiibay Qays bin Al Xusayn. Markaasuu wafdiga Banii Al Xaarith bin Kacb dib ugu noqdeen arligooda bisha Shawwaal inta ka hartay dhexdeeda, ama bilowga bisha Thuu Al Qacdah. Markay tolkood kusoo laabteen kaddib, ma ayan nagaadin afar bilood waxaan ahayn ee Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi

Wasallam, ayaa la oofsaday, uuna Ilaahay u naxariistay oo barakeeyey, raallina ka noqday, una nicmeeyey.

Qoraalka Afar iyo Soddonaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u diray Camr bin Xazm oo awaamiirtiisa sida

Markuu wafdigoodu ka gaddoomay, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u diray Camr bin Xazm, si uu Diinta u baro, una baro Sunnada iyo cilmiga islaamka, uuna zakadooda ka qaado, wuxuuna u dhiibay Qoraal uu ugu dhigay awaamirtiisa, uuna ku amray wuxuu ku amray.

Qoraalkuna wuxuu ahaa sidatan:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Haathaa bayaanun mina Allaahi wa RasuuliHi: yaa ayuhaa allathiina aamanuu awfuu bi al cuquudi. Cahdun min Muxammadin Am Nnabiyyi Rasuula Allaahi li Camr bin Xazm, xiina bacathahu ilaa Al Yaman. Amarahu bi taqwaa Allaahi fii amrihi kullihi, fa inna Allaaha maca allathiina ittaqaw wa allathiina hum muxsinuuna. Wa amarahu an ya'khutha bi al xaqqi kamaa amarahu Allaahu, wa an yubash-shira al nnaasa bi al khayri, wa ya'murahum bihi, wa yucallima al nnaasa Al Quraana, wa yufaqqihihim fiihi, wa yanhaa al nnaasa, falaa yamussa Al Quraana insaanun illaa wa huwa dhaahirun, wa yukhbira al nnaasa bi allathii lahum, wa allathii calayhim, wa yaliina lilnnaasi fii al xaqqi, wa yashaddu calayhim fii al thulmi, fa inna Allaaha kariha al th-thulma, wa nahaa canhu, fa qaala: "Alaa lacnatu Allaahi calaa al th-thaalimina." Wa yubash-shira al nnaasa bi al jannati wa bi camalihaa, wa yunthira al nnaasa al nnaara wa camalahaa, wa yasta'lifa al nnaasa xattaa yufaqqahuu fii Al Ddiini, wa yucallima al nnaasa macaalima al xajji wa sunnatahu wa fariidatahu wa maa amara Rasuulu Allaahi bihi. Wa Al Xajju Al Akbaru: Al Xajju Al Akbaru. Wa Al Xajju Al Asgharu huwa al Cumratu. Wa yanhaa al nnaasa an yusalliya axadun fii thawbin waaxidin saghiirin illaa an yakuuna thawban yathriya dharafayhi calaa caatiqayhi. Wa yanhaa al nnaasa an yaxtabii axadun fii thawbin waaxidin yufdii bi farjihi ilaa Al Ssamaa'i. Wa yanhaa an yacqisa axadun shacra ra'sihi fii qafaahu. Wa yanhaa ithaa kaana bayna al nnaasi hayjun cani al ducaa'i ilaa al qabaa'ili wa al cashaa'iri, wal yakun dacwaahum ilaa Allaahi Cazza wa Jalla Waxdahu laa shariika laHu. Fa man lam yadcu ilaa Allaahi wa dacaa ilaa al qabaa'ili wa al cashaa'iri fal yuqdhafuu bi al ssayfi, xattaa takuuna dacwaahum ilaa Allaahi WaxdaHu laa shariika laHu. Wa ya'muru al nnaasa bi isbaaghi al wuduu'i wujuuhahum wa aydiyahum ilaa al miraafiqi wa arjulihim ilaa al kacbayni, wa yamsaxuuna bi ru'uusihim kamaa amarahumu Allaahu. Wa amara bi al ssalaati li waqtihaa, wa itmaamu al rrukuuci wa al ssujuudi wa al khushuuci, wa yughallisa bi al ssubxi, wa yuhajjiru bi al haajirati xiina tamiilu al sh-shamsu. Wa salaatu al casri wa al sh-shamsu fii al ardi mudbiratun. Wa al maghribu xiina yaqbilu al llaylu, laa yu'akh-khiru xattaa tabduwa al nnujuumu fii Al Ssamaa'i. Wa al cishaa'u awwala al llayli. Wa amara bi al ssacyi ilaa al jumucati ithaa nuudiya lahaa. Wa al ghasli cinda al rrawaaxi ilayhaa. Wa amarahu an ya'khutha mina al maghaanimi khumusu Allaahi, wa maa kutiba calaa al mu'miniina fii al ssadaqata mina al caqari cushru

maa saqat al caynu wa saqati Al Ssamaa'u, wa calaa maa saqaa al ghurbu nisfu al cushri. Wa fii kulli cashrin mina al ibili shaataani, wa fii kulli cishriina arbacu shiyaahin. Wa fii kulli arbaciina mina al baqari baqaratun. Wa fii kulli thalaathiina mina al baqari tabiicun jathacun aw jathcatun. Wa fii kulli arbaciina mina al ghanami saa'imatin waxdahaa shaatun. Fa innahaa fariidatu Allaahi allatii iftarada calaa al mu'miniina fii al ssadaqati. Fa man zaada khayran fa huwa khayrun lahu. Wa annahu man aslama min yahuudiyyu aw nasraaniyyu islaaman khaalisan min nafsihi wa daana bi Diini al islaami fa innahu mina al mu'miniina, lahu mithla maa lahum, wa calayhi mithla maa calayhim. Wa man kaana calaa nasraaniyatihi aw yahuudiyatihi fa innahu laa yuraddu canhaa. Wa calaa kulli xaalimin thakarin aw unthaa, xurrun aw cabdun Diinaarun waafin aw cawduhu thiyaaban. Fa man addaa thaalika fa inna lahu thimmata Allaahi wa thimmata Rasuulihi. Wa man manaca thaalika fa innahu caduwwun Lillaahi wa li Rasuulihi wa lil mu'miniina jamiican. Salawaatu Allaahi calaa Muxammadin, wa Al Ssalaamu Calayhi wa Raxmatu Allaahi wa Barakaatuhu."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Kanu waa caddayn ka timid Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Kuwiinna rumeeyeyow ballamada iyo heshiisyada oofiya oo meel mariya. Kanu waa ballan iyo cahdi uu Nabi Muxammad Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu u dhigay Camr bin Xazm markuu Yaman u diray. Wuxuu ku ballamiyay inuu umuurtiisoo idil Ilaahay uga dhawrsado, maxaa yeelay Ilaahay wuxuu la jiraa kuwa dhawrsada iyo kuwa sama fala. Wuxuu ku amray inuu runta ku dhaqmo siduu Ilaahay ugu amray, dadkana uu khayr ugu bishaareeyo, uuna ku amro inay wax fiican suubiyaan, iyo inuu dadka Quraanka baro, uuna si qoto dheer u garansiiyo. Wuxuuna amray inuu dadka ka reebo waxa laga reebay oo uusan qofna Quraanka taaban isagoo aan daahir mooyee, oo weyso qaba. Wuxuu kaloo ku amray inuu dadka u sheego waxay leeyihiin oo xuquuq ah iyo waxa waajibaad ah oo ayaga lagu leeyahay. Iyo inuu dadka u jilicsanaado markay xaqqa ku taagan yihiin, kuna adkaado markay dulmi ku taagan yihiin., oo Ilaahay dulmiga waa neceb yahay, dadkana wuu ka reebay oo wuxuu yiri: "**"Alaa lacnatu Allaahi calaa al th-thaalimina"**, oo macneheedu yahay, waana Aayadda sideed iyo tobnaad ee Suuratu Huud: "Warhoy! Lacnadda Ilaahay ha ahaato korka kuwa daallimiinta ah." Iyo inuu dadka jannada ugu bishaareeyo iyo camalka lagu galaba. Dadkana uu uga digo naarta iyo camalka lagu galaba. Iyo inuu dadka quluubtooda iyo jeceylkooda iyo saaxiibtinnamoodaba u kasbo si uu Diinta si qoto dheer ugu baro. Iyo inuu dadka axkaamta xajka baro iyo sunnooyinkiisa iyo waajibaaadkiisa iyo wuxuu Ilaahay amray in la sameeyo xajka dhexdiisa. Al Xajju Al Akbaru waa Al Xajju Al Akbaru, Al Xajju Al Asgharuna waa Cumrada. Iyo inuu dadka ka reebo inuusan axadna qayd yar keligiis isagoo xiran ku tukado, inuu yahay mooyee go' uu labadiisa daraf labadiisa garab iyo luquntiisa la isku dhaafiyo oo laga xirto. Iyo inuu dadka ka reebo inuu kadaloobsado isagoo go' keli ah xiran oo uu markaas farjigiisu Samada u muuqdo. Iyo inuu ka reebo inuusan ninna timaha madaxiisa tidcin oo uusan qadaadkiisa ku galaamin oo ku dhejin. Inuu dadka ka reebo markuu khilaaf dhex maro inay u yeertaan qabiil iyo cashiirad, ayse u yeertaan Ilaahay Cazza wa Jalla Keligiis oo aan shariik lahayn. Qofkaan Ilaahay u wacanna oo qabiil iyo cashiirooyin u yeerta ha lala dhaco sefo oo qoorta looga gooyo ilaa uu wacadkoodu Ilaahay keligiis oo aan shariik lahayn noqdo. Iyo inuu dadka amro inay weysada kaamil ka dhigaan oo ay dhammaystiraan oo xubintiiba ay saddex goor dhaqaan weeye, wajiyadooda iyo gancohooda ilaa suxulladooda, iyo lugohooda ilaa canqawyada, iyo inay madaxdooda biyo u mariyaan siduu Ilaahay u amray. Iyo inuu

amro in salaadda waqtigeeda lagu tukado oo rukuuca iyo sujuudda loo dhammaystiro iyo khushuucaba. Salaadda subaxna uu tujiyo markuu gudcurka habeenku dhammad yahay oo uu iftiinka waabarigu ku darsamo oo soo dhex galo. Salaadda duhurna uu tujiyo durbadiiba markay qorraxdu beerka Samada ka iilato. Salaadda casarna markay qorraxdu arliga kasii jeesanayso. Maghribkana markuu habeenku soo galo, uusanna dib u dhigayn ilaa ay xiddiguhu Samada ka muuqdaan. Cishana uu tujiya habeenka bilowgiisa. Wuxuuna amrya in salaadda jimcaha loo degdego marka loo aathaano, lana qubaysto marka la aadayo. Wuxuuna ku amray inuu maghaanimta ka qaado khumuska Ilaahay, mu'miniintana uu ka qaado zakada lagu fardi yeelay, oo ah sidatan: beerta ay ili waraabiso ama Samada ka waraabta, waa roobkee, waxaa lagu leeyahay cushur miraha ka baxa, oo ah tobankii meeloodba meel, beerta wadaani waraabisana waxaa lagu leeyahy cushur nuskiis. Tobankii geelaba waxaa lagu leeyahay laba riyood, labaatankiina afar riyood. Afartanka lo'a ahna sac. Kulli soddonkii lo' ahna waxaa lagu leeyahay tabiicu oo ah labood ama dheddig, oo ah neef labood ama dheddig ah oo ay hal sano u buuxsantay, kuna dhex jira sanadka labaad ee cumrigiisa. Afartanka ari ah oo keligood daaqana waxaa lagu leeyahay ri. Taas weeyey fariidada uu Ilaahay ku fardi yeelay mu'miniinta oo zako ah. Qofka intaas ka badan oo khayr ah bixiyana, isagay khayr u tahay. Hadduu islaamo yuhuudi ama krishtaan si khaalis ah oo naftiisa kasoo go'day, uuna Diinta islaamka ka Diin yeesho, wuxuu ka mid yahay mu'miniinta, oo wuxuu leeyahay waxay ayaguna leeyihiin, waxaana korkiisa ah oo lagu leeyahay waxa ayaga korkooda ha oo lagu leeyahay. Qofka ku hara krishtaannimadiisa iyo yuhuudnimadiisana laga celin mayo, ee mid kastoo kuwaas ka mid ah oo qaan gaaray, ha ahaado lab ama dheddig, xor ama addoon, waxaa lagu leeyahay oo uu bixinayaa hal Diinaar oo buuxa, ama wax qiimihiisa u dhigma oo dhar ah. Qofka ayaga ka mid ah oo bixiya wuxuu leeyahay ilaalinta Ilaahaay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo mu'miniinta dhammaantood. Salawaatka Ilaahay ha ahaadaan Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, korkiisa, wa Al Ssalaamu iyo raxmada Ilaahay iyo barakadiisuba."

Qoraalka Shan iyo Soddonaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Wafdiga boqorrada Ximyar/sanadka sagaalaad ee Hijarada

Waxaa kaloo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah ugu yimid qoraalka boqorrada Ximyar markuu Tabuuk kasoo laabtay iyo ergaygay usoo direen inay islaameen boqorrada Al Xaarithu bin Cabdu Kulaal iyo Nucaym bin Cabdu Kulaal iyo Al Nnucmaanu Qayli Thii Rucayn wa Macaafira wa Hamdaana. Wuxuuna usoo diray Zurcah Thuu Yazin Maalik bin Murrah Al Rrahaawii inay islaameen, ayna shirkiga iyo ehelkiisaba ka tageen.

Qoraalkuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u dhigay

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, u dhigay qoraalkaan:

"Bismi Allaahi Al Rarxmaani Al Rraxiimi. Min Muxmmadin Rasuula Allaahi ilaa Al Xaarithu bin Cabdu Kulaal, wa ilaa Nucaym bin Cabdu Kulaal wa ila Al Nucmaanu Qayli Thii Rucayn wa Macaafira wa Hamdaan. Ammaa bacda thaalikum, fa inni axmadu ilaykumu Allaaha Allathii laa ilaaha illaa Huwa. Ammaa bacdu, fa innahu qad waqaca binaa rasuulukum munqalabanaa min ardi

al rruumi, fa laqiinaa bi Al Madiinati. Fa ballagha maa arsaltum bihi, wa khabbaranaa maa qibalakum, wa anba'anaa bi islaamikum, wa qatlakumu al mushrikiina, wa anna Allaaha qad hadaakum bihudaaHu, in aslaxtum wa adhactumu Allaaha wa Rasuulaha, wa aqamtumu al ssalaata, wa aataytymu al zzakaata, wa acdhaytum mina al ghanaa'imi khumusu Allaaha wa sahma al Rrasuuli wa safiyyihi, wa maa kutiba calaa al mu'miniina mina al ssadaqati mina al caqaari, cushruhu maa saqat al caynu wa saqati al Ssamaa'u, wa calaa maa saqaa al gharbu nisfu al cushri. Wa anna fii al ibili al arbaciina ibnatu labuunin, wa fii thalaathiina mina al ibili ibnu labuunin thakarin, wa fii kulli khamsin mina al ibi shaatun, wa fii kulli cashrin mina al ibili shaataani. Wa fii kulli arbaciina mina al baqari baqaratun, wa fii kulli thalaathiina mina al baqari tabiicun jathacun aw jathacatun, wa fii kulli arbaciina mina al ghanami saa'imatin waxdahaa shaatun. Wa annahaa fariidatu Allaahi allatii faradahaa calaa al mu'miniina fii al sadaqati. Fa man zaada khayran fa huwa khayrun lahu, wa man addaa thaalika wa ash-hada calaa al islaamihi wa thahara al mu'miniina calaa al mushrikiina, fa innahu mina al mu'miniina, lahu maa lahum, wa calayhi maa calayhim, wa lahu thimmatu Allaahi wa thimmata RasuuliHi. Wa innahu man aslama min yahuudiyyin aw nasraayyin fa innahu mina al mu'miniina, lahu maa lahum wa calayhi maa calayhim. Wa man kaana calaa yahuudiyyatihi aw nasraaniyyatihi fa innahu laa yuraddu canhaa, wa calayhi al jizyatu, calaa kulli xaalimin thakarin aw unthaa, xurrin aw cabdin, Diinaarun waafin min qiimati Al Macaafiri aw ciwaduhu thiyaaban. Fa man addaa thaalika ilaa Rasuuli Allaahi fa inna lahu thimmatu Allaahi wa thimmatu RasuuliHi. Wa man manacahu fa innahu caduwwun Lillaahi wa li RasuuliHi. Ammaa bacdu. Fa inna Rasuula Allaahi Muxammadan Al Nabiyyi arsala ilaa Zurcah Thii Yazin an ithaa ataakum rusulii fa uusiikum bihim khayran: Mucaath bin Jabal wa Cabdu Allaahi bin Zayd wa Maaliku bin Cubaadah, wa Cuqayl bin Nimr, wa Maalik bin Murrah wa asxaabuhum, wa an ajmacuu maa cindakum mina al ssadaqaati wa al jizyata min mukhaaliifakum, wa ablighuuhaa rusulii. Wa anna amiiruhum Mucaathu bin Jabalu. Fa laa yanqalibanna illaa raadiyan. Ammaa bacdu. Fa inna Muxammadan yash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa annahu cabduHu wa RasuuluHu. Thumma inna Maalika bin Murrah Al Rrahawii qad xaddathanii annaka aslamta min awwali Ximyara, wa qatalta al mushrikiina, fa abshir bi khayrin, wa aamuruka bi Ximyara khayran. Wa laa takhuunuu, wa laa takhaathaluu, fa inna Rasuula Allaahi huwa waliyyu ghaniyyikum wa faqiirikum, wa inna al ssadaqata la taxillu li Muxammadin wa laa li Ahli Baytihi, innamaa hiya zakaatun yuzakkaa bihaa calaa fuqaraa'i al muslimiina, wa ibna al ssabiili. Wa in kaana Maalikan qad ballagha al kahabara, wa xafitha al ghayba, wa aamurukum bihi khayran. Wa inni qad arsaltu ilaykum min saalixi ahlii wa uulii Diinihim wa uulii cilmihim, wa aamurukum bihim khayran. Fa innahum manthuurun ilayhim. Wa al ssalaamu calaykum wa raxmatu Allaahi wa barakaatuHu."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Muxammad, Nabiga, waxayna u socotaa Al Xaarithu bin Cabdu Kulaal iyo Nucaym bin Cabdu Kulaal iyo Al Nnucmaanu Qayli Thii Rucayn wa Macaafira wa Hamdaan. Intaas dabadeedna. Ilaahay ayaan adinka daraadiin ugu xamdinayaa, Ilaaha uusan jirin Isaga Ilaah aan ahayn. Intaas dabadeedna. Ergaygiinnu wuxuu noo yimid markaan ka nimid arliga ruumaanka, waxaanna kula kulannay Al

Madiinah, waxaad lasoo dirteenna wuu nasoo gaarsiiyay, khabarkiinnana noo sheegay. Wuxuuna noo sheegay inaad islaamteen iyo inaad gaalada layseen, iyo inuu Ilaahay hanuunkiisa idinku hanuuniyay. Hadaba haddaad suubanaataan oo Ilaahay adeecdaan iyo Rasuulkiisaba, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,, salaaddana aad oogtaan, zakadana aad bixisaan, ghaniimada khumuska Ilaahay ka bixisaan iyo sahamka Rasuulka, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo safiyyigiisa, oo ah wuxuu naftiisa u doorto intaan la qaybin oo isaga u gaar ah, iyo waxa mu'miniinta waajib looga dhigay ee zakada beeraha oo ah cushur, oo ah tobankii meeloodba meel, beertay ili waraabiso iyo midday Samadu waraabiso, oo ah roob ku waraabta. Beerta wadaan lagu waraabiyana waxaa waajib ku ah cushur nuskiis, oo ah tobankii meeloodba meel nuskeed. Afartankii geela waa inaad ka bixisaan ibnatu labuun, oo ah neef geela oo dheddig ah oo laba sano u buuxsantay, gudana gashay sanadkii saddexaad oo cumrigeeda. Soddonka geelana aad ka bixisaan ibnatu labuunin oo labood ah. Shan halaad oo geela oo kastana aad ka bixisaan ri. Tobanka halaadna aad ka bixisaan laba riyood.. Afartankii lo'ahna aad sac ka bixisaan. Soddoonkii lo' ah oo kastana aad ka bixisaan Tabiic, oo ah neef lo'aad oo labood ama dheddig ah oo ay hal sano u buuxsantay, kuna dhex jira sanadka labaad ee cumrigiisa. Aadna kulli afartanka neef oo ari ahna oo keligeed daaqda aad ri ka bixisaan. Waana fardi zakadu, oo uu Ilaahy mu'miniinta korkooda ku fardi yeelay. Qofka intaas ka badan bixiyana isagay khayr u tahay, qofka intaas bixiyana islaannimadiisana ka marag kaca, mu'miniintana u hiilliya gaalada korkooda, kaasi sidaas yeela mu'miniintuu ka mid yahay, wuxuuna leeyahay waxay leeyihiin, isagana waxaa korkiisa ah waxa ayagana korkooda ah oo kale (waana xuquuq iyo waajibaat), wuxuuna leeyahy ilaalinta Ilaahay iyo ilaalinta Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Yuhuudiga ama krishtaanka islaama wuxuu ka mid yahay mu'miniinta, wuxuuna leeyahay waxay ayaguna leeyihiin, isagana waxaa korkiisa ah wax la mid ah waxa ayagana korkooda ah oo kale. Qofka ku harase yuhiidinnimadiisa iyo krishtaannimadiisa, laga hor istaagi mayo, oo laga celin mayo, waxaana korkiisa ah oo laga qaadayaa jizyo, oo qof kasta oo qaan gaar ah, lab ama dheddig, xor ama adoon, jizyadu waa hal Diinaar oo buuxa, oo qiimaha Al Macaafir ah, ama qiimo u dhigma oo dhar ah. Qofkooda kaas u dhiiba Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu leeyahay ilaalinta Ilaahay iyo ilaalinta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,. Qofka diidana waa cadawga Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Intaas kaddibna. Rasuulka Ilaahay, Nabi Muxmamad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u diray Zurcah Thii Yazin in markay idiin yimaadaan rusushayda aan soo diray, waxaan idinkala dardaarmayaa inaad u samo fashaan, waana Mucaath bin Jabal iyo Cabdu Allahi bin Zayd iyo Maalik bin Cubaadah, iyo Cuqbah bin Nimr iyo Maalik bin Murrah iyo asxaabtooda. Soona uruuriya zakada agtiinna taalla iyo jizyada kuwa idin khilaafay oo yuhuudda iyo krishtaanka ah, una keenay rusushayda. Waxaana amiirkooda ah oo taladooda haya Mucaath bin Jabal, ee yuusan ii soo noqon isagoo raalli ah mooyee. Intaas dabadeedna. Muxammad, Sallaa Allaahu calayhi Wasallam, wuxuu ka marag kacay oo yiri ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu iyo inuu isagu yahay addoonkiisa iyo Rasuulkiisa. Maalik bin Murrah Al Rrahaawii wuxuu ii sheegay inaad tahay kan Ximyar ugu hor islaamay, gaaladana aad laysay. Marka ku bishaareyso khayr, waxaanna ku amrayaa inad Ximyar u sama fashid. Khayaanana ha la imaanina, gargaarkana ha iskala harina, oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa waliga kiinna hodanka ah iyo kiinna saboolka ahba. Zakada iyo sadqaduna u xalaal ma ah Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo Ehelu Baytkiisaba, waa qoyskiisee, ee waa zaka lagu korinayo fuqarada muslimiinta iyo kuwooda musaafirka ah. Maalikna khabarka wuu nasoo gaarsiiyay, sirtana wuu dhawray, waxaanna idin amrayaa inaad isagana u sama fashaan. Aniguna waxaan idiin soo diray kuwo ka mid ah kuwa fiican ee Ehelkeyga iyo kuwa

Diintoda ugu fiican, uguna cilmi fiican. Waxaanna idin amrayaa inaad u sama fashaan, oo ayaga waa in la xushmeeyaa. Wa al ssalaamu calaykum wa raxmatu Allaahi wa barakaatuHu."

Dardaaranka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Mucaath bin Jabal Yaman u diray

Ibnu Isxaaq wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu Mucaath bin Jabal Yaman u diray wuu la dardaarmay, uuna awaamirtuu fulin lahaa siiyay, kaddibna uu yiri: **"yassir wa la tucassir, wa bashi-shir wa laa tunaffir. Wa innaka sataqdamu calaa qawmin min ahli al kitaabi, yas'aluunaka maa miftaaxu al jannati, fa qul: "Shahaadatu an laa ilaaha illaa Allaahu Waxdahu laa shariika laHu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Fududee umuurta oo ha adkayn, dadka u bishaaree oo waxay ku farxaan u sheeg, ee ha didin oo waxay ka cararaan ha usheegin. Adiguna waxaad u tegi doontaa dad ehelu kitaabka ka mid ah, waxayna ku weydiinayaan wuxuu yahay furaha jannadu. Waxaad tiraahdaa: "Furaha janadu waa: "Shahaadatu an laa ilaaha illaa Allaahu Waxdahu laa shariika laHu." Markaasuu Mucaath bin Jabal soo baxay oo markuu Yaman yimid uu u kacay fulinta wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo amray. Markaasaa waxaa u timid haweeney reer Yaman ah, waxayna tiri: "Saaxiibka Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, muxuu yahay xaqqa uu ninku haweentiisa ku leeyahay?" Wuxuu yiri: "Hoy isjir oo maxaad leedahay! Haweentu maba awooddo inay xaqqa ninkeeda oofiso. Marka naftaada ku jihaad inaad xaqqiisa u oofi intaad ka kartid." Waxay tiri: "Wa Allaahi haddaad ahaan lahayd saaxiibka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waad ogtahay wuxuu xaqqa ninku uu haweentiisa ku leeyahay yahay." Wuxuu yiri: "Hoy, maxaad leedahay! Haddaad u imaan lahayd oo aad heli lahayd inay sankiisa kasoo burqanayaan malax iyo dhiig oo aad kasoo wada nuugto , oo ayan waxba uga harin, xaqqiisa maa aadan gudin."

Qoraalka Lix iyo soddonaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalka Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee reer Yaman oo ay axkaam badani ku sugan yihiin

Al Zarqaanii wuxuu yiri: “Al Nasaa’ii iyo Abuu Xaatim iyo gharkoodba waxay Abii Bakr bin Muxammad bin Camr bin Xazm Al Ansaarii Al Najaarii Al Madanii Qaalliga ahaa ka wariyeen inuu aabihiis awoowihiis Camr bin Xazm bin Zayd bin Lawzaan Al Ansaarii Al Ssaxaabii uuna Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u dhiibay xilka Najraan ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u dhigay qoraal uuna ugu dhiibay Camr bin Xazm oo reer Najraan u geeyey. Qoraalkaas waxaa ku dhignaa:

“Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Mumammadin Al Nnabiyyi ilaa Shuraxbiil bin Cabdu Kulaal wa Al Xaarith bin Cabdu Kulaal, wa Nucaym bin Cabdu Kulaal (qiila Thii Rucayn wa Macaafiir wa Hamdaan), ammaa bacdu.”

Intaas macnohoodu waxaa weeye:

“Bismi Allaahi Ala Rarxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, waxay ku socotaa Shuraxbiil bin Cabdu Kulaal iyo Al Xaarith bin Cabdu Kulaal, iyo Nucaym bin Cabdu Kulaal (oo la yiraahdo Thii Rucayn wa Macaafiir wa Hamdaan), intaas dabadeedna.”

Waa Xadiitrh dheer uuna ka mid ahaa:
“an man ictabadha mu’minan qatlan can bayyinatin fa innahu qawdun illaa an yardaa awliyaa’u al maqtuuli. Wa fiihi anna al rrajula yuqtalu bi al mar’ati, wa fiihi fii al nnafsi al diyatu mi’atu mina al ibili wa calaa ahli al th-thahabi alfu diinaarin, wa fii al anfi ithaa awcaba jadcahu mi’atun mina al ibili, wa fii al llisaani al diyatu, wa fii al sh-shafatayni al diyatu, wa fii al baydatayni al diyatu, wa fii al thakari al diyatu, wa fii al ssulbi al diyatu, wa fii al jaa’ifati thuluthu al diyati, wa fii al munqalati (ama al munaqqilatu) khamsa casharata mina al ibili, wa fii kulli isbicin min asaabici al yadi wa al rijli casharun mina al ibili, wa fii al sinni khamsun mina al ibili.”

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

“Qofka qof mu’min ah gawraca oo sidaas ku dila ayna ku caddaato waa loo qisaasayaa inay da daayaan qofkaas uu dilay ehelkiisu mooyee kuwa dhaxalkiisa iska leh. Ninka haweeney dila isagana waa loo dilayaa. Qofka gaf u dilana waxaa laga qaadayaa boqol halaad oo geel ah oo diyadiisa ah. Dadka aan geela lahaynna oo dahabka leh waxay bixinayaan kun diinaar. Diyada sanka la gooyey oo ayan waxba ka harin waa boqol halaad oo geela. Carrbkuna wuxuu leeyahay diyo (oo ah boqol halaad oo geel ah), labada bashimoodna waxay leeyihiin diyo (oo ah boqol halaad oo geel ah). Labada xiniinyoodna waxay leeyihiin diyo (oo ah boqol halaad oo geel ah). Thakarkuna wuxuu leeyahay diyo. Dhabarkuna wuxuu leeyahay diyo. Labada indhoodna waxay leeyihiin diyo (oo ah boqol halaad oo geel ah). Hal lug waxay leedahay diyo nuskeed. Ma’muumaduna waxay leedhay diyo daloolkeed. Jaa’ifaduna waxay leedahay diyo daloolkeed. Al Munqalatu (ama al munaqqilatu oo ah jebinta lafta) waxay leedahay shan iyo toban halaad oo geel ah. Far kasta oo faraha gacanta ka mid ah iyo faraha cagta waxay leedahay toban halaad oo geela. Iligguna wuxuu leeyahay shan halaad oo geela.”

Riwaayada Maalik waxay warisay:

“wa fii al cayni khamsuuna, wa fii al yadi khamsuuna, wa fii al rijli khamsuuna, wa fii al muudixati khamsun mina al ibili”, oo macnohoodu yahay: “ishiina waxay leedahay konton halaad, gacantuna konton, lugtuna konton al muudixatuna oo ah in lafta la jebiyo oo la caddeeyo ayadoo caddaanteedu muuqatay (uuna ibnu Al Athiir kitaabkiisa “Al Nihaayah” ku yiri “waa lafaha madaxa iyo wajiga oo keli ah, lafaha kalena xukun ayaa lagu ridayaa”) shan halaad oo geela.”

Qoraalka Toddoba iyo Soddonaad

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Qoraalka Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee Banii Zuhayr

Al Zarqaanii wuxuu yiri: "Axmad, Abuu Daauud iyo Al Nasaa'ii waxay ka wariyeen Abuu Al Calaa'i Yaziid bin Cabdu Allaahi bin Al Shakhiir inuu yiri: "anigoo jooga suuqa geela ayaa waxaa yimid nin reer miyi ah oo timihiisuna kacsan yihiin oo wata go' harag guduudan ah ama jaraab ah wuxuuna yiri: "ma idinku jiraa nin wax akhriya?" Waxaan iri: "haa" oo aan go'aas ka qaatay waxaana ku dhignaa:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuuli Allaahi ilaa Banii Zuhayr bin Uqash xayyun min Cakal annahum in shahiduu an laa ilaaha illaa Allaahu, wa anna Muxammadan Rasuulu Allaahi, wa faaraquu al mushrikiina, wa qaamuu al ssalaata, wa aatawuu al zzakataa, wa aqarruu bi al khumusi min ghanaa'imihim wa sahmi Al Nabiyyi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wa safiyyihi, fa innahum aaminuuna bi amaani Allaahi wa RasuuliHi."

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Waxay ka socotaa Rasuulka Ilaahay Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, waxayna u socotaa reer Banii Zuhayr bin Uqash oo ah qabiil ka tirsan Cakal, in hadday ka marag kacaan oo yiraahdaan Laa ilaaha ilaa Allaahu wa Muxammadun Rasuulu Allaahi, ayna gaalada ka tagaan, ayna salaadda oogaan, zakadana bixiyaan, ayna qiraan oo meel mariyaan khumuska xoolahay ghaniimaystaan iyo saamiga Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam iyo safiyyigiisa oo ah wuxuu ghaniimada ka doorto intaan la qaybin, inay markaas leeyihiin amni ahna amniga Ilaahay iyo Rasuulkiisa."

Markaasaan waxaan ninka ku niri: "yaa qoraalkaan kuu dhigay?" Wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam."
Markaasay waxay ragga qaarkiis ku yiraahdeen: "Xadiith aad nooga wariso ma ka maqashay?" Wuxuu yiri: "waxaan maqlay isagoo leh**: "man sarrahu an yath-haba kathiirun min waxri al sadri fal yasum shahra al sabri, wa thalaathata ayyaamin min kulli shahrin"** oo macnihiisu yahay: "qofka jecel inuu ka tago oo laga qaado cudurrada qalbigiisa (sida carada, nacaybka, xaasidnimada, isla waynida, bakhaynimada, kibirka, colaadda, waswaaska , xanta, diradiraha, isla waynida, iwm.) ha soomo bisha sabirka oo ah ramadaan iyo saddex maalmood ee kow iyo tobanka bilood oo kale."
Markaasuu raggu ama midkood wuxuu ku yiri: "ma adigaa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam isagoo sidaas leh maqlay?" Wuxuu yiri: "waxaan u jeedaa inaad igu tuhmaysaan inaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, been ka sheegayo, maanta inta ka hartayna waxaan idiin warinayaa axaadiith oo idiin sheegay." Kaddibna wuu gaddoomay.
Al Zarqaanii wuxuu yiri: "ibnu Qaanic iyo Al Dhabraanii waxay wariyeen inuu ninkaanu yahay Al Nimru bin Yuulab oo uu al Marzabaanii yiri: "wuxuu ahaa gabayaa faseex ah oo Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wafdi ahaan ugu yimid oo uu markaas qoraakaan u dhigay. Kaddibna wuxuu degay Al Basrah, wuxuuna ahaa deeqsi…ilaa laba boqol oo sano ayuuna gaaray."

Sidaasuu kitaabkaan Siduu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Risaalada Rabbigiis u gudbiyay noogu dhammaaday waa aakhiro dacwaahum ani al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina wa Sallaa Allaahu Calaa Sayyidinaa wa Mawlaanaa Muxammadin, bi abii huwa wa ummii, wa Calaa Aalihi Wa Saxbihi wa Sallam tasliiman kathiiran.

Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan wuxuu ku dashay Gaalkacyo degmadaasoo uu aabihiis qaalli ka ahaa, dayrtii la magac baxday Hoobaaq. Hoobaaq waa beel daaqsiin ah oo ka mid ah dooxada Golol, halkaasoo ay eedi ku kala gaartay labada qabiil ee Cumar Maxamuud iyo Sacad dayrtaas, eedaasoo bilaabatay 1943 socotayna ilaa 1944. Xasanweli wuxuu u dhashay Shiikhaal Looboge, oo ah Quraysh, ayagoo ah ubadka Abuu Bakar Al Ssddiiqu, Saaxiibka iyo ina adeerka iyo soddogga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Looboge aabihiis Fiqi Cumar wuxuu ku noolaa Boqortooyada Harar siday u warisay tirada lix boqol iyo sagaal iyo afartan ee wargeyska dalka Sucuudiga kasoo baxa ee la yiraahdo Al Muslimuuna, soona baxay maalinta Jimce ee toddobada bisha Rabiicu al Awwal ee sanadka Hijriga ah ee kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhigantah kow iyo tobanka bisha Luulyo ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashanka, boggiisa tobanaad. Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shiikh oo maqaaladaas qoray wuxuu ku yiri: "Kaddib markay saliibiyiinta krishtaanka ahi ay gacanta ku dhigeen Bayti Al Maqdis, dhammaadka qarniga shan iyo tobnaad ee Miilaadiga ah iyo dhammaadka kan shanaad ee Hijriga, ayna ku sugnaadeen Shaam, ayna gacanta ku dhigeen Khaliiju Al Caqabah ee ku dara Badda Cas, ayay krishtaanku waxay raadiyeen cid ay is gaashaanbuursadaan, oo Badda Cas xagga koofureed uga goysa. Markaasey waxay heleen xabshada krishtaanka ah oo ay markaas gaashaanbuur la noqdeen, ayna kula heshiiyeen inay iska kaashadaan la dagaallanka islaamka iyo muslimiintaba, kuna gaaray taas inay xabashadu kusoo duusho oo ay qabsato Boqortooyada Islaamka ee Harar, taasoo gogol dhig u noqoneysa ku duulidda Xijaaz iyo duminta Kacbada la Sharfay. Sidaas ayayna ku heshiiyeen. Markaasey xabashadu waxay kusoo duushay Harar, waxaana usoo baxay oo ka hortegey Al Shiikh Abaadir oo soomaalidu u taqaanno Fiqi Cumar, ahna aabaha dhalay Aw Qudhub. Markaasuu Amiir Cumar bin Shamsu Al Ddiin (oo ah Fiqi Cumar) si xun u jebiyay oo ka adkaaday. Markaasey xabshadu waxay ka gargaar iyo gurmad dalbeen gaashaanbuurtooda krishtaanka ah. Qaylo dhaankoodaas waxaa kasoo jawaabay Richard the Lion-heart oo ahaa boqorka ingiriiska, ahaana maareeyaha hawlaha ka socday bariga dhexe "Bariga Carabta". Richard wuxuu soo diray ciidammadiisa ka kooban burtuqiis iyo talyaani, si ay xabashada ugu gargaaraan. Ciidammadaani waxay gacanta ku dhigeen oo qabsadeen dekadaha ay Harar lahayd oo ah Zaylac iyo Barbara iyo Bulaxaar, kuwaanoo hadda ku yaalla gobolka waqooyi ee Jamhuuriyada Soomaaliya. Ciidammadaasu waxay soo gaareen ilaa dusha magaalada Harar. Markaasey Imaarada Makkah Al Mukarramah iyo Yaman ayay waxay Harar usoo direen ciidammo gurmad ah. Sidaas ayay ciidammada Islaamku uga adkaadeen kuwa krishtaanka ah, uusanna krishtaamiinta Shaam uga laaban hal askariba ha ahaadee, ayadoo dhammaantood lagu laayey inta u dhexeysa Harar iyo Muqdisho iyo Barbara. Muqdisho waxay Harar usoo dirtay gurmad ahaan fardo iyo hub." Xasanweli wuxuu 1970 ka qalin jebiyay Jaamacadda Bologna ee dalka Talyaaniga halkaasoo uu ku bartay takhtarnimada xoolaha. Kaddib wuxuu noqday macallin Dugsiga Sare ee Xasan Barsane ee Muqdisho, Macallin Kulliyada Daawada Xoolaha ee Jaamacadda Qaranka Soomaaliyeed,

Xildhibaan Golaha Shacbiga Qaranka ee Soomaaliya, Danjiraha Soomaaliya ee Dawlado Yurub ah, kaddibna wuxuu ku wareegay Jaamacadda Dawladaha Carabta, uuna noqday Danjireheeda Kenya, iyo Danjireheeda Qarammada Midoobay ee Vienna. Kaddib wuxuu soo degay USA, wuxuuna noqday Macallin Dugsiga Sare ee English High School ee Boston, Baare Shareecada Islaamka ee Islamic Legal Studies Program ee Harvard Law School ee Harvard University ee Cambridge. Siirada Ibnu Hishaam ayuu soomaali ku tarjumay 180 cajaloodna ku duubay. Kaddib wuxuu ilaa sideed sano ka ahaa imaam masjidyada xabsiyada ku yaalla gobolka Massachusetts oo ay Boston caasimadda u tahay ee dalka maraykanka, halkaasoo uu dadka xabbisan ku salaadana tujin jiray, barina jiray diinta islaamka, hortiisana ay ku islaameen khalqi badan oo rag iyo dumarba leh, uuna shahaadada xaqqa ah u mariyay, mahaddana Ilaahay ayaa iska leh.